

Nofeembar 3, 2026 Doorashada Guud iyo Gaarka

Degmada King

Buug-yaraha Rasmiga ah ee Codbixiyeyaasha Deegaanka

codee!



Warqaddaada codbixinta waxay imaan
doontaa ugu dambeyn Oktoobar 19

206-296-VOTE (8683) | kingcounty.gov/elections




King County
Elections

Hal shay oo ay shaqaalaha doorashada dooneyaan inaad ogaato...



Waxaan jeclaan lahaa in codbixiyeyaal badan ay ogaadaan inay caadi tahay in wax laga weydiyo sida ay doorashooyinku u shaqeeyaan. Dhab ahaantii, waxaan jeclaan lahaa in dad badani ay sidaas sameeyaan. Doorashooyinku waa hannaan dadweyne, codbixiyeyaashuna waxay u qalmaan inay fahmaan sida warqaddooda codbixinta ay uga timaaddo gacmahooda ilaa natiijooyinka kama dambeysta ah. Na weydii su'aalo, noo kaalay si aad na aragto anagoo shaqeynayna, oo baro sida uu u shaqeeyo. Mar kasta oo ay dad badani fahmaan hannaanka, waa mar kasta oo aan kalsooni badan si wadajir ah ugu qabi karno.

Leland B.
Hoggaamiyaha Khabiirka Doorashooyinka



Waxaan si adag uga shaqeynaa si aan codeynta uga dhigno mid fudud. Laga bilaabo waxbarashada codbixiyaha ee dugsiyada sare ilaa fursadaha codeynta la heli karo ee maktabadaha iyo bangiyada cuntada, waxaan ku jirnaa goobaha bulshada ee guud ahaan Degmada King.

Naheed A.
Kormeeraha Barnaamijka Helitaanka Luqadda iyo Wacyigelinta Bulshada




Dadka xaqiijiya in Doorashooyinka Degmada King ay yihiin kuwo sax ah, la heli karo, oo sugan waa deriskaaga! Wadar ahaan waxaan leenahay sannado tababar iyo khibrad ah, waxaana u heellan nahay himiladeenna. Waxaan aaminsanahay in doorashooyinku ay muhiim yihiin, iyo in codkaagu uu muhiim yahay!

Devon L.
Isuduwaha Adeegyada Dhismaha




Inta badan shaqaalaha Doorashooyinka Degmada King ee aad aragto inta lagu jiro doorashada waa shaqaale ku meel gaar ah oo si fiican u tababaran oo loo shaqaaleysiiyay si gaar ah doorashadaas. Kooxdeenna aasaasiga ah ee ka kooban 72 shaqaale oo heellan waxay kori kartaa in ka badan 600 marka ay jiraan doorashooyinka ka waaweyn. Qaar badan oo ka mid ah shaqaalaheena ku meel gaarka ah ayaa u soo noqda dhowr doorasho sababtoo ah ballanqaadka KCE ee ku aaddan xaqiijinta in doorashooyinku yihiin kuwo sax ah, sugan, la heli karo, iyo daah-furan. Waxaan ku hanweynahay shaqada aan dhammaanteen qabanno si aan u taageerno hannaanka doorashada iyo codbixiyeyaasheena.

Meredith M.
Maareeyaha Adeegyada Maamulka



Waxaan halkan u joognaa in aan ku caawinno!



☎ 206-296-VOTE (8683)
1-800-325-6165
TTY Relay: 711

✉ elections@kingcounty.gov

🌐 kingcounty.gov/elections



Uma codeyn doontid wax walba oo ku jira buug-yarahaan codbixiyeyaasha. Ka eeg warqaddaada codbixinta tartannada iyo xeerarka.

Macluumaadka Guud

Is diiwaan geli si aad u codeyso	4
Qof Walba Codkiisa Waa Muhiim	5
Sida loo codeeyo	6
Xarumaha codbixinta	7
Goobaha sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta	8
Raad-raac warqaddaada codbixinta	11
Waaajiibaadyada xafisyada ee doorashadan	12
Yaa ku tabarruca ololeyaasha siyaasadeed	14
Khariiradda Degmooyinka Kongareeska	16
Khariiradda Degmooyinka Sharci Dejinta	21
Khariiradda Degmooyinka Golaha Degmada King	68

Federaalka

Degmada Kongareeska Lr. 1	17
Degmada Kongareeska Lr. 7	18
Degmada Kongareeska Lr. 8	19
Degmada Kongareeska Lr. 9	20

Gobolka

Degmada Sharci Dejinta Lr. 1	22
Degmada Sharci Dejinta Lr. 5	24
Degmada Sharci Dejinta Lr. 11	26
Degmada Sharci Dejinta Lr. 12	28
Degmada Sharci Dejinta Lr. 30	30
Degmada Sharci Dejinta Lr. 31	33
Degmada Sharci Dejinta Lr. 32	36
Degmada Sharci Dejinta Lr. 33	39
Degmada Sharci Dejinta Lr. 34	42
Degmada Sharci Dejinta Lr. 36	44
Degmada Sharci Dejinta Lr. 37	46
Degmada Sharci Dejinta Lr. 41	49
Degmada Sharci Dejinta Lr. 43	51
Degmada Sharci Dejinta Lr. 45	53
Degmada Sharci Dejinta Lr. 46	56
Degmada Sharci Dejinta Lr. 47	59
Degmada Sharci Dejinta Lr. 48	62

Degmada

Degmada King	65
Golaha Degmada Lr. 2	69
Golaha Degmada Lr. 4	70
Golaha Degmada Lr. 6	70
Golaha Degmada Lr. 8	71

Garsoorka

Maxkamadda Sare ee Gobolka	72
Maxkamadda Racfaannada, Qaybta Lr. 1, Degmada Lr. 1	77
Degmada Doorashada ee Waqooyi-bari	78
Degmada Doorashada ee Shoreline	82
Degmada Doorashada ee Koonfur-bari	83
Degmada Doorashada ee Koonfur-galbeed	87
Degmada Doorashada ee Galbeed	91

Magaalooyinka

Magaalada Seattle	96
-------------------	----

Xeerarka

Xeerka Hindisaha Lr. IP26-645	101
Xeerka Hindisaha Lr. IL26-001	107
Xeerka Hindisaha Lr. IL26-638	114
Magaalada Bothell	118
Magaalada Clyde Hill	120
Magaalada Issaquah	122
Magaalada Kenmore	124
Magaalada Lake Forest Park	126
Magaalada Milton	128
Magaalada SeaTac	130
Magaalada Seattle	132
Magaalada Shoreline	134
Degmada Dugsiga Auburn Lr. 408	136
Degmada Dugsiga Highline Lr. 401	138
Degmada Dugsiga Kent Lr. 415	142
Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 20	144
Degmada Qabuuraaha ee Degmada King Lr. 1	146

Tusmada Musharaxa


Tusmada Musharaxa	155
-------------------	-----

Codeyntaadu aad ayay muhiim u tahay ha ula sugin ilaa iyo daqiiqadda ugu dambeysa.

Goor Hore Codee!

Buug-yarahaan codbixiyeyaasha wuxuu leeyahay macluumaad ku saabsan arrin kasta iyo tartan kasta oo ku jira warqaddaada codbixinta. Samee cilmi baaristaada, samee xulashooyinkaaga, ka dibna warqaddaada codbixinta ku soo celi sanduuqa rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah!

Ka dib, raad-raac warqaddaada codbixinta tallaabo kasta oo ay marayso adigoo isticmaalaaya digniimaha warqadda codbixinta oo ah farriin qoraal taleefan ama iimeel. Iska qor barta [kce.wiki/TrackMyBallot-SO](https://www.kce.wiki/TrackMyBallot-SO)



Waxaad heli doontaa laba Buug-yaraha Codbixiyeyaasha ah

Marka lagu daro buug-yarahaan codbixiyeyaasha, waxaad mid ku qoran Af-Ingiriis ka heli doontaa Xoghayaha Gobolka. Haddii aadan helin Buug-yaraha Gobolka, soo wac 1-800-448-4881.



1

Yaa is diiwaan gelin kara?

Si aad isku diiwaan geliso oo aad uga codeyso Washington, waa inaad tahay:

- Muwaadin Mareykan ah,
- Degane sharci ahaan ku nool gobolka Washington,
- Ugu yaraan 18 sanno jir ah maalinta doorashada,*
- Aan laga mamnuucin codeynta amar maxkamad awgeed,
- Qof aan lagu haynin xabsi guud oo hoos taga xukunka Waaxda Asluubta ee gobolka Washington xukun dambi-weyn oo ka dhacay Washington awgeed iyo,
- Aanan iminka xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn oo federaal ah ama mid ka dhacay gobolka Washington dibadiisa.



*Haddii aad tahay 16 ama 17 jir, waxaad isku diiwaan gelin kartaa kan **Codbixiyaha Mustaqbalka** ahaan oo si toos ah ayaa lagu diiwaan gelinayaa oo aad u helaya warqad codbixin marka aad u qalanto.

2

Sidee baan isku diiwaan geliyaa?



Oonleenka

Booqo VoteWA.gov si aad oonleenka isaga diiwaan geliso. Is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashadan Guud ayaa la heli karaa ilaa iyo **Oktoobar 26**.



Boostada

Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta barta kce.wiki/VoterReg. Boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King, 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Doorashooyinka Degmada King waa inay foomka helaan ugu dambeyn **Oktoobar 26**.



Shakhsi ahaan

Iska diiwaan geli goobta Xarunta Codbixinta ilaa iyo 8 p.m. fiidnimo **Maalinta Doorashada, Nofeembar 3**. Ka hel saacadaha iyo goobaha Xarunta Codbixinta bogga 7-aad, iyo barta kce.wiki/xarumahacodbixinta

Booqo Xarunta Codbixinta

Shaqaalaha Xarunta Codbixinta ayaa caawin kara inay:

- diiwaan geliyaan codbixiyeyaasha cusub,
- cusboonaysiiyaan macluumaadka codbixiyeyaasha hore u jira,
- daabacaan warqad codbixin beddelaad ah iyo bakhshadda soo celinta,
- iyo ka jawaabaan su'aalo.

Xarumaha Codbixinta ayaa sidoo kale leh unugyo codbixin oo la heli karo oo ka caawiya codbixiyeyaasha naafada ah inay si gaar ah oo madax bannaan u dhiibtaan warqadahooda codbixinta. Wax dheeraad ah ka baro oo ballan ka qabso barta kce.wiki/xarumahacodbixinta.



Qof Walba Codkiisa Waa Muhiim

Dadka xabsiga soo maray waxay leeyihiin xuquuqda codeynta. Codbixintaada waa hal waddo oo codkaaga lagu maqli karo!



Waxaan leeyahay xukun dambi yar. Ma codeyn karaa?

Haa!

Waxaan leeyahay xukun anigoo dhalinyaro oo aan qaangaarin. Ma codeyn karaa?

Haa!

Waxaan leeyahay deymaha maxkamadda (LFOs). Ma codeyn karaa?

Haa!

Waxaan leeyahay xukun dambi-weyn, oo waxaan dhammaystiray xukunkeyga, waxaana laga sii daayay DOC. Ma codeyn karaa?

Haa!

Doorashooyinka Degmada King ayaa aqbasha wicitaannada ka yimaada xarumaha xabsiga. Naga soo wac **206-296-VOTE (8683)** oo shaqaale tababaran ayaa ku caawin doona. Waxaan halkan u joognaa inaan ku caawinno!

Ka hor intaadan codeyn, waa inaad is diiwaan gelisaa.



Iska diiwaan geli oonleenka barta **VoteWA.gov** ama ka wac Doorashooyinka Degmada King lambarka **206-296-VOTE (8683)**.



Waxaan kuu soo diri doonaa foomka diiwaan gelinta codbixiyaha. Buuxi foomka oo boostada ugu dir **Doorashooyinka Degmada King, 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057**.

Sidee baan ku helaa warqaddayda codbixinta?



Warqadaha codbixinta si toos ah ayaa loogu diraa codbixiyeyaasha is diiwaan gashan qiyaastii 3 toddobaad ka hor Maalinta Doorashada.

Waxaad ciwaanka xarunta xabsiga u qoran kartaa sida ciwaankaaga boostada, ama qof aad jeceshahay ayaad ka codsan kartaa inuu kuu soo gudbiyo warqaddaada codbixinta.

Ma u baahan tahay caawinnaad? Naga soo wac **206-296-VOTE (8683)**. Waxaan ula shaqeyn doonaa adiga iyo xarunta xabsiga si aan warqaddaada codbixinta kuu soo gaarsiino.

Hel warqaddaada codbixinta wakhtigii loogu talagalay.



Ima baahnid istaambo! Laakiin waa inaad u codeysaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Ku rid warqaddaada codbixinta boostada ugu yaraan hal toddobaad ka hor Maalinta Doorashada.

Codeyntu waxay u fududahay sida 1-2-3

1. Samee cilmi baaristaada! Buug-yarahaan codbixiyeyaasha waxa ku jira macluumaad ku saabsan tartannada iyo arrimaha ku jira warqaddaada codbixinta.



2. Buuxi goobaabinnada ku dhinac yaal dookhyadaada ee ku qoran warqaddaada codbixinta.



3. Warqaddaada codbixinta geli bakhshadda soo celinta, oo **hana ilaabin inaad saxiixdo xagga dambe!**



Sidee baan u soo celiyaa warqaddayda codbixinta?

Degmada King waxay leedahay ku dhawwaad 100 sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta oo ku baahsan degmada. Sanduuqyada lagu rido waxay furan yihiin 24 saacadood maalintii, 7 maalmood toddobaadkii, ilaa iyo 8 p.m. fiidnimo oo gaw ah Maalinta Doorashada. Ka hel sanduuqa lagu rido ee kugu habboon oo kuu dhow barta kce.wiki/sanduuqyada




Boostada ma ku soo diri karaa warqaddayda codbixinta?

Haa! Keliya hubi in warqaddaada codbixinta ay lahaato shaabadda boostada oo ah ugu dambeyn Maalinta Doorashada. Adeegga Boostada waxay kugula talineysaa inaad warqaddaada codbixinta boostada ku soo dirto ugu yaraan hal toddobaad ka hor Maalinta Doorashada.



Waxaad raad-raaci kartaa warqaddaada codbixinta tallaabo kasta oo ay kaga jirto hannaanka adigoo helaaya digniimaha warqadda codbixinta ee tooska ah. Iska qor barta kce.wiki/TrackMyBallot-SO si aad u hesho fariimo qoraal taleefan ama iimeel ah.



Waxaan halkan u joognaa in aan ku caawinno!

Haddii aad u baahan tahay caawinnaad dheeraad ah ama hab kale oo aad u dhiibato warqaddaada codbixinta, fadlan kala xiriir xafiiskeena taleefanka 206-296-VOTE (8683).

Booqo Xarunta Codbixinta si aad u hesho caawinnaad shakhsi ahaan ah



Shaqaalaha doorashooyinka ayaa diyaar u ah inay kaa caawiyaan is diiwaan gelinta si aad u codeyso iyo inaad hesho warqad codbixin ilaa iyo Maalinta Doorashada. Shaqaale tababaran iyo qalab gaar ah ayaa diyaar u ah si loo caawiyo codbixiyayaasha naafada ah in ay dhiibtan warqad codbixin qarsoodi ah, oo madax bannaan. Wax dheeraad ah ka ogow oo ballan ka qabso barta [kce.wiki/xarumahacodbixinta](https://www.kce.wiki/xarumahacodbixinta).

Goobaha		Saacadaha Shaqada
Renton	Doorashooyinka Degmada King 919 SW Grady Way, 98057	Maalmaha shaqada, Oktoobar 14-23 8:30 a.m. – 4:30 p.m. Maalmaha shaqada, Oktoobar 26-30 8:30 a.m. – 6:00 p.m. Sabti, Oktoobar 31 10:00 a.m. – 4:00 p.m. Isniin, Nofeembar 2 8:30 a.m. – 6:00 p.m. Maalinta Doorashada, Nofeembar 3 8:30 a.m. – 8:00 p.m.
Bellevue	Bellevue College Dhismaha U, Qolka Xafladaha Gary Locke 3000 Landerholm Cir SE, 98007	Sabti, Oktoobar 31 10:00 a.m. – 4:00 p.m. Isniin, Nofeembar 2 8:30 a.m. – 6:00 p.m. Maalinta Doorashada, Nofeembar 3 8:30 a.m. – 8:00 p.m.
Federal Way	Hoolka Xafladaha ee Xarunta Dabaasha ee Weyerhaeuser 650 SW Campus Dr, 98023	
Kenmore	Kenmore City Hall (Aqalka Magaalada) 18120 68th Ave NE, 98028	
Kent	Kambaska Green River College ee Kent Qolalka 282 & 283 417 Ramsay Way, 98032	
Seattle	Dhismaha Aqalka Magaalada Seattle Qolka Bertha Knight Landes, Dabaqa 1-aad 600 4th Ave, 98104	



Baarkinka waa bilaash
Xarumaha Codbixinta ee
Renton, Bellevue, Federal
Way, Kenmore, iyo Kent.

Baarkinka lacagta ah waxaa
laga heli karaa Xarumaha
Ka-qaybgalka Ardayga iyo
Xarumaha Codbixinta ee
Seattle.

Xarumaha Ka-qaybgalka Ardayga

Kambaska Jaamacadda Washington ee Seattle


Iyadoo ku taal Lyceum (Qolka 160) ee ku dhex taal Dhismaha Husky Union (HUB), Xarumaha Ka-qaybgalka Ardayga ee UW Seattle waxay ardayda siisaa fursad ay isku diiwaan geliyaan si ay u codeeyaan markii ugu horreysay, u cusbooneysiyaan diiwaan gelintooda, u helaan warqad codbixin beddelaad ah, ama u isticmaalaan qalabka caawinnaadda. Shaqaalaha doorashooyinka ayaa diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalaha oo ay bixiyaan caawinnaad.

Kambaska Jaamacadda Washington ee Bothell

Ardayda u diiwaan gashan inay codeeyaan waxay isticmaali karaan kiyooska la bixiyay si ay u daabacaan warqaddooda codbixinta.



Wax dheeraad
ah ka baro
saacadaha
shaqada iyo
adeegyada.



Sanduuqyada Lagu Rido Warqadda Codbixinta ee Degmada King

Ku Dhawwaad 100 Goobood!

Dhammaan sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta waxay xirnaan 8 p.m. fiidnimo oo gaw ah Maalinta Doorashada, Nofeembar 3.

Auburn
Maktabadda Auburn, 1102 Auburn Way S, 98002
Auburn Park & Ride, 101 15th St NE, 98002
CUSUB Auburn Valley YMCA, 1620 Perimeter Rd SW, 98001
CUSUB * Kulliyadda Green River (ka soo horjeeda Dhismaha Teknolojiyada Xirfadda ee ku yaal SE 320th St), 12401 SE 320th St, 98092
Muckleshoot Community Center (Xarunta Bulshada ee Muckleshoot), 17432 SE 392nd St, 98092
Bellevue
CUSUB * Bellevue College (oo yaalla Goobta Baarkinka 1A), 3000 Landerholm Cir SE, 98007
Maktabadda Bellevue, 1111 110th Ave NE, 98004
Xarunta Ganacsiga ee Crossroads (albaabka koonfurta), 15600 NE 8th St, 98008
Maktabadda Newport Way, 14250 SE Newport Way, 98006
* North Bellevue Community Center (Xarunta Bulshada ee Waqooyiga Bellevue), 4063 148th Ave NE, 98007
Black Diamond
Maktabadda Black Diamond, 24707 Roberts Dr, 98010
Bothell
Maktabadda Bothell, 18215 98th Ave NE, 98011
University of Washington - Kambaska Bothell (u dhow Xarunta Hawlaha & Madadaalada), 18220 Campus Way NE, 98011
Burien
Maktabadda Boulevard Park, 12015 Roseberg Ave S, 98168
Fagaaraha Magaalada Burien (geeska 5th Ave SW iyo SW 152nd St), 480 SW 152nd St, 98166

Carnation
Maktabadda Carnation, 4804 Tolt Ave, 98014
Covington
Maktabadda Covington, 27100 164th Ave SE, 98042
Des Moines
CUSUB Maxkamadda Dowladda Hoose ee Des Moines, 21630 11th Ave S, 98198
* Highline College (albaabka laga soo galo ee ka soo horjeeda 27th Ave), 2400 S 240th St, 98198
Duvall
* Duvall Police Department (Waaxda Booliiska Magaalada Duvall) - Jardiinka Depot, 26225 NE Burhen Way, 98019
Enumclaw
Maktabadda Enumclaw, 1700 1st St, 98022
Fall City
Maktabadda Fall City, 33415 SE 42nd Pl, 98024
Federal Way
Maktabadda Federal Way 320th, 848 S 320th St, 98003
Federal Way City Hall (Aqalka Magaalada Federal Way), 33325 8th Ave S, 98003
* Safeway Star Lake, 28810 Military Rd S, 98003
Issaquah
Issaquah City Hall (Aqalka Magaalada Issaquah), 130 E Sunset Way, 98027
Kenmore
Kenmore City Hall (Aqalka Magaalada Kenmore), 18120 68th Ave NE, 98028
Kent
Maktabadda Kent Panther Lake, 20500 108th Ave SE, 98031
Kent YMCA, 10828 SE 248th St, 98030
Regional Justice Center (Xarunta Caddaalad Goboleedka) u dhow albaabka laga galo baarkinka, 401 4th Ave N, 98032
CUSUB Safeway Kent Kangley, 13101 SE Kent-Kangley Rd, 98030
Kirkland
Maktabadda Kingsgate, 12315 NE 143rd St, 98034
* Kirkland City Hall (Aqalka Magaalada Kirkland), 120 3rd Ave, 98033
<i>Sanduuqaan waxaa loo guuriyay Goobta Baarkinka ee Kirkland Wester, oo koonfur ka xigta Dhismaha Aqalka Magaalada.</i>
Lake Forest Park
Lake Forest Park City Hall (Aqalka Magaalada Lake Forest Park), 17425 Ballinger Way NE, 98155

Maple Valley
Suuqa Cuntada Hobart, 20250 276th Ave SE, 98038 * Dhismaha Degmada Dugsiga Tahoma, 25720 Maple Valley-Black Diamond Rd SE, 98038
Mercer Island
Mercer Island Community & Event Center (Xarunta Bulshada & Dhacdada Mercer Island), 8236 SE 24th St, 98040
Newcastle
Newcastle City Hall (Aqalka Magaalada Newcastle), 12835 Newcastle Way, 98056
Normandy Park
Normandy Park Towne Center (Fagaaraha Magaalada Normandy Park), 19901 1st Ave S, 98148
North Bend
Maktabadda North Bend, 115 E 4th St, 98045
Pacific
Maktabadda Algona-Pacific, 255 Ellingson Rd, 98047
Ravensdale
CUSUB Jardiinka Ravensdale, 27200 SE Kent Kangley Rd, 98051 <i>Goobta baarkinka ee bariga Garoonka 4-aad, ee ka soo horjeeda 272nd Ave SE laga bilaabo Xafiiska Adeegga Boostada Mareykanka.</i>
Redmond
* Redmond City Hall (Aqalka Magaalada Redmond), 15670 NE 85th St, 98052 * Redmond Community Center at Marymoor Village (Xarunta Bulshada ee Redmond ee Xaafadda Marymoor), 6505 176th Ave NE, 98052 * Redmond Ridge Park & Ride (Geeska NE Cedar Park Cres iyo Redmond Ridge Drive NE), 98053
Renton
Maktabadda Fairwood, 17009 140th Ave SE, 98058 * Doorashooyinka Degmada King, 919 SW Grady Way, 98057 * Powell Avenue, 725 Powell Ave SW, 98057 <i>Sanduuqa warqadda codbixinta wuxuu yaalaa goob laba baloog u jirta Doorashooyinka Degmada King si fudud ayaana lagu tagi karaa wakhtiyada uu taraafik jaamka jiro.</i> * Xarunta Caafimaadka Dadweynaha Renton, 3201 NE 7th St, 98056
Sammamish
Sammamish City Hall (Aqalka Magaalada Sammamish), 801 228th Ave SE, 98075 South Sammamish Park & Ride, 3015 228th Ave SE, 98075
SeaTac
Angle Lake Transit Station (Saldhiga Gaadiidka ee Angle Lake), 19955 28th Ave S, 98188 Maktabadda Valley View, 17850 Military Rd S, 98188

Shoreline
Maktabadda Shoreline, 345 NE 175th St, 98155 Shoreline Park & Ride, 18821 Aurora Ave N, 98133
Skykomish
CUSUB Skykomish Community Center (Xarunta Bulshada ee Skykomish), 114 W Railroad Ave N, 98288
Snoqualmie
Maktabadda Snoqualmie, 7824 Center Blvd SE, 98065
Tukwila
* Tukwila Community Center (Xarunta Bulshada Tukwila), 12424 42nd Ave S, 98168 Tukwila Justice Center (Xarunta Caddaaladda ee Tukwila), 15005 Tukwila International Blvd, 98188
Vashon
Maktabadda Vashon, 17210 Vashon Hwy SW, 98070
Woodinville
Woodinville City Hall (Aqalka Magaalada Woodinville), 17301 133rd Ave NE, 98072 Maktabadda Woodinville, 17105 Avondale Rd NE, 98072

 Sanduuqyada Seattle
Ballard
Maktabadda Laanta Ballard, Geeska NW 57th St and 22nd Ave NW, 98107
Beacon Hill
Maktabadda Beacon Hill, 2821 Beacon Ave S, 98144 Kambaska Xaafadda NewHolly, 7054 32nd Ave S, 98118
Belltown
CUSUB Belltown, 2208 4th Ave, 98121
Broadview/Greenwood
Maktabadda Broadview, 12755 Greenwood Ave N, 98133
Bryn Mawr-Skyway
Maktabadda Skyway, 12601 76th Ave S, 98178
Capitol Hill
Seattle Central College (geeska waqooyi bari ee Dhismaha Broadway-Edison), 1701 Broadway, 98122
Central District
Garfield Community Center (Xarunta Bulshada Garfield), 2323 E Cherry St, 98122 12th & Cherry, 1223 E Cherry St, 98122

Chinatown/International District
Uwajimaya, 713 6th Ave S, 98104
Columbia City
Rainier Community Center (Xarunta Bulshada Rainier), 4600 38th Ave S, 98118
Crown Hill
Safeway Crown Hill (geeska Waddada NW 83rd iyo Mary Ave NW), 8340 15th Ave NW, 98117
Downtown
Sanduuqa King Street (u dhow Kingdome Deli), Geeska 2nd Ave S iyo S King St, 98104
CUSUB Maktabadda Seattle Central, 1000 4th Ave, 98104
Fremont/Wallingford
Waterway 19 Park (ku dhegan Jardiinka Gas Works), 2119 N Northlake Way, 98103
Green Lake/Phinney
Green Lake Community Center (Xarunta Bulshada Green Lake), 7201 E Green Lake Dr N, 98115
Lake City
Maktabadda Lake City, 12501 28th Ave NE, 98125
Magnolia
* Jardiinka Magnolia, 1461 Magnolia Blvd W, 98199
Northgate
North Seattle College (u dhow geeska waqooyi bari ee N 95th iyo College Way N), 9600 College Way N, 98103
CUSUB Maktabadda Northgate, 10548 5th Ave NE, 98125
Queen Anne
* Dukaanka Buugaagta ee Seattle Pacific University, 310 W Bertona St, 98119
Rainier Valley
Rainier Beach Community Center (Xarunta Bulshada Rainier Beach), 8825 Rainier Ave S, 98118
Sand Point/Laurelhurst
* Jardiinka Magnuson – Dhismaha 406, 6344 NE 74th St, 98115
South Lake Union
South Lake Union, 310 Terry Ave N, 98109
South Park
Maktabadda South Park, 8604 8th Ave S, 98108


University District
Kambaska University of Washington, Hoolka Schmitz (albaabka dhanka Waqooyi NE 41st St), 1410 NE Campus Pkwy, 98195
Uptown
Suuqa Magaalo Weynta ee Queen Anne, Geeska 1st Ave N iyo Mercer St, 98109
West Seattle/Delridge
Isgoyska Alaska, Geeska SW Alaska St iyo 44th Ave SW, 98116
Maktabadda High Point, 3411 SW Raymond St, 98126
Isgoyska Jardiinka Morgan, 6401 California Ave SW, 98136
South Seattle College (halka laga galo ee dhismaha Robert Smith), 6000 16th Ave SW, 98106
White Center

CUSUB Jardiinka Steve Cox Memorial, 1321 SW 102nd St, 98146
Sanduuqa horrey u yaallay Maktabadda White Center ayaa loo wareejiyay Jardiinka Steve Cox Memorial.

* *Sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta adigoo gaariga saaran*


Booqo kce.wiki/sanduuqyada si aad u hesho liiska dhammaan sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta ee la heli karo doorashadan. Dhammaan sanduuqyada lagu rido waxay xirmaan markay tahay 8 p.m. oo gaw ah Maalinta Doorashada.





Aaway warqaddayda codbixinta?

Booqo kce.wiki/TrackMyBallot-SO si aad oonleenka uga raadraacdo warqaddaada codbixinta ama aad isugu diiwaan geliso digniinnada warqadda codbixinta ee iimayl iyo/ama farriin qoraal ah.



Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?

Haddii warqaddaada codbixinta ay lunto ama kharribanto, waxaad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.

Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (OBMP) waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan. Waxaa loogu talagalay inuu caawiyo codbixiyeyaasha naafada ah (gaar ahaan kuwa indhooleyaasha ah ama uu araggoodu hooseeyo) inay warqaddooda codbixinta si qarsoodi ah u calaamadaystaan.



Sida loo isticmaalo Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka

- Tag barta kce.wiki/obmp.
- Macluumaadkaaga geli foomka.
- Oonleenka ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay,
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sanduuqa rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ugu dambeyn 8 p.m. fiidnimo oo gaw ah Maalinta Doorashada. Haddii aad boostada ku soo celinayso, Adeegga Boostada waxay kugula talineysaa inaad warqaddaada codbixinta boostada ku soo dirto ugu yaraan hal toddobaad ka hor Maalinta Doorashada. Warqaddaada codbixinta waa inay lahaato shaabadda boostada oo ah ugu dambeyn Maalinta Doorashada.


AMA

- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.
- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah loo calaamadeeyay.

Agabyada lagu heli karo 7 luqadood!

Waxaad heli kartaa warqadaha codbixinta, agabka codeynta, iyo isgaarsiinta oo ah afka Ingiriiska, Shiinaha, Kuuriyaanka, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, iyo Fiyatnamiiska.

Ka buuxi foomka codsiga oonleenka barta kce.wiki/languages oo waxaad xafiiskeena ka heli doontaa dhammaan agabka codeynta oo ku qoran luqaddii dookhaaga ah.




Ku Saabsan Doorashada Guud ee Nofeembar ee Washington

Haddii doorasho hordhac loo qabto jago xafiis, labada musharax ee hela codadka ugu badan ee Doorashada Hordhaca ayaa u gudbi doona Doorashada Guud.

Musharax kasta oo u tartamaaya xafiis xisbinimo loo doorto ayaa laga yaabaa inuu sheegto xisbi siyaasadeed oo uu musharaxu doorbido. Doorbididda musharaxa micnaheedu ma aha in musharaxaas uu xisbiga soo magacaabay ama uu xisbiga taageero ka haysto, ama uu xisbigu ansixiyay ama musharaxaas xiriir la leeyahay.

FEDERAALKA



Mushahar (2026):
\$174,000


Adeeg ah 2 sanno

Wakiilka Dalka Mareykanka

Ka caawiya dejinta sharciyada heer federaal, matala danaha dadka deegaanka, wuxuuna awood u leeyahay inuu mas'uuliyiinta federaalka ku soo oogo dacwad xil ka qaadis.

Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada Kongareeska

GOBOLKA




Mushahar (2026):
\$67,688

Adeeg ah 4 sanno

Senatarka Gobolka

La wadaagga mas'uuliyadda Wakiillada Gobolka ee dejinta sharciyada gobolka iyo ansixinta miisaaniyadda gobolka. Sidoo kale mas'uul ka ah ansixinta magacaabiyada uu sameeyo Guddoomiyaha Gobolka.

Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada Sharci-Dejinta



Mushahar (2026):
\$67,688


Adeeg ah 2 sanno

Wakiilka Gobolka

La wadaagaa mas'uuliyadda Senatarrada Gobolka ee dejinta sharciyada gobolka iyo ansixinta miisaaniyadda gobolka.

Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada Sharci-Dejinta

DEGMADA



Mushahar (2026):
\$264,745

Adeeg ah 4 sanno

Xeer Ilaaliyaha

Waxay u adeegaan sidii qareenka degmada, waxayna dacweeyaan kiisaska dambiyada fudud iyo kuwa culus.

Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada King



Mushahar (2026):
\$241,096

Adeeg ah 4 sanno

Qiimeeyaha

Go'aamiya qiimeyaasha hantida ee ku aaddan canshuuraha hantida ee degmada.

Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada King




Mushahar (2026):
\$241,096

Adeeg ah 4 sanno

Agaasimaha Doorashooyinka

Waxay maamulaan doorashooyinka, oo ay ku jiraan diiwaan gelinta codbixiyaha, tirinta warqadaha codbixinta, iyo bixinta natiijooyinka doorashada.

Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada King



Mushahar (2026):
\$187,547

Adeeg ah 4 sanno

Golaha Degmada King ee Magaalo Weynta

Dejiya sharciyada oo ansixiya miisaaniyadda degmada.

Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada Golaha ee Degmada King

Liiska waajibaadyada xafiisyada ee doorashadan ayaa sii socda



GARSOORKA



Mushahar (2026):
\$262,011

Garsooraha Maxkamadda Sare ee Gobolka

Maadaama ay tahay maxkamadda ugu sareysa ee gobolka, waxay dhegaysataa racfaannada waxayna dib u eegtaa go'aannada Maxkamadaha Racfaanka iyo maxkamadaha hoose.

Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gobolka Washington

Adeeg ah 6 sanno



Mushahar (2026):
\$249,417

Garsooraha Maxkamadda Racfaannada

Waxay Dhegaystaan oo go'aamiyaan racfaannada ka yimaada Maxkamadaha Sare.

Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada King

Adeeg ah 4 sanno



Mushahar (2026):
\$226,096


Garsooraha Maxkamadda Degmada

Dhegaysta oo go'aamiya dacwadaha dambiyada fudud, dacwadaha yaryar, kiisaska taraafikada, iyo amarrada ilaalinta.

Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada doorashada

Adeeg ah 4 sanno

MAGAALADA



Mushahar (2026):
\$166,058

Xubinta Golaha Magaalada Seattle

Ansixiya miisaaniyadda magaalada, horumariya sharciyada iyo siyaasadaha, oo kormeera adeegyada dadweynaha.

Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada Seattle

Adeeg ah muddo-xilleed 1-sanno weli dhammaanin



Mushahar (2026):
\$214,791

Garsooraha Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle

Dhegaysta oo go'aamiya dacwadaha dambiyada fudud ee Magaalada Seattle.

Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada Seattle

Adeeg ah 4 sanno



Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg macluumaadka ku tabarruceyaasha
dhaqaale ee musharaxiinta federaalka:

Guddiga Doorashada Federaalka

www.fec.gov | Wicitaan Bilaash 1 (800) 424-9530

Eeg ku tabarruceyaasha dhaqaale ee musharaxiinta
iyo xeerarka:

Guddiga Kashifaadda Dadweynaha

www.pdc.wa.gov | Wicitaan Bilaash 1 (877) 601-2828



CODBIXIYAHA
★ MUSTAQBALK ★

Hore isku diiwaan geli si aad u codeyso.

Haddii aad tahay ugu yaraan 16 jir, waxaad wakhti
kasta hore iskaga diiwaan gelin kartaa oonleenka ama
boostada si aad u codeyso.

Waxaanu hayn doonaa diiwaan gelintaada oo aan
si toos ah kuugu soo diri doonaa warqad codbixin
markii aad u qalanto inaad codeyso.

Hantidhawrada iyo Ilaalinta Tayada

Kooxdeenu waxay fuliyaan tijaabooyin dhowr
ah ka hor, inta lagu jiro, iyo ka dib doorasho
kasta si loo hubiyo in dhammaan codadka
loo tirinaayo si sax ah.



Tijaabinta Caqli-galnimada & Saxnaanta

Waxa la qabtaa qiyaastii saddex
toddobaad ka hor doorashada,
tijaabada Caqli-galnimada &
Saxnaanta waxay isticmaashaa
warqado codbixin tijaabo ah iyo
xirmooyin natijoooyin la filanaayay
sii loo hubiyo in qalabka xisaabinta
uu codadka u akhrinaayo si sax ah.



Hantidhawrka Dufcadda Kala Sooca Lahayn

Khamiista ku xigta Maalinta
Doorashada, lix dufcadood oo
warqado codbixin ah ayaa si aan
kala sooc lahayn loo soo xulaa
waxaana lagu tiriyaa gacanta si loo
hubiyo in qalabka xisaabinta uu
u sii wado akhrinta codadka sidii
loogu talagalay.



Hantidhawrka Xaddidaada Khatarta

Waxaa la qabtaa inta u dhexeysa
Maalinta Doorashada iyo
shahaadaynta, nidaamkan
hantidhawrku waxa uu hubiyaa
warqado codbixin tusaale ah
oo aan kala sooc lahayn si loo
gaaro kalsoonida xisaabeed ee
natijoooyinka doorashada.




**Doorashooyinka
Degmada King
ma saxaan
astaamaynta,
naxwaha, ama
hubinta xaqiiqda
saxda ah ee
bayaannada
musharaxa iyo
cabbirka.**



Doorashooyinka Degmada King ma waafajiyaan, wax kama beddelaan, ama dib u eegis kuma sameeyaan bayaannada musharaxiinta iyo cabbirka warqadda codbixinta xaalad kasta oo lagu jiro.

Dhammaan bayaannada waa tarjumaadda erey iyo erey ee dhabta ah, oo ah bayaannada ay soo gudbiyeen musharaxa, guddiga, ama maamulka, laguna dhammeeyay wakhti xaddidan. Sababtaas awgeed, bayaannada la tarjumay ayaa laga yaabaa in meelaha qaarkood aysan kaga caddeyn maxaa yeelay isticmaalka luqadda, fikradaha, iyo sharaxaadda ayaa ku kala duwan luqadaha.

Degmooyinka Kongareeska





Wakiilka Dalka Mareykanka

Suzan DelBene

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 483-1500

info@delbeneforcongress.com

www.delbeneforcongress.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Dalka Mareykanka, 2012-Hadda. Guddiga Hababka iyo Miisaaniyadda (Ways and Means Committee).

Khibrad Xirfadeed Kale: Xirfad 20-sanno ah oo guul leh oo ah haweeney ganacsato ah iyo hal-abuur ganacsi. Maamule hore oo Microsoft ah, hoggaamisay shirkado cusub oo teknolojiyada sare ah oo maxalli ah. Agaasimihii hore ee Waaxda Dakhliga ee Washington, halkaas oo aan ku hoggaamiyey dadaallada lagu fududeynayo nidaamka canshuurta iyo caawinta ganacsiyada yaryar. La taliye u ah urur aan faa'iido doon ahayn oo maalgelin yar ka caawiya qoysaska dhibban.

Waxbarashada: B.A., Bayoolajiga, Kuliyadda Reed; M.B.A., Jaamacadda Washington.

Adeegga Bulshada: Waxaan la-talin siiyay ardayda Dugsiga Ganacsiga ee UW; waxaan firfircoon uga ahaa kaniisaddayda, anigoo u adeegay xubin guddiga. Waxaan mutadawacnimo uga shaqeeyay PTA, Sahamada Gabdhaha iyo YWCA, anigoo taageeraya guryo ku-meelgaar ah, tababarka shaqada iyo adeegyada caawiya qoysaska inay dib isugu taagaan.

Bayaanka: Dalkeennu wuxuu joogaa isgoys. Jamhuuriyiinta Kongareeska waxay diideen inay Trump ka hor yimaadaan maadaama uu dhaawac qoto dheer u geysanayo dhaqaalaheena, qoysaskeena, deriskeena, iyo dimuqraadiyadeena. Sababtooda awgeed, kharashyada shidaalka, raashiinka, guryaha, iyo biilasha adeegga tamarta ayaa cirka isku shareeraya. Si loo bixiyo jarista canshuurta ballaaran ee dhowrka ugu taajirsan, Jamhuuriyiinta waxay daryeelka caafimaadka ka qaadeen malaayiin, waxay meel mariyeen jaritaanno naxariis-darro ah oo cuntada ka qaadaya miiska qoysaska shaqeeya, waxayna qaadeen maalgeshiyo muhiim ah oo ku saabsan tamarta cagaaran.

Anigoo ah Xildhibaanaddiina, waxaan ka hortagayaa siyaasadaha xagjirka ah ee nolosha ka dhigaya mid aan la awoodi karin oo si aan loo baahnayn u kala qaybinaya dadka Mareykanka. Waxaan diiradda saarayaa dhimmista kharashyada, caawinta qoysaska fasalka dhexe iyo waayeelka, taageeridda halyeeyada, iyo dhisidda mustaqbal ifaya oo carruurteena u ah.

Waxaan taageeraa siyaasado hoos u dhigaya kharashka nolosha, yaraynaya canshuuraha qoysaska shaqeeya, isla markaana hubinaya in kuwa hodanka ahi bixiyaan qaybtooda caddaaladda ah. Waxaan u dagaallamayaa inaan hoos u dhigo lacagaha caymiska daryeelka caafimaadka, dib u celiyo jaritaannada naxariis-darrada ah ee Medicaid, oo aan soo afjaro canshuuraha soo-dejinta ee taxaddar la'aanta ah ee Madaxweyne Trump.

Si aan u caawiyo qoysaska shaqeeya, waxaan hoggaamiyey ballaarinta joogtada ah ee Gunnada Canshuurta Carruurta, taas oo qoysaska u diri lahayd jeegag bille ah isla markaana saboolnimada carruurta kala bar dhimmi lahayd. Waxaan soo bandhigay sharci laba xisbi ah oo dardargelinaya abuurista laba milyan oo guryo la awoodi karo.

Waa xilli hore loo dhaafay in la hagaajiyo hannaanka socdaalka oo la xakameeyo wakiilada ICE ee faraha ka baxay ee cabsi iyo rabshad ku faafiyay bulshooyinkeena. Si ka duwan Jamhuuriyiinta MAGA, waxaan iga go'an inaan xoojiyo Social Security iyo Medicare. Waxaan si xooggan u taageeraa xuquuqda taranka, waxaanan sameyn doonaa wax kasta oo aan awoodo si aan uga hortago isku dayada xag-jiriinta Jamhuuriyiinta ee ah inay meel mariyaan mamnuucid ilmo iska soo ridid oo dalka oo dhan ah.

Waxaa sharaf ii ah inaan taageero ka haysto kooxaha Dimuqraadiga, ururada shaqaalaha, hoggaamiyeyaasha maxalliga ah, iyo kuwo kale oo badan. Anigoo diiradda saaraya natijoyin, ma aha hadal qurxin, waxaan ku kalsoonahay inaan sameyn karno horumar dhab ah si aan u caawino qof kasta oo ku nool Degmada 1aad. Waxaan kaa codsanayaa codkaaga.

Mary Silva

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 426-9000

info@marysilvaforcongress.com

www.marysilvaforcongress.com



Khibradda Jago Loo Doortay: PCO, Degmada Snohomish 2022 - Hadda; Degmada King, 2014-2016, 2008-2012. Shirka Gobolka ee Xisbiga Jamhuuriga 2024, Ergo. Shirka Gobolka ee Xisbiga Jamhuuriga 2008, Beddel.

Khibrad Xirfadeed Kale: 20 sanno oo khibrad ah oo ah dhakhtar maqalka oo caafimaad ah oo leh toddoba sanno oo ah lammaane maamule. Hoggaamin fulinneed oo la xaqiijiyay iyo khibrad farsamo. Asal ku leh sayniska iyo ku-dhaqanka caafimaadka. Hab xog-ku-saleysan oo lagu xalliyo dhibaatooyinka.

Waxbarashada: Jaamacadda Salus - 2009, Dhakhtarka Maqalka. Jaamacadda Gobolka Washington -2006, Master of Arts, Maqalka/Hadalka iyo Sayniska Maqalka. Jaamacadda Western Washington - 2003, Bachelor of Arts, Sayniska Isgaarsiinta iyo Cilladaha.

Adeegga Bulshada: Xubin hore oo ka tirsan guddiga Akadeemiyaha Maqalka ee Gobolka Washington. Big Brother Big Sisters. Mutadawac Dugsiga.

Bayaanka: Degmada Koowaad ee Washington waxay mudan tahay hoggaan diiradda saaraya xalal wax-ku-ool ah, ma aha bandhigyo dhinac-socod ah oo dareen kiciya oo keliya u adeega inay na kala qaybiyaan. Bulshadeennu way horumartaa marka aan ka gudubno mashquulinta xisbiyada oo aan u midowno wax ka qabashada dhibaatooyinka dhaqaale iyo qaab-dhismeed ee aasaasiga ah ee wajahaya qarankeena.

Muddo aad u dheer, siyaasadaha dhaqaale ee aragtida-gaaban ayaa u oggolaaday shirkadaha caalamiga ah inay gudaha ka faarujiyaan dabaqadda dhexe ee Mareykanka. U wareejinta shaqooyinka dibadda waxay naga siibtay awoodaha wax-soo-saarka muhiimka ah, iyadoo dhaqaalaha maxalliga ah ka dhigaysa mid nugul. Waxaan aaminsanahay inay tahay wakhtigii la rogi lahaa isbeddelkan. Iyadoo la hirgelinayo xalal siyaasadeed-ku-saleysan oo dhiirigeliya wax-soo-saarka gudaha, waxaan Washington ku soo celin karnaa shaqooyin tayo sare leh oo dib u dhisi karnaa madax-bannaannideena dhaqaale.

Adkeysiga dhaqaale ee dhabta ah wuxuu u baahan yahay saldhig amni. Kaabayaasha dhijitaalka ah ee noo yaal hadda waxay u nugul yihiin carqaladaha caalamiga ah iyo faragelinta shisheeye. Waxaan mudnaan siin doonaa maalgeshiyo federalal oo adag si loo ilaaliyo hannaannadeenna teknolojiyada, iyadoo la hubinayo in shabakadaheena, isgaarsiinteena, iyo xogteena gaarka ah ay ahaadaan kuwo sugan oo madax-bannaan.

Intaa waxaa dheer, waa inaan diiraddeenna dhaqaale ka wareejinno maalgeliyayaasha Wall Street iyo bilyaneerrada urursada hantida iyagoo dhaawacaya Waddada Main. Goobaha canshuuraha badda ka baxsan waxay abuuraan hannaan dhaqaale oo laba heer ah kaas oo xaddidaya awooddeena istaraatiijiyadeed. Barnaamijkaaygu wuxuu ku baaqayaa in wax laga qabto dhibaataada canshuurta ee kuwa ku tiirsan kaalmooyinka dowladda ee shirkadaha waaweyn kuwaas oo dalkayaga ku khasaarinaya tiriliyan doolar oo dakhli lumay ah. Waxaan u dagaallami doonaa ganacsiyada yaryar iyo kuwa cabbirka dhexe. Shirkadahan waa matoorada dhabta ah ee dhaqaalahayaga iyo aasaaska kala duwanaanshahayaga maxalliga ah. Iyada oo la dhimmayo caqabadaha sharciyeed iyo ballaarinta helitaanka raasumaalka ganacsatada maxalliga ah, waxaan kobcin karnaa suuq kala duwan oo is-waafajin ah oo ku salaysan halkan Gobolka Washington.

Waxaan u tartamayaa inaan noqdo cod mideeya oo ku jira Kongareeska. Waxaan u heellannahay siyaasad nuxur leh oo xoojisa warshadahayaga, sugta mustaqbalkeena dhijitaalka ah, oo qoysaska maalinlaha ah ka kor marisa danaha shirkadaha. Si wadajir ah, waxaan diidi karnaa isku-dayada na lagu kala qaybinayo oo u dhisi karnaa mustaqbal xooggan oo barwaaqo leh nafteena.



Wakiilka Dalka Mareykanka

Pramila Jayapal

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 604-4543

info@pramilaforcongress.com

www.pramilaforcongress.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Dalka Mareykanka ah, 2017-hadda; Senatarka Gobolka Washington, 2015-2017

Khibrad Xirfadeed Kale: Aasaasaha/Agaasimaha Fulinta, OneAmerica; Agaasimaha, Sanduuga PATH ee Wareejinta Teknolojiyada; Falanqeyye Maaliyadeed; Qoraa

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka ee Ingiriisiga & Dhaqaalaha, Jaamacadda Georgetown; MBA, Jaamacadda Northwestern

Adeegga Bulshada: Xubin: Guddiga Garsoorka ee Aqalka, Guddiga Arrimaha Dibadda ee Aqalka, iyo Guddiga Miisaaniyadda. Xubin Darajo Sare ah oo ka tirsan Guddiga Hoosaadka Socdaalka. Guddoomiyaha Hore iyo Xubin ka tirsan Guddiga Fulinta, Guddiga Horumarka ee Kongareeska. Guddoomiye-Wadaag, Guddiga Ka-hortagga Keli-talisyada Ganacsiga. Guddoomiye-Wadaag, Guddiga Hawlaha Sinnaanta Dadka Isbeddella (Trans). Xubin: Guddiga Sinnaanta ee Kongareeska, Guddiga Aasiyaanka Baasifigga Mareykanka ee Kongareeska, Guddiga Xulashada Xuquuqda Haweenka. Abaalmarinta Halyeeyga Isbeddelka oo uu bixiyay Madaxweyne Obama. Xubin hore oo ka tirsan Guddiga La-talinta Sinnaan La'aanta Dakhliga ee Seattle (\$15 mushaharka ugu yar).

Bayaanka: Waan ku faraxsanahay inaan matalo degmada 7aad ee Washington oo aan u istaago dadka shaqeyda maalin kasta. Anigoo ah Xildhibaanad, waxaan ka shaqeynay ilaalinta dimuqraadiyadeena, kordhinta mushaharka, yaraynta kharashyada, dhisidda guryo la awoodi karo, ilaalinta xuquuqda ilmo soo rididda, iyo la dagaalanka isbeddelka cimilada.

Waxaan hoggaaminayaa dadaalka loogu jiro Xeerka Medikeerka Loogu Talagalay Dhammaan si loo hubiyo in daryeelka caafimaad ee guud uu noqdo xuquuq, ee uusan noqon mudnaan. Waxaan sidoo kale hoggaamiyaa sharciyo muhiim ah oo lagu doonayo in waxbarashada sare laga dhigo mid bilaash ah, lagu dammaanad qaado guryaha inay yihiin xuquuq aadane, lagu ballaariyo xuquuqda shaqaalaha, lagu kordhiyo mushaharka ugu yar ee federaalka, lagu hirgeliyo dib-u-habaynta socdaalka ee bani'aadannimada, iyo in la sameeyo canshuur hantiyeed oo aad u badan oo loogu talagalay milyaneerro aad u taajirsan. Waxaan hoggaaminayaa sharciyo labada xisbi ah oo mamnuucaya ganacsiga saamiyada ee Xubnaha Kongareeska iyo ilaalinta dadka Mareykanka ee basaasnimada dowladda. Waxaan sameynayaa wax kasta oo suurtagal ah si aan lacag uga saarno siyaasadda oo aan dib-u-habeyn ugu sameyno Maxkamadda Sare.

Waxaan safa hore kaga jiray la xisaabtanka Trump, oo ay ku jiraan falalka sharci-darada ah ee ICE iyo CBP ee afduubay oo la waayay deriskeena. Waxaan aasaasay Guddiga Ka-hortagga Keli-talisyada Ganacsi si aan ula dagaalamo isku-darka, hunguri-xumada shirkadaha, iyo kor u qaadista qiimaha. Waxaan qoray Qaraarka Awoodaha Dagaalka si loo soo afjaro dagaalka sharci darada ah ee Trump uu ka wado Iiraan, waxaana la shaqeynay dadkii ka badbaaday Epstein si loo helo caddaalad ka dhan ah ugaarsadeyaasha galmada iyo kuwa carruurta fara xumeeya.

Waxaan qabtay in ka badan 130 kulan dowladeed waxaana caawiyay kumanaan dad ah oo deegaanka ka soo jeeda, oo ay ku jiraan halyeeyadii hore iyo waayeellada, si ay u helaan in ka badan \$25 milyan oo faa'iidooyin federaal ah. Xafiiskaygu wuxuu guriga keenay in ka badan \$70 milyan oo maalgashi cusub oo federaal ah oo loogu talagalay guryaha, gaadiidka, shaqooyinka, iyo ammaanka dadweynaha.

Waan ku faraxsanahay inaan matalo degmo kala duwan, hal-abuur leh oo naxariis badan. Weligay ma qaadan lacag shirkadeed oo ku saabsan PAC sababtoo ah waxaan u dagaalamaa dadka shaqeyda, ee ma aha bilyaneerrada iyo shirkadaha waaweyn. Si qoto dheer leh ayay sharaf iigu ahaan lahayd inaan helo codkaaga.

Taageerooyinka: *Ururada shaqaalaha oo ay ku jiraan Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, WFSE, UFCW 3000, NEA/WEA, iyo Golaha Dhismaha iyo Qandaraasyada Gobolka Washington. Qorsheynta Waalidnimada (Planned Parenthood), Sierra Club, iyo Dimuqraadiyiinta Degmada King.*

Nirav Sheth

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 816-2977

campaign@shethforcongress.com

www.shethforcongress.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Ma jiro xil hore oo loo doortay, hase yeeshee waxa uu leeyahay asal ganacsi oo xooggan

Khibrad Xirfadeed Kale: Madaxa Maaliyadda ee Sheth Groups (Laamaha Meineke 2017 ilaa Hadda; Mulkiile Wadaag ah ee Maqaayadda Bistro Baffi 2018 ilaa 2025; Sarkaal Booliis oo ka tirsanaa Waaxda Booliiska ee Lakewood 2017 iscasilay sababtoo ah maqal-beel qayb ah; Ciidamada Mariiniska ee Dalka Mareykanka 2011 ilaa 2014 Fasaxaad Ay Sharaf La Socoto

Waxbarashada: Shahaado jaamacadeedka labada sanno ee injineernimada korontada & Sayniska Kombuyuutarka. Makaaniik Qaab-dhismeedka Diyaaradaha, Maamulka Ganacsiga iyo istaraatiijiye, Maamulka Kheyraadka Aadanaha

Adeegga Bulshada: Afar Sanno oo ka tirsanaa Ciidamada Mariiniska ee Dalka Mareykanka, Sarkaal Booliis oo ka tirsanaa Lakewood, WA. Mutadawac ahaan xiriiriye sirdoon ka ahaa Ilaalada Xuuduuka ee Mareykanka Yuma, AZ intii uu ku jiray adeegga Ciidamada Mariiniska ee Dalka Mareykanka. Mutadawac ka tirsan Laanqayrta Cas ee Mareykanka

Bayaanka: Hadafkaygu waa in aan abuurro guryo waara & la awoodi karo si loo xalliyo guri la'aanta, dib loogu soo celiyo sharciga & kala dambeynta Seattle & kharash nololeed oo ka jaban qof kasta.

Magacaygu waa Nirav Sheth. Socdaalkayga ka yimid guri dhexdhexaad ah oo ku yaalla India ilaa heerkana waxaa lagu dhisay hal aaminaad: Riyada Mareykanku ma aha hadiyad—waa ballan mudan in loo dagaalamo. Keliya ma iman dalkan; waxaan kasbaday booskayga halkan. Waxaan ku dhaartay inaan difaaco qarankeena, marka hore anigoo ka tirsan Ciidamada Mariiniska ee Dalka Mareykanka, ka dibna anigoo ah Sarkaal Booliis. Waxaan garanayaa adkeysiga ay u baahan tahay in bulsho ammaan lagu hayo iyo anshaxa looga baahan yahay hoggaaminta marka aan meel qalad loogu talagalay jirin. Maanta, degmadeenu waxay joogtaa meel xasaasi ah. Haddii aad aaminsan tahay in bulshadeenu barwaaqaysan tahay, jidkaas sii wad. Laakiin haddii aad dareemayso kharashka sare ee nolosha & tamarta, xaafad aan ammaan ahayn, iyo iftiinka fursadda oo sii daciifaya, waa wakhtigii jihada la beddeli lahaa. Waxaan guuldarradan u dareemay si shakhsi ah. Ganacsigayga, Maqaayadda Bistro Baffi, wuxuu dhibbane u noqday isla siyaasadda shaqo-bixiyeayaasha eryaya oo xaafadeena burburinaya. Waxaan sidoo kale u tartamayaa Kongareeska si aan Washington, D.C. ugu keeno la-xisaabtan heer ciidan ah. Waxaan sidoo kale doonayaa inaan ka shaqeeyo Xalal Dhab ah si loo caawiyo dadka guri la'aanta ah & Madax-bannaannida Tamarta.

Ciidamada Mariiniska iyo ganacsiga dhexdiisa, waxaan maamulay miisaaniyado halkaas oo senti kasta muhiim ahaa. Waxaan lacagtaada canshuurta ula dhaqmi doonaa isla ixtiraamkaas quduuska ah. Noloshayda waxaa qeexay adeeg; hadda, waxaan codsanayaa sharafta ah inaan noqdo codkaaga.

Wadajir, waxaan xaqiijin doonaa dhaqal barwaaqo ah oo carruurteena u noqon doona, waxaana korin dib ugu soo celin doonaa bulshadeenna.



Wakiilka Dalka Mareykanka

Kim Schrier

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 477-9861

info@drkimschrier.com

drkimschrier.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Dalka Mareykanka, 2019-Hadda, Guddiga Tamarta & Ganacsiga, Guddiyada Hoose ee Caafimaadka, Tamarta, iyo Ganacsiga, Waxsoosaarka, iyo Ganacsiga

Khibrad Xirfadeed Kale: Dhakhtarka carruurta ee Issaquah muddo 17 sanno ah; Loo doortay Dhakhtarka Carruurta ee Ugu Fiican, aagga weyn ee Seattle (Wargeyska Parent Map, 2013)

Waxbarashada: Tababarka dhakhtarnimada carruurta ee Jaamacadda Stanford, 2000; Dugsiga Daawada ee UC Davis, 1997; UC Berkeley, B.A., Cilmiga Xiddigaha (Astrophysics), 1991

Adeegga Bulshada: Soo celinta deegaanka noolaha ee Green River, la shaqeeya Mountains to Sound Greenway, Rugta Caafimaadka ee Degmada King oo bixisa daryeel caafimaad oo bilaash ah dadka u baahan

Bayaanka: Waxaan ku jiraa Kongareeska si aan adiga kuugu dagaalamo oo aan xaddido awoodda aan la xakameyn ee maamulkan. Hadda, qoysasku waxay ku dhibtoonayaan inay nolol maalmeedka daboolaan, iska daa inay horumar gaaraan. Taasi waa sababta aan u soo bandhigay sharci si isla markiiba loo hakiyo canshuurta shidaalka ilaa dhammaadka sannadka, loo dardargeliyo horumarinta tamarta nadiifka ah, loo xakameeyo xadgudubiyada shirkadaha caymiska, loona abuuro guryo badan oo la awoodi karo.

Doollarradaada canshuurta waa inay adiga kuu shaqeeyaan. Taasi waa sababta aan u xaqiijiyay in ka badan \$60 milyan oo loogu talagalay Mashaariicda Bulshada ee Degmada 8aad: rugta caafimaadka ee ku saleysan dugsiga ee Graham, guryaha Ciidamada Hore ee Ellensburg, hagaajinnada Highway 2, ballaarinnada badan oo bangiyada cuntada ah, dab-damiska iyo adkeysiga ka hortagga dababka kaymaha ee North Central Washington, iyo kamaradaha jirka iyo hannaan DNA degdeg ah oo Degmada King leedahay si loo taageero dhaqan gelinta sharciga.

Waxaan u istaagayaa beeraha qoysaska, kuwaas oo aasaas u ah Degmada 8aad, anigoo dib u celinaya canshuuraha tufaaxa ee India, la dagaalamaya isku-biirinta Albertson's-Kroger, iyo helaya taageero loogu talagalay helitaanka suuqyada shisheeye ee Sharciga Beeraha.

Kharashyada daryeelka caafimaadku aad bay u sareeyaan, sidaas darteed waxaan meel mariyay sharciyo lagu xaddiday kharashyada insulinka, Medicare lagu siinayo awood uu kula xaajoodo qiimeyaal daawo oo hooseeya, laguna xaddiday kharashyada jeebka laga bixiyo ee waayeelka. Laakiin Kongareeskan, saaxiibbadayda Jamhuuriyiinta ah waxay dhimmeen daryeelkaaga caafimaadka si ay bilyaneerrada u siiyaan canshuur-dhimmis. Taasi waa wax laga xumaado. Mar walba waxaan u dagaalami doonaa inaan hoos u dhigo kharashyada oo aan dhakhaatiirta iyo bukaanada dib ugu celiyo kursiga darawalka, ma aha shirkadaha caymiska.

Anigoo qabtay in ka badan 130 kulammo bulsho, waxaa iga go'an inaan ku dhegaysto, wax barto, oo aan adiga kuu fuliyo Kongareeska. Waa sharaf inaan kuu adeego, waxaana si hoose kaaga codsanayaa codkaaga.

Taageerooyinka: Sanduuqa Waxqabadka Qorsheynta Waalidnimada, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, Ururka Codbixiyayaasha Ilaalinta Deegaanka, iyo duqooyinka magaalooyinka guud ahaan degmada oo ay ku jiraan: Mike Poirier oo ka socda Wenatchee, Rich Elliott oo ka socda Ellensburg, Dan Rankin oo ka socda Darrington, iyo Nancy Backus oo ka socota Auburn.

Spencer Meline

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(509) 293-3618

info@melineforcongress.com

www.melineforcongress.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Ma jiro khibrad jago loo doortay oo hore.

Khibrad Xirfadeed Kale: Mulkiile ganacsi yar iyo maqaayadle ku sugan Leavenworth, Washington. Wuxuu dhisay ganacsiyo badan isagoo ka bilaabay eber, abuuray shaqooyin, kana caawiyay dhaqaalaha maxalliga inuu koro. Wuxuu maareeyay shaqaale, mushahar-bixin, miisaaniyado, ruqsado, iyo hawlgallo maalinle ah isagoo wajahaya caqabadaha haysta ganacsiyada yaryar ee Washington. Wuxuuna xirfaddiisa ku qaatay u adeegidda macaamiisha, taageeridda shaqaalaha, iyo maalgelinta bulshada.

Waxbarashada: Dhammeeyay koorsooyin ka socda Kuliyadda Bulshada Edmonds anigoo ku daba jiray fursado ganacsi iyo xirfadeed.

Adeegga Bulshada: Wuxuu la shaqeeyaa ururro maxalli ah si uu uga caawiyo bixinta cuntooyinka bulshada iyada oo loo marayo ganacsigiisa. Wuxuu si firfircoon u taageeraa dugsiyada maxalliga ah, hawlaha dhallinyarada, kaniisadaha, iyo dhacdooyinka bulshada ee gobolka oo dhan.

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa Kongareeska sababtoo ah qoys badan oo Washington ah waxay dareemayaan in Riyada Mareykanka ay ka siibanayso. Kharashka guryaha, raashinka, shidaalka, caymiska, iyo nolosha maalinlaha ah ayaa sii kordhaya. Ganacsiyada yaryar ayaa ku xirmaya heerar cabsi leh, dad badanna waxay dareemayaan in siyaasiyiinta xirfadda ka dhigtay ee aan weligood la kulmin caqabadaha haysta qoysaska shaqeeya ay iska indho tirayaan.

Waxaa sharaf ii ah inaan kasbaday taageerada Xisbiga Jamhuuriga ee Degmada King iyo Xisbiga Jamhuuriga ee Degmada Snohomish labadaba. Taageeradoodu waxay muujinaysaa xawaaraha sii kordhaya ee ka dambeeya ololaheenna iyo farriinteenna ku saabsan soo celinta fursadda qoysaska shaqeeya ee Washington oo dhan.

Anigu ma ihi siyaasi. Waxaan ahay say, aabbe, iyo mulkiile ganacsi yar oo dhisay ganacsiyo isagoo ka bilaabay eber. Waan garanayaa waxa ay ka dhigan tahay in mushahar-bixin la daboolo, kharashyo sii kordhaya la maareeyo, iyo saacado dheer la shaqeeyo si qoys loogu masruufo.

Waxaan aaminsanahay inaan u baahanahay hoggaan diiradda saaraya dhimmista kharashyada, xoojinta ganacsiyada yaryar, taageeridda shaqooyin mushahar qoys lagu noolaado leh, ilaalinta bulshooyinkeenna, ilaalinta xuduuddeenna ammaan, iyo si mas'uuliyad leh u maaraynta dhulalka dadweynaha ee jiilalka mustaqbalka.

Waxaan u tartamayaa inaan Kongareeska keeno aragti dunida dhabta ah oo aan u dagaallamo dadka si adag u shaqeeya, sharciga raaca, oo doonaya fursad caddaalad ah oo ay ku dhistaan mustaqbal ka wanaagsan.



Wakiilka Dalka Mareykanka

Adam Smith

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 308-8986

info@electadamsmith.com

www.electadamsmith.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Dalka Mareykanka, 1997-Hadda; Senatarka Gobolka Washington, 1991-1996

Khibrad Xirfadeed Kale: Xeer Ilaaliye, Magaalada Seattle, 1993-1995; Qareen, Cromwell, Mendoza and Belur

Waxbarashada: J.D., Jaamacadda Washington, 1990; B.A., Jaamacadda Fordham, 1987

Adeegga Bulshada: Xubin: Guddiga La-talinta Sharafeed ee Dugsiga Evans ee Jaamacadda Washington; Golaha Xiriirka Dibadda; Guddiga Maamulka Mashruuca Borgen. Xubin hore: Naadiga Kubadda Cagta ee Issaquah, tababarre mutadawac ah; PTA-yada Dugsiga Sare iyo Dugsiga Dhexe ee Issaquah; PTA-ga Dugsiga Hoose ee Northeast Tacoma, halkaas oo xaaskayga, Sara, ay u adeegtay Madaxweynaha PTA-ga; Naadiga Kiwanis ee Federal Way; Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Tom Lantos; Kaniisadda Episcopal ee St Matthew.

Bayaanka: Degmadeenu waa bulsho aad u kala duwan oo dadaal badan, mid aan ku faani jiray inaan gurigayga ugu yeero noloshayda oo dhan. Waxaan ku soo koray magaalada SeaTac. Sara iyo anigu waxaan halkan ku korinay labadeenna carruur, waxay dhigteen dugsiiyadeena dadweynaha ka dibna waxay aadeen UW iyo WSU.

Marka qarankeenu wajahayo caqabado aan hore loo arag gudaha iyo dibaddaba, waxaan diiradda saarayaa xoojinta fasalka dhexe iyo maalgelinta mustaqbalkeena. Qoysaska fasalka shaqeeya, sida qoyska ururka shaqaalaha ee aan ku soo koray, ma haystaan fursadihii ay haysteen jilashii hore. Tani waxay u baahan tahay inay isbeddesho. Waa inaan hoos u dhignaa qiimaha guryaha oo aan mar kale ka dhignaa lahaanshaha guri mid la gaari karo. Waa inaan ka kornaa dhexda, kordhinnaa fursadaha dhaqaale, ilaalinnaa ururada shaqaalaha, ballaarinnaa tababarka shaqada iyo barnaamijyada horumarinta xoogga shaqaalaha, abuurnaa shaqooyin mushahar fiican leh, oo ilaalinnaa kuwa aan haysano.

Dhammaan dadka, iyadoon loo eegin asalkooda, waa inay helaan daryeel caafimaad oo tayo leh, la awoodi karo. Hannaankeena daryeelka caafimaadka wuxuu u baahan yahay in dib loo qaabeeyo si loo abuurro waddo loogu gudbo qorshe hal-bixiye ah sida Medicare for All. Anigoo ahaa Guddoomiyihii hore iyo Dimuqraadiga ugu sareeya ee Guddiga Adeegyada Hubaysan ee Aqalka, waxaan sidoo kale mudnaan siiyay hubinta in dhammaan xubnaha adeegyadeena iyo qoysaskooda, iyadoon loo eegin cidda ay yihiin, ay helaan taageerada ay u baahan yihiin oo ay kasbadeen.

Waxaan si adag uga shaqeeyaa inaan hubiyo in qof kasta oo degmadeena ku nool uu heli karo waxa ugu fiican ee dalkan leeyahay; ma aha oo keliya sababtoo ah waa waxa saxda ah ee la sameeyo, balse sababtoo ah tani sidoo kale waa gurigayga—waa arrin aniga ii gaar ah.

Waa mudnaan dhab ah inaan u adeego bulshadeenna, waana igu sharaf inaan helo codkaaga.

Doug Basler

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(833) 311-2967

candidate@dougbasler.com

dougbasler.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiye Ku-xigeen hore oo Xisbiga Jamhuuriga ee Degmada King; Madaxweynihii hore ee Eastside Republican Club iyo Madaxweyne Ku-xigeenka hadda; Sarkaal muddo dheer ka tirsanaa Guddiga Goobta Doorashada ee Xisbiga Jamhuuriga; musharax u taagan Kongareeska Mareykanka.

Khibrad Xirfadeed Kale: Aasaase iyo Madaxweyne Prologue Digital Inc., shirkad xayeysiin iyo soo-saar muuqaal oo Washington ah; xirfadle warbaahin iyo suuqgeyn tan iyo 1990; tababarre iib muddo dheer ah iyo mulkiile ganacsi yar.

Waxbarashada: Ka qayb galay Jaamacadda Multnomah; waxbarasho sii socota oo ka badan saddex tobanaan sanno oo khibrad ganacsi, warbaahin, xayeysiin, tababar iib, iyo hoggaamin ah.

Adeegga Bulshada: La shaqeeyay hawlgallada samatabixinta, Union Gospel Mission, iyo Salvation Army ee wacyigelinta dadka guri la'aanta ah; si dhow ula shaqeeyay dhallinyarada khatarta ku jirta; wadaad dhallinyaro hore, wadaad cibaado hore, iyo mutadawac kaniisadeed muddo dheer ah.

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa Kongareeska sababtoo ah qoysaska Washington waxay mudan yihiin wax ka badan kacaan siyaasadeed kale. Waxaan u baahanahay kacaan fursadeed.


Aagga Seattle wuxuu gacan ka gaystay dhisidda qaar ka mid ah shirkadaha ugu waaweyn adduunka — Boeing, Microsoft, Starbucks, Amazon, Costco, iyo kuwo kale oo badan. Waxaan caan ku noqonay meel fikraduhu ku kori karaan, shaqaaluhu ku barwaaqoobi karaan, qoysaskuna ku dhisi karaan mustaqbal ka wanaagsan. Laakiin maanta, siyaasadaha dowladda weyn ayaa adkeynaya in wax la dhiso, shaqaale la qorto, la awoodo, oo la joogo. Marka aan colaad u muujino shaqo-bixiyayaasha iyo hal-abuurayaasha abuuray fursadda halkan, waxaan luminnaa shaqooyin, waxaan daciifinnaa shaqaalayahayga, waxaan nolosha ku adkeynaa qoysaska shaqeeya.

Awoodda lagu dabooli karo kharashaadka hadda waa dhibaato. Qoysaska waxaa cirriirinta qiimaha gaaska oo sareeya, kharashyada tamarta, raashinka, guryaha, caymiska, iyo canshuuraha. Climate Commitment Act wuxuu u ekaan karaa mid wanaagsan, laakiin ficil ahaan wuxuu kor u qaadayaa kharashka tamarta isagoo wax yar si toos ah uga qabanaya hagaajinta deegaanka. Marka lagu daro mid ka mid ah canshuuraha gaaska ugu sareeya dalka, siyaasadahani waxay kordhiyaan kharashyada gaadiidka, cuntada, iyo tamarta — kharashyadaasna waxaa loogu gudbiyaa qoysaska ku dhawaaq wax kasta oo ay iibsadaan. Waxaan aaminsanahay qoyska, badqabka dadweynaha, aaminaadda ilaahay iyo is-aaminaadda dadka dhexdooda. Waxaan u baahanahay inaan deriskeenna mar kale jeclaanno. Waxaan ka dheregsan nahay kala-qaybsanaan, caro, iyo eedayn. Dhibaatooyinkeena waa dhab, laakiin ma xallin doono anagoo midba midka kale kala jeexayna.

Waxaan noqon doonaa cod caqli caadi ah, dhex-dhexaadnimo, iyo xalal wax-ku-ool ah oo ku jira jawi siyaasadeed oo aad u kacsan. Waxaan aaminsanahay bulshooyin ammaan badan, qoysas xooggan, kharashyo hoose, dowlad mas'uul ah, iyo dhaqaale qof walba uu ku haysto fursad uu ku shaqeeyo, dhiso, adeegto, kuna horumaro.

Waxaan ahay Doug Basler, waxaana sharaf ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

Degmooyinka Sharci Dejinta





Wakiilka Jagada Lr. 1

Davina Duerr

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 219-7945

davina@electdavina.com

electdavina.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Waxaa loo magacaabay inay matasho Degmada 1aad sannadkii 2019. Guddoomiyaha Guddiga Dowladda Hoose. Waxay ka shaqeysay Golaha Magaalada Bothell 2016-2022, Ku-xigeenka Duqa Magaalada laga bilaabo 2016-2020.

Khibrad Xirfadeed Kale: Naqshadeeyaha keliya oo shahaadaysan oo ka tirsan sharci-dejinta. U heellan naqshad waarta, la awoodi karo. Waxay ka shaqeysay Iskaashiga Gaadiidka Eastside; Kooxda La-talinta Fulinta ee WSDOT; Kooxda Hoggaanka la Doortay ee Gaadiidka Degdegga ah ee Basaska Gaadiidka Sound; Guddiga Siyaasadda Gaadiidka PSRC iyo Guddiga Agaasimeyaasha Ururka Sound Cities

Waxbarashada: Jaamacadda Syracuse, Shahaadada Naqshadeynta Dhismaha oo leh taqasus yar oo Juqraafiga Deegaanka ah

Adeegga Bulshada: Toban sanno oo ka tirsan Guddiga Ilaalinta Astaamaha Taariikhiga ah ee Bothell, siddeed sanno guddoomiye. Waxaan ka mid ahaa aasaaseyaasha Ololaha Lacagta M.I.L.K. ee Hey'adda Dugsiyada Northshore oo taageera ardayda la kulmaya hoy-la'aanta.

Bayaanka: Tayada noloshu waxay ku xiran tahay lahaanshaha guryo la awoodi karo oo u dhow shaqooyinka, gaadiid la heli karo, deegaan caafimaad qaba, iyo waxbarasho dadweyne oo xooggan. Muddo-xilleedkii ugu dambeeyay, toddoba ka mid ah sharciyadaydu waxay noqdeen sharci, oo ay ku jiraan sharciyo: ka dhigaya dhisidda guryaha la awoodi karo mid ka jaban, ka saaraya qaboobiyeyaasha wasakhda aadka u sareeya, xiraya farqi ku jira maamulka koritaanka, fududeynaya oggolaanshaha guryaha cusub, iyo siinaya Deegaanka awood fulin oo ku saabsan nidaaminta meelaha qashinka lagu shubo. Waxaan xaqiijiyay \$532 milyan oo loogu talagalay Degmada 1aad sannadkii 2025, oo ay ku jiraan \$464.5 milyan oo loogu talagalay mashruuca marinka I-405. Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga. Waxaa taageeray: Golaha Shaqaalaha Gobolka, Ficilka Ilaalinta Washington, Senatar Stanford, Wakiilka Kloba, Duqooyda Magaalooyinka Thompson, Arndt, Herbig, Curtis iyo kuwo kale.

Maggie Wang

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 215-8822

maggieforolympia@yahoo.com

www.maggieforolympia.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

Khibrad Xirfadeed Kale: Waxay maamushay saloon timo oo naqshad moodo ah muddo siddeed sanno ah laga bilaabo 1981. Waxay lahayd oo maamushay maqaayad ku taalla bartamaha Redmond muddo lix iyo labaatan sanno ah.

Waxbarashada: Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

Adeegga Bulshada: Mutadawac kormeere doorasho ka ahaa Doorashooyinka Degmada King tan iyo 2022.

Bayaanka: Waxaan ahay Maggie Wang – muhaajir, mulkiile ganacsi, xaas, hooyo iyo qof Mareykan ah oo ku faanaya. Ka dib markii aan ka imid Taiwan 1989, ninkayga iyo anigu waxaan ku gaarnay Riyada Mareykanka shaqo adag. Maanta, riyadaas waxaa weerar ku haya canshuuraha kordhaya, qiimaha guryaha, iyo faragelinta xad-dhaafka ah ee dowladda. Waxaan u baahanahay hoggaan ka horumarinaya *miisaaniyadda* ballaarinta xafiisyada dowladda.

Olympia gudaheeda, waxaan noqon doonaa codkaaga ku saabsan *la awoodi karitaanka, badqabka dadweynaha, xuquuqda waalidiinta*. Diiraddaydu waa mid fudud: canshuuro hoose, xaafado badbaado badan, iyo dhaqaale ay ganacsiyada yaryar ku barwaaqoobaan. Aan si wadajir ah u soo celino dowlad caqli-gal ah. *Waxaa taageeray Xisbiga Jamhuuriga ee Degmada King*. Waxaan diyaar u ahay inaan u dagaalamo qoyskaaga.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Shelley Kloba

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 823-9732
info@votekloba.com
www.votekloba.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka; Guddoomiye-ku-xigeenka Guddiga Teknolojiyada, Horumarinta Dhaqaalaha, iyo Halyeeyada Hore; xubin ka tirsan Guddiyada Ilaalinta Macaamiisha iyo Ganacsiga iyo Deegaanka iyo Tamarta; xubin xil ahaan ah oo ka tirsan Guddiga Khamaarka ee Gobolka WA; Shirka Qaran ee Sharci-dejiyayaasha Gobollada, Kooxda Hawsha Sirdoonka Macmalka ah, Amniga Internetka, iyo Asturnaanta Xogta; aasaasaha kutlada Teknolojiyada ee Aqalka. Hore: Guddiga Hawlgalka Khamaarka Dhibaataada, Xubin ka tirsan Golaha Magaalada Kirkland 2013-2016

Khibrad Xirfadeed Kale: Bixiye daryeel caafimaad oo shati haysta muddo ka badan 20 sanno

Waxbarashada: B.S. ee Cilmiga Dhaqdhaqaaqa Jirka, Jaamacadda Illinois; Shahaadada Qorsheynta Siyaasadda Tamarta, Jaamacadda Idaho; Dugsiga Masaajada ee Seattle

Adeegga Bulshada: Hadda: Kirkland Kiwanis Club. Hore: Wakiilka Hey'adda Dugsiyada Lake Washington, Xubin Guddiga Beerta Kirkland, Agaasimaha Sharci-dejinta ee WA State PTA


Bayaanka: Waxay sharaf ii ahayd inaan adiga kugu matalo Olympia tan iyo 2017. Waxaan u dagaallamay inaan hagaajiyo asturnaanta xogta, xakameeyo dallaaaliinta xogta, oo yareeyo waxyeellada Sirdoonka Macmalka ah ku leeyahay nolosha macaamiisha. Codkaaga, waxaan sii wadi doonaa ka shaqeynta hagaajinta kaabayaasha gaadiidka, hagaajinta xeerka canshuureed ee dib-u-noqodka ah, abuurista shaqooyin cagaaran, dhimmista kharashyada qoysaska shaqeeya, maalgelinta waxbarashada si buuxda, kordhinta helitaanka daryeelka caafimaadka habdhaqanka, iyo ilaalinta xuquuqda madaniga. Si wadajir ah, waxaan aburi karnaa amni, fursad, iyo caddaalad dhammaan.

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada Snohomish, Naadiga Sierra, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, Ururka Waxbarashada Washington PAC, Isbahaysiga Washington ee Mas'uuliyadda Hubka, U Doodeyaasha Isbahaysiga Qorsheynta Waalidnimada

Cliff Moon

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 470-1887
vote@cliff4LD1.com
www.cliff4LD1.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Madaxa Guddiga Xaafadda, Degmada Sharci-dejinta 1.

Khibrad Xirfadeed Kale: Waxaan leeyahay saddex iyo lixdan sanno oo waayo-aragnimo ah oo ku saabsan xirfadaha dhismaha iyo afar iyo konton sanno oo lahaanshaha ganacsiyada yaryar ah.

Waxbarashada: Shahaadada jaamacadda ee Cilmiga Badaha Jirreed, Jaamacadda Washington; Shahaadada Mastarka ee Injineernimada Madaniga, Jaamacadda Washington. Waxbarasho dhaqamo kala duwan ah, iyo waayo-aragnimo waxbarid caalami ah.

Adeegga Bulshada: Bare booqde ah oo macallin jaamacadeed ah oo dhiga fasallada Ganacsiga Hal-abuurka iyo Hordhaca Ganacsiga ee jaamacadaha Kazakhstan, India, iyo Jaamacadda Washington-Bothell.

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa inaan matalo dadka doonaya inay carruurtooda koriyaan, si adag u shaqeeyaan, oo lacag uga harto dhammaadka jeeg kasta oo mushahar ah. Qiimaha gaaska, raashiinka, iyo khidmadaha adeegga tamarta waxay cunnaan dakhligayaga. Canshuuro isasaar ah ayaa kor u qaadaya kharashyada. Qoysasku waa aasaaska bulsho xooggan. Waalidiintu waa inay carruurtooda koriyaan. Dugsiyadu waa inay diiradda saaraan tacliinta.

Waxaan taageeraa fulinta sharciga, badqabka dadweynaha, iyo socdaalka sharciga ah. Mid kasta wuxuu suurtageliyaa bulsho firfircoon oo badbaado leh. Hagaha akhlaaqda ee Olympia waa la leexiyay, caqli-galkana waa la iska indho-tiray. Waxaa i taageeray Xisbiga Jamhuuriga ee Degmada King.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Zach Hall

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 614-8162

hello@electzachhall.com

www.electzachhall.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka ee hadda; Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Deegaanka & Tamarta ee Aqalka; Xubin ka ah Guddiyada Dowladda Hoose iyo Gaadiidka ee Aqalka; Xubin hore oo ka tirsanaa Golaha Magaalada Issaquah

Khibrad Xirfadeed Kale: Kaaliyihii hore ee Sharci-dejinta ee Aqalka Wakiillada Gobolka Washington; Horrey lataliye ugu ahaa magaalooyin iyo hey'ado gobol

Waxbarashada: Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, Jaamacadda Washington Dugsiga Evans ee Siyaasadda Dadweynaha iyo Maamulka; Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga, Jaamacadda Washington

Adeegga Bulshada: Zach horrey ayuu u guddoomiyay Guddiga Dab-damiska & Badbaadinta ee Eastside, isagoo hubiyay in jawaab-bixiyeyaasha koowaad ay haystaan waxa ay u baahnaayeen si ay noo ilaaliyaan. Isagoo ah qof noloshiisa oo dhan deganaa Issaquah, wuxuu si xamaasad leh u daneeyaa soo-kabashada salmonka, wuxuuna ka tirsan yahay Guddiga Friends of the Issaquah Salmon Hatchery.

Bayaanka: Anigoo ah wakiilkaaga, waxaan diiradda saarayaa dhisidda is-afgarad iyo bulshooyin xooggan. Kalfadhigaygii ugu horreeyay, waxaan soo jeediyay oo ansixiyay sharciyo labada xisbi taageereen si loo dhimmo kharashyada tamarta, waxaan mudnaan siiyay horumarinnada amniga iyo ciriiriga ee SR 18, waxaan taageeray dib-u-habeyno lagu xallinayo dhibaataada guriyeynta. Waxaa iga go'an inaan taageero jawaab-bixiyeyaasha koowaad, inaan si buuxda u maalgeliyo dugsiyadeenna, inaan ka caawiyo ganacsiyada yaryar inay kobcaan, iyo inaan riixo daryeelka carruurta iyo daryeelka caafimaadka oo la awoodi karo. Waxay ii ahaan lahayd sharaf inaan kasbado codkaaga.

Taageerooyinka: Dab-damiyeyaasha Eastside, Golaha Shaqaalaha ee WA, Ururka Waxbarashada ee WA, U Doodeyaasha Isbahaysiga Qorsheynta Waalidnimada, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Xildhibaanada Kim Schrier, Senatarka Gobolka Victoria Hunt, Wakiilka Gobolka Lisa Callan, iyo duqeyda magaalooyinka deegaanka.

Michelle Bennett

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 243-3233

michelle@votembennett.com

electmichellebennett.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Madaxweyne: Taliyeyaasha/Sheriff-yada Booliiska ee Degmada King, La-hawlgaleyaasha Akadeemiyaha Qaranka ee FBI ee Gobolka WA, Guddiga Fulinta ee Taliyaha Booliiska Gobolka Washington iyo Sheriff-ka, Guddoomiye-ku-xigeen Guddiga Sharci-dejinta, Guddiga Ardayda Jaamacadda Waqooyi-galbeed.

Khibrad Xirfadeed Kale: Macallin: Jaamacadda Northwestern, Kuliyadda Bellevue. Taliyaha Booliiska: Maple Valley, Sammamish, Mercer Island. Qorsheynta iyo Hawlgallada Sare ee Xafiiska Sheriff-ka ee Degmada King, Ku-xigeenka KCSO ee North Bend.

Waxbarashada: Shahaadada PhD-ga ee Waxbarashada, Jaamacadda Seattle Pacific. Shahaadada Mastarka ee Sayniska ee Horumarinta Ururada, Shahaadada Jaamacadda ee Farshaxanka ee Sharciga iyo Caddaaladda, Jaamacadda Bartamaha Washington.

Adeegga Bulshada: Abuure-wadaaga Manhajka Ka Soo Horjeedka Cagajuglaynta ee laga isticmaalo gobollo badan, wuxuu abuuray dhowr barnaamij oo bulsho oo ay ku jiraan Isbahaysiyada Bulshada Caafimaadka leh ee Sammamish, iyo Barnaamijyada Sahaminta Dhallinyarada iyo Iskaa wax u qabso.

Bayaanka: Qoysaska ku nool Degmada 5aad ee Sharci-dejinta waxay mudan yihiin bulshooyin ammaan ah, iskuullo xooggan, iyo dowlad goboleed ixtiraamta dadka bixinaya biilasha. Olympia ayaa dhawwaan u codeysay kordhinta canshuurta ugu weyn taariikhda gobolka halka qoysas badan ay la halgamayaan kororka kharashaadka. Booliiska ayaa sidoo kale aan haysan qalab cad oo lagu ilaalinayo dhibanayaasha iyo xaafadaha.

Anigoo haysta shahaadada ugu sareysa ee waxbarashada (doctorate), iyo sidii taliyihii hore ee booliiska degmadan, waxaan la yimaadaa waayo-aragnimo dhab ah oo ku saabsan badbaadada dadweynaha, waxbarashada, iyo miisaaniyad mas'uuliyad leh. Waxaan hubin doonaa in kharashaadka dowladdu ay keenaan natiijooyin la qiyaasi karo. Waxaan u dagaalami doonaa dugsiiyo xooggan, bulshooyin ammaan ah, waxaan hoggaamin caqli-gal ah u keenni doonaa Olympia.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Lisa Callan

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 260-4878
elect.lisacallan@gmail.com
electlisacallan.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka ee hadda, Guddoomiye Ku-xigeen, Guddiga Miisaaniyadda Raasamaalka; Xubin ka ah Guddiga Qoondeynta ee Aqalka iyo Guddiga Waxbarashada K-12 ee Aqalka; Horey uga tirsanaa Waxbarashada Hore ee Adeegyada Aadanaha, Agaasimihii hore ee Guddiga Dugsiga Issaquah.

Khibrad Xirfadeed Kale: Injineer hoggaamiye hore iyo maareeye mashruuc oo Boeing ah. Lataliye hore oo maamulayay barnaamijyo horumarinta softiweerka ee ganacsiga oonleenka oo baaxad weyn u leh ganacsiyada.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee xisaabta oo xoogga saaraya cilmiga kombuyuutarka oo ka socda Jaamacadda Northern Arizona.

Adeegga Bulshada: Xubin ka tirsan Kiwanis iyo Rugta Ganacsiga Issaquah. Hoggaamiye hore oo PTA ah, sarkaal fulinneed oo horrey loogu amaahiyay United Way ee Degmada King, xubin hore oo guddiga Xarunta Dhallinyarada ee Garage-ka ah, iyo Saameyn ku Yeello Isbahaysiga Ka Hortagga Daroogada ee Dhallinyarada.

Bayaanka: Siyaasad wanaagsan waxay ka timaadaa dhegaysi, ma aha xisbinimo. Waxaan Olympia la imaanayaa xallinta dhibaatooyinka ee injineerka. Waxaan sii wadi doonaa inaan u dagaalamo dugsiyo dadweyne oo wanaagsan, daryeelka caafimaadka maskaxda ee carruurta, guriyeynta shaqaalaha ee qoysaska u adeegga bulshooyinkeenna, iyo amniga hubka oo badbaadiya nolosha. Waxaan difaaci doonaa xorriyadda taranka, u dagaalami doonaa daryeelka carruurta oo la awoodi karo, ilaalin doonaa kaymaha iyo hawo nadiif ah, waxaanan ka shaqeyn doonaa xeer canshuureed oo aan cadaadin dadka shaqeeya. Waxaa Taageeray: Bareyaasha, Golaha Shaqaalaha Gobolka, Shaqaalaha Raashinka, Dab-damiyeyaasha, Kalkaaliyeyaasha, Naadiga Sierra, Ficilka Ilaalinta Washington, Qorsheynta Waalidnimada, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Ganacsiga Dhismaha, Isbahaysiga Guryaha, Xildhibaannadda Kongareeska Kim Schrier, Duqeyda iyo Xubnaha Golaha ee dhammaan Degmada Sharci-dejinta ee 5aad.

Patrick Peacock

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 906-9342
patrick@electpeacock.org
electpeacock.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Ma aha siyaasi xirfad leh.

Khibrad Xirfadeed Kale: 23 sanno oo ah Adeegga Ciidanka, Sarkaalka Waaranka Sirdoonka Aadanaha, Wakiilka Ka-hortagga Sirdoonka, laba safar oo dagaal oo Afgaanistaan ah, Xiddig Maar ah, Calaamadda Hawlgalka Dagaalka. Guddoomiye Ku-xigeenka KCGOP, Khabiir Sare oo Amniga Warshadaha ah - Boeing.

Waxbarashada: Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga-Xoogga Maaliyadda, Jaamacadda Webster; B.A.-Falsafadda oo diiradda saareysa Cilmi Baarista (Epistemology), Jaamacadda Washington.

Adeegga Bulshada: Qoyskaygu wuxuu si joogto ah ugu noolaa Hobart, WA tan iyo 1887. Adeegga bulshadu wuxuu had iyo jeer qayb ka ahaa dhaqankeena, waxaana mahad leh aabahay, Dick Peacock, oo muddo dheer ahaa madaxweynaha Ururka Taariikhda Maple Valley, waxaan si qoto dheer u fahmay taariikhda deegaannada ku xeeran Issaquah, Maple Valley, Ravensdale, Black Diamond, iyo Enumclaw.

Bayaanka: Washington waxay sii noqonaysaa mid aan la awoodi karin, soo bandhigidda canshuurta dakhliga ee gobolka waxay sii xumeyn doontaa xaaladda. Dadka deegaanka ayaa horrey u bixiya qaar ka mid ah canshuuraha ugu badan ee shidaalka, taasoo kor u qaadaysa kharashaadka guud ahaan. Si wax looga qabto caqabadahan, waa inaan ku dhiirigelinnaa loo-shaqeeyeyaasha inaysan ka tagin oo ay mudnaanta siiyaan arrimaha sida guryaha la awoodi karo, waxbarashada tayada leh, iyo yaraynta dambiyada. Nasiib darro, xeerka hal-dhinac ee Washington ayaa ku guuldareystay inuu si wax ku ool ah uga soo baxo arrimahaan. Inaad sii wadato codbixinta si isku mid ah oo aad filayso natiijooyin kala duwan waa wax aan faa'iido lahayn—waa wakhtigii isbeddel la sameyn lahaa. Waxaa jira xalal dhab ah, aan qabanno waxa shaqeeya.

Waxaa taageeray Degmada Sharci Dejinta 5aad iyo Jamhuuriyiinta Degmada King.



Wakiilka Jagada Lr. 1

David Hackney

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

info@hackney4the11th.com
hackney4the11th.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka Degmada Sharci-dejinta ee 11aad, Jagada 1aad (2021-Hadda)

Khibrad Xirfadeed Kale: Kaaliyihii hore ee Xeer Ilaaliyaha Mareykanka, Xeer Ilaaliyihii hore ee Dambiyada Dagaalka ee Qaramada Midoobay, Lataliyihii Sare ee hore ee Kheyraadka Aadanaha Caalamiga ah ee Ilaalinta Dabeecadda, iyo Lataliyihii hore ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada Seattle

Waxbarashada: BS, Jaamacadda Cornell; MPA, Jaamacadda Harvard; JD, Dugsiga Sharciga ee Harvard

Adeegga Bulshada: Xubin hore oo ka tirsan Guddiga Hey'adda Carruurta ee Tukwila; Xubin hore oo ka tirsan Guddiga Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka; Xubin hore oo ka tirsan Guddiga Tabor 100 (Rugta Ganacsiga ee Ameerikaanka Afrika); Guddoomiyihii hore, Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Gobolka Washington; Mutadawac hore, Mashruuca Dib-u-habaynta Caddaaladda Dambiyada ee Uzbekistan; Xubin hore oo ka tirsan Guddiga Habitat for Humanity Seattle-Degmooyinka King & Kittitas.

Bayaanka: Wakhtiyadu way adag yihiin, kumana xisaabtami karno dowlad federaal ah oo is-mari waag ku jirta. In kasta oo aan si weyn ugu faanayo waxa aan ku gaarnay heerka gobolka, haddana weli shaqo badan ayaa inoo dhimman. Qiimaha nolosha ee maalinlaha ah wuu sii kordhayaa, qoysaskeennuna waxay u baahan yihiin gargaar degdeg ah. Diiraddayda keliya waa helidda habab toos ah oo lagu dhimmo kharashyada dadka caadiga ah, laga bilaabo guryaha ilaa daryeelka caafimaadka.

Waxaa sharaf ii ah inay i taageereen Governor Bob Ferguson, Xeer Ilaaliyaha Guud Nick Brown, hoggaamiyeyasha maxalliga ah, Dimuqraadiyiinta Degmada 11aad, Golaha Shaqaalaha Gobolka, iyo kuwo kale oo badan. Waxaan rajaynayaa inaan kasbado codkaaga.

Ashley Fedan

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(717) 487-4316
Info@electashleyfedan.com
Electashleyfedan.com



Khibradda Jago Loo Doortay: **Khibradda Jago Loo Doortay:** PCO Degmada Sharci-dejinta ee 11aad, Wakiilka Guddiga Qaranka ee Dimuqraadiga 2024, PCO hore ee Degmada Sharci-dejinta ee 28aad, Guddoomiye.

Khibrad Xirfadeed Kale: In ka badan shan iyo labaatan sanno oo khibrad ah anigoo ah kalkaaliye diiwaan gashan iyo Kalkaalisada Suuxinta oo Diiwaan Gashan. Mulkiile ganacsi yar oo bixiya daryeelka suuxinta, oo ay ku jiraan daryeelka xaqiiqinta jinsiga, ilmo iska soo ridid, iyo daryeelka taranka. Halyeeyga Ciidamada Badda, u adeegay isagoo ah Lieutenant Commander ee Nursing Corps.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Kalkaalinta, Jaamacadda Case Western Reserve; Shahaadada Mastarka, York College of Pennsylvania; Shahaadada ugu Sareysa Jaamacadda ee Hoggaaminta Isku-dhafaan, Jaamacadda Creighton.

Adeegga Bulshada: Xubin ka tirsan Pro-Choice Washington PAC, xubin guddiga APRNs ee Gobolka Washington, Madaxweynihii hore ee Ururka Suuxinta Kalkaaliyaha ee Washington, Medic, Southend Indivisible.

Bayaanka: In ka badan labaatan sanno, waxaan u adeegay anigoo ah kalkaaliye caawinaya deriska maxalliga ah iyo Ciidamada Badda ee Dalka Mareykanka. Waxaan la shaqeeyay kooxo cadaadis ku jira anigoo daryeelaya bukaannadayda iyo qoysaska. Waxaan u baahanahay khibraddaas oo u dagaalanta dadka shaqeeya ee ay cadaadiyeen kharashyada guriyeynta iyo daryeelka carruurta, biilasha daryeelka caafimaadka, iyo deynta waxbarashada.

Hadda ma jiraan kalkaaliyeyaal ka shaqeeya sharci-dejinta. Waxaan u dagaalami doonaa daryeel caafimaad oo la heli karo, guriyeyn la awoodi karo, maalgashiyada K-12, tababarka xirfadaha, iyo shaqooyin mushahar fiican leh. Kalkaaliyeyasha waxaa loo tababaray inay xalliyaan dhibaatooyinka- waxaana loo baahan yahay inay isbeddel togan keenaan Olympia. Waxaa taageeray Kalkaaliyeyaal, Shaqaalaha Gobolka, Saraakiisha la Doortay, Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta ee 11aad, Dimuqraadiyiinta Degmada, Qorsheynta Waalidnimada, iyo kuwo kale.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Steve Bergquist

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 390-4527

steve4house@gmail.com

www.steve4house.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka

Khibrad Xirfadeed Kale: Macallin Taariikhda/Cilmiga Bulshada ee Degmada Dugsiga Renton, Mulkiilihii hore ee Ganacsiga Yaryar ee Aces Tennis, oo maamula Barnaamijyada Tenniska ee Jardiinooyinka iyo Madadaalada ee Magaalada Renton.

Waxbarashada: Dugsiga Sare ee Hazen, Renton; Shahaadada koowaad ee jaamacadda, Sayniska Siyaasadda iyo Taariikhda laba takhasus, Jaamacadda Washington; Shahaadada labaad ee waxbaridda, Jaamacadda Western Washington

Adeegga Bulshada: Xubin guddi oo hadda ka tirsan Gobolka Washington ee Ciyaaraha Gaarka ah, Xarunta Bulshada Taariikhda iyo Abtirsinta Renton iyo Hey'adda Bulshada Gobolka Renton. Waxaan sidoo kale ka shaqeynayaa bulshadeenna dhexdeeda, anigoo la shaqeynaya hey'adaha aan faa'iido doonka ahayn, degmooyinka iskuullada iyo magaalooyinkeena si aan u ansixiyo HB1587 si aan u helo deeqo waxbarasho oo jaamacadeed oo u oggolaanaysa arday kasta fursad la awoodi karo ka dib qalin-jebinta dugsiga sare.

Bayaanka: Waayo-aragnimadayda waalid shaqeynaya iyo mid ka mid ah macallimiinta firfircoon ee keliya ee ka shaqeeya sharci-dejinta waxay keenaysaa aragti muhiim ah oo ku saabsan dooddeenna miisaaniyadda gobolka. Waxaan sii wadi doonaa inaan ballaariyo barnaamijyada si qoysaska shaqeeya ay u awoodaan daryeelka carruurta, xanaanada carruurta (Ready K) iyo kulliyadda (Iyada oo la adeegsanayo barnaamijyo sida Renton/Tukwila Promise) iyo sidoo kale inaan gacan ka geysto abuurista guryo badan si dadku u awoodaan inay ku noolaadaan meel u dhow meesha ay ka shaqeeyaan. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga!

Aad baan ugu faraxsanahay in macallimiinta, kalkaaliyeyaasha caafimaadka, dab-damiskaaga, Dimuqraadiyiinta Degmada 11aad iyo xubno badan oo bulshada ka tirsan, ururo, iyo hoggaamiyeyaasha la doortay ay taageereen.



Ma Guurtay? Magacaaga ma beddeshay?

Cusbooneysii
Diiwaan Gelintaada
Codbixiyaha!

Oonleenka: Tag barta
VoteWA.gov ugu dambeyn
Oktoobar 26 si aad uga codeyso
Doorashada Guud.

Shakhsi Ahaan: Booqo Xarunta
Codbixinta ugu dambeyn 8 p.m.
fiidnimo Maalinta Doorashada.
Ka hel macluumaad dheeraad
ah oo ku saabsan Xarumaha
Codbixinta bogga 7-aad.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Brian Burnett

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(509) 699-3700

brian@burnettforstaterep.com

www.burnettforstaterepresentative.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka Degmada 12aad ee Sharci-dejinta (2024-2026); Sheriff-ka Degmada Chelan (2011-2022); Sarkaalka Guddiga Deegaanka Degmada Chelan (2011-2018)

Khibrad Xirfadeed Kale: Madaxweynihii Hore ee Ururka Sheriff-ka iyo Taliyayaasha Booliiska ee Washington; Madaxweynihii Hore ee Ururka Sheriff-ka Gobolka Washington; Xiriiriyaha Maamulka ee Ururka Sheriff-ka Gobolka Washington; Guddoomiyaha Tababarka Caddaaladda Dambiyada ee Gobolka Washington; Agaasimaha Adeegyada Fulinta Sharciga ee Amniga ugu Fiican Seattle

Waxbarashada: Akadeemiyaha Qaranka ee FBI-ga Fasalka 262; Akadeemiyaha Saajinnada; Akadeemiyaha Aasaasiga ah ee SWAT ee Gobolka Washington; Akadeemiyaha Fulinta Sharciga Aasaasiga ah ee Gobolka Washington

Adeegga Bulshada: Agaasimaha Xerada Carruurta Qoyska Boqortooyada - Xerada Xagaaga ee Carruurta La Koriyo; Xubin Guddi oo ka tirsan Hey'adda Wadaaddada NCW; Xubin Guddi oo ka tirsan UVCares (La-talin Caafimaad Dhimirka oo Oonleen ah)

Bayaanka: Brian Burnett si sharaf leh ayuu ugu adeegaa Degmada 12aad, isagoo tobanaan sano oo waayo-aragnimo ah u keenay Olympia amniga dadweynaha iyo hoggaaminta. Brian, oo hore u ahaa xirfadle sharci fulin ah isla markaana hadda ah Agaasimaha Adeegyada Fulinta Sharciga, wuxuu u shaqeeyaa si uu u ilaaliyo waxa ugu muhiimsan: xuquuqdaada, hantidaada, iyo doorkaaga waalid ahaan.

Sharci-dejinta, wuxuu diiradda saarayaa yaraynta dambiyada, taageeridda qoysaska, mudnaanta siinta lacagaha canshuur-bixiyayaasha, dib u soo celinta go'aan qaadashada bulshooyinka maxalliga ah, yaraynta culaysyada saaran ganacsiyada yaryar, iyo taageeridda caddaaladda dhibanayaasha oo dambiileyaasha ka dhigaysa kuwo lala xisaabtamo. Brian iyo xaaskiisa, April, waxay is qabeen 39 sanno waxayna yihiin waalidiin, ayeeyooyin iyo awooweyaal ku faanaya nolosha oo dhan.

Stacy Willoughby

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(509) 557-0483

stacy@stacyforhouse.com

www.stacyforhouse.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Musharax markii ugu horreeyay

Khibrad Xirfadeed Kale: Shan iyo labaatan sanno oo ay ku jirtay adeegyada maaliyadeed, oo ay ku jiraan doorar la-taliye maaliyadeed iyo maareeye laan bangi oo maxalli ah. Waxay fahamsan tahay sida qiimaha guryaha loo awoodi karo, kharashyada caymiska, iyo canshuuraha sii kordhaya ay u saameeyaan qoysaska iyo bulshooyinka.

Waxbarashada: Ka Qalin Jebisay Machadka Hoggaanka ee Waqooyiga Dhexe ee Washington. Dhigatay Jaamacadda Central Washington iyo Kulliyadda Skagit Valley.

Adeegga Bulshada: Guddoomiyaha Guddiga ee Chelan Valley Hope, oo ah hey'ad aan faa'iido doon ahayn oo qoysaska ka caawisa adeegyada daruuriga ah sida kaalmada kirada, shidaalka, xaabada, cuntada, iyo ka hortagga ka saarista guryaha, Aasaasaha Chelan Business Women Connect, iyo xubin ka tirsan Guddiga Rugta Ganacsiga ee Lake Chelan.

Bayaanka: Siyaasiyiinta Olympia waxay ku guuldareysteen qoysaska halkan jooga. Waxay ballan qaadayaan "wax la awoodi karo," haddana qiimaha gaaska iyo raashinka ayaa kor u kacaya, guryaha ayaa weli aan la gaari karin, shaqooyinka mushaharka wanaagsan leh ee dhallinyaradana way baaba'ayaan. Ka dib sannado badan oo ay ku jirtay adeegyada maaliyadeed, Stacy waxay taqaanaa tirooyinka iyo deriskeeda. Waxay u ololeyn doontaa miisaaniyad dowladeed oo mudnaanta siinaysa caddaaladda canshuuraha qoysaska miyiga iyo ganacsiyada yaryar, hubinta guryaha la awoodi karo oo u adeega bulsho kasta, iyo kor u qaadida tababarka xirfadaha ee dhallinyaradeena.

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta 12aad, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, AFT-Washington, iyo Hoggaamiyayaasha Sage Washington.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Mike Steele

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(509) 679-7085

mike@votemikesteele.com

votemikesteele.com



Khibradda Jago Loo Doortay: 2016-Hadda: Wakiil Gobol, Degmada 12aad, Hoggaamiye Ku-xigeenkii Hore ee Dadka laga tirada badan yahay Aqalka Wakiillada Gobolka; Laba Kalfadhi Golaha Deegaanka, Magaalada Chelan

Khibrad Xirfadeed Kale: Xafiiska Arrimaha Siyaasadda ee Aqalka Cad, Shaqaalaha Aqalka Gobolka Washington Hoggaanka Jamhuuriga, Agaasimaha Fulinta ee Rugta Ganacsiga ee Lake Chelan, Madaxa Fulinta ee jiilka 6aad ee Family Apple iyo Cherry Orchard.

Waxbarashada: Ardayga Kaalinta Labaad ee Fasalka, Dugsiga Sare ee Manson. Ka qalin jebiyay Jaamacadda Pacific Lutheran isagoo haysta shahaadooyin ku saabsan Maamulka Ganacsiga iyo Sayniska Siyaasadda.

Adeegga Bulshada: Madaxweynihii hore, Naadiga Rotary ee Chelan, Madaxweynihii hore ee Hey'adda Caafimaadka iyo Daryeelka ee Lake Chelan, Hey'adda Bulshada ee Wakiilka ee NCW, Guddoomiye Hore ee Rugta Ganacsiga ee Gobolka Washington. Wakiil, Ururka Ganacsiga Washington.

Bayaanka: Mike Steele hadda wuxuu ku guda jiraa wakhtigiisii shannaad ee Aqalka Wakiillada ee Gobolka Washington. Mike wuxuu ku qaatay xirfadiisa sharci dejinta iyo tan khibradeed isagoo u doodaya baahiyaha ganacsiyada yaryar. Xididdada qotoda dheer ee qoysaskiisu ku leeyihiin warshadaha beeraha iyo inay si toos ah ula shaqeeyaan boqolaal ganacsi oo ku kala jira warshado kala duwan maalin kasta, waxay siisay aragti ku saabsan sida arrimaha iyo siyaasadu si toos ah u saameeyaan dhaqaalaha degmada 12aad. Mike si gaar ah ayuu ugu qalmaa inuu ka shaqeeyo Olympia. Mike wuxuu rajeynayaa in markii lixaad uu ku guuleysto Aqalka Gobolka si uu u sii wado u adeegsiga dadka Degmada 12aad.

Maggie Adams

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 636-5910

campaign@adamsforwashington.com

www.adamsforwashington.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Ganacsiga, Maareeyaha Shaqada - IATSE Local # 887; Wakiil - Golaha Shaqaalaha ee Degmada Martin Luther King Jr.

Khibrad Xirfadeed Kale: Xubin hadda ka tirsan IATSE Local 887 (Farsamayaqaanka Dharka, Naqshadeeyaha Dharka) iyo Ururka Sinnaanta Jilayaasha (Jilaaga, Muusigistaha, Barre Farshaxanista ah). Hore: Maamulaha Ganacsiga ee Sare, Microsoft; Kaaliyaha Fulinta Amazon; Cunto-qaade; Ilaaliyaha Nolosha.

Waxbarashada: Kulliyadda Bulshada Xeebta

Adeegga Bulshada: Wakhtigii aan la qaatay Girl Scouts USA, kaas oo aan ku helay Abaalmarinta Qalinka, wuxuu kobciyay u heellanaanta noloshayda oo dhan ee adeegga bulshada. Waxaan iskaa wax u qabso ugu shaqeeyaa arrimaha deegaanka iyo waxbarashada sida Habitat for Humanity iyo El Corazon, Jardiinooyinka Degmada King, Jardiinooyinka Gobolka California, Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle iyo Mujaamacada Thespian ee Gobolka Washington.

Bayaanka: Waxaan ahay waalid shaqeeya oo u heellan hubinta helitaanka daryeelka caafimaadka, waxbarashada, iyo jawi caafimaad qaba oo loogu talagalay qof kasta oo ku nool Gobolka Washington. Anigoo ah Hoggaamiye Urur oo la doortay oo mas'uul ka ah gorgortanka iyo kormeerka Heshiisyada Wadarta Guud, waxaan ka shaqeeyay sidii loo dejin lahaa mushahar caddaalad ah, ilaalinta shaqaalaha, iyo heerarka badbaadada shaqada. Haddii la ii doorto waxaan si aan daal lahayn uga shaqayn doonaa mushaharka nolosha, helitaanka daryeelka caafimaadka, caddaaladda canshuuraha iyo gargaarka sicir bararka iyo sidoo kale ilaalinta beeraha, kheyraadka dabiiciga ah iyo dhulalka beeraha. Waxaan rajeynayaa fursad aan ugu adeego Degmada 12 oo ah wakiilkaaga. Wadajir ayaan u dhisi karnaa Washington oo ka wanaagsan oo iftiin badan.



Senatarka Gobolka

Claire Wilson

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 501-5772

claireforsenate30ld@gmail.com

claireforsenate.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatarka Gobolka ee hadda; Guddiga Dugsiga Federal Way 2011 - 2019

Khibrad Xirfadeed Kale: Barre iyo maamule 35-sanno ah oo hoggaaminaya shaqada waxbarashada hore, ka-qaybgalka qoyska, iyo maamulka; Agaasimaha Mashruuca WIC; mulkiile ganacsi yar. Waxay ahayd shaqada noloshaada inaan taageero carruurta iyo qoysaska shaqeeya si aan u caawiyo kobcinta guryo guuleysta oo caafimaad qaba guud ahaan Washington.

Waxbarashada: Jaamacadda Gobolka Washington, BS, Cuntada iyo Nafaqada, Daraasadaha Carruurta iyo Qoyska; Jaamacadda Northern Colorado, MA, Waxbarashada Dadka Waaweyn, Dhaqaalaha Guriga ee Xirfadeed.

Adeegga Bulshada: Khibrad mutadawacnimo oo ballaaran, oo ay ku jiraan Maktabadda Qalabka ee South Degmada King, Guddiga Hoggaaminta Gobolka WA, Ururka Agaasimeyaasha Guddiyada Dugsiyada ee Gobolka WA, Muwaadiniinta Dugsiyada Federal Way, PTA, iyo Barnaamijka Mentor and Me.

Bayaanka: Daryeelidda carruurteena, qoysaskeena, iyo bulshooyinkeena waa waxa aan sameeyo maalin kasta-taageeradiinnana, waxaan sii wadi doonaa inaan u dagaalamo dadka iyo goobaha muhiimka ah. Anigoo ah barre muddo dheer ah, Agaasimihii hore ee Guddiga Dugsiga Federal Way, haddana ah Senatarkaaga Gobolka, waxaan mudnaanta koowaad siinayaa baahiyaha qoysaska iyo bulshooyinka, anigoo diiradda saaraya xalalka iyo natiijooyinka.

Waxaan hoggaamiyaa dadaallada Senate-ka si loo ballaariyo adeegyada iyo taageerada dhallinyarada, carruurta dugsiga loogu hayo oo waxyeellada looga fogaayo. Waxaan kafaala qaaday oo meel mariyay maalgelino taariikhi ah oo ku saabsan xanaanada carruurta ee la awoodi karo, waxbarashada hore ee tayada leh, iyo caawinta qoysaska nugul. Waxaan keenay kheyraad loogu talagalay fursadaha guryaha la awoodi karo ee u adeega waayeellada, qoysaska dakhligoodu hooseeyo, dadka shaqeeya, iyo caawinta dadka si ay uga baxaan hoy la'aanta.

Kadib fatahaado burbur badan geystay, waxaan xaqiijiyay in ka badan \$7.5 milyan oo maalgelin ah oo loogu talagalay magaalada Pacific. Anigoo u heellan badqabka, waxaan u codeeyay kordhinta mushaharka iyo tababar dheeraad ah oo loogu talagalay saraakiisha fulinta sharciga, iyo maalgelinta daaweynta daroogada iyo soo kabashada. Waxaan ka shaqeeyay dhimmista culayska canshuurta ee saaran shaqaalaha iyo ganacsiyada yaryar, anigoo isla markaana xaqiijinaya maalgelinta loo baahan yahay ee K-12.

Waxaa si sharaf leh ii taageeray Dab-damiyayaasha, Qorsheynta Waalidnimada, Macallimiinta, Kalkaaliyayaasha, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Sanduuqa Ololaha Carruurta, Golaha Shaqaalaha Gobolka, Ururka Mashiinisteyaasha. Codkaaga, waxaan ku sii wadi doonaa dagaalka- ee ku aaddan dhammaanteen!

Michael Rutland

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 419-8120

rutlandforwashington@gmail.com

Rutland4wa.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Musharax markii ugu horreeyay.

Khibrad Xirfadeed Kale: Sareeye Sare oo ka tirsan Ciidanka Cirka ee Mareykanka oo hawlgab noqday isagoo 24 sanno shaqeynayay, oo ay ku jiraan Desert Shield iyo Desert Storm; hoggaamiyihii hore ee Boeing oo leh afartan sanno oo waayo-aragnimo maamul iyo hoggaamineed ah.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Maamulka, magna cum laude, Jaamacadda Phoenix.

Adeegga Bulshada: Xubin ka tirsan ururka adeegga Knights of Columbus muddo 41 sanno ah; mutadawac ka tirsan Coats for Kids iyo Ciyaaraha Gaarka ah ee Washington oo taageeraya carruurta iyo ciyaartoyda maxalliga ah ee Federal Way.

Bayaanka: Qoysaska Washington waxay u qalmaan inay ku noolaadaan gobol ay shaqo adag wali awoodi karto inay guri ku noolaadaan, ay buuxiyaan haanta shidaalka, oo ay mustaqbal wanaagsan u dhisaan carruurtooda.

Muddo aad u dheer, Olympia waxay nolosha ka dhigtay mid qaali ah halka qoysaskuna ay aad uga daaleen. Michael Rutland wuxuu u dagaalami doonaa inuu yareeyo kharashaadka, ka soo horjeedo canshuuraha cusub ee dakhliga, laalo siyaasadaha kor u qaadaya qiimaha shidaalka iyo raashinka, wuxuuna dalban doonaa miisaaniyad mas'uuliyad leh halkii laga canshuuri lahaa dadka shaqeeya. Canshuur bixiyayaasha Washington waxay mudan yihiin gargaar, isla xisaabtan, iyo hoggaamiyeyaal fahma cadaadiska qoysaska iyo ganacsiyada yaryar ay la kulmaan maalin kasta.

Ilmo kastaa wuxuu u qalmaa waxbarasho wanaagsan, waalid kastana wuxuu mudan yahay cod. Michael wuxuu taageeri doonaa heerarka waxbarasho ee sare, iskuullada badbaadada leh, waxbarashada xirfadda iyo farsamada, iyo ka qaybgalka waalidka si ardaydu ugu diyaar garoobaan kulliyadda, shaqooyinka, iyo nolosha. Wuxuu aaminsan yahay in dugsiyadu ay diiradda saaraan sidii ay arday kasta u guuleysan lahaayeen, ee aysan diiradda saarin ajendayaal siyaasadeed oo ka imanaya Olympia.

Xaafadaha amniga ah, nolosha la awoodi karo, iyo dowladda la xisaabtami karo waa inaysan noqon arrimo xisbi. Doorashadan waa fursad lagu keenni karo dheelitirnaan, caqli-galnimo, iyo jiho cusub oo Washington ah, sidaa darteed Washington waxay mar kale u shaqeysaa dadka shaqeeya.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Jamila E. Taylor

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 486-6493

info@electjamilataylor.com

www.electjamilataylor.com



Khibradda Jago Loo Doortay: *Wakiilka Gobolka:* Guddoomiyaha Guddiga Xuquuqda Madaniga & Garsoorka; Guddoomiyaha Caucus-ka U-doodista Naafanimada Koritaanka; Guddoomiye Ku-xigeenka Caucus-ka Xubnaha Midabka Leh. Xubin ka tirsan Guddiga Gaadiidka; xubin ka tirsan Guddiga Waxbarashada Hore & Adeegyada Aadanaha.

Khibrad Xirfadeed Kale: *Qareen:* La-taliyihii hore ee U-doodista Gobolka oo dhan oo maamulaayey qareennada gargaarka sharciga ee caawinnaya badbaadeyaasha rabshadda qoyska iyo dhibaneyaasha dambiyada. *U-doodaha Dhalinyarada:* Maamulay dadaallada dhimista rabshadda dhalinyarada. *Mulkiile Ganacsi Yar:* Shaqo qareen oo gaar ah iyo la-taliye urur aan faa'iido doon ahayn.

Waxbarashada: JD, Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Oregon; BA, Jaamacadda Virginia State

Adeegga Bulshada: Xubin guddiga BlackPast.org, Guddiga Adeegyada Aadanaha ee Federal Way, Hey'adda Kulliyadda Highline, iyo Girl Scouts; iyo daryeelle xubin qoys oo la nool xanuunno daba dheer.

Bayaanka: Waxaan mudnaanta siiyay caafimaadka iyo badqabka qoysaskeena iyo bulshooyinkeena, anigoo meel mariyay sharciyo dhimma rabshadda hubka, hagaajiya tababarka Booliiska iyo kalsoonida, isla markaana wax ka qabta sababaha aasaasiga ah ee dambiyada. Anigoo u heellan wax ka qabashada awood-u-lahaanshaha, waxaan keenay kheyraad loogu talagalay guryaha iyo xanaanada carruurta, waxaan dhimmay canshuuraha ganacsiyada yaryar, waxaan ballaariyay dhibcaha canshuurta ee qoysaska shaqeeya. Anigoo u heellan dhaqaale xooggan, waxaan la shaqeeyaa ganacsiyada maxalliga ah, ururada shaqaalaha, iyo dugsiyada si loo ilaaliyo shaqooyinka, loo ballaariyo tababar-shaqooyinka, loona bixiyo waddooyin xirfadeed.

Waxaa taageeray: Dimuqraadiyiinta Degmada 30aad, Golaha Shaqaalaha Gobolka, Qorsheynta Waalidnimada, Codadka OneAmerica, Naadiga Sierra, u-doodeyaasha guryaha, macallimiinta, shaqaalaha daryeelka caafimaadka, iyo kuwo kale! Aan sii wadno inaan wada shaqeyno mustaqbalka aan mudannahay.

Tiffany Bowyer

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 669-6532

votetiffanyforwa@gmail.com

www.tiffanybowyer.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibrad Xirfadeed Kale: Mulkiile ganacsi yar oo khibrad u leh miisaaniyad-dejinta, suuqgeynta, adeegga macaamiisha, iyo ka-qaybgalka bulshada. Shaqadani waxay i siisay faham toos ah oo ku saabsan caqabadaha wajahaya qoysaska, shaqaalaha, iyo ganacsiyada maxalliga ah iyadoo xoojinaysa xirfadahayga isgaarsiinta, abaabulka, iyo xallinta dhibaatooyinka.

Waxbarashada: Waxaan leeyahay taariikh ku saabsan caafimaadka iyo fayyo-qabka oo leh tababar ku saabsan daaweynta duugista, dhir-daaweynta, iyo baridda yoga.

Adeegga Bulshada: Adeegga bulshada waxaa ku jira ka-qaybgalka co-op-ka gabadhayda, taageeridda dadaallada lacag-ururinta ee ururada aan faa'iido doonka ahayn ee faa'iido u leh Isbitaalka Carruurta Seattle, iyo mutadawacnimo la shaqeynta kaniisadaha maxalliga ah. Waxaan sidoo kale taageeraa hooyooyinka iyo qoysaska bulshadayda dhexdeeda anigoo ka caawiya xannaanada carruurta, taageerada dhalmada kadib, iyo caawinta gacanta ah marka loo baahdo.

Bayaanka: Anigoo ah hooyo iyo mulkiile ganacsi yar, ma istaagi karo iyadoo gobolkeenu sii marayo waddo burbur leh. Qoysasku waxay la halgamayaan kharashyo sii kordhaya, oo ay ku jiraan canshuuraha hantida, qiimaha shidaalka, iyo biilasha adeegga tamarta oo sii kordhaya, halka kharashaadka dowladdu ay sii kordhayaan. Kama fiicnin sidii aan ahayn afar sanno ka hor. Carruurteenu waxay mudan yihiin fursad ay ku koraan oo ku guuleystaan gobolka aan naqaanno oo jecel nahay, laakiin taas waxay u baahan tahay isbeddel dhab ah oo jihada ah. Waxaan u heellannahay inaan u dagaalamo mustaqbalkeena, taageero ganacsiyada yaryar, oo dib u soo celiyo isla-xisaabtanka hoggaanka dhegaysa oo si dhab ah u matala dadka.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Kristine Reeves

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(360) 359-1910

info@kristinereeves.com

www.kristinereeves.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilkaaga Gobolka, 2017-2019 & 2023-hadda.

Khibrad Xirfadeed Kale: Mulkiile ganacsi yar oo Federal Way ah, ku takhasusay la-talinta horumarinta ururada. Hore waxay u ahayd Agaasimaha Horumarinta Dhaqaalaha ee Qaybta Ciidanka iyo Difaaca ee Washington ee Waaxda Ganacsiga ee Gobolka Washington, iyo Agaasimaha Fulinta ee Isbahaysiga Militariga ee Washington. Waxay u adeegtay Isku Duwaha Deegaanka Halyeeyada Hore ee Gobolka oo dhan ee Senatarradda Dalka Mareykan Patty Murray iyo agaasimaha wacyigelinta gobolka.

Waxbarashada: Ka qalin jebisay, Dugsiga Sare ee Moses Lake; BA, Jaamacadda Gobolka Washington; MA, Jaamacadda Gonzaga; ABD, Jaamacadda Seattle Pacific.

Adeegga Bulshada: Xubin, Ururka Zeta Phi Beta; Mutadawac, Dugsiga Hoose ee Brigadoon; Mutadawac, Rugta Ganacsiga; Mutadawac, Masraxa Qoob-ka-ciyaarka Carruurta.

Bayaanka: Albaab furan, maskax furan, iyo u heellanaan natiijooyin. Taasi waa sida aan ugu adeegay Degmada 30aad, diyaar ayaanna u ahay inaan sii wado. Waxaan ansixiyay sharciyo ilaaliya ardayda hoy la'aanta ah, ballaariya helitaanka cunto nafaqo leh oo waayeelka ah, yareeya khatarta dabka duurjoogta, oo geliya \$100 milyan badqabka dadweynaha ee maxalliga ah. Waxaan aasaasay Guddiga labada xisbi ee Halyeeyada Hore & Qoysaska Ciidanka, waxaan ansixiyay Sharciiga Fasaxa La Wadaago ee Wounded Warrior (Dagaalyahanka Dhaawacmay), haddana waxaan guddoomiye u ahay Guddiga Beeraha iyo Kheyraadka Dabiiciga ah ee Aqalka, oo diiradda saara cunto, beeraha, iyo dadka cashada saara miiskeenna. Waxaa Taageeray: Xildhibaan Adam Smith, Duq-magaalooyin & Hoggaamiyeyaasha Magaalada, Shaqaale, Kalkaaliyeyaal, Macallimiin, Booliiska, & U-doodeyaasha Deegaanka

Paul McDaniel

(Doorbida Xisbiga Madax-Bannaan)

(253) 391-0779

vote@paul4washington.com

paul4washington.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Golaha Magaalada Federal Way

Khibrad Xirfadeed Kale: Mulkiile, 7th Power, Inc. | La-taliyaha Teknolojiyada; Halyeey Hore ee Ciidamada Mariiniska ee Dalka Mareykanka, Dagaalkii Iraq

Waxbarashada: Dugsiga Sare Federal Way, Kulliyadda Highline

Adeegga Bulshada: Mutadawac Isbitaalka St. Francis muddo 9 sanno ah, tababarke kaaliye legdinta ee Dugsiga Dhexe Totem, haddana wuxuu Jiu-Jitsu baraa carruurta iyo dadka waaweyn.

Bayaanka: Ma maanta ayaad ka fiican tahay, marka loo eego laba sanno ka hor? Kharashyada guryaha, cuntada, shidaalka, iyo tamarta oo sii kordhaya waxay dhaawacayaan qoysaska shaqeeya. Khiyaannada, musuqmaasuqa, iyo hoggaan daciif ah ayaa nolosha ka dhigay mid adag. Haddana, Olympia waxay sii dalbanaysaa wax dheeraad ah.

Anigoo ah mulkiile ganacsi, halyeey hore, iyo xubin goole hore, waxaan fahamsanahay adeegga, isla-xisaabtanka, iyo caqabadaha qoysasku wajahaan maalin kasta. Olympia, waxaan kuu dagaallami doonaa anigoo dhimmaya canshuuraha, hagaajinaya badqabka dadweynaha, ballaarinaya guryaha la awoodi karo, fududeynaya shaqooyinka mushaharka qoyska ku filan, iyo ilaalinaya ciyaaraha gabdhaha. Waa wakhtigii hoggaan lala xisaabtami karo oo diyaar u ah inuu sameeyo go'aanno adag oo adiga kaa horumariya. Ku biir saaxiibbadaada & deriskaaga - u codee Paul McDaniel.



Senatarka Gobolka


Phil Fortunato

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 680-9545

phil@VoteFortunato.org

www.VoteFortunato.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatarka Gobolka ee Degmada 31aad tan iyo 2017; Wakiilka Gobolka ee Degmada 31aad oo la doortay 2016; Wakiilka Gobolka ee Degmada 47aad 1998-2000

Khibrad Xirfadeed Kale: Tababar iyo la-talin deegaanka ah. Ganacsi caalami ah oo ka jira Yurub iyo Aasiya. Mulkiile ganacsi yar oo qandaraasyo. Agaasimaha Aasaasaha iyo Madaxweynihii ugu horreeyay ee PNW Erosion Control Association.

Waxbarashada: Jaamacadda Rutgers, Kuliyadda Beeraha Cook; Naqshadaynta Muuqaalka Dhulka

Adeegga Bulshada: Waxaan guursannahay 49 sanno, waxaan leeyahay 5 carruur ah, 3 ka mid ahna waa halyeeyo hore Ciidamada Mariiniska ee Dalka Mareykanka oo la maamuusay. Xubin Knights of Columbus - Darajada 4aad, Mashruuca Rachel, Ururka Walaalaha Gorgoryaasha, Wiilasha & Gabdhaha Talyaaniga, Ururka Liberia ee WA.

Bayaanka: Waxay ahayd sharaf inaan u adeego codkiina Senatka Gobolka oo aan u istaago qiimaha, xorriyadaha, iyo caqliga caadiga ah ee bulshooyinkeena ka dhiga kuwo xooggan. Habkayga go'aan qaadashada waa fudud yahay: Ilaah marka hore, degmada marka labaad, iyo doorbidka shakhsiyadeed ugu dambeyn. Mabda'aas ayaa hagaya cod kasta oo aan ka dhiibto Olympia. Waa sababta aan si joogto ah uga raadiyo jawaab-celintiinna sahanada degmada iyo kulamada dadweynaha. Codkiina waa inuu qaabeeyaa go'aannada saameeya bulshooyinkeena.

Caqabadaha maaliyadeed ee wajahaya gobolkeena ma aha kuwo shil ah. Waxay ka yimaadeen kharash-bixin xad-dhaaf ah iyo koritaanka aan la xakamayn ee barnaamijyada dowladda. Shakhsiyaadka, qoysaska, waayeelka, shaqaalaha, iyo ganacsiyada yaryar dhammaantood waxaa lagu burburinayaa canshuuraha sii kordhaya iyo kharashyada sare, qaar badan oo naga mid ahna, waxaan gaarnay heerkiisii jabitaanka.

Waxaan sii wadi doonaa inaan si adag uga soo horjeesto dadaallada lagu wiiqayo xuquuqdeena Wax-ka-beddelka Labaad, waxaan u dagaalami doonaa isticmaal mas'uul ah oo nidaamsan oo lagu maareeyo doollarrada canshuurtiinna. Waxaan codsanayaa taageeradiina joogtada ah anigoo ka shaqeynaya ilaalinta xuquuqdiina, difaaca barwaaqadiinna, iyo u dagaalanka dowlad goboleed lala xisaabtami karo oo dheeraad ah.

Waxaa si sharaf leh ii taageeray hoggaamiyayaasha fulinta sharciga, saraakiisha maxalliga ah ee la doortay, hoggaamiyayaasha bulshada, iyo deriska guud ahaan degmada oo igu kalsoon inaan matalo qiimahooda barta caasimadda Gobolka.

Tamara Stramel

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(253) 987-6382

togetherwithtamara@gmail.com

togetherwithtamara.com



Khibradda Jago Loo Doortay: PCO Dimuqraadi ah ilaa 2017.

Khibrad Xirfadeed Kale: Abaabulaha Goobta ee Dammaanadda Dugsiga Sumner-Bonney Lake 2024 (kii ugu weynaa taariikhda Gobolka WA), waxaana horrey loo shaqaaleysiiyay maamule barnaamij gudaha xarumaha daaweynta degaanaanshaha.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Cilmi-Nafsiga oo leh Taqasus Yar ee Daraasaadka Diinta oo ka socda Jaamacadda Gobolka California, Bakersfield

Adeegga Bulshada: Hadda waxay ka shaqeysaa Guddiga La-talinta Dammaanadda Dugsiga Sumner-Bonney Lake; xubin Guddiga Fulinta PTA ah iyo Guddoomiyaha Guddiga Bandhigga Buugaagta; iyo sannadkaygii sideedaad ee hoggaaminta joogtada ah ee guddiga Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta ee 31aad. Mutadawacnimada hore waxaa ka mid ah Xoghayaha Kooxda Diyaargarowga Qoyska ee USS Shoup (DDG-86).

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa Senatka Gobolka ee degmada 31aad sababtoo ah waxaan aaminsanahay in bulshooyinkeenu mudan yihiin senatar yimaada, dhegaysta, una shaqeeya qof kasta oo degmadaan hoy ugu yeera. Qoysaska waxaa qiimo ahaan looga saaraya meelaha ay degan yihiin, kaabayaasha waxay cadaadis ku yihiin koritaan degdeg ah, dugsiyadeenana waxaa laga codsanayaa inay wax badan ku qabtaan wax yar. Isla wakhtigaas, dad badan ayaa dareemaaya inaan la maqlin, ama waxay ka baqayaan inay hadlaan.

Waxaan ahay hooyo, abaabule, iyo xaaska halyeey hore. Waxaan la soo shaqeeyay carruur ku jira dhibaato anigoo ah la-taliye dhalinyaro, waxaan taageeray qoysaska ciidamada intii lagu jiray hawlgalka, waxaana siddeed sanno xidido ku sii adkeystay meel u dhow Lake Tapps, anigoo labadayda wiil la korinaaya ninkayga. Caqabadahayaga hadda jira ma aha doodo siyaasadeed oo aan noloshayda taaban; waa noloshayda.

Waxaan aaminsanahay inaan si ka wanaagsan u maamuli karno. Waxaan ku hoggaamin doonaa daacadnimo, naxariis, iyo go'aan si loo xalliyo dhibaatooyinka iyadoo la matalaayo degmada 31aad oo dhan. Waxaan u doodi doonaa in bulshooyinkeenu ay mudnaan ka helaan Olympia, gaar ahaan miisaaniyadda gaadiidka. Waxaan mudannahay hoggaan daryeella qoysaska, u dooda waxbarashada, si dhab ahna u qaata horumarinta kaabayaasha miyiga. Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan helo codkiina.

Waxaa taageeray: Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, AFL-CIO; Dimuqraadiyiinta Degmada Pierce; iyo hoggaamiyayaasha maxalliga ah ee la aaminni karo. Fadlan ka eeg boggayga internetka wax badan!



Wakiilka Jagada Lr. 1

Drew Stokesbary

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 550-5501

drew@drewstokesbary.com

drewstokesbary.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka (hadda Hoggaamiyaha Tirada Yar ee Aqalka, horrey Guddoomiyaha Guddiga Gaarka ah ee Siyaasadda Hawlgabka, Xubinta Ugu Sareysa ee Guddiga Qoondaynta Aqalka, iyo Hoggaamiyaha Dabaqa ee Tirada Yar ee Aqalka)

Khibrad Xirfadeed Kale: Lammaane ka tirsan Chalmers, Adams, Backer & Wallen (la-talinta shirkadaha bilowga ah, ganacsiyada yaryar iyo maalgashadayaasha ee arrimaha sharciga shirkadaha iyo hantida maaliyadeed ee la ganacsado)

Waxbarashada: J.D. (cum laude), Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Notre Dame; B.S. ee Dhaqaalaha, Jaamacadda Duke

Adeegga Bulshada: Aasaase-wadaagaha Sanduuqa Difaaca Ficulka Muwaadiniinta (bixinta la-talin sharci oo bilaash ah kaniisadaha maxalliga ah, ururada aan faa'iido doonka ahayn iyo kuwa kale ee taageeraya xuquuqaha dastuuriga ah); mutadawac diyaariye canshuur

Bayaanka: Anigoo ah qof noloshiisa oo dhan Washington ku noolaa, waxaan ogahay awoodda cajiibka ah ee gobolkeenu leeyahay. Nasiib darro, Washington waxay u socotaa jihada qaldan. Waxaan ku jirnaa meelaha ugu qiimaha badan gaaska, raashiinka iyo guryaha ugu sareeya iyo heerarka dambiyada ugu xun dalka. Dhibcaha imtixaanka ardayda, heerarka xaadiritaanka iyo heerarka isqorista kulliyadda ayaa hoos u dhacaya. Dhanka kale canshuuruhu way sii kordhayaan, bilyanno sannad kasta.

Waa wakhtigii isbeddelka. Waxaan u tartamayaa dib-u-doorasho si aan u beddelo isbeddeladaan. Waxaan u dagaalami doonaa xaafado badqab leh halkaas oo sharciyada la dhaqan geliyo dambiileyaashana la qabto, dugsiyaal wanaagsan oo dhammaan ardayda u diyaariya kulliyad ama xirfad, iyo dhaqaale xooggan oo la awoodi karo. *Si wadajir ah, aan hagaajino Washington.*

Stephen Szczurko-Walton

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(844) 558-6623

stephen4district31.com

Stephen@stephen4district31.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Midna. Musharax markii ugu horreysay tartamaya.

Khibrad Xirfadeed Kale: Waan ogahay sida ay tahay in laga shaqeeyo lacag qaadidda ee Office Depot ama in lacag faa'iido wadaag laga helo goobta iibka ee Nordstrom. Anigoo ah waardiye amniga kambaska, waxaan dadka guriga u raacay habeenkii marka aysan ammaan ku dareemin kambaska. Hawl-wadeenka falcelyaha nukliyeerka ee Ciidanka Badda ee Mareykanka, 2015–2024. Saddex hawlgal oo saarnaa USS Theodore Roosevelt: hawlgallo lagu taageerayay xulafada Kurdiyiinta ee ka dhanka ah ISIS ee Bariga Dhexe iyo xorriyadda maritaanka Badda Koonfurta Shiinaha. Hadda waxaan ahay farsamo yaqaan ganacsi qabooyiye kulayliyaha iyo hawo qaad oo u adeega dugsiyada, isbitaalada, iyo ganacsiyada yaryar.

Waxbarashada: B.A., Cilmiiga Siyaasadda, UC Santa Barbara (2014). Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha (2025).

Adeegga Bulshada: Midna wakhtigan.

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa sababtoo ah adeeggaygu ma dhammaan markii aan dharkii ciidanka iska siibay. Wiilkaygu wuxuu mudan yahay bulsho derisyo is yaqaaniin, ma aha mid ay kala jeexeen warbaahinta xanaaqa kicisa. Adiguna waxaad mudan tahay in dadka aad doorato ay kula dhaqmaan sharaf iyo ixtiraam.

Waxaan u dagaallami doonaa ansixinta SB 6358 iyo joojinta kharashaadka doorashada ee shirkadaha ee Washington, xitaa haddii ay la macno tahay inaan tago degmada senatar kasta. Waxaan ka shaqeyn doonaa hoos u dhigista kharashaadka guryaha, daryeelka caafimaadka, iyo canshuuraha ee burburinaya qoysaska shaqeeya. Waxaana difaaci doonaa Sharciga Ballanqaadka Cimilada oo casriyayn doonaa shabakadeenna qarniga uu wiilkaygu dhaxli doono.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Joshua Penner

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 224-4226

Josh@VotePenner.com

VotePenner.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka (Kaaliyaha Xubinta Sare ee Guddiga, Qoondoynta; Maaliyadda; Waxbarashada Hore & Adeegyada Aadanaha); Duqii hore (8 sanno), Xubin Golaha (6 sanno), iyo Guddiyihii Qorsheynta (2 sanno), Magaalada Orting; Guddoomiyihii hore, Golaha Goboleedka Degmada Pierce; Guddiyihii hore ee Dib-u-eegista Axdiga, Degmada 1aad.

Khibrad Xirfadeed Kale: Istaraatiijiyadda Fulinta, Penner & Co; Halyeey Hore, Ciidamada Mariiniska ee Dalka Mareykanka; Halyeeygii Hore ee Dagaalka Iraq & Hawl-wadeenka Raadiyaha.

Waxbarashada: Jaamacadda Harvard, Master's (ALM); Jaamacadda St. Martin's, BA; Kuliyadda Bulshada Green River, AA; Dugsiga Sare ee Sumner.

Adeegga Bulshada: Aasaase-Wadaagga PNW Vets, shabakadda ugu weyn ee taageerada Halyeeyada Hore ee Pacific Northwest; Tababaraha Faragelinta Xasaradaha ee WA-CJTC.

Bayaanka: Waxaan ku koray Bonney Lake, waxaan ka qalin jebiyay Dugsiga Sare ee Sumner, waxaan u adeegay sidii Mariinis gudaha Iraq, waxaana Orting u hoggaamiyay anigoo Duq Magaalo ah. Anigoo ah Wakiilkaaga, waxaan Olympia u keenayaa qiimaha ay bulshadeennu wadaagto iyo ruuxaas dagaalka.

Wadajir, waxaan badbaadinay Dugsiga Rainier ee Buckley, waxaan ka hortagnay dhimmista musiibada ah ee waxbarashada hore, waxaan ilaalinay xarumaha daryeelka ee dhallaanka cusub ee fentanyl-ku saameeyay, waxaana jarnay nidaamka xad-dhaafka ah si loo maalgeliyo dayactirka buundooyinka White River iyo Fairfax. Taageeradaada, waxaan sii wadi doonaa inaan u dagaallamo dhimmista kharashyada nolosha, dalbashada isla-xisaabtan, ilaalinta kuwa ugu nugul, iyo sugidda xaafadaheenna. Aan ku hoggaaminno ficil, ee ma aha qodobo hadal.


John Bielka

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(360) 888-6589

Johnbielka@icloud.com

Bielka31.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Adeege dadweyne markii ugu horreysay.

Khibrad Xirfadeed Kale: John waa injineer Madani ah iyo agaasime hawlaha dadweynaha oo leh in ka badan 30 sanno oo uu maamulayay kaabayaal, miisaaniyado, iyo hawlgallo. John wuxuu lahaa ganacsi qodista dhulka wuxuuna si sharaf leh lo' ugu dhaqdaa beertiisa bannaanka Orting.

Waxbarashada: John wuxuu haystaa Shahaadada Jaamacadda ee Injineernimada Madaniga ah oo ka socda Jaamacadda Saskatchewan; daraasaadka shahaadada mastarka oo ku saabsan dhaqaalaha injineernimada iyo xisaabaadka.

Adeegga Bulshada: John wuxuu aad u jecel yahay bulshadaan. Wuxuu mutadawac ahaan uga shaqeeyaa la taliyaha Waxbarashada Xirfadda iyo Farsamada ee Dugsiyada Chief Leschi wuxuuna taageeray Xarunta Waayeelka ee Orting iyo Bangiga Cuntada ee Orting isagoo ah qoraa codsiyada deeqaha.

Bayaanka: Weligay ma qorsheyn inaan u tartamo xafiis. Anigoo ah injineer madani ah, agaasime hawlaha dadweynaha, iyo beeraley lo', waxaan xirfaddayda ku qaatay xallinta dhibaatooyinka, maareynta miisaaniyadaha, iyo gaarsiinta natiijooyin hal-abuur u leh bulshooyinkeena. Degmada 31 waxay u baahan tahay hoggaan wax ku ool ah oo diiradda saaraya awood u lahaanshaha, guryo, kaabayaal, iyo dugsiyaal xooggan. Waxaan la shaqeyn doonaa dhinaca kale si loo yareeyo kharashaadka maalinlaha ah, loo hagaajiyo waddooyinka iyo adeegga tamarta, loo taageero badqabka dadweynaha, loona ballaariyo waxbarashada xirfadda iyo farsamada oo ay ku jiraan waddooyinka xirfadaha farsamada. Dowladda waa inay noqotaa mid daacad ah, lala xisaabtami karo, oo awood u leh inay wax qabato. Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga.



Senatarka Gobolka

Cindy Ryu

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 605-1588

electcindyryu@gmail.com

www.cindyryu.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka 2011-hadda. Waxay guddoomisaa Guddiga Teknolojiyada, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Halyeeyada. Duqii Magaalada Shoreline iyo Xubin Golaha Magaalada 2006-2009.

Khibrad Xirfadeed Kale: Wakiilka Xaafadda ee Allstate Insurance; maareeyaha hantida ganacsiga. Maareynta Diiwaannada iyo Falanqeyaha Hannaannada, Magaalada Seattle. Sarkaalka Qaabilaadda Medicaid, University Hospital. Sarkaalka Qaabilaadda, Harborview Medical Center.

Waxbarashada: Jaamacadda Washington-Seattle: MBA ee Maareynta Hawlaha; Shahaadada Jaamacadda ee Microbiology.

Adeegga Bulshada: Guddiyada - Xirfadda iyo Waxbarashada Farsamada ee Dugsiyada Shoreline; La-talinta Canshuurta Dammaanadda Jardiinooyinka Shoreline; Xarunta La-talinta iyo Horumarinta Ganacsiga ee UW; Horumarinta Dhaqaalaha Lynnwood; Gobolka Dhaqaalaha Pacific Northwest; Ururka Bulshada Richmond Beach; Rugta Shoreline; Dollars for Scholars; Haweenka ku jira Dowladda; La-talinta Is-dhexgalka Dowladda ee FCC. Macallinka Dugsiga Axadda ee PC-USA, barnaamijka Quudinta Xagaaga.

Bayaanka: Runtii waxay ii ahayd sharaf inaan u adeego sidii Wakiilkaaga Gobolka. Hadda, waxaan diyaar u ahay inaan khibraddayda, natiijooyinkayga la xaqiijiyay, iyo qiimahaaga horusoodka ah u keeno Senatka Gobolka. Waxaan sii wadi doonaa inaan u dagaallamo hannaan canshuureed oo caddaalad badan oo dadka ugu hantida badan ka codsada inay bixiyaan qaybtooda iyadoo gargaar la siinayo qoysaska shaqeeya, kuwa ku nool dakhli go'an, iyo caawinta ganacsiyada yaryar inay guuleystaan.

Farqiga u dhexeeya musharaxiinta tartankan ma noqon karo mid ka sii cad. Diiwaankayga waa mid ficiil iyo u istaagid qiimaha Dimuqraadiga ah. Waxaan hormuud ka noqday sharciyo shaqaalaha ka ilaaliya heshiisyada aan caddaaladda ahayn ee tartan-la'aanta, kordhiyay guryo la awoodi karo—gaar ahaan bulshooyinka aan si ku filan loo matalin —waxaana ka shaqeeyay inaan keeno helitaanka internetka xawliga ku socda gees kasta oo gobolkeenna ah. Waxaan sii wadi doonaa inaan imaado, aan ku dhegaysto, oo aan si aan daal lahayn uga shaqeeyo caqabadahayaga ugu waaweyn sida awoodda la iibsano karo, abuurista shaqooyinka, iyo ilaalinta bulshooyinkeenna. Taasi waa farqiga tartankan.

Senatka dhexdiisa, mudnaantaydu weli waa: Ilaalinta deegaanka, maalgelinta dugsiyadeenna dadweynaha, iyo xaqiijinta ilaalin xooggan oo macaamiisha ah oo ka dhan ah dhaqamada ugaarsiga ah. Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan mar kale kasbado codkaaga.

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada 32aad iyo Degmada Snohomish, SPEEA, Shaqaale (WSLC), Shaqaalaha Gobolka (WSFE), Ururka Waxbarashada Washington (WEA), Isbahaysiga Guryaha ee WA, Kalkaaliyayaasha (WSNA), iyo Wakiilkii hore Ruth Kagi, iyo kuwo kale oo badan.

Jesse Salomon

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

info@votesalomon.com

votesalomon.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Xildhibaan Gobolka ah tan iyo 2019. Guddoomiyay Guddiga Wadajirka ah ee Dib-u-eegista Hantidhawirka Sharci-dejinta: xiritaanka daldaloollada canshuurta, qiimeynta barnaamijyada si loo ilaaliyo lacagahaaga canshuurta. Guddoomiyaha Guddiga Dowladda Hoose: yareynta xeerarka dib u dhiga, dhisidda guriyeynta iyo xarumaha daryeelka carruurta. Guddoomiyay Guddiga Beeraha iyo Kheyraadka Dabiiciga ah: ilaalinta deegaankeenna. Xubin ka tirsan Guddiga Sharciga iyo Caddaaladda: ilaalinta dhibaneayaasha rabshadaha qoyska. Ku-xigeenkii hore ee Duqa Magaalada Shoreline iyo Xubin Golaha Magaalada.

Khibrad Xirfadeed Kale: Xeer-ilaaliyihii hore ee daryeelka carruurta oo ilaalinayay carruurta la xadgudbay; qareenka difaaca dadweynaha oo matalayay xubnaha bulshada dakhligoodu hooseeyo.

Waxbarashada: Jaamacadda Western Washington; Dugsiga Sharciga ee UW.

Adeegga Bulshada: Kooxda Hawsha Dembiyada Nacaybka; Guddiga La-talinta Kheyraadka Badda; Kooxda Hawsha Abaarta; Golaha Maamulka Wabiga; xubin hore oo ka tirsan Ururka Xaafadda Shoreline; wada-aasaasay urur aan faa'iido doon ahayn oo loogu talagalay dhallinyarada hoy la'aanta ah.

Bayaanka: Washington waxay u qalantaa hoggaamiyeyaal Dimuqraadi ah oo fuliya ballanqaadyada. Diiwaankaygu wuxuu muujinayaa inaan fuliyo. Sida Senatarkaaga ahaan, waxaan mamnuucay waji-daboolka ICE, waxaan xaddiday kordhinta kirada, waxaan hoggaamiyay dagaalka lagu joojinayo qorsheyaasha kordhinta kirada ee ku shaqeeya sirdoonka macmalka ah, waxaan joojiyay canshuuraha iibka ee daawooyinka aan dhakhtar qorin iyo alaabta nadaafadda, waxaan ballaariyay canshuur celinta dadka dakhligoodu hooseeyo ee loogu talagalay 460,000 qoys oo dheeraad ah, waxaanan canshuuraha ka jaray ganacsiyada yaryar. Waxaan naqshadeeyay oo hoggaamiyay sharci xiray daldaloollada canshuurta shirkadaha, taas oo xaqiijisay boqolaal milyan oo maalgelin cusub ah oo loogu talagalay daryeelka caafimaadka, dugsiyada K-12, iyo daryeelka carruurta.

Ka dib markii aan garaacay kumanaan albaab, si cad ayaan idiin maqlay: qiimeyaashu xakameyn way ka baxeen, dowladduna waxay u baahan tahay inay si ka mas'uuliyad badan u maamusho lacagiihanna canshuurta. Waxaan hantidhawri doonaa kharashaadka, ballaarin doonaa dhimmista canshuurta hantida ee waayeelka, ka hortagi doonaa ICE, waxaanan joojin doonaa fowdada Trump ee gobolkeenna. Waa inaan la tacaalnaa dhibaataada ka jirta Aurora anagoo adeegsanayna naxariis iyo isla-xisaabtan, anagoo dadka ku xirayna adeegyada caafimaadka maskaxda iyo daaweynta ku tiirsanaanta maandooriyaha, halkii aan indhaha ka qabsan lahayn.

Waxaan rajaynayaa inaan kasbaday codkiinna dib-u-doorashada.

Waxaa taageeray Dimuqraadiyiinta: Wakiilkayaga Degmada 32aad Lauren Davis, Xildhibaanka Kongareeska Adam Smith, Dimuqraadiyiinta Senatka Washington, Duqyada Magaalooyinka Lynnwood iyo Shoreline; Xubnaha Golaha ee Lynnwood, Shoreline, Seattle, Edmonds; Xubnaha Golaha Degmada King iyo Degmada Snohomish; ururo shaqaale badan, shaqaalaha daryeelka carruurta, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Sheriff-ka Degmada Snohomish.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Keith Scully

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 446-5491
keith@keithscully.org
keithscully.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Shoreline Xubin Golaha Magaalada (2016–hadda); Ku-xigeenka Duqa (2020-22); Duqa Magaalada (2022–24).

Khibrad Xirfadeed Kale: Xirfad yahan daryeelka caafimaadka degdegga (1994-98); Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Degmada King (1999-2005); Xeer-ilaaliyaha Dambiyada Dagaalka ee Qaramada Midoobay (2005-06); Agaasimaha Sharciga, Urur Aan Faa'iido Doon Ahayn ee Deegaanka ee Futurewise (2006-08); Qareenka Hantida Aqooneed (2008-hadda).

Waxbarashada: J.D., Dugsiga Sharciga ee NYU; M.A., Taariikhda Bariga Dhexe, Jaamacadda Tufts; B.A., Taariikhda, UCLA

Adeegga Bulshada: Guddiga Hey'adda Jawaabta Dhibaatooyinka Gobolka; Guddoomiyaha Guddiga Taageerada Nolosha Sare ee Canshuurta EMS ee Gobolka; Guddiga Codbixiyeyaasha Ilaalinta Degmada King; Xubin iyo Guddoomiye Guddiga Qorsheynta Shoreline; Guddiga Golaha Soo-kabashada Salmonka; Guddiga Continuum of Care; Habitat for Humanity; Madaxweynaha PTA-ga; waalid iyo mutadawac bulsho oo ku lug leh.

Bayaanka: Waxaan noqday xirfad yahan daryeelka caafimaadka degdegga sababtoo ah waxaan aaminsanaa in nolol kasta mudan tahay in la badbaadiyo. Isla qancintaas ayaa ii horseeday inaan dacweeyo dambiileyaasha dagaalka, difaaco deegaankeenna, una tartamo xil. Shoreline gudaheeda, waxaan ballaariyay guryo la awoodi karo iyo gaadiidka dadweynaha, waxaan khubaro caafimaadka maskaxda geeyay goobta, waxaan dhisay marinada dadka lugaynaya iyo jardiinooyinka — dhammaantood anigoo miisaaniyadda isku dheellitiraya.

Hadda waxaan diiwaankaas geyn doonaa Olympia. Waxaan ka dhigi doonaa guryaha, adeegga tamarta, iyo daryeelka carruurta kuwo la awoodi karo. Maalgelinta waxbarashada iyo waxbarashada hore. Dalbashada ficiil dhab ah oo cimilada ah. Dib-u-habeynta xeerka canshuurta si uu u noqdo caddaalad, horusocod, oo waara. *Waxaa taageeray Dimuqraadiyiinta Snohomish, Dab-damiyeyaasha Shoreline iyo Degmada South, Wakiil Ryu iyo 40+ saraakiil la doortay.*

Danica Noble

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 569-4538
danica@electdanica.com
www.electdanica.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibrad Xirfadeed Kale: Qareen, Guddiga Ganacsiga Federaalka, Xafiiska Tartanka, Qaybta Dhaqangelinta Teknolojiyada; La-taliye Farsamo, Ukraine USAID, Suuqyada Tartanka leh; Karaaniga Sharciga, Guddiyada Garsoorka ee Senatka & Aqalka Mareykanka; Karaaniga, U.S. Virgin Islands; Xarunta Daryeelka Carruurta, Jaamacadda Georgetown; Pangea Coffee, Walla Walla; Hooyo leh 3 carruur ah oo dhigta dugsiyada dadweynaha

Waxbarashada: Dugsiga Dadweynaha K-12; Kulliyadda Whitman; Sharciga Georgetown; Saaxiib Bulsho, Xarunta UW ee Dadweynaha Xog-ogaalka ah; Iskaashiga Adeegga Dadweynaha Mareykanka, Deeqaha Saaxiibtinimada: Hoggaaminta Federaalka ee Sirdoonka Macmalka ah, Heer-sare ee Dowladda

Adeegga Bulshada: Guddoomiye, Qaybta Ka-hortagga Isku-kal-soonaanta Ganacsiga, Ilaalinta Macaamiisha, iyo Dhaqamada Ganacsi ee Caddaalad-darrada ah ee Ururka Qareennada Gobolka Washington; Agaasime, NORML Haweenka Washington 2011-2021; Guddiga U-ololeynta PTA-ga Gobolka Washington; Guddoomiyaha U-ololeynta PTA-ga, Broadview Thomson K-8, Robert Eaglestaff, Dugsiga Hoose ee McDonald

Bayaanka: Waxaan 20 sanno la dagaallamayay keli-talisada ganacsiga, khiyaameeyayaasha, shirkadaha waaweyn ee raashinka, iyo shirkadaha waaweyn ee teknolojiyada. Waxaan la tacaalay shirkadaha sirdoonka macmalka ah ee aan la xisaabtamin ee waxyeelleeya carruurteenna, nolosheenna, iyo fayobideenna. Sida hooyo PTA oo firfircoon ahaan, waxaan mideeyay waalidiinta, ardayda, iyo bareyaasha si loo horumariyo caddaaladda waxbarashada, sugnaanta cuntada, iyo ammaanka dugsiga. Diiwaankaygu wuxuu muujinayaa u-ololeyn aan daal lahayn, ficiil, iyo saameyn bulshadeenna dhexdeeda. Anigoo leh khibrad dhimmista kharashaadka, u dagaallanka dugsiyada, iyo dejinta xeerar ilaalin ah oo ku saabsan teknolojiyada bartilmaameedsata carruurta iyo shaqaalaha, marnaba kama laabto danaha awoodda leh. Waan sii wadi doonaa inaan u dagaallamo anaga.

Taageerooyinka: Golaha Shaqaalaha Gobolka, Dimuqraadiyiinta Snohomish, Wakiillada Kagi, Taylor, Fosse, Kloba, Donaghy, Shavers, Parshley, iyo kuwo kale.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Lauren Davis

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 745-2010

lauren@electlaurendavis.com

www.electlaurendavis.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilkaaga Gobolka ilaa 2019—mas'uuliyaddayda ugu weyn iyo sharaftayda ugu qoto dheer

Khibrad Xirfadeed Kale: *Caafimaadka Habdhaqanka:* Aasaasaha Isbahaysiga Soo Kabashada ee Washington, macallin ka tirsan Dugsiga Shaqada Bulshada ee UW, agaasimaha barnaamijka caafimaadka maskaxda ee dhallinyarada. *Horumarinta Caalamiga ah:* Falanqeeeye Hey'adda Gates, Aqoonyahan Fulbright (Galbeedka Afrika). **Waxbarashada:** waxay dhigtay dugsiga barbaarinta, ESL dadka waaweyn

Waxbarashada: Jaamacadda Brown (BA, Daraasaadka Qowmiyadaha)

Adeegga Bulshada: *Guddiyada La-talinta:* Ururka Magaalada Walaasha Shoreline, Xarunta Caafimaadka ee Latino (Guddiga Rabshadaha Guriga), Xarunta Cilmi-baarista Daryeelka Is-dilka ee UW, Xarunta Caddaaladda Bulshada Lynnwood. *Abaalmarinnada:* Taageerada Bulshada ee Heer Sare ee Xarunta Adeegyada Aadanaha, Hormuudka Caafimaadka Habdhaqanka ee NAMI, finalis Adeegga Bulshada ee Rugta Ganacsiga Lynnwood, Hormuudka Caafimaadka Dadweynaha, PSBJ 40 Under 40, Hormuudka Magaalada, Geesinnimada Crosscut ee Adeegga Dadweynaha

Bayaanka: Si loola dagaallamo balwadda, waxaan meel mariyay Ricky's Law, waxaan abuuray Barnaamijka Recovery Navigator, waxaan bilaabay barnaamijyo daaweyn oo gudaha xabsiyada iyo ER-yada ah, waxaana hormuud ka noqday Lynnwood Crisis Care Center. Si loola dagaallamo rabshadaha guriga, waxaan maalgeliyay tababar garsooreyaal, gargaar sharci oo loogu talagalay dadka ka badbaaday, iyo u-doodayaal dhibbaneyaal oo Booliiska la falgala. Waxaan hormuud ka noqday daryeel caafimaad oo loogu talagalay muhaajiriinta iyo ilaalin ka dhan ah ICE. Waxaan si buuxda u taageersanahay doorashada taranka. Waxaa iga go'an inaan wax ka qabto awoodda la iibsano karo, maalgelinta waxbarashada, hoy la'aanta, iyo rabshadaha qoryaha.

Taageerooyinka: *Guddoomiyeyaasha:* Ferguson, Gregoire; *Kongareeska:* Wakiillada DelBene, Larsen, Smith; Xubnaha Golaha: Seattle, Shoreline, Lynnwood, Mountlake Terrace, Edmonds; *Ururada Shaqaalaha:* Dab-damiyeyaasha, Kalkaaliyeyaasha, Macallimiinta, Saraakiisha Booliiska, Shaqaalaha Raashinka, Golaha Shaqaalaha Gobolka; Dimuqraadiyiinta Degmada 32aad


Imraan Siddiqi

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(253) 533-2095

info@peopleforimraan.com

peopleforimraan.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Midna

Khibrad Xirfadeed Kale: Agaasimaha Fulinta, CAIR-Washington; U doode Xuquuqda Madaniga; Hoggaamiye Urur Aan Faa'iido Doon Ahayn; mulkiile ganacsi yar oo maxalli ah iyo ganacsade hore.

Waxbarashada: Jaamacadda Texas Arlington, B.A. ee Ganacsiga; Jaamacadda Gobolka Arizona Dugsiga Ganacsiga W.P. Carey, MBA

Adeegga Bulshada: Abaabule isbahaysi dhinacyo badan leh oo la shaqeeya ururada shaqaalaha, u doodeyaasha xuquuqda kiraysteyaasha, iyo Shabakadda Isku-duubnida Muhaajiriinta ee Aagga Washington; tababarre ciyaaraha dhallinyarada; fududeeye aqoon-is weydaarsi ka-qaybgalka madaniga oo maxalli ah; ka hadla jaamacadaha iyo dugsiyada sare ee maxalliga ah.

Bayaanka: Dadka ku nool guud ahaan 32aad ayaa dib u dhacaya, mushaharradu lama jaanqaadayaan biilasha, muhaajiriinta iyo dadka ugu nugul bulshadeenna waxay wajahayaan bartilmaameed federaal ah, hoggaamiyeyaashayda haddana wax ku filan uma qabanayaan inay caawiyaan. Waxaan mudannahay wax ka fiican.

Waxaan ahay hoggaamiye xuquuqda madaniga ah iyo mid ka mid ah dacwad-oogeyaasha asalka ahaa ee ka dhanka ahaa Mamnuucidda Muslimiinta ee Trump. Waxaan xirfaddayda ku qaatay abaabul la garab istaagaya shaqaalaha, kooxaha xuquuqda muhaajiriinta, iyo ururada bulshada oo u dagaallamaya dadka nidaamkeennu inta badan iska indho-tiro. Waxaan u dagaallami doonaa awood u lahaanshaha guryaha, hoos u dhigista kharashaadka maalinlaha ah, iyo Gobolka Washington oo ka hortaga xadgudubka awoodda federaalka. Waxaa taageeray Dimuqraadiyiinta, hoggaamiyeyaasha maxalliga ah, iyo ururada bulshada.



Senatarka Gobolka

Tina L. Orwall

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 409-3038

tina.orwall@gmail.com

www.electtinaorwall.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatarka Gobolka; Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Caafimaadka & Daryeelka Muddada-dheer; ku jirta Xeerarka, Adeegyada Aadanaha, Guryaha, iyo Guddiga Wadajirka ah ee Arrimaha Halyeeyada & Ciidamada. Wakiil Gobolka hore; Afhayeen Ku Meel Gaar; Xubin ka tirsan Golaha Qaranka ee Sharci-dejiyayaasha Gobolka ee Arrimaha Halyeeyada & Ciidamada.

Khibrad Xirfadeed Kale: Macallin La Shaqeeya UW oo leh labaatan sanno oo khibrad ah oo ku saabsan caafimaadka habdhaqanka, la-talinta, iyo qorista deeqaha, iyadoo la shaqeysa dowladaha iyo hey'adaha deeqaha si ka wanaagsan loogu adeego bulshooyinkeena.

Waxbarashada: Shahaadada Mastarka ee Shaqada Bulshada & B.S. ee Cilmi-Nafsiga oo ka socda UW.

Adeegga Bulshada: Rugta Ganacsiga Kent, Guddiga Judson Retirement Community, Golaha Saameynta United Way, Kooxda Hawsha Ka-hortagga Isdiilka Halyeeyada.

Bayaanka: Sharaf bay ii tahay inaan kuugu adeego Senatka Gobolka, halkaas oo aan ku dhisay diiwaankayga hoggaaminta sharci-dejinta-anigoo horumarinaya tallaabooyin wax looga qabanayo baahiyaha guryaha iyo caafimaadka habdhaqanka iyo kuwa halyeeyada iyo qoysaska ciidamada, waxaana ka shaqeeyay inaan abuurro ilaalino bulshooyinkeena ka dhan ah AI aan la nidaamin. Waan ku faanayaa biilasha sannadkan ee xoojinaaya ilaalinta ka dhanka ah ka faa'iidsiga galmada carruurta, ka mamnuucaya shirkadaha caymiska inay AI u adeegsadaan diidmada daryeelka, maalgelinaya ka soo kabashada fatahaadaha, yaraynta hoy la'aanta dhallinyarada, iyo xoojinaaya xuquuqda mulkiileyaasha guryaha.

Anigoo ah shaqaale bulsho oo xirfad ahaan u shaqeeya, ilaalinta dadka nugul ee Washington mar walba waxay ahayd diiraddayda. Ilaalinta dadka ka badbaaday xadgudubka galmada, rabshadaha qoryaha, iyo isdiilka waa si buuxda mudnaan ii ah inta aan ka adeegayo sharci-dejinta. Iyadoo jarista federaalku ay halis gelinayso barnaamijyada qoysaska dhibtoonaya iyo hey'adaha ilaaliya dadka nugul, waxaan sii wadi doonaa inaan ka shaqeeyo xoojinta iyo ilaalinta kheyraadkan gobolkeena.

Codkaaga, waxaan sii wadi doonaa ka shaqeynta guryo la awoodi karo, daryeel caafimaad dhammaystiran, 988, yaraynta wasakhawga garoonka diyaaradaha, helitaanka daryeelka carruurta ee qoysaska shaqeeya, helitaanka luqadda ee dugsiyada, iyo helidda xalalka cimilada.

Waxaa si sharaf leh ii taageeray duqayda iyo xubnaha goleyaasha deegaanka ee maxalliga ah, ururada shaqaalaha iyo hoggaamiyayaasha gobolka, iyo kuwo kale oo badan. Aan sii wadno wada shaqeynta si loo helo bulshooyin xooggan, badqab leh, oo taageero badan leh oo ku yaalla Koonfurta Degmada King

CODBIXIYAHA ★ MUSTAQBALK ★

16 iyo 17 sanno jirka ayaa hore isku sii diiwaan gelin kara si ay u codeeyaan oo si toos ahna loo diiwaan gelinayo si ay u codeeyaan marka ay gaaraan 18 jir.

Si aad u noqoto codbixiyaha
mustaqbalka, waa inaad tahay...

16



Ugu yaraan
16 jir

Muwaadin
Mareykkan ah

Degan
Washington

Sideen isku diiwaan geliyaa?

Oonleenka hore isaga diiwaan geli si aad u codeyso barta [VoteWA.gov](https://www.vote.wa.gov). Waxaad sidoo kale shakhsi ahaan hore iskaga diiwaan gelin kartaa Xarunta Codbixinta, ama adigoo boostada ku soo diraaya foomka diiwaan gelinta xaashida ah.

Maxaa dhacaya markaan is diiwaan geliyo ka dib?

Waxaad si toos boostada ugu heli doontaa warqad codbixin marka aad u qalanto inaad codeyso.

Sideen u soo celiyaa warqaddayda codbixinta?

Warqaddaada codbixinta ku soo celi sanduuqa rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah! Ka hel sanduuq kugu habboon oo kuu dhow barta [kce.wiki/sanduuqyada](https://www.wiki.wa.gov/sanduuqyada)

Haddii aad warqaddaada codbixinta boostada ku direyso, Adeegga Boostada waxay kugula talineysaa inaad boostada ku dirto ugu yaraan hal asbuuc ka hor Maalinta Doorashada.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Edwin Obras

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

info@edwinobras.org
edwinobras.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Edwin waxaa loo magacaabay Aqalka Gobolka Washington bishii Diseembar 2024 waxaana la doortay 2025.

Khibrad Xirfadeed Kale: Edwin wuxuu 18-kii sanno ee la soo dhaafay ku qaatay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Seattle, isagoo ka soo kacay khabirka barnaamijka ilaa Agaasimaha Qaybta. Wuxuu ka shaqeeyay hoy la'aanta, barnaamijyada ka hortagga gaajada, horumarinta dhallinyarada, iyo badqabka bulshada.

Waxbarashada: BA, Jaamacadda Washington; MPA, Jaamacadda Northeastern. Qofkii ugu horreeyay ee qoyskiisa ka qalin jebiyay kulliyad.

Adeegga Bulshada: Edwin wuxuu Filibiin ka yimid isagoo carruur ah wuxuuna SeaTac ku noolaa 23-kii sanno ee la soo dhaafay. Guddoomiyihii hore ee Guddiga Bulshada Filibiin ee Seattle wuxuuna wada-guddoomiyay ololahooda raasumaalka guryaha la awoodi karo. Wuxuu guddoomiyay Guddiga La-talinta Adeegyada Aadanaha ee SeaTac.

Bayaanka: Kirada, guryaha, gaaska iyo raashinka ayaa cirka isku shareeraya. Mushaharradu ma la jaanqaadayaan. Qoysasku ma awoodaan inay ku noolaadaan xaafadahooda. Kalfadhigaygii ugu horreeyay ee buuxa ee Olympia, lix ka mid ah sharciyadayda oo u dagaallamayay awoodda iibsashada karo iyo shaqaalaha ayaa sharci noqday. Waxaan ilaaliyay shaqaalaha go'doonsan, waxaan xoojiyay hubinta taariikhda, waxaan nidaamiyay shirkadaha rideshare-ka, waxaanan xoojiyay ilaalinta ciwaanka kalkaaliyayaasha ee ka dhanka ah AI. Waxaan sii wadi doonaa inaan u dagaallamo xuquuqda muhaajiriinta. Waxaan Degmadeenna u xaqiijiyay in ka badan \$30 milyan, oo ay ku jiraan maalgashiyo loogu talagalay guryaha iyo caafimaadka. Waan sii imaan doonaa. Waxaa Taageeray: Golaha Shaqaalaha Gobolka WA, Dimuqraadiyiinta 33aad, Ficilka Ilaalinta Washington, Qorsheynta Waalidnimada, Ururka Kalkaaliyayaasha Washington, Guddoomiye Ferguson, Senatar Orwall, Wakiil Gregerson.

Chris Martinez

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 840-1244
cmartinez121325@gmail.com
ElectMartinezId33.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Madaxa Guddiga Xaafadda ee la magacaabay. Waxaan rajeynayaa mudnaanta ah inaan u adeego degmadeena oo aan keeno natiijooyin dhab ah oo loogu talagalay fasalka shaqeeya.

Khibrad Xirfadeed Kale: Shaqaale gacanta ku shaqeeya oo noloshiisa oo dhan ahaa farsamayaqaan baabuur, ranjiile warshadeed, gacan-yare, iyo shaqaale. Shaqooyinkani waxay sifeeyeen xirfadahayga xallinta dhibaatooyinka ee wax ku oolka ah ee aan keenni doono Sharci-dejinta Washington.

Waxbarashada: Ka qalin jebiyay dugsiga sare 2010. Shahaadada Xisaabaadka Ku-saleysan Kombuyuutarka 2012. Tababar farsamo, ranjiyeynta warshadaha. Ku helay xirfado baabuur oo horumarsan khibrad xirfadeed oo gacanta laga qabto.

Adeegga Bulshada: Dee-q-bixiye deeqsi ah oo taageera arrimaha muxaafidka ah ee keena natiijooyin dhab ah maxalli ahaan iyo qaran ahaan. Iyadoo loo marayo bixinta toban meelood meel joogto ah, bixinta samafalka, waxaan si joogto ah dadka u baahan ugu caawiyaa lacag, gaadiidyo, taayirro, dhar, iyo hadiyado waaweyn.

Bayaanka: Waxaan ahay shaqaale gacanta ku shaqeeya oo noloshiisa beddelay, anigoo guri lahaansho ku gaaray shaqo adag iyo rumaysadka Ciise Masiix. Waan ogahay waxa ay ka dhigan tahay in Olympia ku illowdo. Dowladdeennu way iska indho-tirtaa xuquuqahaaga Ilaahay ku siiyay waxayna canshuur uga qaaddaa dakhligaaga shaqada adag lagu kasbaday. Waa waqtigii siyaasiyiinta xirfadda ka dhigtay lagu beddeli lahaa hoggaamiyayaal u ololeeya dowlad xaddidan, qiimaha qoyska dhaqanka, mas'uuliyadda maaliyadeed, badqabka dadweynaha, iyo xuquuqaha dastuuriga ah. Waxaan u dagaallami doonaa baabi'inta canshuuraha dila tamarta, taageeridda sharci fulinta, iyo ilaalinta qoyskaaga ka dhan ah xadgudubka awoodda dowladda. Waxaa taageeray Xisbiga Jamhuuriga ee Degmada King. Si wadajir ah, waxaan dib ugu soo celin karnaa Washington caqli caadi ah iyo qiimaha Mareykanka.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Mia Su-Ling Gregerson

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 795-1950
peopleformia@gmail.com
MiaGregerson.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Mia Gregerson waa qof degan ilaa jiilka afraad Koonfurta Degmada King, waxaa ka soo korsaday Taywaan qoys ka tirsan Ciidanka Cirka. Waxay ka shaqeysay Golaha Magaalada SeaTac, ka dibna waxay Duq Magaalo ahayd 2008 ilaa 2015, markii SeaTac ay meel marisay mushaharkii ugu horreeyay ee ugu yar ee \$15 dalka. Waxay matashay Degmada 33aad tan iyo 2013, waxay u adeegtaa sidii Guddoomiye Ku-xigeenka Qoondoynta Aqalka, waxay Guddoomiye-Wadaag ka tahay koox-hawleedka dhimmista saboolnimada oo gobolka oo dhan ah waxayna gacan ka geysatay aasaasidda Xafiiskii ugu horreeyay ee Sinnaanta ee Washington.

Khibrad Xirfadeed Kale: Ka hor sharci-dejinta, Mia waxay ku dhawaaad 20 sanno ku qaadatay goobta ilkaha iyadoo ahayd kaaliye qalliin iyo maareeye ganacsi.

Waxbarashada: Waxay shahaadada taariikhda ka haysataa Jaamacadda Washington.

Adeegga Bulshada: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Bayaanka: Wakhtiyo adag baa la joogaa. Raashinku wuxuu noqday qaali Gaasku wuu ka qaalisan yahay sidii hore. Kiradu way ka qaalisan tahay sidii hore. Qoysaska degmadeenna ku nool waxay toddobaad walba culays ka dareemaan bixinta kharashka nolosha. Xaaladda hadda jirta ma shaqeynayso. Waxaan ka shaqeeyay inaan keeno natiijooyin dhab ah si aan u caawiyo qoysaska la halgamaya inta lagu jiro wakhtiyadan adag. Cunto dugsi oo bilaash ah la siiyo ilmo kasta oo Washington ku nool. Gargaar cunto oo degdeg ah markii miisaaniyadda SNAP hoos u dhacday. Sharciga Xuquuqda Dayactirka si uu lacag kuugu badbaadiyo qalabka elektaroonigga ah. Gaadiid bilaash ah oo carruurta ah. Malaayin loogu talagalay jidka 224aad iyo baska rapid ride ee Kent. Waxaa taageeray: Golaha Shaqaalaha Gobolka, One America Votes, Adam Smith, Tina Orwall, Edwin Obras, Bob Ferguson, iyo kuwo kale.

Yuri Marinchik

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 569-6477
yurihr@proton.me
yuriwa.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibrad Xirfadeed Kale: Waxaan wakhti buuxa ka shaqeeyaa shaqooyin culus anigoo ganacsi yar la dhisaya xaaskayga. Khibradahani waxay muujinayaan sida siyaasadaha dowladda ee canshuuraha, xeerarka, kharashaadka tamarta, iyo guryaha ay maalin kasta u saameeyaan qoysaska shaqeeya iyo ganacsiyada yaryar.

Waxbarashada: Khibrad gacanta laga qabto anigoo ah mulkiile ganacsi yar iyo xirfadle shaqeeya.

Adeegga Bulshada: Waxaa iga go'an inaan u adeego qoysaska shaqeeya anigoo dhegaysanaya walaacyadooda una dagaallamaya xalal ka dhigaya Washington mid la awoodi karo, badqab leh, oo caddaalad u ah qof kasta. Anigoo ah muhaajir kooxda shaqeeya ah oo isku dheellitiraya shaqo wakhti buuxa ah iyo ganacsi yar, waxaan fahamsanahay cadaadisayada maalinlaha ah ee dad badan oo reer Washington ah wajahayaan halkii aan ka qaadan lahaa aragtida fog ee siyaasiyiinta xirfadda ka dhigtay ee Olympia.

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa Aqalka Wakiillada Gobolka Washington si aan caqli caadi ah ugu soo celiyo Olympia. Ma ihi siyaasi xirfad ka dhigtay — waxaan ahay mid idinka mid ah. Haddii aad ka daashay siyaasiyiin illooba dadka ay u adeegaan, igu soo biir. Si wadajir ah waxaan ugu dagaallami doonaa kharashaadka guryaha iyo tamarta oo hooseeya, canshuuro caddaalad ah, badqab dadweyne oo xooggan, iyo xalal wax ku ool ah. Halkii ay ka abuuri lahaayeen xeerar aan dhammaad lahayn oo nolosha ka dhigaya mid adag oo kordhiya xakamaynta dowladda, waa inay u dhaqmaan sida adeegeyaal dadweyne oo dhab ah — nolosheena fududeeya si aan ugu raaxaysanno qoysaskeena una gaarno is-rumeyn. Aan dadka ka horumarinno siyaasadda oo aan keenno natiijooyin dhab ah.



Senatarka Gobolka

Emily Alvarado

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 745-2010

emily@emilyalvarado.com

emilyalvarado.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatarka Gobolka (2025-2026); Wakiilka Gobolka (2023-2025)

Khibrad Xirfadeed Kale: Hoggaamiye urur aan faa'iido doon ahayn oo dhisaya guriyeyn tayo leh oo la awoodi karo iyo daryeelka carruurta; Agaasimihii hore ee Xafiiska Guriyeynta ee Seattle oo maalgeliyay \$290 milyan si looga hortago barakaca, loo taageero adkeysiga cimilada, loo dhiso guriyeyn taageero leh si wax looga qabto hoy la'aanta, loo ilaaliyo kiraysteyaasha, loona ballaariyo lahaanshaha guryaha; abaabule Qorsheynta Waalidnimada oo abaalmarin ku guuleystay; Qareen

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda, Kulliyadda Scripps (summa cum laude); JD (Shahaadada Sharciga), Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Washington (Aqoonyahan Sharciga Adeegga Dadweynaha ee Gates)

Adeegga Bulshada: Xubintii hore ee Guddiga, Isbahaysiga Guriyeynta Dakhliga Hoose ee Washington; xubintii hore, Guddiga Haweenka ee Seattle; Qareenkii hore ee Mutadawaca ah, Rugta Sharciga Bulshada ee Ururka Qareennada Latino ee Washington; waalid PTA ah oo leh laba arday oo dhigta Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle

Bayaanka: Waa mudnaan inaan kugu matalo Senatka Gobolka. Sida u doode nolosheeda oo dhan u ololeeya guryaha la awoodi karo iyo fursadaha dhaqaale, waxaan keennaa khibrad qoto dheer iyo rikoor la xaqiijiyay oo ah keenista natiijooyin. Sida Senatarkaaga ahaan, waxaan horrey u socodsiiyay arrimaha muhiimka ah: dugsiyo dadweyne oo tayo sare leh, guryo la awoodi karo, iyo helitaanka daryeelka carruurta iyo daryeelka caafimaadka. Waxaan ku faraxsanahay inaan hormuud ka noqday siyaasado wax ka qabta qiimaha sare ee nolosha anigoo meel mariyay dib-u-habeyn taariikhi ah oo canshuuraha ah si loo maalgeliyo dugsiyada iyo adeegyada, dhimmista canshuurta ee qoysaska shaqeeya iyo ganacsiyada yaryar, iyo ilaalinta kiraysteyaasha, shaqaalaha, iyo macaamiisha.

Waxaan sii wadi doonaa inaan riixo dhaqaale caddaalad ah oo leh shaqooyin mushahar fiican leh iyo dib-u-habeyn ka dhigaya lahaanshaha guriga, daryeelka caafimaadka, daryeelka carruurta, iyo raashiinka kuwo la awoodi karo. Waxaan u dagaallami doonaa hagaajinta natiijooyinka waxbarasho ee carruurta iyo xoojinta shabakadda badbaadada bulshada ee dhallinyarada iyo dadka waayeelka ah. Dhammaanteen waxaan mudannahay adeegyo dadweyne oo la isku halayn karo, waxaan sii wadi doonaa u doodista maalgelinnada loo baahan yahay si bulshooyinkeenu u noqdaan kuwo caafimaad qaba oo ammaan ah.

Waxaad igu kalsoonaan kartaa inaan u istaago dimuqraadiyadeena iyo xuquuqdeena madaniga ah, xorriyadda taranka, dib u habeynta hub caqligal, iyo ficilka cimilada. Waxaa iga go'an inaan ka dhigo dowladda inay u shaqeyso dadka—maaha kuwo wata dano gaar ah. Waxaa sharaf ii ahaan lahayd inaan kasbado taageeradaada sii socota.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Brianna K. Thomas

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 321-9890

brianna4the34th@gmail.com

Briannathomas.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Si sharaf leh ayey u adeegtaa ayadoo ah Wakiilkaaga Gobolka tan iyo 2025.

Khibrad Xirfadeed Kale: Hadda waxay u adeegaysaa ayadoo ah La-taliyaha Sare ee Siyaasadda ee Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Seattle. Horrey waxay ugu adeegtay Madaxa Shaqaalaha ee guddoomiyaha Golaha Magaalada, Xiriiriyaha Shaqaalaha ee Xafiiska Duqa Magaalada, iyo Agaasimaha Ololaha ee hindiseyaal/musharaxiin badan oo horusocod ah.

Waxbarashada: Jaamacadda Washington, Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Siyaasadda 2010

Adeegga Bulshada: Taariikh shaqo oo bisil oo natiijooyin ah oo ay u shaqeysay bulshadeena. Waxay maamushay ololihii mushaharka ugu yar ee \$15 ee SeaTac sannadkii 2013, kii ugu horreeyay dalka ee ku guuleysta warqadda codbixinta. Waxay hoggaamisay hindisaha Honest Elections (Doorasho Nadiif ah) ee Seattle, kaas oo aasaasay barnaamijka foojarrada dimuqraadiyadda ee magaalada, waxayna u adeegtay Agaasimaha Goobta ee Sanduuqa Waxqabadka Isbahaysiga Guryaha Dakhliga Yar ee Washington.

Bayaanka: Shaqada noloshaydu waxay ku saabsan tahay dhisidda adduun ka wanaagsan oo ka caddaalad badan kan hada jira, taas ayaana dhaqaajisa sharciyada aan soo jeediyay oo aan meel mariyay. Labadan sanno ee miisaaniyadeed, waxaan ka qayb qaatay meel marinta Canshuurta Milyaneerrada, anigoo keenay dib-u-habeyn canshuureed muddo dheer la sugayay si ay uga faa'iideystaan dadweynaha Washington ee shaqeeya. Waxaan meel mariyay sharciyo damaanad qaadaya nasashooyinka cuntada iyo nasashada shaqaalaha daryeelka caafimaadka, siinaya shaqaalaha guryaha ay muddo dheer mudnaayeen, gaadiidka sii socodsiiya, isla markaana xaqiijinaya asturnaanta shaqaalaha iyo madaxbannaanida jirkooda. Sharaf bay ii tahay inaan sii wado inaan idiin dagaallamo iyo Fighting 34th!

Taageerayaasha: Dimuqraadiyiinta 34thLD, Golaha Shaqaalaha ee Gobolka WA, AG Nick Brown, Xubin Golaha Degmada Teresa Mosqueda, UFCW, WFSE/AFSCME iyo kuwo kale oo badan.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Joe Fitzgibbon

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 949-5127

jcfitzgibbon@gmail.com

www.joefitzgibbon.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka, 2010-hadda; Hoggaamiyaha Aqlabiyadda Aqalka, 2022-hadda; Guddoomiye, Guddiga Deegaanka & Tamarta ee Aqalka Hoose, 2014-2022

Khibrad Xirfadeed Kale: kaaliyaha sharci-dejinta; la taliyaha siyaasadda deegaanka

Waxbarashada: BA, Taariikhda iyo Sayniska Siyaasadda, Kuliyadda Princi

Adeegga Bulshada: Guddiga Agaasimeyaasha, Guddiga Ololaha Sharci-dejinta ee Dimuqraadiga, 2019-2025; Guddiga Agaasimeyaasha, Futurewise (urur deegaanka oo gobolka oo dhan ah oo aan faa'iido doon ahayn), 2016-2019

Bayaanka: Waa sharaf inaan idinku matalo oo aan u dagaallamo bulshooyinkeena. Taariikhdaydu waa mid horusocod wax ku ool ah oo natiijooyin keena. Waxaan meel mariyay sharciyada cimilada ee ugu xooggan dalka; waxaan Gobolka Washington ka difaacay weerarrada federaalka; waxaan xaqiijiyay maalgelinno waxbarashada, daryeelka caafimaadka, gaadiidka dadweynaha, badqabka dadweynaha, iyo deegaanka; waxaan ka caawiyay xasillinta miisaaniyaddeena.

Waxaan hoggaamiyey meel marinta dib-u-habeyn canshuureed oo taariikhi ah — canshuurta milyaneerrada oo lagu lammaaniyay dhimmista canshuuraha ee qoysaska shaqeeya iyo ganacsiyada yaryar. Anigoo ah waalid cusub oo leh laba carruur yaryar ah, waxaan u dagaallamayaa bulshooyin ammaan ah, maalgelin dugsi oo wanaagsan, tamar nadiif ah oo la awoodi karo, canshuuro caddaalad ah, iyo mustaqbal waara. Waxaan ku weydiisanayaa codkaaga.

Mary Anito

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

Maryforseattle@gmail.com

Maryforwa.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiil Aaminaad Leh, Xubin ka tirsan Guddiga Qorshaha Hawlgabka, REI CO-OP

Khibrad Xirfadeed Kale: Hooyo saddex carruur ah oo dhigta Dugsiyada Dadweynaha; Dib-u-habeeyo, Jenito Homes (Seattle); Madaxa Hawlgallada Goobta, Shelf Engine (Seattle); VP-ga Hawlgallada, Hum Nutrition (California); Maamule Sare oo Hawlgallada, REI (Sumner); Agaasimaha, Maamulka Alaab-qeybiyayaasha, Wayfair (Boston); Maamule Sare oo Hawlgallada, Caterpillar (Illinois); Cilmi-baare Qalin-jabin ah, Novartis (Iswiisland); Injineer Pb-Free, Nidaamyada Cisco (Boston)

Waxbarashada: BS Sayniska Agabka iyo Injineerinka, Jaamacadda Johns Hopkins, MBA iyo MS, Aqoonyahan Barnaamijka Hoggaamiyayaasha Hawlgallada Caalamiga ah ee MIT, *Isbaanish/Talyani heer wada hadal*

Adeegga Bulshada: Guddiga ROOTS Hoyga Dhallinyarada Qaangaarka, Xoghaye iyo Khasnaji; Guddiga Waxbarashada Goorta Hore ee Coop; Jawaabta CORE Covid; Mutadawac la shaqeeya Habitat for Humanity iyo Junior Achievement, Isku-duwaha Kobicinta PTA

Bayaanka: Mas'uuliyadda maaliyadeed iyo maalgelinta dadweynaha ee xooggan iskuma diidana. Isku-dheellitirka miisaaniyaddeena iyadoo la maalgelinayo kaabayaasha muhiimka ah, waxbarashada, iyo daryeelka caafimaadka waa lama huraan u ah xoogga, xasilloonida, iyo wanaagga muddada dheer ee bulshooyinkeena.

Anigoo ah hooyo shaqeysa oo qabata hawlgallo, guriyeyn, iyo ganacsi yar, waxaan fahamsanahay caqabadaha ay wajahaan qoysaska, shaqaalaha, iyo ganacsiyada maxalliga ah - iyo degdegga keenista xalalka. Waxaan ku hadlaa Isbaanish. Waxaan diyaar u ahay inaan u adeego Degmada Sharci-dejinta ee 34aad anigoo keenaya khibraddayda hoggaamineed ee wada shaqeynta oo si guul leh wax uga qabatay caqabado adag si aan ugu doodo baahiyaha bulshadeenna, u dhaqaaqiyo natiijooyin, oo u meel mariyo isbeddel macno leh si jiilalka mustaqbalka ay ugu faanaan inay Gobolka Washington ugu yeeraan gurigooda.



Senatarka Gobolka

Noel C. Frame

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 701-0344

campaign@noelframe.com

www.noelframe.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatarka Gobolka, 2023-hadda; Wakiilka Gobolka, 2016-2023; Guddoomiye Ku-xigeenka Maaliyadda, Guddiga Hababka iyo Dhaqaalaha; Guddoomiye Ku-xigeen, Guddiga Adeegga Aadanaha; Xubin, Golaha Iskaashiga Caddaaladda Dhallinyarada; Wada-Guddoomiyihii Hore, Kooxda Shaqada Caafimaadka Dhaqanka ee Carruurta & Dhallinyarada.

Khibrad Xirfadeed Kale: Lammaanaha Maareeynta/Mulkiile Ganacsi Yar, Uncommon Bridges (2016-hadda); bixiye guriyeynta (2025-hadda); agaasime urur aan faa'iido doon ahayn (2010-2015); la taliye maamulka & isgaarsiinta (2005-2010)

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Isgaarsiinta Siyaasadda, Shahaadada Mastarka ee Maamulka Siyaasadda, Jaamacadda George Washington, Washington, DC

Adeegga Bulshada: Xubin hadda ka tirsan Ururka Waalidiinta iyo Macallimiinta (PTA) ee dugsiga hoose ee maxalliga ah, iyo xubin hore oo PTA ah oo ka tirsan Dugsiyada Sare ee Ballard iyo Garfield, iyo Dugsiga Dhexe ee Hamilton International iyadoo ahayd waalid korin/ daryeelle qoys ballaaran (qaybo ka mid ah 2005-2015).

Bayaanka: Waxaa mudnaan ahayd inaan matalo dadka Degmada 36aad 10-kii sanno ee la soo dhaafay. Waxaa 15 jeer la ii sharfay u doodistayda dadka qaba naafanimada koriinka iyo caqabadaha caafimaadka dhaqanka, iyo dhallinyarada ku lug leh nidaamyada daryeelka korinta iyo sharciga dambiyada dhallinyarada, iyo sidoo kale shaqadayda ku saabsan guriyeynta la awoodi karo, horumarinta dhaqaalaha iyo dib-u-dheellitirka nidaamka canshuuraha ee dib-u-socodka ah ee gobolka. Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga.

Caqabadda awoodda wax iibsiga si adag ayuu u saameynayaa degmadeena waxaana sii xumeynaya falalka taxaddar la'aanta ah ee Maamulka Trump. Anigoo ah hoggaamiye siyaasadda canshuuraha, waxaan ka caawiyay meel marinta Canshuurta Milyaneerrada si loo maalgeliyo dugsiyadeena dadweynaha, daryeelka caafimaadka, adeegyada aadanaha iyo barashada hore, iyo sidoo kale siyaasado muhiim ah oo awoodda wax iibsiga ah sida ballaarinta deynta canshuurta qoysaska shaqeeya (460,000 qoys oo cusub) iyo barnaamijka ka-dhaafidda canshuurta hantida ee dadka waayeelka ah (50,000 qoys oo cusub), sameynta barnaamijka kaalmada tamarta ee dakhliga hoose, maalgelino taariikhi ah oo guriyeynta la awoodi karo, iyo ka-dhaafidda alaabta guriga ee muhiimka ah canshuurta iibka. Haddii fursad la isiiyo inaan sii adeego, maalin kasta waxaan u dagaallami doonaa dadka shaqeeya ee bulshadeenna.

Waxaan ku faraxsanahay inay i taageereen Dimuqraadiyiinta Degmada 36aad, Xisbiga Qoysaska Shaqeeya, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington AFL-CIO, iyo Ficilka Ilaalinta Washington.

Jillian England

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 902-7027

Info@JillianEngland.com

www.JillianEngland.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Madaxa Guddiga Xaafadda oo la doortay tan iyo 2007; Guddoomiye Ku-xigeen, Xisbiga Jamhuuriga ee Degmada Sharci-dejinta ee 36aad

Khibrad Xirfadeed Kale: Xirfad ballaaran oo ku saabsan sayniska kombuyuutarka iyo hawlgallada ganacsiga daryeelka caafimaadka, oo diiradda saaraya xallinta dhibaatooyinka xog-ku-saleysan iyo waxtarka kharashka.

Waxbarashada: B.S. ee Sayniska Kombuyuutarka iyo Ganacsiga, Jaamacadda Puget Sound

Adeegga Bulshada: Xubin firfircoon, Kaniisadda Lutheran ee Missouri Synod tan iyo 2006.

Bayaanka: Waxaan ahay Jillian England, waxaan u tartamayaa Senatka Gobolka ee Degmada Sharci-dejinta 36aad si aan u soo celiyo miyir-qabka maaliyadeed iyo dowladda dastuuriga ah ee Olympia.

Sanno badan oo xukun hal xisbi ah ayaa dadka degan iyo shaqo-bixiyeyaasha ka eryay Seattle iyadoo ay jiraan canshuuro xad-dhaaf ah iyo xeerar culus. Gobolkeenu wuxuu sii wadaa inuu iska indha tiro qaybaha ugu culus ee xeerka canshuurta — canshuurta iibka ee sare iyo canshuurta Ganacsiga & Shaqada (B&O) ee is-dulsaaran — iyadoo raadinaysa “Canshuurta Milyaneerrada” oo ah 9.9% taasoo albaabka u fureysa canshuur dakhli oo ballaaran oo lagu soo rogo qoysaska shaqeeya. Ka noqoshada canshuurahan waa mudnaantayda ugu sareysa.

Waxaan sidoo kale ka shaqeyn doonaa ka noqoshada Xeerka Ballanqaadka Cimilada ee kharashka badan, kaas oo ku daray 50–65 senti gallon kasta oo shidaal ah kuna kordhiyay biilasha tamarta guryaha ee qoysaska Seattle iyo ganacsiyada yaryar. Waxaan taageersanahay istaraatiijiyad tamareed oo dhammaan fursadaha ka kooban—dedejinta awoodda nukliyeerka, ballaarinta gaaska dabiiciga ah, iyo ilaalinta ilaha saldhigga ah ee la isku halayn karo—si korontadu u ahaato mid la awoodi karo loona ilaaliyo shaqooyinka.

Marka ay timaado hoy la'aanta iyo waxbarashada, waxaan dalbanayaa isla-xisaabtan. Waa inaan ku beddelnaa hababka fashilmay xalal wax ku ool ah oo nadiifiya xeryaha, soo celiya badqabka dadweynaha ee xaafadaheena, oo hubiya in dugsiyadeenu ardayda wax baraan halkii ay fikrado ku shubi lahaayeen. Waxaan u dagaallami doonaa dhimmista canshuuraha iyo yaraynta culeyska xeerarka ee qoysaska iyo shaqooyinka ka riixaya Gobolka Washington.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Julia Grant Reed

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 208-2297

info@votejuliareed.com

www.votejuliareed.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka ee hadda, Degmada Sharci-dejinta ee 36aad

Khibrad Xirfadeed Kale: La-taliye ka tirsan Kinetic West, oo bixiya qorsheyn istaraatiiji ah iyo adeegyada maamulka ururka ee barnaamijyada shaqaalaha iyo tababarka xirfadeed ee dhallinyarada. La-taliyihii hore ee Sare ee Siyaasadda & Agaasimaha Arrimaha Gobolka ee Magaalada Seattle, oo hoggaaminayay shaqaaleynta dhallinyarada, shaqaalaha, gaadiidka, iyo siyaasadda farshaxanka. Shaqaale hore oo ka tirsanaa maamulka Obama, Waaxda Arrimaha Dibadda ee Mareykanka iyo Xafiiska Maamulka iyo Miisaaniyadda.

Waxbarashada: MPA, Jaamacadda Princeton; BA, Kuliyadda Smith

Adeegga Bulshada: Waxaan ku koray Seattle, anigoo ah gabadha bareyaasha dugsiyada dadweynaha. Waxaan ahay xubin firfircoon oo ka tirsan St. Anne Catholic Church iyo xubin ka tirsan Guddiga Akadeemiyaha Alumnae ee Holy Names. Xubin hore oo guddiga ah: YMCA Xarunta Saameynta Bulshada, Madasha Hoggaamiyeyaasha Adduunka, *Fuse WA*.

Bayaanka: Anigoo ah Wakiilka Gobolka, waxaan weli iga go'an bulshooyin ammaan ah, la awoodi karo, oo horumaraya. Taageeradaada, waxaan ku sii dhisi doonaa khibraddayda taageeridda dhallinyarada iyo horumarinta shaqaalaha, anigoo ka caawinaya jiilka xiga inay gaaraan awooddooda buuxda. Waxaan horumarin doonaa siyaasadaha taageera guriyeynta si loo daboolo baahiyaha degdegga ah iyo kuwa muddada dheer ee Seattle, waxaan maalgelin doonaa waddooyinka tababarka xirfadeed iyo waxbarashada sare, waxaan ballaarin doonaa dhaqaalaha hal-abuurka ee Washington, waxaana noqon doonaa cod xooggan oo u taagan xalalka gaadiidka ee cimilada u wanaagsan iyo dhaqaalaha badda.

Waxaa taageeray: Golaha Shaqaalaha Gobolka; U Doodeyaasha Isbahaysiga Qorsheynta Waalidnimada; Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka; PAC-ga Guddiga Kalkaaliyeyaasha ee Washington; Xiriirka Shaqaalaha Gobolka ee WA; Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta ee 36aad, sharci-dejiyeyaasha, hoggaamiyeyaasha shaqaalaha & bulshada, iyo kuwo kale!



Wakiilka Jagada Lr. 2

Liz Berry

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 923-9296

info@lizberry.com

www.lizberry.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka (2021-hadda); Madaxa Guddiga Xaafadda (2014-hadda)

Khibrad Xirfadeed Kale: Agaasimihii Fulinta hore ee urur aan faa'iido doon ahayn ee ugu weyn gobolka ee u heellan ilaalinta xuquuqaha macaamiisha, shaqaalaha, iyo bukaanada. Waxaan sidoo kale u adeegay sidii Agaasimaha Sharci-dejinta ee Xildhibaanad Gabby Giffords, anigoo diyaarinayay siyaasado lagu caawinnayo qoysaska militariga iyo kor loogu qaadayo teknoloojiyada tamarta nadiifka ah.

Waxbarashada: BA, Jaamacadda American; Shahaadada Fulinta ee Hoggaaminta Dadweynaha, Jaamacadda Harvard

Adeegga Bulshada: Anigoo ah xubin hore oo guddiga Pro-Choice Washington (urur u dooda xuquuqda doorashada taranka) iyo u doodaha caddaaladda taranka noloshayda oo dhan, waxaan u dagaallamay inaan ilaaliyo oo ballaariyo helitaanka adeegga ilmo iska soo rididda. Waxaan si xiiso leh u taageeraa kobcinta dhaqaalahayaga hal-abuurka anigoo ku jira guddiga ArtsFund. Waxaan ahay hooyo PTA oo ku faanta laba arday oo dhigta Dugsiyada Dadweynaha Seattle.

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa dib-u-doorasho si aan u sii wado u dagaallanka qoysaska shaqeeya iyo Washington la awoodi karo. Waxaan taageeray dhimmista canshuuraha waxyaabaha maalinlaha ah ee muhiimka ah iyadoo aan ka dhigayno hannaankeena canshuuraha mid caddaalad badan si aan si ka wanaagsan u maalgelin karno dugsiyada dadweynaha, daryeelka carruurta, guriyeynta, iyo daryeelka caafimaadka.

Anigoo ah Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha, waxaan shaqaalaha ka ilaaliyay xatooyada mushaharka iyo heshiisyada tartan-la'aanta ee aan caddaaladda ahayn, anigoo taageeraya shaqooyin urur-shaqaale oo mushahar fiican leh. Waxaan hoggaaminayaa waxqabadka cimilada si loo yareeyo qashinka caagga ah loona ballaariyo dib-u-warshadaynta. Anigoo ah hormuudka amniga hubka, waxaan meel mariyay sharci taariikhi ah oo dhigaaya in loo baahan yahay ruqsad lagu iibsado hub. Mar walba waxaan u istaagi doonaa dadka, waxaanan riixi doonaa isbeddel geesinimo leh.



Senatarka Gobolka

Chipalo Street

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 705-3585

info@electchipalo.com

electchipalo.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka, 2023-hadda

Khibrad Xirfadeed Kale: Anigoo ka shaqeeya Microsoft, waxaan ka shaqeeyaa in teknolojiyadeennu ay ahaato hoggaamiye caalami ah wax ka qabata badqabka iyo amniga. Intaas waxaa dheer, waxaan ahay mulkiile ganacsi yar iyo garsoore kubbadda cagta oo xirfadle hore ahaa. Waxaan xiiseyeyn u qabaa in la helo guryaha la awoodo in la iibsado, iyo dhallinyaradeenna, gaar ahaan ciyaaraha iyo waxbarashada STEM.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda iyo Shahaadada Mastarka ee Cilmiga Kombuyuutarka, Jaamacadda Brown

Adeegga Bulshada: Waxaan u heellanahay sinnaanta dijitaalka, waxaan cilmiga kombuyuutarka ka dhigay Hey'adda Helitaanka Teknolojiyadda. Shaqadayda mutadawacnimada waxay xoojisay bulshadeenna: Xubin Guddiga, Machadka Mustaqbalka Dimuqraadiga; Ka-qaybgalka Ardayda Qalinjabisay, Hoggaanka Berri; Xubin Golaha Saamaynta Siyaasadda Dadweynaha, United Way ee Degmada King; wada-Madaxweyne, Bulshada Qaranka ee Injineerrada Madow.

Bayaanka: Anigoo ku soo koray xaafad fasalka shaqeeya ah isla markaana si sharaf leh uga soo baxay dugsiyada dadweynaha, waxaan fahamsanahay caqabadaha ay qoysasku wajahaan. Guryuhu waa qaali, daryeelka caafimaadkuna lama awoodi karo. Kharashka childcare wuxuu la eg yahay deyn guri, dugsiyadeenna dadweynahana maalgelin ku filan ma haystaan.

Iyadoo faashiiste uu yahay madaxweynaha, sharci-dejinta gobolku way ka muhiimsan tahay weligeed. Waxaan ahay musharaxa keliya ee qiimaha horusocodka u beddelay siyaasad iyo maalgelin. Waxaan kasbaday xilal hoggaanka Dimuqraadiga ah iyo guddiyada canshuuraha iyo miisaaniyadda si aan u hormariyo Canshuurta Milyaneerrada, taas oo maalgelisa waxbarashada, ballaarisa helitaanka daryeelka caafimaadka, isla markaana canshuuraha ka dhimaysa qoysaska shaqeeya. Waxaan la dagaallamay kooxaha u ololeeya mulkiilayaasha guryaha si aan u meel mariyo ilaalinnada kiraystayaasha sida xasilinta kirada, waxaan dib u habeeyay sharciyada aagagga si loo kordhiyo dhismaha guryaha.

Anigoo la shaqeynaya bulshada, waxaan xaqiiqayay \$131 milyan oo lagu maalgeliyo degmadeenna, oo ay ku jiraan Garfield Super Block, Skyway Homeownership, Tubman Health Center, Rainier Valley Food Bank, Xarunta Waxbarashada Hore ee Childhaven, iyo \$300,000 si loo daraaseeyo magdhowga faraca addoommadii.

Waan iska caabiyay markii Trump dib loo doortay, anigoo soo celiyay maalgelintii ilmo iska soo rididda ee uu meesha ka saaray, sii hayay kaalmada cuntada ee muhaajiriinta, mamnuucay in ICE ay xirtaan maaskaro, oo joojiyay kormeerka kaamaradaha Flock ee bulshooyinkeena. *Anigoo haysta taageero aan la barbar dhigi karin oo ka timid shaqaalaha iyo u-qareemayaasha deegaanka, waxaan codkaaga ku weydiisanayaa si aan u hormariyo guulo horusocod ah.*

Tatiana Brown

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 412-1535

hello@tatianaforwa.org

www.tatianaforwa.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Tani waa tartankaygii ugu horreeyay ee jago la doorto.

Khibrad Xirfadeed Kale: Golaha Caddaaladda Deegaanka ee WA - Guddoomiye-Wadaag iyo Wakiilka Bulshada. Shaybaarka Dhaqaalaha Dadweynaha - Istaraatiijiye Maamul Wadajir ah. Sanduuqa Waarta ee Kambaska, UW Seattle - Hoggaamiyaha Barnaamijka. Machadka Hoggaaminta Bulshada ee Hoggaamiyeyaasha Sage. Saaxiib Sare oo La Maamuusay, Dugsiga UW Evans.

Waxbarashada: MPA iyo MPH oo ka socda UW-Seattle; BS ee Cilmi Nafsiyada Bulshada oo ka socda Jaamacadda Virginia Commonwealth. Lagu tababaray dhaqaalaha, deegaanka, caafimaadka dadweynaha, iyo siyaasadda.

Adeegga Bulshada: Waxaan u adeegay bulshadayda si aan u ballaariyo helitaanka cuntada, u taageero qoysaska muhaajiriinta ah, u yareeyo farqiga hantida ee jinsiga, una hago jiilka xiga ee hoggaamiyeyaasha oo aan la shaqeeyay ururo sida Hoggaamiyeyaasha Sage iyo U Istaaga Dimuqraadiyadda.

Bayaanka: Waxaan ahay abaabule bulsho oo xirfaddayda ku qaatay inaan garab istaago qoysaska shaqeeya si loo helo caddaalad, fursad, iyo in u doodista heerka hoose loo beddelo isbeddel waara.

Degmada Sharci-dejinta ee 37aad, waxaan la shaqeeyay deriskayga, shaqaalaha, dhallinyarada, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada si aan gacan uga geysto qaabeeynta siyaasado taariikhi ah sida Sharciyada Ballanqaadka Cimilada iyo HEAL. Waxaan gacan ka geystay hoggaaminta qaar ka mid ah shirarka bulshada ee ugu horreeyay dalka ee ay dowladdu maalgeliso sababtoo ah dadka sida ugu badan ay u saameeyso siyaasadda dadweynaha waa inay gacan ka geystaan abuuristeeda.

Waxaan u tartamayaa Senatka Gobolka si aan codadka bulshada si toos ah ugu geeyo Olympia oo aan u fuliyo mudnaanta aan maalin kasta maqlo: guryo la awoodi karo, dugsiiyo dadweyne oo xooggan, xaafado ammaan badan, iyo gaadiid dadweyne oo la isku halayn karo. Waxaan hormuud u noqon doonaa daryeel caafimaad oo la heli karo, caddaaladda cimilada, iyo dhaqaale ay dadka shaqeeya ku horumari karaan. Waxaan maalgelin ku toosin doonaa Seattle, Skyway iyo Renton, waxaan ilaalin doonaa bulshooyinka shaqaalaha iyo muhaajiriinta, ganacsiyada yaryar, waxaan xaqiijin doonaa in hannaankeena canshuuraha loo qaabeeyo si kuwa ugu hantida badan ay u bixiyaan qaybtooda caddaaladda ah.

37aad waa gurigayga, waxaana maalin kasta ka shaqeyn doonaa inaan u dagaallamo dowlad dhammaanteen noo adeegta. Waxaad mudan tahay hoggaan ku saleysan bulshada iyo ficil, codkaagana - waxaan si wadajir ah ugu Dhisi Doonaa Si Ka Duwan.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Kelabe Tewolde

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 588-6096

hello@kelabeforwashington.com

kelabeforwashington.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Musharax markii ugu horreysay tartamaya si uu Olympia u keeno isbeddel jiil oo loo baahan yahay

Khibrad Xirfadeed Kale: Ku-xigeenka Agaasimaha Horumarinta Hoggaaminta, Ardayda Rainier (2018-hadda); Cilmi-baarista UX, Bloom Works iyo Washington Thriving (2024); Shaqada kiisaska iyo tababarro sharci-dejin, Senator-ka Mareykanka Patty Murray.

Waxbarashada: Jaamacadda Colgate, BA Cilmiga Siyaasadda

Adeegga Bulshada: Xubin hadda ka tirsan Guddiga Qorsheynta Seattle, 2020-hadda, oo gacan ka geysanaya in magaaladeenna noqoto mid la awoodi karo, loo dhan yahay, oo soo dhaweyn leh dadka sii kordhaya ee kala duwan. Wuxuu abaabulay gargaar is-dhaafsi sannadkii 2020, isagoo gacan ka geystay quudinta kumannaan xubnood oo bulshada ah oo uu la shaqeynayay abaabulayaal maxalli ah. Shaqo mutadawacnimo oo dheeraad ah oo lala yeeshay Hindisaha Mamelodi, Pretoria, Koonfur Afrika, si loo ballaariyo waxbarashada iyo wacyigelinta, iyo Guddiga La-talinta Deeqaha Dhallinyarada oo lala leeyahay Seattle Foundation.

Bayaanka: Waxaa i korisay hooyo keligeed ah oo dalkan u timid qaxooti ahaan. Anigoo carruur ah oo jooga Seattle, waxaan la kulannay amni-darro guri, deyn caafimaad, iyo rabshado hub. Waxaan xasillooni gaarnay markii ay heshay shaqo daryeel caafimaad oo urur shaqaale leh, aniguna waxaan ku biiray Ardayda Rainier.

Waa wakhtigii isbeddelka ee Olympia, si wax looga qabto baahiyaha degdegga ah loona soo celiyo rajada: la awoodidda guryaha ee qoysaska dhibban, childcare tayo leh oo loogu talagalay waalidiinta shaqeeya, xadidaadaha dulsaarka deynta caafimaadka, iyo faragelino hore oo carruurta waxbarashada ku haya. Aan tan sameyno, si wadajir ah. Taageerooyinka: Wakiil Dawn Mason, Chris Reykdal, Sage Leaders, Dimuqraadiyiinta Kuliyadda ee Washington, Jaelynn Scott, iyo Hannah Sabio-Howell.

Sharon Tomiko Santos

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 326-9042

info@FriendsofSantos.com

www.votesharontomikosantos.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiye, Guddiga Waxbarashada; Xubin, Guddiga Maaliyadda iyo Guddiga Ilaalinta Macaamiisha iyo Ganacsiga.

Khibrad Xirfadeed Kale: Maamulka iyo maareynta urur aan faa'iido doon ahayn, oo ay ku jiraan abuuridda saddex urur oo aan faa'iido doon ahayn (laba qaran, hal maxalli ah); siyaasadda laanta fulinta ee dowladda maxalliga ah iyo xiriirka bulshada

Waxbarashada: Dugsiga Sare ee Franklin; B. A., Kuliyadda Gobolka Evergreen; M.A., Jaamacadda Northeastern.

Adeegga Bulshada: Xubin Guddiga, Aqalka Xaafadda; Xubin, Isbahaysiga Xuquuqda Madaniga ee Washington; Xubin Aasaase Guddiga, Hate Free Zone of Washington (OneAmerica); Xubin Aasaase Guddiga, Raadiyaha Dadweynaha ee Puget Sound, KUOW; Xubin Aasaase, Isbahaysiga Caddaaladda Canshuuraha Washington; Xubin Aasaase, Kooxda Hawsha ee Socdaalka iyo Gobollada, Shirka Qaran ee Sharci-dejiyeyaasha Gobollada (NCSL)

Bayaanka: Wakhtiyadan adag, qoysaska Gobolka Washington waxay wajahayaan kharashyo kor u kacaya iyo caqabado adag. Anigoo ah Wakiilkaaga Gobolka iyo Guddoomiyaha Waxbarashada ee Aqalka, waxaan diiradda saarayaa mustaqbal amni dhaqaale iyo waxbarasho tayo leh ay qof walba heli karo. Waxaan ka shaqeynayaa inaan hoos u dhigo kharashka nolosha anigoo ilaalinaya adeegyada aasaasiga ah ee aan dhammaanteen ku tiirsannahay.

Waddadeenna hore waxay u baahan tahay khibrad sinnaaneed iyo xalal geesinimo leh oo wax ku ool ah. Xiddadadayda bulsho ee qotada dheer waxay qaabeeyaan ballanqaadkayga ku aaddan casriyeynta shaqaalaheenna, kordhinta sahayda guriyeynta, iyo xaqiijinta caddaaladda canshuuraha ee qoysaska shaqeeya. Si xushmad leh ayaan codkaaga u codsanayaa si aan u dhisno Gobolka Washington oo adkaysi leh, loo dhan yahay.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Jaelynn Scott

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 395-8695

hello@votejaelynn.com

votejaelynn.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Ma khasayso

Khibrad Xirfadeed Kale: Jaelynn waa hoggaamiye heer qaran laga aqoonsan yahay oo ku saabsan hoggaaminta ururrada aan faa'iido doonka ahayn iyo u-qareemidda horusocodka. Hadda waxay u adeegtaa Agaasimaha Fulinta ee Lavender Rights Project. Waxay leedahay khibrad shaqo oo ballaaran oo hore, iyadoo laba mar ahayd xubin urur shaqaale iyo wasiir qoys oo la caleemo saaray, waana la-taliye khibrad u leh maaraynta urureed ee ku saleysan feejignaanta maskaxda.

Waxbarashada: Shahaadada Mastarka ee Cilmiga Diinta (MDiv)

Adeegga Bulshada: Jaelynn waa abaabule bulsho oo ku jira dhaqdhaqaaqyada guryaha, caddaaladda dembiyada, jinsiga, iyo jinsiga bulshada. Waxay u adeegtay Qasnajiga Guddiga iyo Xubin Guud, waxayna si mutadawacnimo ah ula shaqeysay ururro dalka oo dhan ah.

Bayaanka: Degmadeennu waa mid ka mid ah bulshooyinka ugu firfircoon uguna dhaqammo badan Washington, waxayna mudan tahay wakiil u istaagi doona qof kasta oo gurigiisa ugu yeera. Waxaan keenay natiijooyin la taaban karo, anigoo \$16 milyan ka wareejiyay xabsiyada una wareejiyay guryaha taageerada leh, isla markaana gacan ka geystay aasaasidda hannaan badqab dadweyne oo bulsho-ku-salaysan oo heer qaran laga aqoonsan yahay.

Olympia, waxaan u dagaallami doonaa badqab dadweyne oo naxariis leh, xeer canshuureed oo caddaalad badan, daryeelka caafimaadka guud, kharashyo hoose oo qoysaska shaqeeya ah, iyo ballaarinta guryaha la awoodi karo. Waxaan ku faraxsanahay inaan taageero ka haysto Pramila Jayapal, Bernie Sanders, shaqaalaha, iyo mas'uuliyiin la doortay oo si adag ugu dagaallama dadka shaqeeya.

Evon McCorkle

(Doorbida Xisbiga Madax-Bannaan)

(918) 935-0738

Voteevonmccorkle@gmail.com

evonmccorkle.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Ma laha khibrad hore oo xafiis loo doortay

Khibrad Xirfadeed Kale: Arday kulliyadeed oo leh khibrad ku saabsan doodaha hoggaaminta, horumarinta siyaasadda, ka-qaybgalka bulshada, iyo cilmi-baaris madax-bannaan oo la xiriirta guriyeynta, waxbarashada, iyo siyaasadda gobolka. Sameeyay soo-jeedinno faahfaahsan oo diiradda saaraya dib-u-habeeynta canshuuraha, helitaanka guriyeynta, iyo isla-xisaabtanka dadweynaha ee Gobolka Washington

Waxbarashada: Daraasadaha Xisaabta iyo Fiisigiska. Casharada waxa ku jira kalkulus, injineernimada, cilmiga kombuyuutarka, iyo fiisigiska.

Adeegga Bulshada: Firfircoon ka ah wadhadallada bulshada ee ku saabsan xasilloonida guriyeynta, helitaanka waxbarashada, iyo ula-dhaqanka caddaaladda ah ee bulshooyinka aan si ku filan loogu adeegin ee Seattle. Si joogto ah uga qaybqaata doodaha siyaasadeed ee deegaanka, dadaallada u doodista, iyo wacyigelinta diiradda saaraysa in dadka deegaanka la siiyo cod xooggan oo dowladda dhexdeeda ah iyo hagaajinta kalsoonida u dhexeysa bulshooyinka iyo mas'uuliyiinta la doortay

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa Wakiilka Gobolka sababtoo ah waxaan aaminsanahay in Degmada 37 ay mudan tahay hoggaan dhegaysta, fahma halganka, una dagaallama xalal dhab ah. Anigoo ah arday iyo xubin noloshayda oo dhan ka tirsan bulshadan, waxaan arkay qoysas dhinac loo riixay sababo la xiriira kharashyada kordhaya, xasillooni la'aanta guriyeynta, iyo caqabadaha waxbarashada. Ma i taageeraan dadka awoodda leh ee gudaha ama mashiinada siyaasadeed waxaan u tartamayaa inaan dadka maalinlaha ah siiyo cod xooggan oo dowladda dhexdeeda ah. Ololahaygu wuxuu diiradda saarayaa waxbarashada, guriyeynta la awoodi karo, amniga bulshada, iyo soo celinta kalsoonida u dhexeysa dadka iyo hoggaanka. Si wadajir ah, waxaan dhisi karnaa mustaqbal qof kasta oo degmadeena ku nool dareemo in la maqlay, la ixtiraamay, lana matalay.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Janice Zahn

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(360) 718-5673
info@janicezahn.org
janicezahn.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka, Guddiyada: Dowladda Hoose (Guddoomiye Ku-xigeen), Guriyeynta, Maaliyadda, iyo Gaadiidka; Xubin Golaha Bellevue (2017-2025)

Khibrad Xirfadeed Kale: Injineer Sare iyo Maareeyaha Dhismaha Hawlaha Dadweynaha, Dekedda Seattle; Injineer qaab dhismeedka, Berger/ABAM Injineerada

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda iyo Shahaadada Mastarka Injineerinka Madaniga iyo Fulinta Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, Jaamacadda Washington; Leadership Eastside; Leadership Tomorrow

Adeegga Bulshada: Ururka Dugsiyada Bellevue, Wakiil; The Sophia Way, Xubinta Guddiga; Shabakadaha Nafaqaynta, Xubinta Guddiga; Ururka Qaranka ee Magaalooyinka, Guddiga Agaasimeyaasha; Machadka Shiinaha ee Injineeryaasha, Xubinta Guddiga La-talinta; Dugsiga Caalamiga ah ee PTA; Dugsiga Hoose ee Puesta del Sol PTA; Hoggaamiyaha Girl Scout; Hoggaamiyaha PEPS; Guddiga Gaadiidka Bellevue, Guddoomiyaha; Ololaha Bixinta Bulshada Dekedda Seattle, Guddoomiye; Guddiga Cilmi-baarista Gaadiidka, Xubinta Guddiga; iyo qaar kaloo badan.


Bayaanka: Sharaf ayay ii tahay inaan idinku matalo Olympia, anigoo dhisaya Gobolka Washington halkaas oo qoys kasta ku horumari karo oo aan xoojinayo dimuqraadiyadeenna. Anigoo ah injineer, hoggaamiye gaadiid, iyo adeegaha dadweynaha muddo dheer, waxaan diiradda saarayaa hagaajinta awoodista iyo keenista maalgashiyo ku saabsan guriyeynta, waxbarashada, daryeelka carruurta, iyo gaadiidka, anigoo si mas'uuliyad leh uga jawaabaya caqabadaha miisaaniyadda gobolkeenna. Anigoo ah muhaajir jiilkii koowaad ah, waxaan aaminsanahay xalalka dadka mudnaanta siinaya ee bulshooyinka isu keena waxna qabta.

Taageerooyinka: Kalkaaliyeyaasha; Macallimiinta; Qorsheynta Waalidnimada; Shaqaalaha; Dimuqraadiyiinta 41aad, Degmada King; Ficilka Ilaalinta; Mas'uuliyadda Hubka; Senatar Wellman; Wakiil Thai; Xubnaha Kongareeska Smith, DelBene; Xubnaha Golaha Balducci, Perry; hoggaamiyeyaasha Bellevue, Mercer Island, Issaquah, Sammamish, iyo Newcastle; iyo kuwo kale!

Elle Nguyen

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 486-4456
electElle2021@gmail.com
TheChoiceForChange.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Musharax Guddiga Dugsiyada Degmada Dugsiga Mercer Island 2021; ka gudbay doorashada hordhaca ah. Musharax Degmada Sharci-dejinta ee 41aad, Jagada 2aad, sannadkii 2022.

Khibrad Xirfadeed Kale: U doodid bulsho, cilmi-baaris iyo diyaarinta sharci, u doodid dhallinyaro iyo qoys, iyo khibrad maalgashi ganacsi yar iyo hantida ma-guurtada ah, oo ay ku jiraan adeegidda Guddoomiyaha Isbahaysiga Connect Care oo ku lug leh caafimaadka bulshada, barnaamijyada dhallinyarada, iyo hindiseyaasha isla-xisaabtanka dadweynaha.

Waxbarashada: B.A. ee Cilmiga Diinta/Daraasaadka Diinta, Master of Divinity (MDiv) ee Adeegga Diimeed ee Wax ku oolka ah, iyo Shahaadada Sharciga (JD).

Adeegga Bulshada: U doode bulsho oo ku lug leh wacyigelinta dadka hoy la'aanta ah, taageerada qoysaska, wanaagga dhallinyarada, iyo hindiseyaasha daryeelka bulshada, oo ay ku jiraan ka-qaybgal hoggaamineed oo lala leeyahay Isbahaysiga Connect Care iyo wacyigelin ku lug leh bulshooyinka adeeg-yar hela iyo dalalka Afrika.

Bayaanka: Waalid, u doode bulsho, iyo hoggaamiye diiradda saaraya ilaalinta carruurta, xoojinta qoysaska, hagaajinta badqabka dadweynaha, taageeridda wanaagga dhallinyarada, iyo horumarinta daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka dowladda. Waxaa ka go'an hoggaan wax ku ool ah, qiimaha dhaqanka, fursad dhaqaale oo loogu talagalay qoysaska shaqeeya, taageerada ganacsiyada yaryar, iyo soo celinta kalsoonida dadweynaha iyada oo loo marayo xalal caqli-gal ah oo bulshooyinka mudnaanta siinaya.

"Ka Dhig Mid Caqli Gal ah."



Wakiilka Jagada Lr. 2

My-Linh T Thai

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

Electmylinh@gmail.com
www.mylinhthai.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka: Ku-xigeenka Hoggaamiyaha Aqlabiyadda; xubin ka ah guddiyada Qoondaynta, Xuquuqda Madaniga & Garsoorka, Badqabka Bulshada, Waxbarashada, Maaliyadda, Daryeelka Caafimaadka & Fayo-qabka, Guriyeynta, Xeerarka. Madaxweynihii hore ee Guddiga Degmada Dugsiga Bellevue. Ku-xigeenkii hore ee Madaxweynaha Ururka Agaasimeyaasha Guddiga Dugsiga ee Gobolka Washington.

Khibrad Xirfadeed Kale: Farmashiiste. CEO - Rugta Caafimaadka Neerfaha Guud & Carruurta ee Wyoming. Macallin - Barnaamijka Master-ka Kalkaalinta ee Vietnam.

Waxbarashada: Jaamacadda Washington - Dugsiga Farmashiyaha. Akadeemiyaha Sharci-dejinta Galbeedka ee Golaha Dowladda. Golaha Qaran ee Dowladda - Henry Toll Fellowship.

Adeegga Bulshada: Guddiga Agaasimeyaasha - Xarunta Kheyraadka Caafimaadka Maskaxda Carruurta, Hey'adda Deeqaha Waxbarasho ee Fiyatnamiiska. Kormeerka Xafiiska Kaalmada Sharciga Madaniga. Guddiga La-talinta Caafimaadka Dadweynaha. Wakiil sharci-dejiye oo ka tirsan Shabakadda Deganaanshaha Daawada Qoyska.

Bayaanka: Sharaf ayay ii tahay inaan matalo qoysaska Eastside waxaana iga go'an dhisidda bulshooyin ammaan ah, taageero leh, halkaas oo qof walba ku horumari karo. Anigoo ah xirfadle daryeel caafimaad, ilaalinta helitaanka daryeel la awoodi karo oo tayo sare leh, taageeridda hal-abuurrada sayniska, iyo qaadista tallaabo macno leh oo ku saabsan isbeddelka cimilada ayaa ah mudnaantayda ugu sareysa. Anigoo ah qaxootigii ugu horreeyay ee la doorto, waxaa iga go'an horumarinta bulsho caddaalad badan, loo dhan yahay, oo loo siman yahay qof walba.

Taageeradaada, waxaan mudnaanta siin doonaa wanaagga bulshadeenna - anigoo diiradda saaraya fursadaha waxbarashada, ballaarinta adeegyada caafimaadka habdhaqanka, hagaajinta gaadiidka, iyo horumarinta shaqaale xooggan oo ka jira gobolkeenna. Waxaan si qushuuc leh kuu weydiisanayaa codkaaga.

Michael Rosen

(Doorbida Xisbiga Madax-Bannaan)

michael@rosenforwa.com
rosenforwa.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Ma jiro khibrad jago loo doortay.

Khibrad Xirfadeed Kale: Qareen, Ururka Qareennada Gobolka Washington; Maalgaliye; Nafaqeeeye ka shahaadaysan Washington.

Waxbarashada: B.B.A., magna cum laude, Jaamacadda George Washington; J.D., Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Miami; M.S. ee Nafaqada, Jaamacad Qaran ee Daawada Dabiiciga ah.

Adeegga Bulshada: Mutadawac, Democracy Postcarders; Naadiga Rotary ee Mercer Island; Rugaha Ganacsiga ee Mercer Island, Newcastle, iyo Sammamish.

Bayaanka: Anigoo ah jiilka afaraad ee reer Washington oo ku dhashay kuna koray Mercer Island, waxaan daawaday gobolkan oo jidkiisii luminaya — Olympia waxay sii wadaa inay wax badan kharash garayso oo wax yar keento, iyadoo lacagtaada canshuurta ula dhaqmeysa sida jeeg bannaan. Kharashka gobolka wuxuu ka badan labanlaabmay labaatan sanno gudahood halka isla-xisaabtanka, la awoodi karo, badqabka dadweynaha, iyo natiijooyinka caafimaadku ay ka sii dareen, kama soo roonaan.

Waxaan ahay qareen, maalgaliye, iyo nafaqeeeye ruqsad ka haysta Washington. Waxaan u fikiraa si madax-bannaan, raacaa caddeynta, qiimeeyaana natiijooyinka halkii aan ka qiimeyn lahaa fikradaha. Waxaan mudnaanta siin doonaa isla-xisaabtanka, la awoodi karo, iyo hagaajinta natiijooyinka caafimaadka ee qoysaska Gobolka Washington. Degmada 41 waxay mudan tahay wakiil khibrad leh, dalbada anshax maaliyadeed, una dagaallama xalal.



Senatarka Gobolka

Jamie Pedersen

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 419-7340

jamie@peopleforpedersen.org
peopleforpedersen.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Hoggaamiyaha Aqlabiyadda Dimuqraadiga (2025-hadda), Senatarka Gobolka (2013-hadda), Wakiilka Gobolka (2007-2013), Degmada 43aad.

Khibrad Xirfadeed Kale: Madaxweyne Ku-xigeenka Fulinta iyo Lataliyaha Guud ee McKinstry, shirkad injineernimo iyo dhisme oo ku saleysan Seattle kuwaas oo boqollaal shaqaale urur xirfad leh ay ku wanaagsan yihiin dhisme mas'uul ka ah deegaanka (2012-hadda). Qareen, K&L Gates (1995-2012).

Waxbarashada: Dugsiga Sare ee Puyallup, Kulliyadda Yale, Dugsiga Sharci ee Yale.

Adeegga Bulshada: Bixiyay caawimo sharci oo bilaash ah ururrada maaliyad-doonka ahayn ee deegaanka, oo ay ku jiraan Lambert House iyo Seattle Men's Chorus. Ka caawiyay qaxootiga inay ku guuleystaan magangalyo siyaasadeed. Qareenka hoggaaminaya ee mutadawaca ah ee Lambda Legal ee kiiska sinnaanta guurka ee Gobolka Washington. Khasnaji iyo macallinka Dugsiga Axadda, Central Lutheran Church on Capitol Hill. Hoggaamiye koox Sahamin. Qof baaskiil ku taga shaqada.

Bayaanka: Jamie waxaa si ballaaran u aqoonsan ururrada shaqaalaha inuu yahay Hoggaamiyaha Senatka ugu horusocodka badan taariikhda gobolka. Wuxuu hoggaamiyay dadaalka lagu ansixinayo Canshuurta Milyaneerrada iyo canshuurta faa'iidada raasumaalka si hannaankeena canshuureed looga dhigo mid caddaalad badan, loo bixiyo maalgelin qadooyinka dugsiyada guud, daryeelka caafimaadka, iyo taageerada bulshooyinkeenna ugu nugul iyo ganacsiyada yaryar, iyadoo la dhimmayo canshuurta qoysaska shaqeeya.

Hoggaaminta Jamie, gobolkeennu wuxuu dadka reer Washington ka ilaaliyay Trump isagoo mamnuucay wakiillada ICE ee ku dhuumanaya maaskaro gadaasheeda, joojiyay isticmaalka kamaradaha ee kormeerka iyo dhaqangelinta socdaalka, soo celiyay lacagtii Trump ka jaray Qorsheynta Waalidnimada, iyo ilaalinta macluumaadka codbixiyaha ee xasaasiga ah.

Jamie waa horyaal adag oo sinnaanta ah, isaga oo hoggaaminaya dagaalka sinnaanta guurka, xuquuqda madaniga ah ee LGBTQ+, iyo ilaalinta asturnaanta taraanisjandarka. Wuxuu keenay natiijooyin ku saabsan maalgelinta dugsiyada, ka hortagga rabshadaha qoriga, xuquuqda ilmo iska soo rididda, ilaalinta kiraysteyaasha, ficilka cimilada, iyo barnaamijka fasaxa qoyska ee la bixiyo ee Gobolka Washington. Laakiin Jamie wuu ogyahay in shaqadu aysan dhammaan. Waxaa ka go'an helida maalgelinta ku filan ee dugsiyada, wax ka qabashada awoodista guriyeynta, iyo dhisidda nidaamka tareenka fudud oo buuxa ee codbixiyeyaashu ansixiyeen.

Jamie iyo saygiisa, macallin hawlgab ah, waxay leeyihiin afar wiil oo dhigta dugsiyada dadweynaha, waxayna ku nool yihiin Capitol Hill. Jamie waxaa taageeray ururrada shaqaalaha, Naadiga Sierra, U Doodeyaasha Isbahaysiga Qorsheynta Waalidnimada, iyo Senatar kasta oo Gobolka Dimuqraadi ah.

Hannah Sabio-Howell

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(360) 602-2794

info@hannahforwashington.com
hannahforwashington.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Midna.

Khibrad Xirfadeed Kale: Agaasimaha Isgaarsiinta, Working Washington, abaabulaha wadajirka shaqaalaha iyo ururrada shaqaalaha si loo keeno mushaharro sare iyo ilaalin shaqo oo xooggan oo loogu talagalay shaqaalaha mushaharkoodu hooseeyo; Kaaliyaha Sharci-dejinta iyo Khabiirka Isgaarsiinta, Aqalka Wakiillada Gobolka Washington iyo Senatka Gobolka Washington, taageeraya sharci-dejiyayaasha gobolka iyada oo loo marayo cilmi-baaris, istaraatiijiyad, iyo fariin gudbin ku saabsan siyaasado isbeddel leh sida Canshuurta Faa'iidada Raasamaalka, ballaarinta Medicaid ka dib dhalmada, Daah-furnaanta Mushaharka, iyo kuwo kale.

Waxbarashada: BA, Jaamacadda Whitworth (Cilmiga Siyaasadda & Isbaanish, oo leh Sharaf).

Adeegga Bulshada: Xubin, Guddiga Pro-Choice Washington PAC iyo Guddiga Doorashooyinka The Urbanist, ka shaqeynta horumarinta caddaaladda taranka, gaadiidka la isku halleyn karo, guriyeynta la awoodi karo, iyo doorashada musharaxiinta kor iyo hoosba warqadda codbixinta kuwaas oo u dagaallami doona dadka shaqeeya.

Bayaanka: Bixinta kirada, iibsashada guryaha, iyo korinta qoys waa inay noqdaan kuwo la awoodi karo. Sababta aysan sidaas u ahayn waa siyaasiyiin xirfad ka dhigtay oo ilaaliya xaaladda jirta isla markaana heshiisyo la gala danaha gaarka ah ee shirkadaha kuwaas oo kharashyada sare ku baxsha arrintaan. Taasi waa sababta aan u nahay ololaha keliya ee tartankan aan qaadan lacagta PAC-yada shirkadaha.

Guddiga Sharci-dejinta Gobolka Washington, waxaan ka shaqeeyay ballaarinta helitaanka daryeelka caafimaadka, maalgelinta waxbarashada sare, iyo canshuur saarista dadka hodanka ah. Working Washington, waxaan si wadajir ah ula dagaallamay shaqaalaha mushaharkoodu hooseeyo waxaan ka hortagay shirkadaha waaweyn si loo kordhiyo mushaharka, loo xoojiyo heerarka shaqada, loona hubiyo in dhammaan shaqaaluhu helaan ilaalin. Waxaan abaabulay anigoo la shaqeynaya ururrada asaasiga ah ee xuquuqda shaqaalaha, xuquuqda muhaajiriinta, iyo xuquuqda queer si loo joojiyo nasinta canshuurta shirkadaha loogana difaaco Gobolka Washington Trump.

Sida senatarkaaga gobolka ahaan, waxaan u dagaallami doonaa inaan hubiyo in dadka aadka u hodanka ah ay bixiyaan saamigooda caddaaladda ah ee canshuurta si loo helo dugsiiyo wanaagsan, daryeelka caafimaadka, iyo daryeelka carruurta; inaan dhimmo kirada oo aan lahaanshaha guri ka dhigo mid la gaari karo anigoo dhisaya guryo badan; iyo inaan u dhiso dhinaca daryeelka carruurta guud—ugu dambeyntii hoos u dhigaya kharashyada oo Gobolka Washington ka dhigaya mid dhammaanteen noo la awoodi karo.

Waxaa na taageeray horyaallada horusocodka ah iyo ururrada shaqaalaha sida Wakiilka Gobolka Shaun Scott, Xubinta Golaha Magaalada Seattle Alexis Mercedes Rinck, Senatarka Gobolka Rebecca Saldaña, Guddoomiyaha Dekedda Seattle Toshiko Hasegawa, AFT Washington, iyo Xisbiga Qoysaska Shaqeeya. Wax badan ka eeg hannahforwashington.com.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Nicole Macri

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 313-3751

nicole@votenicole.org

www.votenicole.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka (2017-ilaa hadda)

Khibrad Xirfadeed Kale: Anigoo ah Ku-xigeenka Agaasimaha DESC (Xarunta Adeegga Degdegga ah ee Downtown), waxaan gacan ka geystaa kormeerka miisaaniyad \$150 milyan ah oo bixisa guryo taageero leh, daryeel caafimaad oo isku dhafan, iyo adeegyo bulsho oo loogu talagalay kumanaan qof oo la kulmay guri la'aan gobolkeena. Shaqadaydii hore waxaa ka mid ah taageeridda dadka ka badbaaday rabshadaha qoyska iyo shakhsiyaadka la nool naafonimooyinka korriinka.

Waxbarashada: MPA, Dugsiga Evans, Jaamacadda Washington; BA, Cilmiga Bulshada, Jaamacadda Rutgers

Adeegga Bulshada: Madaxweynihii Hore, Isbahaysiga Guriyeynta Dadka Dakhligoodu Yar Yahay ee Washington; Xubin Hore, Guddiga Dib-u-eegista Hey'adeed ee Jaamacadda Seattle; Abaalmarinta Xuquuqda Aadanaha ee Guriyeynta, Xarunta Sharciga Qaranka ee Guri la'aanta; Waxaa Seattle Magazine iyo Seattle Met ugu magac-dareen mid ka mid ah dadka ugu saameynta badan Seattle.

Bayaanka: Anigoo ah Wakiilkaaga Gobolka, waxaan hoggaamiyey dagaalka lagu ilaalinayo helitaanka ilmo iska soo rididda, wax ka qabashada isbeddelka cimilada, iyo ka dhigista guryaha iyo daryeelka caafimaadka kuwo la awoodi karo. Waxaan hormuud ka ahaa sharciyo taariikhi ah si looga hortago kor-u-qaadidda xad-dhaafka ah ee kirada iyo hirgelinta caddaalad canshuureed oo taariikhi ah si loo maal geliyo dugsiyada iyo daryeelka carruurta, loo yareeyo kharashyada qoysaska shaqeeya iyo dadka waayeelka ah, loona dhimmo canshuuraha ganacsiyada yaryar.

Waxaan ka shaqeeyay dhimmista rabshadaha qoryaha, wax ka qabashada dhibaataada fentanolka, iyo ilaalinta deriska muhaajiriinta iyo LGBTQ+ ka dhanka ah faragelinta federaalka ee nacaybka leh. Taageeradiinna joogtada ah, waxaan sii wadi doonaa horumarinta caddaaladda dhaqaalaha iyo fursadda qof walba. Waxaan *maya* ugu codeynayaa dhammaan hindisayaasha gobolka oo dhan, waxaana rajeynayaa in bulshadeennu ay ka midowdo cabbirradan waxyeellada leh.

Alby Clendennin

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

albyforwashington@gmail.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibrad Xirfadeed Kale: Hadda waxaan u adeegaa Agaasimaha Deganaanshaha ee Jaamacadda Washington. Waxaan kormeeraa hawlaha maamulka, maamulaa koox Hoggaamiyeyaal Arday ah, waxaan hubiyaa badqabka ku dhawwaad 10,000 degane inta lagu jiro wareegyada shaqada habeenkii. Mas'uuliyadahayga aasaasiga ah waxaa ka mid ah maaraynta miisaaniyadda, wada-shaqeynta barnaamijka iyo horumarinta ardayda, iyo u adeegidda Sarkaalka Dhegaysiga ee Kiisaska Anshaxa Ardayga.

Waxbarashada: M.A. - Maamulka Arrimaha Ardayda, Jaamacadda Appalachian State, B.A. - Daraasadaha Caalamiga ah oo diiradda saaraya Amniga iyo Diblomaasiyadda iyo Takhasus Yar Cilmiga Siyaasadda, Jaamacadda West Florida

Adeegga Bulshada: Wakhtigeysiga intiisa badan waxaan ku qaataa taageeridda iyo u shaqeynta ardayda UW.

Bayaanka: Waxaan isu arkaa Dimuqraadi horusocod ah oo wax ku ool ah. Mudnaantayda waxaa ka mid ah yareynta saameynta shirkadaha ee siyaasadda, nidaaminta sirdoonka macmalka ah si looga hortago qiimeyn aan caddaalad ahayn, iyo xoojinta adeegyada dadweynaha si qof kasta oo reer Washington ah u guuleysto.

Qof kasta oo reer Washington ah wuxuu mudan yahay dugsi weyn, xaafad lagu socon karo, guri la awoodi karo, iyo dowlad dadka ka hormarisa faa'iidada. Waayo-aragnimadayda anigoo ah nin gay ah, wiilka macallin, iyo agaasimaha deganaanshaha waxay i bareen qiimaha dhegaysiga, u adeegidda dadka kale, iyo dhisidda bulshada. Anigoo ah wakiilkaaga gobolka, waxaan taageeri doonaa fikrado geesinimo leh waxaanan aaminsanahay in wax dhibaato ah aysan ahayn in la xalliyo.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Shaun Scott

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 437-7826

organizewithshaun@gmail.com

BolderWashington.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka Washington, Degmada Sharci-dejinta ee 43aad (2025-hadda). Anigoo ah sharci-dejiye xilli-koowaad ah, waxaan ka shaqeeyay inaan joojiyo ka-dhaafitaannada canshuurta shirkadaha oo dhan \$645 milyan oo kharash laba sanno ah oo la ilaaliyay oo loogu talagalay guriyeynta dadka dakhligoodu hooseeyo, yareynta khatarta dabka duurjoogta, dugsiyada dadweynaha, iyo waxbarashada sare. Labadii olole ee aan kursigan u galay, waxaa i taageeray Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, U doodayaasha Isbahaysiga Qorsheynta Waalidnimada, Ficilka Ilaalinta Washington, iyo kuwo kale.

Khibrad Xirfadeed Kale: Agaasimaha Fulinta, Got Green (2025-hadda). Falanqeyaha Siyaasadda, Shabakadda Waxqabadka Saboolnimada Gobolka oo Dhan (2020-2024).

Waxbarashada: Taariikhda, daraasadaha BA, Jaamacadda Washington (2003-2008).

Adeegga Bulshada: Xubin ka tirsan Xisbiga Hantiwadaaga Dimuqraadiga ee Seattle tan iyo 4-tii Janaayo 2017; Madaxa Guddiga Xaafadda, Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta ee 43aad (2020-2023).

Bayaanka: Xilligeygii ugu horreeyay ee xafiiska 2025, lixda shirkadood ee ugu waaweyn Gobolka Washington waxay \$2.1 milyan ku bixiyeen u ololeynta Olympia. Oligarch-yadani waxay filayaan soo celin maalgashigooda ah oo ku timaadda deeqo shirkadeed oo waaweyn iyo jaritaanno lagu sameeyo adeegyada muhiimka ah ee inteenna kale ku tiirsan nahay. Waxa keliya ee ka hor istaagaya inay helaan waa dhaqdhaqaaqyada fasalka shaqeeya ee ka baxsan caasimadda gobolka, iyo halgamayaasha fasalka shaqeeya ee gudaha ku jira. Waxaan xiiseynayaa inaan dib ugu noqdo shaqada dadka Degmada Sharci-dejinta ee 43aad anigoo ah hantiwadaagii ugu horreeyay ee furan ee Golaha Sharci-dejinta Gobolka Washington laga soo bilaabo 1914.



Senatarka Gobolka

Manka Dhingra

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

info@electmanka.com

electmanka.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatarka Gobolka; Ku-xigeenka Hoggaamiyaha Aqlabiyadda; Guddoomiye: Guddiga Sharciga & Caddaaladda; Xubin Guddiga: Hababka & Dhaqaalaha; Deegaanka, Tamarta & Teknolojiyada

Khibrad Xirfadeed Kale: Ku-xigeenka Sare ee Xeer Ilaaliyaha, Degmada King (20 sanno); Guddoomiye: Qaybta Beddelka Daaweynta; Macallinka Tababarka Faragelinta Xasaradaha: Guddiga Tababarka Caddaaladda Dambiyada ee WA (10 sanno). Tababar qaataha: Qaybta Dambiilayaasha Galmada ee Rabshadaha Leh, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud. Karaaniga: Maxkamadda Sare ee Gobolka.

Waxbarashada: Shahaadada

Sharciga UW; B.A. Taariikhda iyo Cilmiga Siyaasadda, UC Berkeley

Adeegga Bulshada: Qaataha: PTSA abaalmarinnada "Qorfaha Dahabka ah," "Halyeyga Carruurta" iyo NAMI "Halyeyga Caafimaadka Dhaqanka". Hooyada buskudka Girl Scout; tababaraha Kooxda Jarta, Naadiga Xisaabta iyo Male-awaalka Meesha Loo Socdo; xubin guddiga Hopelink; Aasaase-wadaagaha API Chaya, (taageeraya dadka ka badbaaday rabshadaha ku saleysan jinsiga).

Bayaanka: Waxaan mudan nahay hoggaamiyeyaal leh diiwaan la caddeeyay oo dadka isku keena si ay u xalliyaan dhibaatooyin adag. Waxaan dhegaystay bulshadeenna si aan u keeno natiijooyin macno leh. Shaqadayda waxaa hago cilmiga iyo xogta, waxayna ku qotontaa wada-shaqeyn, daacadnimo, iyo hufnaan. Waxaan hoggaamiyay dadaallo lagu xoojinayo badqabka dadweynaha, lagu ballaarinayo daryeelka caafimaadka, dhaqanka, lagu ilaalinayo xorriyadda taranka, laguna difaacayo xuquuqda madaniga.

Waxaan u baahan nahay hoggaamiyeyaal geesinimo leh, oo u heellan caddaaladda. Waxaan la shaqeeyay dadka ka badbaaday, hay'adaha fulinta sharciga iyo ururrada bulshada si loo hagaajiyo adeegyada dhibbanayaasha, loo xoojiyo isla-xisaabtanka, loo ballaariyo hannaannada ka jawaabidda xasaradaha, loona xiro dadka la kulmaya cudurrada dhimirka iyo qabatinka daaweyn.

Mid kasta oo naga mid ah door ayuu ku leeyahay barwaaqada gobolkeenna.

Waa inaan sii wadnaa horumarinta sinnaanta bulshada, maalgashiga mas'uuliyadda leh ee gaadiidka, iyo awood-siinta carruurteenna si ay u noqdaan hoggaamiyeyaasha aan u baahan nahay si aan u sii wadno korriinkeena dhaqaale ee weyn. Gobolkeennu waa inuu sii ahaadaa hoggaamiye ku jira hal-abuurka iyo abuurista fursado qof walba ah.

Codkiinna, waxaa sharaf ii ahaan lahayd inaan sii wado ka shaqeynta ilaalinta dimuqraadiyadeenna, hagaajinta helitaanka daryeelka caafimaadka, difaaca shaqaalaha, ilaalinta dadka waayeelka ah, ganacsiyada yaryar, iyo muhaajiriinta, iyo u dagaallanka meere ammaan ah oo lagu noolaan karo. Taageerooyinka:

Qorsheynta Waalidnimada, One America Votes, Ficilka Ilaalinta Washington, ururrada shaqaalaha, kalkaaliyeyaasha, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada ee Eastside oo dhan.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Roger Goodman

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 736-8009

roger@rogergoodman.org

rogergoodman.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka, 2007-hadda; Guddoomiye, Guddiga Badqabka Bulshada ee Golaha; Guddoomiye, Guddiga Sharciga Qoran; Xubin Sare, Guddiga Xuquuqda Madaniga iyo Garsoorka; Guddiga Adeegyada Aadanaha iyo Waxbarashada Hore.

Khibrad Xirfadeed Kale: Qareen ku jira shaqo gaar ah; Ururka Qareennada Degmada King, 2000-08; Agaasimaha, Guddiga Tilmaamaha Xukunka Gobolka Washington 1998-2000; Golaha La-talinta Sharciga iyo Caddaaladda Gobolka Washington; Madaxa Shaqaalaha Kongareeska iyo Agaasimaha Sharci-dejinta, 1988-1995.

Waxbarashada: Kuliyadda Dartmouth, AB, Khabiir Sare; Jaamacadda George Washington, JD; Jaamacadda Harvard, MPA.

Adeegga Bulshada: Hopelink, Guddiga Agaasimeyaasha; Madaxweyne, Ururka Xaafadda Lakeview ee Kirkland; Naadiga Rotary; Guddiga La-talinta Caafimaadka Dhaqanka ee Degmada King; aabbe ku faanaya laba carruur.

Bayaanka: Waxaa sharaf ii ah inaan idinku matalo Olympia, anigoo hoggaaminaya dadaallo lagu hagaajinayo badqabka dadweynaha, lagu dhimmayo rabshadaha qoryaha laguna caawinayo dadka ku jira xasaradaha. Waxaan ansixiyay sharciyo lagu ilaaliyo dadka ka badbaaday dambiyada, lagu ballaariyo adeegyada mukhaadaraadka iyo caafimaadka dhimirka, laguna hagaajiyo isla-xisaabtanka iyo tababarka hey'adaha fulinta sharciga.

Waxaan u codeeyay in la dhimmo culayska canshuurta ee dadka shaqeeya iyo ganacsiyada yaryar iyo in la bixiyo cuntooyin dugsi oo bilaash ah iyo daryeel carruur oo la awoodi karo. Codkiinna, waxaan sii wadi doonaa inaan hormuud ka noqdo maalgelinta K-12, maalgashiyada guriyeynta la awoodi karo, waxqabadka cimilada, iyo xuquuqda taranka. Aan sii wadno wada shaqeynta si aan u ilaalino bulshooyinkeenna iyo qoysaskeenna.

JoAnn Tolentino

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(401) 216-9663

jotolentino@protonmail.com

votejoann.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Madaxa Guddiga Xaafadda, shan sanno.

Khibrad Xirfadeed Kale: Macallimad muusig oo 35 sanno ah. Xirfadle hawlgab ah oo ku shaqeyn jirtay iibka software-ka Maamulka, Khatarta, iyo U-hoggaansanaanta.

Waxbarashada: Waxay dhigatay Kuliyadda Wenatchee Valley iyo Jaamacadda Seattle Pacific, takhasuska Daaweynta Muusigga.

Adeegga Bulshada: Waxay u hurtay boqolaal saacadood hawlo xididdada bulshada ah oo taageeraya dimuqraadiyadda; waxay xilliyada xagaaga la shaqeysay dhalinyaro xiran.

Bayaanka: Degmada 45aad waxay mudan tahay natiiyooyin, ma aha ciyaaro xisbiyeed. Ma ihi siyaasi; waxaan ahay macallimad, hooyo, iyo ayeeyo aaminsan in dadka la hor mariyo. Waxaan dib ugu soo celin doonaa isla-xisaabtanka Olympia anigoo difaacaya xuquuqdeenna dastuuriga ah, daah-furnaanta, iyo caddaalad siman. Waa inaan hirgelinaa doorashooyin sugan, awood siinaa waalidiinta, oo mudnaan siinaa heer-sare tacliimeed. Waxaan la dagaallami doonaa xeerarka kor u qaadaya kharashyada guryaha, waxaana hormuud ka noqon doonaa tamar la awoodi karo. Waxaan u baahan nahay xalal soo-kabasho oo la caddeeyay oo loogu talagalay guri la'aanta iyo taageero buuxda oo loo fidiyo hey'adaha fulinta sharciga. Waxaa i taageeray Xisbiga Jamhuuriga ee Degmada King. Waxaan diyaar u ahay shaqada adag ee dib loogu soo celinayo kalsoonida iyo difaacidda xorriyaddeenna.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Vanessa Kritzer

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 286-8683
vanessa@electvanessakritzer.com
www.electvanessakritzer.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Xubinta Golaha Magaalada Redmond (2020–hadda); Madaxweynaha Golaha (2024–2025); Madaxweyne Kuxigeenka Golaha (2022–2023); PCO Dimuqraadi ah (2017–Hadda).

Khibrad Xirfadeed Kale: Agaasimaha Fulinta, Ururka Washington ee Ilaalinta Dhulka. Horey uga shaqaysay Microsoft, Ururka Codbixiyeyaasha Ilaalinta Deegaanka, iyo Latin America Working Group.

Waxbarashada: Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha (MPA) iyo Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga (MBA), Jaamacadda Washington; BA, Kuliyadda Vassar.

Adeegga Bulshada: Xubinta Guddiga ee hadda ee Hopelink, Golaha Soo-kabashada Salmonka ee WRIA 8 (Guddoomiye), Iskaashiga Gaadiidka Eastside, OneRedmond, iyo Isbahaysiga Duurjoogta iyo Madadaalada Washington. Xubin PTA ee Norman Rockwell. Horey u soo noqotay Regent-ka Jaamacadda Washington, Guddoomiyaha Guddiga La-talinta ee Degmada Ilaalinta King, Guddiga Qorsheynta Redmond, Xubin Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka ee WA.

Bayaanka: Anigoo ah hooyo waayo-aragnimo u leh dowladda, ururrada aan macaash doonka ahayn, iyo teknolojiyada, waxaan leeyahay xirfadaha iyo aragtida aan ugu doodi karo mudnaanta bulshadeenna. Anigoo ka tirsan Golaha Magaalada Redmond, waxaan hirgeliyay guryo la awoodi karo, ballaariyay waddooyinka baaskiilka iyo gaadiidka dadweynaha, kordhiyay badqabka dadweynaha, oo dardargeliyay tallaabada cimilada. Anigoo ah Wakiilkaaga, waxaan ka shaqeyn doonaa taageeridda dugsiyada, horumarinta daryeelka carruurta iyo awoodda qoysaska, ilaalinta kaymaha iyo beeraha, iyo difaacista xuquuqda madaniga ah.

Waxaa Taageeray: Dimuqraadiyiinta 45aad, Xildhibaanad DelBene, Senator Dhingra, Xubnaha Golaha Degmada Perry iyo Balducci, Meeyarrada Redmond, Kirkland, Woodinville, Duvall, Sammamish, iyo 50+ hoggaamiyeyaal la doortay, Isbahaysiga Qorsheynta Waalidnimada, Ficilka Ilaalinta Washington, Ururka Waxbarashada Washington, Golaha Shaqaalaha Gobolka, iyo kuwo kale!

John P Gibbons

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 260-2505
john98045@gmail.com

Sawir lama soo gudbin

Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibrad Xirfadeed Kale: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Waxbarashada: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Adeegga Bulshada: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Bayaanka: Wax macluumaad ah lama soo gudbin



Senatarka Gobolka

Javier Valdez

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

javiervaldez46senate@gmail.com

javiervaldez.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatarka Gobolka, Guddoomiyaha Guddiga Dowladda Gobolka, Arrimaha Qabiilooyinka, iyo Doorashooyinka. Wakiil Gobolka oo hore.

Khibrad Xirfadeed Kale: Javier wuxuu u shaqeynayay Magaalada Seattle in ka badan labaatan sanno, halkaas oo uu hoggaamiyay barnaamijyo lagu ballaarinayo fursadaha ganacsiyada ay leeyihiin haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay.

Waxbarashada: Javier oo ah wiilka iyo awoowga shaqaalaha beeraha iyo shaqaalaha xoogsatada ah, wuxuu Shahaadadiisa Jaamacadda ee Maamulka Ganacsiga ka qaatay Jaamacadda Washington iyo Shahaadadiisa Mastarka ee Maamulka Dadweynaha ka qaatay Kuliyadda Baruch, Jaamacadda Magaalada New York.

Adeegga Bulshada: Javier wuxuu ka soo shaqeeyay guddiga Rugta Ganacsiga Hispanic-ga ee Gobolka Washington, Madaxweynaha Hispanic Seafair, iyo madaxweynaha AFSCME Local 21C.

Bayaanka: Javier waa hoggaamiyaha Olympia ee iska hor taagaya Trump, hoggaaminayana dadaalka lagu mamnuucayo in wakiillada ICE ay xirtaan maaskaro, isla markaana laga hortagayo cabsi gelinta bulshooyinkeenna. Wuxuu sidoo kale ka caawiyay buuxinta lacagtii Trump ka jaray Qorsheynta Waalidnimada, wuxuu diiday saaxiibada Trump inay xadaan xogta codbixiyeyaasha, wuxuuna mamnuucay wakiillada federaalka inay isticmaalaan kamarado si ay ugu basaasaan soo-galootiga.

Sida adiga oo kale, kharashaadka sii kacaya isaga sidoo kale way saameeyeen. Taasi waa sababta uu uga caawiyay dib-u-habeynta sharciyada duugga ah ee aagagga si aan u dhisno guryo badan oo la awoodi karo, u saaro xad kororka kirada, una codeeyay in milyaneerrada iyo kuwa aadka u hodanka ah la canshuuro si loo bixiyo qadada dugsiga ee bilaashka ah, dhimmista canshuurta ganacsiyada yaryar, iyo maalgeshiyada daryeelka caafimaadka.

Javier waa halgame ka tirsan sharci-dejinta oo ka shaqeeya ka hortagga rabshadaha qoryaha, isagoo qoray sharciyo mamnuucay qoryaha aan raad-raaca lahayn iyo qasnaddaha qaadka sare leh. Kalfadhiga xiga, wuxuu rabaa inuu meel mariyo sharci mamnuucaya in qoryo lagu qaato jardiinooyinkeenna iyo goobaha bandhigyada.

Javier wuxuu ku daraa cod gaar ah Olympia, isagoo ka mid ah Latinos-kii ugu horreeyay ee Senatka, wuxuuna bixiyaa aragti sinnaaneed oo loo baahan yahay go'aannada siyaasadda. Javier wuxuu ku faanayaa inuu taageero ka helay: Dimuqraadiyiinta Degmada 46aad, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, U doodeyaasha Isbahaysiga Qorsheynta Waalidnimada, Ficilka Ilaalinta Washington, One America Votes, Ururka Kalkaaliyeyaasha Gobolka Washington, iyo kuwo kale.

Sandra Stephens

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 363-5189

Sandy.Stephens11@gmail.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Waxaa loo doortay Ururka Qaranka ee Kalkaaliyeyaasha Pro-Life laba xilli: 1988-1992

Khibrad Xirfadeed Kale: Intii aan ku jiray xirfaddayda ballaaran ee kalkaalisada, marnaba shaqo keliya iguma ahayn. Anigoo ah Kalkaaliso Khaliinka Caafimaadka, kana shaqeynaya isbitaallo kala duwan, xarumaha daryeelka guriga ee caafimaadka maskaxda, xarumaha istaroorogga, rugaha caafimaadka, iyo xarumaha caafimaadka bulshada, lix iyo tobankii sanno ee ugu dambeeyay waxaan ahaa kalkaalisada mas'uulka ah ee Isbitaalka Northwest ee UW, dabaqa 5aad.

Waxbarashada: Waxay qalin-jebisay 1978 iyadoo ah Kalkaaliso Diiwaan Gashan oo haysata Shahaadada Jaamacadda ee Sayniska oo ka timid Jaamacadda Sayniska Caafimaadka ee Oregon.

Adeegga Bulshada: Waxaan ka soo shaqeeyay guddiyada isbitaallada, ka shaqeeyay quudinta dadka hoy la'aanta ah, mutadawac ka noqday xabsiyada dhallinyarada, Kooxaha Jawaabta Degdegga ah ee Salvation Army, iyo wax badan oo kale.

Bayaanka: Laga soo bilaabo da'yar waxaan rabay inaan caawiyo kuwa ugu nugul ee inaga mid ah. Waxaan ahay ayeeyo korisay toddoba carruur ah oo jecel qarankeenna, iyo Dastuurkeenna. Waxaan aaminsanahay xurmada nolosha, iyo xorriyadda damiirka qofka oo ah aasaaska bulshadeenna. Khatarta ugu weyn ee tan, iyo hab-nololeedkeenna ee Gobolka Washington, waa burburinta socota ee wax-ku-darsiga dhaqaale ee jiilal na siiyay meel wanaagsan oo aan ku korinno qoysaskeenna. Tan waxaa sameynaya mashiinka siyaasadeed ee Xisbiga Dimuqraadiga ee hadda jira, kaas oo aan hadda xisbi ahayn, balse ah shabakad dambiyeed. Saldhigga maaliyadeed ee tan waa xatooyada lacagaha canshuur-bixiyeyaasha iyada oo loo marayo ururro aan macaash doon ahayn oo aan la hantidhawrin, kuwaas oo markaas loo dhaqay siyaasiyiinta. Xatooyadan waa waxa wadata burburka adeegyada iyo kordhinta canshuuraha.

Waxaan ku faanayaa taageerada aan ka helay Xisbiga Jamhuuriga ee Degmada King. Barnaamijkoodu waa mid aad u wanaagsan iyo matallaad wanaagsan oo siyaasaddayda ah. Waxaan ku boorinayaa dhammaan kuwa dareemaya in codkoodu uusan muhiimad lahayn inay i doortaan. Waxaan ku nool nahay wakhtiyo dad badan oo sii kordhaya ay soo baraarugayaan, annaga oo wadajirana waan sameyn karnaa farqi.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Gerry Pollet

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

info@gerrypollet.com
gerrypollet.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilkaaga Gobolka tan iyo 2012.

Khibrad Xirfadeed Kale: Macallin ka tirsan Dugsiga Caafimaadka Dadweynaha ee UW; qareen danta dadweynaha; Agaasimaha Wadnaha Ameerika ee Northwest, kooxda muwaadiniinta ee hoggaamisa dadaallada nadiifinta deegaanka ee goobta Nukliyeerka Hanford, kormeera barnaamijka keliya ee gobolka ee ardayda sharciga deegaanka Qabiilka ee shaqo-gacan-ku-hayn ah.

Waxbarashada: Dugsiga Sharciga UW

Adeegga Bulshada: Waxaa marar badan lagu maamuusay “Sharci-dejiyaha Sannadka” kooxaha u doodaya kulliyad la awoodi karo, xuquuqda dadka naafada ah, waxbarashada gaarka ah, iyo dowlad furan. Waxaa “Sunshine in Government” ku maamuusay Codbixiyayaasha Ururka Haweenka. Wuxuu ka tirsan yahay Guddiga Isbahaysiga Washington ee Dowladda Furan. Wuxuu helay Abaalmarinta Adeegga Bulshada ee Dugsiga Caafimaadka Dadweynaha ee UW. Dhaqdhaqaaqe PTSA oo muddo dheer ah.

Bayaanka: Waxaan hoggaamiyay guulo horusocod ah oo waaweyn. Waxaa jira wax badan oo la qabanayo. Waxaan hormuud u ahaa Canshuuraha Milyaneerrada iyo faa’iidada raasumaalka si dadka ugu hantida badan ay u bixiyaan qaybtooda caddaaladda ah si loo maalgeliyo dugsiyada, daryeelka caafimaadka, iyo daryeelka carruurta. Waxaan ka shaqeynayaa inaan hubiyo in carruurteennu awoodaan inay ku noolaadaan Seattle, waayeelladuna ay ku duqoobi karaan guryahooda iyada oo la dhisayo guryeyn la awoodi karo, la dhimayo canshuurta iibka, kulliyaddana laga dhigayo bilaash. Waxaan la dagaallamay Trump anigoo meel mariyay mamnuucidda maaskaro ICE, maalgeliyay helitaanka ilmo iska soo rididda, oo ilaaliyay muhaajiriinta. Mar walba waxaan ka hor istaagay danaha gaarka ah.

Waxaa Taageeray: Qorsheynta Waalidnimada; Ficilka Ilaalinta Washington; Kalkaaliyeyaal; Macallimiin; Golaha Shaqaalaha; Isbahaysiga Mas’uuliyadda Hubka; Xildhibaanadda Kongareeska Pramila Jayapal; iyo kuwo kale.

Will Dreher

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(360) 320-6918
info@willdreher.com
willdreher.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Adeege dadweyne oo muddo dheer ahaa oo dacwad ku oogay dadkii rabshadaha sameeyay January 6th, difaacay xuquuqda madaniga ah, una soo shaqeeyay karraani ahaan Garsooraha Maxkamadda Sare ee Mareykanka Elena Kagan; musharax markii ugu horreysay tartamaya.

Khibrad Xirfadeed Kale: Qareen dacwad ku oogaya shirkadaha saliidda, tubaakada, iyo Al si uu u ilaaliyo macaamiisha iyo bulshooyinka; hore u ahaa Kaaliyaha Qareenka Mareykanka (xeer-ilaaliye federaal ah) oo dacwad ku oogay dadkii rabshadaha sameeyay January 6th, dembiyada nacaybka iyo rabshadaha, iyo xadgudubyada xuquuqda madaniga ah ee ay geysteen saraakiil; qareen tamarta iyo deegaanka taageera; macallin dugsi dadweyne oo fasalka 4aad ah; cilmi-baare ka tirsan ururro siyaasadeed oo ku xiran ururrada shaqaalaha.

Waxbarashada: BSFS, Jaamacadda Georgetown; JD, Dugsiga Sharciga Harvard.

Adeegga Bulshada: Maalinta Sharciga Dhallinyarada, Guddiga Sharciga Dambiyada, Ururka Qareennada Federaalka; Kaniisadda Katooliga St. Bridget; Ururka Mareykanka ee Caddaaladda; tababaraha kubbadda softball ee gabdhaha NESLL.

Bayaanka: Ma rabtaa musharax khibrad leh oo leh fikrado cusub halkii aad ka heli lahayd hadallo duugoobay? Anigoo ahaa macallin hore, waxaan leeyahay qorshe aan si buuxda ugu maalgelinayo dugsiyada kuna hagaajinayo waxqabadka dugsiyada, anigoo isla markaana dejinaya ilaalinno warbaahinta bulshada ah oo carruurta loogu talagalay. Waxaan yareyn doonaa caqabadaha xafiisyada, maalgelin doonaa guryeyn la awoodi karo, daryeel carruur, iyo gaadiid dadweyne, waxaanan hagaajin doonaa canshuuraha dib-u-dhaca leh. Waxaan hirgelin doonaa tallaabooyin badqabka dadweynaha ah oo ku saleysan caddeyn, waxaanan dowladdeenna kula xisaabtami doonaa lacagaha canshuurta. Waxaana ahay musharaxa *keliya* ee ballanqaadaya inuu si xooggan u nidaamin doono teknolojiyada si loo gaabiyo faafinta macluumaadka khaldan ee Al ee aan joogsiga lahayn, shaqo lumiska ka dhasha Al/otomaatiga, iyo koritaanka xarumaha xogta.

Waxaa i taageeray Qareenka Magaalada Erika Evans, Xubinta Golaha Magaalada Dionne Foster, Dimuqraadiyiinta Kulliyadda, iyo kuwo kale.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Darya Farivar

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

info@daryaforhouse.com
daryaforhouse.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Darya Farivar waa Wakiilka Gobolka Washington ee Degmada Sharci-dejinta ee 46aad, waana haweeneydii ugu horreysay ee Bariga Dhexe ka soo jeedda ee loo doorto Sharci-dejinta Gobolka Washington.

Khibrad Xirfadeed Kale: Darya waxay u adeegtaa sidii Khabiirka ADA & Sinnaanta Naafada ee Xafiiska Fulinta Degmada King, halkaas oo ay ka shaqeyso ballaarinta helitaanka, sinnaanta, iyo ka-mid-noqoshada bulshooyinka nugal.

Waxbarashada: B.A., Jaamacadda Redlands.

Adeegga Bulshada: Guddoomiye-Wadaag Guddiga Haweenka ee Seattle; Guddoomiyaha Siyaasadda ee Golaha La-talinta Waxbarashada Gaarka ah ee Gobolka; Xubin Guddiga Peyvand; Xubin Guddiga Isbahaysiga Washington ee La Xisaabtanka Booliiska; waxaa loo aqoonsaday Hormuudka Bulshada Naafada ee Isbahaysiga Shaqada Bulshada iyo sharci-dejiyaha sannadka ee SEIU 775.

Bayaanka: Waxaan aaminsanahay in dowladdu si fiican u shaqeyso marka hoggaamiyeyaashu dadka dhageystaan, dhibaatooyinka aqoonsadaan, oo keenaan xalal dhab ah. Markii Lake City ay lumisay dukaan raashin weyn, waxaan aragnay sida daloolada sharci ee shirkadaha ay xaafadaha uga tagi karaan iyaga oo aan helin cunto iyo farmashiyo. Taasi waa sababta aan u meel mariyay sharci ka hortagaya in dukaamadu ka hor istaagaan dukaamo raashin cusub iyo farmashiyo. Markii qoysasku ku dhibtoodeen helitaanka daryeel, daryeel-bixiyeyaashuna la kulmeen caqabado shaqo, waxaan meel mariyay sharci ballaarinaya shaqaalaha daryeel-bixiyeyaasha. Taasi waa nooca hoggaaminta wax-ku-oolka ah, xalalka diiradda saarta ee aan maalin kasta u keeno Olympia.

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada 46th, Pro-Choice Washington, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, Xeer Ilaaliyaha Guud Brown, iyo Xildhibaanadda Kongareeska Jayapal.

Rodney 'Star' Thornley

(Doorbida Xisbiga Madax-Bannaan)

(206) 561-1771
star1398105@yahoo.com
rthornley.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Midna

Khibrad Xirfadeed Kale: 35-sanno Ururka Waxbarashada ee Lake Washington. 2 jeer Wakiilka Gobolka WEA. Hore u ahaa Madaxweyne laba xilli oo Ururka Mas'uuliyiinta ee PNBOA. Xoghaye hadda ah iyo raadraac 25 sanno oo adeeg guddi ah. Madaxweynaha Ururka Iskiiga Biyaha ee Pacific Northwest iyo Naadiga Iskiiga Lake Washington. Hore u ahaa Madaxweynaha Naadiga Iskiiga Biyaha ee LakeSammamish Ka-qaybqaate guddiga "Trafficking" ee Seattle Uber.

Waxbarashada: Kuliyadda Bulshada Seattle Central; Kuliyadda Seattle Pacific; Jaamacadda Washington

Adeegga Bulshada: Mutadawac - qaybta gargaarka degdegga ah ee Husky Football Basketball. Macallin hadda ah oo First Aid/CPR/AED ah. Darawal ruug-caddaa ah oo loogu talagalay Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee Seattle Seafair. Isku-duwaha barnaamijka barafka biyaha ee dhalinyarada magaalada dhexdeeda. Isku-duwaha "Seattle Night Out" ee xaafaddayda UDistrict.

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa sidii madax-bannaan sababtoo ah Olympia waxay u baahan tahay isbeddel dhaqan. Saraakiil badan oo la doortay waxay raacaan hoggaanka xisbiga halkii ay diiradda saari lahaayeen dadka ay u adeegaan. Waan ogahay in tani ay noqon doonto fuulid adag maadaama aan ahay musharax markii ugu horreysay tartamaya, laakiin waxaan diyaar u ahay inaan shaqada qabto. Mudnaantaydu waa dhalashada Gobolka Washington ee deggeneyaasha aan dukumentiyada lahayn, waddo kulliyadeed oo saddex sanno ah, isla-xisaabtan maaliyadeed, iyo dowlad dhageysata muwaadiniinta ka hor inta aysan lacagtooda kharash gareyn. Codbixiyeyaashu waxay mudan yihiin xalal wax-ku-ool ah, dood daacad ah, iyo wakiillo aan lagu xakameyn siyaasadda xisbiyada. Booqo websaydkayga si aad faahfaahin dheeraad ah uga hesho mowqifyadayda.



Senatarka Gobolka

Claudia Kauffman

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(253) 335-1851

info@voteclaudiakauffman.com

www.voteclaudiakauffman.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatarka Gobolka ee Degmada Sharci dejinta ee 47aad tan iyo 2022

Khibrad Xirfadeed Kale: Xiriiriyaha Arrimaha Dowladaha Dhexdooda ee Qabiilka Hindida Muckleshoot; Aasaase-wadaag, Native Action Network

Waxbarashada: Shahaadada jaamacadeedka labada sanno, Kuliyadda Northwest Indian; Shahaadada Maamulka Mashruuca, Dugsiga Ganacsiga ee UW

Adeegga Bulshada: Guddoomiyihii hore ee Guddiga Maamulka Kuliyadda Green River. Waxaan sidoo kale helay abaalmarinnada badan oo ku saabsan **Adeegga Bulshada:** Abaalmarinta Adeegga Bulshada ee Adeline Garcia, Guddiga Caafimaadka Hindida Seattle; Abaalmarinta Aqoonsiga Adeegga, Guddiga Maamulka Kuliyadda Green River; Abaalmarinta U Doodaha Carruurta, Isbahaysiga Carruurta; Abaalmarinta Golden Crayon, Isbahaysiga Waxqabadka Waxbarashada Hore; Abaalmarinta Guddoomiyaha Gobolka ee Heerka Sare ee Tabaruga Noloshu oo Dhan, Guddoomiye Christine Gregoire

Bayaanka: Bulshadeennu waxay joogtaa isgoys halkaas oo kororka qiimaha nolosha uu halis gelinayo xasilloonida qoys kasta. Anigoo ah Senatarkiina Gobolka, mudnaantaydu weli way cadahay: ka dhigista Washington mid qof walba awoodi karo. Waa inaan wax ka qabannaa dhibaataada guryaha annagoo kordhinayna sahayda kana ilaalinayna kiraystayaasha qiime-koror ugaarsi ah. Waxaan hormuud ka noqday sharci lagu dhisayo guryo badan, waxaana sii wadi doonaa dagaalka loogu jiro guryaha dadka dakhligoodu dhex-dhexaadka yahay si dadku ugu noolaadaan halka ay ka shaqeeyaan.

Waan ogahay sida ay tahay in la isku dheellitiro kirada iyo kharashyada daryeelka caafimaadka, raashinka iyo gaaska, iskuna daydo in dhammaan la maareeyo. Waxaan ka shaqeeyay dhimista canshuurta hantida ee waayeelka, waxaana ballaariyay helitaanka daryeelka carruurta ee waalidiinta shaqeeya. Waa inaan xaqiijinnaa in shabakadeenna badbaadada bulshada ay ku filan tahay inay qabato kuwa dib u dhacaya iyadoo la dhisayo dhaqaale halka shaqooyinka mushaharka lagu noolaan karo ay yihiin heerka caadiga ah, ee aysan ahayn wax ka reeban.

Waxaan u tartamayaa si aan u xaqiijiyo in Koonfurta Degmada King ay leedahay hoggaamiye la tijaabiyay oo fahmaya caqabadaha degmadeenna kala duwan. Waxaan ku faanayaa in ay i taageereen Duqeyda Auburn, Covington, iyo Kent, Madaxa Fulinta Degmada King Girmay Zahilay, Dimuqraadiyiinta Degmada 47aad, Golaha Shaqaalaha Gobolka, iyo kuwo kale oo badan. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga si aan u sii wado shaqada loogu jiro Washington caddaalad ah, loo dhan yahay, lana awoodi karo.

Kristina Soltys

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 227-1856

kristina@kristinaforsenate.com

kristinaforsenate.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Golaha Magaalada Covington, 2019 ilaa hadda; Guddiga Arrimaha Dadweynaha ee Ururka Magaalooyinka Sound; Guddiga Fulinta ee Iskaashiga Guryaha iyo Hoy la'aanta Koonfurta King

Khibrad Xirfadeed Kale: Sawir-qaade Caafimaad oo Baaritaan Sameeya, (ARDMS, OB, RVT); Bilaabe Amaah; Macallin Koor; Macallin Biyaano; Hooyo leh saddex carruur ah

Waxbarashada: AA, Kuliyadda Bellevue; Shahaadada Sawir-qaadaha Caafimaadka ee Baaritaanka Sameeya ee Diiwaangashan (RDMS)

Adeegga Bulshada: Rugta Ganacsiga ee Covington, Bangiga Cuntada ee Covington Storehouse, nadiifinta qashinka Magaalada Covington, abaabulaha dadaalka gargaarka sahayda caafimaadka ee Yukreyn, mutadawac dugsi intii lagu jiray xirnaanshaha dugsiyada ee COVID-19, xubin guddiga dugsiyada PTA, iyo kuwo kale

Bayaanka: Qoysas aad u badan oo ku nool Kent, Auburn, iyo Covington, nolosha way ka adag tahay sidii ay ahayd inay noqoto. Hoggaamiyeyaaasheena Olympia waxay diiradda saarayaan awood siyaasadeed halkii ay ka saari lahaayeen waxa qoysaskeena, shaqaalaheena, iyo ganacsiyadeennu u baahan yihiin. Taasi waa inay is beddeshaa. Taasi waa sababta aan ugu tartamayo Senatka Gobolka, waana sababta aan markii ugu horreysay ugu tartamay xil toddoba sanno ka hor.

Waxaan dalkan uga imid Yukreyn anigoo shan sanno jir ah oo aan luqadda aqoon, laakiin waxaan ku barakoobay fursado ay suurto geliyeen dugsiyo xooggan, xaafado ammaan ah, ganacsiyo kobcaya, iyo bulsho diiradda saarta mustaqbalka. Markii qiimahaas ay dareemeen hanjabaad, waan istaagay si aan u adeego.

Sannadkii 2019, waxaan ka adkaaday qof xilka hayay afar iyo toban sanno si aan ugu adeego Golaha Magaalada Covington sababtoo ah qoysaskeennu waxay mudan yihiin wax ka fiican. Tan iyo markaas, waxaan diiradda saaray natiijooyin dhab ah: bilaabista Kooxda Nadiifinta si loo hagaajiyo goobaha dadweynaha; maalgelinta buuxda ee Booliiskeenna, oo ay ku jirto maalgelinta sarkaalka ilaha bulshada ee deriska wajahaya guri la'aan ama dhibaatooyin caafimaadka maskaxda ah; iyo dagaalka lagu yareynayo ciriiriga gaadiidka.

Degmada 47aad waxay mudan tahay senator diiradda saaraya natiijooyin, isla-xisaabtan, iyo xalal caqli-gal ah - ma aha ciyaaro xisbi. Waxaan diyaar u ahay inaan taas keeno Olympia, waxaana sharaf ii ahaan lahayd codkaaga.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Debra Jean Entenman

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 375-6298

info@electDebraEntenman.org

www.electdebraentenman.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka, Degmada 47aad, 2018-hadda; xubin ka ah guddiyada Aqalka ee Guryaha; Xuquuqda Madaniga & Garsoorka; Gaadiidka; iyo Waxbarashada Dugsiga Sare Ka Dib & Xoogga Shaqaalaha.

Khibrad Xirfadeed Kale: 12 sanno oo khibrad ah oo loogu adeegayay Koonfurta Degmada King anigoo ah shaqaale Kongarees, oo ay ku jiraan saddex sanno oo aan ahaa Agaasimaha Degmada.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda, Cilmiga Siyaasadda, Jaamacadda Seattle.

Adeegga Bulshada: Xubin hadda ah, Guddiga Gobolka Washington ee Kuliyadaha Bulshada & Farsamada; 11 sanno oo ku jirtay Guddiga Maamulka Kuliyadda Farsamada Renton; xubin, Ururka Magaalada ee Magaalo Weynta Seattle; xubin, Ururka Qaranka ee Horumarinta Dadka Midabka leh (NAACP).

Bayaanka: Anigoo ah Wakiilkiina Gobolka, waxaan ka shaqeeyay xoojinta shabakadaha badbaadada bulshada, hagaajinta badqabka dadweynaha, taageeridda shaqaalaha, iyo maalgelinta jawaab-bixiyayaasha safka hore. Anigoo xubin ka ahaa fasalkii ugu horreeyay ee Seattle/Degmada King Head Start iyo qof kuliyad ku qalin jabiyay waddo aan dhaqameed ahayn, waxaan ogahay sida helitaanka hore ee fursadda iyo waxbarashada la awoodi karo ay nolosha u beddeli karaan. Iyadoo loo marayo HB2015, waxaan xaqiijiyay \$100 milyan oo loogu talagalay badqabka dadweynaha. Hindise sharciyeedkayga HB1559 wuxuu abuuray hagayaal dheefaha si ay ardayda kuliyadda uga caawiyaan helitaanka taageerooyin dhammaystiran iyo dhammaystirka waxbarashadooda.

Waxaan sii wadi doonaa la shaqeeynta asxaabtayda labada dhinac si loo ilaaliyo qoysaska nugal loona hagaajiyo fursadaha qoysaska guud ahaan Gobolka Washington.


Cobi Clark

(Doorbida Xisbiga Libertariyanka)

(206) 854-1136

campaign@cobiclark.com

www.cobiclark.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibrad Xirfadeed Kale: Waxaan ahay horumariye guryo, maareeye mashruuc dhisme, iyo qof lagu sharfay South Sound Business Top 40 Under 40. Intii aan ku jiray xirfaddayda, waxaan gacan ka geestay geeyitaanka boqolaal guryo ah guud ahaan Gobolka Washington, oo ay ku jiraan degaannada waayeelka, guryaha qoysaska keliya, guryaha dabaqyada ah ee qiimaha suuqa, iyo guryaha dhexe, ka hor inta aanan raacin xirfad adeeg dadweyne.

Waxbarashada: Waxaan haystaa shahaadada jaamacadda oo maadooyin isku dhafan ah oo ku saabsan Dhaqaalaha, Falanqeynta Siyaasadda, Siyaasadda, iyo Falsafadda kana timid Jaamacadda Washington Tacoma. Intii aan waxbaranayay, waxaan u shaqeeyay shaqaale siyaasadeed oo u shaqeeya Senatar Jeff Wilson iyo u doode ganacsi oo ka tirsan Rugta Ganacsiga Tacoma-Pierce. Shaqadayda tacliimeed ee ku saabsan siyaasadda dadweynaha waxaa dib u eegay aqoonyahanno waxaana la daabacay.

Adeegga Bulshada: Auburn Rotary

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa inaan soo celiyo awoodista, ilaaliyo xuquuqda dastuuriga ah, oo aan keeno hoggaan wax ku ool ah oo diiradda saaraya siyaasadda Olympia. Ka dib markii aan geeyay boqolaal guryo ah guud ahaan Washington, waxaan si toos ah u arkay sida xeerarka xad-dhaafka ah, canshuuraha kordhaya, iyo dib-u-dhacyada xafiisyadu u kordhiyaan kharashka guryaha, tamarta, iyo daryeelka caafimaadka. Waxaan taageeraa mas'uuliyadda maaliyadeed, dowlad lala xisaabtamo, xorriyadaha madaniga ah ee xooggan, bulshooyin ammaan ah oo ixtiraama badqabka dadweynaha iyo xuquuqda shakhsiga labadaba, iyo sii wadidda ka soo horjeedka canshuur dakhliga gobolka. Waxaan u baahanahay kharashyo hoose, tamar badan oo la isku halleyn karo, guryo badan, iyo riwaayad siyaasadeed oo yar. Waa wakhtigii *la heli lahaa waddo ka fiican oo hore u socota* oo qoysaska shaqeeya iyo shakhsiyaadka hor marinaysa.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Chris Stearns

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

info@chris4wa.com
chris4wa.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka; Afhayeenka Ku Meelgaarka ah; Guddoomiye Ku-xigeenka, Dowladda Gobolka & Xiriirka Qabiillada; xubin guddiga: Miisaaniyadda Raasumaalka, Deegaanka & Tamarta, Xeerarka; Xubin hore oo Golaha Magaalada Auburn ah

Khibrad Xirfadeed Kale: Xirfad nololeed oo ku saabsan la shaqaynta qabiillo, bulshooyin miyiga ah, iyo bulshooyin la takooray si loo abuuro shaqooyin, loo maalgeliyo tamar nadiif ah, loona ilaaliyo xuquuqda; waxaa Madaxweyne Clinton u magacaabay Agaasimihii ugu horreeyay ee Arrimaha Hindida ee Waaxda Tamarta ee Mareykanka; Guddoomiyihii hore ee Guddiga Khamaarka Gobolka Washington

Waxbarashada: Dugsiga Sharciga ee Cornell, JD; Kuliyadda Williams, BA

Adeegga Bulshada: Guddiga Guryaha La Awoodi Karo ee Degmada King; Guddiga Xanuunka Maskaxda iyo Ku-tiirsanaanta Maandooriyaha ee Degmada King; Kooxda Hawsha ee Haweenka Asaliga ah ee Maqan iyo La Dilay ee Gobolka Washington


Bayaanka: Anigoo ah Wakiilkaaga, waxaan ka shaqeeyay inaan natiijooyin dhab ah u keeno qoysaska shaqeeya—balaadhinta guryaha la awoodi karo, xoojinta ilaalinta shaqaalaha, hagaajinta adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka, iyo difaaca xuquuqda madaniga ah. Anigoo ah qareen Navajo ah, waxaan xirfaddayda ku qaatay inaan u istaago caddaaladda oo aan cod u noqdo bulshooyinka laga reebay go'aan qaadashada. Waxaan sii wadi doonaa dagaalka aan ugu jiro dugsiiyo xooggan, bulshooyin ammaan badan, iyo dhaqaale qoys kasta fursad u siinaya inuu guuleysto.

Waxaa Taageeray: Duqa Auburn Backus, Duqa Kent Ralph, Duqa Covington Smith; Xildhibaanka Kongareeska Adam Smith; Guddoomiyaha Gobolka Bob Ferguson; Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 47aad; Ururka Kalkaaliyeyasha Gobolka Washington; Ururka Mashiinisteyasha Hawada 751; Ficilka Ilaalinta Washington; Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington iyo kuwo kale!

Ted Cooke

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 779-8495
Ted.Cooke@outlook.com
tedcooke.org



Khibradda Jago Loo Doortay: **Khibradda Jago Loo Doortay:** KCGOP Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad, 2020-2022; PCO COV 3244, COV 1127, 2009-hadda; Guddiga Maamulka Timberlane HOA (Covington) 2010-2011

Khibrad Xirfadeed Kale: **Khibrad Xirfadeed Kale:** Tijaabiyaha Sare ee Softiweerka, Hoggaamiyaha Kooxda, Maamulaha Mashruuca ee Shahaadeysan

Waxbarashada: **Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga Diinta, Jaamacadda Beacon

Adeegga Bulshada: **Adeegga Bulshada:** Hore uga tirsanaa Guddiga Maamulka ee Portable Academic Lapdesk (urur waxbarasho oo aan maaliyad-doon ahayn); Shaqo mutadawacnimo oo hore: Booliiska Kansarka qaba, Kabaha iyo Calaamadaha, Xarunta Carruurta Echo Glen, Dugsiga Green Hill, Hoyga Haweenka ee Goobta Vine Maple, Union Gospel Mission, Bangiga Cuntada ee Maple Valley, Shabakadda Northwest Fellowship ee Mareykanka (Colville Reservation), Dugsiga Hoose ee Miguel de Cervantes (Nicaragua), iyo Kuliyadda Rainbow Evangelical (Fiji).

Bayaanka: Dimuqraadiyiintu waxay Washington ka dhigeen mid aan la awoodi karin. Waxaan hayaa qorshe aan ku hagaajinayo. Waxaan xannibi doonaa dhammaan canshuuraha cusub, waxaan baabi'in doonaa canshuuraha jira ee dakhliga, hantida, iyo shidaalka. Waxaan amri doonaa hantidhawrka xafiis kasta iyo barnaamij kasta oo gobolka ah, waxaana jari doonaa khasaaraha. Waxaan joojin doonaa iskaashiyada dadweyne iyo kuwa gaarka ah ee aan isla xisaabtan lahayn iyo guddiyada sharci-dejinta. Waxaan mudnaanta siin doonaa guryaha bilowga ah ee leh barxado halkii aan mudnaanta siin lahaa aqallada cufnaanta sare leh ee Olympia nagu khasabtay. Waxaan DEI ku beddeli doonaa mudnaan ku saleysan karti ee shaqaaleysiinta dowladda, waxaan soo celin doonaa xuquuqda waalidka oo buuxda ee waxbarashada, waxaan taageeri doonaa qeexidda bayooloji ee jinsiga. Badqabka dadweynaha iyo waxbarasho Mareykan ah oo qadiimi ah ayaa ugu horreeya. Kent, Auburn, Covington, iyo Maple Valley waxay u qalmaan wax ka wanaagsan. Waan gaarsiin doonaa.



Senatarka Gobolka

Vandana Slatter

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 777-0579

friendsofvandanaslatter@gmail.com

vandanaslatter.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatar, Degmada Sharci Dejinta 48aad; Guddoomiye Ku-xigeenka- Guddiyada Deegaanka, Tamarta, Teknolojiyada iyo Caafimaadka & Daryeelka Muddada Dheer, Xubin- Guddiga Waxbarashada Sare & Horumarinta Shaqaalaha; Guddoomiye-wadaag- Kooxda Sayniska, Hal-abuurka, Teknolojiyada; 2021-24 Sharci-dejiyaha Sannadka ee Ururka Ardayda WA; Wakiilka Gobolka ee LD 48aad afar xilli; Xubin Golaha Bellevue.

Khibrad Xirfadeed Kale: Saynisyahan caafimaad oo ka shaqeynayay shirkado hormuud u ah bayoteknolojiyada in ka badan 20 sanno; farmashiiste caafimaad oo shati haysta.

Waxbarashada: Dhakhtarka Farmashiyaha, UW; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, UW; Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga (Farmashiyaha), UBC.

Adeegga Bulshada: Golaha Dean ee Dugsiga Evans ee UW; Guddiga La-talinta Xarunta Ruckelshaus; Guddiga Hopelink; Guddiga Adeegyada Deegaanka; Guddiga Hey'adda Isbitaalka Overlake; Guddiga Farmashiyaha Gobolka; Guddiga Hey'adda NARAL ProChoice; Beerta Lake Hills Urban.


Bayaanka: Sida Senatarkaaga Gobolka ahaan, waxaan keenaa khibrad aan u leeyahay saynisyahan, xirfadle daryeel caafimaad, hooyo, iyo waalid ciidan oo ku faana si aan wax uga qabto mudnaanta maxalliga ah iyadoo ay jiraan hubanti la'aan federaal iyo dhaqaale. Waxaan leeyahay rikoorka xooggan oo aan ugu dagaallamay qiimaha aan wadaagno: daryeel caafimaad oo la awoodi karo, xorriyadda taranka, taageerada muhaajiriinta, iyo xeer canshuureed oo caddaalad u ah dadka shaqeyaya.

Waxaan hormuud ka ahaa sharci lagu hoos u dhigayo kharashaadka qoysaska shaqeyaya, lagu xoojinayo waxbarashada dadweynaha iyo daryeelka carruurta, lagu taageerayo hal-abuurka iyo cilmi-baarista sayniska, lagu hubinayo in isbitaalladu furnaadaan, laguna ilaalinayo dadka Washington falalka federaalka ee waxyeellada leh. Waxaan u codeeyay guryo la awoodi karo oo badan, xalalka gaadiidka dadweynaha iyo gaadiidka ee gobolkeenna, tababarka xirfadaha, xoojinta sharciyada badqabka qoryaha, tallaabadada cimilada, iyo dhimista deynta caafimaadka. Anigoo ah maalgeliyaha hoggaaminaya ee "My Health My Data"--mid ka mid ah sharciyada ugu xooggan ee asturnaanta caafimaadka ee dalka, iyo wax ka beddel dastuuri ah oo ilaalinaya xuquuqda ilmo iska soo rididda, waxaan ahay u doode la xaqiijiyay oo u taagan xorriyadaha shakhsiyeed.

Waxaan ahay qof xog ku saleeya xallinta dhibaatooyinka oo matalaya kala duwanaanta iyo ruuxa hal-abuurka ee bulshadeenna. Qof walba wuxuu u qalmaa fursad uu ku horumaro-Waxaan sii wadi doonaa dagaalka aan ku xaqiijinayo inay taasi suurtagal noqoto. *Waxaa Taageeray: Degmada King, Dimuqraadiyiinta 48aad; Golaha Shaqaalaha Gobolka; Macallimiinta; Codbixiyayaasha ilaalinta deegaanka; U Doodeyaasha Qorsheynta Waalidnimada; Kalkaaliyayaasha; Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka; Duqyada Redmond, Bellevue, Kirkland; Xubin Golaha Balducci; Xeer Ilaaliye Nick Brown; Guddoomiyaha Caymiska (Senatarkii hore ee 48aad) Kuderer; Khasnajiya Pellicciotti; Guddoomiyaha Gobolka Locke; kuwo kale!*

Codeyntaadu waa mid tirsanta. Waad hubin kartaa.

**Ka raad-raac warqaddaada codbixinta barta
kce.wiki/TrackMyBallot-SO**



Baraheena Bulshada!

**Ka taag-garee @kcelections
goobaha bulshada halka kore ku
xusan waxaana laga yaabaa inaan
wadaagno sawirkaaga.**

**Nala wadaag sawirkaaga
codeynta #VotingSelfie!**



Wakiilka Jagada Lr. 1

Osman Salahuddin

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(202) 240-8370

osman@electosman.com

www.electosman.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka, Degmada Sharci-dejinta ee 48aad; hore u ahaa Xubin Golaha Magaalada Redmond

Khibrad Xirfadeed Kale: Khibraddii hore waxaa ka mid ah La-taliyaha Qalabka Caafimaadka, Cilmi-baare Kansarka ee Fred Hutchinson, Maareeyaha Ka-qaybgalka Bulshada ee Degmada King, iyo Mulkiilaha Dukaan Qaxwo

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda Neurobiology (Bayoolajiga Neerfaha) & Taqasus Yar Ingiriis, Jaamacadda Washington (*Madaxweynaha Ururka Ardayga*; Ka Qalin Jebiyay LWSD

Adeegga Bulshada: Xubin guddiga Hopelink, Isbahaysiga Dookhyada Gaadiidka, Hey'adda OneRedmond, Aasiyaanka Baasifigga-Jasiiradleyaasha Mareykanka ee Awood-siinta Madaniga ah, Qareenno Caawinaya Carruurta Gaajeysan; Xubin ka tirsan Guddiga Waxbarashada Xirfadda & Farsamada ee LWSD; hore u ahaa xubin ka tirsan Dab-damiska Eastside & Ciidanka Dab-damiska ee Badbaadinta, Tababaraha Kubadda Kolayga Dhallinyarada Redmond

Bayaanka: Anigoo ah Wakiilkaaga Gobolka, waxaan diiradda saarayaa keenista natiijooyin. Waxaan sugay maalgelinno muhiim ah oo daryeelka carruurta iyo daryeelka caafimaadka ah oo loogu talagalay degmadeenna, waxaana meel mariyay sharciyo ka badan sharci-dejiye kasta sannadkan, anigoo hormuud u ahaa biilal ku saabsan guryeyn la awoodi karo, ka hortagga rabshadaha hubka, iyo ilaalinta muhaajiriinta. Anigoo ah qof Eastside ku noolaa noloshiisa oo dhan, waxaan sii wadi doonaa inaan u dagaallamo mudnaanta maxalliga ah: badqabka dadweynaha, helitaanka daryeelka caafimaadka, iyo dugsiyo xooggan. Waxaan u tartamayaa inaan sii wado u adeegidda bulshooyinkeenna anigoo u heellan xalal caqli-gal ah iyo koboc dhaqaale.

Waxaa Taageeray: Xildhibaanada Kongareeska DelBene; Guddoomiye Ferguson; Xubin Golaha Degmada Balducci; Duqyada Redmond, Bellevue, Kirkland, Medina; Macallimiin; Kalkaaliyeyaal; Ficilka Ilaalinta; Golaha Shaqaalaha Gobolka; Dimuqraadiyiinta 48th; Isbahaysiga Qorsheynta Waalidnimada; iyo in ka badan; iyo kuwo kale!

Jeffery Poppe

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

Jeff4WA@outlook.com

Poppe4WA.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Agaasime, Ururka Canshuur-bixiyeyaasha San Diego; Agaasime, Ururka Mulkiilayaasha Guryaha; Ergay, Shirarka Jamhuuriga ee Washington iyo Qaranka

Khibrad Xirfadeed Kale: CPA, la-taliye hannaanka maaliyadda muddo 40 sanno ah; Wuxuu hantidhawray khiyaanno bangi oo bilyan doolar ah oo loo sameeyay FDIC; Wuxuu sameeyay hantidhawro loogu talagalay Guddiga Xeer-beegtida Weyn ee Degmada LA; La-taliye hannaanka maaliyadda u ahaa shan shirkadood oo Fortune 500 ah, dowladda federaalka, California, iyo degmooyinka ugu waaweyn California; Wuxuu lahaa oo maamulay maqaayad Giriik ah

Waxbarashada: BS, Jaamacadda Cincinnati, magna-cum-laude; MBA, Maaliyadda, Jaamacadda Gobolka San Diego; Macalling daraasaadka jaamacadda ka dib ee Nidaamyada Macluumaadka Xisaabaadka

Adeegga Bulshada: Wuxuu maamulay barnaamijka deeqaha hoy la'aanta ee kaniisadda; Wuxuu casharro u dhigay murashaxiinta imtixaanka CPA

Bayaanka: Waxaan Dowladda u Keeni Doonaa Mas'uuliyad Maaliyadeed si loo Badbaadiyo Doolarrada Canshuurtaada ee Si Adag Lagu Kasbaday.

Canshuuro cusub dambe maya! Washington waxay leedahay dhibaato kharash bixin oo aad u daran, ma aha dhibaato dakhli. Waan diidi doonaa canshuur kasta oo cusub ama aan loo baahnayn. Tirtir khiyaannada! Waxaan hormuud ka noqon doonaa hantidhawrka khiyaannada si loo joojiyo ku khasaarinta lacagtaada. Waxaan riixi doonaa in dowladdeennu noqoto mid wax ku ool ah oo hufan. Waxaan matali doonaa adiga, ma aha danaha gaarka ah! Waxaan aqbali doonaa oo keliya tabarucaadka ka socda shakhsiyaadka. Waan madax-bannaannaa doonaa oo ma aqbali doono wax tabarucaadyada ka socda PAC-yada iyo ururka shaqaalaha. Si adag ayaan kuugu shaqayn doonaa. Fadlan ii codee.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Jessica Forsythe

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 202-5825

info@votehorsythe.com

votehorsythe.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Xubin Golaha Magaalada Redmond (2020-hadda), Madaxweynaha Golaha ('22-'23), Madaxweyne-ku-xigeenka Golaha ('24-'25); Guddoomiyaha Guddi-hoosaadka Jawaabta Dhibaataada Beddelka ah; Guddi-hoosaadka Ilaalinta Kiraystayaasha; Guddoomiye-Wadaagga Eastrail; Guddiga Siyaasadda Maamulka Kobaca; Guddiga U-doodista Federaalka ee AWC; Guddiga Naafada

Khibrad Xirfadeed Kale: Mulkiile Ganacsi Yar muddo 20 sanno ah; Ergada Guddiga SEIU; Agaasimaha Fulinta ee Urur Aan Faa'iido-doon Ahayn; Agaasimaha Farshaxanka Seattle Symphony; Shaqaalaha Daryeelka Degdegga ah

Waxbarashada: BFA Isgaarsiinta Muuqaalka iyo Naqshadeynta, Jaamacadda Kent State; Shahaadada Naqshadeynta Deegaanka; Shahaadada Hoggaaminta Dowladda Hoose ee Ururka Magaalooyinka Washington; Akadeemiyaha Muwaadiniinta FBI

Adeegga Bulshada: Sarkaalka Guddiga Goobta Doorashada ee LD48; Kaaliyaha Legion-ka Mareykanka; Guddiga U-doodista Federaalka ee Akadeemiyaha Duubista; Lataliyaha Dhallinyarada NAMI; Khasnajiga Codbixiyayaasha Ururka Haweenka ee Degmada King; Aasaasaha Wadajirka ah ee Seattle Symphony Pride; Ciyaaraha Olombikada Gaarka ah

Bayaanka: Kharashyada guriyeynta iyo daryeelka caafimaadku waxay u kacayaan si ka dhakhso badan mushaharka; waxbarashadu ma haysato maalgelin ku filan; dhibaataada cimiladu waa halkan; qoysaska shaqeeya waxay la halgamayaan qiimayaal kordhaya. Waxaan isku dheelli tiray miisaaniyado degmo oo bilyan-doollar ah, ku guuleystay ilaalinta kiraystayaasha, sugay \$7.5M oo loogu talagalay guryeynta iyo adeegyada aadanaha, hagaajiyay daah-furnaanta maaliyadeed, hormuud u ahaa taageerada ganacsiyada yaryar intii lagu jiray cudurka faafa, waxaan u dagaallamay bulshooyinka LGBTQIA+ iyo muhaajiriinta. Waxaan qaadi doonaa habkayga ka-mid-noqoshada iyo wax-ku-oolka ah ee keenay guulahan ilaa Olympia si aan ugu dagaallamo dhammaan qoysaska.

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada 48aad; Dimuqraadiyiinta Degmada King; Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington; Guddoomiyaha Caymiska Kuderer; SenatarSlatter; U Dodayaasha Isbahaysiga Qorsheynta Waalidnimada; Dab-damiyayaasha Redmond; 60+ mas'uuliyiin la doortay. Dheeraad: votehorsythe.com.

Amy Walen

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 381-1909

amy@amywalen.com

www.voteamywalen.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka 2019-hadda; Duqa Kirkland 2014-2018; Xubin Golaha Kirkland 2009-2019

Khibrad Xirfadeed Kale: 20+ sanno oo waayo-aragnimo ah anigoo ah mulkiile iyo Madaxa Maaliyadda ee ganacsiyada qoyskeenna

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Sharciga, Jaamacadda Dugsiga Sharciga ee Queensland; Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, Cilmiga Siyaasadda, Jaamacadda Queensland

Adeegga Bulshada: Waxaan mar walba ka shaqeeyay inaan nolosha dadka bulshadayda ka dhigo mid ka wanaagsan, anigoo ka adeegaya doorar mutadawacnimo iyo madani ah oo lala leeyahay ururro sida Food Lifeline, Adeegyada Dhalinyarada ee Eastside, PorchLight iyo Studio East, iyo anigoo sugaya deeqo waxbarasho si ardaydu u dhigtaan Machadka Teknolojiyada Lake Washington. Anigoo ah qof ka badbaaday kansar, waxaan mudnaan ka dhigaa taageeridda adeegyada qoysaska uu kansarku saameeyay.

Bayaanka: Waxaan ahay Dimuqraadi wax-ku-ool ah oo maamulaya oo ka shaqeeya labada dhinac ee siyaasadda. Waxaan hormuud u ahay badqabka dadweynaha, awoodda kharashyada lagu dabooli karo, miisaaniyado isku dheelli tiran iyo masuuliyadda maaliyadeed.

Waxaan ka hor istaagay dowladda federaalka anigoo ICE ka mamnuucay xirashada maaskaro isla markaana buuxiyay lacagtii laga jaray Planned Parenthood. Anigoo ka mid ah mulkiilayaasha ganacsiyada yaryar ee kooban ee Olympia, waxaan diiradda saaray abuurista iyo ilaalinta shaqooyinka mushaharka qoyska, gaar ahaan ganacsiyada yaryar iyo shaqaalaha teknolojiyada, taas oo ah sababta aan cod maya ugu bixiyay canshuurta dakhliga. Taageerooyinka: Ururka Booliika Bellevue, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Guddoomiye Gregoire, Xildhibaan Smith, Xildhibaan Claudia Balducci



Xeer Ilaaliyaha

Leesa Manion

(206) 282-1805

info@leesamanion.com

leesamanion.com



Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Dugsiga Sharciga ee Seattle University; Shahaadada Jaamacadda, Northern Kentucky University

Shaqo iyo Xirfad: Qareenka Xeer Ilaalinta ee Degmada King; hore u ahayd Madaxa Shaqaalaha iyo Ku-xigeenka Qareenka Xeer Ilaalinta

Bayaanka: Sida haweeneydii ugu horreysay iyo qofkii ugu horreeyay ee dadka midabka leh ee Degmada King ee u adeegta sidii Qareenka Xeer Ilaalinta ahaan, waxaan afartii sanno ee la soo dhaafay ku qaatay fulinta ballantaydii ahayd inaan xaafadaheena ammaan ka dhigo, yareeyo dambiyada hantida, iyo inaan ilaaliyo badbaadeyaasha iyo kuwa ugu nugul. Ka dhabeynta ballanqaadkaas waxay u baahan tahay aragti la xaqiijiyay, hoggaan dhab ah iyo khibrad – sifooyin aan leeyahay oo aan xoojiyay tan iyo markii aan xafiiska imid.

Hoggaankayga hoostiisa, Xafiiska Xeer Ilaalintu wuxuu maalin kasta dacweeyaa dambiyada rabshada wata, weerarrada galmada, iyo dambiyada hantida. Tan iyo markii la ii doortay, waxaan ballaariyay taageerada dadka ka badbaaday rabshadaha qoyska iyo xadgudubka galmada, waxaan maalgashaday xukunno beddel ah oo loogu talagalay halyeeyada, dhallinyarada, iyo shakhsiyaadka wajahaya caqabadaha caafimaadka dabeecadda iyo qabatinka, waxaana mudnaanta siiyay dib-u-habeynta caddaaladda carruurta.

Heellanaantayda ku aaddan dhimmista rabshadaha hubka ayaa ka muuqata ku dhawwaad 50% oo hoos u dhac ah oo ku yimid dilalka hubka tan iyo 2023. Waxaan sidoo kale ka shaqeeyay inaan sharci ka dhigo siyaasadaha Amarka Ilaalinta Khatarta Ba'an ee ugu adag ee Washington, mamnuucista gobolka oo dhan ee makhaasiinnada qaada wax badan iyo qoryaha aan lambarka lahayn, iyo agabyada caawiya hey'adaha fulinta sharciga si ay u raadraacaan hubka loo adeegsaday dambiyada.

Waxaan ku faanayaa shaqadii la qabtay afartii sanno ee la soo dhaafay: horumarinta siyaasadaha iyo dib-u-habeynta caddaaladda dambiyada ee caddaaladda ah iyo kuwa waxtarka leh, hoggaaminta koox ka kooban ku dhawwaad 600 oo xirfadleyaal ah, dhisidda iskaashiyo lagu kalsoon yahay oo lala yeesho hey'adaha fulinta sharciga, difaaceyaasha dadweynaha, hoggaamiyeyaasha ganacsiga iyo kuwa bulshada, iyo u doodeyaasha sinnaanta iyo caddaaladda. Waxaa weli jira shaqo muhiim ah oo la qabto, waxaana diyaar u ahay inaan sii wado si aan u xaqiijiyo in degmadeenu ay u ammaan tahay qof kasta.

Waxaa si sharaf leh ii taageeray Guddoomiyeyaashii hore ee gobolka Gary Locke iyo Christine Gregoire; Madaxa Fulinta Girmay Zahilay; Duqii hore ee magaalada Seattle Bruce Harrell; Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka (Alliance for Gun Responsibility); ururada shaqaalaha, ururada Dimuqraadiga ee Degmada King; tobaneeyo hoggaamiyeyaal degmo iyo magaalo ah; garsooreyaal hawlgab ah; iyo Xeer Ilaaliyeyaashii hore ee Mareykanka.

Su'aalaha Soo Noqnoqda ee Codeynta

○ Sidee baan u codeeyaa? ● —

Buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga ee tartan walba.


○ Ma waxaan isticmaalaa qalin?

Waxaad isticmaali kartaa qalin, qalin qori, ama wax kasta oo si cad u buuxiya goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga.

○ Ma inaan ka codeeyaa tartan kasta?

Adiga ayay ku xiran tahay tartannada aad ka codeynayso. Waxaad ka codeyn kartaa hal tartan, laba tartan, ama dhammaan tartannada. Waxaanu xisaabin doonaa codeyn kasta oo aad samayso.

○ Maxaa dhacaaya haddii aan fikradayda beddelo ama aan khalad sameeyo?



Xariiq dul mari dookha aadan doonaynin. Markaa ka dib buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga saxda ah.

○ Ma inaan warqaddayda codbixinta saxiixaa?



Waa in aad saxiixdo xagga dambe ee bakhshadda soo celinta si warqaddaada codbixinta loo tiriyoo. Saxiixaagu uma baahna inuu noqdo mid nidaamsan ama la akhrin karo, laakiin waa inuu u dhigmo saxiixyada aan ku hayno faylkaaga diiwaan gelinta codbixiyaha.

○ Sidee baan u soo celiyaa warqaddayda codbixinta?



Waxaan kugula talineynaa isticmaalka mid ka mid ah sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta. Waxaa jira ku dhawwaad 100 oo ku baahsan Degmada King!

Haddii aad boostada ku soo celinayso, Adeegga Boostada waxay kugula talineysaa inaad warqaddaada codbixinta dib ugu soo dirto boostada ugu yaraan hal toddobaad ka hor Maalinta Doorashada.



Qiimeeyaha

Rob Foxcurran

(206) 593-2203
rob@voterobfoxcurran.com
voterobfoxcurran.com



Waxbarashada: University of Washington, Shahaadada Jaamacadda; Qiimeeyaha Guud ee Hantida Ma-guurtada ah ee Shahaadaysan; qalin-jebiye Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle

Shaqo iyo Xirfad: Qiimeeye Sare, Magaalada Seattle; Baaraha Dhegaysiga ee Hore ee Degmada King

Bayaanka: Xafiiska Qiimeeyaha wuxuu saameeyaa awoodda qof kasta u leeyahay inuu ku sii nagaado gurigiisa. Canshuuraha hantida ee kor u kacaya ayaa mulkiileyaasha guryaha, kiraysteyaasha, iyo ganacsiyada yaryar ka saaraya bulshooyinkooda, iyo dad aad u badan ayaan ku kalsoonayn in hannaanku ula dhaqmayo si caddaalad ah. Degmada King waxay u baahan tahay xafiis Qiimeeye oo sax ah, caddaalad ah, iyo daah-furan oo u shaqeeya qof walba.

Waxaan ahay jilalkii shannaad ee reer Seattle iyo musharaxa keliya ee tartankan ee dhab ahaan u qabtay shaqada qiimeynta ee uu xafiiskani ku tiirsan yahay. Sida Qiimeeyaha Sare ee magaalada Seattle ahaan, waxaan maalin kasta qiimeeyaa hantida dadweynaha, anigoo hubinaya in go'aannada hantida ma guurtada ah ay u adeegaan danta dadweynaha. Xirfaddayda waxaa ka mid ahaa qiimeynta ganacsiga ee qaybta gaarka loo leeyahay. Sida Baaraha Dhegaysiga ee Guddiga Racfaannada iyo Sinnaanta ee Degmada King ahaan, waxaan miiska la fadhiistay mulkiileyaasha guryaha ee u dagaalamaya inay ku sii noolaadaan bulshooyinkooda halka mulkiileyaasha dhulka ee shirkadaha ay keensadeen kooxo khabaro ah si ay u helaan dhimmis canshuur. Waxaan fahamsanahay labada dhinac ee nidaamkan.

Waxaan ku noolaa guryo dakhligoodu xaddidan yahay. Waxaan ogahay sida uu culayska maaliyadeed uga muuqdo gudaha, waana sababta aan ugu hanweynahay inaan ahaado wakiilka ururka PROTEC17.

Waxaan u keenni doonaa nasasho dhab ah mulkiileyaasha guryaha iyo kiraysteyaasha, iyo daah-furnaanta iyo la xisaabtanka nidaam dad badan aysan si buuxda u fahmin. Gudaha Olympia, waxaan u ololayn doonaa in la dejiyo ilaalinta hantida guryaha ee guryaha rasmiga ah si looga caawiyo mulkiileyaasha guryaha inay maareeyaan kharashyada kordhaya, iyo in la abuurro dhibcaha canshuurta kiraystaha si kiraysteyaasha looga khafiifiyo kharashyada guryaha ee kordhaya sidoo kale.

Waxaan ku hanweynahay in ay i taageereen Seattle Times, the Stranger, Madaxa Fulinta ee Degmada King Girmay Zahilay, Ku-xigeenka Sare ee Qiimeeyaha Al Dams, Xubnaha Golaha Degmada King Claudia Balducci, Sarah Perry, iyo Rhonda Lewis, Dimuqraadiyiinta Degmada King, kow iyo toban urur oo Dimuqraadi ah oo ka tirsan degmooyinka sharci dejinta, Xubnaha Golaha Seattle Eddie Lin iyo Dionne Foster, ururo shaqaale oo badan, iyo Danny Hagen, Madaxweynaha Ururka Qiimeeyeyaasha Degmada ee Gobolka Washington, iyo kuwo kale. Waxay ku kalsoon yihiin khibraddayda xirfad yahan si aan u hoggaamiyo waaxdan.

Dominique M Scarimbolo

(253) 256-5279
domscarimboloforkcassessor@gmail.com
www.domscarimboloforassessor.com



Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Caddaaladda Dambiyada, Washington State University

Shaqo iyo Xirfad: Mulkiilaha Ganacsi Yar oo Qoys, Madaxa Qaybta Degmada King ee CAPR

Bayaanka: Qiimeeyaha Degmada King waa wax aad uga badan qiimeeye—waa hubaal inuu yahay door hoggaamineed, oo ka mid ah xafiisyada dadweynaha ee ugu waaweyn ee saameeya mulkiile kasta. In kasta oo xafiisku uu shaqaaleeyo shaqaalaha qiimeynta, mas'uuliyadda Qiimeeyaha ayaa hubisa in nidaamka oo dhan uu u shaqeeyo si daah-furan, si joogto ah, si caddaalad ah, iyo si waafaqsan sharciga.

Waxaan nidaamkeena canshuurta hantida ka bartay aragtida canshuur bixiyeyaasha, falanqeynta xogta qiimeynta, cilmi-baarista hab-dhaqannada qiimeynta guud, codsiyada diiwaannada dadweynaha, racfaan ka qaadashada qiimeynnada, iyo dib-u-eegista go'aannada BoE, waxaana diyaariyay soo jeeddinnada hantidhawrka ee dhammaystiran ee lagu aqoonsanayo aagagga muhiimka ah ee dib-u-habeynta. Khibraddaasi waxay i siinaysaa wax aysan musharaxiin badani sheegan karin: aragtida canshuur bixiyaha ee ku saabsan sida uu nidaamku dhab ahaan ugu shaqeeyo ficil ahaan.

Ololahaygu ma aha mid ku saabsan sameynta isbeddello yaryar oo lagu sameeyo xaaladda hadda jirta. Waxa ay ku saabsan tahay hiigsiga dib-u-habeyno macno leh oo nidaamka oo dhan ah kuwaas oo ilaalinaya canshuur bixiyeyaasha, xoojinaya xuquuqda hantida, hannaanka sharciga ah ee waafaqsan caddaaladda, isla markaana gacan ka geysanaya xaqiijinta in dadka aan canshuur looga saarin guryahooda.

Dowladda waa in lagu qiimeeyaa natiijooyinka—ee ma aha ujeeddooyinka. Nidaamkeena qiimeynta ee hadda waxaa looga baahan yahay inuu soo saaro qiimeyno caddaalad ah oo isku mid ah, laakiin haddii nidaamkaas uusan soo saarin natiijooyinka uu sharcigu u baahan yahay, waxaan leenahay mas'uuliyad ah inaan si daacad ah u baarno, cabbirno waxqabadkiisa, oo aan horumarinno.

Mulkiileyaasha hantida waxay mudan yihiin macluumaad ay fahmi karaan. Waxay u qalmaan faahfaahinnada qayb kasta oo hanti ah oo gaar ah oo ku saabsan qiimeynnada hantidooda gaarka ah—ee ma aha oo keliya lambar kama dambeys ah. Waxay mudan yihiin hannaan caddaalad ah, racfaanno wakhtigooda ku dhaca iyo halbeeygo caddeyneed oo caqli-gal ah, waana inaysan marnaba u baahnaa inay noqdaan khabaro dhanka qiimeynta ah ama ay bixiyaan lacag caawinnaad xirfad yahan ah, si ay si fudud ugu xujeeyaan qiimeyntooda.

Waxaan ahay degane Degmada King, mulkiilaha ganacsi yar, iyo Madaxweynaha laanta CAPR ee Degmada King. Anigu ma ihi siyaasi. Dowladda ayaa si ugu wanaagsan u shaqeysa iyadoo si buuxda u daah-furan oo lala xisaabtami karo, waxaanan dalbanaynaa mas'uuliyad maaliyadeed. Waxaan sii wadi doonaa inaan si hagar la'aan ah uga shaqeeyo beddelidda xaaladda hadda jirta, xoojinta ilaalinta canshuur bixiyaha, iyo u doodista dib-u-habeyn muhiim ah oo dib u soo celinaya caddaaladda iyo la xisaabtanka mid ka mid ah xafiisyada dadweynaha ee ugu muhiimsan Degmada King.



Agaasimaha Doorashooyinka

Julie Wise



wise.julie@me.com
facebook.com/ElectJulieWise

Waxbarashada: Maamulaha Doorashada ee Shahaadaysan ee Qaranka iyo Gobolka Washington; Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno, Green River College

Shaqo iyo Xirfad: Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada King ee hadda ah, maamulaha doorashada oo 26 sanno ah, beeraley

Bayaanka: Waad ku mahadsan tihiin sida aad iigu aaminteen hoggaaminta Waaxda Doorashooyinka tobankii sanno ee la soo dhaafay. Muddadaas gudaheeda, waxaan ku kordhinay in ka badan 80 sanduuq oo sugan oo lagu rido warqadda codbixinta, xarumaha codbixinta ee shakhsi ahaan loo tago, agabyada doorashada oo ku qoran afar luqadood oo cusub, digniimaha warqadda codbixinta, iyo lakabyo cusub oo ah ammaanka goobta iyo amniga internetka. Waxaan sidoo kale hirgelnay barnaamijyo ku guuleystay abaal marino heer qaran ah sida Maalgelinta Waxbarashada Codbixiyaha, tababarka shaqaaleysiinta ardayda ee ku aaddan Ka-qaybgalka Madaniga ah, iyo Barnaamijka Kormeerka ee Labada Xisbi oo xooggan.

Waalidkay waxay walaashay iyo anigaba nagu beereen dareen mas'uuliyadeed oo ah inaan wax ku biirinno bulshadeenna iyo inaan u adeegno ujeeddo ka weyn. Dhab ahaantii, waxay ahayd markii uu aabbahay u tartamayay Duqa Magaalada Enumclaw ee aan arkay oo aan codsaday shaqo ka tirsan Waaxda Doorashooyinka, lix iyo labaatan sanno ka hor. Waxaan jaceyl u qaaday shaqada – hubinta in codbixiye kasta oo u qalma la maqlo codkiisa/codkeeda iyo ka shaqeynta ilaalinta mid ka mid ah hey'adaheena ugu muhiimsan.

Waxaan maanta weli ahay mid si la mid ah ugu heellan oo ay ka go'an tahay hagaajinta waayo-aragnimadeena codeynta iyo ilaalinta waaxda doorashooyinka oo adag, daah-furan, oo dhex-dhexaad ah. Laga bilaabo Olympia ilaa D.C., waxaan sii wadi doonaa inaan u doodo si aan u hubiyo in qof kastaa uu si wax ku ool ah u helo xuquuqdiisa codeynta.

Waad ku mahadsan tahay codeynta!

Sugidda Doorashooyinkeena Si Codeyn Kasta Loo Tiriyo



Halkan Doorashooyinka Degmada King, hadafkeenu waa inaan qabanno doorashooyin sax ah, sugan, oo la heli karo.

Ammaanka Goobta



Xarunteena waxaa kormeera in ka badan ku dhawwaad 80 kaamirooyinka amniga ah.



Dadweynaha ayaa naga daawan kara in ka badan 15 kaamirooyinka tooska ah anagoo shaqeynayna inta lagu jiro habeynta warqadda codbixinta.



Shaqaalaha iyo goobjoogeyaasha waa inay aqoonsi ku soo galaan uguna baxaan goobta looga shaqeeyo warqadaha codbixinta.



Agga lagu keydiyo iyo xisaabinta warqadda codbixinta ayaa u baahan aqoonsi iyo mashiinka suulka la saaro labadaba.

Ammaanka Oonleenka



Khubaro ku taqasusay amniga internetka oo shahaadeysan ayaa shaqaale ka ah waaxda doorashooyinka iyo IT-ga Degmada King.



Dhammaan shaqaaluhu waxay qaataan tababarka sannadlaha ah ee ammaanka oonleenka.




Nidaamyada diiwaan gelinta codbixiyaha iyo xisaabinta codeynta ayaa la kala soocaa si loogu ilaaliyo ammaanka ugu sareeya.



Nidaamka xisaabinta codeynta waa nidaam gebi ahaanba ah shabakad xiran, kumana xirna internetka.

Degmooyinka Golaha Degmada King



Calaamooyinka

- Xuduudaha Degmooyinka Golaha Degmada King
- Magaalooyinka

0 1 2 4 6 8 Miles




King County

Waxaa soo diyaariyay:
Qaybta GIS
Waxda Doorashooyinka
Febraayo 2022



Degmooyinka Golaha Degmada King



Khariiradda Goobta



Golaha Degmada Lr. 2

Rebecca Saldaña

(206) 659-8303
info@rebeccasaldana.com
www.rebeccasaldana.com



Waxbarashada: Senatarka Degmada Sharci Dejinta ee 37aad (2017–Hadda); Agaasimaha Fulinta, Puget Sound Sage (2014–2016)

Shaqo iyo Xirfad:Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Aadanaha iyo Cilmiga Diinta, Seattle University

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa Golaha Degmada King si aan u dhiso guryo badan oo la awoodi karo dakhli kasta, kor u qaaddo mushaharka, u hagaajiyo gaadiidka dadweynaha, iyo inaan xanaanada carruurta ee caalamiga ah ka dhigo mid dhab ah. Ka dhigista Degmada King meel qoys kastaa awoodi karo waxay u baahan doontaa isbeddel horseed ah, waana dhab ahaan waxa aan ka qabanayay aqalka senatarka gobolka muddo toban sanno ah.

Qoysas aad u badan ayaa kala dooranaya bixinta kirada ama caymiska caafimaadka. Sida gabadh ay dhashay shaqaale beeraley reer Mexico ah oo hore u ahaa mid aan sharciga haysan ahaan, weligay ma joojin doono dagaalka aan bulshooyinkeena kaga ilaalinayo wakiillada ICE ee maaskarayn ee argagax gelinaya deriskeena iyo shirkadaha xadaya mushaharkeena.

Aqalka senatka ee gobolka, waxaan u ololeeyay oo aan ansixiyay canshuuraha dadka aadka u taajirsan, oo ay ku jiraan Canshuurta Faa'iidooyinka Raasumaalka iyo Canshuurta Milyaneerrada, si loo maalgeliyo adeegyada muhiimka ah ee aan u baahannahay. Sida Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha ahaan, waxaan ansixiyay barnaamijyada Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Lacagta la siiyo ee ugu horumarka badan dalka, waxaana ansixiyay Xeerka Xuquuqda Shaqaalaha Guryaha si loo xaqiiqiyo caddaaladda iyo karaamada shaqaalaha daryeelka. Waxaan sidoo kale fuliyay maalgelino muhiim ah oo ku saabsan guryaha la awoodi karo, gaadiidka dadweynaha, iyo maalgelinta bulshada.

Waxaan ku hanweynahay inaan kasbaday taageerada keliya ee Dimuqraadiyiinta Degmada King. Waxaan golaha u keenni doonaa tamar cusub iyo hoggaan la xaqiijiyay si loo ballaariyo caafimaadka habdhaqanka iyo ka jawaabista dhibaatooyinka, loo hagaajiyo helitaanka gaadiidka dadweynaha, loona yareeyo kharashyada qoysaska shaqeeya. Wax ka qabashada caqabadaha noogu adag waxay ka dhigan tahay ka hor istaagga danaha gaarka ah ee awoodda leh iyo inaan marnaba looga tanaasulin qiyaamkeena. Taasi waa waxa aan noloshayda ku qaatay.

Taageerooyinka: Xubnaha Golaha Degmada King Mosqueda, Perry, Balducci, iyo Gossett (hore); Xubnaha Golaha Magaalada Seattle Foster, Hollingsworth, iyo Lin; sharci-dejiyayaasha horusocodka ah Scott, Macri, Farivar, Street, iyo Javier Valdez; ururada matalaya shaqaalaha muhiimka ah (SEIU 775, SEIU 925, iyo UFCW 3000); shaqaalaha degmada (PROTEC17; Teamsters 28, 117, 174, iyo 763; iyo Golaha AFSCME 2); farsamo yaqaannada (IAM 751); ardayda qalin jebisay (UAW 6); in ka badan oo ku jira rebeccasaldana.com!

Toshiko Grace Hasegawa

(206) 992-7156
hello@votetoshiko.com
www.votetoshiko.com



Waxbarashada: Seattle University Shahaadada Mastarka, Caddaaladda Dambiyada; Shahaadada Jaamacadda, Caddaaladda Dambiyada; Shahaadada Jaamacadda, Isbaanish; Garfield High School; Kimball Elementary

Shaqo iyo Xirfad:Guddoomiyaha Dekedda Seattle; Mulkiilaha Ganacsi Yar, Agaasimaha Fulinta ee Hey'adda

Bayaanka: Sida Mareykan-Jabaaniis ah oo jiilka afaraad ah iyo hooyo haysata labo carruur ah ahaan, waxaan ku hanweynahay inaan qoyskayga ku koriyo isla gurigii Beacon Hill ee ay ayeeyaday iyo awoowgay iibsadeen ka dib markii laga soo daayay xeryihii lagu ururin jiray dadka Jabaaniiska ee WWII. Laakiin halganka lagu sii nagaanayo halkan ayaa ka adag sidii hore abid. Deris aad u badan ayaa ka guuraya sababtoo ah siyaasiyiintu kama dhigin awood-u-yeelashada qiimaha mudnaanta. Waxaan aaminsanahay in qof walba ay tahay inuu awoodo inuu ku noolaado meesha uu jecel yahay ee uu hoygiisa ugu yeero. Waxaan diyaar u ahay inaan halgankan gaarsiyo heerka xiga.

Waxaan ka soo shaqeeyay kooxaha kala guurka ee Guddoomiyaha Gobolka Ferguson, Madaxa Fulinta Zahilay iyo Duqa Magaalada Wilson sababtoo ah waxay ku kalsoon yihiin khibraddayda iyo awooddayda waxqabad. Hadda, Degmada King waa in ay bixisaa guryaha, daryeelka carruurta iyo kaabayaasha gaadiidka ee ay dadku u baahan yihiin.

Sida Guddoomiyaha Dekedda ahaan, waxaan u dooday xalalka daryeelka carruurta, fursadaha shaqada, waxaana fuliyay in ka badan \$5,000,000,000 oo mashaariicda hantida waaweyn ah wakhtigii loogu talagalay iyo miisaaniyaddii loogu talagalay. Ka hor Guddiga Dekedda, waxaan ka shaqeeyay Degmada King halkaas oo aan ugu adeegay bulshooyinka nugal anigoo horumarinaya sinnaanta iyo dhisidda nidaamyada la xisaabtanka. Waxaan fahamsanahay degmada iyo halka ay fursadaha horumarintu ku jiraan, waxaan fuliyay dib-u-habeyn dhab ah, waxaanan si gaar ah ugu diyaar garoobayay inaan daboolo baahiyaha bulshooyinkeena.

Sida Xubintaada Golaha Degmada ee xigta ahaan, waxaan u doodi doonaa ilaalinta ka-hortagga barakicinta ee kiraysteyaasha iyo mulkiileyaasha guryaha si isku mid ah. Waxaan u dagaalami doonaa fursadaha xanaanada carruurta ee la awoodi karo lana heli karo ee qoysaska, waxaana dalban doonaa maalgeshiyo lagu sameeyo kaabayaasha ammaanka gaadiidka si looga hortago dhimashooyinka. Waxaan mudnaanta siin doonaa maalgeshiyada hordhaca ah ee keena natiijooyin ka wanaagsan oo dhanka caafimaadka iyo ammaanka dadweynaha ah. Taas micnaheedu waa in si buuxda loo maalgeliyo caafimaadka maskaxda iyo xeeladaha looga hortago rabshadaha hubka ee ay bulshadu hoggaamiso, sida barnaamijyada dugsiga kadib iyo kuwa hagida.

Waxaa i taageeray Madaxa Fulinta Girmay Zahilay, Qareenka Magaalada Erika Evans, Xubinta Golaha Degmada Teresa Mosqueda, Xubnaha Golaha Magaalada Alexis Mercedes Rinck, Eddie Lin iyo Joy Hollingsworth, Guddoomiyaha Gobolka Inslee, sharci-dejiyayaasha, ururada shaqaalaha, ururada Dimuqraadiyiinta, iyo in ka badan 100 hoggaamiye bulsho oo horumarka jecel oo ka tirsan Degmada 2. Aan doorano mustaqbal ka wanaagsan.



Golaha Degmada Lr. 4

Jorge L. Barón



info@electjorgebaron.com
www.electjorgebaron.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Yale Law School; Shahaado Jaamacadeedka Dhaqaalaha iyo Taariikhda, Duke University

Shaqo iyo Xirfad:Xubinta Golaha Degmada King; Agaasimihii Hore ee Fulinta, Mashruuca Xuquuqda Soogalootiga ee Waqooyi Galbeed

Bayaanka: Saddexdii sanno ee la soo dhaafay, waxaan si adag uga shaqeynayay wax ka qabashada arrimaha ay deganeyaasha Degmada 4 iga codsadeen inaan mudnaanta siiyo: hubinta in nidaamyadeena sharciga ee dambiyada iyo madaniga ah ay u shaqeynayaan si wax ku ool ah iyo si caddaalad ah si aan u xoojino badqabka bulshada; xasillinta iyo xoojinta nidaamka ka jawaabista guri-la'aanta si aan u dhimno tirada dadka aan hoyga lahayn ee ku nool gobolkeena; ilaalinta rugaha caafimaadka dadweynaha iyo maalgashiga isbitaalka degmada, Xarunta Caafimaadka ee Harborview, si aan u dhowrno helitaanka daryeelka caafimaadka; hagaajinta badqabka iyo isku haleynta nidaamka gaadiidka Metro; iyo waxyaabo kale oo badan.

Aniga iyo kooxdayda waxaan xoogga saarnay inaan horumar ka sameyno arrimahaan adag, laakiin waxaan ogahay in shaqo aad u badan ay weli dhimman tahay, waxaana weli iga go'an mudnaanahan. Waxaan sidoo kale garawsanahay in xaqiiqada dad badan oo bulshadeenna ka mid ah ay maanta aad uga duwan tahay sidii ay ahayd 2023 markii aan markii ugu horreysay u tartamay xafiiskan. Wakhtigaas, maamul labaad oo Trump ah ayaa ahaa mid suurtagal ah. Maanta, waa xaqiiqo khatar ku ah ammaanka iyo fayo-qabka dad aad u badan, gaar ahaan deriskeena soogalootiga ah iyo deriskeena taraanisjendarka ah.

Gaar ahaan xilli sidan oo kale ah, waxaan aaminsanahay inay muhiim tahay in la helo hoggaamiyeyaal ku jira dowladda gobolka iyo tan deegaanka kuwaas oo aan tanaasul ka sameyn doonin difaacidda iyo horumarinta qiyaamka bulshadeenna iyadoo lala kulmayo maamul federaal ah oo sii kordhaya oo fowdo iyo kali-talisnimo ah, iyadoo isla markaana la sii wadayo raadinta siyaasado horusocod ah oo hagaajin doona nolosha deganeyaasheena.

Sababahan dartood, waxaan idinka codsanayaa, deriskayga ku nool Degmada 4, inaad i siisaan fursadda aan ku sii wadi karo matalaaddiinna ee Golaha Degmada King.

Waxaa taageeray Guddoomiyaha Gobolka Bob Ferguson; Xeer Ilaaliyaha Guud Nick Brown; Wakiilka Pramila Jayapal; Madaxa Fulinta ee Degmada King Girmay Zahilay; Dimuqraadiyiinta Degmada King; hoggaamiyeyaasha gobolka iyo kuwa deegaanka ee la doortay; ururada shaqaalaha; iyo ururada caddaaladda bulshada iyo deegaanka.



Golaha Degmada Lr. 6

Claudia Balducci



(425) 864-1767
claudiabalducci1@gmail.com
claudiabalducci.com

Waxbarashada: Shahaadada sharciga, Columbia University School of Law; shahaadada jaamacadda, Providence College

Shaqo iyo Xirfad:Hadda: Xubin Golaha Degmada. Hore: Duqa Magaalada/Xubinta Golaha Bellevue, Agaasimaha Xabsiyada, Qareenka Shaqaalaha

Bayaanka: Waxaan ku faanayaa inaan u adeegay sida hoggaamiye goboleed ahaan, anigoo natiijooyin u keenay Bariga Degmada King iyo bulshooyinka ku baahsan gobolkeena. Muddadii aan ku jiray Golaha Degmada King, waxaan isugu keenay dadka si wax looga qabto caqabadaha noogu waaweyn iyadoo la adeegsanayo xalal wax ku ool ah iyo in diiradda la saaro in wax la qabto.

Anigoo ku matalaya, waxaan hoggaamiyey dadaallada lagu ballaarinayo guryaha la awoodi karo, anigoo guddoominaya Guddiga Goboleedka Guryaha la Awoodi Karo isla markaana la shaqeynaya magaalooyinka, bixiyeyaasha guryaha, shaqaalaha, ganacsiga, iyo ururrada bulshada si loo qorsheeyo in ka badan 200,000 oo guri oo cusub oo la awoodi karo ee guud ahaan Degmada King. Waxaan hormuud ka ahaa horumarinta ku jihaysan gaadiidka dadweynaha si loo abuuro kumanaan guryo la awoodi karo ah oo u dhow tareenka fudud, waxaan gacan ka geystay hirgelinta Caafimaadka loo marayo Guryeynta (Health through Housing), waxaan u xaqiijiyay maalgelin deggan farshaxanka iyo dhaqanka iyada oo loo marayo Albaabbada Furan (Doors Open), waxaana sii waday hoggaaminta ballaarinta nidaamkeena gaadiidka goboleedka, oo ay ku jirto furitaanka tareenka fudud ee dusha buundada I-90 ilaa Eastside. Waxaan sidoo kale ka shaqeeyay xoojinta adeegyada guryo la'aanta iyo caafimaadka dabeecadda, hagaajinta ammaanka dadweynaha, dhowrista jardiinooyinka iyo goobta furan, ilaalinta xorriyadda dhalmada, difaacidda bulshooyinka soogalootiga ah, iyo maalgelinta barnaamijyada taageera carruurta, qoysaska, iyo shaqaalaha.

Sida Guddoomiyaha Golaha ahaan intii ay jirtay masiibada COVID-19, waxaan hoggaamiyey jawaab-celinta Golaha ee lagu hayay dowladda degmada mid furan, anigoo gargaar muhiim ah u fidinaya shaqaalaha, kiraysteyaasha, ganacsiyada yaryar, iyo deganeyaasha nugul. Waxaan kafaala-qaaday wax ka beddelka xeerka ee doorashooyinka degmada loogu rarayo sannadaha dhabanka ah si codbixiyeyaal aad u badan oo aad u kala duwan ay u doortaan wakiilladooda dowladda hoose.

Weli waxaa jira shaqo intaas ka badan oo la qabanayo. Waxaan sii wadi doonaa ballaarinta guryaha la awoodi karo, hagaajinta caafimaadka iyo ammaanka dadweynaha iyada oo loo marayo maalgeshiyo caqligal ah oo leh la xisaabtan, dhammaystirka shabakadeenna gaadiidka goboleedka, ilaalinta deegaankeena, taageeridda ganacsiyada yaryar iyo qoysaska shaqeeya, iyo hubinta in Degmada King ay bixiso dowlad wax ku ool ah, oo lala xisaabtami karo taas oo ka tarjumaysa qiyaamka dadka ay u adeegto. Waxay sharaf ii noqon lahayd inaan mar kale helo codkaaga.



Golaha Degmada Lr. 8

Teresa Mosqueda

info@TeamTeresa.org
TeamTeresa.org



Waxbarashada: Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, taqasus ah siyaasadda caafimaadka, Evergreen State College; Shahaadada Jaamacadda, University of Washington

Shaqo iyo Xirfad: Xubinta Golaha Degmada; horyaalka shaqaalaha, u-doodaha carruurta, hoggaamiyaha siyaasadda caafimaadka dadweynaha

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa dib-u-doorashada Golaha Degmada si aan u sii wado dhisidda Degmada King oo ka caafimaad badan, ka ammaan badan, kana qiimo jaban halkaas oo qoysaska shaqeeya ay ku barwaaqoobi karaan. Xilli kharashyadu ay kor u kacayaan iyo deris badan ay la dhibtoonayaan inay guryahooda ku sii jiraan, u ilaaliyaan helitaanka daryeelka, iyo inay nolosha maareeyaan - waxaan u baahanahay hoggaan dhiiran oo natiijooyin dhab ah u keena bulshooyinkeena.

Waxaan xirfaddayda ku qaatay u halgamidda shaqaalaha, carruurta, iyo bulshooyinka caafimaadka qaba. Intii aan joogay Children's Alliance iyo Guddiga Shaqaalaha Gobolka Washington, waxaan gacan ka gaystay helitaanka fasaxa jirrada ee lacagta leh, kordhinta mushaharka ugu yar, iyo ilaalinta ka xooggan ee shaqaalaha iyo tan soogalootiga. Golaha Magaalada Seattle iyo hadda Degmada King, waxaan dhisay isbahaysiyo si aan u ballaariyo guryaha la awoodi karo, u xoojiyo ilaalinta shaqaalaha, u maal geliyo caafimaadka habdhaqanka, una taageero ganacsiyada yaryar iyo ammaanka bulshada.

Gudaha Degmada King, waxaan ka shaqeeyay kordhinta maalgashiga ee guryaha la awoodi karo iyo kuwa taageerada leh, horumarinta adeegyada caafimaadka habdhaqanka, ilaalinta bulshooyinka soogalootiga iyo kuwa qaxootiga, iyo xoojinta kaabayaasheena caafimaadka dadweynaha. Sidoo kale waxaan u doodday maalgelinta gaadiidka dadweynaha, daryeelka carruurta, iyo horumarinta xoogga shaqaalaha si looga caawiyo qoysaska inay sii joogaan oo ay ku guulaystaan gobolkeena.

Mudnaantayda ayaa weli ah ballaarinta guryaha la awoodi karo iyo ka hortagga barakaca; hagaajinta badbaadada bulshada iyada oo loo marayo caafimaadka habdhaqanka iyo ka hortagga rabshadaha hubka; iyo maalgelinta qoysaska shaqeeya oo leh gaadiidka dadweynaha ee la heli karo, daryeelka carruurta, daryeelka caafimaadka, iyo fursadaha shaqo ee ururka.

Waxaan aaminsanahay in Degmada King ay si fiican u shaqeeyso marka aan ku hoggaaminno naxariis, isla xisaabtan, iyo ballanqaadka fursadda ee qof walba - iyadoo loo eegin lambarka boostada, dakhliga, ama asalka. Wadajir, waxaan sii wadi karnaa dhisidda Degmada King halkaas oo qof kastaa uu fursad u leeyahay inuu caafimaad qabo, hoy helo, badbaado helo, isla markaana uu adkaysi yeesho.

Waxaa si sharaf leh u taageeray Xildhibaan Jayapal; Guddoomiyaha Gobolka Ferguson; Xeer Ilaaliyaha Guud Nick Brown; dhammaan ururada taageeraya oo ay ku jiraan MLK Labor, Ururka Shaqaalaha SEIU, UFCW 3000, iyo Seattle Building Trades; Dimuqraadiyiinta Degmooyinka 34aad, 33aad, iyo 11aad; Progreso Latino Progress; Washington Conservation Action; Sanduuqa Waxqabadka Isbahaysiga Guriyeynta ee WA; Guddiga Siyaasadda Haweenka ee NW; iyo 200+ oo kale!

Nick Duda

(206) 261-4416
info@nickduda.com
www.nickduda.com



Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, Sayniska Siyaasadda, University of Notre Dame

Shaqo iyo Xirfad: La-taliyihii hore ee falanqeynta xogta; Hoggaamiyaha Siyaasadda ee dhawwaan ka tirsan Golaha Magaalada

Bayaanka: Qof kasta oo aan kula hadlo degmadeena dhexdeeda wuxuu rabaa waxyaabo isku mid ah: waddooyin ammaan ah, dugsiiyo wanaagsan, daaweyn loogu talagalay kuwa dhibaataysan, hawo iyo biyo nadiif ah, meel la awoodi karo oo qoys lagu koriyo ama ganacsi laga bilaabo, iyo dowlad u jawaabta bulshadeeda.

Sida qof noloshiisa oo dhan ahaa Dimuqraadi ahaan, waxaan la wadaagaa qiyaamkaas, laakiin waxaa cad inaanaynu ka soo baxayn iyaga. Jagadan ayaa kormeer ku leh dhibaatooyinka caafimaadka dadweynaha ee waddooyinkeena waxayna saameyn weyn ku leedahay siyaasadda maaliyadda. Inan si wax ku ool ah loo isticmaalin awooddaas waxay keentay in gobolkeenu uu hadda ka mid noqdo kuwa ugu liita dalka dhanka hoy la'aanta, dhimashada daroogo badsashada, dambiyada hantida, kharashka nolosha, iyo ka ganacsiga galmada ee ganacsiga ah. Natiijooyinkani ma aha maalgelin yari darteed; waxaan si joogto ah u kordhinay canshuuraha waxaana hoy la'aanta ku bixinay kharash ka badan ku dhawaaq gobol kasta oo Ameerika ah, iyadoo isla markaana aan sidoo kale aragnay hoos u dhacyo ku yimid diiwaan gelinta dugsiga, dhismaha guryaha, deganaanshaha xafiisyada, iyo shaqaaleysiinta. Kuwani waa xaqiiqooyin aan raaxo lahayn, laakiin waa kuwo daacad ah.

Madaxdeena waxay inta badan guusha ku cabbirraan inta ay kharash gareeyaan, ee ma aha sida waxtarka leh ee doolarradaas loo kharash gareeyo. Is weydii si daacad ah: ma gobolkeenu wuu ka wanaagsan yahay sidii uu ahaa sagaal sanno ka hor?

Ololahaygu wuxuu ku saabsan yahay hagaajinta natiijooyinkeenna. Taas waxay ka dhigan tahay ammaanka dadweynaha oo leh la xisaabtan dhab ah. Waxay ka dhigan tahay dariiqyo naxariis leh, oo daaweyn looga baahan yahay oo lagaga saarayo waddooyinka kuwa la tacaalaya ku tiirsanaanta daroogada. Waxay ka dhigan tahay dhisidda guryo badan iyadoo la hagaajinaayo bixinta oggolaanshaha lana dhimmayo caqabadaha hortaagan dhismaha cusub, iyo guryaha dadweynaha oo ammaan ah isla markaana xasillooni siinaya kuwa ugu nugul ee inaga mid ah.

Haddii aad tahay qof dhallinyaro ah oo qiimaha suuqa awgeed looga saaray, waalid ka welwelsan mustaqbalka ilmahaaga, ama degane muddo dheer deganaa oo canshuurta gurigaaga awgeed looga saarayo, dowladeena waa inay kuu shaqeysaa, ee ma aha danta gaarka ah iyo barnaamijyada fashilmay.

Horumarku ma aha oo keliya in kharash badan la bixiyo; horumarku waa bixinta natiijooyin ka wanaagsan. Waxaan ku weydiinayaa codkaaga si aan u keeno natiijooyinkaas ee waafaqsan qiyaamka gobolkeena.



Garsooraha Maxkamadda Sare Jagada Lr. 1

Colleen Melody



(206) 745-2010
hello@melodyforjustice.com
melodyforjustice.com

Khibradda Sharciga/Garsoorka: Garsooraha Maxkamadda Sare. Colleen Melody waxay maalin kasta ka shaqeysaa ilaalinta sareynta sharciga, hagaajinta helitaanka caddaaladda, iyo ilaalinta xuquuqda dadka Washington.

Khibrad Xirfadeed Kale: Colleen waxay ahayd qareen xuquuq madani ah oo xirfad dheer leh iyo adeege dadweyne. Waxay wax ka dhigtay Jaamacadda Washington waxayna keentay kiisas adeeg bilaash ah oo ay u qabatay muhaajiriinta iyo halyeeyada. Waxay ka shaqeysay dukaan biisa ah dugsiga sare waxayna miisaska ka shaqeysay intii ay kulliyadda ku jirtay.

Waxbarashada: UW oo ay ku qaadatay kulliyadda iyo dugsiga sharciga, labadaba sharaf sare leh.

Adeegga Bulshada: Colleen waxay ka shaqeysay hagaajinta helitaanka adeegyada bulshada miyigeeda, oo ay ku jiraan kheyraad ka wanaagsan waayeelka, adeegyo daryeel caafimaad oo kordhay, iyo daryeel carruur oo qiimo la awoodi karo leh.

Bayaanka: Colleen waxay ku kortay Spokane, gabadha macallin iyo u doodaha daryeelka caafimaadka. Anigoo ah qareen xuquuq madani ah, waxay ilaalisay dadka Washington ee xuquuqdooda ay ku xadgudbeen shirkado caalami ah, danaha gaarka ah, iyo dowladda federaalka. Colleen waxay soo celisay malaayiin mushahar ah oo shaqaalaha lagu lahaa waxayna shaqaalaha ka ilaalisay takoorka uurka iyo dhibaataaynta galmada. Anigoo ah hoggaamiyaha Qaybta Xuquuqda Madaniga ah ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, waxay ka adkaatay Maamulka Trump markii uu isku dayay inuu soo rogo Mamnuuciddiisa Muslimiinta ee aan dastuuriga ahayn iyo inuu qoysaska ku kala saaro xadka.

Hadda in ka badan weligeed, maxkamadaha gobolku waa inay xuquuqdeena ku ilaaliyaan madax-bannaani iyo dhex-dhexaadnimo. Sharciyada Washington waxay bixiyaan ilaalin ballaaran oo ku saabsan asturnaanta, goobta shaqada, guriyeynta, daryeelka caafimaadka, iyo waxbarashada. Maxkamadaha gobolku waa inay noqdaan meelo dhibaneyaasha dambiyada iyo takoorka ay caddaalad ku raadsan karaan iyagoo leh ammaan iyo sharaf.

Colleen waa hooyo shaqeysa oo la nool ninkeeda iyo laba gabdhood oo dhigta dugsiyada dadweynaha oo ku nool Galbeedka Washington ee miyiga ah. Waxaa taageeray Garsoore kasta oo hadda fadhiya Maxkamadda Sare; Garsooreyaasha hawlgabka ahaa Yu iyo Madsen; Guddoomiyeyaasha Ferguson, Inslee, iyo Gregoire; Xeer Ilaaliyaha Guud Brown; boqolaal garsooreyaal iyo hoggaamiyayaal la doortay oo gobolka oo dhan ah, iyo Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington.

Xuquuqdaadu waa muhiim. Garsoore Colleen Melody waxay xirfaddeeda oo dhan ka shaqeysay ilaalintooda.

Scott Edwards



(206) 201-1108
info@votescottedwards.com
votescottedwards.com

Khibradda Sharciga/Garsoorka: Ballard Spahr/Lane Powell (2010-hadda) (Guddoomiyaha Ku-dhaqanka 2010-2024) (Guddiga 2017-2019, 2023-24); Perkins Coie (1999-2010); Bogle & Gates (1996-1999). Khibrad muhiim ah oo hortaalay maxkamadaha Washington oo ku saabsan arrimaha dastuuriga ah iyo arrimo kale oo adag; Waxaa lagu Qiimeeyay inuu ka mid yahay kuwa ugu sareeya goobtayda: Qareennada Sare, Qareennada Ugu Wanaagsan ee Mareykanka, iyo Chambers.

Khibrad Xirfadeed Kale: Barafasoor Ku-xigeen, Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Washington (2002-hadda); Ururka Qareennada Gobolka Washington; Ururka Qareennada Mareykanka; Golaha Canshuuraha Gobolka.

Waxbarashada: Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Washington (oo leh Maamuus) 1991; Jaamacadda Princeton (magna cum laude) 1988, Dhaqaalaha - helaha Abaalmarinta Paul Volcker.

Adeegga Bulshada: Laanqayrta Cas ee Mareykanka; Parish-ka St. Cecilia; Sahaminta Ameerika; Kooxda Muusigga Dhallinyarada ee Bainbridge Island; Carruurta ku jira Bandhigga.

Bayaanka: Waxaan u tartamayaa inaan Maxkamadda Sare ee Washington u keeno madax-bannaani, xukun mabda' leh, iyo ixtiraamka sareynta sharciga. Maxkamad madax-bannaan waxay ilaalisaa xuquuqaha dastuuriga ah, waxay xaqiijisaa caddaalad siman, waxayna u adeegtaa sidii hubin kama dambeys ah oo dheelitiran oo ku jirta hannaanka dowladeena. Doorke Maxkamadda Sare waa inay ku dhaqdo dastuurka iyo sharciyada sida loo qoray, ee ma aha inay dib u qorto.

In ka badan 30 sanno waxaan macaamiil ku matalay dhammaan heerarka hannaanka maxkamadaha Washington, oo ay ku jiraan in ka badan darsin kiis oo Maxkamadda Sare ee Washington ah. Anigoo ah qareen canshuurta iyo dastuurka, waxaan ka shaqeeyaa arrimo adag oo si toos ah u saameeya qoysaska iyo ganacsiyada Washington. Waxaan sidoo kale wax ka dhigay Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Washington in ka badan 20 sanno.

Waxaan hore u bartay qiimaha shaqada adag, daacadnimada, iyo adeegga dadweynaha, anigoo ka shaqeynayay maqaayadda awoowayaashay, isla markaana arkay aabbahay oo u adeegaya xeer ilaaliyaha guud ee Alaska. Washington waxay mudan tahay garsooreyaal sharciga u adeegsan doona si la saadaalin karo, sida loo qoray, iyo iyagoon u eexanayn ajande siyaasadeed. Ballanqaadkaygu waa inaan ilaaliyo xuquuqahaaga dastuuriga ah oo aan ka shaqeeyo in Maxkamadda Sare ee Washington noqoto mid lagula xisaabtami karo oo u qalanta kalsoonidaada.

Siyaasadda ka saar qolka maxkamadda. U codee Scott Edwards, Jagada 1aad.



Garsooraha Maxkamadda Sare Jagada Lr. 3

David Stevens

(360) 789-1405

DavidforJustice@yahoo.com

JudgeStevensforWA.com



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Garsooraha Maxkamadda Sare ee Degmada; Dacwad-oogaha Sare ee Dambiyada Waaweyn; Difaacaha Dadweynaha ee Federaalka, Madaxa Difaacaha Dadweynaha ee Qabiillada Colville Confederated; Dacwad-oogaha Federaalka; Dacwad-oogaha Caalamiga ah ee Pristina, Kosovo; La-taliyaha Caddaaladda ee Bamiyan, Afghanistan.

Khibrad Xirfadeed Kale: Baare Xuquuqda Madaniga ah ee Federaalka; Halyeeyga Ciidanka Badda ee Dalka Mareykanka; soo jeediye: siminaarro waxbarasho sharci oo ka dhacay Bayruut, Lubnaan, Kolasin iyo Budva, Montenegro, iyo Ururka Dacwad-oogayaasha Washington.

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Washington; Shahaadada Jaamacadda, Jaamacadda Washington. Shahaadada Waaxda Arrimaha Dibedda ee Fiigga Islaamiga.

Adeegga Bulshada: Kaaliyaha Wadaadka, Kaniisadda Lutheranka ee Mount Olive; VFW Larry Godwin Post 1694 Honor Guard; Skookum Rotary; La-taliyaha Dugsiga Sharciga ee UW; YMCA iyo garsooraha maxkamadda dacwadaha matallaadda ee Dugsiga Sharciga ee UW.

Bayaanka: Waajibbaadka Maxkamadda Sare ee Gobolka Washington waa inay ilaaliso dastuurkeena oo ay difaacdo xuquuqdeena iyo xorriyaddeena. Siyaasadda dadweynaha waxaa iska leh laamaha siyaasadeed ee ma aha maxkamadaha.

Labadii tobanaan sanno ee u dambeeyay, magacaabista tooska ah ee garsooreyaasha ee uu sameeyo guddoomiyaha gobolka halkii dadku ka dooran lahaayeen garsooreyaasha waxay noqotay dhaqan muddo dheer jiray. Dastuurka Gobolkeenu wuxuu faray doorashada garsooreyaasha sababtoo ah magacaabista tooska ah waxay keentaa go'aanno *mabda'iyeed iyo siyaasadeed*. Magacaabista waxaa loogu talagalay boosaska bannaan. Garsoore Stevens waa la doortay oo lama magacaabin. Doorashadiisu waxay Maxkamadda Sare u keenni doontaa caqli caadi ah iyo dheellitir.

Ka dib Dugsiga Sare, Garsoore Stevens wuxuu ku biiray Ciidanka Badda. Ka dib adeeggiisa militari, wuxuu adeegsaday faa'iidooyinkiisa halyeeyga hore si uu u dhigo Jaamacadda Washington halkaas oo uu kula kulmay xaaskiisa Pam. Ka dib markii uu qalin jebiyay, wuxuu u shaqeeyay sidii Baare Xuquuqda Madaniga ah ee Federaalka oo ka tirsanaa Xarunta Dhaqangelinta Guriyeynta Caddaaladda ee Seattle, isagoo la dagaalamaayay takoor ku salaysan jinsi, qowmiyad, iyo diin. Kadib wuxuu galay Dugsiga Sharciga ee UW. Garsoore Stevens iyo xaaskiisu waxay ku nool yihiin Shelton u dhow lix ka mid ah sagaalkooda ay awoow/ayeeyo u yihiin..

Qareen iyo garsoore ahaan wuxuu qaaday in ka badan laba boqol oo maxkamado xeerbeegti ah. Taageerayaashii waxaa ka mid ah qabiillo, garsooreyaal, difaacayaasha dadweynaha, dacwad-oogayaal, qareenno, iyo hey'adaha fulinta sharciga.

Jaime Michelle Hawk

(206) 486-2959

info@judgehawk.com

www.judgehawk.com



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Garsoore Jaime Hawk waxay ahayd hoggaamiye sharci oo heer gobol iyo heer qaran ah in ka badan 20 sanno. Sida Garsoore Maxkamadda Sare, difaacaha dadweynaha federaalka, iyo qareen xuquuq madani ah oo ACLU ahaan, waxay ilaalisay xuquuqdeena iyo xorriyaddeena.

Khibrad Xirfadeed Kale: Bare Ku-xigeen Sharciga. Guddiga Dadka Laga Tirada Badan iyo Caddaaladda ee Maxkamadda Sare. Shaqadii ka hor dugsiga sharciga, Garsoore Hawk waxay taageertay dadka ka badbaaday rabshadaha qoyska waxayna u heshay hoy ammaan ah.

Waxbarashada: Iyadoo ay korisay hooyo keligeed ah, Garsoore Hawk waxay ahayd qofkii ugu horreeyay qoyskeeda ee dhigta kulliyad, iyadoo sharaf kaga qalin jebisay Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Gonzaga.

Adeegga Bulshada: Garsoore Hawk waxay guddiyo uga dooday carruurta muhaajiriinta ah, xuquuqda codeynta, halyeeyada, iyo xuquuqda haweenka.

Bayaanka: Garsoore Hawk waxay qolka maxkamadda ugu dagaallantay kuwa aan awoodin inay qareen helaan. Waxay qabatay maxkamadeynno iyo racfaanno, waxayna dadka Washington ka difaacday dowladda federaalka. Iyadu waa qareenkii ugu horreeyay ee ACLU of Washington ka tirsan ee noqda garsoore. Xildhibaanad Pramila Jayapal iyo Guddoomiyaha Gobolka Bob Ferguson waxay taageerayaan Garsoore Hawk.

Garsoore Hawk waa hoggaamiye sharci oo lagu kalsoon yahay oo khibrad leh. Senatarrada Murray iyo Cantwell ayaa u magacaabay guddigooda xulashada garsooraha federaalka. Ururka Qareennada Mareykanka ayaa u xushay inay kormeerto dhegaysiyada militariga ee Guantanamo Bay, ka dibna waxay u dooratay inay caawiso qoysaska xadka ku kala go'ay siyaasadaha socdaalka ee xilligii Trump.

Garsoore Hawk waxay guddoomisay boqolaal kiis oo dambiyeed, madani, iyo sharciga qoyska ah, iyo sidoo kale racfaanno ka yimid maxkamadaha hoose. Marna maxkamadeyn ay guddoomisay looma rogin khalad sharci awgiis. Waxay raacdaa sharciga. In ka badan 100 garsooreyaal iyo garsooreyaal hawlgab ah oo hadda jira oo ka kala socda Washington oo dhan ayaa taageeray Garsoore Hawk.

Garsoore Hawk waxay keenni doontaa cod xooggan oo madax-bannaan. Waxaa taageeray Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka, ururada Dimuqraadiga ee maxalliga ah iyo degmada, iyo Golaha Shaqaalaha Gobolka, waxay fahamsan tahay welwelka haweenka iyo qoysaska shaqeeya waxayna aragtidaas u keenni doontaa Maxkamadda. Garsoore Hawk waxay ilaalin doontaa xuquuqdeena iyo sareynta sharciga.



Garsooraha Maxkamadda Sare Jagada Lr. 4

Ian Birk

info@ianbirk.com
www.ianbirk.com



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Garsoore, Maxkamadda Racfaanka Gobolka, oo uu magacaabay Guddoomiye Jay Inslee, dabadeedna la doortay. Aad baan ugu faraxsanahay inaan u adeego maxkamadda labaad ee ugu sareysa gobolka, anigoo dhegaysanaya kiisaska gobolka oo dhan.

Khibrad Xirfadeed Kale: Labaatan sanno oo shaqo gaar ah lagu hayay, iyadoo la matalayo shakhsiyaadka, qoysaska, iyo ganacsiyada yaryar - badanaa ka dhanka ah danaha shirkadaha ee awoodda badan - kiisaska ku lug leh sheegashooyinka caymiska, ilaalinta macaamiisha, takoorka goobta shaqada, iyo dacwadaha madaniga ah ee adag.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda (BA) and Shahaadada Sharciga (JD), University of Washington

Adeegga Bulshada: In ka badan 10 sanno oo adeeg sharci ah oo aan ka qabtay Xarumaha Sharciga ee Xaafadaha ee Ururka Qareennada Degmada King, anigoo siinaya gargaar sharci oo bilaash ah dadka aan awoodin inay qareen helaan. Kiisas badan waxay ku lug lahaayeen kiraysteyaal, macaamiil, iyo qoysas shaqeeya oo wajahaya amni darro dhaqaale ama hoy oo degdeg ah.

Bayaanka: Waxaan ku faanayaa inaan ahay musharaxa keliya ee jagadan ku jira oo leh khibrad garsoor oo heer gobol ah iyo taariikh racfaan oo muujinaysa ixtiraamka sharciga, saameynta uu ku leeyahay bulshooyinka, iyo dhammaan dadka aan u adeegno. Astaanta khibraddayda ee matalaysa dadka reer Washington ee maalin walba, waxaan Maxkamadda Sare u keeni doonaa aragti gaar ah, halkaas oo aan ku sii wadi doono qorista ra'yi madax-bannaan, caddaalad ah, oo ku saleysan qiimeeyaal la wadaago.

Kiis kasta oo aan qareen ahaan u qaatay, oo aan garsoore ahaan u maqlay, waxaan diiradda saaray xuquuqda qof kasta uu u leeyahay inuu helo caddaalad siman, sinnaan sharciga waafaqsan, iyo natiijooyin caddaalad ah. Waxaan qoray boqolaal go'aan oo ku saabsan sharciga madaniga ah, dambiyada, qoyska, maamulka, iyo dastuurka, waayo aragnimo ballaaran oo aan lala tartami karin, taas oo ay "Si Gaar ah oo Wanaagsan ugu Qalma" ku qiimeeyeen Qareennada Haweenka ee Washington iyo Mujtamaca Cardozo.

Waxaa si sharaf leh ii taageeray Xeer Ilaaliye Nick Brown, Garsooreyaasha Maxkamadda Sare Gonzalez, Gordon-McCloud, Whitener, Montoya-Lewis, Mungia, Angelis, Garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee hore Ireland iyo Yu, in ka badan 100 oo ka tirsan garsooreyaasha oo laga soo doortay dhammaan 39-ka degmo ee Washington, Wakiilka Dalka Mareykanka Pramila Jayapal, Madaxa Fulinta Degmada King Girmay Zahilay, Golaha Shaqaalaha Gobolka WA, Ururka Mashiiinisteyasha, Macallimiinta, Dimuqraadiyiinta Degmada King, iyo kuwo kale.

Si Wadajir ah, waxaan u ilaalin karnaa sharafta iyo madax-bannaanida maxkamadaheenna wakhtiyada adag. Waxaan ku weydiisanayaa codkaaga.

Sean O'Donnell

(206) 588-6172
campaign@odonnellforjustice.com
odonnellforjustice.com



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Garsoore ka tirsan Maxkamadda Sare ee Degmada King tan iyo 2013; Garsoore Ku-Meelgaar oo ka tirsan Maxkamadda Sare ee Gobolka Washington; waxaa garsooreyaal gobolka oo dhan iigu doorteen Madaxweynaha Ururka Garsooreyaasha Maxkamadda Sare; Madaxa Waaxyada Sharciga Qoyska iyo Dambiyada ee Degmada King; Garsoore Baaris Gaar ah; garsoore hormuud u ah maxkamadda caafimaadka dhimirka; xeer ilaaliye muddo 12 sanno ah, ka tirsanaa Hawlgalka Green River oo maxkamadeeyay kiiskii ugu horreeyay ee ka ganacsiga dadka ee Washington; Kaaliyaha Gaarka ah ee Qareenka Dowladda Federaalka; guddoomiyaha Guddiga Hawlgalka Badbaadada Maxkamadda Dacwad-qaadista ee gobolka oo dhan.

Khibrad Xirfadeed Kale: Macallinka Ku-xigeenka, Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Seattle

Waxbarashada: Dugsiga Sharciga ee Seattle University, J.D. cum laude; Georgetown University, B.A.

Adeegga Bulshada: Golaha Kheyraadka Ardayda Rainier; dhexdhexaadiye mutadawac ah; garsoore maxkamadeyn oo mutadawac ah

Bayaanka: Waxaan ku jiray adeegga dadweynaha muddo 25 sanno ah anigoo ah garsoore maxkamadeed, Garsoore Ku-Meelgaar oo Maxkamadda Sare ah, iyo dacwad oogaha. Waxaan ilaaliyay xuquuqda dastuuriga ah ee shakhsiyaadka, waxaan taageeray sharciga, waxaan diiradda saaray codadka dhibbaneyaasha dambiyada ee nidaamkeena caddaaladda.

Waan ogahay doorka sharcigu ka ciyaaro ilaalinta iyo u adeeggida dhammaanteen. Waxaan bilaabay shaqadeyda sharciga anigoo ka caawinnaya sidii loo soo taagi lahaa dambiilaha Green River. Anigoo ah Garsooraha Sare ee Sharciga Qoyska, waxaan gacan ka gaystay bilaabista maxkamad amar ilaalin ah taas oo keentay in boqolaal hub ah ay soo dhiibaan dad gaystay falal rabshado qoys. Waxaan ku nool nahay wakhtiyo aan horrey loo arag oo ku saabsan dimuqraadiyadeena. Anigoo ah Garsoore, waxaan difaaci doonaa xuquuqdeena iyo Dastuurka, waxaan ilaalin doonaa dhexdhexaadnimada, mar walbana waan xasuusan doonaa in xukunnadaydu ay saameeyaan dadka dhabta ah.

Waxaan ku faanayaa in ururo badan oo qareenno ah ay ii qiimeeyeen "Si Gaar ah oo Wanaagsan ugu Qalma" Maxkamadda Sare, waxayna ii magacaabeen "Garsooraha Sannadka" Cutubka Washington ee Guddiga Qareennada Maxkamadaha Mareykanka.

Taageerooyinka: Guddoomiye Christine Gregoire, Xildhibaan Adam Smith, Xildhibaan Marilyn Strickland, Guddoomiyaha Dhulka Dave Upthegrove, Madaxweynaha Golaha Magaalada Seattle Joy Hollingsworth, 15 duq magaalo, madaxda degmooyinka, Xafiiska Beeraha Washington, Golaha Booliiska iyo Sheriff-ka Washington, iyo in ka badan 200 oo mas'uuliyiinta garsoorka oo ka tirsan maxkamadaha dambiyada iyo racfaanka.



Garsooraha Maxkamadda Sare Jagada Lr. 5

Theo Angelis

info@justiceangelis.com
www.justiceangelis.com



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Garsooraha hadda ee Maxkamadda Sare oo uu magacaabay Guddoomiyaha Gobolka Ferguson kadib xirfad sharci oo kala duwan, abaalmarinno helay, 26-sanno ah isagoo ahaa Lammaane ka tirsan K&L Gates.

Khibrad Xirfadeed Kale: Intii uu ku jiray xirfaddiisa, wuxuu hoggaamiyey kooxaha Rafcaannada iyo Hantida Garaadka, iyo kiisaska adeeg bilaash ah ee matalaya carruurta soo-galootiga ah, halyeeyada, qaxootiga, ganacsiyada yaryar, iyo dadka la kulmaya hoy la'aan.

Waxbarashada: BA, Kulliyadda Claremont McKenna; MA, Jaamacadda Oxford; MA, Dugsiga Dhaqaalaha ee London; JD, Jaamacadda Yale

Adeegga Bulshada: Wakiilka, Ururka Qareennada Degmada King; Madaxweyne, Ururka Sharciga ee Bariga Dhexe ee Washington; Xubin, Kooxda Hawsha Badqabka Internetka Dhallinyarada ee Xeer Ilaaliyaha Guud; Abaalmarinta Aasaaseyaasha, Carruurta u Baahan Difaaca; Abaalmarinta Bani'aadannimada ee ACLU; La taliyaha Sannadka, Ururka Qareennada Degmada King

Bayaanka: Anigoo ah Garsoore iyo intii aan ku jiray xirfaddayda sharciga, waxaan u dagaallamay ku-dhaqanka sharciga, xuquuqda dhammaan shakhsiyaadka, iyo in la hubiyo in maxkamadaheennu ay ahaadaan kuwo caddaalad ah, madax-bannaan, oo la heli karo. Ka hor intaan ku biirin Maxkamadda Sare, waxaan si joogto ah mutadawac ugu ahaa caawinta dadka aan awoodin qareenno. Waxaan dacweeyay dowladda federaalka markii ay ku khasbeen carruur—da'doodu tahay ilaa ka ugu yar 4 sanno—inaanay qareenno la'aan uga soo muuqdaan maxkamadda socdaalka. Dowladda federaalka ugu dambeyntii waxay oggolaatay inay bixiso qareenno, ACLU-na waxay i siisay Abaalmarinta Bani'aadannimada.

Waxaan sidoo kale matalay halyeey hore Ciidanka ka tirsanaa, muwaadin Mareykan ah oo dhalasho qaatay, kadib markii ICE si khaldan u xirtay toddoba bilood. Mashruuca Xuquuqda Soo-galootiga ee Northwest wuxuu i siiyay Abaalmarinta Amicus shaqadayda "horumarka horseedday".

Waxaan ka shaqeeyay inaan la taliyo qareenno si loo ballaariyo kala-duwanaanshaha xirfadeenna, anigoo leh asal Turkish iyo Greek ah, waxaan ku faanayaa inaan ahay Garsoorihii ugu horreeyay ee asal Bariga Dhexe ku leh maxkamadeenna ugu sareysa.

Waxaa i taageeray dhammaan asxaabta Maxkamadda Sare; Guddoomiyeyaasha Gobolka Ferguson iyo Gregoire; Xeer Ilaaliyeyaashii hore ee Mareykanka Durkan, Gorman, iyo McKay; in ka badan 500 Garsooreyaal iyo qareenno gobolka oo dhan; 52 Xildhibaan Gobolka; Madaxa Fullinta Zahilay; duq-magaalooyin gobolka oo dhan; Golaha Shaqaalaha Gobolka WA; Degmada King iyo Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta badan; iyo kuwo kale!

Dave Larson

(206) 207-2903
campaign@larsonforjustice.com
www.larsonforjustice.com



Khibradda Sharciga/Garsoorka: 41 sanno oo khibrad sharci ah; garsooraha maxkamadda dacwadaha (18 sanno, Hawlgab), qareen maxkamadeed (23 sanno). Waxaa lagu qiimeeyay AV Heerka Ugu Sarreeya isagoo ah qareen maxkamadeed iyo Si Gaar Ah U Qalma (Garsoore iyo musharax Maxkamadda Sare).

Khibrad Xirfadeed Kale: Dhexdhexaadiye iyo Garnaqsiye (1990–2008); Madaxweynaha, Guddiga Dugsiga Federal Way

Waxbarashada: JD, Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Seattle; BA, Jaamacadda Puget Sound.

Adeegga Bulshada: Abaalmarinta Madaxweynaha ee DMCJA ee Ilaalinta Madax-bannaannida Garsoorka (2018); Abaalmarinta Judge William Nevins (2014) iyo Geesiga Dugsiyada Federal Way (2018, 2022) ee Ballanqaadka Waxbarashada Madaniga ah; Hoggaamiyaha Magaalada ee ugu Wanaagsan (2022); Kiwanis (Abaalmarinta Geesiga Maalin Walba iyo kuwo kale); Aasaasaha, Naadiga Aktion ee Federal Way (naadiga adeegga ee dadka waaweyn ee leh naafonimooyinka korriinka), iyo kuwo kale.

Bayaanka: 41-ka sanno ee khibradda heerka sare ah ee Garsoore Dave Larson, 18 sanno oo uu ahaa garsoore maxkamadeed, 23 sanno oo uu ahaa qareen maxkamadeed, waxay sameeyaan rikoor aan la barbar dhigi karin oo ka dhigaya musharaxa ugu qalma uguna diyaarsan maxkamadda ugu sareysa gobolkeena.

Dave wuxuu dib u soo celin doonaa kalsoonida maxkamadaheena isagoo ka sareeya danaha xisbiyeed, sharciga ku dabaqaya cabsi la'aan ama eex la'aan, isla markaana dib u soo celinaya madax-bannaannida garsoorka. Musharax dhab ahaan aan xisbi lahayn, Dave wuxuu la xiriiiraa Dimuqraadiyiinta, Jamhuuriyiinta, Shaqaalaha, Ganacsiga, iyo codbixiyeyaasha Bariga iyo Galbeedka Washington oo dhan, sababtoo ah caddaalad u adeegta qaar naga mid ah oo keliya midna inama wada adeegdo. Wuxuu ilaalin doonaa xuquuqahaaga shakhsiyadeed iyo madax-bannaannida garsoorka ee hadda halista ku jirta.

Dib-u-habaynta caddaaladda dambiyada ee hal-abuurka leh ee Dave ayaa laga aqoonsaday dalka oo dhan. Wuxuu la shaqeeyay Dimuqraadiyiinta iyo Jamhuuriyiinta sharci-dejinta si uu uga caawiyo maxkamadaheena dacwadda inay la tacaalaan dambiga iyo balwadda si naxariis iyo isla-xisaabtan leh. Hase yeeshee, go'aannada Maxkamadeenna Sare ayaa wiiqay jawaabtaas. Garsooraha Maxkamada Sare ahaan, wuxuu ka caawin doonaa hagaajinta dhibaatooyinka hadda jira iyo dhisidda xalal waara oo wax ku ool ah.

Maxkamadeenna Sare waxay u baahan tahay aragtida gaarka ah ee Dave ka helay khibraddiisa muhiimka ah ee garsoore maxkamadeed. Khibraddaas, daacadnimadaas, iyo xukunkaas degan ayaa si sax ah waxa loo baahan yahay si dib loogu soo celiyo kalsoonida maxkamadaheena, loona hagaajiyo. U codee Garsoore Dave Larson Maxkamadda Sare.



Garsooraha Maxkamadda Sare Jagada Lr. 7

Debra L. Stephens



(206) 382-5552

debra@debrastephenslaw.com

justicestephens.com

Khibradda Sharciga/Garsoorka: Madaxa Garsoorka hadda iyo Garsoore ilaa 2008. Xaakinka Maxkamadda Racfaanka, Bariga Washington (2007). Qareen Racfaan & barafasoor ku-meel gaar ah, Jaamacadda Gonzaga (1993-2007).

Khibrad Xirfadeed Kale: Guddoomiye-Wadaagga Guddiga Maamulka Garsoorka, Ururka Qaranka ee Haweenka Garsooreyaasha, Guddoomiye-Wadaagga Guddiga Madax-bannaannida Garsoorka, Guddiga Fulinta ee Shirka Madaxda Garsooreyaasha Maxkamadda Sare, Agaasimaha Machadka Qaranka ee Maxkamadaha & Sayniska, Macallinka Kulliyadda Qaranka ee Garsoorka, Golaha Waxbarashada Madaniga ah ee WA, macallin hore oo ka tirsanaa Kulliyadda Bulshada ee Spokane.

Waxbarashada: Jaamacadda Gonzaga, J.D., B.A. Dugsiga Sare West Valley, Spokane.

Adeegga Bulshada: Guddoomiyihii hore ee guddiga dugsiga, hagaha Upward Bound, Guddiga Dadka Tirada Yar & Caddaaladda, YMCA Dhallinyarada & Dowladda, Sacred Heart Children's Hospital, Habitat for Humanity, Madaxweynihii hore ee Rotary, xubin guddiga Xarunta Washington ee Farshaxanka Bandhigga.

Bayaanka: Anigoo ah Madaxa Garsoorka ee Washington, waxaan u heellanahay ilaalinta ku dhaqanka sharciga iyo bixinta caddaalad cadaalad ah oo aan eex lahayn. Maxkamaduhu waa laan muhiim ah oo ka mid ah dowladda, halkaas oo qof kasta loola dhaqmo si caddaalad ah iyo sharaf leh, go'aannaduna waa inay ku saleysnaadaan sharciga iyo xaqiiqooyinka. Xilli ay sii kordhayaan isku-dayada lagu siyaasadeynayo garsoorka, waxaan maalin kasta ka shaqeeyaa ilaalinta daacadnimada iyo madax-bannaannida maxkamadaheena iyo dhawrida helitaanka caddaaladda ee qof kasta.

Anigoo ah barafasoor hore oo sharciga dastuurka ah, waxaan ixtiraamaa dhaqannada sharciga iyo mabaadi'da dastuuriga ah. Anigoo ah waalid iyo guddoomiyihii hore ee guddiga dugsiga, waxaan fahamsanahay sida go'aannada maxkamaduhu u saameeyaan nolosha qoysaska Washington. Anigoo ah haweeneydii ugu horreysay ee ka timid Bariga Washington ee ka mid noqota Maxkamadda, waxaan ogahay in waayo-aragnimada nololeed iyo aragtiyaha kala duwan ay muhiim u yihiin sameynta go'aanno sax ah.

Waxaan leeyahay rikoorka la xaqiijiyay oo ku saabsan ballaarinta helitaanka caddaaladda, hagaajinta hufnaanta iyo daah-furnaanta, wax ka qabashada caqabadaha isbeddelaya ee hannaankeena sharciga, iyo ilaalinta xuquuqaha qofka. Mar walba waxaan helay taageero ballaaran, waxaana i taageeray saaxiibbadayda hadda iyo kuwii hore, xaakinnada gobolka oo dhan, Golaha Shaqaalaha Gobolka ee WA, mas'uuliyiinta la doortay, iyo hoggaamiyeyaasha waxbarashada iyo bulshada. Waxaan codsanayaa codkaaga si aan u sii wado inaan kaaga adeego Maxkamadeenna Sare.

Todd A. Bloom



(360) 876-2588

electtodd bloom@gmail.com

Khibradda Sharciga/Garsoorka: In ka badan labaatan sanno oo bixinta adeegyo sharci iyo xirfadeed ah shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa dadweynaha lagu leeyahay, madaxda fulinta, mulkiileyaasha ganacsiga iyo qoysaska Washington; wuxuu u adeegay sidii Garqaade FINRA laga bilaabo 1999 ilaa 2020.

Khibrad Xirfadeed Kale: In ka badan toban sanno isagoo ah qareen canshuur iyo maamule sare oo ka tirsan shirkadaha xisaabaadka waaweyn. Sarkaal Ciidanka Badda oo adeeg firfircoon ku jiray laga bilaabo 2002 ilaa 2013. Magacaabisyo xirfadeed oo dheeraad ah: CPA, CFA iyo CFP.

Waxbarashada: LL.M. - Jaamacadda Washington; J.D., M.B.A. - Jaamacadda Tulane; M.A. - Kulliyadda Dagaalka Badda; B.A. - Kulliyadda Simpson; Kulliyadda Taliska Badda & Shaqaalaha; U Qalma Dagaalka.

Adeegga Bulshada: WSBA - Guddiga Guddoomiyeyaasha; Golaha Maaliyadda ee Ururada Aan Faa'iido Doonka Ahayn; macallin ku-xigeen (UW, Tulane); Ku-deeqaha Dhiigga ee ah in ka badan Gallon

Bayaanka: Intii aan ku jiray xirfaddayda, waxaan ka shaqeeyay xallinta dhibaatooyin adag si taxaddar leh, wada-shaqeyn leh, oo caddaalad ah. Taariikhdayduna waxay i siisay qadarin qoto dheer oo ku saabsan shaqada adag, u huridda, iyo waayo-aragnimada dadka caadiga ah. Si aan dugsiga isaga bixiyo, waxaan ka shaqeeyay beeraha, raashiinka iyo shaqooyinka maqaayadda, ka dibna waxaan komishankayga ka kasbaday darajooyinka askarta laga qoray.

Ka dib 9/11, waxaa laygu yeeray Keydka Ciidanka Badda si aan u galo adeeg firfircoon, halkaas oo aan u adeegay in ka badan toban sanno. Waxaan hakiyay xirfaddaydii rayidka ahayd, waxaanan ka tagay xaaskayga iyo carruurta si aan ugu hawlallo Persian Gulf. Waayo-aragnimadaas waxay saameyn weyn ku yeelatay fahamkayga waajibaadka, isla-xisaabtanka, iyo hoggaaminta cadaadiska ku jirta. Tan iyo markii aan ku soo laabtay nolosha rayidka, waxaan sii waday adeeggayga dadweynaha anigoo ka shaqeynaya Guddiga Guddoomiyeyaasha ee WSBA. Halkaas ayay ahayd markii la igu dhiirageliyay inaan u tartamo doorashada Maxkamadda Sare.

Doorashada sannadkan waa doorasho--in la sii haysto garsooreyaasha hadda jira ama codkaaga la siiyo qof cusub. Waxaan aaminsanahay inaan matalo aragti cusub oo macno leh, khibrad, iyo caqli caadi ah oo dheellitir u keenni doona maxkamadda.

Haddii la i doorto, waxaan ballanqaadayaa inaan kor u qaadi doono oo aan ku dabaqi doono sharciga si aan eex lahayn oo caddaalad ah. Si xushmad leh ayaan codkaaga uga codsanayaa Garsooraha Maxkamadda Sare, Jagada #7.



Garsooraha Jagada Lr. 5

David S. Mann



(425) 466-0619
judgedavidmann@gmail.com

Khibradda Sharciga/Garsoorka: Garsoore, Qaybta I, Maxkamadda Racfaanka, oo shaqeynayay tan iyo 2016 isla markaana qoray in ka badan 500 ra'yi. Shaqada qareennimo ee gaarka loo leeyahay ee xoogga saaraysa sharciga deegaanka iyo siyaasadda, xuquuqda madaniga ah, diiwaannada dadweynaha, isticmaalka dhulka, iyo dacwadaha dowladda ee furan muddo 25 sanno ah. Kiisaska waaweyn waxaa ka mid ahaa caawinnaadda ilaalinta Keydka Badda ee Maury Island oo laga difaacayay terminala weyn oo la soo jeediyay. Si guul leh ayuu uga dooday kiis muhiim ah oo Xeerka Xorriyadda Macluumaadka ah oo ka dhacay Maxkamadda Sare ee Mareykanka.

Khibrad Xirfadeed Kale: Xirfadlaha cilmiga dhulka/fiisigiska dhulka

Waxbarashada: J.D., Dugsiga Sharciga ee Northwestern, Kulliyadda Lewis & Clark; B.A., Jaamacadda California, Santa Barbara

Adeegga Bulshada: Xubin hore oo guddiga ah – Ilaalinta Northwest, Sanduuqa Northwest ee Deegaanka, Golaha Deegaanka ee Washington, Ururka Marymoor Velodrome

Bayaanka: Garsoore David Mann waxaa Guddoomiye Jay Inslee u magacaabay Maxkamadda Racfaanka Gobolka sannadkii 2016, waxaana loo doortay inuu sii hayo jagadaas sannadkii 2017, waxaana dib loo doortay sannadkii 2020. Wuxuu soo noqday Garsooraha Sare ee Qaybta I, wuxuuna hadda yahay garsooraha ugu muddada dheer maxkamadda tobanka xubnood ka kooban. Sidoo kale waa xubin ka tirsan Guddiga Maamulka Garsoorka ee Gobolka.

Ka dib xirfad uu ku lahaa fiisigiska dhulka, Garsoore Mann wuxuu qaatay shahaadada sharciga 35 sanno ka hor wuxuuna bilaabay xirfad guul leh oo ah qareen ku takhasusay deegaanka iyo isticmaalka dhulka. Xirfaddiisa, aqoontiisa qoto dheer, iyo u heellanaantiisa qiyaamka Waqooyigalbeedku waxay ka faa'iideeyeen kooxaha muwaadiniinta, qabiillada Hindida Mareykanka, iyo mulkiileyaasha hantida gaarka ah ee gobolka oo dhan. Wuxuu ka dooday kiisas muhiim ah maxkamadaha gobolka iyo kuwa federaalka, oo ay ku jirto racfaan guul leh oo Xeerka Xorriyadda Macluumaadka ah oo loo gudbiyay Maxkamadda Sare ee Dalka Mareykanka.

Kiisaska intooda badan ee laga soo racfaan qaado Maxkamadaha Sare waxay si toos ah u aadaan Maxkamadda Racfaanka, Maxkamadduna waa inay aqbashaa dhammaan racfaannada la soo gudbiyo. Garsoore Mann wuxuu isku muujiyay inuu yahay xubin shaqo badan oo ka tirsan garsoorka, isagoo sannad walba qoray in ka badan 65 ra'yi oo ku saabsan dhammaan qaybaha sharciga Washington. Waxaa taageersan aqlabiyadda garsooreyaasha racfaanka iyo garsooreyaasha maxkamadaha sare ee hadda gobolka.



Garsooraha Jagada Lr. 6

Bill A. Bowman



(425) 466-0619
judgebillbowman@gmail.com

Khibradda Sharciga/Garsoorka: Waxaa Guddoomiye Jay Inslee u magacaabay Maxkamadda Racfaanka ee Washington bishii Janaayo 2020; Garsoore Maxkamadda Sare ee Degmada King (2011–2020); Garsooraha Shir-guddoonka ee Maxkamadda Magaalada Black Diamond (2011); Difaaca Dadweynaha ee Degmada King, Kuxigeenka XeerIlaaliyaha Dacwadoogista ee Degmada King, iyo qareen ku shaqeeya shaqada qareennimo ee gaarka loo leeyahay muddo ku dhow labaatan sanno.

Khibrad Xirfadeed Kale: Barafasoor Ku-xigeen ee U Doodaha Maxkamadeynta, Dugsiga Sharciga ee University of Washington (2014–2026); Madaxa Kulliyadda Garsoorka Gobolka Washington (2017)

Waxbarashada: B.A., University of Washington; J.D., Dugsiga Sharciga ee California Western

Adeegga Bulshada: Ku firfircoon waxbarashada madaniga ah ee fasallada dugsiga hoose ilaa dugsiga sare, si joogto ahna u hago qareennada da'da yar iyo ardayda sharciga

Bayaanka: Markii uu Garsoore Bowman u magacaabay Maxkamadda Racfaanka, Guddoomiye Inslee wuxuu yiri: "Garsoore Bowman waa mid ka mid ah garsooreyaasha ugu ixtiraamka badan Degmada King. Marka laga soo tago xirfaddiisa xooggan ee maaraynta maxkamadaha, wuxuu leeyahay faham ku saabsan maamulka maxkamadda iyo sumcad ahaan ciyaaryahan kooxeed oo wanaagsan."

Garsoore Bowman wuxuu qabtay dhowr xil oo hoggaamineed oo ka tirsan Maxkamadda Sare ee Degmada King, wuxuuna si wadajir ah ula shaqeeyay asxaabtiisa garsoorka iyo kooxaha bulshada si loo helo ilo muhiim ah oo loo gaarsiiyo qaybaha aan si fiican loo adeeggin ee Degmada King, isla markaana si ammaan ah loo yareeyo xabsiga ka hor maxkamadeynta.

Hadda waa Kusimaha Garsooraha Sare ee Qaybta Koowaad wuxuuna u shaqeeyaa Guddoomiyaha Guddiga Sharcidejinta ee Maxkamadda Racfaanka. Maxkamadda Sare ee Degmada King, Garsoore Bowman wuxuu soo qabtay xilalka Kaaliyaha Garsooraha Shir-guddoonka, Garsooraha Sare ee Xarunta Caddaaladda Gobolka Maleng, Garsooraha Sare ee Waaxda Madaniga ah, iyo Kaaliyaha Garsooraha Sare ee Waaxda Dambiyada. Wuxuu sidoo kale guddoomiyay guddiyada Teknolojiyada iyo Miisaaniyadda, wuxuuna dhowr sanno ka tirsanaa Guddiga Fulinta.

Garsoore Bowman wuxuu ku koray Laurel, Washington, wuxuuna ka qalin jebiyay Dugsiga Sare ee Sehome. Hadda wuxuu ku nool yahay beer yar oo uu la leeyahay xaaskiisa oo ku taalla koonfurta Degmada King, wuxuuna ku raaxaystaa orodka waddooyinka Cascades iyo sallaxidda hirarka badda ee Westport.



Garsooraha Jagada Lr. 1

Jan Trasen



trasenforjudge@gmail.com
trasenforjudge.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Dugsiga Sharciga ee Boston College; Shahaadada Jaamacadda, Tufts University

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Sharciga Maamulka; Garsooraha Pro Tem ee Maxkamadda Degmada ee Degmada King

Bayaanka: Jan Trasen waxay shaqadeeda u hurtay caddaalad, caddaalad siman, iyo hubinta in maxkamaduhu u shaqeeyaan qof walba. Waa musharaxa keliya ee leh khibrad garsoornimo oo wakhti buuxa ah, iyadoo u adeegta sidii Garsoore Sharciga Maamulka iyo Garsoore Pro Tem ahaan. Waxay si xushmad leh ula dhaqantaa dhammaan dadka ku jira qolka maxkamadda, iyadoo gaarta go'aanno caddaalad ah oo saameeya amniga dadweynaha, helitaanka daryeelka caafimaadka, iyo xasilloonida qoyska.

Ka hor inta aysan noqon Garsooraha Sharciga Maamulka (ALJ), Jan waxay 26 sanno ku qaadatay difaaca dadweynaha iyo qareennimada racfaanka, iyadoo ka dooday kiisaska ka hor Maxkamadda Sare ee Washington iyo Maxkamadda Racfaanka ee kiisaska dambiyada, carruurta, iyo kuwa ku tiirsanaanta daroogada. Waayo aragnimadeeda heer kasta oo nidaamka sharciga ah waxay siinaysaa garashada, dabeecadda, iyo madax-bannaannida looga baahan yahay si ay si caddaalad ah oo wax ku ool ah ugu adeegto.

Jan waa musharaxa keliya ee helay qiimeynta "Si Gaar ah oo Wanaagsan ugu Qalanta" oo ka timid lix urur qareenno maxalli ah oo madax bannaan. Jan waxay degan tahay Kirkland, halkaas oo ay ku soo korisay gabdhaheeda.

Waxaa taageeray: Aqlabiyadda Maxkamadda Sare ee Gobolka Washington; in ka badan 95 garsoore & mas'uuliyiin la doortay; aqlabiyadda Maxkamadda Degmada ee Degmada King; Guddoomiyeyaasha Kuderer, Cho & Calkins; Senatarrada Dhingra, Slatyer, & Stanford; Claudia Balducci; Wakiillada Goodman & Hall; Duqa Magaalada Birney; Xubnaha Golaha ee ku sugan guud ahaan Eastside; Dab-damiska Bellevue; Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka; Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo kuwa 1aad, 5aad, 41aad, 45aad, iyo 48aad; Shaqaalaha Gobolka WA; Mashiinisteyaasha; Wadayaasha Gaadiidka; iyo kuwo kale oo badan!

Bianca Tse



info@biancaforjudge.org
biancaforjudge.org

Waxbarashada: B.A. Jaamacadda Washington, Seattle; Shahaadada Sharciga, Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Tulane, New Orleans

Shaqo iyo Xirfad: Garsoore Pro Tem, Maxkamadda Degmada ee Degmada King; Qareen

Bayaanka: Waxaan u adeegaa sida garsoore beddel ah (Pro-Tem) oo ka tirsan Maxkamadaha Degmada King, anigoo go'aan ka gaaraya kumanaan kiis, mararka qaarna dhegaysanaya in ka badan 100 kiis maalintii. Haddana kiis kasta iyo ka-qaybgale kasta waa muhiim. Jagadan waxay u baahan tahay xirfado ka duwan ahaanshaha garsoore sharci maamul. Waxaan muddadii 30-ka sanno ahayd ee xirfaddayda maxkamadaha dacwadaha ku kasbaday xirfadaha iyo khibrada saxda ah ee lagu maareeyo dacwado aad u badan, anigoo weliba kiis kasta ku go'aaminaya caddaalad iyo daacadnimo.

Garsooreyaashu waa inay ahaadaan kuwa aan xisbi raacsanayn. Waxaan aaminsanahay in siyaasaddu aysan wax door ah ku yeelan maxkamadaheena. Waxaa i taageeray dadka igu yaqaana shaqadayda wanaagsan, ee ma ahan xisbi ku xirnaan. Waxaan dhowr urur oo qareenno ah ka helay qiimeynta ugu sarreysa, oo ah "Si Gaar ah oo Wanaagsan ugu Qalanta".

Anigoo ku soo koray Renton sida soo galooti jilkkii koowaad ahaan, aniga iyo ninkaygu waxaan degnay Bellevue halkaas oo aan deganayn muddo 25 sanno ah, anagoo carruurtayada ku soo korinayna dugsiyada Bellevue isla markaana wax ku kordhinayna bulshadeenna. Waxaan idinka codsanayaa taageeradiina si aan khibraddayda ugu keeno xilkan la doorto.

Waxaa taageeray: Senatar Manka Dhingra; Wakiil My-Linh Thai; Xeer Ilaaliyihii Hore ee Degmada King Daniel Satterberg; Duqooyda Magaalada Malakoutian iyo Sherlock; Garsooreyaasha Maxkamadda Sare, Maxkamadda Degmada iyo Maxkamadda Dowladda Hoose ee Degmada King; Xubnaha Golaha ee Bellevue, Mercer Island, Redmond, Issaquah, Newcastle, Sammamish iyo Edmonds; Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka-Washington, iyo kuwo kale.



Garsooraha Jagada Lr. 2

Michelle Gehlsen



retainjudgegehlens@gmail.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Southern Methodist University; Shahaadada Cilmiga Adabka, Texas State University, cum laude

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King

Bayaanka: Garsoore Michelle Gehlsen waxay garsoore ahaan u adeegaysay in ka badan 16 sanno, oo ay ku jiraan 10 sanno oo ay ahayd Garsoore Gudoomiyaha ee Maxkamadda Dowladda Hoose ee Bothell ka hor inta aysan ku biirin Maxkamadda Degmada King sannadkii 2019. Waxaa ka go'an inay qof kasta oo soo gala qolkeeda maxkamadda ula dhaqanto sharaf, caddaalad, iyo ixtiraam iyadoo si aamin ah sharciga si siman ugu fulinaysa dhammaan.

Garsoore Gehlsen waxay aaminsan tahay in maxkamadaha xooggan ay dhiirigeliyaan ammaanka dadweynaha iyo kalsoonida dadweynaha labadaba. Waxay guddoomisay Maxkamadda Bulshada ee Redmond, iyadoo gacan ka gaysanaysa wax ka qabashada sababaha asalka u ah habdhaqanka dambiyada iyadoo isla markaana yaraynaysa dambiyada soo noqnoqda, waxayna aasaastay Maxkamadda Dhallinyarada ee Bothell, iyadoo dhiirigelinaysa barnaamijyada maxkamadda dhallinyarada ee la midka ah ee bulshooyinka deriska ah.

Asxaabteeda garsoorka ayaa u doortay inay noqoto Madaxweynaha Ururka Garsooreyaasha Maxkamadaha Degmada Washington iyo Dowladda Hoose, taas oo ka tarjumaysa kalsoonida iyo ixtiraamka ay ku dhex kasbatay garsooreyaasha gobolka oo dhan. Waxay sidoo kale heshay taageerooyin ka yimid garsooreyaasha heer kasta oo ka mid ah garsoorka Washington waxayna heshay Abaalmarinta Qareennada Haweenka ee Washington Vanguard iyo Abaalmarinta Hoggaaminta Garsooraha Steiner iyadoo loo aqoonsanayo heellananteeda hoggaaminta garsoorka iyo adeegga dadweynaha.

Garsoore Gehlsen waxay si xushmad leh kuugu weydiisanayaa codkaaga si ay ugu sii adeegto dadka Degmada King.



Garsooraha Jagada Lr. 3

Lisa O'Toole



(206) 799-8236

otooleforjudge@gmail.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga (JD), cum laude, Dugsiga Sharciga ee Seattle University; Shahaadada Jaamacadda, Whitman College

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King

Bayaanka: Garsoore Lisa O'Toole waxaa sharaf u ah inay u adeegto dadka Degmada King sida Garsoore Maxkamadda Degmada ee Degmada King ahaan. Garsoore O'Toole waxaa markii ugu horreysay la doortay 2014. Waxaa ka go'an hubinta in caddaaladda loo maamulo si caddaalad ah, hufan, iyo si siman dhammaan, iyo in qof walba loola dhaqmo si xushmad iyo asluub leh.

Garsoore O'Toole waxay keenaysaa kursiga Maxkamadda Degmada in ka badan 30 sanno oo khibrad ah oo ku saabsan ku dhaqanka sharciga iyo qaadista dacwadaha, labadaba sida qareenkii hore ee xeer ilaalinta ahaan iyo qareen sharciga gaarka ah oo ka shaqeysta xafiis gaar ah. Iyadu waa mutadawac firfircoon oo ka tirsan guddiyo garsoor oo badan iyo bulshadeenna dhexdeeda.

Garsoore O'Toole waxaa taageeray Garsooreyaasha Maxkamadda Sare, Racfaanka, Maxkamadda Sare, Degmada, iyo Maxkamadda Dowladda Hoose waxayna leedahay taageero ballaaran, oo labada xisbi ah, oo ay ku jiraan Xubnaha Golaha Degmada King Balducci iyo Dunn; Wakiillada Gobolka Goodman, Walen, iyo McBride (hawlgab); Duqa Magaalada Bellevue Malakoutian; Duqa Magaalada Redmond Birney, Xubnaha Golaha Robinson, Nieuwenhuis iyo Barksdale (hawlgab), Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta LD ee 1aad, 5aad, 41aad, 48aad; Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka.

Garsoore O'Toole waa degane nolosheeda oo dhan deganaa Washington. Waxay ninkeeda la degan tahay bariga Degmada King, halkaas oo ay ku soo koriyeen labadooda carruur ah. Garsoore O'Toole waxaa sharaf u ahaan lahayd inay sii wado u adeeggida bulshadeenna sida Garsooraha Maxkamadda Degmada King ahaan waxayna si xushmad leh u weydiisanayaa codkaaga.



Garsooraha Jagada Lr. 4

Kevin Peck



(425) 466-0619

Judgekevinpeck@gmail.com

judgekevinpeck.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, University of Oregon; Shahaadada Jaamacadda, Northern Illinois University, oo leh darajo sharafta ugu sareysa summa cum laude

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King

Bayaanka: Garsoore Kevin Peck waxaa si wadajir ah oo loo dhan yahay kursiga garsoorka ugu magacaabay Golaha Degmada King sannadkii 2019, ka dibna waxaa loo doortay jagada sannadihii 2020 iyo 2022. Ka hor magacaabistiisa, wuxuu muddo ka badan 25 sanno u adeegay Garsoore Pro Tem ahaan ee Maxkamadda Degmada ee Degmada King.

Daah-furnaanta, daacadnimada, iyo caddaaladda ayaa udub-dhexaad u ah shaqada Garsoore Peck ee Maxkamadda Degmada. Wuxuu ku dadaallaa inuu soo saaro go'aanno caddaalad ah oo loo siman yahay, isagoo hubinaya in qof kasta oo hor yimaada uu fahmo hannaanka sharciga, fursadaha ay heli karaan, iyo la xisaabtanka laga filayo iyaga.

Garsoore Peck waxa uu qareen maxkamadeed ka ahaa Degmada King in ka badan soddon sanno, isaga oo macaamiisha ku matali jiray kiisaska takoorka shaqada, xuquuqda madaniga ah, iyo dambiyada federaalka. Waxa uu si guul leh dacwad u maray Maxkamadda Sare ee Dalka Mareykanka si loo ilaaliyo xuquuqda hadalka xorta ah. Wuxuu sidoo kale xubin guddiga ka ahaa Washington Community Action Network muddo ka badan 30 sanno.

Waxaa taageeray: In ka badan 100 garsoore oo ka socda dhammaan heerarka nidaamka maxkamadeenna; Xubinta Golaha Claudia Balducci; Xeer Ilaaliyaha Guud Nick Brown; Xeer Ilaaliyihii hore ee Guud Rob McKenna; IAM District Lodge 751; ATU 587; Teamsters JC 28; Dimuqraadiyiinta Degmada King; Dimuqraadiyiinta Degmooyinka Sharci Dejinta ee 1aad, 5aad, 41aad, 45aad, iyo 48aad



Garsooraha Jagada Lr. 5

Jill Klinge



(253) 765-8414

judgeklinge@gmail.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, University of California, Davis 1991 Shahaadada Jaamacadda, University of California, Davis 1988

Shaqo iyo Xirfad: Garsoore, Maxkamadda Degmada King

Bayaanka: Waxaa sharaf ii ahayd inaan u adeego sidii Garsoore Maxkamadda Degmada ee Degmada King ilaa iyo markii uu Golaha Degmada King si wadajir ah oo loo dhan yahay ii magacaabay sannadkii 2019, waxaana ku xigay sii haynta xilkayga iyo dib-u-doorashadayda sannadihii 2020 iyo 2022. Hadda waxaan u shaqeeyaa sidii mid ka mid ah labada garsoore ee wakhtiga buuxa ee Maxkamadda Bellevue.

Deganeyaasha Degmada King waxay u qalmaan inay dareemaan ammaan iyo in laga ilaaliyo dambiyada. Waxay sidoo kale u qalmaan nidaam caddaaladeed oo siiya eedeysaneyaasha ay ka go'an tahay inay isbeddelaan kheyraadka iyo fursadaha ay ku guuleystaan. Garsooreyaashu waa inay isku dheelitirnaan yoolashan muhiimka ah maalin kasta. Maxkamaddayda dhexdeeda, waxaan ka shaqeeyaa inaan taageero isbeddel macno leh oo ku yimaada nolosha eedeysaneyaasha, isla markaana dhiirigelinaya la xisaabtanka dambiga iyo ammaanka iyo amniga bulshadeenna. Waxaan rajaynayaa inaan sii wado shaqadaan muhiimka ah.



Garsooraha Jagada Lr. 6

Denice Gagner

(425) 466-0619
gagnerforjudge@gmail.com
gagnerforjudge.com



Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, University of Washington - 2007; Shahaadada Cilmiga Adabka - University of Washington - 2000

Shaqo iyo Xirfad: Garsoore Pro Tem: Maxkamadda Degmada ee Degmada King, maxkamadaha dowladda hoose ee kala duwan

Bayaanka: Denice Gagner waxay kursiga garsoorka u keeneysaa 20 sanno oo khibrad sharci oo kala duwan ah. Sida u-doodaha dhibbanaha ahaan, waxay taageertay dadka ka badbaaday xadgudubka galmada iyo kan jirka. Sida Qareenka Xeer Ilaalinta ahaan, waxay dembiilayaasha kula xisaabtantay iyadoo horumarinaysay xalal dhawrayay ammaanka dadweynaha. Sida qareen difaaca dambiyada ahaan, waxay si xamaasad leh ugu doodday macaamiisha la hayb-sooco ee wajahaya qabatinka iyo arrimaha caafimaadka maskaxda. Sida Garsoore Pro Tem ahaan, waxay ku kasbatay sumcad caddaaladdeeda, naxariisteeda, iyo heellanaanteed.

Denice Gagner waa adeegaha dadweynaha ee muddo dheer ah waxayna xoojisay bulshadeeda xitaa meel ka baxsan qolka maxkamadda. Waxay u adeegtaa sidii Guddoomiyaha Qorsheynta ee magaalada Redmond waxayna ku guulaysatay Golden Acorn Award sannadkii 2022 is-xilqaankeeda lagu dayan karo ee dugsiga dadweynaha ee carruurteeda darteed.

Iyadu waa musharaxa keliya ee Eastside ee hesha darajada garsoorka ee ugu sarreysa ee suurto galka ah – “Si Gaar ah oo Wanaagsan ugu Qalanta” – oo ka timid dhammaan 7-da urur ee qareennada ee madax-bannaan. Waxaa taageeray 50+ garsooreyaal hadda xafiiska fadhiya, 100+ qareenno, 30+ hoggaamiyeyaal deegaanka ah (Sharci-dejiyeyaasha, Senatarrada, Duqooyda Magaalada, iyo labadaba Xubnaha Golaha Degmada iyo Xubnaha Golaha Magaalada), Machinists Union (IAM 751), King County Democrats, dhammaan shanta Dimuqraadiyiinta LD ee Eastside, iyo Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka ee Washington.

Denice waxay ku dhowri doontaa sareynta sharciga si caddaalad, daacadnimo, iyo ixtiraam leh dhammaan dadka hor yimaada maxkamadda.



Garsooraha Jagada Lr. 7

Peter Peaquin

(425) 466-0619
judgepeterpeaquin@gmail.com



Waxbarashada: Shahaadada Sharciga (JD), Tulane University; Shahaadada Cilmiga Adabka, Western New England College; National Judicial College, 2023

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King

Bayaanka: Garsoore Peaquin waxaa kursiga Maxkamadda Degmada u magacaabay cod loo dhan yahay oo ay dhiibteen Golaha Degmada King sannadkii 2023, waxaana jagadiisa ku xaqiijiyay codbixiyeyaasha sannadkii 2024.

Wuxuu kursiga garsoorka u soo kordhiyay in ka badan 30 sanno oo khibrad ah isagoo ah qareen shaqeynaya. Waxa uu xoogga saaray difaacista shakhsiyaadka lagu eedeeyay dambiyada fudud iyo dambiyada culus – wax kasta oo ka bilaabma dambiyada heerka hoose ee aan rabshadda lahayn ilaa dil -- waxaana uu boqolaal dacwadood ka hor qaaday xeerbeegtiyo. Isagoo matalaya macaamiisha ka socota bulshada la faquuqay, Garsoore Peaquin wuxuu helay faham ku saabsan caqabadaha ay la kulmaan dad badan oo hor yimaada Maxkamadda Degmada. Isagoo matalaya shakhsiyaadka la kumaya arrimaha caafimaadka habdhaqanka iyo qabatinka maandooriyaha, wuxuu aqoon u leeyahay murugsanaanta dhibaataada wajahaysa bulshooyinkeena wuxuuna khibradnaan u adeegsadaa doorkiisa uu ku guddoominayo Maxkamadda Bulshada ee Redmond oo ah barnaamij guulaysatay oo loogu talagalay dambiileyaasha ku habboon ee aan rabshadda sameyn si looga hortago ku lug lahaanshaha mustaqbalka ee nidaamka caddaaladda dambiyada. Halkaas, barnaamijyada dhaqan-celinta waxaa lagu daray adeegga bulshada iyo shuruudo kale si loo xaqiijiyo la xisaabtanka loona yareeyo ku laabashada dambiga.

Garsoore Peaquin wuxuu Kirkland kula degan yahay xaaskiisa ay is qabeen muddo 34 sanno ah. Waxa uu taageero ka helay Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo Ururka Caalamiga ah ee Mashiinisteyaasha iyo Shaqaalaha Hawada Sare (IAM 751).



Garsooraha Jagada Lr. 1

Raul Martinez



(425) 466-0619
judgeraulmartinez@gmail.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga (JD), Dugsiga Sharciga ee Seattle University, 2001; Shahaadada Jaamacadda, Sharciga iyo Kala Duwanaanshaha, Western Washington University, 1995

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King

Bayaanka: Garsoore Martinez waxaa kursiga Maxkamadda Degmada ee Degmada King loogu magacaabay codka loo dhan yahay ee Golaha Degmada King sannadkii 2023. Waxaa loo doortay inuu sii hayo jagadiisa sannadka 2024. Sida xubin heellan oo ka tirsan maxkamadda ahaan, waxaa taageeray in ka badan 50 garsoore oo maxkamadeed iyo kuwa racfaan ah.

Garsoore Martinez wuu fahamsan yahay waxaana ka go'an wax ka qabashada caqabadaha wajahaya maxkamadaheena, oo ay ku jiraan cudurka faafa ee obiyoodka daroogada ee taariikhiga ah, nidaamka caafimaadka dhimirka ee aan la siin maalgelin ku filan, iyo matallaadda madaniga ah ee aan la awoodin. Waxa kale oo uu u heellan yahay kordhinta helitaanka caddaaladda. Dadaalladiisa waxaa ka mid ah ka adeeggida guddiyada garsoorka ee cusbooneysiya hannaanyada maxkamadda, foomamka, iyo macluumaadka dadweynaha si loogu fududeeyo dadka aan qareennada ahayn inay fahmaan oo ay helaan maxkamadahooda.

Garsoore Martinez wuxuu maxkamadda u keenay 21 sanno oo khibrad sharci oo kala duwan ah sida Ku-xigeenka Sare ee Qareenka Xeer Ilaalinta ee Degmada King, dacwoodaha madaniga ah, qareenka racfaanka, iyo la-taliyaha sharciga ee ganacsiyada iyo hey'adaha dowladda ahaan. Khibraddiisa waxay u oggolaanaysaa inuu soo saaro go'aanno si wanaagsan loo sababeeyay, oo dhex-dhexaad ah kuwaas oo raacaya sharciga. Sida uu yahay wiilka shaqaalaha beeraha ee guura, waxaa sidoo kale si qoto dheer uga go'an caddaaladda, ammaanka dadweynaha, iyo karaamada dadka oo dhan.

Adeegga bulshada ee hore ee Garsoore Martinez waxaa ka mid ah Guddiyada Northwest Justice Project iyo kuwa Latina/o Bar Association. Waxaa taageeray: Dimuqraadiyiinta Degmada King; Dimuqraadiyiinta Degmada 32-aad; iyo Dimuqraadiyiinta Degmada 1-aad



Garsooraha Jagada Lr. 2

Karama H. Hawkins



(206) 251-2350
Reelectjudgekaramahawkins@gmail.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga - Dugsiga Sharciga ee University of Washington; Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka - University of Washington

Shaqo iyo Xirfad: Garsoore

Bayaanka: Magacaygu waa Karama H Hawkins. Waxaan codsanayaa dib-u-doorasho sida garsoorahaaga ee Maxkamadda Degmada King, Degmada Shoreline Jagada 2. Waxaan u heellannahay hubinta in maxkamaddaan ay ahaato mid madax-bannaan, iyo in qof kasta loola dhaqmo si sharaf iyo ixtiraam leh. Inaan xilkan ugu adeego waxay ahayd maamuuskii ugu weynaa ee xirfaddayda. Waxaa sharaf ii ahayd inaan guddoomiyo barnaamijka Maxkamadda Bulshada ee Shoreline/Kenmore. Waxaan si wadajir ah ula shaqeeyay ururada bulshada iyo UW si aan u abuurro koorso xirfadaha nolosha ah oo bilaash ah oo qof walba heli karo. Waxaan abuuray Barnaamijka "Devon's Closet" si loogu bixiyo alaabta daryeelka shakhsi ahaanneed, jaakooyinka, kabaha, iyo agabyada kale ee lagama maarmaanka ah shakhsiyaadka ku lug leh nidaamka caddaaladda ee aan haysan kheyraadka. Hadda waxaan guddoomiyaa barnaamijyada Maxkamadda Goboleedka ee Caafimaadka Maskaxda iyo Maxkamadda Goboleedka ee Halyeeyada Ciidamada ee Maxkamadda Degmada ee Degmada King ee ku yaalla xarumaheenna Seattle iyo Kent. Waxaa la ii doortay Garsooraha Guddoomiyaha ee Qaybta Galbeed ee Maxkamadda Degmada King. Gudaha Maxkamadda Degmada King waxaan ka tirsanahay dhowr guddi isla markaana guddoomiya Guddiga GR 36. Heerka gobolka, waxaan u adeegaa Guddiga Maamulka ee DMCJA iyo dhowr guddi, oo ay ku jiraan Guddiga Kala-duwanaanshaha, Guddiga Maxkamadaha Daaweynta, iyo Guddiga Waxbarashada. Waxaan rajaynayaa inaan sii wado shaqada Garsoorka. Waan qaddarinayaa taageeradaada.



Garsooraha Jagada Lr. 1

Leah Taguba



(206) 571-0276
judgeleahtaguba@gmail.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Dugsiga Sharciga ee Southwestern University Shahaadada Cilmiga Adabka; Shahaadada Cilmiga Adabka, Washington State University

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King, Qaybta Koonfur-bari

Bayaanka: Garsoore Leah Taguba waxaa sharaf u ahayd in ay u adeegto bulshada Degmada King tan iyo 2022. Waxay si is-hoosaysiin leh kuugu weydiinaysaa codkaaga si aad mar kale ugu doorato kursiga Maxkamadda Degmada King. Garsoore Taguba waxay maamuustaa xuquuqda dastuuriga ah iyadoo xaqiijinaysa in dhinacyada la dhegaysto si loo gaaro qaraarro loogu talagalay dhibbaneyaasha, eedeysaneyaasha iyo dhammaan dhinacyada dacwaddu ka dhexeyso. Maalin kasta, waxay sharciga u fulisaa si caddaalad iyo sinnaan ah, iyadoo dhammaan kuwa u baahan adeegga Maxkamadda ula dhaqanta si xushmad iyo sharaf leh. Garsoore Taguba waxay sii wadi doontaa inay ilaaliso kalsoonida ay siisay bulshadaan, waxayna si adag u shaqeyn doontaa si ay u dhowrto mabaadii'dan.

Tan iyo markii uu magacaabay Golaha Degmada King sannadkii 2021 iyo doorashadii xigtay ee 2022, waxay guddoomisay kumanaan dacwadood oo dambiyo iyo madani ah ee Xarunta Caddaaladda ee Auburn iyo Maxkamadda Bulshada. Garsoore Taguba waxay aaminsan tahay in caddaaladdu ay dheellitirto la xisaabtanka u dhigma dhibaataada la geystay, ammaanka bulshada iyo dhaqan-celinta. Waxay si xooggan u taageertaa maxkamadaha daaweynta ama beddellada kale ee xabsiga, halka ay ku habboon tahay.

Sida haweeney ka tirsan dadka midabka leh ahaan, waxay u heellan tahay kala duwanaanshaha garsoorka, iyo sinnaanta iyo caddaaladda nidaamka maxkamadda. Garsoore Taguba waa Guddoomiyaha Guddiga Tirada Laga Tirada Badan Yahay iyo Caddaaladda ee Maxkamadda Sare ee Gobolka Washington (WA Supreme Court Minority and Justice Commissioner) iyo xubin ka tirsan Guddiga La-talinta ee Machadka Garsoorka ee Washington.



Garsooraha Jagada Lr. 2

Matthew York



reelectjudgeyork@gmail.com

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Isgaarsiinta, University of Nevada, Reno; Shahaadada Sharciga iyo Shahaadada Xallinta Khilaafaadka, Willamette University

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King

Bayaanka: Waad ku mahadsantiihin fursadda iyo sharafta u adeeggida bulshadeenna sida Garsoore ahaan sagaalkii sanno ee la soo dhaafay. Labadii muddo xilleedka ee u dambeeyay, waxaa i doortay asxaabtayda aan wada shaqeyno si aan ugu adeego, mararka qaarkood, sida Garsooraha Guddoomiyaha ee Koonfurta iyo Garsooraha Guddoomiyaha ee Sare ahaan. Waxaan guddoomiye ka ahaa Guddiga Fulinta, Guddiga Xeerarka, haddana waxaan xubin ka ahay Guddiga Shaqaalaha.

Sidoo kale waxaan ku firfircoonnahay bulshada koonfurta Degmada King, anigoo si is-xilqaamid ah ula shaqeeya dhowr urur oo aan faa'iido doon ahayn. Waxaan aaminsanahay in garsoore uu leeyahay mas'uuliyad ah inuu u adeego maxkamadda dibaddeeda iyo sidoo kale gudaha, aniga iyo qoyskayguna waxaan si qoto dheer ugu qottonaa hadafkaas.

Qareennada iyo garsooreyaasha ka soo muuqda maxkamadda inta badan waxay ilaabaan in khibraddu ay noqon karto mid cabsi leh iyo mid dhib badan. Xeerarka iyo habraaca murugsan waxay fogeeyaan kuwa aan aqoon u lahayn iyaga. Maxkamadda Degmada waa maxkamadda ay dadka intiisa badan kala kulmi doonaan khibraddooda keliya ee laantan dowladda. Marnaba ma ilaabi doono sida ay tahay in qof aan qareen ahayn uu maxkamadda uga soo muuqdo, waxaanan u qaadan doonaa wakhti si aan u hubiyo in dhammaan su'aalaha laga jawaabo, iyo in filashooyinka ay cad yihiin. Codkaaga i sii oo waxaan sii wadi doonaa inaan ku dadaallo inaan u qalmo maalin kasta.



Garsooraha Jagada Lr. 3

Tricia Grove Johnson



(425) 466-0619

grovejohnsonforjudge@gmail.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Seattle University; Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, University of Washington

Shaqo iyo Xirfad: Garsoore Ku Meel Gaar ah iyo Qareenka Xeer Ilaalinta ee Maple Valley

Bayaanka: Tricia Grove Johnson waxay ku dhalatay kuna kortay Koonfur-bari ee Degmada King, waxayna 30sanno ee xirfaddeeda sharciga u hibeysay u adeeggida bulshada ay hoy u taqaan. Khibraddeeda ballaaran—oo isugu jirta Xeer Ilaalinta, Difaaca Dambiyada, Difaaca Dadweynaha, iyo boqolaal saacadood oo ay u adeegtay sida Garsoore Pro Tem ahaan—waxay siisaa faham dhif ah oo dhammaystiran oo ku saabsan nidaamka caddaaladda iyo dadka uu saameeyo.

Tricia waxay si dhow ula shaqeysay shakhsiyaadka ku jira xaaladaha adag iyo bulshooyinka taariikh ahaan la kulmay caqabado ka dhex jira nidaamka sharciga. Waxay aaminsan tahay in caddaaladda dhabta ahi ay u baahan tahay dheelitirka La-xisaabtanka, Naxariista, iyo Fursadaha. La-xisaabtanka ayaa xaqiijiya bulshooyin ka ammaan badan. Naxariistu waxay aqoonsataa bani'aadannimada iyo duruufaha qof kasta. Fursaduhu waxay shakhsiyaadka u abuuraan waddooyin ay dib ugu dhistaan, ugu koraan, oo ay si wanaagsan wax ugu biiriyaan bulshadooda.

Hannaankeedu wuxuu ku qotomaa fikradda ah in nidaamka caddaaladdu ay tahay inuu ilaaliyo dadweynaha isagoo sidoo kale bixinaaya fursado macno leh oo isbeddel ah. Waxaa ka go'an inay si daacadnimo ah ugu adeegto iyo inay hubiso in qof kasta oo soo gala qolka maxkamadda loola dhaqmo sharaf iyo ixtiraam.

Waxaa taageeray: Duqooyda Magaalooyinka Maple Valley, Renton, Kent, Auburn, Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka ee Washington; iyo IAM 751, Amalgamated Transit Union Local 587, Dimuqraadiyiinta Degmada King, waxaana "Si Gaar ah oo Wanaagsan ugu Qalanta" u qiimeeyay shan Urur oo Qareenno oo madax-bannaan



Garsooraha Jagada Lr. 4

Corinna Harn



Committeetoreelectjudgeharn1@gmail.com

Waxbarashada: 1980 Whitman College, Shahaadada Jaamacadda (Cilmiga Siyaasadda iyo Kimisteriga), 1984 Seattle University (UPS), Shahaadada Sharciga

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada

Bayaanka: Garsoore Harn ayaa u keenaya in ka badan 25 sanno oo khibrad garsoornimo ah kursiga Maxkamadda Degmada ee Degmada King. Wakhtigan xaadirka ah waa Kaaliyaha Garsooraha Guddoomiyaha ah iyo xubin ka tirsan Guddiga Fulinta ee Maxkamadda. Garsoore Harn waxay bulshadeena ka dhigtaa mid ka ammaan badan, hal go'aan oo taxaddar iyo miyir leh markiiba. Iyadu waa caddaalad ah, naxariis badan, dulqaad badan iyo dhiirigelin leh. Waxay ku dadaashaa maalin kasta si ay u raacdo sharciga iyo si ay u kasbato kalsoonida iyo ixtiraamka lagama maarmaanka u ah si ay u noqoto garsoore wax ku ool ah. Garsoore Harn waxay kaaga mahad celinaysaa codkaaga waxayna ballanqaadaysaa inay sii wado inay si daacadnimo leh u shaqeeyso si ay u bixiso caddaalad la heli karo oo loogu talagalay dhammaan.



Garsooraha Jagada Lr. 5

Joshua C. Harris



(253) 245-9292
info@josh4kingcounty.com
josh4kingcounty.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Villanova University; BS, University of Maryland; AA, Cochise College; AAS, Defense Language Institute

Shaqo iyo Xirfad:Qareen; Halyeeyga Ciidanka; Mulkiile Ganacsi

Bayaanka: Joshua C. Harris waa qareen khibrad leh, halyeey Ciidanka ah, mulkiile ganacsi oo Puget Sound ah, iyo waalid ay ka go'an tahay asluubta, naxariista, iyo sinnaanta sharciga hortiiisa.

Isagoo ku dhashay kuna soo barbaaray Galbeedka Washington, Harris wuxuu u adeegay Ilaalada Qaranka ee Ciidanka Washington waxaana loo diray Bariga Dhexe isagoo ka tirsan Kooxda 5-aad ee Ciidamada Gaarka ah. Khibradahaas ayaa baray anshax, go'aan qaadasho suuban, iyo la xisaabtan marka uu cadaadis ku jiro. Ka dib adeegga ciidanka, Harris wuxuu aasaasay shirkad ammaan oo fadhigeedu yahay Degmada King, isagoo maalin walba gaara go'aanno saameynaya shaqaalaha, macaamiisha, iyo ammaanka dadweynaha ee dalka oo dhan.

Harris waxaa loo magacaabay Guddiga Imtixaannada Qareennada ee WSBA waxaana Guddoomiyaha Gobolku u magacaabay Guddiga Dib-u-eegista Xuduudaha ee Degmada Pierce. Wuxuu dhammaystiray tababarka garsoorka ee adeegga Garsoore Pro Tem ahaan isagoo u maraya Ururka Garsooreyaasha Maxkamadda Degmada iyo Dowladda Hoose iyo WSBA. Hawshiisa sharci waxaa ka mid ah sharciga shaqaaleynta, sharciga ganacsiga, sharciga canshuurta, iyo sharciga maamulka, oo ay weheliso maamulka dacwadaha iyo maamulka dhexdhexaadinta. Wuxuu sidoo kale macaamiisha danyarta ah ku matalay Rugta Canshuurta ee Dakhligoodu Hooseeyo ee Federaalka.

Harris wuxuu aaminsan yahay in garsooreyaashu ay tahay inay si taxaddar leh u dhegaystaan, sharciga si caddaalad ah u mariyaan, iyo inay qof kasta ula dhaqmaan si sharaf leh. Maxkamadda waa in lagu qeexaa ixtiraam—ma aha cabsi gelin. Isagoo ah degane Kent, wuxuu keenni doonaa garsoor degan iyo caddaalad siman Koonfur Bari ee Degmada King.

Heather M. Barker



(425) 545-7500
heatherbarkerforjudge@gmail.com
heatherbarkerforjudge.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Dugsiga Sharciga ee Seattle University; Shahaadada Jaamacadda oo ay la socoto maamuusyo, Cilmiiga Dadka (Anthropology), California State University Long Beach

Shaqo iyo Xirfad:Garsooraha Pro Tem ee Maxkamadda Degmada ee Degmada King; Qareen Shaqeysata

Bayaanka: Heather M. Barker waxay u soo adeegtay sidii Garsoore Pro Tem ee Maxkamadda Degmada King tan iyo 2022. Waxay guddoomisaa arrimaha madaniga iyo kuwa dambiyada labadaba, oo ay ku jiraan Maxkamadaha Caafimaadka Maskaxda iyo kuwa Halyeeyada. Iyada oo loo marayo adeeggeeda garsoorka, Heather waxay kasbatay kalsoonida qareennada difaaca iyo kuwa xeer ilaalintaba—iyo taageerada garsoore kasta oo ka tirsan Maxkamadda Degmada ee Degmada Doorashada Koonfur Bari ee Degmada King.

Heather oo qareen ahayd muddo labo iyo toban sanno ah, waxay muddo toban sanno ka badan lahayd shirkad dacwadaha madaniga ah. Waxay la imaanaysaa khibrad maxkamadeed iyo hoggaamin ganacsi. Iyadoo ku dhalatay kuna kortay Kent, haddana qoyskeeda ku korinaysa Renton, Southeast Division waa magaalada Heather ay u dhalatay. Iyadu waa hooyo iyo xaaska halyeeyga ciidanka oo ku faanaysa. Tan iyo markii ay qalin-jabisay, waxay diyaarisay qorsheyaasha hantida oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay shaqaalaha gurmada degdegga ah ee Washington. Iyadu waxay sidoo kale si mutadawacnimo ah uga qaybqaadataa barnaamijka YMCA Mock Trial.

Heather waxay aaminsan tahay in caddaalad hufan, oo ka fiirsasho leh ay dhisayso bulshooyin ka xoog badan, kana ammaan badan. Waxay heellan tahay ilaalinta ammaanka dadweynaha iyadoo ku fadhida kursiga garsoorka iyadoo si taxadar leh isugu dheelitiraysa la xisaabtanka iyo dhaqan-celinta. Waxaa *“Si Gaar ah oo Wanaagsan ugu Qalanta”* ku qiimeeyay Ururka Qareennada Degmada King.

Waxaa taageeray: *Ururka Saraakiisha Booliiska ee Degmada King; Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka; IAM&AW 751; ATU 587; Degmada King & Dimuqraadiyiinta LD-ga ee 5aad, 11aad, 30aad, 31aad, 33aad, 37aad, iyo 47aad; 35+ garsooreyaal deegaanka ah.*



Garsooraha Jagada Lr. 6

Rhonda Laumann



(206) 335-8815

treasurer@andy-lo.com

Waxbarashada: Waxbarashada: Shahaadada Sharciga Seattle University, 1992; Shahaadada Jaamacadda Colorado Mesa University, 1989

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King, qaybta Koonfur Bari, jagada 6

Bayaanka: Iyadoo u heellan maamulka hufan ee caddaaladda, Garsoore Laumann waxaa loo doortay kursiga Maxkamadda Degmada ee Degmada King sannadkii 2018. Hadda waxay mas'uul ka tahay kumanaan dacwadood oo madani ah oo khuseeya deganeyasheena Degmada King. 8-dii sanno ee la soo dhaafay, waxay gacanta ku haysay kiisaska dambiyada, dacwadaha yaryar, iyo kuwa amarka ilaalinta. Maxkamadda Degmadu waa maxkamadda dadweynaha, halkaas oo Garsoore Laumann ay ku dhaqanto mabaadii'da daacadnimada, dulqaadka, naxariista, dabacsannaanta, iyo maskax furnaanta.

Sida xubin ka tirsan garsoorka madaniga ah ahaan, Garsoore Laumann waxay la xiriirtaa tiro badan oo dacwoodayaal is-matalla ah. Waxay awood u leedahay inay dhinacyada dacwaddu u dhexeyso ugu sharaxdo hannaanyada sharciga ee adag si la fahmi karo iyo inay si cad u qeexo go'aannada maxkamadda, iyadoo ku salaynaysa khibraddeeda ballaaran ee waxbaridda. Qayb ka mid ah waajibaadkeeda waxaa ka mid ah tababaridda garsooreyaasha pro tempore, iyo sidoo kale sii wadista waxbaridda ururka qaran oo aan faa'iido doon ahayn, National Institute of Trial Advocacy, iyadoo taageeraysa qareennada yoolkooda ah inay u noqdaan u-doodaha ugu wanaagsan ee macaamiishooda.

Garsoore Laumann waxay xafiiskan u haysaa mudnaanta ugu sareysa, iyadoo u adeegaysa muwaadiniinta Degmada King mudda-xilleedkii saddexaad. Iyadoo u heellan abuurista kursi garsoor oo kala duwan, Garsoore Laumann waxay u adeegtaa Guddiga Kala-duwanaanshaha iyo Ka-qaybgalka ee Maxkamadda waxayna guddoomisaa guddi hoosaadka Foomamka Dacwadaha Yaryar. Garsoore Laumann aad ayay u qadarinaysaa taageeradaada joogtada ah!

投票!

투표하세요!

голосуй!

codee!

ivota!

bỏ phiếu!

Ku codee afka Shiinaha, Kuuriyaanka, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, ama Fiyatnamiiska!

Waxaad isku qori kartaa inaad hesho warqaddaada codbixinta iyo dhammaan agabka codeynta oo ku qoran luqadda dookhaaga ah.

Hal mar isku qor oo dhammaan doorashooyinka mustaqbalka waxaad heli doontaa:

- warqadaha codbixinta,
- buug-yaraha codbixiyeyaasha,
- warqadaha iyo isgaarsiinta,
- adeegga macaamiisha (taleefan/iimeel), iyo
- agabyada diiwaan gelinta codbixiyaha iyo waxbarashada

Booqo kce.wiki/languages
si aad isku qorto maanta!





Garsooraha Jagada Lr. 1

Brian Todd



Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Isbaanishka, Arizona State University, Shahaadada Jaamacadda ee Daraasaadka Carruurta iyo Qoyska, Shahaadada Sharciga ee University of Wyoming

Shaqo iyo Xirfad: Garsoore, Maxkamadda Degmada King, hore u ahaa Garsoore Sharciga Maamulka ah

Bayaanka: Garsoore Brian Todd waxaa sharaf u ah inuu u adeego muwaadiniinta Degmada King iyo degmada doorashada Koonfur Galbeed. Waxaa loo magacaabay codka loo dhan yahay ee Golaha Degmada King, wuxuuna sii wadaa inuu si sharaf leh ugu adeego shacabka Degmada King.

Falsafadda Garsoore Todd waa in dadka loola dhaqmo si caddaalad ah iyadoo aan loo eegin halka ay ka yimaadeen iyo iyadoo aan loo eegin xaaladahooda. Wuxuu aqoonsan yahay in khibraddiisa shakhsi ahaanneed iyo khibraddiisa nololeed ay ka duwan yihiin kuwa dadka kale ee ka yimid asallo, dhaqamo, iyo duruufa badan oo kala duwan. Hodantinimadan bulshadeenna ayaa ah sababta uu Garsoore Todd sharaf ugu leeyahay inuu qayb ka noqdo uuna u adeego bulshada.

Kahor inta uusan imaanin maxkamadda, Garsoore Todd wuxuu u adeegay bulshada isagoo cod xooggan ugu matalayay kuwa baahan. Wuxuu macaamiisha ka caawiyay eedeymaha dambiyada, walaacyada sharciga qoyska, amarrada ilaalinta, iyo dhexdhexaadinnada. Dhammaan khibraddan ayaa qaabaysay Garsoore Todd waxayna ka dhigaysaa mid wax-ku-biirin qiimo leh u ah Maxkamadda Degmada King.

Garsoore Todd wuxuu haystaa taageerada garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee Gobolka Washington, garsooreyaasha Maxkamadda Rafcaanka, Maxkamadda Sare, Maxkamadda Degmada, iyo Maxkamadaha Dowladda Hoose. Garsoore Todd wuxuu si xushmad leh kaaga codsanayaa codkaaga si uu u sii wado u adeeggida muwaadiniinta Degmada King iyo Degmada Doorashada Koonfur Galbeed.



Garsooraha Jagada Lr. 2

Andrea Samonica Jarmon



(425) 243-7430

friendsofandreajarmon@gmail.com

reelectjudgeandreajarmon.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Dugsiga Sharciga ee University of Washington; Shahaadada Cilmiga Adabka (Ingiriisiga), Shahaadada Cilmiga Adabka (Daraasaadka Haweenka), University of Washington

Shaqo iyo Xirfad: Garsoore, Maxkamadda Degmada King

Bayaanka: Waxaa sharaf ii ah inaan adeego. Maxkamadaha leh awoodda xaddidan waa maxkamadda dadweynaha, inta badanna waa hordhaca ugu horreeya ee qofka ee nidaamka—haddii ay tahay kiis dambiyeed, arrin dacwadaha yaryar, ama beddelidda magaca. Qof kasta oo soo gala qolka maxkamaddeenna wuxuu mudan yahay in loola dhaqmo sharaf, caddaalad, iyo ixtiraam. Iyadoo aan loo eegin natiijada, qof kasta waa inuu dareemaa inuu helay fursadda ah in arrintiisa si buuxda, si taxaddar leh, iyo si caddaalad ah looga fiirsado. Ka go'naanshahayga gaarista go'aanno laga baaraan degay, oo uu sharcigu hagayo laguna bixiyay naxariis, wuxuu salka ku hayaa shan iyo tobanka sanno ee khibradda sharciga ah ee aan u keenayo jagadan—khibrad ahaan qareenka xeer ilaalinta, Kaaliyaha Xeer Ilaaliyaha Guud, garsoore sharciga maamulka, iyo qareen u matalaya qoysaska iyo shakhsiyaadka arrimaha dambiyada iyo kuwa madaniga ah.

Khibradaha nolosha ayda u gaarka ah ayaa qaabeeyay aaminsanaantayda ah in maxkamadaheenu ay tahay inay noqdaan kuwo la heli karo, lala xisaabtami karo, fahamsan saameynta naxdinta, iyo kuwo diiradda saara bani'aadannimada. Sida garsoorahaaga ahaan, waxaan yareeyay galalka dacwadaha si aan u oggolaado dhegaysiyo ka macno badan, waxaan fududeeyay jadowallada dhegaysiga dacwadaha ee ka hor maxkamadeynta, waxaan ballaariyay dadaallada ka-qaybgalka bulshada ee Maxkamadda, waxaan abuuray barnaamijyo ka-qaybgalka madaniga ah si looga caawiyo in dhallinyarada lagu soo bandhigo xirfadaha sharciga. Waxaa weli iga go'an kordhinta helitaanka caddaaladda.

Waxay sharaf ii ahaan lahayd inaan sii wado u adeeggida. Waxaan si naxariis leh ku waydiisanayaa codkaaga.



Garsooraha Jagada Lr. 3

Mitch Greene



(206) 760-9822
mitchgreeneforjudge@gmail.com

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Siyaasadda iyo Isgaarsiinta, CUNY, Shahaadada Sharciga ee Seattle University, 1992

Shaqo iyo Xirfad: Qareen, Garsoore ku meel gaar ah

Bayaanka: Mitch Greene wuxuu xirfaddiisa u hibeeyay u adeeggida dadka Degmada King isagoo leh caddaalad, daacadnimo, iyo ixtiraamka sareynta sharciga. Isagoo ah qareen shaqeynayay tan iyo 1992 iyo garsoore pro tempore ah tan iyo 1997, wuxuu guddoomiyay kumanaan dhegaysi wuxuuna gacanta ku hayay kumanaan kiis oo dambi yar, dambi yar oo culus, iyo xadgudubyo ah, isagoo keenaaya tobanaan sanno oo khibrad qolka maxkamadda ah kursiga garsoorka.

Isagoo ah degane noloshiisa oo dhan deganaa Degmada King, Mitch wuxuu fahamsan yahay in kalsoonida lagu qabo nidaamka caddaaladda ay ku xiran tahay garsooreyaal dhex-dhexaad ah, diyaarsan, oo u heellan inay qof kasta ula dhaqmaan si sharaf leh. Wuxuu aaminsan yahay in doorka garsooruhu yahay inuu sharciga u fuliyo si joogto ah, ilaaliyo xuquuqda shakhsiga, iyo inuu hubiyo in qof walba helo dhegaysi caddaalad ah oo dhex-dhexaad ah.

Isagoo lagu yaqaano xirfad-yaqaanimadiisa, garashadiisa suuban, iyo dabeecaddiisa degan, Mitch wuxuu isku dheelli tiraa isla xisaabtanka iyo caddaaladda, wuxuuna qof kasta oo hor yimaada maxkamadda ula dhaqmaa si xushmad leh. Khibraddiisa sharciyeed iyo ka go'naanshiyihiisa caddaalad loo siman yahay waxay u kasbeen ixtiraamka asxaabta ay wada shaqeeyaan, qareennada, iyo dacwoodeyaashaba si isku mid ah.

Sida Garsooraha Maxkamadda Degmada King, Qaybta Burien Lr. 3 ahaan, Mitch Greene waxa uu sii wadi doonaa inuu sharciga ku ilaaliyo daacadnimo, inuu bulshada ugu adeego si heellan, uuna xaqiijiyo in qof kasta oo soo gala qolka maxkamadda loola dhaqmo si caddaalad, ixtiraam, iyo eex-la'aan ah. Wuxuu si xushmad leh u codsanayaa taageeradaada.

Ma Ogtahay?

Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ee Degmada King ayaa ah habka ugu wanaagsan ee aad si toos ah warqaddaada codbixinta ugu soo celin karto Xarunta Doorashada. Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta waa ammaan, ku habboon, oo furan ilaa daqiiqadda ugu dambeysa! Warqadaha codbixinta ee lagu soo celiyo sanduuqa lagu rido Maalinta Doorashada ayaa loo dammaanad qaadaa in loo tixgeliyo inay ku yimaadeen wakhtigii loogu talagalay haddii lagu rido sanduuqa 8:00 p.m. ka hor.

- ✓ aan la faragelin karin
- ✓ midkiiba 1000 rodol
- ✓ boolal kula xiran shubka
- ✓ dab-damiye ayaa ku dhex jira
- ✓ habab qufullo oo badan
- ✓ shaabado muujinaya faragelinta





Garsooraha Jagada Lr. 4

Fa'amomoi Masaniai, Jr.



(206) 880-6897
fmasaniai_jr@hotmail.com
reelectjudgemasaniai.com

Waxbarashada: Dugsiga Sare ee Evergreen, Washington State University, WSBA APR Barnaamijka Rule 6

Shaqo iyo Xirfad:Garsoore

Bayaanka: U adeeggida sida Garsoorahaaga Maxkamadda Degmada ee Degmada King ahaan waxay ahayd mid ka mid ah maamuusyada ugu waaweyn ee nolosha. Waa sharaf in loo adeego dadka Degmada King si caddaalad, daacadnimo, iyo ixtiraam leh. Anigoo leh 32 sanno oo khibrad ah oo ku saabsan nidaamka caddaaladda dambiyada, waxaa iga go'an inaan sharciga si caddaalad ah u mariyo iyadoo la hubinaayo in qof walba la maqlo.

Helitaanka caddaaladda ayaa ah muhiimadda koowaad ee qolkayga maxkamadda. Dad badan ayaa hor yimaada maxkamadda iyagoo dareemaya cabsi, walaac, iyo hubaal la'aan. Waxaan si taxaddar leh u dhegaystaa, si cad u sharaxaa sharciga, waxaanan qof kasta ula dhaqmaa si sharaf leh.

Caddaaladdu waxay ku saabsan tahay wax ka badan ciqaab. La xisaabtanku waa lagama maarmaan, laakiin sidoo kale waxaa muhiim ah fursadaha dhaqan-celinta iyo dib-u-dhiska nolosha. Isku xirka dadka iyo daaweynta, tababarka shaqada, iyo kheyraadka bulshada waxay gacan ka geysataa dhimmista ku laabashada dambiyada waxayna xoojisaa ammaanka dadweynaha. Waxaan ka qiimo badan nahay waxa ugu xun ee aan waligeen sameynay.

Sida garsoorihii ugu horreeyay ee Samoan ee gobolka Washington ahaan, jidkayga kursiga garsoorka wuxuu ku bilaabmay karaaniga maxkamadda ka hor intaan ka qalin jebin WSBA Rule 6 Law Clerk Program. Waxaan u soo adeegay sidii qareenka dadweynaha, qareenka xeer ilaalinta, qareenka dacwadaha madaniga ah, Kaaliyaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee American Samoa, iyo hadda oo aan ahay garsoorahaaga, anigoo ka qayb qaatay ku dhawaaq 200 oo maxkamadeynta xeerbeegtida ah. Waxaan weli u heellannahay u adeeggida bulshooyinkeena kala duwan si caddaalad, naxariis, iyo la xisaabtan leh.

Harry Steinmetz



(206) 387-1333
info@steinmetzforjudge.com
steinmetzforjudge.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Santa Clara University, Dugsiga Sharciga, 1989; Shahaadada Jaamacadda, San Diego State University, 1985.

Shaqo iyo Xirfad:Garsooraha Sharciga Maamulka, Garsoore Pro Tem, xeer ilaalinta, iyo qareenka difaaca.

Bayaanka: Garsooraha wuxuu u baahan yahay khibrad, daacadnimo, iyo naxariis. Waxaan bixiyaa dhammaan saddexdaba. Muddo 36 sanno ah, waxaan u soo adeegay sidii Garsoore Sharciga Maamulka, Garsoore Pro Tem, xeer ilaaliye, iyo qareenka difaaca ahaan, anigoo ka faa'iideysanaya khibradda dhinac kasta oo qolka maxkamadda ah. Waxaan helay faham dheellitiran oo ku saabsan nidaamkeena sharciga iyo baahida loo qabo in sharciga loo dabaqo si caddaalad ah, si eex la'aan ah, iyo iyadoo la ixtiraamayo qof kasta oo hor yimaada maxkamadda.

Sida xubinta Golaha Magaalada Des Moines ee labo jeer la doortay ahaan, waxaan fahamsanahay sida go'aannada maxkamaddu u saameeyaan shakhsiyaadka, qoysaska, ganacsiyada, iyo bulshooyinka.

Sumcadda iyo anshaxa ayaa muhiim ah. Hab-dhaqanka garsooraha—ha ahaato marka uu kursiga garsoorka ku fadhiyo iyo dibaddiisaba—wuxuu kasbadaa ama lumiyaa kalsoonida dadweynaha. Intii ay socotay shaqadaydu, waxaan shaqaalaha maxkamadda iyo qof kasta oo soo gala qolka maxkamadda ula dhaqmay sharaf iyo ixtiraam.

“Harry waa mid si gaar ah oo wanaagsan ugu qalma inuu ka adeego maxkamadda” – Rebecca Robertson, Garsooraha Sare, KCDC. Waxaa si sharaf leh ii taageeray garsooreyaasha Maxkamadda Degmada ee Degmada King iyo Maxkamadaha Sare iyo duqooyda magaaloooyinka iyo saraakiisha la doortay ee guud ahaan Qaybta Koonfur Galbeed. Ka eeg liiska oo dhammaystiran ee www.steinmetzforjudge.com. Waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa codkaaga ee Maxkamadda Degmada King, Qaybta Koonfur Galbeed, Jagada Lr. 4.



Garsooraha Jagada Lr. 5

Noel Merfeld

(206) 922-4335

merfeldforjudge@gmail.com

merfeldforjudge.com



Waxbarashada: Shahaadada Sharciga (JD), Dugsiga Sharciga ee University of Washington; Shahaadada Jaamacadda, University of Washington

Shaqo iyo Xirfad: Qareenka ku-tiirsanaanta ee matalaya carruurta ku jirta nidaamka daryeelka carruurta

Bayaanka: Waxaan mustaqbalkayga shaqo ku qaatay u adeeggida dadka nugal—sida xeer ilaaliye ahaan oo ilaalinaya dhibbaneyaasha rabshadaha qoyska, sida qareenka difaaca dadweynaha ahaan oo ilaalinaya xuquuqda dastuuriga ah, iyo maanta, sida u doodad ahaan u ah carruurta iyo qoysaska. Door kasta dhexdiisa, si dhab ah u caawinnaadda dadka waxay u baahan tahay in laga eego meel ka baxsan kiiska si loo fahmo loona maareeyo caqabadaha sida qabatinka, xanuunka dhimirka, naxdinta, iyo xasillooni darada qoyska. Taasi waxay u baahan tahay tixgelin, heellannaan, garaadka dareenka, is-hoosaysiin, iyo xiiso.

Tayooyinkan ayaa si la mid ah muhiim ugu ah kursiga garsoorka. Eedeysaneyaasha dareema in la dhegaystay waxay u badan tahay inay xukunkooda u aqbalaan mid caddaalad ah ayna ka fikirkaan hab dhaqankooda. Garsooreyaashu waxay kalsoonida nidaamka sharciga ku dhisaan iyagoo dhegaysanaya bulshooyinka ay u adeegaan. Garsooreyaasha si maskax leh ula falgala bah-wadaagta bulshada waxay xoojiyaan awoodda bulshada ee lagu taageerayo soo kabashada, la xisaabtanka, iyo xallinta khilaafaadka.

Dadaalladan waxay abuuraan wareegyo jawaab-celin togan. Kuwa ku guuleysta daaweynta waxay hagi karaan kuwa kale ee la dhibtoonaya qabatinka. Kalsoonidu waxay xubnaha bulshada ka dhigtaa kuwo aad ugu diyaarsan inay u soo jeestaan oo ay la macaamilaan maxkamadda; ka-qaybgalkaas wuxuu garsooreyaasha siiyaa macluumaad ka wanaagsan; go'aannada xog-ogaalnimada leh waxay dhisaan kalsooni ka sii weyn.

Dhegaysiga, barashada, iyo la shaqeynta bulshooyinkeena ayaa hagi doona sida aan u adeego garsoorehaaga ahaan. Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan helo codkiina. Waxaa taageeray Duqa Magaalada SeaTac Mohamed Egal, Xubinta Golaha Buriin Sam Mendez, Dimuqraadiyiinta Degmada 33-aad, iyo kuwo kale.

Renee Walls

renewallsforjudge@gmail.com

renewallsforjudge.com



Waxbarashada: Dugsiga Sharciga ee Lewis & Clark, Portland, Shahaadada Sharciga

Shaqo iyo Xirfad: University of Illinois, Urbana-Champaign, Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka

Bayaanka: Renee Walls waa doorashada ugu wanaagsan ee Garsooraha Maxkamadda Degmada #5 sababtoo ah diiwaankeeda khibrada sharciga ee 26-ka sanno ah ee aan loo dhigmin. Sida Garsoore Pro Tem iyo Qareenka Xeer Ilaalinta ahaan, Renee waxay kasbatay sumcad adag oo ku aaddan daacadnimo, caddaalad, iyo garasho suuban—sifooyin muhiim u ah garsoore lagu kalsoon yahay.

Sheekada Renee waxay ku bilaabatay iyadoo ah soo galooti Koonfurta Kuuriya ah oo la soo korsaday, oo ay soo koriyeen hooyadeed oo ka timid Filibiin iyo aabaheed, oo ah beeraley Minnesota ka soo jeeda. Waxay Renee ku beereen qiyaamka shaqada adag, waxbarashada nolosha oo dhan, u adeeggida bulshada, iyo ixtiraamka dadka kale.

Muddo 17 sanno ah, Renee waxay u adeegtay sidii Garsoore Pro Tem ahaan, iyadoo si dhab ah u guddoominaysay kumanaan dacwadood isla markaana bixinaysay caddaalad dhex-dhexaad ah, dheelitiran, oo hufan. 26-keeda sanno ee ay ahayd Qareenka Xeer Ilaalinta waxay bixinayaan faham qoto dheer oo ku saabsan nidaamka sharciga iyo saameynta uu ku leeyahay shakhsiyaadka, qoysaska, iyo bulshada.

Renee Walls waxaa taageeray in ka badan 35 garsoore, degmooyinka sharci dejinta ee Dimuqraadiga ee Koonfur-galbeed, Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada ee lagu kalsoon yahay. Hoggaankeeda ayaa kasbaday kalsoonida asxaabteeda ay wada shaqeeyaan, kuwaas oo u doortay Madaxweynaha South King County Bar Association. Sida Garsoore Maxkamadda Degmada King ahaan, Renee Walls waxay keenni doontaa Kursiga Garsoorka khibrada, xukunka, iyo daacadnimada ay bulshadeennu u qalanto. Waad mahadsan tahay.



Garsooraha Jagada Lr. 1

Bardi Martin



(206) 385-2724
judgebardimartin@gmail.com
www.retainjudgebardi.com

Waxbarashada: Dugsiga Sharciga ee Seattle University, Shahaadada Sharciga; University of Washington, Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada King, Qareen, 19 sanno

Bayaanka: Isagoo uu si wadajir ah oo loo dhan yahay u magacaabay Golaha Degmada King, Garsoore Bardi Martin ayaa si sharaf leh ugu adeegaya sida Garsoorahaaga Maxkamadda Degmada ee Degmada King ahaan, isagoo la imaanaya khibrad maxkamadeed oo la xaqiijiyay, xukun degan, iyo ballanqaad noloshiisa oo dhan ah oo ku aaddan Degmada King.

Markii uu dhashay ayaa la korsaday, Bardi waxaa soo koriyay macallin dugsiga dadweyne iyo ruug-caddaa bilad-sharaf dagaal leh oo ku dhex jira qoys jinsiyo iyo qowmiyado kala duwan leh. Dhaxalkiisa Puerto Rican-ka ah, khibradihiisa qof la soo korsaday ahaan, iyo shaqadiisii ugu horreysay ee muusikiiste xirfad yahan ahaan ayaa baray inuu si qoto dheer u dhegasto, dadka u arko shakhsiyaad, iyo inuu qof kasta ula dhaqmo si sharaf leh.

Isagoo ka qalin-jebiyay University of Washington iyo Dugsiga Sharciga ee Seattle University, Bardi wuxuu 19 sanno ku qaatay maxkamadaheena. Wuxuu ku bilaabay sida qareenka dadweynaha ahaan, wuxuu dhisay xafiis qareennimo oo Seattle ah oo guuleystay, wuxuuna u adeegay sida garsoore ku meel gaar ah ahaan. Maanta, Garsoore Martin wuxuu guddoomiyaa arrimaha madaniga iyo dambiyada iyo Maxkamadda Bulshada ee Shoreline iyo Kenmore, taas oo shakhsiyaadka lagu soo eedeeyay dambiyada heerka hoose ku xirta kheyraadka guriyeynta, caafimaadka maskaxda, iyo isticmaalka maandooriyaha, iyadoo kor loo qaadayo la xisaabtanka isla markaana la dhimmayo dambiyada soo noqnoqda.

Garsoore Martin waxaa taageeray in ka badan 50 garsoore waxaana uu helay taageerada keliya ee Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo *The Stranger*. Maadaama ay kiisaska maxkamaddu si xawli ah u kordhayaan, khibradda kursiga garsoorka ayaa ka muhiimsan weligeed. Fadlan u codee si loo sii hayo Garsoore Bardi Martin—khibrad aad ku kalsoonaan karto.

Nyjat Rose-Akins



(206) 745-2010
info@electnyjatforjudge.com
electnyjatforjudge.com

Waxbarashada: B.B.A., Ganacsiga Caalamiga ah iyo Maaliyadda, Howard University; Shahaadada Sharciga (JD), Dugsiga Sharciga ee Seattle University

Shaqo iyo Xirfad: Garsoore Pro Tem ee Maxkamadda Degmada King; hore u ahayd Kaaliyaha Qareenka Magaalada

Bayaanka: Go'aannada garsoorku waxay saameeyaan nolosha shakhsiyaadka, qoysaska, iyo bulshooyinka. Muddo 16 sanno ah, waxaan u hibeeyay xirfaddayda u adeeggida Degmada King si caddaalad, daacadnimo, iyo ixtiraam leh.

Sida soo galooti ahaan, waxaan si shakhsi ah u dhex maray nidaamka sharciga madaniga ah. Sida Kaaliyaha Qareenka Magaalada ahaan, waxaan hoggaamiyeyasha magaalada kala taliyay hoy la'aanta iyo la xisaabtanka booliiska. Sida Garsoore Pro Tem ahaan, waxaan guddoomiyay kumanaan kiis, oo ay ku jiraan amarrada ilaalinta, rabshadaha qoyska, dacwadaha yaryar, iyo DUIs. Sida u-doodaha bulshada ahaan, waxaan booqday xabsiyada oo aan ka soo shaqeeyay guddiyada ururada gargaarka sharciga.

Wadajir, khibradahan waxay ii diyaariyeen inaan gaaro go'aanno dhex-dhexaad ah oo ilaalinaya ammaanka dadweynaha iyadoo la hubinayo caddaaladda. Waxaan aaminsanahay in caddaaladda loo siman yahay ay ku xiran tahay dhegaysiga, u adeegsiga sharciga si caddaalad ah, iyo ula dhaqanka dadka si sharaf iyo ixtiraam leh. Falsafadayda waa mid fudud: marka hore dhegayso, ugu dambeyntii go'aanso.

Lagu qiimeeyay "Si Gaar ah oo Wanaagsan ugu Qalanta" ururada Cardozo Society, Joint Asian Judicial Committee, Degmada King, Latino Bar, iyo Loren Miller Bar. Waxaa taageeray Dimuqraadiyiinta Degmooyinka Sharci Dejinta ee 32aad, 34aad, 36aad, 37aad, iyo 46aad; Garsooreyaasha Whitener, Mungia, iyo Angelis; Xeer Ilaaliyaha Guud Nick Brown; Xubinta Golaha Joy Hollingsworth; Duqii Hore ee Magaalada Bruce Harrell; Senatarka Rebecca Saldana; Wakiilka Brianna Thomas; iyo in ka badan 100 garsooreyaal iyo qareenno ah. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga.



Garsooraha Jagada Lr. 2

Kuljinder K. Dhillon



(206) 334-3777

judgekuljinderdhillon@gmail.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Dugsiga Sharciga ee Gonzaga University, 2002; Shahaadada Jaamacadda, Isgaarsiinta, Washington State University, 1995

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King

Bayaanka: Garsoore Dhillon waxay u soo adeegtay Degmada King in ka badan 30 sanno, ka hor magacaabisteeda Maxkamadda Degmada ee Degmada King ee 2021. Ka hor dugsiga sharciga, waxay cod siisay dhibbaneyaasha dambiyada iyadoo ahayd U-doodaha Dhibbanaha Rabshadaha Qoyska ee Xafiiska Qareenka Xeer Ilaalinta Degmada King. Sida u doode ahaan, waxay keentay aragti toos ah oo ka timid dhaqamo kala duwan oo ku saabsan sida loo arko rabshadaha guriga bulshooyinka kale dhexdooda. Aragtideeda gaarka ah ayaa si weyn u caawisay dhibbaneyaasha/badbaadeyaasha rabshadda qoyska. Sida qareen ahaan, waxay matashay eedeysaneyaasha saboolka ah, iyadoo heshay sumcad qareen difaaca dadweynaha oo aad loo qadariyo ahaan, ka dibna qareen difaaca oo gaar ah.

Waayo-aragnimada ballaaran ee Garsoore Dhillon ee nidaamka caddaaladda ayaa si fiican ugu adeegta sida garsoore ahaan, halkaas oo ay hadda ku dhegaysato boqolaal dacwadaha dambiyada, doon doonista yaryar (small claims), iyo amarrada ilaalinta ee Seattle. Waxay sidoo kale ahayd garsooraha Maxkamadda Goboleedka ee Rabshadaha Qoyska, iyadoo guddoominaysay muddo labo sanno ah. Dhammaan dacwadaha ay dhegaysato, Garsoore Dhillon waxay si adag u aaminsan tahay in qof kasta oo horyimaada maxkamadda loola dhaqmo si ixtiraam, caddaalad, iyo eex-la'aan leh.

Garsoore Dhillon waxay u soo adeegtay sidii xubin ka tirsan guddiga la-talinta ee Machadka Garsoorka (The Judicial Institute) 2021-2022, kaas oo u heellan kala duwanaynta nidaamka garsoorka ee gobolka Washington. Waxay hadda ka tirsan tahay Guddiga Shaqaalaha ee Maxkamadda. Garsoore Dhillon waxay qadarinaysaa codkaaga bisha Nofeembar!



Garsooraha Jagada Lr. 3

Rebecca Robertson



(253) 237-4233

judgerebeccarobertson@gmail.com

Waxbarashada: BA Cilmiga Siyaasadda UW 1996 / Shahaadada Sharciga ee Dugsiga Sharciga ee Seattle University 2000

Shaqo iyo Xirfad: Garsoore, Maxkamadda Degmada King

Bayaanka: Garsoore Robertson waxay ahayd garsoore tan iyo 2010. Sannadkii 2021 waxaa si aqlabiyad buuxda leh Maxkamadda Degmada ee Degmada King ugu magacaabay Golaha Degmada King, waxaana la doortay 2022. Ka hor inta aysan fariisan kursiga garsoorka ee Degmada King, waxay Federal Way ka soo noqotay Garsooraha Maxkamadda Dowladda Hoose. Waxay hadda tahay Garsooraha Guud ee Shir-guddoonka ee Maxkamadda Degmada ee Degmada King.

Garsoore Robertson waxay ka tirsan tahay Guddiga Maamulka Garsoorka (BJA) ee gobolka oo dhan, waa Madaxweynihii hore ee Ururka Garsooreyaasha Maxkamadaha Degmada iyo Dowladda Hoose (DMCJA), waana Guddoomiyihii hore ee Guddiga Siyaasadda iyo Qorsheynta ee BJA iyo Guddoomiye-Wadaagga Guddiga Hawlgalka Badbaadada Maxkamadda Dacwad-qaadista. Waxay sidoo kale ka tirsan tahay Golaha Maxkamadaha Madax-bannaan ee DMCJA.

Garsoore Robertson waxay miisaaniyad-sameynta maxkamadda, madax-bannaannida garsoorka, iyo sharciga iyo habraaca bartaa garsooreyaasha kale, qareennada, hoggaamiyeyaasha laamaha fulinta iyo sharci-dejinta, iyo ardayda.

Ka hor intaysan ku biirin garsoorka, Garsoore Robertson waxay ahayd qareenka xeer ilaalinta iyo Garsoore Pro Tem ee maxkamado kala duwan. Waxay guddoomiye ka ahayd Qaybta Sharciga Dambiyada ee Ururka Qareennada Gobolka Washington waxayna daabacday oo ay dhigtay koorsooyin ku saabsan Rabshadaha Guriga iyo arrimaha DUI. Garsoore Robertson waxaa sharaf u ahaan lahayd inay hesho codkaaga.



Garsooraha Jagada Lr. 4

Yvonne Chin



Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, DePaul University, College of Law; Shahaadada Jaamacadda, Vassar College

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King

Bayaanka: Garsoore Yvonne Chin waxaa lagu qiimeeyay “Si Gaar ah oo Wanaagsan ugu Qalanta” Ururka Qareennada Gobolka King, Qareennada Haweenka ee Degmada King, Ururka Qareennada Latina/o, iyo Ururka Qareennada Loren Miller (“xiriirka maxalliga ah ... ee qareennada Afrikaanka Mareykanka ah” ee Washington). Sannadkii 2026, Golaha Degmada King ayaa si aqlabiyad buuxda leh ugu magacaabay Maxkamadda Degmada.

Ka hor inta aysan ku biirin kursiga garsoorka, Garsoore Chin waxay ahayd qareen heellan oo ka shaqeeya kaalmada sharciga madaniga ah iyo danta guud. Sida Agaasimaha Sharciga ee Xarunta Sharciga Xadgudubka Galmada ahaan iyo Qareenka Sare ee ACLU of Washington ahaan, waxay matashay dad wajahaya qaar ka mid ah caqabadaha nolosha ugu adag.

Khibraddeeda sharciyeed ee ballaaran waxay dabooshaa sharciga madaniga, dambiyeedka, dastuuriga, iyo maamulka. Waxay si guul leh macaamiisha ugu matashay labadaba maxkamadaha dacwad-qaadista iyo kuwa racfaanka ee Washington, Illinois, iyo maxkamadda federaalka. Waxay sidoo kale u soo adeegtay sidii Garsoore iyo Xaakim Pro Tempore ee Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle.

Garsoore Chin waxay la timid sannado khibrad adeegga dadweynaha ah iyo ka go’naansho qoto dheer oo ku aaddan la dhaqanka caddaaladda iyo ixtiraamka leh ee qof kasta oo horteeda yimaada. Madax-bannaannideeda, u diyaar garowgeeda taxaddarka leh, iyo ixtiraamkeeda sharafta qof kasta waxay gacan ka geystaan xaqiiqinta in maxkamadaheenu yihiin kuwo caddaalad ah, la heli karo, kuna qotoma sharciga.



Garsooraha Jagada Lr. 5

Kristin Shotwell



(206) 337-2256

judgeshotwell@gmail.com

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda Yale University; M.S.W. University of Washington; Shahaadada Sharciga University of Hawai’i

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King

Bayaanka: Ka dib 23 sanno oo khibrad xirfadeed ah oo ay u leedahay nidaamyada caddaaladda dambiyada iyo nidaamyada adeegyada bulshada, Garsoore Shotwell waxaa loo magacaabay kursiga Maxkamadda Degmada ee Degmada King sannadkii 2021. Waxaana markii dambe la doortay sannadkii 2022.

Sida qareen ahaan, Garsoore Shotwell waxay u soo shaqeysay sidii difaacaha dadweynaha, qareenka dacwadaha iyo kormeeraha qareennada ee ballanqaadyada madaniga ah iyo dambiyada culus.


Intii ay ku jirtay xirfaddeeda, Garsoore Shotwell waxaa ka go’nayd dhimmista ku laabashada dambiyada si loo hagaajiyo ammaanka dadweynaha iyo nolosha shakhsiyaadka ku lug leh nidaamka caddaaladda.

Garsoore Shotwell waxay Shahaadada Sharciga ka qaadatay Dugsiga Sharciga ee University of Hawai’i, halkaas oo ay ahayd ardaygii ugu darajo sareeyay; shahaadada mastarka ee shaqada bulshada oo ay ka qaadatay University of Washington; iyo Shahaadada Jaamacadda ee cilmi-nafsiya oo ay ka qaadatay Yale University. Waxay ahayd turjumaan luqadda Isbaanishka ah oo ka shahaadaysan gobolka in ka badan 25 sanno.

Ma isticmaashay Foojarradaada Dimuqraadiyadda?

Waa maxay Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda?

Sannadka 2026, deganeyaasha Degmada 5 ee Seattle waxay helayaan laba Foojarro Dimuqraadiyadeed oo midkiiba yahay \$50, kuwaas oo ay ku deeqi karaan musharaxiinta u tartamaaya Doorashada Gaar ah ee Degmada 5aad ee Seattle.



Musharaxiinteed ayaan siin karaa Foojarradayda Dimuqraadiyadda?

Musharaxiinta u tartamaaya Golaha Magaalada Seattle Jagooyinka Degmada 5 ayaa u qalma maalgelinta Foojarka Dimuqraadiyadda. Iska hubi si aad u xaqiijiso in musharaxa aad jeceshahay uu isticmaalaayo Foojarrada Dimuqraadiyadda. Ka hel liiska musharaxiinta ka qayb qaadanaya seattle.gov/democracymailbox ama wac (206) 727-8855.

Goorma ayaan isticmaalaa Foojarradayda Dimuqraadiyadda?

Waxaad isticmaali kartaa Foojarrada Dimuqraadiyadda laga bilaabo marka aad hesho ilaa Nofeembar 30, 2026. Si kastaba ha ahaatee, musharaxiinta waxay heli karaan oo keliya tiro kooban oo foojarro ah. Haddii aad wakhti dheer sugto si aad u isticmaasho foojarradaada, waxay aad u badan tahay in musharaxiinta aad doorbidayso ay gaaraan xadkooda foojarka.

Waxaan lumiyay Foojarradayda Dimuqraadiyadda. Ma codsan karaa foojarro cusub?

Haa! Waxaad codsan kartaa Foojarro Dimuqraadiyadeed oo cusub adiga oo buuxinaaya foomka oonleanka ee webseedka, iimeel ugu diraa democracymailbox@seattle.gov, ama adigoo wacaya (206) 727-8855.

Haddii aan isticmaalo Foojarradayda Dimuqraadiyadda, macluumaadkaas ma loo shaaciyaa dadweynaha?

Haa, ku tabarrucidda ololeyaasha, oo ay ku jiraan Foojarrada Dimuqraadiyadda, waa macluumaad dadweyne. Tani waxay ka dhigan tahay in magacaaga (iyo laga yaabo ciwaankaaga), qofka aad wax ugu deeqday, iyo caddadka ayaa lagu daabici doonaa oonleanka.

Nagala Soo Xiriir!

seattle.gov/democracymailbox
democracymailbox@seattle.gov
(206) 727-8855

Qalabka Daah Furnaanta Canshuuraha ee Xafiiska Qiimeeyaha Degmada King

Si aad u aragto sida canshuurta la soo jeediyay ee Seattle ama Degmada King oo ku jirta warqadda codbixinta ay u saameyn doonto canshuurtaada hantida, ama laga yaabo kiradaada, booqo <https://localscape.spatialist.com/#kingcountyassessor/My-Property>

Geli ciwaankaaga guriga ka dibna guji barta "View Property" markaa ka dib guji barta "View Proposed Taxes."

Maadaama kirada ku saleysan tahay arrimo badan, isbeddelka canshuurta hantida wuxuu saameyn karaa ama uusan saameyn karin kirada qofka degan. Qalabkani wuxuu muujinayaa sida canshuurta hantiyeed loogu qaybin karo unugyada kala duwan ee guri kiro ah.

Seattle/Degmada King

HAGAHA CODBIXIYEYAASHA OO FIDIYOOW AH

Taageerayaasha iyo kuwa ka soo horjeeda ee degmada oo dhan iyo cabbirrada warqadda codbixinta ee Seattle iyo dhammaan degmada King oo dhan, Golaha Degmada King ee Magaalo Weynta, Dekedda Seattle, Magaalada Seattle, iyo musharaxiinta Guddiga Dugsiga Seattle waxaa lagu martiqaaday inay duubaan muuqaal laba daqiiqo ah oo sharaxaaya cidda ay yihiin iyo sababta ay u tartamayaan.

- ✓ **Si toos ah uga dhegayso musharaxiinta!**
- ✓ **Bayaannadu waa ilaa iyo laba daqiiqo oo lama tafatirin**
- ✓ **Musharaxiinta waxay u kala horeeyaan sida ay ugu qoran yihiin warqadda codbixinta**

📺 seattlechannel.org/elections



Hagaha Codbixiyeyaasha ee Fiidiyowga ah ee aan xisbina raacsanayn waa wada shaqeynta Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka ee Seattle, TV-ga Degmada King, iyo Janaalka Seattle.



Golaha Degmada Lr. 5

Nilu Jenks



(206) 321-9890
info@neighborsfornilu.com
www.neighborsfornilu.org

Waxbarashada: Agaasimaha Siyaasadda iyo Iskaashiga ee FairVote Washington; hooyo iyo qabanqaabiye

Shaqo iyo Xirfad: Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, Dhaqaalaha iyo Isbaanishka, Wellesley College

Bayaanka: Waqooyiga Seattle waxay u qalantaa Xubinta Golaha Magaalada oo dhegaysata, ka jawaabta, oo fulisa baahiyaheena maalinlaha ah. Seattle waa magaalo si qoto dheer u horumarsan. Waxaan haysannaa agab, hibo, iyo codad aan ku xallin karno caqabadaha waaweyn, laakiin inta badan Aqalka Magaalada wuxuu dareemaa inuu ka go'an yahay waxa dadku la kulmayaan maalin kasta.

Markii Fred Meyer ee Lake City la xiray, carruurtaaydu waxay i weydiyeen sababta aan cidna si ka adag ugu dagaalamin badbaadintiisa ama u beddeliddiisa. Jawaab fiican ma aanan helin. Qoysaska aan lahayn baabuur ayaa habeen gudihiisa waayay helitaanka raashiinka iyo adeegyada farmashiyaha, magaaladeenuna ma lahayn qorshe dhab ah. Taasi lama aqbali karo. Kharashka guryaha ayaa sii kordhaya si xad dhaaf ah, taasoo dad badan ku riixaysa xasilooni darro iyo hoy la'aan, halka deganeyaasha muddada dheer ay ku dhibtoonaayaan inay sii joogaan xaafadaha ay jecel yihiin.

Waxaan u baahanahay xubin golaha ah oo soo xaadirta, dhegaysata, oo diiradda saarta xalalka wax ku oolka ah. Mudnaantaydu waa kuwo cad: dhisidda guryo badan oo la awoodi karo, hagaajinta badbaadada Lake City Way iyo Aurora, taageerada ganacsiyada xaafadda, xoojinta ka hortagga rabshadaha hubka, ilaalinta bulshooyinka soogalootiga ah ee ka dhanka ah faragelinta federaalka, naga dhaqaajinta sidii aan u gaari lahayn yoolalkeena cimilada, iyo hubinta in codeynta doorashada darajeysan si guul leh loo hirgeliyo 2027 si codbixiyeyaashu ay u aaminnaan oo ay u fahmaan nidaamka.

Waxaan ku noolahay Lake City aniga iyo saygayga Rob iyo labadeenna carruur ah. Waxaan ka shaqeeyaa FairVote Washington, halkaas oo aan maalin kasta ka shaqeeyo dimuqraadiyadda iyo dhismaha isbahaysiga ee gobolkeena oo dhan. Laga bilaabo u adeeggida Guddoomiyaha U doodista PTA ee Dugsiga Hoose ee John Rogers ilaa abaabulka Seattle oo dhan, shaqaadydu had iyo jeer waxay ahayd isku xirka dadka iyo keenista natiijooyin.

Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

Waxaa taageeray: Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta Degmada 32aad, 36aad, iyo 46aad, Ficilka Ilaalinta Washington, Xisbiga Qoysaska Shaqeeyaa, PROTEC17, UFCW 3000, IBEW 46, Xubnaha Golaha Magaalada Seattle Alexis Mercedes Rinck, Dionne Foster, Joy Hollingsworth, iyo Eddie Lin, Senatarrada Javier Valdez iyo Noel Frame, Wakiillada Darya Farivar, Julia Reed, Liz Berry, iyo kuwo kale.

Julie Kang



(206) 880-3873
julieforseattle@gmail.com
julieforseattle.com

Waxbarashada: UCLA (BA); California State University (MA); University of Washington (PhD)

Shaqo iyo Xirfad: Seattle University, University of Washington Agaasime & Macallin

Bayaanka: Waxaan ahay degane Degmada 5 muddo 30 sanno ah, bare, xubin ka tirsan qoys ka tirsan ururka shaqaalaha, soo galooti jiilkii koowaad ah, iyo hoggaamiye bulsho. Waxaan doortay Waqooyiga Seattle si aan ugu koriyo gabadhayada waxaana xirfaddayda ku qaatay baridda bareyaasha, caawinnaadda ganacsiyada yaryar ee ay maamulaan soogalootigu, iyo xoojinta bulshada.

Waxaan ahay Dimuqraadi ay ka go'an tahay hagaajinta nolosha qoysaska shaqeeya, waayeellada, carruurta, iyo soo galootiga. Waxaan hor istaagi doonaa Trump marka uu khatar geliyo bulshooyinkeena iyo qiyaamkeena.

Degmada 5 waxay heshay fiirto aan joogto ahayn iyo kheyraad ka yar inkastoo ay jirto baahi. Waxaan weynay ganacsiyo iyo adeegyo muhiim ah, oo ay ku jiraan dukaanka raashiinka iyo farmashiyaha keliya ee Lake City, qoysaskuna waxay wajahayaan kor u kaca kharashyada guriga, kharashyada cuntada, kharashyada xanaanada carruurta, iyo kharashyada gaadiidka. Taas ayaa ah sababta ay iiga go'an tahay inaan xafiisyo degmo ka hirgeliyo Aurora Ave iyo Lake City si loo kordhiyo helitaanka kheyraadka.

Mudnaantayda koowaad waa awoodi karidda kharashka. Waxaan dhimmayaa dib-u-dhacyada bixinta oggolaanshaha si guryo loogu dhiso si ka dhakhso badan, waxaan taageerayaa guryaha dakhligoodu isku dhafan yahay iyo guryaha shaqaalaha ee u dhow gaadiidka dadweynaha, waxaan hagaajinayaa sahlanaanta socodka lugta, waxaanan soo jiidayaa dukaamada raashiinka ee la awoodi karo.

Mudnaantayda labaad waa wax ka qabashada hoy la'aanta daba-dheeraatay iyadoo la adeegsanayo daryeel, daaweyn, guriyeyn, iyo la xisaabtan. Waan ballaarin doonaa daaweynta caafimaadka dhimirka iyo tan isticmaalka maandooriyaha, waxaan dadka ku xiri doonaa guryo iyo adeegyo, waxaana isku duba ridi doonaa bixiyeyaasha, jawaab-bixiyeyaasha degdegga ah, SPD, iyo CARE. Waxaan taageeraa shaqaaleynta booliiska, ka hortagga rabshadaha hubka, iyo dhaqan gelinta diiradda lagu saarayo dambiyada rabshadaha wata iyo ka ganacsiga sharci darada ah.

Keliya ma aqoonsado dhibaatooyinka; waxaan xirfaddayda ku qaatay habeynta xalalka. Markii ay bangiyada waaweyn iska indha-tireen soogalootiga, qoysaska shaqeeya, iyo ganacsiyada yaryar, waxaan aasaasay bangi bulsho. Markii aan arkay in raashiinka uu noqonayo mid aan la awoodi karin, waxaan bilaabay inaan toddobaad kasta tabaruk ahaan uga shaqeeyo bangiga cuntada. Tababarkayga dhinaca la-talinta ayaa wargeliya fahamkayga ku aadan caafimaadka habdhaqanka iyo daaweynta. Guddiga Soogalootiga iyo Qaxootiga ee Degmada King dhexdiisa, waxaan ka shaqeeyaa in aan meesha ka saaro caqabadaha hortaagan adeegyada. Waxaa taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 32-aad, The Seattle Times, Tree PAC, LiUNA Local 242, mas'uuliyiinta deegaanka ee la doortay, hoggaamiyeyaasha bulshada, iyo 50+ oo ganacsiyada xaafadda ah. Inaad codkaaga i siiso waxay noqon lahayd sharaf.



Maxkamadda Dowladda Hoose Garsooraha Jagada Lr. 1

Cat McDowall



judgecatmcdowall@gmail.com
judgecatmcdowall.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Dugsiga Sharciga ee University of Virginia; Shahaadada Jaamacadda, Northwestern University

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle

Bayaanka: U adeeggida sida Garsooraha Maxkamadda Dowladda Hoose Ee Seattle waxay ahayd sharaf. Maalin kasta, waxaan ku dadaalaa inaan xaqiijiyo in dhammaan dadka soo gala qolkayga maxkamadda loola dhaqmo si caddaalad ah, sharaf leh, iyo ixtiraam leh, iyo in go'aan kasta lagu hago sharciga, u diyaargarowga taxaddarka leh, iyo xukunka dhex-dhexaadka ah.

Ka hor intaan ku biirin Maxkamadda Dowladda Hoose Ee Seattle sannadkii 2020, waxaan sidii Garsoore Ku-meel-gaar ah u guddoominayey Maxkamadda Dowladda Hoose Ee Seattle, Maxkamadda Degmada ee Degmada King, iyo Maxkamadda Sare ee Degmada King (Qaybta Carruurta). Waxaan sidoo kale tobanaan sanno ku qaatay u adeeggida nidaamkeena sharciga sida qareen madani ah iyo Ku-xigeenka Sare ee Qareenka Xeer Ilaalinta ahaan. Khibradahaas ayaa i siiyay faham ballaaran oo ku saabsan nidaamkeena caddaaladda, waxayna xoojiyeen heellanaantayda ku aaddan caddaalad loo siman yahay oo sharciga waafaqsan.

Sida Garsooraha Maxkamadda Dowladda Hoose ahaan, waxaan gacan ka geystay xoojinta kalsoonida dadweynaha ee maxkamadaheena anigoo hagaajinaya helitaanka caddaaladda, casriyaaynaya hawlgallada maxkamadda, iyo taageeraya hababka hal-abuurka leh ee hagaajinaya ammaanka dadweynaha. Hadda waxaan guddoomiyaa Mashruuca Faragelinta Rabshadaha Qoyska, oo ah barnaamij maxkamadeed oo hal-abuur leh kaas oo isku daraya la xisaabtanka iyo daaweynta shakhsi ahaanneed si loo yareeyo rabshadaha soo noqnoqda loona hagaajiyo natiijooyinka u soo hoyda dadka ka badbaaday, qoysaska, iyo bulshadeenna. Waxaan sidoo kale ka tirsanahay Guddiga Maamulka ee Ururka Garsooreyaasha Maxkamadda Degmada iyo Dowladda Hoose, waxaan la-guddoomiyaa Guddigiisa Xeerarka, waxaana la-maamulaa Maxkamadda Gaadiidka Dhallinyarada ee Seattle, oo ah barnaamijka caddaaladda dib-u-soo-celinta ah kaas oo ka caawiya dhallinyarada inay bartaan mas'uuliyadda iyo ka-qaybgalka madaniga ah.

Meel ka baxsan qolka maxkamadda, waxaan ahaa mutadawac firfircoon oo ka tirsan dugsiyada Seattle, isboortiska dhallinyarada, iyo ururada bulshada anigoo afar carruur ah kula korinaya ninkayga.

Waxaan ku faanayaa inaan u adeego si madax-bannaani, daacadnimo, iyo naxariis leh. Waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa codkaaga si aan u sii wado dhowrista sareynta sharciga, ilaalinta caddaaladda loo siman yahay, iyo u adeeggida dadka Seattle si caddaalad iyo xushmad leh.



Maxkamadda Dowladda Hoose Garsooraha Jagada Lr. 2

Katharine Edwards



(425) 466-5296
katharineedwardsforjudge@gmail.com
edwardsforsmc.com

Waxbarashada: Macalester College; Dugsiga Sharciga ee Lewis and Clark

Shaqo iyo Xirfad: Kormeeraha Qareenka Difaaca Dadweynaha

Bayaanka: Waxaan markii ugu horreysay galay Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle anigoo ahayd arday fasalka sideedaad ah, oo ka shaqeynaya mashruuc dugsi oo ku saabsan difaaca dadweynaha. Ma aanan qorsheynin xirfad halkaas ah. Waxaan 16-kii sanno ee la soo dhaafay ku qaatay qolkaas maxkamadda iyo kuwa kale ee ku yaalla guud ahaan Degmada King, anigoo garab taagan dadka maalmaha ugu adag noloshooda.

Waxaan matalay dad wajahaya dambiyada fudud iyo dad wajahaya dambiyada culus ee halista ah. Waxaan dacwad ka galay kiisaska dilka, waxaan ka gorgortamay beddellada daaweynta, waxaan garab istaagay carruurta ku jirta daryeelka fostarka. Shaqadaas waxay i tustay waxa qabatinka, saboolnimada, iyo daaweyn la'aantu ay ku sameeyaan qofka muddo dheer ka hor inta uusan garsoore furin faylka.

Maxkamadda Dowladda Hoose waxay qaaddaa fal-dambiyeedyada fudud, oo ah eedaynta dambi ee ugu hooseysa Washington, laakiin kiisaska yaryar ayaa weli xambaarsan cawaaqibyo culus. Qof ayaa xabsi ugu jiri kara dambi fudud halka qof lagu soo eedeeyay dambi culus uu guriga aadayo isla galabtaas. Garsooreyaashu waxay lumiyaan kalsoonida dadweynaha marka ciqaabtu ay u dhigmi weydo eedaynta.

Sida garsoore ahaan, waxaan si buuxda u dhegaysan doonaa labada dhinacba, waxaana xeer ilaalinta iyo difaacaba ku qaban doonaa heer isku mid ah. Ka hor intaan qofna ku amrin barnaamij, waxaan rabaa inaan arko cilmi-baarista ka dambeysa iyo xogta ku saabsan inuu shaqeynayo. Dadka maamula barnaamijyadaas waa inay talo ku lahaadaan sida ay isu beddelayaan. La xisaabtanku waa inuu u dhigmaa dambiga uuna qofka ka dhigaa mid si fiican u awoodda inuu ka fogaado maxkamadda.

Waxaan weydiisanayaa codkaaga.

Waxaa taageeray: Garsooreyaasha Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle Anita Crawford Willis, Damon Shadid, iyo Pooja Vaddadi, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta LD ee 32aad, 34aad, 36aad, 37aad, 43aad, iyo 46aad, Garsoorihii Hore ee Maxkamadda Sare Mary Yu, Garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee Degmada King Rothrock, Larranaga, Hecklinger, Vargas, Keenan, iyo McKee, Garsooreyaasha Maxkamadda Degmada ee Degmada King Shotwell, Dhillon, Peaquin, iyo Paglisotti, Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka, Machinists Local 751, Ironworkers Local 86, UAW 4121, iyo qaar kale oo badan.



Maxkamadda Dowladda Hoose Garsooraha Jagada Lr. 3

Pooja Vaddadi

Sawir lama
soo gudbin

(253) 765-8179
pooja@electjudgevaddadi.com

Wax bayaan ah lama soo gudbin.



Maxkamadda Dowladda Hoose Garsooraha Jagada Lr. 4

Anita Crawford-Willis



(206) 395-5694
judgēcrawfordwillis@gmail.com

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Dugsiga Sharciga ee Seattle University; Shahaadada Jaamacadda, Seattle University

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Guddoomiyaha ah, Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle

Bayaanka: Waxaan ku dhashay kuna soo koray Degmada Dhexe ee Seattle, halkaas oo aan qiyaamka shaqada adag, caddaaladda, iyo adeegga ka bartay waalidiintayda, kuwaas oo labaduba ka shaqeyn jiray khadka wax-soo-saarka ee Boeing isla markaana ahaa xubno ka tirsan ururka shaqaalaha oo ku hanweyn. Qiyaamkaas ayaa i hagayay muddadii ay socotay xirfaddayda ee adeegga dadweynaha.

Ka dib markii aan in ka badan 30 sanno u adeegay sida qareen dadweyne, Garsoore Sharciga Maamulka, iyo Garsoore Ku-meel-gaar ah ahaan ee Maxkamadda Dowladda Hoose Ee Seattle, waxaa la ii magacaabay Maxkamadda Dowladda Hoose Ee Seattle sannadkii 2017 waxaana sharaf ii ahayd in mar kale la ii doorto sannadihii 2018 iyo 2022.

Sida qof ka qalin-jebiyay Seattle University iyo Dugsiga Sharciga ee Seattle University ahaan, waxaan ahaa mid si weyn ugu heellan jaamacaddaydii, hadda waxaan xubin ka ahay Guddiga Aaminaadda (Board of Trustees).

Heellanaantayda adeegga waxay dhaafsiisan tahay qolka maxkamadda. Waxaa sharaf ii ahayd inaan u adeego sidii Guddoomiyaha Naadiyada Wiilasha & Gabdhaha (Boys & Girls Clubs) ee Degmada King ahaan, sidii sarkaal ka tirsan Ururka Qareennada ee Loren Miller ahaan, sidii Madaxweynaha Ururka Garsooreyaasha ee Maxkamadda Degmada iyo Dowladda Hoose ahaan, iyo sida xubin ka tirsan Guddiga Jinsiga iyo Caddaaladda ee Maxkamadda Sare ee Washington. Waxaa sidoo kale ii ahayd khushuuc inaan helo Abaalmarinta Garsooraha sannadka ee Heerka Sare ah ee Ururka Qareennada Gobolka Washington iyo Abaalmarinta Guusha Cimriga ee Ururka Qareennada Loren Miller.

Inta aan ku jiray xirfaddayda garsoornimo, diiraddaydu waxay ahayd mid joogto ah: xaqiijinta helitaanka caddaalad loo siman yahay iyadoo qof kasta loola dhaqmayo sharaf iyo ixtiraam. Sida Garsooraha Shir-guddoominaya ahaan, waxaan ku hanweynahay inaan gacan ka geysto furitaanka Maxkamadaheena Xiriirka iyo ballaarinta Xarunta Kheyraadka Bulshada. Waxaan aaminsanahay in la xisaabtanka iyo naxariistu ay yihiin qiyaam dhammaystir ah, waxaana rabaa qof kasta oo soo gala qolka maxkamadayda inuu ka baxo isagoo og in la arkay, la dhegaystay, loolana dhaqmay si xushmad leh.

Aniga iyo saygaygu waxaan ku hanweynahay inaan Seattle hoy ugu yeerno. Waxaan ku raaxaysanaa inaan wakhti la qaadano gabadheena, safridda, taageeridda ururada samafalka ee maxalliga ah, iyo dhiirigelinta Seattle University Redhawks.



Maxkamadda Dowladda Hoose Garsooraha Jagada Lr. 5

Gabe Rothstein

(201) 877-1869
gabrielrothstein1975@yahoo.com
www.gabeforjudge.com



Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Bulshada, Emory University, Shahaadada Sharciga ee Dugsiga Sharciga ee UCLA,

Shaqo iyo Xirfad: Qareenka Difaaca Dadweynaha, Garsoore Pro tempore

Bayaanka: In ka badan labaatan sanno, Gabe Rothstein wuxuu u doodayay bulshooyinka saboolka ah iyo kuwa aan la siinin adeeg. Dadka badanaa dareema in aan la maqlin.

Ka hor inta uusan noqon difaacaha dadweynaha, Gabe wuxuu si mutadawacnimo ah ula shaqeeyay Mashruuca Caddaaladda Guryaha iyo Mashruuca Sharciga Shaqo la'aanta, isagoo ka caawinaya deganeyaasha Seattle ee wajahaya guri ka saarista iyo ilaalinta xuquuqda shaqaalaha ee faa'iidooyinka shaqo la'aanta.

Sannadkii 2005, Gabe wuxuu noqday difaacaha dadweynaha—door uu weli hayo isagoo ku faanaya. Tan iyo markaas, wuxuu matalay kumanaan qof, kuwaas oo qaar badan oo ka mid ah ay isugu jireen dad ka badbaaday xadgudubka iyo shakhsiyaadka ku dhex xayiran nidaamka sharciga dambiyada. Wuxuu maxkamadeeyay in ka badan toddobaatan kiis ilaa uu go'aan ama xukunkoodu ka soo baxay.

Shaqadani waxay Gabe bartay in dad aad u badan ay maxkamadda ka tagaan iyagoo dareemaya inaan la maqlin. Wuxuu u tartamayaa garsoore si uu taas u beddelo. Qof kasta oo soo gala qolka maxkamadda—dhibbaneyaasha, eedeysaneyaasha, iyo kuwa aan awoodin qareen—wuxuu mudan yahay sharaaf, xitiraam, iyo caddaalad. Maxkamadda Degmada Seattle waa maxkamadda dadka, qof walbana wuxuu mudan yahay in la dhegaysto oo la maqlo.

Difaaca dadweynaha waa shaqada wakhtiga buuxa ee Gabe, laakiin sidoo kale wuxuu u shaqeeyaa garsoore pro-tem maxkamadaha magaalada iyo degmooyinka ee Washington oo dhan. Wuxuu guddoomiyaa Guddiga Anshaxa iyo Sifada Sharciga ee Ururka Qareennada Gobolka Washington, kaas oo qiimeeya codsadeyaasha doonaya inay galaan shaqada sharciga. Habeennada iyo dhammaadka toddobaadyada, wuxuu ka jawaabaa wicitaannada ka imaanaya Youth Access to Counsel Line, isagoo hubinaya in carruurto ay la hadli karaan qareen ka hor inta aysan booliisku su'aalo weydiin. Waxa kale oo uu ka shaqeeyaa guddiga Xarunta Soo kabashada Holman oo ah xarun lagu daaweeyo isticmaalka maandooriyaha ee bukaan jifka. Gabe wuxuu aaminsan yahay daaweynta, la xisaabtanka la socda soo kabashada, dib-u-dhiska nolosha, iyo fursadaha labaad.

Taageerooyinka: The Stranger, The Progressive Voter Guide, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta Degmada 32aad, 34aad, 37aad, 43aad, iyo 46aad, Cutubka Difaaca Dadweynaha ee SEIU 925, Dimuqraadiyiinta Stonewall, Madaxa Fulinta ee Degmada King Girmay Zehilay, Garsooreyaasha Maxkamadda Sare Gordon McCloud iyo Melody, Wakiil Chipalo Street, Wakiil Rebecca Saldana, iyo garsooreyaal kale oo badan iyo hoggaamiyayaasha bulshada.

Garmon Newsom

(206) 745-2010
info@NewsomforJudge.com
NewsomforJudge.com



Waxbarashada: BA Cilmiga Siyaasadda, Kulliyadda Morehouse; JD, Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda George Washington

Shaqo iyo Xirfad: Garsoore Pro Tem ee Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle; Qareenkii hore ee Magaalada

Bayaanka: Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle waxay u baahan tahay garsooreyaal khibrad leh oo leh garasho suuban iyo heellannaanta helitaanka, caddaaladda, iyo karaamada, kuwaas oo aan diiradda saarayn siyaasadda iyo fikirka. Codkaaga, waxaan ku keenni doonaa natiijooyin caddaalad ah, wax ku ool ah, oo loo siman yahay kuwaas oo dhisa kalsoonida iyo ammaanka dadweynaha.

Muddo 34 sanno ah, waxaan u soo adeegayay sida adeegaha dadweynaha ahaan—sida xeer ilaaliyaha dambiyada culus iyo kuwa fudud, qareenka dowladda hoose, dacwoodaha madaniga ah, xubinta Guddiga Anshaxa ee Degmada King, iyo Garsoore Pro Tem ahaan. Waxaan noqday qareen si aan u cirib tiro sinnaan la'aanta iyo caddaalad darada ka jirta nidaamkeena caddaaladda. Waxaan diiradda saarayaa ilaalinta bulshada anigoo eedeysaneyaasha u bixinaya fursadda weecinta, adeegyada, daaweynta, iyo taageerada.

Sida wiilka hooyo soo galooti ah oo jiilkii koowaad ah iyo aabbe ka tirsan ururka shaqaalaha baabuurta ee Detroit ahaan, waxaan bartay qiimaha shaqada adag, daacadnimada, iyo daryeelka dadka kale, kuwaas oo aan ku muujiyay si xirfadaysan iyo iyada oo loo marayo la-talinta dhallinyarada, adeegga bulshada, iyo tababarka.

Waxaan ku mahadsanahay oo aan ku hanweynahay in ay i taageeraan xeer-yaqaano daryeel leh, xirfad leh, lana xitiraamo, iyadoo lagu salaynayo khibraddayda, dabeecaddayda, iyo ka go'naanshahayga dhabta ah ee caddaaladda. *Garsoorka:* Garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee Gobolka Washington Sal Mungia, Mary Yu (hawlgab), iyo Barbara Madsen (hawlgab), iyo garsooreyaal ka tirsan kuwa hadda jooga iyo kuwa hawlgabka ah ee Degmada King oo ka badan musharax kasta oo tartankan ku jira, oo ay ku jiraan Garsooraha Guddoomiyaha ah Rothrock, Kaaliyaha Garsooraha Guddoomiyaha ah Thorp, Garsoorihii hore ee Guddoomiyaha ahaa Shah, iyo Garsooreyaasha Galvan, Amato, Hawkins, Gipe, Madaxa Garsooraha Guddoomiyaha ah York, iyo garsooreyaasha hawlgabka ah ee McCullough, Kondo, iyo McKenna. *Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle:* Garsooraha Guddoomiyaha ah Anita Crawford-Willis, garsoore guddoomiyihii hore Faye Chess, iyo garsoore Willie Gregory oo howlgab noqonaya. *Warbaahinta iyo Bulshada:* The Seattle Times Guddiga Tifaftirka iyo Xisbiga Dimuqraadiga ee LD 32aad.

Waxaan ahay musharaxa keliya ee tartankan ku jira ee haysta qiimeynta ugu sareysa ee suurto galka ah ee Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle - oo Si Gaar ah oo Wanaagsan ugu Qalma oo ka timid Bulshada Cardozo, Ururka Qareennada Latina/o, iyo Ururada Qareennada Aasiyaanka ee Wadajirka ah.

Waxaa sharaaf ii ahaan lahayd in aan noqdo garsoorahaaga. Wax badan ka baro: <https://newsomforjudge.com/>



Maxkamadda Dowladda Hoose Garsooraha Jagada Lr. 6

Shantrice Anderson

(206) 745-2010

shantrice@andersonforjudge.com
andersonforjudge.com



Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda, Gonzaga University; Shahaadada Sharciga (JD), Dugsiga Sharciga ee Seattle University

Shaqo iyo Xirfad: Qareen Madani ah, Garsoore Pro Tem/Garsoore

Bayaanka: Waxaan aaminsanahay in qof kasta oo soo gala albaabada Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle uu mudan yahay in loola dhaqmo si caddaalad ah, sharaf leh, iyo ixtiraam leh. Badanaa barta xiriirka ee ugu horreysa uguna soo noqnoqoshada badan ee dadka degan Seattle ay la leeyihiin mas'uuliyiintooda la doortay, Maxkamadda iyo Garsooreyaasheeda waa inay ahaadaan kuwo loo siman yahay, la heli karo, oo caddaalad ah.

Waxaan leeyahay in ka badan toban sanno oo khibrad sharci oo kala duwan ah sida difaacada dadweynaha ee Degmada King iyo Colorado ahaan, anigoo gacanta ku hayay dambiyada fudud, kiisaska carruurta, iyo dambiyada culus. Waxaan ka soo shaqeeyay maxkamadaha takhasuska leh/bulshada, ee gudaha iyo dibadda gobolka Washington, waxaana arkay faa'iidooyinka ay u keenni karaan shakhsiyaadka, qoysaska, iyo bulshada ballaaran. Waxaan hadda ku dhaqmaa sharciga madaniga ah waxaanan ka soo muuqdaa maxkamadaha gobolka iyo kuwa federaalka ee gobolka iyo dalka oo dhan. Wakhtigayga firaaqada ah, waxaan sidoo kale ahay Garsoore Pro Tem ee Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle, anigoo guddoominaya dhegaysiyada hordhaca ah, mooshinnada, dacwad-qirashada, iyo xukun-rididda. Khibradahan dhammaantood waxay saldhig u yihiin ka go'naanshahayga caddaaladda iyo adeegga bulshada.

Inaan noqdo xubintii ugu horreysay ee qoyskayga ee ka qalin-jebisay kulliyadda iyo dugsiga sharciga waxay gacan ka gaysatay hoosta ka xariiqidda mudnaannadayda: ballaarinta helitaanka caddaaladda ee macnaha leh, yaraynta caqabadaha hortaagan bulshooyinka aan matallaadda ku filan lahayn, iyo hubinta in Maxkamaddu ay si dhab ah ka tarjumayso magaaladan kala duwan ee firfircoon. Go'aannada Maxkamaddu waa inay si adag ugu qotomaan sharciga haddana ay ka turjumaan qiyaamka muwaadiniinteeda. Sida Garsoore ahaan, waxaan aqoonsan doonaa bani'aadannimada ka-qaybgale kasta oo maxkamadda ah go'aannadayduna waxay ku salaysnaan doonaan dhegaysi taxaddar leh, garasho suuban, la xisaabtan, iyo dhaqan-celin.

Ka go'naanshahayga ku aaddan sinnaanta iyo caddaaladda waxaa laga dhex arki karaa qiimeyntayda garsoorka: Si Gaar ah oo Wanaagsan ugu Qalanta waxaa u aqoonsaday Guddiga Qiimeynta Aasiyaanka ee Wadajirka ah, Latina/o, iyo Ururada Qareennada ee Loren Miller; iyo Si wanaagsan Ugu Qalanta waxaa u aqoonsaday Q-Law iyo Ururka Qareennada Degmada King. Waxaa si sharaf leh ii taageeray Garsoore Faye Chess oo hawlgab noqonaysa, Garsoore Haydee Vargas, Dimuqraadiyiinta Degmada iyo tan Gobolka; Garsooraha Maxkamadda Sare Mungia; iyo kuwo kale.

Waxay ii noqon lahayd sharaf inaan kuu adeego.




Maxkamadda Dowladda Hoose Garsooraha Jagada Lr. 7

Damon Shadid

(206) 651-4380

shadidforseattle@gmail.com
www.shadidforseattle.com



Waxbarashada: Shahaadada Sharciga

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Dowladda Hoose ee Seattle

Bayaanka: Garsoore Damon Shadid ayaa wakhtigiisa u hibeeyay Maxkamadda Dowladda Hoose Ee Seattle isagoo isku dayaya inuu helo habab ka wanaagsan oo loo wajaho caddaaladda dambiyada. Wuxuu si qoto dheer u fahamsan yahay in nidaamka sharciga dambiyada uu lahaado laba ujeedo oo aasaasi ah oo is-kaabaya: in bulshada ammaan lagu hayo iyo in dadka laga caawiyo helitaanka adeegyada ay u baahan yihiin si ay uga baxaan nidaamka sharciga dambiyada.

Iyadoo ujeedooyinkan maskaxda lagu hayo, asxaabta Garsoore Shadid ee maxkamadda ayaa u xilsaaray inuu la shaqeeyo Qareenka Magaalada Seattle iyo Waaxda Difaaca Dadweynaha si loo dhiso "Maxkamadda Xiriirka" cusub taas oo lagu dhisayo aasaaska shaqadii Garsoore Shadid ee Maxkamaddii hore ee Maxkamadda Bulshada. Maxkamadda Xiriirka waxay siisaa ka-qaybgaleyaasha fursadda ah in si degdeg ah loogu xiro adeegyada bulshada dhexdeeda si wax looga qabto sababaha asalka u ah dambiyadooda.

Garsoore Shadid ayaa sidoo kale door muhiim ah ka qaatay dib-udhiska Maxkamadda Caafimaadka Maskaxda ee Seattle, halkaas oo uu guddoomiye ka ahaa muddo 4 sanno ah. Wuxuu awooday inuu la shaqeeyo Xafiiska Qareenka Magaalada iyo Waaxda Difaaca Dadweynaha si loo hagaajiyo Maxkamadda Caafimaadka Maskaxda iyo in lagu dhiirigeliyo shakhsiyaad badan oo qaba caqabadaha caafimaadka maskaxda inay helaan adeegyada muhiimka ah ee ay u baahan yihiin.

Ugu dambeyntii, Garsoore Shadid ayaa bilaabay "Jadwalka Isku-dhafaan." Maxkamaddan waxay u oggolaanaysaa shakhsiyaadka leh shaqaalaha kiiska ee bulshada dhexdeeda inay yimaadaan hal jadwal toddobaad kasta si ay u caawiyaan macaamiishooda inay helaan adeegyo oo ay uga baxaan nidaamka sharciga dambiyada.

Laakiin shaqadu ma dhammaan. Seattle waxay wajahaysaa caqabado waaweyn oo ka dhashay la'aanta adeegyo muhiim ah sida guriyeynta, daaweynta isticmaalka maandooriyaha iyo daaweynta caafimaadka dhimirka kuwaas oo keena arrimaha ammaanka dadweynaha ee bulshadeenna. Garsoore Shadid wuxuu aaminsan yahay in Maxkamadda Dowladda Hoose ay tahay inay door dhexe ka ciyaarto hagaajinta helitaanka adeegyadan, wuxuuna sii wadi doonaa inuu maalin kasta si adag u shaqeeyo si loo hubiyo in dadka oo dhan loola dhaqmo si caddaalad iyo naxariis leh.

Xeerka Hindisaha Lr. IP26-645

Xeerka Hindisaha Lr. IP26-645 wuxuu khuseeyaa canshuuraha gobolka iyo kuwa deegaanka. Xeerkan wuxuu dib uga noqon doonaa canshuur 9.9% ah ee dakhliga shakhsiga ah ee sannadlaha ah ee ka badan \$1,000,000; wuxuu mamnuuci doonaa canshuuraha lagu cabbirro dakhliga shakhsiga ah iyo canshuuraha laga qaado dakhliga shakhsiga ah ama helitaanka dakhliga shakhsiga ah; wuxuuna qeexi doonaa “dakhliga.” Xeerkan wuxuu dhimmi doonaa maalgelinta waxbarashada K-12 ee dadweynaha, maalgelinta waxbarashada sare (oo ay ku jiraan jaamacadaha iyo kulliyadaha bulshada), iyo maalgelinta adeegyada aadanaha (u horreyn daryeelka caafimaadka).

Ma tahay in xeerkan loo hirgeliyo sharci ahaan?

Haa

Maya

Bayaanka sharaxaadda

Sharci Sida uu Hadda u Jiro

Gobolka Washington wuxuu soo rogaa canshuuro kala duwan si loo soo saaro dakhli lagu maalgeliyo dowladda gobolka. Canshuurahaas waxaa ka mid ah canshuurta iibka tafaariiqda, canshuurta ganacsiga iyo shaqada, canshuurta hantida gobolka, canshuurta faa'iidada hantida waaweyn, iyo canshuuraha kale ee gobolka. Sannadkii 2026, Sharci-dejintu waxay ansixisay sharci soo rogaya canshuur dhan 9.9 boqolkiiba oo laga qaadayo helitaanka dakhliga qofka ee ka badan \$1,000,000, laga bilaabo sannad-tirsiga 2028. Laga bilaabo 2029, ka-goynta caadiga ah ee \$1,000,000 ayaa la kordhinayaa si loogu xisaabtamo sicir bararka.

Caddadka dakhliga canshuurta laga qaadayo wuxuu ku salaysan yahay dakhliga guud ee la habeeyay ee lagu soo sheegay warbixinnada canshuurta dakhliga federaalka, iyadoo ay jiraan wax-ka-beddelid qaar ah.

Marka laga soo tago ka-goynta caadiga ah ee \$1,000,000, canshuur bixiyeyaasha waxay ka goosan karaan ilaa \$100,000 deeqaha samafalka. Ka-goynta caadiga ah ee \$1,000,000 iyo ka-goynta suurtagalka ah ee \$100,000 ee tabarugaadka samafalka ayaa khuseeya qoyskiiba, sidaas darteed lammaanaha is qaba ama isbahaysiga guriga ayaa wadaaga hal ka-goynta oo ah \$1,000,000 iyo ilaa \$100,000 oo loogu talagalay tabarugaadka samafalka. Ka-goynta dheeraad ah ayaa loo heli karaa xaalado gaar ah oo cayiman. Kharashyo gaar ah oo la xiriira hey'adaha dakhli-gudbinta ee laga gooyo ujeedooyinka canshuurta federaalka ayaa lagu darayaa caddadka laga qaadayo canshuurta Washington.

Sharci wuxuu sidoo kale oggolaanayaa dhibcaha canshuurta qaarkood, kuwaas oo hoos u dhigaaya caddadka canshuuraha ee lagu leeyahay. Dhibcaha canshuurta waxaa loo heli karaa canshuurta dakhliga ee la siiyay gobol kale; caddadyada lagu bixiyay canshuurta faa'iidada raasumaalka ee gobolka Washington; iyo canshuuraha lagu leeyahay canshuuraha ganacsiga iyo shaqada ama canshuuraha adeegyada dadweynaha ee lagu bixiyay isla dakhligaas laga qaadayo canshuurtaan.

Dadka aan deganeyaasha ka ahayn Washington waxaa keliya oo ku waajibaya canshuurtaan iyadoo lagu salaynayo dakhliga laga helay ilaha gudaha Washington. Dakhliga ay ka helaan ilo kale lama xisaabiyo.

Shan boqolkiiba oo ka mid ah lacagta laga soo ururiyo canshuurtaan ayaa lagu shubaa koonto keliya loo isticmaali karo ujeedooyinka daryeelka carruurta iyo waxbarashada goorta hore. 95 boqolkiiba ee soo hartay ee lacagta laga soo ururiyay canshuurta iyo dulsaar iyo ganaaxyo kasta waxaa lagu shubaa sanduuqa guud ee gobolka.

Sharci 2026 ee sharci ka dhigaaya canshuurta dakhliga ka sareeya \$1,000,000 ayaa sidoo kale sharci ka dhigay ama ballaariyay ka dhaafitaanno canshuur, ka-goymo, iyo dhibco kala duwan. Marka hore, waxay meesha ka saartay canshuurta iibka ee iibinta daaybarada, daawooyinka aan dhakhtar qorin, badeecooyinka isqurxinta iyo nadaafadda, iyo barnaamijyada kombuyuutarka qaarkood, adeegyada dhijitaalka ah, habeynta xogta, iyo bandhigyada tooska ah. Marka labaad, waxay dhintay canshuuraha ganacsiga iyo mihiyada iyadoo kordhisay dhibcaha canshuur dhimmista ganacsiga yar, kordhisay xadka ugu yar ee ganacsiyadu ku xareeyaan canshuuraha, iyo iyadoo meesha ka saartay lacag dheeraad ah oo saarnayd ganacsiyada dakhligoodu sareeyo ee bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, isbitaalada, iibiyeyaasha daawooyinka dhakhtar qoro, iyo iibka cuntada jumlada ah. Saddexaad, waxay ballaarisay u-qalmitaanka Canshuur Reebista Qoysaska Shaqeyaa, kaas oo bixiya lacag celin canshuur oo loogu talagalay shakhsiyaadka dakhligoodu hooseeyo ee u qalma.

Saameynta Xeerka La Soo Jeediyay Haddii La Ansixiyo

Haddii la ansixiyo, xeerka la soo jeediyay wuxuu dib uga noqon lahaa canshuurta sannadlaha ah ee dakhliga shakhsiga ah ee ka badan \$1,000,000. Tani waxay sidoo kale meesha ka saari lahayd maalgelinta laga soo ururiyay canshuurta ee aadi lahayd sanduuqa guud (taas oo maalgelisa waxbarashada dadweynaha ee K-12, waxbarashada sare sida jaamacadaha iyo kulliyadaha bulshada, daryeelka caafimaadka, iyo adeegyada kale ee bani'aadannimada) iyo xannaanada carruurta iyo barashada goorta hore. Dhibcaha canshuurta ee aan dakhliga ahayn, ka-dhaafitaannada, iyo ka-goynta ee la socday canshuurtaan dib looga noqon maayo oo sidooda ayay u sii jiri doonaan.

Xeerku waxa uu sidoo kale dowladaha gobolka iyo kuwa deegaanka ka mamnuuci doonaa soo rogista canshuuraha dakhliga shakhsiga ama helidda dakhliga shakhsiga iyo canshuuraha lagu qiyaasay dakhliga shakhsiga. Canshuurta keliya ee si cad ugu qoran oo xeerku dib uga noqday waa canshuurta dakhliga ka badan \$1,000,000.

Xeerka warqadda codbixinta ayaa sidoo kale bixin doona qeexitaannada ereyada qaar ee loogu isticmaalay xeerka warqadda codbixinta. Waxay u qeexi lahayd “dakhli” ujeedooyinka canshuuraha badeecadaha sida “faa'iido ama dheef kasta oo lagu qiyaasay lacag oo laga helay raasumaalka qofka, shaqada qofka, hantida qofka, ama isha kale ee qofka.” Waxay u qeexi lahayd “shakhsi” ujeedooyinka canshuuraha badeecadaha inuu yahay “qof dabiici ah.”

Bayaanka Maaliyadda

Xogta Kooban

Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyaashu, Hindisaha Xeerka Lr. IP26- 645 wuxuu dhalin doonaa khasaare la qiyaasay oo soo gaara dakhliga gobolka oo dhan \$11.4 bilyan inta lagu guda jiro sannadaha-maaliyadeedka ee gobolka ee 2027-2031. Tani waxay yareyn doontaa maalgelinta sanduuqa guud ee gobolka ee lagu taageero adeegyada aasaasiga ah ee dowladda, gaar ahaan waxbarashada dadweynaha ee K-12, waxbarashada sare (oo ay ku jiraan jaamacadaha iyo kulliyadaha bulshada), iyo adeegyada bini'aadantinimada (ugu horreyn daryeelka caafimaadka). Sharci-dejintu waxay muujiyeen ujeeddo ah in loo isticmaalo dakhliga dheeriga ah ee uu abuuray Hindise-sharciyeedka beddelka ah ee Aqalka Sena ee Mashquulka 6346 (2026) (ESSB 6346) ku aaddan bixinta cuntooyinka dugsiga ee bilaashka ah, wareejinta maalgelinta ee xanaanada carruurta iyo maalgelinta ee barashada goorta hore, iyo wareejinta maalgelinta ee dowladaha hoose si loo yareeyo lumitaanka canshuurta iibka.

Malaynta guud

Canshuur gobol oo la mid ah 9.9 boqolkiiba oo laga qaado dakhliga canshuurta laga qaado ee Washington ee ka badan \$1,000,000 qofkiiba ayaa noqotay sharci ka dib kal-fadhigii sharci-dejinta ee 2026 sababtoo ah ESSB 6346 - Sameynta canshuur lagu soo rogayo dadka milyaneerrada ah. Haddii la ansixiyo, hindisuhu wuxuu dib uga noqon doonaa canshuurta si aanay mar dambe u dhaqan gelin doonin Janaayo 1, 2028, gobolkuna uusan mar dambe u soo rogi doonin canshuurtaas.

- Taariikhda dhaqan galka ee hindisaha waa Diseembar 3, 2026.
- Qodobbada hindisuhu waxay khuseeyaan mustaqbalka, ee ma aha dib u noqoshada.
- Waaxda Dakhliga (DOR) waxay joojinaysaa dhammaan hawlaha hirgelinta taariikhda dhaqan galka, oo ay ku jiraan hawlahaas hadda socda.
- Qiyaasuhu waxay isticmaalaan sannad-maaliyadeedka gobolka (SFY) ee Julay 1 ilaa Juun 30. Sannad maaliyadeedka gobolka ee 2027 waa Julay 1, 2026, ilaa Juun 30, 2027.
- Sannad-taariikheedka waxaa loola jeedaa Janaayo 1 ilaa Diseembar 31.
- RCW 29A.72.025 oo khuseeya bayaannada saameynta maaliyadeed ayaa tilmaamaya in bayaan kasta oo noocaas ah "waa inuu sharaxaa koror kasta ama hoos u dhac kasta oo la saadaaliyay oo ku yimaada dakhliga, kharashyada, kharash bixinta, ama deynta ay dowladda gobolka ama dowladaha hoose la kulmi doonaan haddii xeerka warqadda codbixinta ay ansixiyaan codbixiyeyaasha gobolka." Sidaas darteed, saameynaha dhici kara ee ka dhasha ficillada Sharci-dejinta mustaqbalka ama kuwa lagu muujiyay oo keliya ujeeddada sharci-dejinta, kuma jiraan.

Dakhliga

Dakhliga Deegaanka

Hindisaha ma saameyn doono dakhliga deegaanka.

Dakhliga Gobolka

Hindisaha waxaa lagu qiyaasay inuu horseedi doono luminta dakhli dhan \$11,432,414,000 muddo shan sanno maaliyadeed ah oo ka imaanaya sanduuqa guud ee gobolka, sanduuqa guud ee federaalka, iyo barnaamijka bilowga hore ee carruurta. Sanduuqa guud waa maalgelinta aasaasiga ah ee gobolka ee taageerta

hawlgalka gobolka. Koontada barnaamijka bilowga hore ee carruurta waxaa loo isticmaalaa oo keliya ujeeddooyinka daryeelka carruurta iyo barashada goorta hore.

Malaha Dakhliga Gobolka

Sanduuqa Guud ee Gobolka

Qiyaasaha dakhliga waxay ku salaysan yihiin dhowr ilo xogeed oo la heli karo oo ay ku jiraan:

- Waaxda Dakhliga (DOR) xogta canshuurta dadban.
- Golaha Saadaasha Dhaqaalaha iyo Dakhliga (ERFC) Juun 2026 saadaasha dakhliga canshuurta
- Daabacaadda 6149 ee Wakaalada Canshuurta Gudaha (IRS) ee saadaasha sannad-taariikheedka gobol ahaan ee 2024.
- Canshuur celinta dakhliga shakhsiga ee IRS ee sannad-canshuureedka 2022.
- Daabacaadda National Library of Medicine, "Canshuuraha Mareykanka ee Guulaha Khamaarka iyo Dhiirigelinnada Sharadka."

Malo-awaallada dheeraadka ah ee soo socda ayaa loo sameeyay ujeeddooyinka xisaabinta:

- Sannadka ugu horreeya ee ay saameyntu ku yeelanayso ururinta canshuurta waa sannad-maaliyadeedka gobolka ee 2029.
- Canshuurta keliya ee ay saameysay waa canshuurta lagu sharaxay ESSB 6346 ee Kal-fadhiga Sharci Dejinta ee 2026.
- Ma jiraan wax bixinno canshuur ah oo la qiyaasay oo loo baahan yahay sannadka canshuurta 2028 (sannadka kalandarka 2028), sidaas darteed bixinnada ugu horreeya waxaa laga rabaa canshuur bixiyeyaasha bisha Abriil 2029.
- Qiyaas ahaan 89 boqolkiiba wadarta bixinnada canshuurta ayaa dhici doona Abriil 2029 iyo 11 boqolkiiba ee bixinnada soo haray waxay dhici doonaan Oktoobar 2029, iyadoo ay ugu wacan tahay wakhtiga kama dambeysta ah ee kordhinta lixda bilood ah.
- Lacag bixinnada canshuurta ee ugu horreeya ee la qiyaasay, ee muddada Janaayo 2029 ilaa Juun 2029, waxay ku egyihiin Julay 1, 2029.
- Iyadoo lagu salaynayo macluumaadka ka yimid Machadka Canshuuraha iyo Siyaasadda Dhaqaalaha (ITEP), waxaa loo qaadanayaa in ay jirto miisaaniyad fulinta IRS oo la dhimmay. Iyadoo lagu salaynayo falanqeynta ITEP, hagaajin hoos u dhac ah oo ah 4.71 boqolkiiba ayaa lagu dabaqayaa Dakhliga Guud ee la Hagaajiyay (AGI) ee canshuur bixiyeyaasha ka hor inta aan la qiyaasin ururinta canshuurta.
- Sababo la xiriira habdhaqanka canshuur bixiyaha ee loo qaatay, qaddarin ku saabsan u hoggaansanaanta canshuur bixiyaha ayaa lagu dabaqaa qiyaasaha dakhliga. Waxaa loo qaadanayaa in boqolkiiba 90 ee dakhliga canshuurta la ururin doono sannad canshuureedka 2028 (sannad-taariikheedka 2028) iyo in boqolkiiba 95 ee dakhliga canshuurta la ururin doono sannad canshuureedka 2029 (sannad-taariikheedka 2029) iyo wixii intaas ka dambeeya.

Sanduuqa Guud ee Federaalka

ESSB 6346 waxay lacagaha canshuurta dakhliga gobolka ee dib loo soo celiyo ka dhigtay kuwo hoos yimaada tallaabada ururinta masruufka carruurta ee ay qaaddo Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka. Si loo hirgeliyo qodobkan, Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka waxay filaysaa helitaanka maalgelinta

federaalka ee loogu talagalay cusbooneysiinta teknolojiyada macluumaadka, cusbooneysiinta siyaasadda, iyo tababarka shaqaalaha. Dakhligan federaalka ah waa la baabi'in lahaa haddii hindisaha la ansixiyo.

Xisaabta Bilowga Caddaaladda ah ee Carruurta

ESSB 6346 ayaa faray Xafiiska Khasnajiga Gobolka inuu boqolkiiba shan dakhliga canshuurta ee la soo ururiyay ku shubo koontada barnaamijka bilowga hore ee carruurta laga bilaabo Julaay 1, 2029, iyo Julaay 1-da kasta wixii intaas ka dambeeya. Dib u noqoshada canshuurta waxay ka dhigan tahay in wareejintan aysan mar dambe dhici doonin. Caddadka guud ee aan dib dambe loogu wareejin doonin koontada barnaamijka bilowga hore ee carruurta waa \$377,000,000, oo ay ku jiraan \$155,400,000 oo ah sannad-maalayadeedka gobolka 2030 iyo \$221,600,000 oo ah sannad-maalayadeedka gobolka 2031.

Saameynta Dakhliga Gobolka

Shaxda 1. Khasaaraha dakhliga, marka loo eego koontada

Koontada	SFY 2027	SFY 2028	SFY 2029	SFY 2030	SFY 2031
Sanduuqa Guud ee Gobolka	\$0	\$0	(\$3,108,000,000)	(\$4,276,600,000)	(\$3,670,400,000)
Akoontiga Bilowga Caddaaladda ah ee Carruurta	\$0	\$0	\$0	(\$155,400,000)	(\$221,600,000)
Sanduuqa Guud ee Federaalka	(\$271,000)	(\$143,000)	\$0	\$0	\$0
Wadarta	(\$271,000)	(\$143,000)	(\$3,108,000,000)	(\$4,432,000,000)	(\$3,892,000,000)

Kharashyada Dowladda Gobolka

Qiyaasaha Kharashka Hirgelinta ee Hey'adda Gobolka

Keydka hey'adaha gobolka ayaa lagu qiyaasay inay noqonayaan wadarta guud ee saafiga ah oo dhan \$150,471,700 muddo shan sanno-maalayadeed oo gobolka ah natiijada ka dhalatay hindisaha. Keydka hey'ad ahaan waa:

Shaxda 2. Kharashyada, hey'ad ahaan (sanduuqa guud ee gobolka iyo sanduuqa guud ee federaalka)

Koontada	SFY 2027	SFY 2028	SFY 2029	SFY 2030	SFY 2031
Waaxda Dakhliga	Lama yaqaan	(\$53,676,000)	(\$35,696,900)	(\$30,544,400)	(\$29,927,400)
Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud	\$0	\$0	\$0	\$0	\$0
Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka – Sanduuqa Guud ee Gobolka	(\$139,000)	(\$74,000)	\$0	\$0	\$0
Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka – Sanduuqa Guud ee Federaalka	(\$271,000)	(\$143,000)	\$0	\$0	\$0
Xafiiska Khasnajiga Gobolka	\$0	\$0	\$0	\$0	\$0
Waaxda Asluubta	Aan la qiyaasi karin	Aan la qiyaasi karin	Aan la qiyaasi karin	Aan la qiyaasi karin	Aan la qiyaasi karin
Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska	Aan la qiyaasi karin	Aan la qiyaasi karin	Aan la qiyaasi karin	Aan la qiyaasi karin	Aan la qiyaasi karin
Wadarta Sanduuqa Guud ee Gobolka	(\$139,000)	(\$53,750,000)	(\$35,696,900)	(\$30,544,400)	(\$29,927,400)
Wadarta Dhammaan Maalgelinta	(\$410,000)	(\$53,893,000)	(\$35,696,900)	(\$30,544,400)	(\$29,927,400)

Waaxda Dakhliga

Waaxdu waxay badbaadin doontaa lacag saafi ah oo dhan \$149,844,700 shanta sanno ee maaliyadeed ee u dhexeeya 2027 iyo 2031. Waxaa loo qaadanayaa in qoondada sanduuqa guud ee gobolka ee hadda jirta ee maamulidda canshuurta ay dhammaan doonto markay tahay Juun 30, 2027. Saameynta kharashyada iyo keydka ka dambeeya waxaa lagu qiyaasay inay dhacaan Janaayo 1, 2027 ama ka dib.

Hadda, Waaxda waxay heshay qoondo guud oo dhan \$10,196,000 oo loogu talagalay sannad-maaliyadeedka gobolka ee 2027. Wadarta qoondada ee muddada laga bilaabo Janaayo 2027 ilaa Juun 2027 waa \$5,408,400. Caddadyada aan la kharash gareyn ee ka yimid sanduuqa guud ee sannad-maaliyadeedka gobolka ee 2027 ayaan hadda la aqoon sababo la xiriira qandaraasyada suurtagalka ah iyo ballanqaadyada iibiyayaasha. Sannad-maaliyadeedka gobolka ee 2028, 2029, 2030, iyo 2031 waxaa loo qaadanayaa in DOR ay maalgelin ka heli doonto golaha sharci-dejinta si waafaqsan qoraalka maaliyadda ee qaybaha I – VIII ee ESSB 6346 – Dejinta canshuurta milyaneerrada. Waxaa loo qaatay in kayd laga helayo waajibaadyada maamulka canshuurta ee qiyaas ahaan 30,000 oo canshuur bixiyayaal ah kuwaas oo aan hadda ka dib loo baahnaa doonin. Keydyadan sannad-maaliyadeedka gobolka ahaan waa sida soo socota:

- Keydka \$53,676,000 ee sannad-maaliyadeedka gobolka ee 2028.
- Keyd dhan \$35,696,900 oo loogu talagalay sannad-maaliyadeedka gobolka ee 2029.
- Keydka dhan \$30,544,400 ee sannad-maaliyadeedka gobolka ee 2030.
- Keyd dhan \$29,927,400 oo loogu talagalay sannad-maaliyadeedka gobolka ee 2031.

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud (AGO) ma yeelan doono wax kordhin ama dhimmis kharashyada ah sannad-maaliyadeed kasta oo gobolka ah laga bilaabo 2027 ilaa 2031. Isbeddelka la filayo ee caddadka culayska shaqada adeegyada sharciga waa mid aad u yar. AGO ma helin maalgelin u gaar ah hirgelinta ESSB 6346.

Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka

Sannad-maaliyadeedka gobolka ee 2027, Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (DSHS) waxay keydin doontaa \$139,000 oo ah maalgelinta gobolka iyo \$279,000 oo ah maalgelinta federaalka. Sannad-maaliyadeedka gobolka ee 2028, DSHS waxay keydin doontaa \$74,000 oo ah maalgelinta gobolka iyo \$143,000 oo ah maalgelinta federaalka. Maalgelintan waxaa loo bixiyay cusbooneysiinta teknolojiyada macluumaadka, cusbooneysiinta siyaasadda, iyo tababarka shaqaalaha si ay haya'addu u hirgeliso ururinta taageerada carruurta ee lacag celinta canshuurta gobolka.

Xafiiska Khasnajiga Gobolka

Xafiiska Khasnajiga Gobolka (OST) ma yeelan doono wax koror ama dhimmis ah oo ku yimaada kharashyada sannad-maaliyeedyada gobolka ee 2030 iyo 2031 si loo maamulo ku wareejinta koontada barnaamijka bilowga hore ee carruurta. OST ma helin maalgelin gaar u ah hirgelinta ESSB 6346.

Waaxda Asluubta

Waaxda Asluubta waxay yeelan doontaa kayd aan la qiyaasi karin oo ka dhalanaya meesha ka saarista dambiga culus ee darajada C ah ee ka dhuumashada canshuurtaan.

Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska

Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska waxay yeelan doontaa keyd aan la cayimin oo ka dhashay baabi'inta fal-dambiyeedka heerka C ee ka baxsashada canshuurtaan. Ma cadda haddii fal-dambiyeedyadan ay ku kooban yihiin dambiyada dadka waaweyn.

Bayaanka lagu taageerayo

Ku Codee Haa: Ka Noqo Canshuurta Dakhliga, Ka Dhig in Olympia ay Oofiso Ballanteeda

Kalsoonida laguma dhiso anxixinta canshuur kale, waxaa lagu kasbadaa oofinta ballanqaadyada. 90-kii sano ee la soo dhaafay, dadka degan Washington waxay toban jeer diideen canshuurta dakhliga sababtoo ah waxay ogaayeen inay khatar gelin lahayd koboca dhaqaalaha, niyad-jabin lahayd maalgashiga, isla markaana ay ka gudbi lahayd dadkii markii hore lala beegsaday. Sannadkan, Sharci Dejinta ayaa si kastaba ha ahaatee sharci ka dhigtay canshuur dakhli oo cusub. I-645 waxay soo celinaysaa xuquuqdaada aad ku go'aansanayso.

Canshuuraha Had iyo Jeer Way Ballaartaan

Taageerayaashu waxay ku adkeysanayaan in canshuurta ay tahay mid kooban, oo khuseysa oo keliya dakhliga ka sareeya \$1 milyan. Laakiin sharci-dejiyayaasha ayaa diiday fursadaha si joogto ah loogu xaddidi lahaa baaxaddeeda, iyagoo siinaya Olympia awoodda ay canshuurta dakhliga ugu ballaarin karto qof walba. Ka hor inta aan canshuur bixiyayaasha wax dheeraad ah la weydiisan, waa inay muujiyaan inay fulin karaan ballanqaadyadii ay horrey u sameeyeen.

Taariikhda Ballanqaadyada la Jebiyay

80 jeer shantii sanno ee u dambeeyay ayay Olympia lacag ka soo wareejiisay xisaabaadka loo qoondeeyay una wareejiisay maalgelinta guud. Waxay lacag ka qaateen daryeelka caafimaadka gobolka, xakamaynta daadadka, badqabka tuubooyinka, caymiska shaqaalaha dugsiga, iyo kuwa kale si loogu kabo maalgelinta guud. Canshuurta faa'iidada raasumaalka waxaa loo ballanqaaday in lagu taageero waxbarashada goorta hore iyo daryeelka carruurta, haddana ballanqaadyadaas dib ayaa loo dhigay, waa la dhimmay, ama waa la baajiyay. Shaqaalaha gurmada degdegga ah waxay wakhtigoodii shaqo ku qaateen iyagoo ku tiirsan ballanqaadyada ku saabsan hawlgabkooda, balse waxay uun arkeen golaha sharci-dejinta oo ka leexsanaya lacagaha hawlgabkooda si ay u buuxiyaan daldaloollada sanduuqa guud. Kalsoonidu way wiiqantaa marka maalgelinta heellan aysan dhalin natiijooyinkii dadka loo ballanqaaday.

Ku Codeynta Haa waxay dib uga noqonaysaa canshuurta dakhliga ee cusub ka hor inta aysan bilaaban, waxay dhowraysaa Dhimmista Canshuurta ee Qoysaska Shaqeeya, fasaxa qoyska ee lacagta la bixiyo, iyo gargaarka canshuurta ganacsigayar. Codbixiyayaasha ayaa leh go'aanka kama dambeysta ah.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Sheegashooyinka ololaha Maya waa kuwo aan jirin. I-645 waxay dib uga noqonaysaa canshuurta dakhliga. I-645 la'aanteed, Olympia waxay ballaarin kartaa canshuurta dakhliga si ay u gaarto mushaharkaaga iyadoo la adeegsanayo qalin-ku-duugid fudud. Codeyn dadweyne iyo oggolaansho looma baahna, wakhti kasta oo ay rabaan. Tani marnaba ma ahayn mid ku saabsan dugsiyada ama daaybarrada, taasi waa xeelad cabsi gelin ah. Washington waxay leedahay dakhliyo rikoodh ah. Canshuur dakhli oo qof kasta saaran waxay noqon doontaa canshuur dakhli oo qof walba saaran. Ku Codee Haa.

Waxaa soo gudbiyay: **Chris Gildon**, Senatarka Gobolka, Jamhuuri, Puyallup; **Jesse Proudman**, Qof nolosha oo dhan deganaa Washington iyo Ganacsade saddex-jeer ah; **Patti Mann**, Dab-damis/Kalkaaliye caafimaad oo hawlgab ah, Waaxda Dab-damiska ee Seattle; **Viet Nguyen**, Mulkiilaha Ganacsi Yar, Madax-bannaan, Seattle; **Semmelle Abraham**, Mulkiilaha Ganacsi Yar; **Julie H. Olds**, Ayeyyo iyo Mulkiilaha Ganacsi Yar

Xiriirka: 360-259-9771; chris@chrisgildon.com

Bayaanka looga soo horjeedo

Washington waxay leedahay mid ka mid ah nidaamyada canshuuraha ee dalka ugu foorara, halkaas oo qoysaska dabaqadda shaqeeya iyo kuwa dhexe ay bixiyaan heer canshuureed aad uga sareeya kuwa ugu qanisan. I-645 waxay taas ka dhigi lahayd mid ka sii darta. I-645 waa mid maaliyadda u maamusha si mas'uuliyad-darro ah, iyadoo jaraysa bilyanno maalgelin ah oo loogu talagalay waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka, kordhinaysana canshuuraha 460,000 oo qoysas dadaal badan ah, iyo khatar gelinaysa dhimmista canshuurta ee kumanaan ganacsiyo yaryar ah.

Ku Codee Maya: Jooji Dhimmista Canshuurta ee Kuwa Ugu Taajirsan

Maalgabeenka sanduuqa deyrarka Brian Heywood ayaa ku bixiyay malaayiinta taageeridda I-645 sababtoo ah wuxuu rabaa dhimmis canshuur oo loogu talagalay boqolkiiba 1-ka ugu sareeya, isagoo qoysaska dabaqadda shaqeeya iyo kuwa dhexe iyo ganacsiyada yaryar dusha ka saaraya kharashyo badan. I-645 waxay ka dhigan kartaa canshuuro ka sareeya kumanaan ganacsiyo yaryar ah, waxay ku qasbi kartaa qoysaska inay bixiyaan canshuurta iibka ee agabyada aasaasiga ah ee guriga sida daaybarrada, waxayna u kordhin kartaa canshuuraha 460,000 oo qoysaska Washington ah – si ay uun kuwa sameeya in ka badan hal milyan oo doolar sannadkii u helaan dhimmis canshuureed.

Ku Codee Maya: Jooji Dhimmista Ku Aaddan Dugsiyada, Daryeelka Caafimaadka, iyo Daryeelka Carruurta

Xeerkan ayaa dhimmaya maalgelinta dugsiyada dadweynaha ee K-12, daryeelka caafimaadka, daryeelka carruurta, iyo adeegyada kale ee muhiimka ah ee dadweynaha caddad dhan \$13 bilyan muddo afar sanno ah. Taas waxay ka dhigan tahay cabbirrada fasallada oo ka weyn, kharashyada daryeelka caafimaadka iyo daryeelka carruurta oo ka sareeya, iyo meesha ka saaridda qadooyinka dugsiga ee bilaashka ah ee carruur badan.

Ku Codee Maya: Jooji Kharashyada Sareeya ee Qoysaska Shaqeeya

I-645 waxay dadka ugu hantida badan siinaysaa fursad weyn halka inta kale ee naga midka ah aan wajahayno kharashyo daryeel caafimaad iyo daryeel carruur oo ka sareeya iyo dhimmis lagu sameeyo dugsiyada dadweynaha iyo waxbarashada sare. Ku biir kalkaaliyayaasha, macallimiinta, iyo mulkiileyaasha ganacsiyada yaryar ee Washington. Ku Codee Maya ee I-645.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Canshuurta Milyaneerrada waxay keliya khuseysaa kuwa hela wax ka badan hal milyan oo doolar sannadkii. Isku day kasta oo loogu ballaarinayo kuwa naga midka ah ee qaata wax ka yar hal milyan waxaa lagu go'aamin doonaa warqadda codbixinta - codbixiyayaasha ayaa had iyo jeer leh go'aanka ugu dambeeya. I-645 waxay god dhan \$13 bilyan u qodaysaa miisaaniyadda - ha rumaysan beenaha ah inaan sii haysan karno dhimmista canshuurta ee qoysaska shaqeeya iyo ganacsiyada yaryar laakiin meesha laga saaro canshuurta dadka tirada yar ee hodanka ah ee bixisa kharashkooda.

Waxaa soo gudbiyay: **Janie White**, Madaxweynaha, Washington Education Association; **Matt Hipp**, Mulkiilaha Ganacsi Yar, Halcyon Brewing Company; **Rosa Potts**, Kalkaaliye Caafimaad oo Diiwaan Gashan, Vancouver; **April Sims**, Madaxweynaha, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington; **Thom Garrard**, Macallin fasal oo hawlgab ah, Xubinta Guddiga Dugsiga Edmonds; **Lindsay Johnson**, U Doodeyaasha Waalidnimada ee La Qorsheeyay ee Gobolka Washington Weyn, Yakima

Xiriirka: (360) 545-3362; info@no645.com; <https://no645.com/>

Qoraalka buuxa ee Xeerka Hindisaha Lr. IP26-645

XEER Khuseeya canshuuraha, dib u noqoshada cutubka 238, Sharciyada 2026, iyo mamnuucista canshuuraha dakhliga shakhsiga; ku darista cutub cusub Title 82 RCW; abuurista qaybo cusub; dib u noqoshada 2026 c 238 ss 101, 102, 201, 202, 203, 204, 205, 206, 301, 302, 303, 304, 305, 306, 307, 308, 309, 310, 311, 312, 313, 314, 315, 316, 401, 402, 403, 404, 405, 406, 407, 501, 502, 601, 701, 702, 703, 704, 705, 706, 707, 708, 709, 710, 711, 712, 801, 802, 803, 804, 805, 806, 807, 808, 809, 810, 811, 812, 813, 814, iyo 1201; iyo dib u noqoshada 2026 c 238 ss 1, 1203, 1208, 1209, iyo 1210 (aan ku jirin koodka).

HA NOQOTO MID AY SHARCI KA DHIGEEN DADKA GOBOLKA WASHINGTON:

QAYBTA CUSUB. Qaybta 1. Dadku waxay ogaadeen in muddo ku dhawwaad qarni ah maxkamadaha Washington ay qabeen in dakhligu yahay hanti loo yeelan karo marka loo eego Dastuurka gobolka. Sidaas darteed dakhliga lama canshuuri karo ilaa uu ka buuxiyo dhammaan shuruudaha dastuuriga ah ee canshuuraha hantida oo ay ku jirto heer isku mid ah oo aan ka badnayn 1 boqolkiiba.

Dadku waxay intaas u sii ogaadeen in codbixiyayaasha Washington ay si weyn u diideen 10 isku dayo oo lagu soo rogayo canshuurta dakhliga ee gobolka oo dhan.

Dadku waxay sidoo kale ogaadeen in golaha sharci dejinta ee Washington uu iska indho-tiray Dastuurka iyo rabitaanka dadka si uu sharci uga dhigo canshuur dakhli oo aan dastuuri ahayn.

Si dib loogu soo celiyo rabitaanka dadka, xeerkan wuxuu dib uga noqon lahaa canshuurta gobolka ee helidda dakhliga shakhsiga; wuxuu qeexi lahaa dakhliga ujeedooyinka canshuurta; isla markaana wuxuu mamnuuci lahaa canshuur kasta oo lagu soo rogo, ama lagu cabbirro, dakhliga shakhsiga ah iyadoo aan loo eegin isha ay ka yimid.

QAYBTA CUSUB. Qaybta 2. Xeerarka ama qaybaha xeerarka ee soo socda mid kasta waa laga noqday:

- (1) 2026 c 238 s 1 (aan ku jirin koodka)
- (2) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 101;
- (3) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 102;
- (4) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 201;
- (5) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 202;
- (6) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 203;
- (7) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 204;
- (8) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 205;
- (9) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 206;
- (10) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 301;
- (11) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 302;
- (12) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 303;
- (13) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 304;
- (14) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 305;
- (15) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 306;
- (16) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 307;
- (17) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 308;
- (18) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 309;
- (19) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 310;
- (20) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 311;
- (21) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 312;
- (22) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 313;
- (23) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 314;
- (24) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 315;
- (25) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 316;
- (26) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 401;
- (27) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 402;
- (28) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 403;
- (29) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 404;
- (30) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 405;
- (31) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 406;

- (32) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 407;
 - (33) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 501;
 - (34) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 502;
 - (35) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 601;
 - (36) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 701;
 - (37) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 702;
 - (38) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 703;
 - (39) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 704;
 - (40) 2026 c 238 s 705;
 - (41) 2026 c 238 s 706;
 - (42) 2026 c 238 s 707;
 - (43) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 708;
 - (44) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 709;
 - (45) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 710;
 - (46) RCW 74.20A.--.-- and 2026 c 238 s 711;
 - (47) RCW 82A.--.-- and 2026 c 238 s 712;
 - (48) 2026 c 238 s 801;
 - (49) 2026 c 238 s 802;
 - (50) 2026 c 238 s 803;
 - (51) 2026 c 238 s 804;
 - (52) 2026 c 238 s 805;
 - (53) 2026 c 238 s 806;
 - (54) 2026 c 238 s 807;
 - (55) 2026 c 238 s 808;
 - (56) 2026 c 238 s 809;
 - (57) 2026 c 238 s 810;
 - (58) 2026 c 238 s 811;
 - (59) 2026 c 238 s 812;
 - (60) 2026 c 238 s 813;
 - (61) 2026 c 238 s 814;
 - (62) 2026 c 238 s 1201;
 - (63) 2026 c 238 s 1203 (aan ku jirin koodka);
 - (64) 2026 c 238 s 1208 (aan ku jirin koodka);
 - (65) 2026 c 238 s 1209 (aan ku jirin koodka); iyo
 - (66) 2026 c 238 s 1210 (aan ku jirin koodka).
- QAYBTA CUSUB. Qaybta 3.** QEEXITAANNADA. Qeexitaannada qaybtan waxay khuseeyaan dhammaan Ciwaanka 82 RCW ilaa mawduucu si cad u dalbado si kale mooyaane.
- (1) "Dakhli" macnaheedu waa faa'iido ama dheef kasta oo lacag lagu qiyaasay oo laga helay maalka, shaqada, hantida, ama ilo kale oo shakhsiga ah.
 - (2) "Shakhsi" waxaa loola jeedaa qof dabiici ah.

QAYBTA CUSUB. Qaybta 4. MAMNUUCIDDA CANSHUURAHADA DAKHLIGA SHAKHSIGA.

- (1) Wax canshuur ah laguma soo rogi karo dakhliga shakhsiga, helitaanka dakhliga shakhsiga, ama lagu qiyaasay dakhliga shakhsiga, iyada oo aan loo eegin isha ay ka timid.
 - (2) Dakhligu waa mid hoos yimaada lahaanshaha shakhsiga ah.
 - (3) Mamnuucista qaybtan waxay khuseysaa gobolka, degmooyinka, magaalooyinka, iyo dhammaan maamulada kale ee deegaanka ee gobolka Washington.
- QAYBTA CUSUB. Qaybta 5.** Qaybaha 3 iyo 4 ee xeerkan waxay ka dhigan yihiin cutub cusub oo ku dhex jira Title 82 RCW.
- QAYBTA CUSUB. Qaybta 6.** Qaybaha 3 iyo 4 ee xeerkan waa in si furan loo fasiraa si loo mamnuuco nooc kasta oo canshuurta dakhliga shakhsiga ah.
- QAYBTA CUSUB. Qaybta 7.** Haddii qodob kasta oo ka mid ah xeerkan ama ku-dhaqankiisa ee qof ama xaalad kasta loo arko inuu yahay mid aan ansax ahayn, inta kale ee xeerka ama ku-dhaqanka qodobka ee dadka kale ama xaaladaha kale ma saameynayso.

--- DHAMMAAD ---

Xeerka Hindisaha Lr. IL26-001

Xeerka Hindisaha Lr. IL26-001 wuxuu khuseeyaa xuquuqda waalidiinta ee la xiriirta carruurtooda dhigata dugsiga dadweynaha.

Xeerkan wuxuu dib uga noqon doonaa wax-ka-beddellada lagu sameeyay qaanuunka taxaya xuquuqaha qaarkood ee waalidiinta iyo mas'uuliyiinta carruurta dhigata dugsiga dadweynaha, wuxuuna dib u dhaqan gelin doonaa sharciga sidii markii hore uu u meel mariyay Hindisaha ku socda Sharci Dejinta 2081.

Ma tahay in xeerkan loo hirgeliyo sharci ahaan?

Haa

Maya

Bayaanka sharaxaadda

Sharciga Sida uu Hadda u Jiro

Sannadkii 2024, Sharci Dejintu waxay ansixisay Hindisaha loo gudbiyay Sharci Dejinta 2081, kaas oo taxay xuquuqo gaar ah oo ay leeyihiin waalidiinta iyo mas'uuliyiinta carruurta dugsiyada dadweynaha. Qaar badan oo xuquuqdaas ka mid ah ayaa horrey loogu qeexay meelo kale oo ka mid ah sharciga gobolka ama sharciga federaalka. Sannadkii 2025, Sharci-dejintu waxay dhowr isbeddel ku sameysay liiskan xuquuqda waalidka iyo tan mas'uulka, kuwaas oo mar kale dib u sheegay xuquuqo badan oo horrey uga jiray meelo kale oo ka mid ah sharciga gobolka iyo kan federaalka. Hadda, liiska xuquuqda waalidka iyo xuquuqda mas'uulka waxaa lagu qeexay qaanuunka RCW 28A.605.005 wuxuuna dhigayaa:

Helitaanka Agabyada iyo Diiwaannada Waxbarashada: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin inay galaan qolka fasalka ee ilmahooda iyo waxqabadka uu dugsigu kafaala-qaaday si ay u kormeeraan iyo inay u baaraan buugaagta waxbarashada, manhajka, iyo agabyada dheeriga ah ee lagu isticmaalo qolka fasalka ee ilmahooda si waafaqsan siyaasadaha iyo habraacyada. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin inay dib u eegaan diiwaannada waxbarashada ee ilmahooda iyagoo soo gudbinaya codsi qoraal ah. Diiwaannada waa in lagu bixiyaa muddo macquul ah gudaheed oo aan ka badnayn 45 maalmood. Diiwaannada waxbarashada waxaa lagu qeexaa inay yihiin diiwaanno rasmi ah, faylal, iyo xog si toos ah ula xiriirta arday isla markaana uu hayo dugsiga dadweynaha, oo ay ku jiraan diiwaannada ku jira galka urursan ee ilmaha, diiwaannada imaanshaha iyo shaqada akadeemiyadeed ee la dhammaystiray, diiwaannada guusha iyo imtixaannada qiimeynta, xaaladda asluubta, borotokoollada imtixaanka, iyo barnaamijyada waxbarashada ee shakhsi ahaanneed. Diiwaannada waxbarashada kuma jiraan diiwaannada lagu hayo gacanta qofka sameeyay oo keliya, ee loo isticmaalo oo keliya kaalmo xusuuseed shakhsi ah, oo aanay heli karin ama aan loo bandhigin qof kale marka laga reebo beddele ku meel gaar ah oo u ah qofka sameeyay diiwaanka. Dugsiyadu waxay qaadi karaan lacag macquul ah oo loogu talagalay koobiyeeynta diiwaannada waxbarashada ee waalidiinta iyo ilaaliyayaasha ilaa iyo inta lacagtu aysan ka hor istaageyn waalidka ama ilaaliyaha helitaanka diiwaannada. Waalidiinta iyo ilaaliyayaasha loogama baahna inay shakhsi ahaan u yimaadaan si ay u codsadaan diiwaannada waxbarashada, haddii dugsiga dadweynaha uu xaqiijin karo aqoonsiga qofka codsanaya. Helitaanka iyo kashifaadda macluumaadka daryeelka caafimaadka waxaa xukuma sharciyada kashifaadda daryeelka caafimaadka ee gobolka.

Waxqabadka iyo Imaanshaha Ardayga: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin in lagu wargeliyo waxqabadka waxbarasho ee ilmahooda, oo uu ku jiro waxqabadka ilmaha ee imtixaannada iyo qiimeynta heerarka barashada gobolka. Waalid ama mas'uul sharci ah wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado kulan fool-ka-fool ah oo uu la yeesho macallinka fasalka ee ilmaha iyo maamulaha ilmaha si looga wada hadlo kheyraadka ama xeeladaha lagu taageerayo laguna dhiirigelinaayo horumarka waxbarashada ee ilmaha. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay sidoo kale xaq u leeyihiin in lagu ogeysiyo maqnaanshaha aan cudur-daarka lahayn iyo inay ka qayb qaataan dadaallada lagu tirtirayo ama lagu dhimmayo maqnaanshaha ilmaha si waafaqsan sharciga kale ee gobolka.

Tallaabo Dambiyeed iyo Fulinta Sharciga: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan ogeysiis degdeg ah marka lagu eedeeyo in fal dambiyeed laga galay ilmahooda gudaha hantida dugsiga inta lagu jiro maallinta

dugsiga ama inta lagu jiro hawl uu dugsigu kafaala qaaday, ama marka ilmahooda loo hayo sabab macquul ah oo ku saabsan ku lug lahaanshaha fal dambiyeed gudaha hantida dugsiga inta lagu jiro maalinta dugsiga. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay sidoo kale xaq u leeyihiin inay helaan ogeysiis degdeg ah haddii ilmahooda lagu sameeyo su'aalo weydiin xabsi ah oo ka dhacda dugsiga dhexdiisa inta lagu jiro maalinta dugsiga, marka laga reebo xaaladaha halkaas oo waalidka ama mas'uulka sharciga ah lagu eedeeyay xadgudub ama dayacaad ka dhanka ah ilmaha su'aalaha la weydiinayo. Dugsiyada dadweynaha waa inay sidoo kale ogeysiiyaan waalidiinta iyo mas'uuliyiinta marka ay helaan warbixinnada sheegaya in ilmahoodu yahay dhibbanaha lagu eedeeyay xadgudub jireed ama galmu, dhaqan-xumo, ama weerar uu geystay shaqaale dugsi ama qandaraasle.

Ka saarista Kambaska: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin in aan ilmahooda laga saarin barxadaha dugsiga ama dhismayaasha dugsiga inta lagu jiro saacadaha dugsiga iyada oo aan oggolaansho laga helin waalidka ama mas'uulka sharciga ah iyadoo la raacayo qodobbada kale ee sharciga gobolka. Ogeysiiska waalidiinta ee ay bixiyaan xarumaha hoyga dhallinyarada, hey'adaha fulinta sharciga, iyo Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska marka ay hoy siiyaan ama ay la wareegaan haynta carruurta waxaa maamula sharciyo kale.

Takoor-La'aan: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin in ilmahoodu ay helaan waxbarasho dadweyne oo ku taal goob mamnuucaysa kala-sooca iyadoo lagu salaynayo jinsiga, isirka, caqiidada, diinta, midabka, asalka qaranka, xaaladda askarinimo ama rug-caddaaga si sharafeed looga saaray ciidanka, u-janjeeridda galmada, muujinta jinsiga, aqoonsiga jinsiga, jiritaanka naafannimo kasta oo dhanka dareenka, maskaxda ama jirka ah, ama isticmaalka eyga hagaha ah ee tababaran ama xayawaanka adeegga ee uu isticmaalo qof naafada ah.

Dhibaataaynta, Caga-jugleynta, iyo Xoog-sheegashada: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta waxay xaq u leeyihiin inay cabasho u gudbiyaan iyagoo matalaya ilmahooda taas oo la xiriirta dhibaataaynta, cabsi-gelinta, iyo handadaadda, sida lagu qeexay sharciyada kale ee gobolka.

Ogeysiiska iyo Xuquuqda Ka Bixitaanka: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan ogeysiis qoraal ah iyo inay carruurtooda ka saaraan sahanada, falanqeynta, ama qiimeynta muujinaya macluumaadka khuseeya qaybaha ku qoran sharciyada federaalka ee ka bixitaanka, oo ay ku jiraan xiriirka siyaasadeed ama aaminsannaanta; dhibaatooyinka dhimirka ama nafsiga ah ee ardayga ama qoyska ardayga; habdhaqanka iyo dabeecadaha galmada; habdhaqanka sharci darada ah, bulshada ka horjeeda, is-edaynta ah, ama dulleysiga ah; qiimeynta dhaleeceynta ah ee dadka xiriirka dhow la leh ilmaha ama qoyska ilmaha; dhaqannada diimeed, xiriirada, ama aaminsannaanta ilmaha ama qoyska ilmaha; iyo dakhliga. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay sidoo kale xaq u leeyihiin inay ilmahooda ka saaraan waxbarashada galmada ee dhammaystiran sida uu dhigaayo sharciga kale ee gobolka.

Xuquuqda Diiwaan Gelinta: Waalidiinta iyo ilaaliyayaasha sharciga ah waxay xaq u leeyihiin in ilmahoodu u qalmo diiwaan gelinta degmada dugsiga haddii loo beddelo, ama ay sugayaan in loo beddelo, xarun ciidan oo ku dhex taal gobolka. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin in ilmahoodu u qalmo iyada oo aan la haysan deegaan sharci ah ee diiwaan gelinta degmada dugsiga. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay sidoo kale xaq u leeyihiin inay codsadaan diiwaan gelinta ilmahooda ee degmada dugsiga ee aan degane ka ahayn. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan

diiwaan gelinta ilmahooda ee dugsiga charter-ka.

Xuquuqda Helitaanka Luqadda: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan ogeysiis sannadle ah oo ku saabsan siyaasadaha helitaanka luqadda ee dugsiga dadweynaha iyo adeegyada helitaanka luqadda ee dugsiga dadweynaha iyo xuquuqda waalidiinta ee adeegyada helitaanka luqadda ee bilaashka ah. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay sidoo kale xaq u leeyihiin in ilmahooda oo luqaddiisa koowaad aysan ahayn Ingiriis uu helo waxbarasho iyo adeegyo dheeri ah iyada oo loo marayo barnaamijka waxbarashada labada luqadood ee kala guurka ah.

Xuquuqda Waxbarashada Gaarka ah: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan barnaamijyada waxbarashada gaarka ah iyo taageerada ee ilmahooda haddii ilmahoodu u qalmo, balse uusan helin, adeegyada waxbarashada gaarka ah, oo ay ku jirto xanuun dartiis. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay sidoo kale xaq u leeyihiin inay racfaan u codsadaan kormeeraha guud ee waxbarashada haddii ilmahooda naafada ah ay degmada dugsiga ama dugsi dadweyne u diideen fursadda barnaamijka waxbarashada gaarka ah, iyo inay helaan dhegaysiyada hannaanka saxda ah ee waxbarashada gaarka ah ee ku saabsan ilmahooda.

Jadwalka Dugsiga: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan jadwalka dugsiga ee sannadlaha ah ugu dambeyn 30 maalmood ka hor bilowga sannad-dugsiyeedka, iyo in lagu ogeysiiyo wixii dib-u-eegis ah ee lagu sameeyo jadwalka. Jadwalka waa in lagu soo dhejiyaa webseedka dugsiga waana inuu ku jiraa maalmaha imaanshaha ardayga iyo dhacdooyinka u baahan imaanshaha waalidka ama ardayga ee ka baxsan maalmaha ama saacadaha dugsiga ee caadiga ah.

Kharashyada Loo Baahan Yahay: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin in lagu wargeliyo khidmadaha loo baahan yahay iyo ujeeddadooda iyo isticmaalkooda, iyo sida wax looga qaban karo dhibaatooyinka dhaqaale.

Xeerka Labbiska ama Dareeska: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay xaq u leeyihiin in lagu ogeysiiyo sharaxaadda xeer kasta oo labbiska ah ama dareeska loo baahan yahay.

Xuquuqda Dacwadda ee Gaarka ah: Ma jirto wax ku jira xeerka qeexaaya xuquuqda waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah oo abuuraya xuquuq dacwo oo gaar ah.

Saameynta Xeerka La Soo Jeediyay Haddii La Ansixiyo

Haddii la ansixiyo, xeerka la soo jeediyay waxa uu ka noqon doonaa dhammaan isbeddelladii ay samaysay Sharci Dejinta 2025, waxa uuna dib u soo celin doonaa liiska xuquuqda sidii sharci looga dhigay 2024-kii ee Hindisaha loo gudbiyay Sharci Dejinta ee 2081. Gaar ahaan, soo jeedintu waxay sharciga hadda jira wax uga beddeli doontaa siyaabaha soo socda:

Helitaanka Agabyada iyo Diiwaannada Waxbarashada: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay yeelan doonaan xuquuq ay ku baaraan buugaagta waxbarashada, manhajka, iyo agabka dheeriga ah ee lagu isticmaalo qolka fasalka ee ilmahooda. Xaddidaadda ah in helitaanka waalidka iyo mas'uulka ay tahay sida waafaqsan qodobbada sharciga kale iyo waafaqsanaanta siyaasadaha dugsiga waa laga saari doonaa. Marka la eego diiwaannada, dugsiyada waxaa laga mamnuuci doonaa inay dalbadaan in waalidiintu ay shakhsi ahaan u yimaadaan si ay u sameeyaan codsiga diiwaannada. Ka-reebistaanka kiisaska halka dugsigu uu xaqiijin waayo aqoonsiga waalidka ama mas'uulka ayaa meesha laga saari doonaa. Dugsiyada waa laga mamnuuci doonaa in ay lacag ka qaadaan nuqullada elektaroonigga ah, waxayna qaadi karaan lacag macquul ah oo loogu talagalay nuqullada diiwaannada xaashida

ah. Diiwaannada waxay noqon doontaa in lagu soo saaro muddo toban maalmood oo shaqo gudaheed ah halkii ay ka ahaan lahayd 45-ta maalmood ee uu oggol yahay sharciga hadda jira. Noocyada diiwaannada ee laga rabi doono dugsiyada inay soo saaraan ayaa la ballaarin doonaa si loogu daro fayl kasta oo ardayga u gaar ah, dukumentiyada, ama agabyada kale ee uu hayo dugsigu. Ka-reebitaanka dukumentiyada uu haysto qofka sameeyay oo keliya ayaa meesha laga saari doonaa. Qodobka qeexaaya in diiwaannada daryeelka caafimaadka ay maamulaan sharciyo gooni ah oo ku saabsan kashifaadda diiwaannada daryeelka caafimaadka ayaa meesha laga saari doonaa.

Adeegyada Caafimaadka iyo Dawaynta: Xeerka ayaa ku dari doona in waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah ay xaq u leeyihiin inay helaan ogeysiis hore marka adeegyada caafimaadka loo fidinayo ilmahooda (marka laga reebo daaweynta caafimaadka ee degdegga ah), inay helaan ogeysiis marka adeeg kasta oo caafimaad loo fidiyo ilmahooda kaas oo keenni kara saameyn dhaqaale oo soo gaarta waalidka ama mas'uulka sharciga ah, iyo inay helaan ogeysiis marka dugsigu u habeeyo daaweyn caafimaad oo keenta daryeel daba-gal ah oo ka baxsan saacadaha caadiga ah ee dugsiga.

Tallaabo Dambiyeed iyo Fulinta Sharciga: Qeexitaanka ah in waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ay xaq u leeyihiin oo keliya ogeysiis ka yimaada dugsiyada dadweynaha marka dambiga ama la macaamilka hey'adaha fulinta sharciga uu ka dhaco hantida dugsiga iyo inta lagu jiro saacadaha dugsiga ayaa meesha laga saari doonaa. Xuquuqda helitaanka ogeysiis degdeg ah marka ilmo lagu eedeeyo inuu yahay dhibbanaha, bartilmaameedka, ama qaataha xadgudub jireed ama galmo, anshax-xumo galmo, ama weerar uu geystay shaqaale dugsiga ama qandaraasle ayaa laga saari doonaa.

Ka saarista Kambaska: Qodobka qeexaaya in ogeysiinta waalidka iyo tan mas'uulka sharciga ah ee ay bixiyaan hoyga dhallinyarada, hey'adaha fulinta sharciga, iyo Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ay maamulaan sharciyo kale ayaa laga saari doonaa. Dugsiyada dadweynaha waxaa looga baahan doonaa inay ogeysiiyaan waalidiinta haddii ilmo laga kaxeeyo ama laga saaro dugsiga dadweyne iyada oo aan oggolaansho waalid laga helin, oo ay ku jirto inuu joogo hoyga dhallinyarada.

Takoor-La'aan: Qodobka qeexaaya in waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ahi ay xaq u leeyihiin in ilmahoodu waxbarasho ku helo goob mamnuucaysa takoorka dhowr sababood awgood ayaa laga saari doonaa. Xeerka ayaa beddelkeeda sheegi doona xuquuqda waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah si ay u helaan dammaanad ah in dugsiga dadweynaha ee ilmahoodu uusan takoorin ilmahooda iyadoo lagu salaynayo aaminsannaanta diimeed ee dhabta ah ee qoyska ilmaha.

Ogeysiinta iyo Ka-bixitaanka: Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah waxay sii wadayaan inay lahaadaan xuquuqda ka timaada sharciga federaalka ee ah inay helaan ogeysiis qoraal ah iyo inay carruurtooda ka saaraan sahanada, falanqeynta, ama qiimeynta ee muujinaya macluumaadka khuseeya xiriirka siyaasadeed ama aaminsannaanta siyaasadeed; dhibaatooyinka dhimirka ama nafsiga ah ee ardayga ama qoyska ardayga; habdhaqanka galmada iyo dabeecadaha galmada; habdhaqanka sharci darada ah, ka dhanka ah bulshada, is-eedaynta ah, ama meel ka dhaca ah; qiimeynta dhaleeceynta ah ee dadka xiriirka dhow la leh ilmaha ama qoyska ilmaha; dhaqannada diimeed, xiriirada diimeed, ama aaminsannaanta diimeed ee ilmaha ama qoyska ilmaha; iyo dakhliga. Xeerku wuxuu ku dari doonaa liiska mawduucyada ay waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ahi u leeyihiin xuquuqda inay ku helaan ogeysiis oo ay uga baxaan khibradaha galmada ee ilmaha ama soo jiidashada ilmaha, aaminsannaanta qoyska ee ilmaha, anshaxa ilmaha, ama diinta ilmaha, ama xiriirada siyaasadeed

ee ilmaha; iyo dhibaato kasta oo caafimaadka maskaxda ama dhibaatooyinka cilmi-nafsiga ee ilmaha ama xubin qoyska ka mid ah.

Xuquuqda ilmaha looga saarayo waxbarashada galmada ee dhammaystiran ayaa dib loo qori doonaa si loo sheego xuquuqda helitaanka ogeysiis qoraal ah iyo fursadda ilmaha looga saarayo waxbarashada ku saabsan mawduucyada la xiriira dhaqdhaqaaqa galmada si waafaqsan sharciga gobolka.

Qodobbada Kale ee Laga Saaray: Xuquuqda waalidka ama mas'uulka sharciga ah ee ah inuu cabasho u gudbiyo isagoo matalaya ilmahooda ee la xiriirta dhibaataaynta, cagajuglaynta, iyo xoogsheegashada, sida ku cad sharciga kale ee gobolka, ayaa laga saari doonaa. Bayaanka sheegaya in aanay jirin wax ku jira sharciga qeexaaya xuquuqda waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah oo abuuraya xuquuq dacwad gaar ah ayaa laga saari doonaa. Qodobbada khuseeya xuquuqda isqorista, xuquuqda helitaanka luqadda, iyo xuquuqda waxbarashada gaarka ah waa laga saari doonaa.

Jadwalka, Khidmadaha, iyo Xeerka Labbiska: Wax isbeddel ah laguma samayn doono qodobbada khuseeya jadwalka dugsiga, khidmadaha loo baahan yahay, ama xeerka labbiska ama dareeska.

Bayaanka Maaliyadda

Xogta Kooban

Haddii ay codbixiyeayaashu ansixiyaan, Hindisaha Xeerka Lr. IL26-001 wuxuu soo celin lahaa RCW 28A.605.005 sidii markii hore ay u ansixisay Sharci Dejintu kal-fadhiga 2024. Waxay taxaysaa xuquuqo gaar ah oo ay leeyihiin waalidiinta iyo mas'uuliyiinta carruurta dugsiyada dadweynaha, sida xuquuqda dib-u-eegista diiwaannada dugsiga ee ilmahooda, helitaanka ogeysiisyada, iyo ka bixinta ilmahooda waxqabadyo gaar ah. Waxay dib uga noqon doontaa wax ka beddelladii lagu sameeyay kal-fadhiga sharci-dejinta ee 2025. Hindisuhu wax saameyn maaliyadeed ah kuma yeelan doono gobolka. Degmooyinka dugsiyada ee deegaanka waxaa laga yaabaa inay galaan kharashyo yar si ay u cusbooneysiyaan siyaasadaha iyo habraacyada, laakiin saameyntan maaliyadeed waa mid aan la qiyaasi karin.

Malaynta guud

Taariikhda dhaqan galka ee hindisaha waa Diseembar 3, 2026.

Qodobbada hindisuhu waxay khuseeyaan mustaqbalka, ee ma aha dib u noqoshada.

Dakhliga

Hindisaha ma saameyn doono dakhliga gobolka ama kan deegaanka.

Kharashyada

Hindisuhu wax saameyn maaliyadeed ah kuma yeelan doono dowladda gobolka. Degmooyinka dugsiga ee deegaanka ayaa geli kara kharashyo yar si ay u cusbooneysiyaan siyaasadaha iyo habraacyada, laakiin saameyntan maaliyadeed waa mid aan la qiyaasi karin.

Bayaanka lagu taageerayo

Ku Codee Haa si loo Soo Celiyo Xuquuqda Waalidiinta ee Waxbarashada

Xuquuqahan waxaa ka mid ah helitaanka agabyada waxbarashada iyo diiwaannada ardayga ee carruurtooda, ogeysiiska adeegyada caafimaadka, ka bixitaanka waxqabadayada qaarkood iyo waxbarashada qaarkood, iyo ogeysiin degdeg ah marka ay hey'adaha fulinta sharcigu su'aalo weydiyaan ilmahooda ama ilmahooda laga saaro dhismaha dugsiga iyada oo aan oggolaansho waalid laga helin.

Ilaalinta Carruurta Nugul

Shaqaalaha dugsiga waxay weli yihiin warbixiyeayaasha waajibka ah ee xadgudubka ama dayacaadda carruurta ee laga shakisan yahay. Asturnaanta carruurta nugul waxay weli tahay muhiimadda koowaad. Laakiin tallaabooyinka badbaadada ee loogu talagalay carruurta khatarta ku jirta waa inaysan noqon siyaasad lala raaco oo macluumaadka looga celinayo dhammaan waalidiinta.

Taageer Qoysaska, Ha Taageerin Qarsoodiga

Waalidiinta waa inay oggolaansho siiyaan dugsiyada si ay daawada u siiyaan, u mariyaan kareemka qorraxda, ama ay ardayda ugu kaxeeyaan safarrada waxbarashada. Hase yeeshee siyaasadaha hadda jira waxay u oggolaadaan dugsiyada inay qariyaan macluumaad muhiim ah marka uu ilmuhu aqoonsi jinsi oo cusub ku muujiyo dugsiga. Siyaasadahan waxay u baahan karaan in shaqaaluhu ay macluumaadkan ka qariyaan waalidiinta, xitaa marka ay sameynta sidaas ka hor imanayso damiirkooda ama go'aankooda xirfadeed. Kuwa ka soo horjeeda ayaa la-wadaagista macluumaadkan ee waalidiinta ugu yeera "shaacin" xitaa marka isbeddellada muhiimka ah ee nolasha dugsiga ee qofka aan qaana-gaarin laga yaabo inay horrey u ogaayeen ardayda ay isku fasalka yihiin, macallimiinta, iyo shaqaalaha. Ka saarista waalidiinta ee si ula kac ah waxay ula dhaqantaa iyaga sidii kuwo asal ahaan aan ammaan ahayn iyada oo aan la sameyn qiimeyn shakhsi ah. Tani waxay wiiqaysaa xiriirka muhiimka ah ee u dhexeeya waalidka iyo ilmaha waxayna qoysaska u diidaysaa fursadda ay si wadajir ah kaga baaraandegaan su'aalaha masiiriga ah ee ku saabsan caafimaadka iyo fayo-qabka.

Soo Celi Kalsoonida Dugsiyada Washington

Dugsiyadu waa bahwadaag muhiim u ah guusha waxbarasho ee ilmaha, halka waalidiintu ay mas'uul ka yihiin korinta carruurtooda. Ixtiraamka doorarkan kala duwan ayaa lagama maarmaan u ah soo celinta kalsoonida. Ku Codee haa.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Yaan lagu marin habaabin. IL26-001 wuxuu si cad u qeexayaa in dugsiyada "aan looga baahnayn inay bixiyaan" diiwaannada la-talinta caafimaadka dhimirka marka waalidku yahay bartilmaameedka baaritaanka xadgudubka ama dayacaadda ilmaha; wuxuu u baahan yahay "ogeysiin degdeg ah" haddii fal dambiyeed loo arko in lagula kacay ama uu geystay ilmahooda; wuxuuna ka kooban yahay *eber* waajibbaadyo ardayda gelinaya khatar. Xeerku wuxuu dhowrayaa tallaabooyinka badbaadada isagoo hubinaya in waalidiintu helaan macluumaad muhiim ah oo ku saabsan carruurtooda. Ku Codee haa.

Waxaa soo gudbiyay: **Travis Reep**, Macallinka Dugsiga Hoose ee Dadweynaha, Wakiilka Ururka ee la Doortay; **Alesha Perkins**, Waalid iyo Udoodaha Waxbarashada, Qoraa Madax-bannaan; **Peter Rosenkranz**, M.Ed., Kormeeraha Guud, Degmada Dugsiga La Center; **Tony Harris**, Macallinka Sayniska/STEM ee Dugsiga Dadweynaha, Wakiilka Ururka ee la Doortay; **Amy Sousa**, M.A. ee Cilmi-nafsiga Qoto-dheer (Depth Psychology), Udoodaha Xuquuqda Haweenka; **Jess Grant**, Xubin, Dimuqraadiyiinta si ay u helaan Hab Xog Ogaal ah oo ku saabsan jinsiga

Xiriirka: YESonParentsRights@gmail.com

Bayaanka looga soo horjeedo

Ku Codee Maya Ka Saarista Ilaalinta Garashada Saliimka ah ee Dhibbaneyaasha Xadgudubka Carruurta

Halka inta badan waalidiintu ay yihiin kuwo wax jecel, xaqiiqada murugada leh ayaa ah in ay jireen 117,000 oo warbixinoood oo ku saabsan xadgudubka ama dayacaadda carruurta ee WA sannadka 2024 oo keliya. Xeerkan si liidata loo qoray wuxuu sii khatar gelinayaa dhibbaneyaasha u nugul tacaddiga carruurta isagoo dugsiyada ka dalbanaya inay macluumaad xasaasi ah ku wareejiyaan waalidiinta ku jira baaritaan dambiyeed ee la xiriira kufsiga ilmahooda, tacaddiga ilmahooda ama haddii kale waxyeellaynta ilmahooda. Taas ayaa ah sababta ay uga soo horjeedaan hey'adaha fulinta sharciga iyo Isbahaysiga WA ee Ka-hortagga Rabshadaha Guriga iyo Xadgudubka Galmada.

Ku Codee Maya Ku Saabsan Dib u Dhigista Ogeysiinta Waalidka Marka ay Carruurta Yihiin Dhibbaneyaasha Dambiga

Haddii ardaygu uu dhibbane u yahay dambi culus oo ka dhacay dugsiga, waalidiintu ma aha inay sugaan si ay u ogaadaan.

Cawaaqib aan loogu talagalin oo ka dhashay IL26-001 waa soo afjaridda shuruudda sharciga ah ee gobolka Washington ee ah in dugsiyadu *isla markaaba* ogeysiiyaan waalidiinta marka dembiga la soo sheego. Khubaradu waxay sheegayaan in ogeysiinta dib loo dhigay ay keliya kordhiso dhaawaca maskaxeed ee ilmaha ayna ka horjoogsan karto ilmaha inuu helo caawimo iyo taageero degdeg ah oo ka timaada dadka uu jecel yahay iyo xirfadleyaasha.

Ku Codee Maya Ka Sii Daridda Caafimaadka Dhimirka ee Dhallinyarada Iyo Xiisadda Guri La'aanta

Kalkaaliyayaasha dugsiga iyo la-taliyayaasha ayaa sheegaaya in xeerkan, oo ay maalgeliyeen dadka aadka u muxaafidka ah, uu ka niyad-jebinayo ardayda wajahaysa rabshadaha qoyska, xadgudubka galmada, ama xoogsheegashada inay caawinnaad ka raadsadaan macallimiinta iyo la-taliyayaasha dugsiga ee lagu kalsoon yahay, kuwaas oo looga baahan doono inay bixiyaan diiwaannada qarsoodiga ah ee ardayda. Waxay sidoo kale ku qasbaysaa dugsiyada inay carruurta LGBTQ+ si badheedh ah u geliyaan khatar korodhay oo ah rabshad iyo guri la'aan iyadoo loo muujinayo qoysas laga yaabo inay dhib u geystaan. Taas ayaa ah sababta Ururka Kalkaaliyayaasha Gobolka WA, dhakhaatiirta, iyo la-taliyayaasha dugsiga ay uga soo horjeedaan xeerkan.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

IL26-001, oo ay maalgeliyeen kooxaha aadka u muxaafidka ah, waxaa loo qoray si aad u liidata taas oo meesha ka saari lahayd xuquuqda waalidnimo ee muhiimka ah ee hadda jira. Waxay dib uga noqon doontaa sharciyada gobolka ee hadda jira ee dammaanad qaadaya xuquuqda waalidiinta ee ogeysiinta degdegga ah haddii ilmahoodu uu dhibbane u noqdo dambi ka dhacay dugsiga. Waxay soo afjaraysaa badbaadooyinka garashada saliimka ah ee dhibbaneyaasha xadgudubka carruurta oo waalidiintooda lagu eedeeyay xadgudubka carruurta iyo kufsiga. Taas ayaa ah sababta ay uga soo horjeedo Isbahaysiga Ka-hortagga Rabshadaha Qoyska iyo Faraxumaynta Galmada ee WA. Ku Codee Maya.

Waxaa soo gudbiyay: **John Lovick**, Senatarka Gobolka, Dimuqraadi, Sheriff-kii hore ee Degmada Snohomish; **Roshelle Cleland**, Isbahaysiga Washington ee Ka-hortagga Rabshadaha Guriga iyo Xadgudubka Galmada; **Justin Gill**, APRN, Guddoomiyaha, Ururka Kalkaalisoooyinka Gobolka Washington; **Karen Crowley**, Guddoomiyaha, Ururka Haweenka Codbixiyeayaasha ee Washington; **Courtney Normand**, Agaasimaha Gobolka Washington, U Doodeyaasha Isbahaysiga Waalidnimada ee La Qorsheeyay; **Jaime Fineman-McKinney**, La-taliyaha Dugsiga ee Shahaadada ka haysta Guddiga Qaranka, Fife

Xiriirka: NoHateInWASate.org/About-I-001; info@nohateinwastate.org

Qoraalka buuxa ee Xeerka Hindisaha Lr. IL26-001

HINDISAHA IL26-001

XEER Khuseeya xeerka xuquuqda waalidiinta Washington; wax ka beddelka RCW 28A.605.005; iyo abuurista qaybo cusub.

HA NOQOTO MID AY SHARCI KA DHIGEEN DADKA GOBOLKA WASHINGTON:

Qaybta 1. RCW 28A.605.005 iyo 2025 c 369 s 501 ayaa mid kasta wax laga beddelay si

u qoran sidatan:

(1) Qayb-hoosaadyada 2 ilaa 5 ee qaybtan waxay dib u soo celinayaan sharciyada Hindisaha 2081 ee dammaanad qaadaya xuquuqaha waalidiinta, oo ay ku jiraan dib u eegista agabyada waxbarashada ee carruurtooda, helitaanka diiwaannada dugsigooda, in la ogeysiyo marka adeegyada caafimaadka la bixiyo, iyo ka bixitaanka xiisadaha qaarkood. Ansixinta codbixiyaha ee hindisahan waxay bixinaysaa labo sanno oo ilaalin dastuuri ah oo looga soo horjeedo faragelinta sharci-dejinta, taas oo xoojinaysa sharciyada Hindisaha 2081 ee dammaanad qaadaya xuquuqda waalidiinta.

(2) Dadku waxay ogaadeen in: (a) Waalidiintu waa daneeyayaasha koowaad ee korinta carruurtooda; (b) ka-qaybgalka waalidiintu waa qodob muhiim u ah kordhinta guusha ardayga; iyo (c) helitaanka macluumaadka ardaygu wuxuu dhiirigeliyaa ka-qaybgalka waalidiinta oo ka ballaaran.

(3) Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah ee carruurta dugsiyada dadweynaha ee ka yar 18 sano jir waxay leeyihiin dhammaan xuquuqaha soo socda:

(a) In la baaro buugaagta waxbarashada, manhajka, iyo agabka dheeriga ah ee lagu isticmaalo fasalka ilmahooda;

(b)(i) Si ay u kormeeraan diiwaannada dugsiga dadweynaha ee ilmahooda si waafaqsan RCW 28A.605.030, iyo si ay u helaan koobbiga diiwaannada ilmahooda muddo 10 maalmood oo shaqo gudahood ah kadib marka ay soo gudbiyaan codsi qoraal ah, ha ahaato si elektaroonig ah ama warqad ahaan.

(ii) Waalidiinta ama mas'uuliyiinta sharciga ah waa inaan looga baahnaa inay shakhsi ahaan u yimaadaan ujeedooyinka codsashada ama xaqiiqinta codsiga diiwaannada dugsiga dadweynaha ee ilmahooda.

(iii) Wax kharash ah laguma soo rogi karo waalidka ama mas'uulka sharciga ah si uu u helo diiwaannadaas oo kale si elektaroonig ah. Kharash kasta oo loo qaado koobbiga xaashida ah ee diiwaannadaas oo kale ah waa inuu ahaadaa mid macquul ah laguna qeexay siyaasada iyo habraacyada rasmiga ah ee degmada dugsiga.

(iv) Diiwaannada dugsiga dadweynaha waxaa ka mid ah dhammaan kuwan soo socda:

(A) Diiwaannada waxbarashada oo ay ku jiraan, balse aan ku xaddidnayn, tijaabada iyo

dhibcaha qiimeynta si waafaqsan RCW 28A.230.195;

(B) Diiwaannada caafimaadka ama caafimaad-qabka;

(C) Diiwaannada la-talinta caafimaadka dhimirka ee kasta;

(D) Diiwaannada la-talinta xirfadda kasta;

(E) Diiwaannada asluubta, oo ay ku jiraan eryidda iyo ka-joojinta hoos yimaada RCW 28A.600.015;

(F) Diiwaannada imaanshaha, oo ay ku jiraan maqnaanshaha aan cudur-daarka lahayn si waafaqsan RCW 28A.225.020;

(G) Diiwaannada la xiriira baaritaanka ilmaha ee caqabadaha waxbarashada, xaaladaha gaarka ah, qorsheyaasha barnaamijka waxbarashada shakhsi ahaanneed, ama qorshaha lagu meel

mariyay qaybta 504 ee xeerka dhaqan celinta ee 1973; iyo

(H) Wixii kale ee faylal, dukumentiyiyo, ama kuwo kale oo u gaar ah ardayga agabyo ah oo uu hayo dugsiga dadweynaha;

(c) In la helo ogeysiis hore marka adeegyo caafimaad loo fidinayo ilmahooda, marka laga reebo halka looga baahan yahay daaweyn caafimaad oo degdeg ah. Xaaladaha looga baahan yahay daaweyn caafimaad oo degdeg ah, waalidka iyo mas'uulka sharciga ah waa in la ogeysiiya sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah ka dib marka daaweynta la bixiyo;

(d) Si loo helo ogeysiis marka adeeg kasta oo caafimaad ama dawooyin kasta la siiyay ilmahooda taas oo keenni karta saameyn maaliyadeed oo kasta oo ku timaada lacag bixinnada caymiska caafimaadka ee waalidka ama mas'uulka sharciga ah ama lacagaha qaybta laga bixiyo ee waalidka ama mas'uulka sharciga ah;

(e) Si loo helo ogeysiis marka uu dugsigu si toos ah ama si dadban u habeeyo daaweyn caafimaad oo keenta daryeel daba-gal ah oo ka baxsan saacadaha caadiga ah ee dugsiga. Daryeelka dabagalka waxaa ka mid ah kormeerka carruurta ee xanuunnada iyo muruq-xanuunka, daawooyinkiisa, aaladihiisa caafimaadka sida ulaha lagu socdo, iyo daryeelkiisa dareenka ee loo baahan yahay hannaanka bogsashada;

(f) In la helo ogeysiin degdeg ah haddii fal dambiyeed loo arko in laga galay ilmahooda ama uu galay ilmahooda;

(g) In la helo ogeysiis degdeg ah haddii fulinta sharciga shaqaalaheedu ay su'aalo weydiyaan ilmahooda, marka laga reebo xaaladaha halkaas oo waalidka ama mas'uulka sharciga ah lagu eedeeyay xadgudubka ama dayacaadda ilmaha;

(h) In ay helaan ogeysiin degdeg ah haddii ilmahooda laga kaxeeyo ama laga saaro dhismaha dugsiga dadweynaha iyada oo aan oggolaansho waalid laga helin, oo ay ku jirto in la joogo hoyga dhallinyarada ama "hoyga martigelinta" sida lagu qeexay RCW 74.15.020;

(i) In ay helaan dammaanad ah in dugsiga dadweynaha ee ilmahoodu uusan takoor ku sameyn doonin ilmahooda iyadoo lagu salaynayo caqiidooyinka diimeed ee dhabta ah ee qoyska ilmaha sida waafaqsan cutubka 28A.642 RCW;

(j) In la helo ogeysiis qoraal ah iyo fursadda ah in ilmihiisa laga saaro sahan kasta, meelayn kasta, su'aalo-waraysi kasta, waxqabadada jilitaanka kasta, duubista ilmihiisa kasta, ama ka-qaybgallada kale ee ardayga kasta ee ay ku jiraan su'aalo ku saabsan mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda:

(i) Khibradaha galmada ee ilmaha ama soo jiidashada ilmaha;

(ii) Aaminsanaanta qoyska ilmaha, anshaxa qoyska ilmaha, diinta qoyska ilmaha, ama xiriirada siyaasadeed ee qoyska ilmaha;

(iii) Dhibaato kasta oo caafimaadka maskaxda ama cilmi-nafsiga ah ee ilmaha ama xubin qoyska ah; iyo

(iv) Dhammaan sahanada, falanqeynta, qiimeynta ee hoos yimaada aagga uu daboolayo wax-ka-beddelka ilaalinta xuquuqda ardayga ee xeerka xuquuqda waxbarashada iyo sirta qoyska;

(k) Inuu helo ogeysiis qoraal ah iyo inuu haysto fursadda uu ilmihiisa uga saaro waxbarashada ku saabsan mawduucyada la xiriira dhaqdhaqaaqa galmada si waafaqsan RCW 28A.300.475;

(l) In laga helo dugsiga dadweynaha kalandarka dugsiga ee sannadlaha ah, ugu dambeyn 30 maalmood ka hor bilowga sannad-dugsiiyeedka, iyo in qoraal lagu ogeysiyo sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah wixii dib-u-eegis ah ee lagu sameeyo kalandarkaas. Jadwalka noocaas ah waa in lagu soo dhejiyaa webseedka dugsiga dadweynaha waana inuu ku jiraa, ugu yaraan, maalmaha imaanshaha ardayga iyo dhacdo kasta oo u baahan

Qoraalka buuxa ee Xeerka Hindisaha Lr. IL26-001

imaanshaha waalidka ama ardayga ee ka baxsan maalmaha ama saacadaha dugsiga ee caadiga ah;

(m) In qoraal ahaan lagu helo sannad kasta ama laga eego webseedka dugsiga dadweynaha liis dhammaystiran oo ah khidmad kasta oo loo baahan yahay iyo ujeeddadeeda iyo isticmaalkeeda iyo sharaxaad ku saabsan sida wax looga qaban karo dhibaatooyinka dhaqaale;

(n) Inaad qoraal ahaan ku hesho sannad kasta ama aad ka eegto webseedka dugsiga sharaxaadda xeerka labiska ee dugsiga looga baahan yahay ama dareeska ee loo dejiyay si waafaqsan RCW 28A.320.140, haddii ay khuseyso, ee ardayda; iyo

(o) In lala socodsiiyo haddii waxqabadka tacliimeed ee ilmahooda, oo ay ku jirto haddii ilmahooda la siiyay qorshaha waxbarashada ardayga, uu yahay mid khatar gelin kara awoodda ilmaha ee ah in loogu gudbiyo heerka darajada xigta iyo in loo soo bandhigo kulan fool-ka-fool ah oo lala yeesho.

macallinka fasalka ilmaha iyo maamulaha dugsiga si ay uga wada hadlaan kheyraad kasta ama xeellad kasta oo la heli karo si loo taageero loona dhiirigeliyo horumarka waxbarasho ee ilmaha

(4) Inkasta oo ay jiraan wax kasta oo lid ku ah, dugsiga dadweyne loogama baahna doono inuu bixiyo wax diiwaanno ama macluumaad ah oo ku saabsan diiwaannada caafimaadka ee ardayga, diiwaannada caafimaadka ee ardayga, ama diiwaannada la-talinta caafimaadka dhimirka ee ardayga oo la siinayo waalid inta uu socdo baaritaanka xadgudubka ama dayacaadda carruurta ee ay sameynayaan hey'ad kasta oo fulinta sharciga ah ama waaxda carruurta, dhallinyarada, iyo qoysaska halka waalidku uu yahay bartilmaameedka baaritaanka, ilaa waalidku uu ka helo amar maxkamadeed.

(5) Sida loogu isticmaalay qaybtan "dugsiga dadweynaha" wuxuu leeyahay macne la mid ah sida lagu dhex xusay RCW 28A.150.010.

((1) Golaha sharci-dejinta wuxuu ogaaday in: (a) Waalidiintu waa daneeyayaasha koowaad ee barbaarinta carruurtooda; (b) ka-qaybgalka waalidiintu waa qodob muhiim u ah kordhinta guusha ardayga; iyo (c) helitaanka macluumaadka ardaygu wuxuu dhiirigeliyaa ka-qaybgalka waalidiinta oo ballaaran.

(2) Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah ee carruurta ka diiwaan-gashan dugsiyada dadweynaha sida lagu qeexay RCW 28A.150.010 waxay leeyihiin xuquuqaha soo socda:

(a) Si ay u galaan qolka fasalka ee ilmahooda iyo waxqabadada uu dugsigu kafaala qaaday ee ilmahooda si ay u kormeeraan si waafaqsan RCW 28A.605.020 iyo si ay u baaraan manhajka, buugaagta waxbarashada, agabyada waxbaridda, iyo agabyada waxbaridda ee dheeriga ah ee looga isticmaalo qolka fasalka ee ilmahooda si waafaqsan siyaasadaha iyo habraacyada;

(b) Inay kormeeraan oo ay dib u eegaan diiwaannada waxbarashada ee ilmahooda iyo inay codsadaan oo ay helaan koobbiga diiwaannada waxbarashada ee ilmahooda muddo-macquul ah gudahood, laakiin aan ka badnayn 45 maalmood, marka la gudbiyo codsiga si waafaqsan xeerka xuquuqda waxbarashada iyo asturnaanta qoyska ee federaalka ee 1974, Title 20 U.S.C. Sec. 1232g, sida uu u dhaqangalay Janaayo 1, 2025, iyo RCW 28A.605.030.

(ii) Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah ee dooranaya inay kormeeraan oo ay dib u eegaan diiwaannada waxbarashada ee ilmahooda looma baahnaa karo in dugsiga dadweyne uu ka dalbado inay shakhsi ahaan u yimaadaan ujeedooyinka codsashada ama xaqiijinta codsiga ee diiwaannada waxbarashada ee ilmahooda, haddii dugsiga dadweynuhu uu xaqiijin karo aqoonsiga qofka codsanaya.

(iii) Wax lacag ah laguma soo rogi karo waalidka ama mas'uulka sharciga ah si uu u kormeero ama u dib u eego diiwaannada

waxbarashada ee ilmahooda ama kharashyada raadinta ama soo-saarista diiwaannada waxbarashada. Lacag kasta oo laga qaado koobbiga diiwaannadaas oo kale ah waa inay ahaataa mid-macquul ah, waana inaysan ka horjoogsan waalidka, mas'uulka sharciga ah, ama cunugga u qalma inuu isticmaalo xuquuqda kormeeridda iyo dib-u-eegista diiwaannada waxbarashada ee cunugga, waana in lagu qeexo siyaasadaha iyo habraacyada rasmiga ah ee degmada dugsiga iyo dugsiga dadweynaha.

(iv) Diiwaannada waxbarashada waxaa loola jeedaa diiwaannada rasmiga ah, faylasha, iyo xogta si toos ah ula xiriirta ardayga isla markaana uu hayo dugsiga dadweynuhu oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, diiwaannada ka kooban dhammaan agabka lagu hayo faylka isbiirsaday ee ilmaha, sida xogta aqoonsiga guud, diiwaannada imaanshaha iyo kuwa shaqada akadeemiyadeed ee la dhammaystiray, diiwaannada guusha iyo natiijooyinka-imtixaannada qiimeynta, xaaladda anshaxa, hab-maamuusyada-imtixaanka, iyo barnaamijyada waxbarashada ee shakhsi-ahaanneed;

(v) Diiwaannada waxbarashadu kuma jiraan diiwaannada uu haysto oo keliya qofka sameeyay, ee loo isticmaalo oo keliya kaalmo-xusuuseed shakhsi ah, oo aanay heli karin ama aan loo muujin karin qof kale marka laga reebo beddele ku meel-gaar ah oo u ah qofka sameeyay diiwaanka;

(vi) Ma jirto wax ku jira qaybtan oo beddelaya qodobbada helitaanka iyo kashifaadda ee lagu dhisay cutubka 70.02 RCW ee la xiriira macluumaadka daryeelka caafimaadka;

(c) In la helo ogeysiis marka la helo warbixin sheegaysa in fal-dambiyeed lagu eedeeyay in laga galay ilmahooda hantida dugsiga dhexdiisa inta lagu jiro maalinta dugsiga ama inta lagu jiro waxqabad uu dugsigu kafaala qaaday oo ay ku jirto ogeysiis-degdeg ah haddii ay toogasho ka dhacday hantida dugsiga dhexdiisa, ama ilmahooda loo hayo sabab-macquul ah oo ku saabsan ku-lug-lahaanshaha fal-dambiyeed ka dhacay hantida dugsiga dhexdiisa inta lagu jiro maalinta dugsiga;

(d) Inuu helo ogeysiis-degdeg ah marka la helo warbixin sheegaysa in ilmahooda lagu eedeeyay inuu yahay dhibbanaha, bartilmaameedka, ama qaataha dhibaataayn jireed ama mid-galmo, anshax-xumo-galmo, ama weerar uu geystay shaqaale dugsiga ama qandaraasle dugsiga, sida uu dhigayo RCW 28A.320.160;

(e) In la helo ogeysiis-degdeg ah haddii shaqaalaha fulinta sharciga ay su'aalo weydiyaan ilmahooda inta lagu guda jiro su'aalo-weydiin-xabsi ah oo ka dhacaysa dugsiga inta lagu guda jiro maalinta dugsiga, marka laga reebo xaaladaha halka waalidka ama mas'uulka sharciga ah lagu eedeeyay inuu si-xun ula dhaqmay ama dayacay ilmaha;

(f) In aan ilmahooda laga saarin goobaha ama dhismeyaasha dugsiga inta lagu jiro saacadaha dugsiga iyada oo aan oggolaansho laga helin waalidka ama mas'uulka sharciga ah sida ku cad-qodobbada ku jira RCW 28A.605.010. Ma jirto wax qaybtan ka mid ah oo saameynaya qodobbada ku jira RCW 74.15.020, 13.32A.082, 26.44.050, ama 26.44.115;

(g) In ilmahoodu ay helaan waxbarasho dadweyne oo ku taal goob-uu ka mamnuuc yahay midab takoor ka ku salaysan jinsiga, qolada, caqiidada, diinta, midabka, asalka qaranka, halyeeyga si-sharafta-leh looga saaray ciidanka ama xaaladda askarinimo, u-janjeeridda-galmada, muujinta jinsiga, aqoonsiga jinsiga, jiritaanka naafanimokasta oo dareen, maskax, ama jir ah, ama isticmaalka-eeysa-hagaha ah ee tababaran ama xayawaanka adeegga ee uu isticmaalo qofka-naafada ah sida ku cad cutubyada 28A.640 iyo 28A.642 RCW;

(h) Sida waafaqsan ilaalinta xuquuqda ardayga, Ciwaanka 20 U.S.C.: Qaybta 1232h, xuquuqda helitaanka ogeysiis qoraal ah iyo fursadda looga saari karo ilmahooda sahan-kasta, falanqeyn-kasta, ama-qiimeyn-kasta oo kashifaya macluumaadka khuseeya:

Qoraalka buuxa ee Xeerka Hindisaha Lr. IL26-001

(i) Xiriirada siyaasadeed ama aaminsannaanta ardayga ama waalidka ardayga ama mas'uulka sharciga ah ee ardayga;

(ii) Dhibaatooyinka maskaxda ama nafsiga ah ee ardayga ama qoyska ardayga;

(iii) Habdhaqanka iyo dabeecadaha galmada;

(iv) Habdhaqan sharci-darro ah, lidka ku ah bulshada, is-eedayn ah ama bahdil ah;

(v) Qiimeyno dhaleecayn ah oo ku saabsan shakhsiyaadka kale ee ay jawaab-bixiyeeyashu la leeyihiin xiriir qoys oo dhow;

(vi) Xiriirada mudnaanta leh ama kuwa u dhigma ee sharci ahaan loo aqoonsan yahay, sida kuwa qareennada, kuwa dhakhaatiirta, iyo kuwa wasiirrada;

(vii) Dhaqannada diimeed, xiriirada diimeed, ama aaminsannaanta diimeed ee ardayga, waalidka ardayga, ama mas'uulka sharciga ah ee ardayga; ama

(viii) Dakhli, marka laga reebo kan uu sharcigu u baahan yahay si loo go'aamiyo u qalmitaanka ka-qaybgalka barnaamijka ama helitaanka kaalmada maaliyadeed ee hoos timaada barnaamijkaas;

(i) In la helo ogeysiis qoraal ah iyo in la haysto fursadda ah in ilmahooda laga saaro waxbarashada caafimaadka galmada ee dhammaystiran sida waafaqsan RCW 28A.300.475;

(j) In laga helo dugsiga dadweynaha kalandarka dugsiga ee sannadlaha ah, ugu dambeyn 30 maalmood ka hor bilowga sannad dugsiiyeedka, iyo in qoraal lagu ogeysiyo sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah wax kasta oo dib-u-eegis ah oo lagu sameeyo kalandarkaas. Jadwalka noocaas ah waa in lagu soo dhejiyaa webseedka dugsiga dadweynaha waana inuu ugu yaraan ka koobnaadaa maalmaha imaanshaha ardayga iyo dhacdo kasta oo la yaqaan oo u baahan imaanshaha waalidka, mas'uulka sharciga ah, ama ardayga ee ka baxsan maalmaha ama saacadaha dugsiga ee caadiga ah;

(k) In qoraal ahaan lagu helo sannad kasta ama laga eego webseedka dugsiga dadweynaha liis dhammaystiran oo ah khidmad kasta oo loo baahan yahay iyo ujeeddadeeda iyo isticmaalkeeda iyo sharaxaadda sida dhibaatooyinka dhaqaale loogu tixgelin karo maamulidda khidmadaha;

(l) Inaad qoraal ku hesho sannad kasta ama aad ka eegto webseedka dugsiga dadweynaha sharaxaadda xeerka labiska ee dugsiga looga baahan yahay ama yunifoomba ee loo dejiyay si waafaqsan siyaasadaha uu dejiyay uuna oggolaaday RCW 28A.320.140, haddii ay khuseyo, ee ardayda;

(m) In lala socodsiiyo haddii horumarka waxbarasho ee ilmahooda, oo ay ku jirto xuquuqda ay u leeyihiin inay helaan warbixinnada xilliyeedka ah ee ku saabsan koritaanka iyo horumarka waxbarasho ee ilmahooda si waafaqsan RCW 28A.150.240 iyo inay helaan ogeysiiska waxqabadka ilmahooda ee imtixaannada iyo qiimeynta heerarka barashada gobolka si waafaqsan RCW 28A.230.195, iyo haddii waxqabadkaas, uu yahay mid khatar gelin kara awoodda ilmaha ee ah in loo dallacsiyo heerka darajada xigta. Waalidka ama mas'uulka sharciga ah wuxuu sidoo kale xaq u leeyahay inuu codsado kulan fool-ka-fool ah oo uu la yeesho macallinka fasalka ee ilmaha iyo maamulaha ilmaha si looga wada hadlo kheyraad kasta ama xeellad kasta oo diyaar ah si loo taageero loona dhiirigeliyo horumarka waxbarasho ee ilmaha;

(n) In cabasho laga gudbiyo magaca ilmahooda sida uu dhigayo RCW 28A.600.477 ee la xiriirta dhibaataaynta, cagajugleynta, iyo xoogsheegashada;

(o) In ilmahoodu u qalmo is-diiwaan gelinta degmada dugsiga haddii loo beddelo, ama ay sugayaan in loo beddelo, xarun ciidan oo ku dhex taal gobolka si waafaqsan RCW 28A.225.216;

(p) Si loo codsado is-diiwaan gelinta ilmahooda ee dugsi axdi oo lagu dhisay cutubka 28A.710 RCW;

(q) In ilmahoodu u qalmo iyada oo aan la haysan deganaansho sharci ah ee diiwaan gelinta degmada dugsiga si waafaqsan RCW 28A.225.215;

(r) In ilmahooda oo luqaddiisa koowaad aysan ahayn Ingiriis ay helaan waxbarasho iyo adeegyo dheeri ah iyada oo loo marayo barnaamijka waxbarashada labada luqadood ee kala guurka ah si waafaqsan RCW 28A.150.220;

(s) In la helo ogeysiis sannadle ah oo ku saabsan siyaasadaha helitaanka luqadda ee dugsiga dadweynaha iyo adeegyada helitaanka luqadda ee dugsiga dadweynaha, xuquuqda waalidiinta ee adeegyada helitaanka luqadda ee bilaashka ah marka loo eego Title VI ee xeerka xuquuqda madaniga ah ee 1964, 42 U.S.C. Sec. 2000d, et seq., iyo macluumaadka xiriirka ee adeeg kasta oo ah adeegyada helitaanka luqadda ee hoos yimaada RCW 28A.183.040;

(t) Si loo codsado diiwaan gelinta ilmahooda ee degmada dugsiga ee aanay deganayn si waafaqsan RCW 28A.225.220, 28A.225.225, iyo 28A.225.230;

(u) In lagu ogeysiyo maqnaanshaha aan cudur daarka lahayn iyo in laga qayb qaato dadaallada lagu ciribtirayo ama lagu yaraynayo maqnaanshaha ilmahooda si waafaqsan RCW 28A.225.015, 28A.225.018, iyo 28A.225.020;

(v) Si loo codsado, marka loo eego RCW 28A.155.090, macluumaad ku saabsan barnaamijyada waxbarashada gaarka ah iyo taageerada ilmahooda haddii ilmahoodu u qalmo balse uusan helin adeegyada waxbarashada gaarka ah, oo ay ku jirto xanuun dartiis;

(w) Si loo codsado racfaan loo gudbinayo Kormeeraha Guud ee Waxbarashada marka loo eego RCW 28A.155.080 haddii ilmahooda naafada ah loo diiday fursadda barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee degmada dugsiga ama dugsiga dadweynaha; iyo

(x) Si loo helo dhegeysiyada hannaanka saxda ah ee waxbarashada gaarka ah ee ku saabsan ilmahooda sida uu dhigayo RCW 28A.155.020.

(3) Iyadoo ay jirto wax kasta oo lid ku ah, dugsi dadweyne loogama baahna doono inuu bixiyo wax diiwaan ama macluumaad ah oo ku saabsan daryeelka caafimaadka ee ardayga, shaqada bulshada ee ardayga, la-talinta ardayga, ama diiwaannada asluubta ee ardayga oo la siinayo waalidka ama mas'uulka sharciga ah ee eedaynaha ka ah dacwad dambiyeed oo ardaygu yahay dhibbanaha magacaaban ama inta ay socoto baaritaanka xadgudubka ama dayacaadda carruurta oo ay sameynayaan hey'ad kasta oo fulinta sharciga ah ama waaxda carruurta, dhallinyarada, iyo qoysaska oo waalidka ama mas'uulka sharciga ahi uu yahay bartilmaameedka baaritaanka, ilaa waalidka ama mas'uulka sharciga ahi uu helo amar maxkamadeed.

(4) Ma jirto wax qaybtan ka mid ah oo abuuraya xuquuq dacwo oo gaar ah:))

QAYBTA CUSUB. Qaybta 2. Qodobbada xeerkan waa in si ballaaran loo fasiraa si loo hirgeliyo siyaasadaha, ujeedooyinka, iyo ujeeddada xeerkan.

QAYBTA CUSUB. Qaybta 3. Haddii wax kasta oo ka mid ah xeerkan ama isticmaalkiisa uu qof ama xaalad uu yahay mid aan ansax ahayn, inta ka hartay xeerka ama ku-dhaqanka qodobka ee ku aaddan dadka kale ama xaaladaha kale ma saameyn doonto.

QAYBTA CUSUB. Qaybta 4. Xeerkan waxaa loo yaqaanaa waxaana loo soo xigan karaa sidii Xeerka Xuquuqda Waalidiinta ee Washington.

Xeerka Hindisaha Lr. IL26-638

Xeerka Hindisaha Lr. IL26-638 wuxuu khuseeyaa ka-qaybgalka ciyaaraha isboortiska ee dugsiyada K-12.

Xeerkan wuxuu mamnuuci doonaa ardayda uu ku qeexaayo inay yihiin “kuwo lab ahaan u dhashay” inay u tartamaan hawlaha ciyaaraha isboortiska ee dugsiyada qaarkood ee loogu talagalay ardayda dheddigga ah oo keliya. Wuxuu u baahnaan doonaa xaqiijinta jinsiga bayoolajiga ah ee ay bixiyaan bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee ardayda.

Ma tahay in xeerkan loo hirgeliyo sharci ahaan?

Haa

Maya

Bayaanka sharaxaadda

Sharciga Sida uu Hadda u Jiro

Gudaha Washington, degmooyinka dugsiga waxay bixin karaan fursadaha isboortiska ee manhajka ka baxsan ee ardayda. Isboortiyadaas waa in loo fidiyaa dhammaan ardayda dugsiyada dadweynaha iyada oo aan loo eegin jinsiga, laakiin dugsiyada dadweynaha waxay bixin karaan kooxo ciyaaraha isboortiska oo gooni ah oo ku salaysan jinsiga. Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada ayaa sidoo kale dejiya xeerar iyo tilmaamo lagu cirib-tiraayo takoorka isboortiska ee ardayda, xeerarkaasna waxay mamnuucayaan takoorka ku salaysan jinsiga iyo aqoonsiga jinsiga.

Dugsiyada K-12 ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee Washington waxay oggolaan karaan ciyaartoyda gaarka ah iyo kooxaha inay la tartamaan ciyaartoyda iyo kooxaha ka socda dugsiyada kale. Dugsiyada dadweynaha, guddiga agaasimeyaasha ee degmada dugsiga ayaa mas’uul ka ah nidaaminta waxqabadayadan ciyaaraha isboortiska, laakiin waxay mas’uuliyaddaas u wakiilan karaan urur aan faa’iido doon ahayn, sida Washington Ururka Hawlaha Iskuulada Dhexdooda (WIAA). Urur aan faa’iido doon ahayn oo nidaamiya isboortiska dugsiyada dhexdooda ah ma samayn karo takoor ku salaysan jinsiga, waana inuu lahaadaa xeerar iyo siyaasado qoran oo khuseeya ka-qaybgalka ardayga.

Saameynta Xeerka La Soo Jeediyay Haddii La Ansixiyo

Haddii la ansixiyo, hindisahan waxa uu beddeli doonaa xeerarka ka-qaybgalka ee isboortiska dugsiyada dhexdooda ah. Hindisahan waxa uu, luqaddiisa u gaarka ah dhexdeeda, ka mamnuucayaa “ardayda lab ahaan u dhashay inay la tartamaan iyo inay ka hor tartamaan ardayda dheddigga ah” kooxaha isboortiska ama tartamada shakhsiga ah ee loogu talagalay ardayda dheddigga ah oo keliya. Tani waxay guud ahaan ka hor istaagi lahayd gabdhaha taraanisjendarka ah inay ka qayb galaan kooxaha isboortiska ee gabdhaha. Mamnuuciddaan waxay saameyn doontaa dugsiyada dadweynaha ee K-12 iyo sidoo kale dugsiyada gaarka loo leeyahay ee ka qaybqaata WIAA ama ururada la midka ah ee aan faa’iido doonka ahayn.

Ardayda raba inay ka qaybqaataan kooxaha isboortiska ee dugsiyada dhexdooda ama dhacdooyinka gaarka ah ee loogu talagalay ardayda dheddigga ah oo keliya waxay u baahan doonaan inay bixiyaan foom xaqiijinaya “jinsiga dhalashada” ee ardayga. Foomkaas waa inuu saxiixaa bixiyaha daryeelka caafimaadka ee gaarka ah ee ardayga. Xaqiijintu waa inay ku salaysnaataa habka dhismaha jirka ee taranka ee ardayga, qaab-dhismeedka hiddasidaha ee ardayga, ama heerarka testaastaroonka ee caadiga ah ee gudaha jidhka ardayga looga soo saaro. Ardayda ayaa sidaas darteed ku qasbanaan doona inay maraan nooc ka mid ah qiimeyn caafimaad oo ku saabsan jinsigooda si ay uga qayb qaataan isboortiska dugsiyada dhexdooda ah ee loogu talagalay ardayda dheddigga oo keliya.

Bayaanka Maaliyadda

Xogta Kooban

Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyaashu, Hindisaha Xeerka Lr. IL26-638 wuxuu mamnuuci doonaa ardayda uu ku qeexayo “inay yihiin lab dhalasho ahaan” inay ku tartamaan waxqabadayada ciyaaraha isboortiska ee dugsiga qaarkood ee loogu talagalay ardayda dheddigga ah oo keliya. Waxay u baahan tahay xaqiijinta jinsiga bayoolajiga ah ee bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee ardayda. Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada ayaa geli doona kharashyo yar si loo cusbooneysiyo hagidda hadda jirta. Degmooyinka dugsiga ee deegaanka ayaa sidoo kale geli kara kharashyo si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan siyaasadaha, habraacyada, xeerarka, iyo shuruudaha kale ee jira, laakiin saameyntan maaliyadeed waa mid aan la qiyaasi karin.

Malaynta guud

Taariikhda dhaqan galka ee hindisaha waa Diseembar 3, 2026.

Qodobbada hindisuhu waxay khuseeyaan mustaqbalka, ee ma aha dib u noqoshada.

Qiyaasuhu waxay adeegsadaan sannad-maaliyadeedka gobolka (SFY) ee Julaa 1 ilaa Juun 30. Sannad-maaliyadeedka gobolka ee 2026 waa Julaa 1, 2025, ilaa Juun 30, 2026.

Dakhliga

Hindisaha ma saameyn doono dakhliga gobolka ama kan deegaanka.

Kharashyada

Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada waxaa ku bixi doona kharash hal mar ah oo qiyaas ahaan dhan \$21,000 gudaha SFY 2026 si loo cusbooneysiyo tilmaamaha hadda jira si loola waafajiyo shuruudaha hindisaha. Degmooyinka dugsiga ee deegaanka waxay u badan tahay inay sidoo kale geli doonaan kharashyo si dib-u-eegis loogu sameeyo siyaasadaha, habraacyada, xeerarka, iyo shuruudaha kale ee hadda jira, laakiin saameyntan maaliyadeed waa mid aan la qiyaasi karin.

Bayaanka lagu taageerayo

Ku codee haa si loo ilaaliyo caddaaladda isboortiska gabdhaha.

Ciyaartoyda haweenka ah waxay u qalmaan fursado caddaalad ah si ay u dhistaan kalsoonidooda, u horumariyaan xirfadahooda, iyo inay u hiigsadaan yoolalkooda. Aan ilaalino fursadahaas oo aan xaqiijino xuquuqda loogu soo halgamay ee lagu dhisay Title IX sannadkii 1972, taas oo ballaarisay helitaanka ciyaaraha isboortiska ee haweenka iyadoo la aqoonsanayo daruuriga ay leedahay qaybta dheddigga. Washington hadda waxay oggolaataa in raggu ay la tartamaan gabdhaha, iyadoo wiiqaysa fursadaha ay jilalkii iyaga ka horreeyay u soo halgameen si ay u xaqiijiyaan.

Ansixinta IL26-638 waxay Washington waafajin doontaa siyaasadaha isboortiga adduunka.

Sharciga federaalka, Ururka Tennis-ka Haweenka, Ciyaaraha Fudud ee Adduunka, iyo Guddiga Olombikada Caalamiga ah ayaa dhammaantood meel mariyay siyaasado lagu ilaalinayo u qalmiitaanka qaybta dumarka. Bishii Maarso 2026, madaxweynaha IOC ayaa sheegay, “Aad bay u caddahay inaysan caddaalad noqonayn in ragga dhanka bayoolajiga ah ay ku tartamaan qaybta dumarka.”

Ku Codeynta haa waxay siinaysaa dhammaan ardayda fursadda ay ka qaybgalaan isboortiska dugsiyada dhexdooda ah.

Ogolaansho caafimaad ayaa mar horeba loo baahan yahay si badbaado leh looga qaybqaato. Ardaydu waxay ku tartami lahaayeen qaybta waafaqsan jinsigooda, ee lagu xaqiijiyay inta lagu guda jiro daryeelka aasaasiga ah ee joogtada ah, ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ee ay ku talisay Akadeemiyada Mareykanka ee Dhakhtarrada Carruurta (American Academy of Pediatrics). Inta lagu guda jiro booqasho gaar ah oo oggolaansho laga helay, xirfadle caafimaad oo shati haysta ayaa xaqiijin lahaa jinsiga iyadoo lagu salaynayo diiwaannada dhalashada ee ardayga, taariikhda caafimaadkiisa/keeda iyo/ama baaritaan jireed oo caadi ah oo aan faragelin lahayn.

Washington waxay tixgelin kartaa arday kasta iyadoo aqoonsanaysa in qaybaha ciyaaraha isboortiska ee ku salaysan jinsiga ay lagama maarmaan yihiin

Ciyaaryahanad waa inaysan lumin booskeeda bilowga, biladdeeda, horyaalkeeda, ama fursaddeeda qorista kulliyadda sababtoo ah qaybtii loo abuuray iyada oo aan la ilaalin.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Ha u oggolaan in mucaaradku ku marin habaabiyo. IL26-638 uma baahna baaritaanno faragelin leh ama qaali ah. Daryeelka caafimaadka carruurta ee aasaasiga ah ee caadiga ah ayaa mar horeba xaqiijiya jinsiga; u wareejinta diiwaankaas ee isboortis waa ku filan tahay. Faa’iidada ciyaaraha isboortiska ee ragga waa mid si fiican u qotonta. Natiijooyinka tartanka Washington waxay diiwaangelinayaan ugu yaraan 269 kaalmo oo ay galeen ciyaartoyda ragga ah ee ku tartamaya qaybaha tartannada dugsiyada ee gabdhaha, oo ay ku jiraan 74 kaalinta koowaad iyo 156 oo ku dhammaaday kaalinta saddexda ugu sareeya ah. Hindisuhu qofna kama mamnuucayo isboortiska. Waxay si fudud u baahan tahay ka-qaybgal waafaqsan jinsiga qofka. Ku Codee haa.

Waxaa qoray: **Alesha Perkins**, Waalid iyo U-doodaha Waxbarashada, Qoraa Madax-bannaan; **Dori Whitford**, Tababaraha Dugsiga Sare, Qoroka Gaaban iyo Kuwa Masaafada Dheer; **Carol Brown**, Bilad-hayaha Maarta ee Olombikada, Xubinta Guddiga Doon-wadista, ICONS; **Erica Li**, MD, Dhakhtarka Carruurta ee Shahaadaysan; **Ahnaleigh Wilson**, Arday Ciyaaryahan ah, U-doodaha Isboortiska Gabdhaha; **Jess Grant**, Xubin, Dimuqraadiyiinta si ay u helaan Hab Xog Ogaal ah oo ku saabsan Jinsiga

Xiriirka: diagwash@gmail.com; www.di-ag.org

Bayaanka looga soo horjeedo

Ku Codee Maya Si Loo Ilaaliyo Dhammaan Gabdhaha

Dhammaanteen waxaynu doonaynaa caddaalad iyo badbaado xagga isboortiska ah, laakiin xeerkan si liidata loo qoray wuxuu u baahan doonaa in gabdhaha jira ugu yaraan 8 sanno ay maraan shahaado-siinta jinsiga ee caafimaadka ee faragelinta ah, taas oo qayb cusub ka ah baaritaanka caafimaad ee isboortiga. *Waxay waalidiinta ka mamnuucaysaa inay isticmaalaan shahaadooyinka dhalashada.* Qaybta 2 waxay sheegaysaa in dhakhaatiirta ay tahay inay gabdhaha marsiiyaan baaritaanno dhexgal ah oo ku saabsan “xubnahooda taranka,” ama baaritaanno hiddasidaha ama hormoonnada oo qaali ah. *Shuruudahan waxay khuseeyaan gabdhaha oo keliya, wiilasha waa laga dhaafay.*

Ku Codee Maya Sababtoo ah Waa Soo Jeedinta Ugu Darran ee Nooceeda ah ee Dalka Mareykanka

Hindisahan waxaa maalgeliyay deeq-bixiye weyn oo aad u muxaafid ah si looga jeediyo dareenka kharashyada kordhaya, loo dhiirigeliyo nacaybka, loona kala qaybiyo bulshooyinkayaga. Waxay siyaasad ku dhex ciyaaraysaa carruurta, waxayna gabdhaha gelinaysaa khatar.

Ku Codee Maya Sababtoo ah Dhakhaatiirta iyo Kalkaaliyeyaasha ayaa uga Digaya Inay u Baahan Tahay Baaritaanno Faragelin ah oo Xubnaha Taranka ah Oo lagu Sameeyo Gabdhaha

WA State Nurses Association, U doodayaasha Isbahaysiga Waalidnimada ee La Qorsheeyay, iyo dhakhaatiirtu waxay ka digayaan in xeerkani uu gabdhaha u soo bandhigi doono baaritaannada xubnaha taranka oo caafimaad ahaan aan loo baahnayn, wax laga xishoodo, isla markaana waxyeello keeni kara. Maanta, ardaydu waxay sii ahaanayaan iyagoo dhar u wada xiran inta lagu jiro baaritaannada jireed ee isboortiska. Qaar badan oo ka mid ah 147,500 gabdhood ee gobolka Washington ee aan lahayn dhakhtar qoys oo joogto ah ayaa waxaa lagu samayn doonaa baaritaannada xubnaha taranka oo ay samaynayaan dad gabi ahaanba shisheeye ah.

Ku Codee Maya Sababtoo ah Waxay Gabdhaha Ka Niyad-jabinayso Ciyaarista Isboortiga

Tababareyaasha iyo ciyaartoydu waxay sheegayaan haddii aan si dhab ah u daryeeli lahayn isboortiska gabdhaha aynaan u dhigi lahayn caqabado dheeraad ah gabdhaha sida shuruudaha baaritaanka xubnaha taranka ee faragelinta ah. Mamnuuciddan guud ee gobolka oo dhan ah ee 5 - 10 gabdhood oo trans ah looga saarayo kooxaha dugsiga waxay saameyn xun ku yeelan doontaa dhammaan gabdhaha, iyadoo aan meelna looga tagayn go’aannada kiis-kiis ah.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

IL26-638 waxaa ka soo horjeeda dhakhaatiirta carruurta, kalkaaliyeyaasha, waalidiinta, iyo kooxaha ka hortagga xadgudubka galmada sababtoo ah waxay takooraysaa gabdhaha waxayna gelinaysaa khatar waxyeello ah. Maanta gabdhaha dhigta dugsiyada hoose, dhexe, iyo sare waxay ahaanayaan kuwo dhar buuxa xiran inta lagu guda jiro baaritaannada jireed ee isboortiska. Dhakhaatiirtu waxay sheegayaan in xeerkan warqadda codbixinta ee si liidata loo qoray uu gabdhaha u horseedi doono baaritaanno cusub oo xubnaha taranka ah oo faragelin leh. Xeerkan - oo ah kan ugu daran dalka - waxa uu ka dhaafayaa wiilasha, waxa uuna waalidiinta ka mamnuucayaa isticmaalka shahaadooyinka dhalashada. Ku Codee Maya si loo ilaaliyo gabdhaha.

Waxaa qoray: **Justin Gill**, APRN, Madaxweynaha, Ururka Kalkaaliyeyaasha Gobolka WA; **Courtney Normand**, Agaasimaha Gobolka WA, U doodayaasha Isbahaysiga Waalidnimada ee La Qorsheeyay; **Karen Crowley**, Madaxweynaha, Ururka Haweenka Codbixiyeyaasha ee WA; **Grace Shih**, M.D., Dhakhtarka Qoyska; **Katie Johnson**, RN, Kalkaaliyaha Dugsiga ee Hawlgabka ah; **Paul Charbonneau**, Tababaraha Lagdanka Gabdhaha ee Dugsiga Sare

Xiriirka: NoHateInWASate.org/About-I-638; info@nohateinwastate.org

Qoraalka buuxa ee Xeerka Hindisaha Lr. IL-26-638

XEER Khuseeya difaacidda sinnaanta isboortiska dugsiyada dhexdooda; wax-ka-beddelaya RCW 28A.600.200 iyo 28A.640.020; ku daraya qayb cusub cutubka 28A.600 RCW; iyo abuuraya qaybo cusub.

HA NOQOTO MID AY SHARCI KA DHIGEEN DADKA GOBOLKA WASHINGTON:

QAYBTA CUSUB. Qaybta 1. Dadku waxay ogaadeen:

(1) Sharciga hadda jira ee gobolka Washington iyo siyaasadaha degmada dugsiga waxay ardayda uga baahan yihiin inay maraan baaritaan jireed oo joogto ah ka hor inta aysan ka qaybgelin isboortiska dugsiyada dhexdooda ah, kaas oo ay ku jirto dukumentiga jinsiga ardayga ee loo qoondeeyay markii uu dhashay;

(2) Shuruuddan la dejiyay waxay bixisaa asaas la isku halayn karo oo caafimaad ahaan la xaqiijiyay si loo go'aamiyo jinsiga bayoolajiga ah ee ardayga;

(3) Ilaalinta hufnaanta iyo caddaaladda isboortiska haweenka ee dugsiyada dhexdooda waxay lama huraan ka dhigaysaa in ardaydu ay ku tartamaan waxqabadyada ciyaaraha isboortiska ee waafaqsan jinsigii loogu qoondeeyay dhalashada; iyo

(4) Ka faa'iidsiga hannaanka baaritaanka jireed ee jira si loo xaqiijiyay jinsiga bayoolajiga ah wuxuu xaqiijinayaa sinnaanta, ammaanka, iyo dheelirka tartanka ee isboortiska loogu talagalay oo keliya ardayda dheddigga ah, iyadoo la ixtiraamayo xuquuqda iyo fursadaha dhammaan ka-qaybgaleyaasha.

Qaybta 2. RCW 28A.600.200 iyo 2012 c 155 s 2 mid kasta waxaa wax ka beddel lagu sameeyay si loo akhriyo sidatan:

(1) Guddiga agaasimeyaasha ee degmo kasta oo dugsi waxaa halkan lagu siiyay oo ay tahay inay isticmaalaan awoodda ay ku maamulayaan, ku kormeerayaan, kuna nidaaminayaan socodsiiinta waxqabadyada ciyaaraha isboortiska ee dugsiyada dhexdooda iyo waxqabadyada kale ee ka baxsan manhajka ee dugsiyada dhexdooda ee leh dabeecad isboortis, dhaqan, bulsho ama madadaalo ee loogu talagalay ardayda degmada. Guddiga agaasimeyaasha ayaa u xilsaari kara xakamaynta, kormeerka iyo nidaaminta waxqabad kasta oo noocaas ah hey'addaas waxqabadyada dugsiyada dhexdooda ee Washington ee adeegyada la bixiyo, iyadoo la raacayo shuruudaha ((see-socda)) ((:))

((4)) ee lagu qeexay qaybtan.

(2) Ururka aan faa'iido doon ahayn ee iskaa-wax-u-qabsada ah ma kala takoori doono marka la eego shaqaaleysiiinta ama xubinnimada guddigiisa maamulka, ama haddii kale ee la xiriirta hawl kasta oo uu qabanayo, iyadoo lagu salaynayo qolada, caqiidada, asalka qaranka, jinsiga ama xaaladda guurka ((:))

((2(a))) (3) Xeer kasta iyo siyaasad kasta oo uu meel mariyay laguna dhaqmay ururka aan faa'iido doonka ahayn ee iskaa wax u qabso ah ee maamula ka-qaybgalka ardayga ee waxqabad kasta oo dugsiyada dhexdooda ah waa in lagu qoraa ((:)) iyo

((b)) Xeerarka iyo siyaasadahaas waa inay)) bixiyaan ogeysiiska sababaha iyo fursad caddaalad ah oo looga soo horjeesto sababahaas ka hor inta aan la gaarin go'aan kama dambeys ah oo lagu diiday codsiga ardayga ee ah inuu ka qaybgalo ama ka sii mid ahaado waxqabadka dugsiyada dhexdooda ah.

((3(a))) (4) Ururka ama hey'ad kale oo iskaa-wax-u-qabso ah oo aan faa'iido doon ahayn waxaa loo oggolaaday inuu ganaaxyo ku soo rogo jebinta xeerarka ee tababareyaasha, maamuleyaasha degmada dugsiga, maamuleyaasha dugsiga, iyo ardayda, sida ku habboon, si loo ciqaabo dhinaca ama dhinacyada gefka geystay ((:))

((b)) May)) laakiin wax ganaax ah laguma soo rogi karo arday ama ardayda ilaa ardayga ama ardaydu ay iyaga oo og u jebiyaan xeerarka mooyee ama ilaa ardaygu uu helo faa'iido tartan oo weyn ama uu si muuqata u dhibaatayno arday kale iyada oo loo marayo jebinta xeerka ((:))

((e))). Ciqaab kasta oo lagu soo rogo xadgudubyada xeerarka waa inay u dhigantaa dembiga ((:))

((d)) Mid kasta)) iyo mid kasta oo go'aan ah oo keena ciqaab waxaa loo tixgelin doonaa go'aan ka soo baxay degmada dugsiga ee qabanaysa hawsha uu ardaygu doonayo inuu ka qaybqaato ama uu ka qaybqaadanayay waxaana racfaan looga qaadan karaa si waafaqsan RCW 28A.600.205 iyo 28A.645.010 ilaa 28A.645.030.

((4)) (5) Degmooyinka dugsiga, degmooyinka ururka waxqabadyada dugsiyada dhexdooda ee Washington, iyo horyaallada ka qaybqaata waxqabadyada manhajka ka baxsan ee dugsiyada dhexdooda ah waa inaysan soo rogin ciqaabo ka daran xadgudubyada xeerka marka loo eego kuwa lagu soo rogi karo xeerarka ururka ama hay'adda tabaruka ah ee aan faa'iidada doonka ahayn.

((5)) (6) Siyaasadaha, habraacyada, xeerarka, iyo shuruudaha kale ee ay meel mariyeen degmada dugsiga ama hay'ad aan faa'iido doon ahayn oo is-xilqaantay si waafaqsan qaybtan waa inay waafaqsanaadaan qaybta 3-aad ee xeerkan.

(7) Sida loo adeegsaday qaybtan iyo RCW 28A.600.205, "isagoo og" waxaa loola jeedaa inuu leeyahay aqoon dhab ah oo ku saabsan ama inuu ku kaco iska indho-tir ula kac ah ama tixgelin la'aan taxaddar la'aan ah oo ku saabsan mamnuucidda ay khuseyso.

QAYBTA CUSUB. Qaybta 3. Qayb cusub ayaa lagu daray cutubka 28A.600 RCW si loo akhriyo sida soo socota:

(1) Siyaasadaha, habraacyada, xeerarka, iyo shuruudaha kale ee loo meel mariyay si waafaqsan RCW 28A.600.200 ee guddiga agaasimeyaasha degmada dugsiga ama urur aan faa'iido doon ahayn oo iskaa-wax-u-qabso ah waa inay ka mamnuucaan ardayda labka ah ee dhinaca bayoolajiga inay la tartamaan ama ka hor tartamaan ardayda dheddigga ah ee ku jira waxqabadyada ciyaaraha isboortiska ee leh kala saarid gooni ah oo loogu talagalay ardayda labka iyo dheddigga ah haddii waxqabadka ciyaaraha isboortiska uu yahay:

(a) Loogu talagalay ardayda gabdhaha ah oo kaliya; iyo

(b) Waxqabad tartan oo shakhsi ama koox ah.

(2) Ardayga doorta inuu ka qaybqaato waxqabadyada tartanka shakhsiga ah ama kuwa kooxda ee loogu talagalay ardayda dheddigga ah oo keliya ee lagu maamulo qayb-hoosaadka (1) ee qaybtan waa inuu bixiyaa, iyada oo qayb ka ah baaritaanka jireed ee isboortiska ee joogtada ah ee loo baahan yahay, foomka baaritaanka caafimaadka iyo kan oggolaanshaha ama bayaan kale oo uu saxiixay bixiyaha daryeelka caafimaadka ee shakhsiga ah ee ardayga kaas oo xaqiijinaya jinsiga dhalashada ee ardayga, isagoo ku tiirsan oo keliya mid ama ka badan oo ka mid ah kuwan soo socda: Qaab-dhismeedka xubnaha dhalmada ee ardayga, hiddasidaha ardayga, ama heerarka testaastaroonka ee caadiga ah ee gudaha jidhka laga soo saaro ee ardayga.

Qaybta 4. RCW 28A.640.020 iyo 2023 c 242 s 3 ayaa mid kasta wax laga beddelay si loo akhriyo sida soo socota:

(1) Kormeeraha guud ee waxbarashada waa inuu dejiyaa xeerar iyo habraacyo lagu cirib-tirayo takoorka jinsiga sida uu u khuseeyo shaqada dugsiga dadweynaha, adeegyada la-talinta iyo hagidda ee ardayda, waxqabadyada madadaalada iyo ciyaaraha isboortiska ee ardayda, helitaanka koorsooyinka la bixiyo, iyo gudaha buugaagta waxbarashada iyo agabyada waxbarashada ee ay ardaydu isticmaalaan.

(a) Gaar ahaan marka loo eego shaqaaleynta dugsiga dadweynaha, dhammaan dugsiyada waxaa laga rabaa inay:

(i) Ilaali shuruudaha aqoonsiga ee dhammaan shaqaalaha iyada oo aan loo eegin jinsiga;

(ii) Ha sameyn wax kala duwanaansho ah oo ku saabsan miisaanka mushaharka iyadoo lagu salaynayo jinsiga;

Qoraalka buuxa ee Xeerka Hindisaha Lr. IL-26-638

(iii) U xilsaar waajibaadyada dugsiga iyada oo aan loo eegin jinsiga marka laga reebo halka xilsaariddaas ay ku lug yeelanayso waajibaad ka dhaca aagagga ama xaaladaha, sida laakiin aan ku xaddidnayn qolka qubeyska, halkaas oo dadku ay dharka iska dhigi karaan;

(iv) Bixi fursado isku mid ah oo loogu talagalay horumarka ragga iyo dumarka; iyo

(v) Ha sameyn wax farqi ah oo ku saabsan xaaladaha shaqada oo ay ku jiraan, balse aan ku xaddidnayn, habdhaqannada shaqaaleysiinta, fasaxyada maqnaanshaha, saacadaha shaqada, iyo u xilsaaridda, ama bixinta lacagta, waajibaadyada waxbaridda iyo kuwa aan waxbaridda ahayn, iyadoo lagu salaynayo jinsiga.

(b) Gaar ahaan marka loo eego adeegyada la-talinta iyo hagidda ee ardayda, waa in laga dhigaa kuwo loo heli karo dhammaan ardayda si siman. Dhammaan shaqaalaha shahaadaysan waxaa looga baahan doonaa inay xoogga saaraan helitaanka dhammaan fursadaha shaqo iyo kuwa xirfadeed ee ardayda iyada oo aan loo eegin jinsiga.

(c) Gaar ahaan marka loo eego hawlaha madadaalada iyo ciyaaraha isboortiska, waa in loo fidiyaa dhammaan ardayda iyada oo aan loo eegin jinsiga, marka laga reebo sida lagu bixiyay qaybta 3 ee xeerkan. Dugsiyadu waxay bixin karaan kooxo gooni ah oo jinsi kasta ah. Dugsiyada bixiya kuwa soo socda waa inay sidaas u sameeyaan iyadoo aanay jirin wax kala duwanaansho ah oo ku salaysan jinsiga: Qalabka iyo agabyada; daryeelka caafimaadka; adeegyada iyo caymiska; gaadiidka iyo gunnooyinka masaariifta maalinlaha ah; fursadaha lagu helayo tababarka iyo tilmaamaha; adeegyada dhar-dhaqidka; magacaabista garsooreyaasha ciyaarta; fursadaha tartanka, baahinta iyo abaal marinnaa; jadwalka ciyaaraha iyo wakhtiyada tababarka oo ay ku jiraan isticmaalka barxadaha, qolalka jimicsiga, iyo barkadaha dabaasha: WAXAA SHURUUD AH, In jadwalaynta noocaas ah ee ciyaaraha iyo wakhtiyada tababarka ay go'aamin doonaan maamulada maamulka ee deegaanka ka dib marka la tixgeliyo danta dadweynaha iyo danta ardayda ee ka qaybgalka iyo ka qayb qaadashada waxqabadada kala duwan ee madadaalada iyo waxqabadada ciyaaraha isboortiska. Dugsi kasta oo bixiya qubeysyo, musqulo, ama xarumaha qolka tababarka ee ujeedooyinka ciyaaraha isboortiska waa inuu bixiyaa xarumo u dhigma oo loogu talagalay labada jinsi. Xarumahaas oo kale waxaa loo bixin karaa iyagoo ah xarumo gooni ah ama waa in loo qorsheeyaa loona isticmaalaa si gooni ah jinsi kastaaba.

Kormeeraha Guud ee Waxbarashada waxaa sidoo kale looga baahan doonaa inuu diyaariyo sahan arday oo saddexdii sannaba mar loo qaybiyo degmo kasta oo dugsi oo deegaanka ah oo ku taal gobolka si loo go'aamiyo xiisaha ardayda ee ka qaybgalka ragga/ dumarka ee isboortisyada gaarka ah.

(d) Gaar ahaan marka laga hadlayo bixinta koorsooyinka, dhammaan xiisadaha waxaa looga baahan doonaa inay u furnaadaan dhammaan ardayda iyada oo aan loo eegin jinsiga: WAXAA SHURUUD AH, In kala soocidda la oggolaado fasal kasta dhexdiisa inta lagu guda jiro kulamada ku saabsan waxbarashada galmada ama fasallada jimicsiga.

(e) Gaar ahaan marka loo eego buugaagta waxbarashada iyo agabyada waxbarashada, kuwaas oo sidoo kale ay ku jiri doonaan, balse aan ku xaddidnayn, buugaagta tixraaca iyo agabyada maqalka iyo muuqaalka, waxaa looga baahan doonaa inay u hoggaansamaan tilmaamaha uu diyaariyay kormeeraha guud ee waxbarashada si loo hirgeliyo ujeeddada cutubkan: WAXAA SHURUUD AH, In qaybtan hoose aan loo fasiran doonin inay mamnuucdo soo bandhigidda agabka uu macallinku u arko inuu ku habboon yahay ujeedooyin waxbarasho.

(2)(a) Markay tahay Diseembar 31, 1994, kormeeraha guud ee waxbarashada waa inuu dejiyaa halbeegyo ay isticmaalaan degmooyinka dugsiga marka ay dejinayaan siyaasadaha

dhibaataaynta galmada sida looga baahan yahay (b) ee qaybtan hoose. Shuruudaha waa inay ka hadlaan mawduucyada hannaannada cabashada, magdhowga dhibbaneyaasha dhibaataaynta galmada, tallaabooyinka anshax-marinta ee laga qaadayo kuwa ku xadgudba siyaasadda, iyo mawduucyo kale oo uu ikhtiyaarkooda leeyahay kormeeraha guud ee waxbarashada. Tallaabooyinka anshax-marinta waa inay waafaqsanaadaan heshiisyada gorgortanka wadajirka ah iyo sharciyada gobolka iyo federaalka. Kormeeraha guud ee waxbarashada waa inuu sidoo kale siiyaa tusaalooyinka siyaasadaha degmooyinka dugsiga marka la codsado.

(b) Markay tahay Juun 30, 1995, degmo kasta oo dugsi waa in ay meel marisaa oo ay hirgelsaa siyaasad qoran oo khuseysa dhibaataaynta galmada. Siyaasaddu waxay khuseyn doontaa dhammaan shaqaalaha degmada dugsiga, mutadawiciinta, waalidiinta, iyo ardayda, oo ay ku jiraan, balse aan ku xaddidnayn, habdhaqanka u dhexeeya ardayda.

(c) Siyaasadaha degmada dugsiga ee ku saabsan dhibaataaynta galmada waa inuu dib u eegis ku sameeyaa Kormeeraha Guud ee Waxbarashada iyadoo la tixgeliyay shuruudaha lagu dhisay hoos yimaada (a) ee qayb-hoosaadkan iyadoo qayb ka ah hannaanka kormeerka ee lagu dhisay RCW 28A.640.030.

(d) Siyaasadda dhibaataaynta galmada ee degmada dugsiga waa in si muuqata loogu dhejiyaa dhammaan qaybaha dhismaha kasta oo dugsi, lana siiyaa shaqaale kasta. Nuqul ka mid ah siyaasadda waa inuu ka soo muuqdaa daabacaad kasta oo dugsiga ama degmada dugsiga ah ee qeexaya xeerarka, shuruudaha, habraacyada, iyo heerarka habdhaqanka ee dugsiga ama degmada dugsiga. Shuruuddan, sida ay u khuseyso ardayda, waalidiinta, iyo mas'uuliyiinta, waxaa lagu fulin karaa iyadoo la isticmaalayo luqadda buug-gacmeedka ardayga ee tusaalaha ah ee ku jirta RCW 28A.300.286.

(e) Dugsi kasta waa inuu dejiyaa hannaan looga hadlayo siyaasadda degmada dugsiga ee dhibaataaynta galmada. Hannaanku waa inuu xaqiiqayaa in dooddii ay ka hadasho qeexidda dhibaataaynta galmada iyo arrimaha lagu daboolay siyaasadda dhibaataaynta galmada.

(f) "Dhibaataaynta galmada" sida loogu isticmaalay qaybtan waxaa loola jeedaa isku-dayo galmo oo aan la soo dhawweyn, codsiyada raalligeliinta galmada, taabasho jireed oo ujeedkeedu yahay galmo, ama dhaqan kale oo hadal ama jireed ah ama isgaarsiin dabecad galmo leh haddii:

(i) U hoggaansamidda hab-dhaqankaas ama xiriirkaas waxaa laga dhigayaa shuruud ama xaalad, ha ahaato mid si cad ama si dadban, ee helitaanka waxbarasho ama shaqo;

(ii) U hoggaansamidda ama diidmada qofka ee hab-dhaqankaas ama xiriirkaas waxaa loo isticmaalaa qodob ahaan go'aannada saameynaya waxbarashada qofkaas ama shaqada qofkaas; ama

(iii) Dhaqankaas ama isgaarsiintaas waxay leedahay ujeedo ama saameyn ah in ay si weyn u farageliso waxqabadka waxbarashada ama waxqabadka shaqada ee qofka, ama in ay abuurto deegaan waxbarasho ama deegaan shaqo oo cabsi gelin ah, mid colaadeed ah, ama mid meel ka dhac ah.

QAYBTA CUSUB. Qaybta 5. Xeerkan waxaa loo aqoonsan karaa loona soo xigan karaa xeerka difaaca sinnaanta isboortiska dugsiyada dhexdooda.

QAYBTA CUSUB. Qaybta 6. Haddii wax kasta oo ka mid ah xeerkan ama isticmaalkiisa uu qof ama xaalad uu yahay mid aan ansax ahayn, inta ka hartay qaanuunka ama ku-dhaqanka qaybaha ee ku aaddan dadka kale ama xaaladaha saameyn kuma laha.

Soo Jeedinta Lr. 1

Ku Biiritaanka Maamulka Dab-damis Goboleedka ee Waaxda Dab-damiska ee Shoreline

Golaha Magaalada Bothell ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 1784, oo ansixinaaya ku biiritaanka Maamulka Dab-damis Goboleedka ee Waaxda Dab-damiska ee Shoreline iyo wax-ka-beddelka qorshaha ee la xiriira. Si loo joogteeyo heerarka adeegga dab-damiska iyo caafimaadka degdegga ah ee hadda jira iyo in la bixiyo sii jiritaannimada maaliyadeed iyo tan hawlgalleed ee muddada dheer ee adeegyadaas ee gudaha Bothell, ma tahay in Bothell lagu daro oo ay qayb ka noqoto Maamulka Dab-damis Goboleedka ee Waaxda Dab-damiska ee Shoreline, laga bilaabo Maarso 1, 2027, iyadoo la raacayo wax-ka-beddelka qorshaha, sida ku xusan Qaraarka Lr. 1784?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa
Haa ama Maya
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 52.26.300)

Bayaanka sharaxaadda

Golaha Magaalada Bothell ayaa meel mariyay Qaraarka 1784 kaas oo codsanaya ansixinta codbixiyaha si loogu biiriyo loona noqdo qayb ka mid ah Maamulka Dab-damis Goboleedka ee Waaxda Dab-damiska ee Shoreline ("RFA"). Maadaama uu gobolku koray kharashyadiina ay kordheen, Bothell waxay tixgelisay moodooyinka maamulka/adeegga ee adeegyada dab-damiska iyo caafimaadka degdegga ah ("EMS"). Sida qayb ka mid ah daraasaddeeda, Bothell waxay qandaraas la gashay RFA ee adeegyada maamulka dab-damiska (Madaxa Dab-damiska).

Golaha Magaalada ayaa go'aamiyay in ku biiritaanka RFA ay xaqiijinayso joogtaynta muddada dheer ee maalgelinta si loo ilaaliyo heerarka adeegga ilaalinta dabka iyo EMS ee hadda jira. Ku biiritaanku ma beddeli doonto u-geynta ama heerka adeegyada ee deganeyaasha Bothell.

Haddii la ansixiyo ku-daridda, Waaxda Dab-damiska ee Bothell waxay qayb ka noqon lahayd RFA-da ka weyn, halkii ay u shaqeyn lahayd sidii waax dab-damis oo madax-bannaan oo ka yar. Iyadoo la isku daraayo kheyraadka iyo khibrada lana isku duwayo dadaallada, adeegga dab-damiska iyo EMS waxay heli karaan waxtar, oo ay ku jiraan hawlgallada jawaab-celinta. Codbixiyeyaasha Bothell waxay xaq u yeelan doonaan inay ka codeeyaan dhammaan xeerarka warqadda codbixinta ee ay soo jeediyaan RFA—oo ay ku jiraan kuwa la xiriira canshuuraha iyo kharashka dheefta. Bothell waxay matallaad ku yeelan doontaa Guddiga RFA. Haddii ku biiritaanka la diido, Bothell waxay u baahan doontaa inay mar kale raadiso ansixinta codbixiyaha, inay heshiis cusub kala xaajooto RFA ama wakaalad kale, ama inay dib u dhisto Waaxda Dab-damiska ee Bothell.

<https://bothellwa.gov/2209/Fire-Service-Study>

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Kyle Stannert
Maamulaha Magaalada
(425) 806-6141
kyle.stannert@bothellwa.gov

Bayaanka lagu taageerayo

Wesley Wang, Brandon Keith, Mason Thompson

Sida ay Bothell u korayso, jawaab-celinteena dab-damiska iyo caafimaadka degdegga ah waxay u baahan tahay inay nala korto. Soo jeedinta 1 waxay bulshadeenna siinaysaa hab la xaqiijiyay oo lagu bixiyo daryeel degdeg ah oo tayo leh marka ilbiriqsi kasta uu muhiim yahay. Taas ayaa ah sababta ay Ururka Dab-damiska Xirfadleyaasha Bothell (Bothell Professional Firefighters Association), IAFF Local 2099, u taageertay xeerkan warqadda codbixinta.

Adeegga dab-damiska goboleedka waa heerka caadiga ah ee aagaggeena sababo wanaagsan awgood. Marka ay ku biirto Maamulka Dab-damis Goboleedka ee Shoreline, Dab-damiska Bothell waxay noqon doontaa qayb ka mid ah urur weyn oo wadaagi kara kheyraadka, isku duba ridi kara shaqaalaha, ballaarin kara awoodaha gaarka ah, isla markaana horumarin kara hufnaanta hawlgalka. Halkii doolarka bixiyaha canshuurta ee maxalliga ah lagu bixin lahaa in nuqul looga sameeyo nidaamyada maamulka iyo qalabka hey'ado badan oo madax-bannaan, ku biiritaanka waxay kheyraadka la midaynaysaa bulshooyinka deriska ah—iyadoo kheyraadkaas looga faa'iidaynayso heerka ugu sareeya halka ay ka tirsan yihiin: bannaanka xaafadaheena iyagoo u adeegaya deganeyaasheena.

Ku biiritaanka RFA waxay sidoo kale ka caawisaa Bothell in ay u qorshayso kharashyada soo socda. Wadaagista kharashka xarumaha iyo qalabka mustaqbalka ee saldhig canshuur goboleedka oo ka ballaaran waxay fududeynaysaa saameynta maaliyadeed ee magaaladeena, iyadoo deganeyaasha Bothell laga ilaalinayo inay keligood dhabarka u ritaan kharashyadaas iyadoo isla markaana la hagaajinayo adeegga bulshadeenna.

Codka Haa ah, waxaan sii haysanaynaa xakamayn weyn oo ku saabsan jihada adeegga dab-damiska ee Bothell. Magaaladeena waxay yeelan doontaa cod laxaad leh oo ku saabsan sida loo maamulo RFA-da iyadoo leh saddex ka mid ah sagaalka kursi ee guddiga maamulka ee RFA-da.

Ku codee *Haa* Soo jeedinta 1 si loo sii hayo go'aan-qaadasho maxalli ah oo xooggan oo ku saabsan adeegga dab-damiska iyo caafimaadka degdegga ah, la siiyo dab-damiyeyaasheena iyo deganeyaasheena kheyraadka waax goboleed oo ka weyn, si wanaagsanna loogu diyaariyo Bothell horumarinnada adeegga ee mustaqbalka.

Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda xeerkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiyay Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda xeerka.

Maamulada xeerarka ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada “taageeridda” iyo “ka soo horjeedidda”. Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda xeerka warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

Soo Jeedinta Lr. 1

Canshuur Si Loo Sii Wado Bixinta Adeegyada Ammaanka Dadweynaha iyo Adeegyada Isticmaalka Dhulka ee Clyde Hill

Si loo maalgeliyo adeegyada ammaanka dadweynaha iyo adeegyada isticmaalka dhulka, iyo si ay u ahaato magaalo madax-bannaan, Golaha Magaalada Clyde Hill ayaa ansixiyay Qaraarka Lr. 725 kaas oo soo jeedinaaya kordhin ku aaddan canshuurteeda hantida ee caadiga ah qiyaas ahaan ah \$0.30 oo loo kordhinayo \$0.50 halkii \$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay ee 2027 iyadoo ay jirto 3% oo kordhin sannadle ah oo lagu sameynayo xadka sannadlaha ah ee 2028-2036. Ka-dhaafitaannada waxay khuseeyaan waayeellada, halyeeyada ciidamada, iyo dadka naafada ah ee u qalma sida ku xusan RCW 84.36.381.

Ma tahay in soo jeedintan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa
Haa ama Maya
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)

Bayaanka sharaxaadda

Qaraarka Clyde Hill Lr. 725 wuxuu ka codsanayaa codbixiyeyaasha inay kordhiyaan qaybta Magaalada ee canshuuraha hantida si loogu bixiyo booliiska, dadamiska, adeegyada caafimaadka degdegga ah, dirista 911, isticmaalka dhulka, iyo adeegyada aagaynta. Clyde Hill waxay leedahay heerka canshuurta ee saddexaad ee ugu hooseeya ee Degmada King, iyadoo hesha wax ka yar \$0.05 ee \$1.00 kasta oo lagu bixiyo canshuuraha hantida.

Guddi Hawleedka Joogtaynta Maaliyadda oo ay deganeyaashu hoggaaminayaan ayaa soo gabagabeeyay in Magaaladu ay dhintay kharashyada meeshii ay awoodday isla markaana ay shaqaalaha ku haysay tiro kooban marka la barbar dhigo magaalooyinka ay isku baaxadda yihiin. Waxay ku soo gabagabaysay in dhimmisyo dheeraad ah ay khatar gelinayaan adeegyada aasaasiga ah iyo shuruudaha sharciga ah. Haddii aan la helin dakhliyo dheeraad ah, Clyde Hill ma heli doonto maalgelinta lagama maarmaanka ah si ay u sii ahaato magaalada madax-bannaan oo leh xakamaynta maxalliga ah ee waaxdeeda booliiska iyo arrimaheeda aagaynta, iyo sidoo kale adeegyada dadamiska iyo caafimaadka degdegga ah ee tayada leh ee ay deganeyaashu filayeen.

Haddii la ansixiyo, heerka soo rogitaanka canshuurta hantida ee Clyde Hill waxa uu ka kordhi doonaa \$0.29548 halkii \$1,000 ee qiimeynta hantida ee 2026 ilaa heerka canshuurta oo aan ka badnayn \$0.50 halkii \$1,000 ee qiimeynta hantida ee 2027. Tani waxay u dhigantaa qiyaas ahaan kor u kac dhan \$225 oo ku yimid qaybta magaalada ee canshuuraha hantida halkii \$1,000,000 kasta oo qiimeynta la qiimeeyay ah. Sannadaha 2028-2036, wadarta caddadka canshuurta hantida caadiga ah waxay ku kordhi doontaa qodobka xaddidaadda oo ah 3% sannadkiiba. Canshuurta ugu dambeysa ee 2036 waxay noqon doontaa aasaaska dejinta heerarka canshuurta ee sannadaha soo socda.

Haddii soo jeedintan la diido, waxaa la saadaalinayaa in Magaalada ay ka dhammaan doonto maalgelinta hawlgalku dhammaadka 2030. Ma awoodi doonto inay sii waddo heerarka adeegga ee hadda jira waxaana laga yaabaa inay u baahato inay tixgeliso kala diridda.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Heather Thomas-Murphy
Maamulaha Magaalada
(425) 453-7800
cityhall@clydehill.org

Bayaanka lagu taageerayo

Jay Henningsen, Carl Picciotto, Tony Williams
thecampaignforclydehill.com

Waxaan Clyde Hill u qiimeynaa ammaankeeda, tayada adeegyadeeda, iyo la xisaabtanka tuuladayar. Kharashyada sii kordhaya iyo xaddidaadaha gobolka ee koritaanka dakhliga ayaa hadda xaddidaya awoodda magaalada ee bixinta adeegyada aan filayno. Clyde Hill waxay heshaa qiyaastii 4.5% oo keliya biilkaaga canshuurta hantida ee guud, heerka canshuurta magaaladeenuna wuxuu ka mid yahay kuwa ugu hooseeya gobolka (Clyde Hill \$0.30; Medina \$0.59; Bellevue \$0.96; Kirkland \$0.86 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay).

Farqiga miisaaniyaddeena laguma dabooli karo dhimmis keliya. Soo jeedinta 1 waa xal dakhli oo dhexdhexaad ah oo uu soo jeediyay guddiga hawsha ee ay hoggaaminayaan deganeyaasha. Waxay kordhisaa oo keliya qaybta Magaalada ee canshuurahaaga. Dhammaan dakhligu wuxuu ku dhex harayaa Clyde Hill si loo taageero adeegyada muhiimka ah ee magaaladeena ka dhigaya goobta gaarka ah ee aan u dooranay inaan ka dhigano gurigeena.

Ugu dambeyntii, deganeyaasha ayaa go'aamin doona qaddarka Clyde Hill. Ansixinta Soo jeedinta 1 waxay ka dhigan tahay inaan sii haysano waaxdeena booliiska ee shahaadaysan iyo inaan dhowrno xakamaynta isticmaalkadhulka taas oo ilaalinaysa astaanta xaafadeena iyo qiimaha guryaheena.

Fadlan ku codee "Haa" si Clyde Hill ay u ahaato mid ammaan ah oo madax-bannaan, iyadoo mustaqbalkeedu uu gacanta ugu jiro deganeyaasheeda.

Bayaanka looga soo horjeedo

Daniel Brzusek

Wax bayaan ah lama soo gudbin.

Bayaanka lagu taageerayo ama ka soo horjeeda xeerka ama hindisaha warqadda codbixinta waxaa soo gudbiya guddiyo ay magacaabeen maamulka xukunka. Guddiga ka soo horjeedidda ayaa dib uga laabtay hannaanka qoritaanka bayaanka ka soo horjeedidda. Haddii aad jeclaan lahayd inaad mustaqbalka la shaqeyso guddi, fadlan la xiriir maamulka xukunka.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Fadlan ku codee "Haa" ee ku saabsan Soo jeedinta 1 si Clyde Hill loogu hayo - Clyde Hill. Waxay ilaalisaa qiimaha guryaheena, waxay heerka canshuurta magaaladeena ka dhigtaa mid ilaa xad hooseeya, waxay ilaalisaa ammaankeenna dadweynaha, waxayna inagu haysaa gacan ku haynta mustaqbalkeena.

Wax badan ka baro thecampaignforclydehill.com.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Wax bayaan ah lama soo gudbin.

Soo Jeedinta Lr. 1**Curaarta Jardiinooyinka iyo Goobaha Furan**

Golaha Magaalada Issaquah ayaa meel mariyay Xeerka Lr. 3142, ee khuseeya curaarta loogu talagalay mashaariicda jardiinooyinka, waddooyinka socodka, iyo madadaalada.

Haddii la ansixiyo, soo jeedintan waxay Magaalada u oggolaanaysaa inay: dhammaystirto mashaariic kala duwan, oo ay ku jiraan garoomada iyo barxadaha isboortiska, waddooyin socod oo cusub, hagaajinta meelaha laga bilaabo waddooyinka socodka, dib-u-hagaajinta Aqalka Ek ee Jardiinka Confluence, hagaajinta goobta carruurta ku ciyaarto, jardiinka eyga oo cusub, iyo horumarinta mashaariicda hantida waaweyn ee la xiriira; bixiso wax aan ka badnayn \$18,000,000 oo ah curaarta waajibbaadka guud oo ku buuxsamaya 20 sanno gudahood; oo ay soo rogto canshuurta hantida sannadlaha ah ee dheeraadka ah si loo bixiyo oo loo furto curaartaas, dhammaan sida lagu xusay Xeerka Lr. 3142.

Ma tahay in soo jeedintan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.



**Waxaad u codeynaysaa
Haa ama Maya
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1**

Shuruudaha ansixinta: 60% aqlabiyad haa ah iyo soo bixitaanka ugu yaraan 40% ee codbixiyeyaasha dhiibtay warqadaha codbixinta doorashadii guud ee ugu dambeysay (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(b))

Bayaanka sharaxaadda

Magaalada Issaquah waxay soo jeedinaysaa inay soo saarto ilaa \$18 milyan oo curaar ah oo loogu talagalay mashaariic kala duwan oo jardiinooyinka, waddooyinka socodka, iyo madadaalada ah. Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyaasha, curaarahan jardiinooyinka waxay beddeli lahaayeen curaaraha jardiinooyinka ee fariisanaya ee Magaalada waxayna gaari lahaayeen xilliga bixinta 20 sanno ka dib marka la soo saaro.

Mashaariicda curaarta jardiinka ee la soo jeediyay waxaa ka mid ah: garoomada iyo barxadaha isboortiska ee goobo kala duwan; waddooyin socodka oo cusub oo ku yaalla buuraha Cougar iyo Squak kuwaas oo ku xirma waddooyinka socodka ee goboleedka ee ku hareeraysan, hagaajinnada marin-bilowga waddada socodka ee Buurta West Tiger; dib-u-soo-celinta Aqalka Ek ee Jardiinka Confluence; hagaajinnada goobta ciyaarta iyo jardiinka eyda oo cusub oo ku yaalla Jardiinka Tibbetts Valley; iyo horumarinnada raasumaalka ee la xiriira. Dhammaan mashaariicdan waxaa loo aqoonsaday inay yihiin mudnaanta bulshada ee ku jira Qorshaha Nidaamka Jardiinooyinka ee 2024 ee la meel mariyay.

Magaaladu waxay soo jeedinaysaa soo saarista curaarta cusub marka ay curaartii hore dhammaadaan si canshuuraha hantida looga dhigo kuwo isku mid ah, taas oo micnaheedu yahay kharashka la qiyaasay ee mulkiilaha guriga qiimihiisu yahay \$1 milyan wuxuu celcelis ahaan noqon doonaa qiyaastii \$80 sannadkii. Waayeelka dakhligoodu hooseeyo, halyeeyada qaarkood iyo kuwa kale ee u qalma ka dhaafitaanka canshuurta ee curaarta wakhtigeedu dhammaanayso waxay sii ahaan doonaan kuwo laga dhaafay.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo issaquahwa.gov/parkbond.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Jeff Watling
Agaasimaha Jardiinooyinka & Adeegyada
Bulshada
(425) 837-3325
jeffw@issaquahwa.gov

Bayaanka lagu taageerayo

Jeffrey Newell, Robin Beukers, Donovan Richards

Tani waa cusbooneysiin—ma aha canshuur cusub—iyo maalgashi lagu sameeyo jardiinooyinka, waddooyinka socodka, iyo goobaha la isugu yimaado ee Issaquah ka dhiga meel aad u wanaagsan oo hoy loogu yeero.

Kadib sannado qorsheyn ah iyo talo bixin bulsho, deganeyaasha ayaa aqoonsaday mudnaanno cad: saddex garoon oo cows macmal ah oo leh buuxinta guf waarta oo ku yaal dugsiyada hoose ee Issaquah Valley, Clark, iyo Grand Ridge; meesha laga bilaabo socodka buurta oo dib loo dhisay; wareegyada waddooyinka socodka ee cusub ee Cougar & Squak Mountain; goobta kulanka ee Ek House oo la soo celiyay oo ku taal Confluence Park; goob lagu ciyaaro oo loogu talagalay dhammaan awoodaha iyo jardiinka eyda; iyo garoomo bikalbool oo cusub. Dayactirka waxaa lagu dhex dhisay tan iyo bilowgii.

Haddii aan la helin cusbooneysiintan, dhammaystirka mudnaannadan bulshada waxay qaadan kartaa in ka badan 30 sanno. Quruxda dabiiciga ah ee Issaquah iyo helitaanka aan caadiga ahayn ee jardiinooyinka iyo waddooyinka socodka ayaa qayb ka ah waxa bulshadeenna—iyo guryaheenna—ka dhigaya kuwo aad loo doonayo. Cusbooneysiinta curaartan waxay dhowraysaa oo ay xoojinaysaa maalgashigaas ee jiilka soo socda. Bulshadu waxay la xoog tahay oo kaliya meelaha ay wadaagaan: waddo socod oo la wadaago, garoon la wadaago, kursi la wadaago oo hooska yaalla. Goobo lagu ciyaaro, lagu kulmo, lagu sahamiyo, lagana tirsan yahay.

Ku codee *Haa* si loo cusbooneysiyo maalgashigeenna Issaquah. Waxaa taageeray: Issaquah FC, Issaquah Little League, PTSA, Issaquah Alps Trails Club

Bayaanka looga soo horjeedo

Steve Pereira

Qorshaha Jardiinka Istaraatiijiga ah ee Issaquah ayaa jira. Curaartan gaarka ah ee la soo jeediyay waxay u fashilantay sababtoo ah waxay keliya weydiisay waxa aan qaban karno, balse ma aysan weydiisan in mudnaanta la siiyo mashaariicda xaqiijin doona yoolalkeena iyo natiijooyinkeena la sheegay. Tani waxay u baahan tahay inay dhacdo ka hor inta aan la dooran \$18.5M, waxayna muujin doontaa horumar la qiyaasay. Waxay isticmaashaa 20 sanno oo ah awoodda curaarta Jardiinooyinka ee mustaqbalka, laakiin ma aha inay si ugu wanaagsan u buuxiso yoolalkeena 20-ka sanno ee magaalada oo dhan. Waa wax wanaagsan in ay jiraan yoolal hami leh, natiijooyin hami leh, iyo qiimeyaal hami leh oo badan oo ku jira qorshaheena Jardiinooyinka: Isku-xirka. Firfircooni. Adkeysiga. Isku Dheelitir. Qorshaha Peaks to Creeks (Meelaha ugu sareeya ilaa iyo Dooxoooyinka). Waxaan u baahannahay inaan mudnaanta kala horreysiinno ka hor inta aanan kharash gareyn haddii aan rabno inaan muujinno horumar. Horumari oo hirgeli xeerarka halbeegga iyo Heerka Adeegga (LOS) kuwaas oo wargelin doona isla markaana kala horreysiin doona go'aannada maalgelinta iyo mashaariicda.

Kani ma aha dood ka dhan ah mashaariic gaar ah. Waa inaan ku soconaa si ujeeddo iyo ku-talagal leh, haddii kale ma jiro caddad maalgelin ah oo oggolaan doona gaaridda yoolalkeena. Kharash gareynta curaarta waxaa loo isticmaali karaa oo keliya mashaariicda hantida waaweyn ee cusub, inkastoo ay u baahan tahay inay ku xirnaato Qorshaheena Istaraatiijiyadeed ee Jardiinooyinka ee ballaaran (Tusaale: Xarumaha, Dayactirka, Hawlgallada, Barnaamijyada, iwm.).

Keliya codso inaan u codeyno 'Wali ma aha'.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Tani ma ahayn wax qiyaas ah. Sannado qorsheyn ah iyo sahamin ballaaran oo lala sameeyay deganeyaasha ayaa qaabeeyay liiskan. Mashaariicdan waa mudnaanta ay deganeyaasha Issaquah aqoonsadeen—ee ma aha liiska rabitaanka Magaalada. “Weli ma aha” micnaheedu waa dib u dhigidda maalgeshiyada ay bulshadeennu horrey mudnaanta u siisay, laga yaabo muddo tobanaan sanno ah. Halkii laga indho-tiri lahaa doonista dadweynaha, cusbooneysiintan waxay ka tarjumaysaa taas: garoomada, waddooyinka socodka, garoomada ciyaarta iyo goobaha la isugu yimaado ee ay deganeyaashu codsadeen. Qorsheynta waa la sameeyay. Mudnaanta waa ay caddahay. Ku codee *Haa* si loo sharfo hannaankaas.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Qorshaha Jardiinka Istaraatiijiga ah ee Issaquah waa mid hami leh, dhammaystiran, iyo suurtagal ah. Waa inay hagtaa wargelisaa mudnaanta xulashada mashruuca, isla markaana ay la socotaa horumarka aragtideeda nidaamsan ee hirgelinta Jardiinooyinka 20-ka sanno ee Magaalada.

Soo jeedintani waxay qabataa wax, laakiin waxay u baahan tahay wadahal magaalada oo dhan ah si loo go'aamiyo loona xusho baahiyaha ugu degdegga badan ee la xushay. Kharashyada sicir bararka ee sareeya waxay si lama huraan ah ugu baahan yihiin inay horseedaan xulashada Jardiinooyinka ugu wanaagsan. Weli ma ahan.

Soo Jeedinta Lr. 1**Canshuurta Maareynta Cimilada & Deegaanka, Guriyeynta La Awoodi Karo, iyo Adeegyada Aadanaha**

Golaha Magaalada Kenmore ayaa ansixiyay Xeerka 26-0644 ee ku saabsan maalgelinta barnaamijyada iyo adeegyada. Si loo maalgeliyo Maareynta Cimilada & Deegaanka, Guriyeynta La Awoodi Karo, iyo Adeegyada Aadanaha, soo jeedintan waxay kordhinaysaa heerka ugu sareeya ee soo rogitaanka canshuurta hantida ee caadiga ah ee Kenmore ilaa iyo \$1.25/\$1,000 oo la ururinayo sannadka 2027; waxay dejinaysaa qodobka xaddidaadda ee kordhinta soo rogitaanka canshuurta hantida ee caadiga ah ee Kenmore ee 2028-2032 ilaa iyo 6%; waxay u oggolaanaysaa lacagta canshuurta ee 2032 inay aasaas u noqoto xisaabinta canshuuraha xiga (RCW 84.55); waxayna ka dhaafaysaa waayeellada, halyeeyada ciidamada, iyo kuwa kale ee u qalma (RCW 84.36).

Ma tahay in soo jeedintan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleanka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa
Haa ama Maya
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)

Bayaanka sharaxaadda

Magaalada Kenmore waxay codbixiyayaasha ka codsanaysaa ansixin si loo kordhiyo soo rogitaanka canshuurta hantida ee caadiga ah ee Magaalada ilaa \$1.25 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay si loo maalgeliyo barnaamijyada iyo adeegyada loogu talagalay Maamulidda Cimilada & Deegaanka, Guryaha la Awoodi Karo, iyo Adeegyada Aadanaha.

Sida uu qabo sharciga gobolka, iyada oo aan la helin ansixinta codbixiyaha, magaalo waxay kordhin kartaa caddadka soo rogitaanka canshuurta hantida ee caadiga ah boqolkiiba 1% oo keliya sannad kasta, taas oo aan la jaan qaadin sicir bararka iyo kharashyada bixinta barnaamijyada Magaalada iyo adeegyada Magaalada.

Haddii la ansixiyo, Soo Jeedinta 1 waxay u oggolaan doontaa kordhinta heerka canshuurta ee Magaalada qiyaas ahaan \$0.36 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay, ee wadarta heerka canshuurta hantida caadiga ah ee aan ka badnayn \$1.25 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee ururinta 2027, waxayna oggolaan doontaa in caddadka canshuurta uu ku kordho ilaa 6% shanta sanno ee xigta (2028-2032). Heerka guud kama badnaan karo heerka ugu sareeya ee soo rogitaanka canshuurta hantida ee sharciga gobolku u oggol yahay magaalooyinka. Caddadka canshuurta ee 2032 wuxuu noqon doonaa saldhiga lagu xisaabinaayo canshuuraha ka dambeeya. Kororka canshuurta hantida caadiga ah ee Magaalada, oo ay weheliyaan tallaabooyinka kharash-dhimmista ee Magaalada, ayaa kor u qaadi doona waaritanka maaliyadeed ee hawlgallada iyo barnaamijyada Magaalada.

Soo jeedinta 1 waxay qiyaas ahaan \$30 bishii ku dari doontaa biilka canshuurta hantida ee guri lagu qiimeeyay qiimaha celceliska ah ee Kenmore oo ah \$1,000,000. Soo Jeedinta 1 waxay dadka waayeellada, halyeeyada ciidamada, iyo kuwa kale ee u qalma ka dhaafi doontaa kororka.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Scott Passey
Karaaniga Magaalada
(425) 984-6193
spassey@kenmorewa.gov

Bayaanka lagu taageerayo

Tracy Banaszynski, Edouard Lassalle, Juliana Pooley
www.yeskenmore.org

Soo jeedinta 1 waxay maalgelisa dhirta, goobaha cagaaran, iyo u diyaargarowga xagaayo ka kulul, qiiqa dabka duurka, iyo duufaanno ka xooggan iyo fatahaadda. Waxay guryo la awoodi karo ku bixisaa iyada oo loo marayo ARCH, oo ah lammaaneyaasheena guriyeynta ee goboleedka, si dadka waayeelka ah, shaqaalaha muhiimka ah, iyo carruurteena ay halkan ugu noolaan karaan. Waxayna derisyadeenna ku xirtaa cuntada, adeegyada aasaasiga ah, iyo taageerada daryeelka caafimaadka ee ay u baahan yihiin.

Waxay ku kacaysaa \$3/bishii \$100,000 kasta oo qiimaha la qiimeeyay ah — qiyaas ahaan \$29/bishii guriga dhex-dhexaadka ah ee Kenmore. Waayeelka u qalma, dadka hawlgabka ah ee naafada ah, iyo halyeeyada ciidamada ee naafada ah waxaa laga dhaafayaa kordhinta. Sharciga gobolka wuxuu xaddidayaa kordhinta canshuurta hantida caadiga ah ilaa 1% sannadkii, laakiin kharashyada Kenmore waxay kordheen qiyaas ahaan 5% sannadkii shantii sanno ee la soo dhaafay. Kor-u-qaadiddan canshuurta waxay naga caawinaysaa inaan sii haysano adeegyada inkastoo uu jiro sicir barar, iyo iyadoo aan deyn la abuurin. Sharciga gobolka wuxuu farayaa in lacagahan lagu maalgeliyo oo keliya ujeedooyinka ku qoran warqaddaada codbixinta.

Xagaayo ka kulul, kana qiiq badan, duufaanno ka culus, kharashyada guryaha ee sii kordhaya, iyo deriska dhibaataysan ma sugaan sannad miisaaniyadeed oo ka wanaagsan. Iyo xalalku waxay noqdaan kuwo ka qaalisan mar kasta oo aan sii sugno. Waxay ku kacaysaa kharash ka yar in qoyska guri iyo cunto loo hayo intii laga falcelin lahaa ka dib marka ay waayaan gurigooda.

Dhimista barnaamijyada adkeysiga lacag ma badbaadiso. Waxay dib u dhigaysaa hindise-sharciga. Ku Codee *Haa* Soo Jeedinta 1.

Bayaanka looga soo horjeedo

Laurie Sperry, John Hendrickson, Dave Postetter
www.AffordableKenmore.com

Ka dhig Kenmore mid la awoodi karo iyo Golaha Magaalada mid lala xisaabtami karo. Ku Codee May ee Soo Jeedinta 1. Haddii la ansixiyo, waxay kor u qaadi doontaa heerka canshuurta hantida ee Kenmore in ka badan 51% sannadka 2027—iyadoo celceliska qoyska ay ku kacayso in ka badan \$2,000 inta lagu guda jiro muddada canshuurta ee lixda sanno ah. Ka sii daran, kororkani wuxuu noqon doonaa mid joogto ah iyo saldhiga kororka canshuurta ee dheeraadka ah.

Deganeyaal badan oo Kenmore ah ayaa durba dareemaya culayska kharashyada kordhaya. Canshuuraha hantida ee ka sareeya ma saameeyaan oo keliya mulkiileyaasha guryaha. Waxay sidoo kale horseedaan kirooyinka oo kordha, kharashyo sare oo soo food saara ganacsiyada maxalliga ah, iyo awoodi karidda oo u yaraata qof kasta, gaar ahaan kuwa ugu awoodda yar inay u adkaayaan koror kale oo canshuur ah. Saameynadan waa kuwo dib-u-dhac ah. Tani si fudud waa wakhtiga khalidan ee kordhin kale oo weyn oo canshuur ah.

Tan iyo 2020, tirada dadka Kenmore waxay korodhay keliya 1.6%, halka kharashka Magaalada uu kordhay in ka badan 40% iyo shaqaalaha oo kordhay 36%. Hadda, ka dib markii ay dhammeeyeen maalgelintii COVID ee hal mar ahayd iyo dakhliyada kale ee ku meel gaarka ah, golaha magaalada waxay ka codsanayaan canshuur bixiyeyaasha inay buuxiyaan farqiga.

Ma jirto wax dammaanad ah in canshuuraha cusub lagu bixin doono “Cimilada iyo Daryeelka Deegaanka, Guryo la Awoodi Karo, iyo Adeegyada Bulshada.” Soo Jeedinta 1 waxay u oggolaan doontaa Golaha Magaalada inay “wax ka beddelaan mudnaanta kharash bixinta iyo inay u wareejiyaan maalgelinta isticmaallada la oggolaaday dhexdooda.” Goleyaasha Mustaqbalka ayaa dib u weecin kara maalgelinta iyada oo aan la helin ansixinta codbixiyaha. Dalbo la xisaabtanka. Ilaali awood-u-yeelashada. Ku Codee *Maya* ee Soo Jeedinta 1.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Kharash bixinta kordhay ee Kenmore: kororka dadka (1%), sicir barar (29%!), iyo adeegyo cusub oo adkaysi oo lagama maarmaan ah (10%). Xaddidka 1% ee canshuurta hantida gobolka ee saaran magaalooyinka waxay ka dhigan tahay in codbixiyeyaashu ay tahay inay ansixiyaan canshuuraha sida Soo Jeedinta 1 si loola jaan aado sicir bararka.

Sharciga gobolka ayaa mamnuucaya in canshuuruhu noqdaan jeegag bannaan. Soo jeedinta 1 waxay maalgelisa adkeysiga bulshada: matoorada kulayliyeyaasha iyo tamarta qorraxda si loo dhimmo biilasha adeegyada, koronto keyd ah xilliyada duufaannada, daboolka geedaha oo badan, iyo guryo la awoodi karo oo loogu talagalay qoysaska. Kharash bixinta kordhay ee Kenmore: kororka dadka (1%), sicir barar (29%!), iyo adeegyo cusub oo adkaysi oo lagama maarmaan ah (10%). Ku Codee *Haa*.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Ballanqaadyada Kenmore ee ku aaddan deganaanshaha guriyeynta, adkeysiga cimilada, iyo taageerada bulshada waxay ahaanayaan kuwo jira Soo jeedinta 1 la'aanteed. Magaaladu waxay sii wadi doontaa maalgelinta mudnaannahan. Codeyntaan waxay ku saabsan tahay la xisaabtanka maaliyadda iyo isu dheelitirka qiyaamkeena aan wadaagno iyo awoodi karidda.

Waa inaan dalbanaa miisaaniyad anshax leh halkii laga heli lahaa kor u kac canshuur oo joogto ah. Iyadoo kharashka lala jaan qaadinayo dakhliga hadda jira, waxaan xaqiijinaynaa daah-furnaanta, waxaan ka ilaalinaynaa deganeyaasha dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa dakhligoodu dhex dhexaadka yahay canshuuraha kordhaya, waxaana bulshadeenna ka dhigaynaa mid la heli karo oo qof walba mas'uuliyad maaliyadeed u leh. Ku codee *Maya*.

Soo Jeedinta Lr. 1**Kor-U-Qaadista
Canshuurta ee
Adeegyada Ammaanka
Dadweynaha**

Golaha Magaalada ee Magaalada Lake Forest Park ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 26-2084 si loo maalgeliyo Adeegyada Ammaanka Dadweynaha.

Soo jeedintan waxay maalgelin doontaa Adeegyada Ammaanka Dadweynaha sida ku cad Qaraarka oo ay ku jiraan adeegyada booliiska, qalabka ammaanka, gurmada 911, adeegyada maareynta xaaladaha degdegga ah, adeegyada xabsiga, iyo ka jawaabista dhibaataada caafimaadka maskaxda iyadoo si ku meel gaar ah loo dejinaayo heerka ugu sareeya ee wadarta canshuurta caadiga ah ee \$0.88920/\$1,000 oo la ururinayo sannadka 2027, oo ay la socoto koror sannadeed muddo shan sannadood ah oo ku saleysan sicir bararka (CPI-U-ga ee deegaanka Seattle). Waayeellada dakhligoodu hooseeyo, halyeeyada ciidamada ee naafada ah, iyo shakhsiyaadka kale ee naafada ah ee u qalma ayaa laga dhaafayaa canshuurta sida hoos timaadda RCW 84.36.381.

Ma tahay in soo jeedintan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleanka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa
Haa ama Maya
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)

Bayaanka sharaxaadda

Magaalada Lake Forest Park waxay soo jeedinaysaa Soo Jeedinta 1 si ay u bixiso maalgelin waarta oo loogu talagalay Adeegyada Ammaanka Dadweynaha oo ay ku jiraan: shaqaaleynta booliiska, tababarka, iyo qalabka badbaadada; adeegyada dirista 911; adeegyada xabsiga; kharashyada dacwad oogista iyo difaaca dadweynaha; iyo faragelinta xasaradaha iyo barnaamijyada ka jawaabista caafimaadka dhimirka.

Soo jeedinta 1 waxay si ku meel gaar ah u oggolaan doontaa kordhin sannadle ah oo qiyaas ahaan dhan \$1.2 milyan oo ah soo rogitaanka canshuurta hantida caadiga ah ee Magaalada iyada oo loo marayo kor-u-qaadidda canshuurta. Haddii aan la helin kor-u-qaadidda canshuurta ee uu codbixiyuhu ansixiyay, Magaaladu waxay ku xaddidan tahay kordhinta soo rogitaankeeda canshuurta 1%. Maalgelinta canshuurta dheeriga ah ee ka timaadda Soo Jeedinta 1 waxaa loola socon doonaa si gooni ah waxaana loo isticmaali karaa oo keliya si loogu bixiyo kharashka Adeegyada Ammaanka Dadweynaha.

Soo jeedinta 1 waxay mulkiileyaasha hantida ku kici lahayd \$0.22 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay (\$22 halkii \$100,000). Sannadka 2027, guriga qiimihiisa dhex dhexaadka ahi yahay \$963,000, tani waxay noqon lahayd qiyaas ahaan \$211.86 sannadkii ama \$17.66 bishii. Sannad kasta oo ka mid ah shanta sanno ee soo socota (2028 – 2032), kor-u-qaadidda canshuurta waxaa lagu kordhin karaa heerka sicir bararka, taas oo u baahan hannaan dadweyne oo furan iyo codeynta golaha si loo ansixiyo.

Soo jeedinta 1 waxay waayeelka u qalma, halyeeyada naafada ah iyo dadka kale ee naafada ah ka dhaafaysaa kor-u-qaadidda canshuurta. Marka ay dhacdo Soo Jeedinta 1, canshuurta waxay hoos ugu dhici doontaa intii ay ahaan lahayd haddii aan weligeed la ansixin oo ay Magaaladu qaadan lahayd oo keliya 1% kororka uu oggolaaday sharciga gobolka.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Phillip Hill
Maamulaha Magaalada
(206) 368-5440
phill@cityoflfp.gov

Bayaanka lagu taageerayo

Marty Ross
www.yesonlfpprop1.com

Lake Forest Park waxay wajahaysaa isla doorashooyinka adag ee ay wajahayaan bulshooyinka kale ee gobolka oo dhan, kuwaas oo uu hindisay Tim Eyman isla markaana uu sii joogteeyay Golaha Sharci-dejinta Gobolka. Halka sicir bararku uu sannad kasta kordhay 2.8% iyo in ka badan 5% dhawwaan, dakhliga waxaa caqabad ku noqday xadka sannadlaha ah ee 1% ee kordhinta canshuurta hantida.

Sida ay sannaduhu u socdeen, magaalooyinka waxay ku dhibtoodeen inay maalgeliyaan hawlgallada aasaasiga ah. Qaar ayaa dhimmay shaqaaleynta. Brier ayaa dhimmay maalgelinta waaxda booliiska. Edmonds ayaa baartay inay iibiso jardiinooyinka.

Shaqaalaha Lake Forest Park ayaa saadaalinaya in xaaladdeena hadda jirta ay dhammeyn doonto maalgelinta guud marka la gaaro 2031. Halka magaaladu ay dhintay kharashyada iyadoo xiraysa Hoolka Magaalada maalmaha Jimcaha, ilaalinta adeegyada hadda jira waxay u baahan tahay tallaabo dheeraad ah. Dowladda hoose ee magaaladeenu waxay dhegaysatay jawaab-celinta markii ay naqshadaynaysay canshuurtaan, iyadoo hubinaysa daah-furnaanta iyadoo hannaanka soo marsiinaysa Guddiga Maaliyadda. Golaha magaalada isagoo aqoonsanaya dhibaataadaan, ayaa si aqlabiyad leh ugu codeeyay in canshuurtaan naloo soo gudbiyo.

Iyadoo tobanaan sanno loo codeynayay diidmada canshuuraha, Jardiinkeenna Lake Forest aan jecel nahay waxay ka deensanaysay mustaqbalka. Nasiib ayaan u leenahay inaan halkan ku noolaano, waana wakhtigii ay codadkeenu ka tarjumi lahaayeen qiyaamkeena kuwa ugu wanaagsan. Si loo ilaaliyo ballanqaadkeenna ku aaddan ammaanka, booliiska bulshada, iyo deegaankeena, fadlan ku codee *Haa* ee Soo Jeedinta 1.

Bayaanka looga soo horjeedo

T.J. Fudge
nolfpprop1@gmail.com

Maalgelinta buuxda ee ammaanka dadweynaha ee Lake Forest Park waa mid muhiim ah. Sida aan booliiska ugu sheegay ka hor codeyntii sannadkii hore, si farxad leh ayaan ugu codeyn lahaa kordhinta canshuurta haddii ay kordhinayso miisaaniyadda booliiska.

Waxaan taageerayaa kor-u-qaadidda canshuurta si *loo kordhiyo* maalgelinta ammaanka dadweynaha; nasiib-darro, magaaladu kama go'na inay sidaas sameyso. Taa beddelkeeda, waxay keliya ballan qaadeen inay ku bixiyaan kororka canshuurta ee \$1M sannadkiiba ammaanka dadweynaha, iyadoo aanu jirin wax ballanqaad ah oo ah in caddadkan dheeriga ah lagu daro kharashka hadda ee ammaanka dadweynaha ee ka imaanaya sanduuqa guud.

Magaaladu waxay buunbuunisaa caqabadaha miisaaniyadda. Dakhliga maalgelinta guud ee aan xaddidnayn wuxuu kordhay qiyaas ahaan \$4M wadar ahaan, \$1M sannadkiiba, laga bilaabo 2021 ilaa 2025, taas oo si weyn uga badan \$35k ee ay magaaladu tilmaamayso sababtoo ah canshuurta hantidu ma aha isha keliya ee maalgelinta guud. Magaaladu waxay ku tilmaamaysaa yaraanta dhismaha maaliyadeed oo qiyaastii ah ~\$400k, haddana waxay ku dartay, halkii ay ka dhimmi lahayd, shaqaale aan ahayn kuwa ammaanka. Shaqaalaha cusub ee la qortay waxay ku kacayaan caddad la mid ah hoos-u-dhaca hadda jira.

Codeynta 'maya' ah khatar ma gelayso ammaankeenna dadweynaha. Waxay ku amraysaa magaalada in ay xaddido kharashyada aan la xiriiirin ammaanka iyo in ay ballan qaaddo kordhinta maalgelinta ee booliiskeena iyo shaqaalaha ammaanka dadweynaha.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Sicir bararka ayaa si adag u saameeyay miisaaniyadda ammaanka dadweynaha ee magaalada. Kharashyada 911-ka, xabsiga, adeegyada sharciga, iyo sugidda amniga ayaa si weyn u kordhay dhawwaanahan, magaaladuna waxay isticmaashay maalgelinta guud ee hal-mar ah si ay u buuxiso farqiga. Joogtaynta heerarka adeegyada waxay u baahan tahay dakhli dheeraad ah.

Waxaan u codeynaa qiyaamkeena marka aan dooranayno gole si loo ilaaliyo waxa aan daryeelno. Aan siino dowladda magaalada iyo shaqaalaha agabyada ay ku fulinayaan waxyaabahaan mudnaanta leh, lana xisaabtanno iyaga.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Wax bayaan ah lama soo gudbin.

Soo Jeedinta Lr. 1**Canshuurta Iibka
iyo Isticmaalka
ee Dheeraadka
ah ee Loogu
Talagalay Booliiska
iyo Ammaanka
Dadweynaha**

Golaha Magaalada Milton ayaa meel mariyay Qaraarka 26-2005 ee khuseeya soo jeedin si loo joogteeyo maalgelinta adeegyada booliiska iyo ammaanka dadweynaha. Haddii la ansixiyo, soo jeedintan waxay kordhin doontaa heerka canshuurta iibka iyo isticmaalka oo ah toban meelood hal meel oo boqolkiiba ah (0.001) si loo bixiyo maalgelin joogto ah oo loogu talagalay ujeeddooyinka ammaanka dadweynaha ee lagu oggol yahay sida ku xusan RCW 82.14.450, sida bixinta heerar shaqaale oo ku filan oo loogu talagalay fulinta sharciga. Kororkaan wuxuu dhaqan geli doonaa sannadka 2027.

Ma tahay in soo jeedintan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa
Haa ama Maya
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 82.14.450)

Bayaanka sharaxaadda

Haddii codbixiyeyaashu ansixiyaan, soo jeedintu waxay sii wadi doontaa maalgelinta adeegyada booliiska iyo badbaadada bulshada. Si loo ilaaliyo adeegyada booliiska iyo badbaadada bulshada heerarka buuxinaya filashooyinka magaalada iyo filashooyinka bulshada, magaaladu waxay u baahan tahay maalgelin dheeraad ah si loogu kabo dakhliga sanduuqa guud ee magaalada ee jira kaas oo loo adeegsado ujeeddooyinkan. Haddii la ansixiyo, soo jeedintan waxay kordhin doontaa heerka canshuurta iibka iyo isticmaalka oo ah toban meelood hal meel oo boqolkiiba hal ah (0.001) si loo bixiyo maalgelin joogto ah oo loogu talagalay ujeeddooyinka ammaanka dadweynaha ee lagu oggol yahay sida ku xusan RCW 82.14.450, sida bixinta heerarka shaqaalaha fulinta sharciga ee ku filan. Kordhintani waxay dhaqan gelaysaa 2027. Sida ku xusan RCW 82.14.450(7), Magaalada Milton waxaa laga baahnaa doonaa inay degmada la wadaagto 15% ee dakhliga canshuurta ee ay magaaladu hesho iyadoo la raacayo tallaabadan.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Trisha Summers
Karaaniga Magaalada
(253) 517-2705
tsummers@miltonwa.gov

Bayaanka lagu taageerayo

Dave Strader, Jacki Strader
YESonMiltonProp1@gmail.com

Ammaanku hadda wuu ka muhiimsan yahay sidii hore. Ansixinta toban meelood hal meel oo boqolkiiba hal ah (0.1%) oo canshuurta iibka ah - *keliya toban meelood hal meel oo senti ah doolar kasta* - waxay u oggolaan doontaa Waaxda Booliiska ee Milton inay sii haysato miisaaniyadeeda hadda jirta iyo adeegyadeeda tayada sare leh.

Kharashyada shaqaaleynta, tababarka, caymiska, teknolojiyada, qalabka, baaritaannada, adeegyada xabsiga, dacwad oogista, iyo hawlgallada maxkamadda dowladda hoose ayaa sii kordhaya, halka baahida loo qabo ammaanka dadweynaha ay si weyn u kordhay. Maalgashigan yar ee gudaha laga soo saaray wuxuu xaqiijinayaa inaan sii haysano saraakiil si heer sare ah u tababaran oo ku qalabaysan qalabka casriga ah ee caqabadaha maanta, isagoo bixinaaya fulinta sharciga ee jawaab-celinta leh ee ay bulshadeennu filayso.

Markaad ansixiso xeerkan, waxaad gacan ka geysanaysaa ilaalinta xasilloonida maaliyadeed, fududeynta cadaadiska saaran Maalgelinta Guud, iyo ilaalinta maalgelinta waddooyinka, jardiinooyinka, iyo kaabayaasha muhiimka ah. Codkaaga Haa wuxuu maalgeliyaa xasilloonida maskaxda, wuxuu taageeraa ammaanka bulshada, wuxuu daboolaa baahiyaha sii kordhaya ee caddaaladda dambiyada, wuxuuna ilaaliyaa tayada nolosha Milton hadda iyo mustaqbalkaba.

Ilaali waxa ugu muhiimsan. Ku Codee Haa.

Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda xeerkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda xeerka.

Maamulada xeerarka ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda xeerka warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

Soo Jeedinta Lr. 1**Canshuurta Iibka iyo Isticmaalka ee Ka Hortagga Dabka iyo Caddaaladda Dambiyada**

Golaha Magaalada ee Magaalada SeaTac ayaa ansixiyay Xeerka Lr. 26-1017 ee khuseeya maalgelinta ammaanka dadweynaha iyo adeegyada kale ee Magaalada. Haddii la ansixiyo, soo jeedintan waxay kordhin doontaa heerka canshuurta iibka iyo isticmaalka ee Magaalada 1/10aad ee 1% ah (0.1%) si loo bixiyo maalgelinta adeegyada ammaanka dadweynaha, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, ilaalinta dabka, ka hortagga dabka iyo ka jawaabista caafimaadka degdegga ah; taageerada fulinta sharciga iyo shaqaaleynta iyo sii haysashada shaqaalaha; ujeeddooyinka caddaaladda dambiyada; hawlgallada ammaanka dadweynaha, dayactirka iyo mashaariicda hantida waaweyn; iyo hawlgallada iyo adeegyada kale ee ammaanka dadweynaha ee lagu oggolaaday sida ku xusan RCW 82.14.450. Ma tahay in soo jeedintan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleanka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa
Haa ama Maya
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 82.14.450)

Bayaanka sharaxaadda

Magaalada SeaTac waxay bixisaa adeegyada ammaanka dadweynaha iyo adeegyada la xiriira si toos ah iyo iyada oo loo marayo qandaraasyo lala galay Maamulka Dab-damis Goboleedka ee Puget Sound iyo Xafiiska Sheriff-ka Degmada King. Adeegyadaan waxay taageeraan deganeyaasha iyo kumanaan qof oo maalin kasta u safra SeaTac si ay u helaan hoteelada deegaanka, maqaayadaha, ganacsiyada, fursadaha shaqo, iyo Seattle-Tacoma International Airport, oo gebi ahaanba ku dhex yaalla Magaalada.

Soo qulqulashadan waxay dhalisaa tirada dadka soo booqda ee maalinlaha ah oo in ka badan lix laab tirada deganeyaasha Magaalada. U adeegidda deganeyaasha iyo dadka safra waxay dhalisaa tiro aad u sareysa oo aan isku dheellitirnayn oo ah dhacdooyinka dabka iyo xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka ee adag, waxayna kordhisaa baahiyaha loo qabo adeegyada ammaanka dadweynaha. Sicir bararka iyo xaaladaha khatarta ah ee goobta shaqada ayaa kordhiyay kharashka adeegyadaan. Dakhliyada magaalada ma aysan la jaan qaadin, waxaana loo baahan yahay kheyraad dheeraad ah si loo sii wado bixinta adeegyada muhiimka ah ee dab-damiska, caafimaadka iyo ammaanka dadweynaha.

Soo jeedinta 1 waxay oggolaan doontaa 0.1% canshuurta iibka iyo isticmaalka ee iibka tafaariiqda iyo isticmaalka ee canshuurta laga qaado ee gudaha SeaTac. Canshuurtu waxay khuseyn doontaa iibsashada canshuurta laga qaadi karo ee deganeyaasha iyo dadka safra. Keliya macaamillada canshuurta laga qaadi karo marka loo eego sharciga gobolka Washington ayaa la canshuuri lahaa; inta badan raashinka waa laga dhaafay. Sharciga gobolka ayaa sidoo kale canshuurtaan ka dhaafaya iibka gaadiidka iyo 36-ka bilood ee ugu horreeya ee kiraysiga gaadiidka. Dakhliga ka soo xarooda canshuurta waxaa loo qaybin doonaa 85% magaalada iyo 15% Degmada King. Ugu yaraan saddex meelood hal meel oo dakhliga ka mid ah waxaa loo isticmaali doonaa oo keliya ujeeddooyinka ilaalinta dabka, ujeeddooyinka caddaaladda dambiyada, ama labadaba, sida uu u baahan yahay RCW 82.14.450. Canshuurtani waxay ku dari lahayd \$0.10 iibsi canshuuran oo ah \$100.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Cindy Corsilles
Qareenka Magaalada
(206) 973-4662
cityclerk@seatacwa.gov

Bayaanka lagu taageerayo

James Lovell, Damiana Merryweather

Magaalada SeaTac waa bulsho gaar ah. Maalin kasta, kumanaan shaqaale ah, dadka safra ah, booqdeyaal ah, iyo isticmaaleyaasha garoonka diyaaradaha ah ayaa soo gala magaaladeena, iyagoo abuuraya baahiyo loo qabo adeegyada ammaanka dadweynaha oo ay ku jiraan booliiska, dab-damiska, iyo jawaab-celinta caafimaadka ee degdegga ah. Adeegyadaan waxay ilaaliyaan qof walba oo ku nool, ka shaqeeya, soo booqda, iyo ganacsi ka sameeya SeaTac.

Soo jeedinta 1 waxay bixisaa hab caddaalad ah si loo maalgeliyo adeegyada muhiimka ah. Halkii culayska oo dhan la saari lahaa deganeyaasha SeaTac oo keliya, canshuurta iibka ee Ammaanka Dadweynaha ee 0.1% ee dhex dhexaadka ah waxay weydiinaysaa qof kasta oo iibsiyo canshuur laga qaadayo ka sameeya bulshadeenna inuu wax ku darsado—oo ay ku jiraan booqdeyaasha, dadka safra, iyo shaqaalaha isticmaala isla markaana ka faa'iidaysta adeegyada.

Magaaladeenu waxay adeegyada ammaanka dadweynaha siisaa bulsho maalin kasta aad uga ballaaran tirada dadka halkan degan. Waa caddaalad keliya in dadka yimaada SeaTac ee ku tiirsan nidaamkeena ammaanka dadweynaha ay sidoo kale gacan ka geystaan sidii adeegyadaas looga dhigi lahaa kuwo xooggan.

Marka hadda tallaabo la qaado, magaalada SeaTac waxay haysataa fursad ay ku hayso oo ay ku sii haysato maamulka deegaanka ee ku saabsan sida loo isticmaalo dakhliga deegaanka laga soo saaro. Haddii Degmada King ay marka hore soo rogto canshuurteeda iibka ee ammaanka dadweynaha, SeaTac waxay heli doontaa qayb ka yar dakhligaas, waxayna yeelan doontaa xakamayn ka yar isticmaalkeeda. Ku Codee *Haa* ee Soo Jeedinta 1.

Bayaanka looga soo horjeedo

Susan Constable

Dadka SeaTac way soo jeedaan oo ay daawanayaan—*mar kale*. Sannadkii 2014, Golaha Magaalada iyo shaqaaluhu waxay soo rogeen canshuurta adeegyada ee korontada, kaybalka, internetka, taleefanka, iyo waxyaabo kale. Sannadkii 2015, codbixiyeyaashu waxay beddeleen golahaas, canshuurta adeegyada dib ayaa looga noqday, Maamulihii Magaaladana shaqada ayaa laga eryay. Golaha cusub ayaa xitaa diiday kororka tooska ah ee canshuurta hantida. Taasi waxay biloowday toban sanno oo xisaabtan maaliyadeed ah, hareeraha waddooyinka cusub ah, maalgelin dheeraad ah, iyo kordhinta shaqaalaha booliiska ah si SeaTac looga dhigo mid ammaan ah.

Tan iyo xilligaas, inta badan Golaha Magaalada waxaa lagu beddelay dad wata ajende ka duwan. Dheeraadkii waa dhammaaday, kharash-gareynta faraha ayay ka baxday, haddana waxay rabaan inay canshuuraha kordhiyaan *mar kale*—markaan waxay ku kordhinayaan ganacsiyadeena deegaanka. Bulsho ganacsi oo kobcaysa ayaa gacan ka gaysatay in SeaTac laga dhigo mid ka mid ah magaalooyinka ugu qiimaha jaban ee Degmada King. Ha dilin boolanboollada dhasha ukunta dahabka ah si aanan nafteena uga dhex saarin bulshadeenna qiimaha sare awgeed. Maxaa xiga—ma canshuur kale oo adeegyada tamarta ah mise kordhinta canshuurta hantida? Golaha iyo shaqaaluhu waxay halis gelinayaan shaqooyinkooda—*mar kale*

Fadlan yaan la idin marin-habaabin. Canshuurta B&O waa calaamad digniin u ah waxa imaan kara haddii aynaan beddelin jihada. Horrey ayaan u samaynay, waan samayn karnaa *mar kale*.

Ku codee Maya ee kordhinta canshuurtaan!

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Soo jeedintani 1 *ma aha* canshuur saaran deganeyaasha SeaTac ama ganacsiyada maxalliga ah. Waxay *tahay* qalabka ugu wanaagsan ee aan haysano si aan dakhli uga soo ceshano kumanaanka dadka safra ah ee booqda SeaTac sannad kasta. Xilli uu jiro koror aan horrey loo arag oo ku yimid kharashyada ammaanka dadweynaha, waa habka ugu wanaagsan ee lagu xaqiijin karo in deganeyaasha iyo booqdeyaashaba ay sii wadaan helitaanka adeegyo ammaan dadweyne iyo kuwo degdeg ah oo la isku halayn karo.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Canshuurta iibka ee Ammaanka Dadweynaha ayaa xitaa ka sareysa canshuurta B&O. Kuwaas, iyo canshuuraha adeegyada tamarta ee cusub, dhammaantood waxaa loo qorsheeyay isla kulankii golaha. Golahaan iyo shaqaaluhu waxay qabaan dhibaato kharash-garayneed—deganeyaasha SeaTac mar hore ayaa canshuur lagu dilay. Garoonka Diyaaraduhu waa marin-habaabin. *Kuwa ugu waaweyn* macaamillada ee garoonka diyaaradaha—tigidhada diyaaradaha—waa laga dhaafay canshuurta iibka. Canshuurahaan cusub waa kuwo dib-udhac ah oo dhibaya deganeyaasha.

Danta dhammaanteen darteed, *Ku codee Maya!*

Soo Jeedinta Lr. 1**Xeerka Gaadiidka Seattle**

Magaalada Seattle waxay meel marisay Xeerka Lr. 127474 ee khuseeya maalgelinta adeegga gaadiidka iyo baahiyaha gaadiidka ee la xiriira ee gudaha Seattle.

Soo jeedinta 1 ee Magaalada Seattle waxay u qoondayn doontaa maalgelin adeegyada gaadiidka dadweynaha ee faa'iidada u leh deganeyaasha Seattle, oo ay ku jiraan adeegyo aad u soo noqnoqda; barnaamijyada qiimaha la awoodi karo ee loogu talagalay shakhsiyaadka u qalma; mashaariicda isku haleynta, helitaanka, iyo cimilada; adeegga la xoojiyay ee RapidRide iyo waddooyinka u adeega xarumaha deegaanka iyo aagagga mudnaanta sare ee sinnaanta leh; fududeynta ballaarinta Sound Transit; iyo kuwa kale sida ku cad Xeerka 127474. Waxay oggolaanaysaa canshuurta iibka iyo isticmaalka oo ah 0.3% muddo ilaa toban sanno ah si loogu beddelo canshuurta iibka ee 0.15% ee hadda jirta ee ay codbixiyeyaashu ansixiyeen ee wakhtigeedu dhammaanayso Maarso 31, 2027.

Ma tahay in Soo Jeedintan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa laga bilaabo bogga 148.



Waxaad u codeynaysaa
Haa ama Maya
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 36.73.065(1))

Bayaanka sharaxaadda

Sannadkii 2020, Xeerka 126250 wuxuu sharci ka dhigay 0.15 boqolkiiba, oo ah canshuurta iibka iyo isticmaalka ee lixda sanno ah ee ujeeddooyinka gaadiidka. Canshuurta waxaa loo dhigay sharci iyadoo la raacayo awoodda ay codbixiyeyaasha Seattle siiyeen Magaalada markii ay ansixiyeen Xeerka 126115. Canshuurtu waxay dhacaysaa Maarso 31, 2027.

Si loo beddelo maalgelintaan, Soo Jeedinta 1 waxay soo jeedinaysaa in Magaalada la siiyo awoodda ay sharci kaga dhigto canshuurta iibka iyo isticmaalka ee ujeeddooyinka gaadiidka dadweynaha iyada oo loo marayo xeer mustaqbalka ah, oo leh heerka ugu sareeya oo ah 0.3 boqolkiiba iyo muddada ugu dambeysa oo ah toban sanno. Canshuurta cusub ma dhaqan geli karto wax ka horreeya Abriil 1, 2027.

Dakhliga canshuurta ayaa ahaan lahaa oo keliya ujeeddooyinka lagu qeexay Xeerka 127474, oo ay ku jiraan (kuwa kale oo ay ka mid yihiin): Adeegyada Metro-ga Degmada King oo leh in ka badan 65 boqolkiiba istaagyada gudaha Seattle; hirgelinta talooyinka Guddiga Hawsha Badbaadada Gaadiidka Goboleedka ee Degmada King; saacadaha adeegga ee khadadka RapidRide ee hadda iyo kuwa mustaqbalka ee u adeega Seattle, xiriirinta xarumaha goboleedka, iyo waddooyinka u adeega aagagga mudnaanta sare ee sinnaanta leh; barnaamijyada taageeraya helitaanka gaadiidka ee dadka waayeelka ah ee u qalma, shakhsiyaadka naafada ah, deganeyaasha guryaha dakhligoodu hooseeyo, dhallinyarada iyo dadka waaweyn ee dhallinyarada ah, ardayda, iyo kuwa kale; qorsheynta iyo geynta gaadiidka korontada ee la kordhiyay ee bulshooyinka qaarkood ee ay saameysay wasakhowga; dayactirka kaabayaasha gaadiidka iyo hagaajinnada raasumaalka; iyo shaqaaleysiinta barnaamijyada si loo fududeeyo mashaariicda Sound Transit 3.

Guddiga La-talinta Gaadiidka Seattle wuxuu u adeegi doonaa sidii guddiga kormeerka dadweynaha ee loo xilsaaray talo ka bixinta kharash gareynta dakhliga Soo Jeedinta 1. Warbixinnada sannadlaha ah iyo kuwa muddada dhexe ee Magaalada, iyo sidoo kale warbixinnada lagu codsaday iskaashiga lala leeyahay King County Metro, waxay qiimeyn doonaan waxtarka lacagta la kharash gareeyay iyo adeegyada la bixiyay.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Polly Grow

Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka ee Seattle

(206) 615-1248

polly.grow@seattle.gov

Bayaanka lagu taageerayo

Kirk Hovenkotter, Kathryn Ricchiuto, Nick Sattelle
info@hoponboardseattle.org

Seattle waxay u baahan tahay gaadiid dadweyne oo wanaagsan. La'aanteed, rakaabka naafada ah, dadka waaweyn, dhalinyarada, iyo qoysaska shaqeeya waxay ku xayiran yihiin sugitaanka baska waxayna seegaan fursadaha. Gaadiidka dadweynuhu waa inuu noqdaa qayb habsami leh oo ka mid ah nolosha dadka, ee ma aha culays loo qorsheeyo.

Sannadkii 2020, waxaan u codeynay in la hagaajiyo adeegga baska ee guud ahaan Seattle. Xeerkaas ayaa keenay: basasku waxay socdaan marar ka badan, 10,000 oo ka mid ah deriskeenana waxay helaan kaararka gaadiidka dadweynaha ee bilaashka ah. Laakiin maalgelintaan waxay dhammaanaysaa sannadka 2027 haddii aynaan cusbooneysiin mooyee.

Keliya \$29 oo dheeraad ah sannadkiiba qoyskiiba, Soo Jeedinta 1 waxay xaqiijin doontaa in basasku yimaadaan marar badan, xilli dambe oo habeenkii ah, iyo dhammaadka toddobaadka. Waxay labanlaabi doontaa kaararka bilaashka ah ee loogu talagalay dadka dakhligoodu hooseeyo ee degan Seattle. Iyadoo la helayo basas aan isku halayn karno, qoysas badan ayaa ka baaqsan kara kharashka shidaalka ama gaari labaad. Iyo dhammaanteen waxaynu ku raaxaysan karnaa saxmad gaadiid oo ka yar iyo hawo ka nadiifsan. Ku codee "Had" si basaska Seattle ay u sii yimaadaan.

Waxaa taageeray Duqa Magaalada Katie Wilson, Madaxa Fulinta ee Degmada King Girmay Zahilay, Xubnaha Golaha Magaalada Seattle Hollingsworth, Saka, Foster, Juarez, Kettle, Lin, Rinck, Rivera, iyo Saka, Xubnaha Golaha Degmada King Barón, Dembowski, Lewis iyo Mosqueda, MLK Labor, ATU 587, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Isbahaysiga Waddooyinka Seattle (Seattle Streets Alliance), 350 Seattle, Ururka Raaceyaasha Gaadiidka (Transit Riders Union), Isbahaysiga Doorashooyinka Gaadiidka (Transportation Choices Coalition), The Urbanist, iyo kuwo kale.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Xeerkan wuxuu maalgelinayaa adeegga baska ee Metro-ga Degmada King. Codeynta maya waxay dhimmaysaa adeegga baska ee dadka shaqeeya ay ku tiirsan yihiin. La'aanteed, shaqaalaha habeenkii dambe iyo kuwa shaqeeya xilliyada kala duwan ayaa khasaaraya. Xeerkan wuxuu naga caawinnayaa inaan awoodno inaan ku noolaano magaaladeena qaaliga ah.

Xeerkan wuxuu qoys dakhligoodu hooseeyo ku kacaa \$17 sannadkii. Lahaanshaha baabuur wuxuu ku kacayaa \$11,577 sannadkii. Soo Jeedinta 1 waxay bixisaa kaararka ORCA oo bilaash ah oo la siiyo 22,000 oo ka mid ah rakaabka dakhligoodu ugu hooseeyo. Ku Codee Haa ee Soo Jeedinta 1.

Bayaanka looga soo horjeedo

Ari Hoffman

Siyaasiyiinta Seattle waxay sheegaan inay daneeyaan awoodi karidda nolosha, ka dibna waxay deganeyaasha weydiistaan inay ansixiyaan canshuur kale oo iibka oo dib-u-dhac ah. Soo Jeedinta 1 waxay labanlaabi doontaa canshuurta iibka ee Xeerka Gaadiidka Seattle laga bilaabo 0.15% ilaa 0.30%, taas oo canshuurteena iibka ka dhigaysa 10.7%, oo ka mid ah heerarka ugu sareeya ee magaalo kasta oo weyn oo ku taal Ameerika. Ka hor inta aan wax badan laga dalban canshuur bixiyeyaasha, dowladda waa in ay muujisaa la xisaabtanka lacagta ay mar horreyba hesho.

Xeerka waxaa ku jira maalgelin la xiriirta Sound Transit, xilli ay hey'addu la dhibtoonayso fulinta mashaariicdii loo ballanqaaday codbixiyeyaasha. Deganeyaasha Ballard iyo West Seattle waxay bixiyeen canshuuraha Sound Transit muddo sannado badan ah iyadoo ballaarinta tareenka fudud ee qorsheysan ay wajahayaan caqabado maaliyadeed oo aad u weyn iyo hubaal la'aan. Dhanka kale, hey'adaha gaadiidka dadweynaha ayaa dakhliga lacagta rakaabka ka tagaya iyadoo aan la ururin. *Ugu yaraan saddex meelood hal meel oo ka mid ah rakaabka Sound Transit ayaa raacay iyaga oo aan bixin lacagta intii lagu jiray World Cup.* Canshuur bixiyeyaasha waa inaan si joogto ah looga dalban inay bixiyaan lacag dheeraad ah iyadoo hey'aduhu ay ku guuldareysanayaan inay lacagaha safarka ka ururiyaan rakaabka.

Qoysaska Seattle waxay mar horreyba wajahayaan kharashyada sare ee guriyeynta, cuntada, adeegyada, iyo gaadiidka. Canshuuraha iibka ayaa si aan isu dheellitirnayn culays u saara qoysaska shaqeeya iyo dadka dakhligoodu hooseeyo sababtoo ah waxay isticmaalaan qayb ka weyn dakhliga qoyska. Gaadiidka la isku halayn karo waa muhiim. Sidoo kale la xisaabtanka. Aqalka magaalada waa inuu mudnaanta siiyaa kheyraadka jira, dalbadaa maamul mas'uul ah, oo uu hagaajiya ururinta khidmadda ka hor inta aan la kordhin canshuuraha.

Ku codee Maya Soo jeedinta 1.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Taageerayaashu waxay Soo Jeedinta 1 ugu yeerayaan "keliya \$29 oo dheeraad ah," laakiin taasi waxay yaraynaysaa arrinta dhabta ah: Canshuurta iibka ee Seattle waxay kor ugu kici doontaa 10.7%, iyadoo si ugu daran u saameynaysa qoysaska shaqeeya iyo deganeyaasha dakhligoodu hooseeyo. Laba-laabidda canshuurtaan dib-u-dhaca ah ma aha awood-u-yeelasho.

Gaadiidka dadweynaha ee la isku halayn karo wuxuu mudan yahay maamul mas'uuliyad leh. Ka hor inta aysan wax badan dalban, Aqalka City iyo hey'adaha gaadiidka dadweynaha waa inay mudnaanta siiyaan dakhliga hadda jira, ururiyaan khidmadaha aan la bixin, oo ay caddeeyaan in canshuur bixiyeyaashu ay helayaan natiijooyin. Dadka degan Seattle horreyba waxay lacag badan u bixiyaan mashaariicda gaadiidka dadweynaha ee loo ballanqaaday. Ku codee maya ilaa inta la xisaabtanka laga horumarinayo.

Soo Jeedinta Lr. 1**Aasaasidda Degmada
Jardiinka Magaalo
Weynta ee Shoreline**

Golaha Magaalada Shoreline ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 562 ee khuseeya abuurista degmada jardiinka magaalo weynta ee Shoreline.

Soo jeedintan ayaa abuurii doonta Degmada Jardiinka Magaalo Weynta ee Shoreline si loo maalgeliyo oona dib loogu maalgeliyo soo iibsashada, dhisidda, hawlgalka, dayactirka, barnaamijyada, cusbooneysiinta, iyo ballaarinta xarunta barkadda iyo xarumaha madadaalada ee mustaqbalka. Degmada, oo leh xuduuddo la mid ah kuwa Shoreline, oo ay maamusho Guddi ka kooban Xubnaha Golaha Magaalada, waxay adeegsan doontaa awoodaha sharciga gobolka, waxay bixin doontaa maalgelin joogto ah, waxayna soo rogi doontaa canshuuraha hantida caadiga ah oo aan ka badnayn \$0.75/\$1,000 oo ah qiimeynta la qiimeeyay (heerka bilowga ah ee la filayo ayaa ah \$0.55/\$1,000, ama sida loogu baahdo si loo soo saaro qiyaas ahaan \$8.8 milyan sannadkii).

Ma tahay in la aasaaso Degmada Jardiinka Magaalo Weynta ee Shoreline?

Taageeraya aasaasidda Degmada Jardiinka Magaalo Weynta ee Shoreline oo ay maamuli doonaan Xubnaha Golaha Magaalada ee Shoreline.

Ka soo horjeeda aasaasidda Degmada Jardiinka Magaalo Weynta ee Shoreline.

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleanka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa
Taageeridda ama Ka Soo Horjeedidda
ee Soo Jeedinta Lr. 1

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 35.61.040)

Bayaanka sharaxaadda

Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyaashu, soo jeedintan waxay abuuraysaa Degmada Jardiinka Magaalo Weynta ee Shoreline (MPD) si loo maalgeliyo loona dib-u-maalgeliyo dhismaha, hawlgelinta, iyo dayactirka xarun barkad gudaha ah oo cusub iyo xarumaha madadaalada ee mustaqbalka ee suurtagalka ah. MPD waxay yeelan doontaa xuduuddo la mid ah kuwa Magaalada Shoreline (Magaalada). MPD-du waxay noqon lahayd maamul canshuureed cusub (RCW 35.61) oo uu maamulo guddi ka kooban Xubnaha Golaha Magaalada. Shaqaalaha magaalada ayaa ka shaqeysiin lahaa oo dayactiri lahaa barkadda si waafaqsan heshiis lala galay MPD.

Xarunta oo qiyaas ahaan dhan 48,000 oo cagood oo laba jibaaran ayaa laga dhisayaa hantida ay leedahay Magaaladu ee ku taal 17828 Midvale Ave N. Naqshadda hordhaca ah ee la heli karo waxaa ku jira barkadda dabaasha ee 8-layn leh oo leh meesha laga boodo; barkadda madadaalada oo leh webi tamashleyn oo loogu talagalay socodka iyo dul-sabbaynta; barkadda daaweynta biyaha ee ka diiran; sauna; qolalka dharka lagu beddesho ee caalamiga ah; qolalka xafladaha; goobta baabuurta la dhigto; iyo goobaha bannaanka ee ku xirmaya Interurban Trail.

Abuurista MPD-ga waxay oggolaan lahayd dhismaha xarumaha madadaalada ee mustaqbalka haddii maalgelin dheeraad ah la heli karo. Naqshadda xarunta barkadda waxay reebaysaa boos loogu talagalay ku kordhin suurtagal ah oo ah xarun madadaalo.

Heerka soo rogitaan canshuur hanti ee bilowga ah ee la filayo waa \$0.55/\$1,000 ee qiimeynta la qiyaasay, ama sida lagama maarmaanka u ah si loo soo saaro qiyaas ahaan \$8.8 milyan sannadkiiba. Heerka ugu sareeya ee la oggol yahay waa \$0.75/\$1,000. Dakhligu wuxuu bixin doonaa dhismaha, hawlgelinta, iyo dayactirka xarunta barkadda. Dakhliga waxaa loo isticmaali karaa oo keliya xarunta barkadda iyo xarumaha madadaalada ee mustaqbalka, ee ma aha baahiyaha kale ee Magaalada.

Ururinta canshuurta waxay bilaaban doontaa 2028. Mulkiilaha guriga ee leh guri qiimihiisu dhexdhexaad yahay (\$831,000 sannadka 2026) wuxuu bixin lahaa qiyaas ahaan \$421 sannadkii, celcelis ahaan \$35 bishii, oo ah canshuuraha hantida ee dheeriga ah.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Eric Bratton
Maamulaha Barnaamijka Isgaarsiinta
(206) 801-2217
ebratton@shorelinewa.gov

Bayaanka lagu taageerayo

Krishnakant Nammi, Susie McDowell, Buddy Smith
letshorelineswim.org

Waa Wakhtigii Shoreline! Aan maalgashano mustaqbalkeena. Bal qiyaas carruurta oo baranaysa badqabka biyaha, dhallinyarada oo ku tartamaysa tartannada dabaasha, dadka waaweyn oo ku raaxaysanaya dabaasha wareegga, iyo dadka da'da ah oo caafimaadkooda ku ilaalinaya jimicsiga biyaha ee taageerada leh. Ku dhex dabaallo webiga degan inta ay derisku qaadanaayaan xiisadaha jimicsiga oo ay dhisayaan bulshada. Xarun lagu dabaasho oo si wanaagsan loo qorsheeyay iyada oo loo marayo Soo Jeedinta 1 waxay bixin doontaa saldhig ammaan ah oo la heli karo oo loogu talagalay kooxaha dabaasha ee dugsiga sare iyo goob kulan oo soo dhawweyn leh oo loogu talagalay deganeayaasha da' kasta leh.

Daraasaduhu waxay muujinayaan in casharada dabaasha ee rasmiga ahi ay 88% yareeyaan khatarta qarqashada ee carruurta yaryar, halka jimicsiga biyaha uu hagaajiyo xoogga, dhaqdhaqaaqa, iyo ka-hortagga dhicitaanka ee dadka waaweyn. Barkad deegaan ayaa u diyaarinaysa dhallinyaradeena inay si badqab leh u sahamiyaan biyaha Washington waxayna gacan ka geysataa in deganeayaasha waayeelka ah laga dhigo kuwo firfircoon.

Deganeayaasha Shoreline waa inaysan ku qasbanaan inay ka baxaan tuulada ama bixiyaan khidmado ka sareeya oo ah kuwa dadka aan deganeayaasha ahayn si ay u helaan barkadda. Abuurista Degmada Jardiinka Magaalo Weynta (MPD) waxay aasaasaysaa maalgelin maxalli ah oo degan, oo heellan si loo dhiso, loo maamulo, loona dayactiro xarun la awoodi karo, oo sannadka oo dhan ah halkan guriga dhexdiisa.

Isagoo si siman loogu maalgeliyay canshuuraha hantida, xeerkan ayaa si toos ah u maalgeliya caafimaadka, ammaanka, iyo fayo-qabka bulshada. Isbeddel samee maanta. Ku codee *haa* Soo Jeedinta 1 si loo helo aragti caafimaad qabta oo ku saabsan mustaqbalka Shoreline. Mustaqbalka waa hadda!

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Bayaanka looga soo horjeedo waa mid asal ahaan aan sax ahayn. MPD ma yeelan lahayn awood canshuureed oo ballaaran; waxay ku xaddidan tahay inta u dhexeysa 55 iyo 75 senti halkii \$1,000 ee la qiimeeyay. Sheegashadooda ah in MPD uu kordhin doono canshuuraha hantida 33% waa mid aan jirin. Waxay qiyaas ahaan kordhi lahayd 5.5% ilaa 7.5%.

Halkii ay ka ahaan lahayd kharash raaxo, xeerka wuxuu keliya beddelayaa barkaddii aan ku raaxaysan jirnay laga soo bilaabo 1971 ilaa iyo 2020. Cabsi-gelin + xisaab khaldan = dood xun. Ku Codee *haa*.

Bayaanka looga soo horjeedo

Sandra Cribbs, Jeff Hays, Joesph Smith
www.shorelineprop1.com

Kor-u-qaadid Canshuur oo Joogto ah oo loogu talagalay Barkad Raaxo oo dhan \$100 Milyan? Codbixiyeayaasha Shoreline waxay u baahan yihiin inay si taxaddar leh u tixgeliyaan soo jeedintan. Ma awoodno inaan tan ku khaldanno.

Xeerkan ayaa abuuraya Degmo Jardiinka Magaalo Weynta oo cusub oo leh awoodda ay si joogto ah kor ugu qaadayso canshuuraha hantida ee deegaanka/magaalada ugu yaraan 33% — dhammaantood si loo maalgeliyo xarun barkad oo dhan \$100 milyan bilow ahaan. Laakiin tani ma aha curaar ku meel gaar ah. Waa canshuur joogto ah, waxayna siinaysaa Degmada Jardiinka Magaalo Weynta ee dhawwaan la abuuray awood ballaaran oo ay ku maalgeliso mashaariicda mustaqbalka iyada oo aan marnaba dib loogu soo laaban codbixiyeayaasha si looga helo ansixin.

Degane kasta ayaa bixiya qiimaha. Mulkiileyaasha hantida ayaa si toos ah u bixinaaya bilka, mulkiileyaasha guryahana shaki la'aan waxay kharashka si toos ah ugu gudbin doonaan kiraysteayaasha iyadoo loo marayo kiro sare.

Shoreline waxay rabtaa inaad bixiso \$100 milyan oo loogu talagalay keliya xarun barkad raaxo leh – ma jirto xarun madadaalo, ma jirto xarun jimicsi, ma jirto xarun waayeel, ma jirto jiko ganacsi. Waa lacag aad u badan oo loogu talagalay wax aad u yar oo dad aad u yar uun faa'iido u yeelan doona. Magaaladu waxay leedahay mudnaanno ka degdeg badan oo ay tahay in wax looga qabto koror kasta oo canshuureed oo mustaqbalka ah. Ha abuurin degmo canshuur oo cusub oo magaalada siinaysa jeeg maran. Soo Jeedinta 1 waxay Shoreline ka dhigi doontaa mid ka dhib badan in la awoodo dhammaan dadka weligeed. Ku Codee *maya*.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Ma aha wakhtigii lagu dari lahaa deyn dhan \$100M oo loogu talagalay xarun barkad laguna rari lahaa canshuur bixiyeayaasha koror canshuurta deegaanka ah oo dhan 33%. Kuwani waa wakhtiyada dhaqaale oo aad u hubaal la'aan ah oo leh heerarka dulsaarka oo sareeya iyo sicir barar sii kordhaya.

Tiro badan oo kordhino canshuur oo kale ah ayaa durba la ansixiyay ama la filayaa 2-3 sanno ee soo socda. Kororkii dhawwaanahan ee canshuurta hantida ayaa aad uga sare maray sicir bararka. Waxaa jira xad inta ay canshuur bixiyeayaashu awoodaan inay bixiyaan. Kala horreysiinta doolarada canshuurta ee xaddidan waa muhiim. Ku Codee *maya*.

Soo Jeedinta Lr. 1**Curaarta Dhismaha Dugsiga iyo Beddelaadda**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Auburn Lr. 408 ayaa ansixiyay Qaraarka Lr. 1426, ee khuseeya soo jeedin si loo maalgeliyo dhismaha dugsiga cusub iyo kuwo beddel ah. Soo jeedintan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay bixiso maalgelinta si loo dhiso Dugsi Dhexe oo cusub iyo in la beddelo Dugsiga Dhexe ee Cascade iyo Dugsiga Hoose ee Alpac, si loo kordhiyo awood qaadka iyo loo yareeyo cabbirka fasallada, loo casriyeeyo teknolojiyada iyo deegaannada waxbarashada, loo hagaajiyo ammaanka iyo amniga, loona dayactiro garoomada ciyaaraha ee isticmaalka ardayda iyo bulshada, iyadoo soo saaraysa ilaa iyo \$491,000,000 oo ah curaarta waajibaad guud oo ku buuxsami doona muddo 20 sanno gudahood, iyo soo rogista canshuuraha hantida sannadlaha ee dheeraadka ah si dib loogu bixiyo curaarta, sida qaraarka uu dhigaayo.

Ma tahay in soo jeedintan la:

Ansixiyo

Diido

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleanka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa inaad
Ansixiso ama Diido
Soo Jeedinta Lr. 1

Shuruudaha ansixinta: 60% aqlabiyad haa ah iyo soo bixitaanka ugu yaraan 40% ee codbixiyeyaasha dhiibtay warqadaha codbixinta doorashadii guud ee ugu dambaysay (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(b))

Bayaanka sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta 1 waxay Degmada Dugsiga Auburn u oggolaanaysaa inay maalgeliso dhismaha dugsiga cusub iyo kuwo beddel ah iyadoo bixinaysa ilaa iyo \$491,000,000 oo ah curaarta waajibaadka guud. Haddii codbixiyeyaashu ansixiyaan soo jeedintan, Degmadu waxay lacagaha kasoo baxa curaarta u isticmaali doontaa si ay u (1) dhisto oo qalabayso Dugsi Dhexe cusub #5, (2) dhisto oo qalabayso dugsiga dhexe cusub oo leh awood qaad ballaaran si loogu beddelo Dugsiga Dhexe ee Cascade, iyo (3) dhisto oo qalabayso dugsiga hoose cusub oo leh awood qaad ballaaran si loogu beddelo Dugsiga Hoose ee Alpac. Mashaariicdan waxay kordhin doonaan awoodda dugsiga, waxay yarayn doonaan tirada fasallada iyo isticmaalka fasallada la qaadi karo, waxay horumarin doonaan badbaadada iyo amniga, waxay casriyayn doonaan teknolojiyada iyo jawiga waxbarashada ardayda, waxay horumarin doonaan hufnaanta tamarta, waxayna horumarin doonaan oo ballaarin doonaan garoomada ciyaaraha iyo xarumaha ciyaaraha isboortiska ee loogu talagalay isticmaalka ardayda iyo isticmaalka bulshada.

Haddii codbixiyeyaashu ay ansixiyaan soo jeedintan, Degmada waxay filaysaa inay hesho qiyaastii \$36,248,500 oo ah maalgelinta caawinnaadda dhismaha oo ay ka helayso Gobolka si loo dhammaystiro mashaariicdan. Curaarta ayaa ku buuxsami doona muddo 20 sanno gudahood ah waxaana dib loogu bixin doonaa lacagaha xad dhaafka ah ee kasoo xarooda canshuuraha hantida. Webseedka Degmada ee www.auburn.wednet.edu/2026election wuxuu leeyahay saameynta canshuurta ee la filayo ee la xiriirta curaartan. Waxaa laga yaabaa in mulkiileyaasha guryaha ee waayeelka ama naafada ah ee buuxiya xadadka dakhliga ee la cayimay ay heli karaan ka dhaafitaanka canshuurta. Si aad u hesho macluumaad la xiriira ka dhaafitaannada, ka wac Qiimeeyaha Degmada King taleefanka (206) 296-3920.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Cindi Blansfield
Ku-xigeenka Kormeeraha Guud
(253) 931- 4930
cblansfield@auburn.wednet.edu

Bayaanka lagu taageerayo

Cari Manry, Terri Herren

Ku Codee *Haa* si aad u dhisto dugsiga dhexe oo cusub oo aad u beddesho Dugsiga Dhexe ee Cascade iyo Dugsiga Hoose ee Alpaca oo sii duugoobaya. Maanta, in ka badan 1,100 oo ka mid ah ardaydeenna dugsiga dhexe ayaa ku ciriirisan 45 fasal oo ku meel gaar ah (portables), halka Alpaca ay wajahayso dayactiro joogto ah oo qaali ah. Curaartani waxay si toos ah u xallisa ciriiriga degmada oo dhan ee dugsiyada dhexe.

Bulshadeenna iyo ardaydeennuba waxay hadda u qalmaan xarumo casri ah—ee maaha sannado ka dambeeya. Dugsiyo nadiif ah, ammaan ah, oo casri ah waxay kiciyaan hanka ardayda, waxay xoojiyaan u heellannaanta macallimiinta, waxayna kor u qaadaan xaafadaha oo dhan. Carruurteenu waxay u qalmaan meelo loogu talagalay guusha.

Kani waa maalgashi mas'uuliyad maaliyadeed leh. Degmada Dugsiga Auburn waxay leedahay taariikh la xaqiijiyay oo ah fulinta mashaariicda wakhtigii loogu talagalay iyo kharash ka yar miisaaniyadda iyadoo canshuuraha hoos lagu haynaayo. Iyadoo lagu qiyaasay qiimaha \$1.10 oo keliya halkii \$1,000 oo ah qiimaha la qiimeeyay—qiyaas ahaan \$50.41 bishii ee guri \$550,000 ah—waxaan sugi karnaa saddex dugsi oo casri ah si ay ugu adeegaan jiilal badan.

Aqlabiyad ayaa u codeysay *Haa* doorashadii ugu dambeysay, laakiin waxaan u baahanahay aqlabiyad sare oo ah 60% si aan u sugno maalgelinta muhiimka ah ee gobolka ee u dhiganta. Ardaydeennu ma sugi karaan.

Bayaanka looga soo horjeedo

Eric Petersen

Degmada Dugsiga Auburn waxay dalbanaysaa xirmo curaar oo baaxad leh oo dhan \$491 milyan si loo dhiso saddex dugsi oo deegaanka ah, iyadoo celcelis ahaan xarun kasta ay ku kacayso \$163 milyan oo yaab leh midkiiba. Dhanka kale, Degmada Dugsiga Tacoma ee deriska la ah ayaa si guul leh u dhisaysa siddeed dugsi oo kala duwan oo ku kacaaya celcelis ahaan \$66 milyan midkiiba.

Lowell iyo Whittier-ka cusub waa dugsiyo hoose oo casri ah, oo heerka ugu sareeya ah kuwaas oo midkiiba ku kacaayo wax ka yar \$50 milyan. Hase yeeshee, Auburn waxay dalbanaysaa lacag dhan \$118 milyan si loo dumiyo, naqshadeeyo & loo dhiso Alpaca Elementary. Farqigan weyn ee kharashka ayaa dhalinaya su'aal iska cad: halkee ayay dhab ahaan u socotaa \$68-ka milyan ee kale ee dugsigan oo keliya?

Intaa waxaa dheer, heerka canshuurta hantida ee \$1.10 ee ay degmadu xayaysiisay ayaa gabi ahaanba ku guuldaraysta inuu daboolo dib-u-bixinta raasumaalka ah \$491 milyan iyo deynta dulsaarka ee \$350+ milyan ah. Dib-u-bixinta dulsaarkan baaxadda leh ee ururay waxay kor u qaadaysaa heerarka dhabta ah ee bilowga ah ilaa \$1.93 halkii \$1,000 kasta, iyadoo muujinaysa farqi weyn oo u dhexeeya tirooyinka la xayaysiisay iyo xaqiiqada maaliyadeed ee adag.

Qoysaska shaqeeya iyo dadka deegaanka ee daacadda ah ayaa si dhib leh nolosha ugu maareeya jawiga dhaqaale ee adag ee maanta. Degmada dugsiga waa inay canshuur bixiyeyaasha deegaanka u keentaa codsi macquul ah, oo mas'uuliyad maaliyadeed leh halkii ay ka riixi lahayd riyoonin qaali ah oo aad loo buunbuuniyay kuwaas oo culays maaliyadeed oo culus oo aan caddaalad ahayn saaraya bulshadeenna oo dhan. Ku Codee *Maya*

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Isbarbardhigaya marin-habaabinta ah waxay iska indhatiraan farqiyaada u dhexeeya cabbirka dugsiga, xaaladaha goobta, iyo heerarka dhismaha ee muddada dheer. Auburn waxay dhisaysaa dugsiyo loogu talagalay inay sii jiraan qarni waxayna leedahay diiwaan la xaqiijiyay oo ah dhammaystirka mashaariicda wakhtigii loogu talagalay iyo miisaaniyaddii loogu talagalay. Beddelidda dugsiyada duugoobay iyo fasallada guurguura ee ciriiriga ah hadda waa maalgelin muddo dheer ah oo ka caqli badan marka loo eego sii wadista dayactirrada qaaliga ah. Ku Codee *Haa* si loo bixiyo dugsiyo ammaan ah, oo casri ah oo loogu talagalay jiilasha ardayda Auburn.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Haddii aad leedahay hanti lagu qiimeeyay \$600,000, biilkaaga canshuurta hantida ee hadda ee dugsiyada oo keliya waa \$4,800. Haddii aad ku darto curaartaan qiimaha dhabta ah ee \$1.93 halkii \$1,000 oo ah qiimaha la qiimeeyay, qaybtaada canshuurta dugsiga waxay u kici doontaa \$5,958 sannadkii.

Curaarta \$650 milyan ah ee ay ansixisay Tacoma waxay beddelaysaa ama dib u dhis ku sameynaysaa 11 dugsi oo sii duugoobaya; Auburn waxay rabtaa \$491 milyan 3 dugsi oo keliya. Ha oggolaan in lagu cagajugleeyo, ku qasab inay tan dib u soo gudbiyaan iyadoo la raacinayo kharash dhab ah, ee aan ahayn tirooyin bararsan. Ku Codee *maye*.

Soo Jeedinta Lr. 1**Curaarta Lagu Beddelaayo oo Dib Loogu Dhisayo Dugsiyada Duugoobaya Laguna Hagaajinaayo Ammaanka**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Highline Lr. 401 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 11-26, ee khuseeya hagaajinnada dugsiyada xaafadda iyo casriyaynta ammaanka. Soo jeedintan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay: beddesho ama dib u dhis ku sameyso afar dugsi oo sii duugoobaya (Cascade, Chinook, Sylvester, Akadeemiyaha CHOICE), oo ay ku jiraan goobaha waxbarashada xirfadda/farsamada ee cusub, meelaha laga soo galo oo sugan, casriyaynta kaamirooyinka amniga; sameyso casriyaynta nidaamka dhismaha aasaasiga ah ee muhiimka ah ee degmada oo dhan, oo ay ku jiraan kulayliyaha, saqafka, korontada, tubooyinka biyaha; hirgeliso casriyaynta caafimaadka, ammaanka, nidaamka dabka iyo badbaadada dhul-gariirka ee degmada oo dhan; soo saarto \$595,400,000 oo ah curaarta waajibaadka guud oo ku buuxsami doona muddo 21 sanno gudahood ah; iyo inay soo rogto canshuuraha hantida ee dheeraadka ah ee sannadlaha ah si dib loogu bixiyo curaarta, dhammaan sida ku xusan Qaraarka Lr. 11-26. Ma tahay in soo jeedintan la:

Ansixiyo

Diido

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.



**Waxaad u codeynaysaa inaad
Ansixiso ama Diido
Soo Jeedinta Lr. 1**

Shuruudaha ansixinta: 60% aqlabiyad haa ah iyo soo bixitaanka ugu yaraan 40% ee codbixiyeyaasha dhiibtay warqadaha codbixinta doorashadii guud ee ugu dambeysay (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(b))

Bayaanka sharaxaadda

Soo Jeedinta 1 waxay oggolaanaysaa curaarta dhismaha dugsiga si loo beddelo loona dib-u-dhiso dugsiyada sii xumaanaya loona sameeyo hagaajinnada iyo casriyaynta ammaanka iyo helitaanka ee guud ahaan degmada. Soo jeedinta 1 waxay horumarin doontaa badqabka, ammaanka, iyo helitaanka ardayda, shaqaalaha, iyo bulshada, waxay kor u qaadi doontaa deegaannada waxbarashada ardayda, waxay horumarin doontaa oo ay ballaarin doontaa fursadaha waxbarashada, waxayna bixin doontaa xarumaha waxbarashada ardayda ee lagama maarmaanka ah (oo ay ku jiraan goobaha waxbarashada ee xirfadda/farsamada).

Curaarta waxay u oggolaan doontaa Dugsiyada Dadweynaha ee Highline inay: (1) wax ka qabashada baahiyaha muhiimka ah ee degmada oo dhan, oo ay ku jiraan casriyaynta nidaamka dhismaha asaasiga ah iyo hagaajinta goobta (tubooyinka biyaha, nidaamyada biyaha kulul, HVAC, korontada, saqafka, amniga, nidaamyada dabka iyo hagaajinta badbaadada dhul-gariirka); (2) dhisidda dugsi cusub oo lagu beddelaayo Dugsiga Dhexe Sylvester; (3) dhisidda dugsi cusub oo lagu beddelaayo Dugsiga Dhexe Cascade; (4) qayb ahaan dib u dhiska iyo casriyaynta Dugsiga Dhexe Chinook (beddelidda dhismeyaasha, xarumaha iyo kaabayaasha ugu duugga ah, uguna dhacsan dhismeyaal cusub; dayactirka iyo cusbooneysiinta dhismeyaasha hadda la isticmaali karo; iyo ku beddelidda fasallada guurguura fasallo joogto ah); (5) dib u dhiska iyo casriyaynta goobtii hore ee Dugsiga Dhexe Southern Heights oo laga dhigaayo xarun cusub oo loogu talagalay Akadeemiyaha CHOICE; iyo (6) diyaarinta qorsheyaasha naqshadaynta ee dhismaha, dib-u-horumarinta ama beddelidda Xarunta Waxbarashada Goorta Hore ee Valley View iyo Dugsiga Hoose ee Hilltop. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa highlineschools.org/bondandlevy.

\$595,400,000 ee curaarta waajibaadka guud waxa dib loogu bixin doonaa canshuurta hantida sannadlaha ee dheeraadka ah oo ku filan in lagu bixiyo adeegga deynta curaarta inta lagu guda jiro ugu badnaan muddo 21 sanno ah. Ka dhaafitaannada canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Wixii macluumaad oo dheeraad ah, la xiriir Waaxda Qiimeynta ee Degmada King, 206-296-3920.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Andrew Burgess

Xisaabiye

(206) 631-3201

andrew.burgess@highlineschools.org

Bayaanka lagu taageerayo

Tina Orwall, Dan Satterberg, Sili Savusa
www.yesforHighline.org

Ardayda Highline waxay mudan yihiin dugsiiyo ammaan ah, caafimaad qaba, oo u qalabaysan waxbarashada maanta. Ku codee haa Soo jeedinta. 1 si dib loogu dhiso dugsiiyada duugoobay, wax looga qabto dayactirrada muhiimka ah, iyo in dugsiiyada laga dhigo kuwo ADA la heli karo iyo kuwo aad uga sugan khataraha ammaanka.

Curaartan waxay dhammaan ardayda dugsiga dhexe ee bulshadeenna u bixin doontaa fasallo sugan oo casri ah. Waxay beddeli doontaa dugsiiyada dhexe ee Cascade iyo Sylvester, waxay dib u dhisi doontaa Dugsiga Dhexe ee Chinook, waxayna dib u dhisi doontaa Southern Heights oo loogu talagalay Akadeemiyaha CHOICE. Waxay xaqiijinaysaa deegaan waxbarasho oo dugsii dhexe oo loo siman yahay oo loogu talagalay ardayda ku sugan xaafad kasta oo Highline ah.

Ku codeynta Haa waxay dhowraysaa maalgeshiyada bulshadeenna ee xarumaha dadweynaha. Maadaama saqafyada, kulaylinta, tubooyinka biyaha, iyo nidaamyada korontadu ay duugoobayaan, dayactirrada waxay noqonayaan kuwo ka sii qaali ah, fashillada xarumuhuna waxay carqaladeeyaan waxbarashada ardayda. Curaartu waa maalgashi wax ku ool ah oo xaqiijinaya xarumo ammaan ah oo la isku halayn karo oo loogu talagalay ardayda iyo bulshadeenna tobanaanka sanno ee soo socda.

Curaarta deegaanka waa habka keliya ee lagu maalgeliyo dhismaha iyo dayactirka dugsiga. Gobolku ma bixiyo maalgelintaan. Highline waxay leedahay taariikh tobanaan sanno ah oo ay mashaariicda ku dhammaystirto wakhtigii iyo miisaaniyaddii loogu talagalay. Dugsiiyada tayada leh waxay xoojiyaan xaafadaha waxayna bulshooyinka ka dhigaan kuwo ammaan badan. Fadlan la midow waalidiinta, bareyaasha, deriska iyo hoggaamiyeyaasha bulshada ee ku codeynta haa ee Soo Jeedinta 1 si dhammaan ardayda Highline ay wax ugu barran karaan dugsiiyo ammaan ah, oo casri ah.

Bayaanka looga soo horjeedo

Mike Bishoff, Kirsten Cooper, Katie Paulson
BetterPlanforHighline.com

Hadda u codee Maya soo jeedinta curaarta ee Highline ee \$595.4 milyan ee jebiyay rikoorka. Haddii la ansixiyo, canshuur bixiyeyaashu waxay ansixin doonaan in ka badan \$1.4 bilyan oo deynta dhismaha ah toban sanno gudahood oo keliya. Dhanka kale, Highline waxay arday kasta sannadkiiba kharash garaysaa in ka badan \$25,000, taas oo \$3,000 ka badan celceliska gobolka. Hase yeeshee 67% ee ardayda ayaa imtixaanka ka hooseeya heerka darajada ee akhriska, iyo 76% ayaa ku fashilma halbeegyada heerka darajada ee xisaabta iyo sayniska.

Xitaa dugsiiyada dhawwaan dib loo dhisay, xogta gobolka ayaa muujinaysa imaanshaha oo ka sii daraya iyo waxqabadka waxbarashada oo hoos u dhacaya. Dhismeyasha cusub waxay u muuqan karaan kuwo soo jiidasho leh, laakiin dhismooyinka ma xallin karaan waxbarashada fashilmaysa.

Degmada dugsigu waxay doonaysaa inay saddex dugsi dhexe dib u dhiso isku mar. Maxaad ugu bilaabi weyday labo oo aad dib ugu soo laaban weyday midka saddexaad? Curaar ka yar ayaa hagaajin doonta dugsiiyada iyadoo kharashyada ka dhigaysa kuwo si fudud loo maareeyn karo. Iyadoo qiimaha nolosha uu si degdeg ah kor ugu kacaayo, qoysasku ma awoodi karaan culayskan aan loo baahnayn.

Ardaydu waxay u qalmaan dugsiiyo ammaan ah iyo waxbarasho xooggan. Canshuur bixiyeyaashu waxay mudan yihiin kharash-gareyn mas'uuliyad leh, daah-furnaanta, iyo la xisaabtanka. Highline waxay iska indha tirtay walaacyada bulshada wuxuuna ku fashilmay inuu kasbado kalsoonideena. Maxay tahay inaan ugu kalsoonaanno degmada curaar intaan la'eg? Highline dib ugu celi bilowgii qorsheynta. Dalbo curaar ka yar, kana caqli badan oo ardayda mudnaanta koowaad siinaysa, canshuur bixiyeyaashana siinaysa heshiis caddaalad ah. Ku Codee Maya Hadda.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Ardayda dhigata dugsiiyada cusub ee la dhisay ee Highline waxay leeyihiin imaansho iyo ka-qaybgal arday oo sareeya. Dhammaan ardaydu waxay mudan yihiin dugsiiyo ammaan ah oo casri ah. Ma awoodi karno inaan dib u dhigno beddelidda dugsiiyada duugoobaya ee wakhtiga hore iyadoo kharashyada dhismaha ay kor u kacayaan, taasoo canshuur bixiyeyaasha ku kici doonta wax aad u badan hadhow. Soo Jeedinta 1 waxaa qaabeeyay guddiga la talinta ee ay bulshadu hoggaamiso, kaas oo soo jeedinaaya qorshe wax ku ool ah oo diiradda lagu saarayo baahiyaha muhiimka ah iyo maamulka mas'uuliyadda leh ee doolarka canshuurta. Highline waxay kasbatay kalsoonideena iyadoo dugsiiyo cusub ku keentay wakhtigii loogu talagalay, miisaaniyaddii loogu talagalay. Fadlan ku codee Haa!

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Dugsiiyada badqabka leh & loo siman yahay ma aha inay u baahdaan qiimo dhan \$595.4M. Sinnaanta dhabta ah waxay ka dhigan tahay xarumo sugan & horumarka waxbarashada, laakiin xitaa xarumaha cusub, waxbarashadu way hoos u dhacaysaa. Deynta dhismaha ee baaxadda leh ma aha beddel wax ku ool ah ama la aqbali karo oo loo hayo waxbarashada qolka fasalka.

Weydiisashada canshuur bixiyeyaasha \$161.3M ee dib-u-habeynta qayb ahaan ee Chinook - oo dib loo dhigay ilaa iyo 2031- ma aha mid macquul ah marka dib-u-dhistaanyo dhammaystiran ee Sylvester (\$180.3M) & Cascade (\$172.1M) ay ku kacayaan qiyaas ahaan isku mid. Dalbo qorsheyn ka caqli badan, oo ka mas'uuliyad badan: Ku Codee Maya Hadda!

Soo Jeedinta Lr. 2**Canshuurta Teknolojiyada Waxbarashada iyo Horumarinnada Hantida Waaweyn**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Highline Lr. 401 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 12-26, ee khuseeya teknolojiyada waxbarashada iyo horumarinnada hantida waaweyn si loo joogteeyo waxbarashada ardayda. Soo jeedintan waxay maalgelin doontaa teknolojiyada, barnaamijyada iyo shaqaalaha degmada oo dhan iyo horumarinnada kale ee hantida waaweyn ee aanu Gobolku maalgelin, oo ay ku jiraan ilaalinta amniga internetka, internet la isku halayn karo, hawlaha teknolojiyada iyo kaabayaasha, iyo helitaanka teknolojiyada ee ardayda/shaqaalaha, waxayna Degmada u oggolaan doontaa inay canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda ku soo rogto dhammaan hantida la canshuuri karo ee ku dhex taal Degmada:

Sannadka Ururinta	Canshuurta La Qiyaasay/\$1,000 Qiimaha La Qiimeeyay	Caddadka Canshuurta
2027	\$0.36	\$12,000,000
2028	\$0.35	\$12,000,000
2029	\$0.34	\$12,000,000
2030	\$0.32	\$12,000,000

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 12-26. Ma tahay in soo jeedintan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleanka barta kingcounty.gov/elections.



**Waxaad u codeynaysaa
Haa ama Maya
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 2**

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))

Bayaanka sharaxaadda

Soo Jeedinta 2 waxay oggolaanaysaa canshuur raasumaal oo loogu talagalay teknolojiyada waxbarashada iyo horumarinnada dhismeyasha iyo kaabayaasha si loo joogteeyo barashada ardayga loona hagaajiyo badbaadada ardayga, badbaadada shaqaalaha, ammaanka ardayga, iyo ammaanka shaqaalaha. Soo jeedinta 2 waxay wax ka qaban doontaa xaaladda hadda jirta ee qalabka teknolojiyada waxbarashada, kaabayaasha iyo nidaamyada iyo xarumaha dugsiga ee duugoobay iyo kuwa wakhtiga hore ee dhanka waxbarashada.

Canshuurta hantida waaweyn waxay maalgelin doontaa: (1) ilaallinnada iyo nidaamyada amniga internetka ee ilaaliya xogta ardayda iyo xogta shaqaalaha; (2) internet la isku halayn karo, shabakadaha fiillo la'aanta ah iyo kaabayaasha teknolojiyada ee taageera baridda iyo barashada; (3) aaladaha ardayda iyo aaladaha shaqaalaha, teknolojiyada qolka fasalka iyo softiweerka waxbarashada; (4) tababarka iyo taageerada bareyaasha iyo shaqaalaha ee lagu hirgelinayo horumarinnada teknolojiyada; iyo (5) horumarinnada kale ee teknolojiyada iyo casriyaynta guud ahaan degmada. Canshuurta hantida waaweyn waxay sidoo kale maalgelin doontaa horumarinnada dhismeyasha iyo kaabayaasha ee degmada oo dhan si loo taageero dhismaha, casriyaynta iyo dib-u-habeynta dugsiyada iyo xarumaha. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa highlineschools.org/bondandlevy.

Canshuurta afarta sanno ah ee la soo jeediyay waxay oggolaan doontaa ururinta \$12,000,000 mid kasta oo ka mid ah sannadaha 2027 ilaa 2030. Heerka canshuurta ee halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee loo baahan yahay inuu soo saaro caddadyadaan canshuurta ayaa lagu qiyaasay inay tahay \$0.36 sannadka 2027, \$0.35 sannadka 2028, \$0.34 sannadka 2029, iyo \$0.32 sannadka 2030. Heerarka canshuurta ee saxda ah waxaa lagu go'aamin doonaa iyadoo lagu salaynayo qiimaha dhabta ah ee la qiyaasay wakhtiga canshuurta.

Ka dhaafitaannada canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Wixii macluumaad oo dheeraad ah, la xiriiir Waaxda Qiimeynta ee Degmada King, 206-296-3920.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriiir:

Andrew Burgess

Xisaabiye

(206) 631-3201

andrew.burgess@highlineschools.org

Bayaanka lagu taageerayo

Trisha Arias, Karen Keiser, Pat Thompson
www.yesforHighline.org

Ardayda iyo macallimiinta Highline waxay ku tiirsan yihiin teknolojiyada. Ku codeynta haa ee Soo Jeedinta 2 waxay soo celinaysaa dhacday maalgelintii ay ansixiyeen codbixiyayaashu ee loogu talagalay nidaamyada sugan, internetka la isku halayn karo, iyo qalabyada fasalka ee ardayda u diyaariya guusha.

Canshuurtaan waxay maalgelisaa amniga internetka si loo ilaaliyo macluumaadka ardayga ee xasaasiga ah. Waxay bixisaa kharashka barnaamijyada waxbarashada, helitaanka internetka, tababarka macallinka ee isticmaalka teknolojiyada ee mas'uuliyadda leh, taageerada farsamada, iyo aaladaha loogu talagalay ardayda iyo shaqaalaha. Waxay maalgelisaa nidaamka u suurto geliya dugsiyada inay la xiriiraan waalidiinta xaalad degdeg ah iyo isgaarsiinta maalinlaha ah. Kharashyada teknolojiyada ayaa kor u kacaaya. Canshuurtu waxay buuxisaa farqiga u dhexeeya maalgelinta uu bixiyo gobolka iyo kharashyada dhabta ah ee lagu daboolaaayo baahiyaha teknolojiyada ee ardayda iyo dugsiyada.

Teknolojiyada casriga ah ee la isku halayn karo waa maalgashi lagama maarmaan u ah waxbarashada ardayga. Ardaydu waa inay bartaan isticmaalka badqabka iyo mas'uuliyadda leh ee teknolojiyada ay la kulmaan hadda iyo mustaqbalka. Teknolojiyada la isku halayn karo waxay ka dhigan tahay in ardaydu ay wakhti badan ku bixiyaan barashada, macallimiintuna ay wakhti badan ku bixiyaan waxbaridda iyo wakhti yar oo ay ku sugaan in nidaamyada shaqeeyaan.

Canshuurta teknolojiyada waa maalgashi wax ku ool ah oo lagu sameeyo qalabyada ay ardayda Highline u baahan yihiin maanta iyo xirfadaha ay u baahan doonaan si ay ugu guuleystaan mustaqbalka. Fadlan ku biir waalidiinta, bareyaasha, deriska iyo hoggaamiyayaasha bulshada si aad ugu codeysno Haa Highline ugu dambeyn 3-da Nofeembar.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Canshuurtaan waxay maalgelisaa teknolojiyada loogu talagalay ammaanka ardayga, xiriirka waalidka, iyo amniga internetka - ee ma aha kordhinta wakhtiga shaashadda. Macallimiintu waxay u isticmaalaan teknolojiyada waxbarashada fasalka ee casriga ah ee ay dadku hoggaamiyaan. Ardaydu waxay u baahan yihiin inay bartaan isticmaalka badqabka iyo mas'uuliyadda leh ee teknolojiyada si ay ugu diyaar garoobaan xirfadaha mustaqbalka. Hubinta xaqiiqda: Siyaasadda 6101 wali waxay u baahan tahay ansixinta guddiga dugsiga ee qandaraasyada teknolojiyada ee milyan doolar ah. Codbixiyayaasha ayaa si aqlabiyad leh u ansixiyay canshuurta teknolojiyada ee midka/keliya ee Highline sannadkii 2020. Ku codee haa: dib u soo celi maalgelinta wakhtigeedu dhammaatay oo sii ardaydeenna faa'iidooyinka la midka ah kuwa bulshooyinka kale.

Bayaanka looga soo horjeedo

Mike Bishoff, Katie Paulson, Lauren Schmidt
BetterPlanforHighline.com

Sida waalidiinta Highline ahaan, si qoto dheer ayaan u taageernaa dugsiyadeena dadweynaha waxaana doonaynaa deegaanno waxbarasho oo tayo sare leh arday kasta. Waxaan sidoo kale ognahay in guusha dhabta ah ee ardaygu ay ka timaaddo macallimiinta heellan, ee aysan ahayn wakhtiga shaashadda. *Waxaan Maya ugu codeynaynaa canshuurtaan sababtoo ah carruurteena iyo macallimiinteena waxay u qalmaan waxbarasho la xaqiijiyay oo uu bini'aadam hoggaaminayo halkii ay ka heli lahaayeen qandaraasyo teknolojiyadeed oo aan dhammaad lahayn.*

Siyaasadda qalabka ee 1:1 ee Highline waxay cunug kasta siisaa qalab ku xiran internetka laga bilaabo Kindergarten. Halka degmooyinka magaalooyinka waaweyn iyo dugsiyada gaarka loo leeyahay ay yaraynaayan aaladaha iyo hantidhawr ku sameynayaan qandaraasyada teknolojiyada, Highline waxay naga codsanaysaa inaan si toos ah u cusbooneysiino. Waxaan u baahannahay inaan hakino oo aan dib u qiimeyno sida teknolojiyada looga isticmaalaayo fasalladeenna.

Codbixiyayaasha ayaa ansixiyay canshuuro dhowr ah oo dhanka teknolojiyada ah tan iyo 2018, haddana natiijooyinka waxbarashada ayaa hoos u dhacay. Ku tiirsanaanta barnaamijyada qaaliga ah ee aan la xaqiijin sida i-Ready halkii laga isticmaali lahaa waxbarid dhammaystiran oo caddeyn ku salaysan si fudud uma shaqeynayso. Intaas waxaa dheer, canshuurtaan waa jeeg bannaan; iyadoo Siyaasadda 6101 hadda la beddelay bishii Juun, waxay maamuleyaasha siin doontaa awood hordhac ah oo ay ku saxiixaan qandaraasyada teknolojiyada ee malaayiinta doolar ah iyada oo aan loo baahnaa kulan dadweyne ama codeynta guddiga dugsiga.

Codka Maya ma aha ka tagista dugsiyadeena; waa dalbashada barasho ka caqli badan, oo teknolojiyad hoose leh iyo la xisaabtan dhab ah oo degmada ah ka hor inta aan la qarin jeeg dhan \$48 milyan. Ardaydeenna iyo macallimiinteena waxay u qalmaan wax ka wanaagsan. Ku Codee Maya Hadda.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Soo Jeedinta 2 waxay si khaldan u qaadanaysaa in teknolojiyad badan ay ka dhigan tahay waxbarasho badan iyo in barnaamijka kombuyuutarka uu badbaadiyo wakhtiga macallinka. Taageeridda dugsiyadu ma aha inay ka dhignaato maalgelinta teknolojiyada aan la xaqiijin ama ku qasbidda carruurta yaryar inay goor hore ku tiirsanaadaan aaladaha.

Dugsiyada badqabka leh, ee shaqeynaya waxay u baahan yihiin qorsheyaal daah-furan, ee ma aha jeegag bannaan. Ku Codee Maya si aad u dalbato la xisaabtanka degmada: hantidhawr ku samee dhammaan qandaraasyada teknolojiyada, ka saar aaladaha 1:1 ee fasallada hore, deji siyaasado shaashadeed oo cad oo degmada oo dhan ah, oo dib u soo celi kormeerka tooska ah ee guddiga dugsiga ee tacliinta iyo kharash bixinta. Ardayda Highline waxay mudan yihiin wax ka wanaagsan.

Soo Jeedinta Lr. 1

Beddelaadda Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Kent Lr. 415 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 1718 ee khuseeya soo jeedin lagu taageerayo kharashyada barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada. Haddii la ansixiyo, soo jeedintan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, iyada oo lagu beddelaayo canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee ku dhex taal Degmada, si loo taageero barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee aanu maalgelin barnaamijka qaanuuniga ah ee Gobolka ee waxbarashada aasaasiga ah.

Sannadka Ururinta	Qiyaasta Canshuurta/\$1,000 Qiimaha La Qiimeeyay	Caddadka Canshuurta
2028	\$1.95	\$104,700,000
2029	\$1.93	\$111,100,000
2030	\$1.88	\$115,700,000
2031	\$1.84	\$121,400,000

Ma tahay in soo jeedintan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa **Haa ama Maya** ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))

Bayaanka sharaxaadda

Ansixinta Soo jeedinta 1 waxay u oggolaan lahayd Degmada Dugsiga Kent inay beddesho canshuur dhacaysa oo ay ansixiyeen codbixiyeyaashu oo loogu talagalay barnaamijyada iyo hawlgallada dugsiga iyadoo la soo rogayo canshuur dhan \$104,700,000 si loogu ururiyo 2028, \$111,100,000 si loogu ururiyo 2029, \$115,700,000 si loogu ururiyo 2030, iyo \$121,400,000 si loogu ururiyo 2031. Canshuurta la soo jeediyay waxay beddeli lahayd canshuur hadda jirta oo ay codbixiyeyaashu hore u ansixiyeen taas oo dhacaysa 2027. Canshuurta dhacaysa waxay hadda maalgelisaa qiyaas ahaan 15% kharashyada hawlgalka guud ee Degmada. Haddii la ansixiyo, canshuurta beddelaadda ah ee la soo jeediyay waxay bixin doontaa hawlaha maalinlaha ah ee dugsiga si loo daboolo baahiyaha ardayga ee uusan maalgelin Gobolku, oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn shaqaalaha iyo barnaamijyada u diyaargarowga kulliyadda iyo shaqada, shaqaalaha iyo barnaamijyada barashada jireed, bulsho, iyo dareen (oo ay ku jiraan la taliyeyaasha iyo shaqaalaha caafimaadka maskaxda), agabyada, sahayda, iyo kharashyada hawlgalka (oo ay ku jiraan adeegyada guud iyo caymiska), gaadiidka, shaqaalaha badbaadada iyo amniga, barnaamijyada ciyaaraha isboortiska iyo kuwa ka baxsan manhajka, maadooyinka la doorto, iyo barnaamijyada taageerada qolka fasalka.

Iyadoo lagu salaynayo macluumaadka qiimeynta la qiimeeyay ee la saadaaliyay, Degmadu waxay qiyaasaysaa heerka canshuurta oo ah \$1.95 halkii \$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay ee sannadka 2028; \$1.93 halkii \$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay ee sannadka 2029; \$1.88 halkii \$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay ee sannadka 2030; iyo \$1.84 halkii \$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay ee sannadka 2031. Waxaa laga yaabaa in mulkiileyaasha guryaha ee waayeelka ama naafada ah ee buuxiya xadadka dakhliga ee la cayimay ay heli karaan ka dhaafitaanka canshuurta. Si aad u hesho macluumaad la xiriira ka dhaafitaannada, ka wac Qiimeeyaha Degmada King taleefanka (206) 296-3920.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Dr. Wade Barringer
Ku-xigeenka Kormeeraha
(253) 373-7001
Wade.Barringer@kent.k12.wa.us

Bayaanka lagu taageerayo

Dana Ralph, Bill Boyce, Jeff Wagner
citizensforkentschools.com

Dugsiyadeenu waa mid ka mid ah maalgeshiyada ugu muhiimsan ee ay bulshadeennu sameyso—iyo canshuurtaan cusbooneysiinta waxay gacan ka geysan doontaa in maalgeshigaas uu ahaado mid xooggan. Waxay bixisaa maalgelin maxalli ah oo muhiim ah taas oo dugsiyada ka dhigta kuwo ammaan ah, taageerta barashada ardayga, bixisa fursadaha manhajka ka baxsan, isla markaana gacan ka geysata hubinta in ilmo kasta uu heli karo kheyraadka ay u baahan yihiin si ay u guuleystaan.

Ku codeynta *Haa* waxay ka dhigan tahay sii wadista maalgelinta deegaanka ee si toos ah u taageerta ardayda, macallimiinta, iyo barnaamijyada uusan gobolku si buuxda u bixin. Tan waxaa ka mid ah taageerada akadeemiyaha, ciyaaraha isboortiska, farshaxanka, kheyraadka caafimaadka dhimirka, muusigga, ammaanka, iyo gaadiidka. Maalgelintani waxay taabanaysaa kumanaan arday ah waxayna gacan ka geysataa qorista iyo sii haynta macallimiinta iyo shaqaalaha heerka sare ah ee ardaydan u diyaariya kulliyadda, xirfadaha, iyo nolosha.

Aan cusbooneysiino ballanqaadkeenna ku aaddan dugsiyada xooggan anagoo ku codeynayna *Haa!* Dugsiyada xooggan waxay taageeraan ganacsiyada maxalliga ah, waxay xoojiyaan qiimaha hantida, waxayna u diyaariyaan jiilka soo socda ee shaqaalaha iyo hoggaamiyeyaasha. Soo jeedintan waxay sii waddaa dhaqan soo jireen ah oo ah maalgashiga gudaha ee dugsiyadeena iyadoo la ilaalinayo mid ka mid ah heerarka canshuurta dugsiga ee ugu hooseeya degmooyinka deriska ah.

Canshuurtaan ma aha canshuur cusub. Waa maalgashi joogto ah oo lagu sameeyo fursadaha waxbarashada ee maanta iyo xoogga bulshadeenna ee berrito. Fadlan nagu soo biir si aad ugu codeyso *Haa* ardaydeenna, dugsiyadeena, iyo mustaqbalkeena aan wadaagno.

Bayaanka looga soo horjeedo

Joseph Riley

Dhammaanteen waxaan doonaynaa dugsiyo xooggan iyo arday si wanaagsan loo taageeray, laakiin qorista jeeg ka weyn ma xallin doonto maamul maaliyadeed oo liita. Degmadu waxay weydiisanaysaa *si weyn uga badan lacag* halka cabbirrada fasalladu ay kordhayaan, diiwaan gelintu ay hoos u dhacayso, qoysaskuna ay is weydiinayaan halka ay lacagtu dhab ahaan u socoto. Ma sii wadi karno inaan maalgelino hoggaan fashilmay xilli ardaydeennu ay dusha u ridanayaan culayska fasallada ka waaweyn iyo taageerada la dhimmay.

Hoggaanka degmada ayaa si joogto ah dhegaha uga xirtay bulshada, canshuurtaan ayaana la imaanaysa ballanqaadyo aan qabanayn oo lagu ilaalinayo hal barnaamij ama koox shaqaale ah. Ha khaldamin: kororkan canshuurta dib uma soo celin doonto kheyraadka muhiimka ah ee la dhimmay sannadkan, mana ka joojin doonto inay wax badan dhimman sannadka dambe. Ma sii wadi karno inaan u qorno jeegag maran maamul diidaya inuu wax dhegaysto, si joogto ah u bixiya wax ka yar degmooyinka ku hareeraysan, oo naftooda ka horumariya ardayda.

Waxaa intaas dheer, canshuurtaan waxay hal sannad ka horreysaa jadwalka, iyadoo aan wax saameyn ah ku yeelanayn maalgelinta ilaa 2028. *Codeynta "Maya" hadda waxba kuma kacayso fasalladeenna sannadka 2027.* U istaag la xisaabtanta dhab ah, hoggaan cusub, iyo natiijooyin ka wanaagsan oo loogu talagalay carruurteena. Maanta maya u codee, oo u oggolow degmada inay kalsoonidaada ku kasbato qorshe bulshada la jaan qaadaya ka hor inta aysan mar kale isku dayin sannadka dambe.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Sheegashooyinka mucaaradka ma waafaqsana xaqiiqooyinka. Degmada Dugsiga Kent waxay ka gudubtay toddoba hantidhawl oo la xisaabtanka maaliyadeed oo madax-bannaan oo isku xiga, waxayna sii haysatay qiimeyn deenta oo sareysa—calaamado la cabbirri karo oo ah maamul maaliyadeed oo mas'uuliyad leh, ee ma aha fowdo maaliyadeed.

Canshuurtaan cusbooneysiinta ma aha jeeg maran. Waxay maalgelin siisaa dugsiyada deegaanka, iyadoo lala xisaabtamayo doolar kasta. Ardaydeennu waxay u qalmaan go'aanno ku salaysan xaqiiqooyin iyo daah-furnaanta, ee ma aha sheegashooyin marin-habaabin ah oo wiigaya kalsoonida lagu qabo dugsiyadeena iyo dadka u adeegga.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Taageerayaashu waxay sheeganayaan in canshuurtaan ay maalgelin doonto waxyaabaha ay ka midka yihiin taageerada ardayda, ciyaaraha isboortiska, iyo fanka. Canshuurtii ugu dambeysay waxay ballanqaaday isla waxyaabahaas ilaa 2027, laakiin degmadu waxay jartay sannadkan.

Ha aqbalin ballanqaadyada maran. Halka ay canshuuruha kordhayaan, dhibcaha tijaabada iyo heerarka qalin-jebinta ayaa hoos u dhacaya, shaqaalaha ayaa la dhimmayaa, cabbirrada fasalladuna waa ay sii kordhayaan. *Ku codee "Maya" maanta.* Ka dhig degmada inay kasbato kalsoonidaada iyadoo wadata qorshe bulshada la waafajiyay iyo hoggaan cusub ka hor inta aysan mar kale isku dayin sannadka soo socda.

Soo Jeedinta Lr. 1

Curaarta Si Loo Hagaajiyo Xarumaha Dab-damiska iyo Gurmadka Degdegga ah

Guddiga Guddoomiyeyaasha Dab-damiska ee Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 20 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2026-002, ee khuseeya xarumaha gurmadka degdegga ah si loo ilaaliyo caafimaadka dadweynaha, nolosha iyo hantida. Soo jeedintan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay: hagaajiso xarumaha taageerada gurmadka degdegga ah iyo kaabayaasha ku yaalla labo goobood oo ay leedahay Degmadu; dayactirto oo casriyayso saldhiga dab-damiska ee hadda jira; soo iibsato qalabka dab-damiska iyo gurmadka degdegga ah; soo saarto curaar aan ka badnayn \$16,000,000 oo curaarta waajibaadka guud ah oo ku buuxsamaya muddo 20 sanno gudahood ah; iyo in ay soo rogto canshuuraha hantida dheeraadka ah ee sannadlaha ah si dib loogu bixiyo curaarta, dhammaantood sida ku xusan Qaraarka Lr. 2026-002. Ma tahay in soo jeedintan la:

Ansixiyo

Diido

*Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska
Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*



Waxaad u codeynaysaa inaad
Ansixiso ama Diido
Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: 60% aqlabiyad haa ah iyo soo bixitaanka
ugu yaraan 40% ee codbixiyeyaasha dhiibtay warqadaha
codbixinta doorashadii guud ee ugu dambaysay (Dastuurka
Washington, qodobka VII, qaybta 2(b))*

Bayaanka sharaxaadda

Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 20 waxay bixisaa adeegyada xakamaynta dabka iyo badbaadinta, adeegyada caafimaadka degdegga ah, iyo ka hortagga dabka iyo waxbarashada bulshada si loo ilaaliyo nolosha iyo hantida loogana ilaaliyo saameynta xun ee dabka, xaaladaha caafimaad ee degdegga ah ama u nuglaanshaha xaaladaha khatarta ah.

Guddiga Guddoomiyeyaasha Dab-damiska ayaa go'aamiyay in baaxadda aan ku filnayn iyo xarumaha gaboobay iyo kuwa wakhtiga hore ee Degmada, iyo baahida loo qabo in la hagaajiyo ammaanka goobta iyo adkeysiga, diyaargarowga hawlgalka iyo hufnaanta, iyo badbaadada bulshada, badbaadada dab-damiska iyo badbaadada jawaab-bixiyaha xaaladaha degdegga ah, ay u baahan tahay in Degmadu ay hagaajiso xarumaha taageerada jawaab-celinta xaaladaha degdegga ah iyo kaabayaasha laba goobood oo ay leedahay Degmadu. Horumarinnada waxaa ka mid ah dayactirka iyo casriyaynta saldhiga dab-damiska ee hadda jira, iyo soo iibinta qalabka dab-damiska iyo qalabka jawaab-celinta xaaladaha degdegga ah.

Haddii la ansixiyo, soo jeedintan waxay oggolaan doontaa curaarta waajibaadka guud oo aan ka badnayn \$16,000,000 kuwaas oo ku buuxsami doona muddo ugu badnaan 20 sanno ah isla markaana laga bixin doono canshuuraha hantida ee dheeraadka ah ee sannadlaha ah. Heerka canshuurta ee la qiyaasay waa qiyaas ahaan \$0.28 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay. Ka dhaafitaannada canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Wixii macluumaad oo dheeraad ah, la xiriir Waaxda Qiimeynta ee Degmada King, 206-296-3920.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Eric Hicks
Taliyaha Dab-damiska
(206) 772-1430
ehicks@kcfd20.org

Bayaanka lagu taageerayo

Terry Miller, Alesia D. Cannaday, Margie Lindberg

Sida guddiga xaafadda ahaan waxaan taageereynaa curaartan sababtoo ah waa maalgashi lagu sameynayo ammaanka iyo u diyaargarowga bulshadeenna. Waxaan u qalannaa adeegyo degdeg ah oo la isku halayn karo, xarumo ammaan ah oo loogu talagalay dab-damiyeyaasheena, iyo kheyraadka loo baahan yahay si loo waajaho caqabadaha mustaqbalka.

Dab-damiyeyaasheena waxay ka jawaabaan kumanaan wicitaanno degdeg ah oo ka yimaada saldhig la dhisay in ka badan 40 sanno ka hor oo aan loo ansixin u adkeysiga dhul-gariirka. Halka heellannaanta dab- damiyeyaasheena aanay weligeed isbeddelin, qaar ka mid ah xarumaha iyo qalabka ay maalin kasta isku halleeyaan ayaa gaaray dhammaadka muddadii ay waxtarka lahaayeen, waxayna u baahan yihiin in la beddelo.

Curaartan waxay casriyayn doontaa Saldhiga Dab-damiska 20, waxay beddeli doontaa mashiinka gurmadka ee duugoobay, waxayna horumarin doontaa xarunta hawlgallada degdegga ah ee degmada iyadoo dhisaysa keyd sugan oo u dhow oo loogu talagalay agabka xaaladaha degdegga ah iyo qalabka gurmadka. Mashaariicdan/dhismeyaashan waxay gacan ka geysan doonaan ilaalinta gawaarida gurmadka degdegga ah, agabyada, hagaajinta ammaanka dab-damiyeyaasha, iyo xaqiijinta in degmadu ay u diyaarsan tahay inay uga jawaabto dhammaan xaaladaha degdegga ah iyo masiibooyinka.

Curaarta la soo jeediyay waxay diiradda saaraysaa horumarinta dhismeyaasha iyo kaabayaasha ee muddada dheer oo aan lagu maalgelin karin miisaaniyadda hawlgalka ee caadiga ah ee degmada. Ayadoo la sameynayo maalgelintaan hadda, waxaan ilaalin karnaa oo aan hagaajin karnaa xarumaha iyo qalabka taageera jawaab-celinta degdegga ah sannadaha soo socda. Ku Codee *Haa* ee KCFD Lr. 20 Curaarta Ammaanka Bulshada.

Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda xeerkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda xeerka.

Maamulada xeerarka ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada “taageeridda” iyo “ka soo horjeedidda”. Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda xeerka warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go’aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

Soo Jeedinta Lr. 1**Canshuurta Haynta iyo
Hagaajinta Adeegyada
Qabuuraha ee Vashon**

Si loo taageero kharashaadka hawlgalka, loo casriyeeyo loona ilaaliyo diiwaannada aaska, loo helo qalabka lagama maarmaanka ah, horumarinta dhaqamada aaska cagaaran loo horumariyo, loona fududeeyo helitaanka hanti dheeraad ah, Guddiga Degmada Qabuuraha ee Degmada King Lr. 1 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 295 ee soo jeedinaaya koror joogto ah oo ku yimaada canshuurta hantida caadiga ah laga bilaabo qiyaas ahaan \$.03 (\$.02816) ilaa iyo \$.05 halkii \$1000 ee qiimeynta la qiimeeyay laga bilaabo 2027.

Ma tahay in soo jeedintan la:

Ansixiyo

Diido

*Qoraalka buuxa ee xeerkan ayaa laga heli karaa Xafiiska
Doorashooyinka ama oonleanka barta kingcounty.gov/elections.*



Waxaad u codeynaysaa inaad
Ansixiso ama Diido
Soo Jeedinta Lr. 1

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)

Bayaanka sharaxaadda

Xeerkan wuxuu khuseeyaa maamulidda joogtada ah iyo ilaalinta Vashon Cemetery. Qabuuraha waxay u adeegaan sidii goobta nasashada ee ugu dambeysa ee jiilal ka mid ah deganeyaasha jasiiradda, waana kheyraad taariikhi ah iyo mid bulsho oo muhiim ah. Maalgelinta ka dhalata xeerkan waxay taageeri lahayd dayactirka joogtada ah, ilaalinta diiwaannada qabuuraha, dayactirka iyo daryeelka xarumaha, iyo ilaalinta dabeecadda taariikhiga ah ee goobta si looga caawiyo xaqiijinta in qabuuraha ay ahaadaan kuwo ammaan ah, la heli karo, oo si wanaagsan loo dayactiray, iyadoo la ilaalinayo doorkeeda oo ah goob xasuus iyo milicsi ee jiilalka hadda iyo kuwa mustaqbalka. Xeerka ma beddelaayo lahaanshaha ama maamulka qabuuraha. Kororka labo senti ee halkii \$1000 ee qiimeynta la qiimeeyay wuxuu dhalinayaa kororka canshuurta hantida ee sannadlaha ah, halkii \$100,000 ee qiimaha canshuurta hantida ee la qiimeeyay, oo ah labo doolar sannadkii. Haddii la ansixiyo, kororka soo rogitaanka canshuurta hantida wuxuu dhalin doonaa wadarta canshuurta oo ah shan doolar (\$5.00) halkii \$100,000 ee qiimaha la qiimeeyay.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto xeerkan, la xiriir:

Catherine Sullivan
Guddoomiyaha
98070cemeterycommissioner@gmail.com

Bayaanka lagu taageerayo

Ma jiro wax bayaan ah oo lagu taageerayo xeerkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka lagu taageerayo xeerka.

Maamulada xeerarka ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada “taageeridda” iyo “ka soo horjeedidda”. Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda xeerka warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go’aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda xeerkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda xeerka.

Maamulada xeerarka ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada “taageeridda” iyo “ka soo horjeedidda”. Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda xeerka warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go’aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

Qoraalka buuxa ee Xeerka Lr. 127474

Xeer khuseeya canshuurta iibka iyo isticmaalka; bixinta u gudbinta codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada ee doorashada la qaban doono Nofeembar 3, 2026, soo jeedinta lagu ururinayo canshuurta iibka iyo isticmaalka si loo maalgeliyo gaadiidka dadweynaha iyo barnaamijyada gaadiidka ee la xiriira ee Seattle; iyo ansixinta iyo xaqiijinta falal hore oo gaar ah.

Hordhac:

Cutubka 36.73 ee Xeerka Dib-loo-eegay ee Washington (RCW) wuxuu dhigayaa dhisidda degmooyinka dheefaha gaadiidka ee magaalooyinka iyo degmooyinka wuxuuna u oggolaanayaa degmooyinkaas inay soo rogaan oo ay ku soo rogaan canshuuro iyo khidmado kala duwan si loo soo saaro dakhli lagu taageerayo horumarinnada gaadiidka ee faa'iidada u leh degmada isla markaana waafaqsan qorsheyaasha gaadiidka ee gobolka, ee goboleedka, ama ee deegaanka oo ay daruuri ka dhigeen heerarka saxmadda ee hadda jira ama si macquul ah loo sii saadaalin karo.

Xeerka 123397 ee Magaalada Seattle (Magaalada) wuxuu abuuray Degmada Faa'iidada Gaadiidka ee Seattle si loo dhowro loona dayactiro kaabayaasha gaadiidka, loo hagaajiyo ammaanka dadweynaha, loo hirgeliyo qaybaha Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee Gaadiidka Seattle iyo dukumentiyada kale ee qorsheynta, loona maalgashado hagaajinnada baaskiilka, lugeeyaha, dhaqdhaqaaqa xamuulka iyo gaadiidka dadweynaha, iyo in dadka la siiyo doorashooyin ay ku daboolaan baahiyahooda dhaqdhaqaaqa.

Qaraarka 12 ee Seattle Degmada Faa'iidada Gaadiidka (Transportation Benefit District, STBD) dhexdiisa, Guddiga Maamulka ee STBD wuxuu u gudbiyay xeerka warqadda codbixinta (Soo jeedinta STBD 1) codbixiyeyaasha u qalma ee STBD si loo oggolaado ilaa 0.1 boqolkiiba canshuurta iibka iyo isticmaalka iyo khidmada leesanka gaadiidka ee sannadlaha ah oo ilaa \$60 oo dheeraad ah gaari kasta oo diiwaan gashan iyadoo leh \$20 oo dib-u-celin ah oo loogu talagalay shakhsiyadka dakhligoodu hooseeyo, ujeeddooyinka maalgelinta adeegga gaadiidka dadweynaha ee dheeraadka ah ee magaalada oo dhan ee Seattle muddo lix sanno ah oo ku eg Diseembar 31, 2020.

Markay ahayd Nofeembar 4, 2014, STBD Soo Jeedinta 1 waxaa ansixiyay aqlabiyadda codbixiyeyaasha u qalma ee STBD, iyo markay ahayd Diseembar 1, 2014, ee Qaraarka STBD 14, Guddiga Maamulka ee STBD ayaa soo rogay tallaabooyinka dakhliga ay oggolaadeen codbixiyeyaashu iyada oo loo marayo ansixinta STBD Soo Jeedinta 1.

Julaay 8, 2016, iyadoo loo marayo Xeerka 125070, Magaaladu waxay la wareegtay xuquuqaha, awoodaha, xasaanadaha, shaqooyinka, iyo waajibaadyada STBD sida lagu oggolaaday RCW 36.74.030.

Bishii Julaay 2020, iyadoo loo marayo Xeerka 126115, ka dib markii ay la wareegtay awoodaha STBD, Magaaladu waxay u gudbisay xeerka warqadda codbixinta (Soo Jeedinta 1 ee Magaalada Seattle) codbixiyeyaasha Magaalada si loo oggolaado ilaa 0.15 boqolkiiba oo canshuurta iibka iyo isticmaalka ah ujeeddooyinka maalgelinta adeegga gaadiidka dadweynaha ee dheeriga ah ee magaalada oo dhan ee Seattle muddo lix sanno ah oo ku eg Maarso 31, 2027.

Markay ahayd Nofeembar 3, 2020, Soo jeedinta 1 ee magaalada Seattle waxaa ansixiyay 80 boqolkiiba codbixiyeyaasha Seattle ee u qalma waxayna soo rogay tallaabooyinka dakhliga ee ay oggolaadeen codbixiyeyaashu iyada oo loo marayo Xeerka 126250 markay ahayd Diseembar 11, 2020.

Si looga sooco khidmadaha leesanka gaadiidka ee uu sharci ka dhigay golaha magaalada iyadoo la raacayo awoodda Degmada Faa'iidada Gaadiidka ee cutubka 36.73 RCW, ee loo isticmaalo in lagu maalgeliyo maalgeshiyada gaadiidka ee aan ahayn kuwa dadweynaha, Soo jeedinta 1 waxaa hadda loo yaqaanaa Xeerka Gaadiidka Dadweynaha ee Seattle.

Wasaaradda Dakhliga ee Gobolka waxay u baahan tahay ogeysiis hal rubuc-sannadeedka kalandarka ah ka hor inta aan la ururin karin canshuur iib oo cusub. Sidaas darteed, si loo bilaabo ururinta canshuur iib oo cusub Abriil 1, 2027, hal maalin ka dib marka xeerka warqadda codbixinta ee hadda jira uu wakhtigiisu dhammaado Maarso 31, 2027, waa in xeer cusub oo warqadda codbixinta ah ay ansixiyaan

codbixiyeyaasha Doorashada Guud ee Nofeembar 3, 2026, awooddaasna uu sharci ka dhigo Golaha Magaalada marka la gaaro Diseembar 31, 2026.

Magaalada, iyadoo la wareegtay awoodaha STBD, hadda waxay leedahay awoodda ay ku raadsato ansixinta codbixiyaha ee xeer beddelaad ah oo ilaa 0.3 boqolkiiba oo canshuurta iibka iyo isticmaalka ah oo loogu talagalay horumarinnada gaadiidka marka loo eego RCW 82.14.0455.

Tan iyo markii la ansixiyay Soo Jeedinta 1-aad ee Magaalada Seattle sannadkii 2020, Xeerka Gaadiidka Dadweynaha ee Seattle waxa uu maalgeliyay boqolkiiba toddoba ee adeegga baska ee waddooyinka Seattle ee u qalma ee ay maamusho Metro-ga Degmada King (kuwaas oo boqolkiiba 65 ee istaagyadoodu ay ku dhex yaallaan Seattle), isagoo ballaarinaya adeegga baska in ka badan 3,200 oo safar toddobaadkii, ka dhigaya adeegga baska mid la isku halayn karo, mudnaantana siinaya bulshada taariikhyan adeegga ku filan aan helin, iyo kordhinta helitaanka adeegga gaadiidka dadweynaha ee fiidkii, dhammaadka toddobaadka iyo habeenkii ee in ka badan 30 waddo oo basaska ah oo magaalada oo dhan ah.

Xeerka Gaadiidka Seattle ee 2020 wuxuu maalgeliyay hindiseyaasha sinnaanta iyo helitaanka gaadiidka dadweynaha, isagoo bixiyay 52,000 oo kaararka ORCA ah oo la kabay oo loogu talagalay dhallinyarada, dadka waayeelka ah, qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee helaya lacagta waxbarashada dugsiga barbaarinta ee bilaashka ah, ardayda kulliyadda Seattle, shaqaalaha muhiimka ah, dadka shaqa doonka ah, iyo deganeyaasha Maamulka Guryaha Seattle (Seattle Housing Authority).

Xeerka Gaadiidka Dadweynaha ee Seattle ee 2020 wuxuu maalgeliyay kaabayaasha gaadiidka dadweynaha ee la xoojiyay iyada oo loo marayo noocyo kala duwan oo maalgelinta raasumaalka ah. Maalgelinta STM waxay taageertay mashaariic loogu talagalay hagaajinta wakhtiga safarka gaadiidka dadweynaha, isku haleynta, ammaanka, iyo helitaanka. Mashaariicda gaadiidka dadweynaha ee xusidda mudan ee isticmaalaya maalgelinta STM waxaa ka mid ah RapidRide J Line, NE 130th & NE 125th Barnaamijka Mobility and Safety, Barnaamijka Rainier Ave S Bus Lane, 35 Transit Spot Improvements, iyo kuwo kale oo badan. Maalgelintaan waxay ka tajiimayaan ka go'naanshaha SDOT ee ku aadan abuurista nidaam gaadiid dadweyne oo ka ammaan badan, ka waxtar badan, isla markaana la heli karo oo loogu talagalay deganeyaasha Seattle iyada oo loo marayo dakhliga STM.

Markay ahayd Diseembar 18, 2024, darawalkii Metro-ga Degmada King Shawn Yim (Wade # 21882) ayaa la dilay isagoo ku jira shaqada, golaha magaaladuna tan iyo markaas wuxuu raadinayay habab dheeraad ah oo lagu hagaajinayo badqabka iyo amniga gaadiidka dadweynaha ee rakaabka iyo wadayaasha gaadiidka ee Seattle iyo in la xoojiyo ilaalinta xaafadaha si looga caawiyo xaqiijinta in Seattle ay tahay bulsho soo dhaweyn leh, oo ammaan u ah qof kasta.

Magaaladu waxay aqoonsan tahay in hagaajinta badqabka iyo amniga gaadiidka dadweynaha ee dhammaan ay tahay mas'uuliyad la wadaago oo ay saaran tahay dhammaan maamulada, ee aysan ahayn oo keliya mas'uuliyad ay tahay inay wax ka qabtaan hey'adaha gaadiidka dadweynaha sida Metro-ga Degmada King ama Sound Transit, taasoo macnaheedu yahay in maamulada deegaanka oo ay ku jirto Magaaladu ay door muhiim ah ka ciyaaraan maalgashiga hagaajinnada badqabka iyo amniga gaadiidka dadweynaha ee gudaha xuduudaha maamulkooda.

Magaaladu, iyadoo raacaysa talooyinka Guddiga Hawsha Badbaadada Gaadiidka Goboleedka ee Degmada King, waxaa ka go'an inay ka shaqeyso sidii loo heli lahaa nidaamka jawaab-celinta dhacdooyinka goboleedka ee la isku dubariday. Nidaamkan wuxuu isku waafajin doonaa hey'adaha, maamulada, iyo bixiyeyaasha daryeelka isagoo hoos keenaaya hal qaab-dhismeed oo leh borotokoollo la wadaago kuwaas oo si cad u qeexaya doorarka, mas'uuliyadaha, iyo halbeegyada sare u qaadista ee dhammaan noocyada dhacdooyinka ka dhaca gudaha nidaamka gaadiidka goboleedka.

Golaha Magaalada waxaa intaas dheer inay ka go'an tahay inay si wadajir ah ula shaqeeyaan degmada iyo gobolka si loo ilaaliyo badbaadada basaskeena iyo noocyada kale ee gaadiidka dadweynaha, maadaama

Qoraalka buuxa ee Xeerka Lr. 127474

tani aysan ahayn walaac u gaar ah Seattle oo keliya, balse ay tahay walaac qof kasta oo isticmaala gaadiidka dadweynaha ee gobolka Puget Sound, iyo inay taageeraan hirgelinta degdegga ah iyo tan aaminka ah ee Magaalada ee heer deegaan, oo ay weheliyaan dowladaha kale iyo hey'adaha gaadiidka dadweynaha, ee dhammaan talooyinka uu soo jeediyay Guddiga Hawlgalka Badbaadada Gaadiidka Goboleedka ee Degmada King.

Xeerka Gaadiidka Dadweynaha ee Seattle ee 2020 wuxuu bilaabay maalgelinta shaqaaleynta Sound Transit 3 (ST3) si loo taageero fulinta mashaaricda Sound Transit 3 ee Seattle sannadka 2025, oo ay ku jiraan Kordhinta Isku-xirka West Seattle Link Extension, Kordhinta Isku-xirka Ballard, iyo saldhigga buuxinta ee Graham St. Maalgelintaan waxay taageertaa koox ka kooban qorsheeyayaasha gaadiidka, injineerrada, dib-u-eegayaasha oggolaanshaha, iyo maareeyayaasha mashruuca kuwaas oo si dhow ula shaqeeya Sound Transit si loo fududeeyo hannaanka bixinta oggolaanshaha loona gaaro dhismaha si ka dhakhso badan.

Magaaladu waxay damacsan tahay inay la shaqeeyso Metro-ga Degmada King si mudnaanta loo siiyo isticmaalka gaadiidka korontada ku shaqeeya, oo ay ku jiraan basaska korontada ku shaqeeya ee bulshooyinka Duwamish Valley iyo South Seattle ee loo aqoonsaday inay yihiin kuwo culays xad-dhaaf ah saaran yahay saameyn weyna ay ku yeelatay wasakhawga hawadu sababtoo ah waxay buuxiyeen shuruudaha kala shaandheynta ee gobolka oo dhan ee ka saleysan darajada Khariiradda Kala Duwanaanshaha Caafimaadka Deegaanka ee Washington (Washington Environmental Health Disparities Map) iyo tusaha tirakoobka dadka ee EJSscreen.

Magaaladu waxay doonaysaa inay sii waddo ilaalinta helitaanka fursadda iyo inay ballaarisoo shabakadda gaadiidka ee aadka u soo noqnoqda, la isku halayn karo, maalinta oo dhan ah, maalin kasta ah ee ay suurtagelisay Soo Jeedinta 1 ee Magaalada Seattle.

Sababtoo ah muhiimadda ay shabakadda gaadiidka dadweynaha ee goboleedku u leedahay kor u qaadista helitaanka gaadiidka ee loo siman yahay ee bulshooyinka ku baahsan Degmada King, Magaaladu waxay taageeraysaa dadaallada mustaqbalka ee lagu sharci ka dhigaayo xeerka maalgelinta gaadiidka ee degmada oo dhan. Magaaladu waxay damacsan tahay inay sii waddo iskaashigeeda dhow ee ay la leedahay Degmada King, iyo Degmada Gaadiidka ee Degmada King, ama cidda beddesha, ee ku saabsan xeerka gaadiidka dadweynaha ee mustaqbalka kaas oo ay ansixin karaan codbixiyayaasha degmada oo dhan, taas oo u oggolaanaysa Magaalada inay suurtagal tahay inay hagaajiso ama si tartiib-tartiib ah u joojiso xeerkan maalgelinta iyadoo la hubinayo in helitaanka gaadiidka dadweynaha uu buuxiyo baahiyaha dhammaan rakaabka gaadiidka dadweynaha ee Seattle.

Canshuuraha iibka iyo isticmaalka ee dib-u-dhaca ah, sida canshuurta loo baahan yahay si loo maalgeliyo Xeerka Gaadiidka Dadweynaha ee Seattle, ayaa culays badan ku ah shakhsiyaadka iyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo, waana yoolka Magaalada in la yareeyo culayskan iyadoo kharashyada gaadiidka dadweynaha loo wareejinayo ilo dakhli oo horumarka leh meel kasta oo ay suurtagal tahay.

Magaaladu waxay sii wadi doontaa shaqadeeda ay ku aqoonsanayso kuna raadinayso fursado dakhli oo horumarsan oo maxalli ah oo cusub, iyo fursado dhiirigelinaya isticmaalka gaadiidka dadweynaha ee badan, sida qiimeynta saxmadda iyo canshuurta baarkinka ganacsiga. Magaaladu waxay sii wadi doontaa inay la shaqeeyso Degmada King iyo la-hawlgaleyaasha kale ee deegaanka si ay u aqoonsato, ugu ololeyso, ugana raadiso dhammaan fursadaha dakhli ee horumarsan ee suurtagalka ah, iyadoo ujeeddadu tahay in dakhli kasta oo mustaqbalka ka yimaada ilahaas oo kale loo isticmaalo in lagu beddelo dakhliyada Soo Jeedinta sida lagu qeexay Qaybta 2 ee xeerkan.

Sidoo kale, Magaaladu waxay damacsan tahay inay iskaashi la sameeyso Degmada King iyo la-hawlgaleyaasha kale ee goboleedka si ay ugu doodaan oggolaanshaha Gobolka ee ilo dakhli oo cusub oo horumarsan oo loo heli karo degmooyinka faa'iidada gaadiidka, si magaalooyinka iyo degmooyinka Washington ay si ku filan oo la isku halayn karo ugu

taageeraan helitaanka gaadiidka dadweynaha ee loo siman yahay iyada oo aan culays aan loo dhigmin la saarayn qoysaska dakhligoodu hooseeyo.

Inta lagu jiro muddadaas, Magaaladu waxay sii wadi doontaa inay la shaqeeyso Metro-ga Degmada King si ay u bixiso adeegga gaadiidka dadweynaha ee la ballaariyay ee loogu talagalay deganeyaasha Seattle iyada oo loo marayo cusbooneysiinta heshiisyada iibka adeegga ee ay la gashay Magaalada ka dib ansixintii Soo Jeedintii 1-aad ee asalka ahayd ee STBD ee 2014 laguna cusbooneysiiyay qaab wax laga beddelay ka dib ansixintii codbixiyaha ee Xeerka Gaadiidka Seattle ee hadda ee 2020. Sidaas darteed,

Ha Noqoto mid ay amartay Magaalada Seattle sida soo socota:

Qaybta 1. Magaaladu waxay u gudbinaysaa codbixiyayaasha u qalma ee magaalada Seattle soo jeedin lagu oggolaanayo ilaa 0.3 boqolkiiba canshuurta iibka iyo isticmaalka taas oo dhaqangalaysa aan ka horreyn Abriil 1, 2027 isla markaana soconaysa muddo ilaa toban sanno ah, kuna dhammaanaysa Maarso 31, 2037. Canshuurtaan iibka iyo isticmaalka waxay beddeli doontaa canshuurta iibka iyo isticmaalka ee 0.15 boqolkiiba ee ay ansixiyeen codbixiyayaasha Seattle sannadkii 2020 ee muddada lixda sanno ah ee dhacaysa Maarso 31, 2027. Haddii ay ansixiyaan codbixiyayaashu, dakhliga waxaa loo isticmaali doonaa sida hoos loogu qeexay Qaybta 2 ee xeerkan.

Qaybta 2. Icticmaalka dakhliyada. Maalgelinta lagu ururiyay soo jeedintan (Dakhliga Soo jeedinta) waxaa loo isticmaali doonaa oo keliya ujeeddooyinka gaadiidka dadweynaha iyo gaadiidka sida lagu qeexay xeerkan iyo kharashyada maamulka ee la xiriira. Dakhliga soo jeedinta waxaa marka hore loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo kharashyada doorashada iyo kharash kasta oo maamul oo loo baahdo oo ku socda Waaxda Dakhliga ee gobolka.

Dakhliga soo haray ee soo jeedinta waxaa loo isticmaali doonaa si loo maalgeliyo:

A.

1. Saacadaha adeegga iyo kharashyada maamulka, dayactirka, iyo maaraynta hantida ee la xiriira ee taageera adeegyada ay maamusho Metro-ga Degmada King ee leh in ka badan 65 boqolkiiba istaagyada gudaha Seattle, kuwaas oo waafaqsan Qorshaha Gaadiidka Seattle iyo Tilmaamaha Adeegga ee Gaadiidka Dadweynaha ee Metro-ga Degmada King iyo qorshaha muddada dheer (Metro CONNECTS), oo ay weheliyaan keydka maalgelinta ee lagama maarmaanka u ah heshiisyada hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee lala leeyahay Metro-ga Degmada King. Maalgelinta saacadaha adeegga baska waa in la sameeyaa iyadoo la adeegsanayo hab mudnaan-siinta kobaca oo ku salaysan nidaamka oo dhan, xogta ku salaysan, kaas oo tixgelinaya baahiyaha dadka aan si fiican loo adeegin ee taariikh ahaan, oo ay ku jiraan shakhsiyaadka naafada ah iyo bulshooyinka leh fursado gaadiid oo xaddidan, kuwaas oo si joogto ah dib loogu eegi doono iyadoo la adeegsanayo talo ka timid Guddiga La-talinta Gaadiidka. Adeegga habeenkii waa in loo tixgeliyaa qayb muhiim ah oo ka mid ah helitaanka gaadiidka dadweynaha ee maalinta oo dhan iyo in mudnaanta la siiyo gudaha qaab-dhismeedka maalgashigan.

2. Taageerada hirgelinta maxalliga ah ee talooyinka Guddiga Hawsha Ammaanka Gaadiidka Dadweynaha ee Goboleedka Degmada King marka laga eego dhinaca magaalada Seattle, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn maalgelinta khabaro dheeraad ah oo dhanka caafimaadka dabecadda ah, Saraakiisha Booliiska Gaadiidka Metro (MTP), Saraakiisha Ammaanka Gaadiidka, Safiirrada Ammaanka Metro, shaqaalaha ammaanka ee qandaraaska lagu qaatay, saraakiisha fulinta bixinta qarashka safarka, ama taageerooyinka kale ee ammaanka Metro ama kheyraadka shaqaalaha ee ka sareeya heerarka aasaasiga ah ee ay horrey u bixisay Metro, kuwaas oo kor u qaadi doona khibradda badbaadada iyo ammaanka gaadiidka ee rakaabka iyo wadeyaasha, iyadoo taageeraysa deegaan ay ka badbaadaan waxyeellada.

B. Adeegga habeenkii ee taageera ka-qaybgalka dhallinyarada ee barnaamijyada Magaalada ee dhaca fiidkii waxaana loo tixgelin doonaa qayb muhiim ah oo ka mid ah helitaanka gaadiidka dadweynaha ee

Qoraalka buuxa ee Xeerka Lr. 127474

maalinta oo dhan waxaana mudnaanta la siin doonaa qaab-dhismeedka maalgashigan dhexdiisa.

C. Saacadaha adeegga gaadiidka dadweynaha ee Metro-ga Degmada King ee khadadka RapidRide ee hadda iyo kuwa mustaqbalka ee u adeega Seattle, ee lagu aqoonsaday Seattle Transit Master Plan iyo qorshaha muddada dheer ee Metro-ga Degmada King (Metro CONNECTS).

D. Saacadaha adeegga gaadiidka dadweynaha ee Metro-ga Degmada King ee si toos ah isugu xira Xarumaha Goboleedka ee jira iyo kuwa la qorsheeyay, ee lagu aqoonsaday Qorshaha Dhammaystiran ee Magaalada Seattle, iyo downtown Seattle iyo saldhigyada tareenka fudud.

E. Saacadaha adeegga gaadiidka dadweynaha ee Metro-ga Degmada King ee marinnaada u adeegaya meelaha mudnaanta ugu sareysa ee sinnaanta ee Magaalada, sida lagu ogaaday xogta tirada rakaabka iyo tirakoobka.

F. Hirgelinta, maareynta, iyo maamulka barnaamijyada lagu taageerayo helitaanka gaadiidka dadweynaha ee waayeelka u qalma, shakhsiyaadka naafada ah, deganeyaasha Hey'adda Guriyeynta ee Seattle iyo guryaha kale ee dakhligoodu hooseeyo ee ku dhex yaalla Seattle, dhallinyarada iyo dadka waaweyn ee dhallinyarada ah, oo ay ku jiraan ardayda ka qaybgalaya barnaamijka Seattle Promise, barnaamijyada kale ee la midka ah ee kulliyadaha iyo jaamacadaha Seattle, ardayda dhigata machadyada waxbarashada ee fadhigoodu yahay Seattle ee uu aqoonsan yahay gobolka Washington, barnaamijyada barashada xirfadda ee ka diiwaan gashan gobolka Washington, ama bixiyeyaasha tababarka ee uu aqoonsan yahay gobolka Washington, iyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo, ama ka qaybgaleyaasha barnaamijyada kale ee taageerada ee dakhligooda la xaqiijiya ee ay maamusho Magaaladu. Qaybtaan waxay heli kartaa ilaa \$12 milyan oo qoondo sannadle ah.

G. Qorsheynta, iyo geynta, kordhinta isticmaalka gaadiidka dadweynaha ee korontada ku shaqeeya, oo ay ku jiraan basaska korontada ku shaqeeya ee bulshooyinka Duwamish Valley iyo South Seattle kuwaas oo loo aqoonsaday inay yihiin kuwo culays xad-dhaaf ah saaran yahay iyo kuwa saameyn weyn ay ku yeelatay wasakhowga hawada, iyadoo lagu hagayo halbeegyada kala horreysiinta ee la diiwaan geliyay kuwaas oo ay ku jiri karaan shuruudaha kala shaandheynta ee gobolka oo dhan ee ku dhex jira Khariidadda Kala Duwanaanshaha Caafimaadka Deegaanka ee Washington, tusaha tirakoobka dadka ee EJSscreen, ama aaladaha kale ee qiimeynta.

H. Dayactirka kaabayaasha iyo horumarinta dhismeyaasha iyo kaabayaasha si sare loogu qaado hufnaanta, ammaanka, helitaanka, iyo diyaarsanaanta hawlgallada gaadiidka dadweynaha ee gudaha Seattle, oo ay ku jiraan hagaajinnada isku haleynta gaadiidka iyo hawlaha maaraynta baahida gaadiidka ee la xiriira mashruuca ee weheliya. Maalgelinnada u qalma waxaa ka mid ah, laakiin aan ku koobnayn, hagaajinnada xawaaraha iyo isku haleynta gaadiidka dadweynaha, xiriirrada lugeeyaha ee la heli karo, hagaajinnada helitaanka ee Xeerka Dadka Naafada ah ee Mareykanka, kaabayaasha istaagga gaadiidka dadweynaha ee la heli karo, hagaajinnada jihataynta, xoojinnada badbaadada, iyo mashaariicda hagaajinta helitaanka gaadiidka dadweynaha ee shakhsiyaadka qaba naafada dhanka dhaqdhaqaaqa, dareenka (sida kuwa indhoolaha ah, aragga hooseeya, ama dhegoolaha ah), fahamka, ama koriinka. Qaybtaan waxay heli kartaa ilaa \$5 milyan oo qoondeyn sannadle ah, marka laga reebo qoondeynta hantida waaweyn ee dib-u-qaadista ah ee loo oggol yahay marka loo eego sharciga gobolka.

I. Shaqaaleysiinta Magaalada Seattle ee barnaamijyada loogu talagalay in lagu fududeeyo qorsheynta, injineernimada, oggolaansho bixinta, iyo fulinta mashruuca ee mashaariicda Sound Transit 3 oo ay ku jiraan West Seattle Link Extension, Ballard Link Extension, iyo Graham St infill station sida ay ansixiyeen codbixiyeyaasha goboleedka sannadkii 2016. Qaybtaan waxay heli kartaa ilaa \$8 milyan oo qoondeyn sannadle ah, marka laga reebo qoondeynta hantida waaweyn ee dib-u-qaadista ah ee loo oggol yahay marka loo eego sharciga gobolka.

Qaybta 3. Marka laga soo tago xaddidaadaha isticmaalka dakhliga ee Qaybta 2 ee xeerkan, qoondeynta sannadlaha ah ee qayb-hoosaadyada 2.A, 2.B, 2.C, 2.D, iyo 2.E ee xeerkan waa inay la mid noqotaa ugu yaraan 75 boqolkiiba dakhliga sannadlaha ah ee Soo Jeedinta, iyadoo la raacayo ujeeddada xeerka, si loo kordhiyo inta jeer ee uu yimaado iyo isku haleynta adeegga gaadiidka dadweynaha.

Qaybta 4. Maalgelinta adeegga gaadiidka dadweynaha ee aan la isticmaalin. Markay tahay Diseembar 31 ee sannad kasta laga bilaabo 2028, waaxda gaadiidka ee Seattle waa inay u soo gudbisaa Golaha caddadka la filayo ee maalgelinta aan la isticmaalin ee loogu talagalay iibka adeegga gaadiidka dadweynaha ee sannadkaas. Warbixinta ugu horreysa ee ku saabsan maalgelinta adeegga gaadiidka dadweynaha ee aan la isticmaalin waxaa la codsaday inay ku jirto falanqeynta maalgelinta aan la isticmaalin laga bilaabo bilowga xeerka iyo sida loo saadaaliyay ilaa dhammaadka 2028. Goluhu wuxuu damacsan yahay inuu u qoondeeyo maalgelinta aan la isticmaalin isticmaallada ku jira qayb-hoosaadka 2.H ee xeerkan ee taageeraya helitaanka badqabka leh ee gaadiidka dadweynaha ee lugeeyeyaasha iyo helitaanka la kordhiyay ama la xoojiyay ee rakaabka gaadiidka dadweynaha ee ku dhex jira marinka dadweynaha.

Qaybta 5. Haddii Degmada Dheefaha Gaadiidka ee Degmada King ay sharci ka dhigto xeerka maalgelinta gaadiidka dadweynaha ee degmada oo dhan, ama haddii Golaha Sharci-dejinta ee Gobolka Washington uu oggolaado ilo dakhli oo horumarsan oo cusub oo ay heli karaan degmooyinka dheefaha gaadiidka, ama haddii Magaaladu oggolaato ilo dakhli oo horumarsan oo maxalli ah oo cusub, sida qiimeynta saxmadda ama canshuurta baarkinka ganacsiga, ama haddii Magaaladu oggolaato ballaarinta il kasta oo dakhli oo horumarsan oo hadda jira, iyo haddii il kasta oo maalgelin ah oo noocaas ah ay beddeli karto dakhliga Soo Jeedinta, Magaaladu waxay xajisanaysaa xuquuqda ay ku meel marinayso xeer dhimmaya heerka canshuurta iibka iyo isticmaalka ee loo sharciyeeyay si waafaqsan Qaybta 1 ee xeerkan iyo/ama wax ka beddelaaya xaddidaadaha ku jira Qaybta 3 ee xeerkan.

Qaybta 6.

A. Ma jirto beddelid lagu sameynayo maalgelinta hadda jirta ee adeegga gaadiidka dadweynaha. Ka hor inta aan la maalgelin adeeg kasta oo gaadiidka dadweynaha ah, Magaaladu waxay filaysaa inuu jiri doono heshiis dhexmari doona hey'adaha oo lala galo Metro-ga Degmada King si loo bixiyo in dakhliga Soo Jeedinta uusan beddeli doonin maalgelin kale oo loogu talagalay waddo kasta oo qayb ahaan ama gabi ahaanba ka dhex shaqeysa Seattle oo ay Metro-ga Degmada King haddii kale bixin lahayd si waafaqsan Qorshaha Gaadiidka ee Seattle, iyo Tilmaamaha Adeegga Gaadiidka Dadweynaha ee Metro-ga Degmada King iyo qorshaha muddada dheer ee Metro-ga Degmada King (Metro CONNECTS).

B. Inaan la beddelin maalgelinta hadda jirta ee adeegyada badbaadada iyo ammaanka. Ka hor inta aan la maalgelin adeeg kasta oo badbaado iyo ammaan oo la xiriira gaadiidka dadweynaha ee lagu iibsaday xeerkan, Magaaladu waxay filaysaa inuu jiri doono heshiis dhexmara hey'adaha deegaanka oo lala galo Metro-ga Degmada King si loo xaqiijiyo in dakhliga Soo-jeedintu uusan beddeli doonin maalgelinta kale ee adeegyada badbaadada iyo ammaanka ee hadda jira ee laga bixiyo gudaha Seattle kuwaas oo ay Metro-ga Degmada King haddii kale bixin lahayd.

Qaybta 7. Warbixinta iyo kormeerka sannadlaha ah. Magaalada Seattle waa inay soo saartaa warbixin sannadle ah oo loogu talagalay dadweynaha taasoo bixinaysa dulmar ku saabsan heerarka adeegga gaadiidka dadweynaha ee Seattle oo sharxaysa sida Xeerka Gaadiidka Dadweynaha ee Seattle uu u maalgashaday adeegga gaadiidka dadweynaha, helitaanka gaadiidka, hagaajinnada kale ee gaadiidka dadweynaha, iyo dadaallada ballaarinta Sound Transit ee sannadkaas iyo saameynta maalgeshiyadan ay ku yeesheen dadweynaha safraya, oo ay ku jirto horumarka loo qaaday dhanka Shabakadda Gaadiidka Soo Noqoqda (Frequent Transit Network) iyo yoolalka dhaqdhaqaaqa Magaalada.

Qoraalka buuxa ee Xeerka Lr. 127474

Intaa waxaa dheer, Waaxda Gaadiidka ee Seattle, iyadoo lala kaashanayo Metro-ga Degmada King, waa inay bixisaa warbixin sannadle ah oo gooni ah, laga bilaabo Maarso 31, 2028, oo loo gudbinayo Golaha Magaalada oo la xiriirta dhinacyada soo socda ee maalgashiyada Xeerka Gaadiidka Dadweynaha ee Seattle ee adeegga gaadiidka dadweynaha:

A. Wax ku oolnimada soo celinta khidmada, oo ay ku jirto boqolleyda dadka bixinaya khidmadaha, saamiga soo celinta khidmada, oo ay ku jiraan saamiyada soo celinta khidmada ee koox qaran oo ka kooban ugu yaraan 20 hey'adood oo gaadiidka dadweynaha ah oo la barbar dhigi karo ama «dhigga ah» iyo darajada Metro-ga Degmada King ee ku dhex jirta kooxdaas ama boqolleyda kharashyada hawlgalka ee Metro-ga Degmada King ee si toos ah looga maalgeliyay khidmadaha rakaabka, wadarta dakhliga khidmadaha ee la ururiyay, tallaabooyinka ay qaadday Metro-ga Degmada King si loo taageero yoolka ah in dhammaan rakaabka qaangaarka ah ee gaadiidka dadweynaha ay bixiyeen khidmadaha ama ay haayaan baaska gaadiidka dadweynaha ee shaqeynaya, iyo isbeddel kasta oo adeegga, hawlgalka, ama siyaasadda ah oo saameeyay waxqabadka dakhliga;

B. Waxqabadka wakhtiga saxda ah ee dhammaan saacadaha adeegga iyo marinrada loo adeego, oo ay ku jirto boqolleyda safarrada ku imaanaya muddada wakhtiga saxda ah ee ay Metro qeexday iyo qaybinta xilli hore/daahitaanka, iyadoo lagu sharxayo inta ay basasku ka horreeyaan jadwalka ("xilli hore") ama ay ka dambeeyaan jadwalka ("daahay") marka ay yimaadaan, iyadoo loo kala saaray marin ahaan oo ay ku jirto, laga bilaabo sannadka labaad ee diyaarinta warbixinta, isbarbardhigga waxqabadka wakhtiga saxda ah iyo xeerarka saddexdii sanno ee hore ee aagga mawduucan; iyo

C. Isku haleynta, ama tirada safarrada la dhaafay ama la baajiyay iyo heerka adeegga gaadiidka dadweynaha ee Metro-ga Degmada King loo bixiyay si joogto ah iyo si la saadaalin karo oo ay ku jirto, laga bilaabo sannadka labaad ee diyaarinta warbixinta, isbarbardhigga isku haleynta ee halbeegyada saddexdii sanno ee hore ee qaybtan mawduuca.

Guddiga La-talinta Gaadiidka ee Seattle ee ay bulshadu hoggaamisoo ayaa sii wadi doona inuu u adeego sidii guddiga kormeerka dadweynaha ee loo xilsaaray ka talinta kharash gareynta dakhliga Soo Jeedinta. Magacaabista Guddiga La-talinta Gaadiidka, baaxadda waajibbaadkiisa, iyo shuruudaha warbixinta waxay sii ahaan doonaan kuwo waafaqsan Qaraarka 31572, sidii uu Goluhu u meel mariyay 2015-kii, ka dib ansixintii xeerka Degmada Faa'iidaada Gaadiidka ee 2014.

Qaybta 8. Warbixin hal mar ah. Waaxda Gaadiidka ee Seattle, iyadoo lala kaashanayo Metro-ga Degmada King, waa inay bixisaa warbixin ku saabsan natiijooyinka waxqabadka ee waddooyinka baska ee mara masaafu dhan rubuc mayl u jirta dugsiyada dhexe ee dadweynaha, dugsiyada sare ee dadweynaha, iyo xarumaha bulshada. Warbixintu waa inay ku wargelisaa adeeg bixin dheeraad ah oo suurtagal ah oo loo sameeyo marinadan si loo suurto geliyo imaanshaha wakhtiga ku habboon ee dugsiga ama munaasabadaha loo qorsheeyay goobahan ee ardayda dugsiga, shaqaalaha dugsiga, iyo dhallinyarada, iyadoo mudnaanta la siinayo badbaadada shakhsiyaadkan inta ay sugayaan basaska iyo inta ay ku jiraan gaadiidka labadaba. Waddo kasta oo noocaas ah, warbixintu waa inay falanqaysaa heerarka adeegga maalinta oo dhan iyo sida adeegga la bixiyo u waafaqayo ballanqaadyada Shabakadda Gaadiidka Soo Noqnoqda, hufnaanta waddada iyo awoodda darawallada ee ku nagaanshaha jadwalka wakhtiga saxda ah, iyo isku haleynta waddooyinkan. Warbixintu waa inay sidoo kale ka tarjumtaa, marin kasta oo noocaas ah, dhacdo kasta oo joogto ah oo ciriiri xad-dhaaf ah (awood la'aanta baska ee ah inuu qaado dhammaan dadka raba inay ka raacaan istaag gaar ah, ama baahida loo qabo in laga gudbo istaag ama istaagyo awood la'aan darteed), gaar ahaan (1) xilliyada ugu mashquulka badan ee safarka maalinlaha ah ama "saacadaha mashquulka" iyo (2) qaybaha marinka ee ay ku jiraan istaagyada ku yaalla gudaha rubuc mayl u jira dugsiyada dhexe ee dadweynaha, dugsiyada sare ee dadweynaha, iyo xarumaha bulshada. Warbixintu waa inay sidoo kale soo jeedisaa talooyin ku saabsan isbeddellada adeegga gaadiidka dadweynaha ee mustaqbalka ee suurtagalka ah ee la kala horreysiiyay kuwaas oo u badan inay yareeyaan ciriiriga saameeya ardayda,

shaqaalaha dugsiga, iyo dhallinyarada. Warbixinta waa in loo gudbiyaa Golaha Magaalada ugu dambeyn Sebtembar 31, 2028.

Qaybta 9. Warbixin hal mar ah. Waaxda Gaadiidka ee Seattle, iyadoo la kaashanaysa Metro-ga Degmada King, waxaa laga codsaday inay bixiso warbixin ay ku jiraan falanqeynteeda iyo talo-bixinteeda ku saabsan qorshaha hirgelinta ee lagu ballaarinayo faa'iidooyinka Barnaamijka Helitaanka Gaadiidka (Transit Access Program, TAP) loona gaarsiinayo dad dheeraad ah oo dakhligoodu hooseeyo, oo ay ku jiraan, balse aan ku xaddidnayn, kuwa ka qaybqaata barnaamijyada ay Magaaladu maamusho, ee dakhligooda la xaqiijiya sida Barnaamijka Qiimo-dhimmista Adeegyada, Barnaamijka Dugsiga Barbaarinta ee Seattle, Barnaamijka Waxbarashada iyo Kaalmada Carruurnimada Hore. Falanqeyn dheeraad ah oo ku saabsan ballaarinta barnaamijka taageerada macallinka (TAP) ee loo fidinayo qoysaska Seattle ee helaya taageerada si ay u helaan adeegyada guryaha dakhligoodu hooseeyo ayaa sidoo kale la codsaday. Warbixintu waa inay ku daraysaa xaaladaha kharashka iyo maalgelinta, dariiqyada diwaan gelinta iyo u-qalmitaanka, saameynta tirakoobka dadka iyo sinnaanta, suurtoqalnimada maamulka, iyo khataraha, caqabadaha, iyo xeeladaha yaraynta. Warbixinta waa in loo gudbiyaa Golaha Magaalada ugu dambeyn Maarso 31, 2028.

Qaybta 10. Warbixin hal mar ah. Waaxda Gaadiidka ee Seattle (SDOT), iyadoo lala kaashanayo Metro-ga Degmada King, waxaa laga codsaday inay bixiso warbixin lagu qiimeynayo hirgelinta hadda ee siyaasadaha xukuma fogaanta u dhexeysa istaagyada baska ee gudaha Seattle, oo ay weheliso aqoonsashada fursadaha lagu horumarinayo xawaaraha marinka iyo tayada adeegga. Warbixinta waa in ay:

A. Qiimeysa codsiga siyaasadda hadda jirta – Bixi falanqeyn ku saabsan sida tilmaamaha fogaanta istaagga ee Metro – oo celcelis ahaan ah 1/2 mayl (marinnada RapidRide) iyo 1/4 mayl (dhammaan adeegyada kale) – hadda looga hirgeliyo guud ahaan shabakadda gaadiidka ee gudaha Seattle.

B. Aqoonsato kala duwanaanshaha & fursadaha tayaynta – Khariidee oo falanqee goobaha ay fogaanta u dhaxaysa istaagyada ee hadda jira aysan raacin tilmaamaha khuseeya. Qiimeysa fursadaha si loo ballaariyo masaafada u dhexeysa istaagyada ee marinnada ay cufnaanta istaagyo ka sareeyso bartilmaameedyada siyaasadda. Qiimeysa suurtoqalnimada hawlgalka ee kordhinta fogaanta waddooyinka jira (tusaale, saameynta heerka-waddada ee wakhtiga safarka, isku haleynta, qorshaynta gaadiidka).

C. Qiimeysa caqabadaha iyo saameynta helitaanka – Falanqee tixgelinnada helitaanka, oo ay ku jiraan saameynta ku yeelanaysa rakaabka leh caqabadaha dhaqdhaqaaqa iyo helitaanka adeegyada muhiimka ah; saameynta dhaqaalaha, sida: saameynta ku yeelanaysa ganacsiyada maxalliga ah, helitaanka bulshada, iyo dadka ku tiirsan gaadiidka dadweynaha; iyo tixgelinnada ammaanka dadweynaha, oo ay ku jiraan xaaladaha lugeeyaha, iftiinka, isgoysyada, iyo ammaanka goobta istaagga.

D. Bixiso talooyin – Aqoonsato isbeddellada siyaasadda ama hirgelinta ee hagaajin kara bixinta adeegga iyadoo loo marayo waafaqsanaanta tilmaamaha iyadoo la ilaalinayo helitaanka loo siman yahay.

Warbixinta waa in loo gudbiyaa Golaha Magaalada ugu dambeyn Maarso 31, 2028.

Qaybta 11. Warbixin hal mar ah. Waaxda Gaadiidka ee Seattle, iyadoo kaashanaysa Metro-ga Degmada King, waxaa laga codsaday inay bixiso warbixin ku saabsan natiijooyinka ilaa hadda, iyo fursadaha hagaajinta ama ballaarinta, ee barnaamijka tijaabada ah ee Waterfront Shuttle ee Metro-ga Degmada King, kaas oo bixiya adeegga gaadiidka dadweynaha ee xilliyeedka ah inta badan istaagyada dhanka galbeed ee marinka baska ee Third Avenue. Warbixintu waa in ay ku darto talo-bixinta tayada leh ee goleyaasha xaafadda iyo ganacsiga kale ee deegaanka iyo ururada u doodista. Warbixintu waa inay falanqaysaa suurtoqalnimada in adeegga gaadiidka dadweynaha laga dhigo mid joogto ah oo sannadka oo dhan ah ee marinkan ama marin la mid ah. Warbixintu waa inay tixgelisaa tixgelinnada kharashka iyo kuwa hawlgalka ee Metro-ga Degmada King, iyo tixgelinnada dhaqaalaha,

Qoraalka buuxa ee Xeerka Lr. 127474

kuwa ammaanka dadweynaha, iyo kuwa kala dambeynta dadweynaha, iyo sidoo kale tixgelinnada ku saabsan u dhawwaanshaha sannadka oo dhan ee gaadiidka dadweynaha, ee khuseeya aagga hadda xilliyeedka loogu adeego Basaska Waterfront. Warbixinta waa in la siiyaa Golaha Magaalada ugu dambeyn Juun 30, 2027.

Qaybta 12. Warbixin hal mar ah. Waaxda gaadiidka ee Seattle, iyadoo la kaashanaysa Metro-ga Degmada King, waxaa laga codsaday inay bixiso warbixin ku saabsan siyaasadaha hadda hagaya cabbirka basaska ee gaadiidkeeda, isticmaalka hadda ee basaska yaryar ee dhererkoodu yahay 40 cagood ama ka yar, sida shatallada, iyo fursadaha si loo ballaariyo isticmaalkooda. Sahaminta sida basaska yaryar iyo basaska ay u abuuri karaan fursado loogu adeego rakaabka si ka hufan inta lagu jiro saacadaha mashquulka yar iyo kuwa ka baxsan xilliyada mashquulka iyo keydinta kharashka ee suurtagalka ah ee ka dhasha hoos u dhaca isticmaalka shidaalka iyo dayactirka. Warbixintu waa inay sahamisaa suurto galnimada u adeegidda marinada ee waddooyinka cidhiidhiga ah iyo dhulka aadka u dhaadhaca ah halkaas oo basaska yaryar ay u oggolaan karaan fududeynta dhaqdhaqaaqa iyo ammaan la hagaajiyay. Ugu dambeyntii, warbixintu waa inay ka hadashaa saameynta ay iibsashada basaska yaryar iyo basaska ku yeelan karto awoodda Metro-da Degmada King ee ay ku iibsanayso moodellada korontada ku shaqeeya ama haybriidka ah ee sii daaya kaarboon-dayoksaydh ka yar, soona saara buuq ka yar marka loo eego basaska ama basaska waaweyn. Warbixinta waa in loo gudbiyaa Golaha Magaalada ugu dambeyn Maarso 31, 2028.

Qaybta 13. Qiimeynta muddada-dhexe ee barnaamijyada. Waaxda Gaadiidka ee Seattle waa in ay u gudbisaa Golaha Magaalada iyo Guddiga La-talinta Gaadiidka Dadweynaha ee Seattle warbixin qiimeyn muddada dhexe oo qoran oo ku saabsan dakhliga soo jeedintan, kharashyada soo jeedintan, iyo natiijooyinka barnaamijka ee soo jeedintan. Qiimeynyada waa in la gudbiyaa ugu dambeyn Juun 30, 2032. Qiimeynta muddada dhexe waa inay ku jiraan, balse aan ku xaddidnayn, kuwan soo socda:

A. Warbixinta maaliyadda: Soo koobidda dakhliga iyo kharashyada Soo jeedinta ee marka loo eego qaybta barnaamijka, oo ay ku jiraan saacadaha adeegga ee la iibsaday, barnaamijyada helitaanka gaadiidka dadweynaha, maalgeshiyada raasumaalka, iyo taageerada shaqaaleynta ee Sound Transit 3 (ST3).

B. Natiijooyinka adeegga gaadiidka dadweynaha: Qiimeyn lagu sameeyay soo noqnoqoshada adeegga, isku haleynta adeegga, baaxadda adeegga, isbeddellada tirada rakaabka, iyo horumarka loo qaaday dhanka yoolalka gaadiidka ee Shabakadda Gaadiidka Joogtada ah iyo Qorshaha Gaadiidka ee Seattle. Qiimeyntu waa inay ku dadaashaa inay aqoonsato isbeddelka sifooyinka adeegga iyo waxqabadka ee maalgashiga marinka ama jidka ee loo aaneyn karo adeegga ay maalgelisay soo jeedintu. Warbixintu waa inay qiimeysaa saameynta guud ee kharashyada adeegga ee soo jeedintan ee ku aaddan waxqabadka shabakadda gaadiidka dadweynaha ee Seattle.

C. Natiijooyinka sinnaanta adeegga gaadiidka dadweynaha: Aqoonsiga iyo qiimeynta maalgeshiyada iyo hagaajinnada adeegga gaadiidka dadweynaha ee ku dhex yaalla aagagga mudnaanta sinnaanta, oo ay ku jiraan isbeddellada tirada rakaabka iyo qiimeynta qoondaynta adeegga.

D. Barnaamijyada helitaanka gaadiidka dadweynaha: Isticmaalka iyo waxqabadka barnaamijyada helitaanka ORCA ee la kaba.

E. Natiijooyinka raasumaalka iyo kaabayaasha: Aqoonsiga iyo horumarka mashaariicda hantida waaweyn ee ay maalgelisay soo jeedintu, oo ay ku jiraan heerarka muhiimka ah ee u-geynta iyo hagaajinnada la qiyaasay ee isku haleynta gaadiidka, ammaanka, iyo helitaanka.

F. Natiijooyinka isku-duwidda ST3: Waxqabadka qorshaynta, oggolaansho bixinta, iyo shaqaaleynta gaarsiinta mashruuca ST3 ee ay magaaladu maalgelisay, oo ay ku jiraan waxtarka la gaaray iyo horumarka heerarka muhiimka ah ee mashaariicda ST3 ee fadhigoodu yahay Seattle.

G. Tallaabooyinka maamulka iyo hufnaanta kharashka: Qiimeynta kharashyada maamulka, kharashka saacaddiiba ee adeegga la iibsaday, iyo qiimeynta shuruudaha keydka.

H. Talooyin: Talooyinka siyaasadda ee ku saabsan in la sii haynayo ama la dhimmayo heerka canshuur kasta oo iibka ah ee lagu meel mariyay iyadoo la raacayo awoodda Qaybta 1 ee xeerkan, iyo haddii isbeddellada lagu sameynayo mudnaanta kharash bixinta barnaamijka ay yihiin kuwo loo baahan yahay.

Qaybta 14. Doorashada – Ciwaanka Warqadda Codbixinta. Golaha Magaaladu wuxuu farayaa Karaaniga Magaalada inuu xeerkan u xareeyo Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada King, Washington, isagoo ah kormeeraha doorashooyinka ee xafiiska, isagoo ka codsanaya Agaasimaha Doorashooyinka inuu ku dhawwaaqo oo uu qabto doorasho gaar ah oo lala qabanayo doorashada guud ee gobolka ee la qabanayo Nofeembar 3, 2026, ujeeddada ah in codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada loo gudbiyo soo jeedinta lagu qeexay xeerkan.

Xoghayaha Magaalada waxaa loo farayaa inuu u caddeeyo Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada King ciwaanka warqadda codbixinta ee uu ansixiyay Qareenka Magaalada iyadoo la raacayo waajibbaadka Qareenka Magaalada ee hoos yimaada RCW 29A.36.071 iyo RCW 29A.72.050. Ciwaanka warqadda codbixinta ee soo socda oo ka kooban bayaanka mawduuca iyo sharaxaad kooban ayaa loo gudbiyay Qareenka Magaalada si loo tixgeliyo:

MAGAALADA SEATTLE

SOO JEEDINTA LR. 1

Magaalada Seattle waxay meel marisay Xeerka Lr. XXXXXX ee khuseeya maalgelinta gaadiidka dadweynaha iyo baahiyaha gaadiidka ee la xiriira ee gudaha Seattle.

Soo Jeedinta 1 ee Magaalada Seattle waxay u qoondayn doontaa maalgelin adeegyada gaadiidka dadweynaha ee faa'iido u leh deganeyaasha Seattle, oo ay ku jiraan adeegga gaadiidka dadweynaha oo aad u soo noqnoqda; barnaamijyada qiimaha gaadiidka dadweynaha ee dadka dakhligoodu hooseeyo ee u qalma, waayeelka, ardayda, iyo shaqaalaha; isku haleynta gaadiidka iyo mashaariicda helitaanka; adeegga gaadiidka dadweynaha ee la xoojiyay ee RapidRide iyo waddooyinka u adeega aagagga mudnaanta sare ee sinnaanta; iyo qorsheynta iyo bixinta oggolaanshaha ee ballaarinta Sound Transit. Waxay oggolaanaysaa canshuurta iibka iyo isticmaalka oo ah 0.3% muddo ilaa toban sanno ah si loogu beddelo canshuurta iibka ee 0.15% ee hadda jirta ee ay codbixiyeyaashu ansixiyeen ee wakhtigeedu dhammaanayso Maarso 31, 2027.

Ma tahay in Soo Jeedintan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qaybta 15. Kalagoynta. Qodobbada xeerkan waxaa lagu dhawwaaqay inay kala gooni yihiin oo la kala saari karo. Ansax la'aanta qodob kasta, jumlad kasta, faqradd kasta, qayb-hoosaad kasta, qaybta kasta, ama qayb kasta oo xeerkan ah, ama ansax la'aanta dhaqan gelintiisa ee qof kasta ama xaalad kasta, ma saameynayso ansaxnimada inta soo hartay ee xeerkan ama ansaxnimada dhaqan gelintiisa ee dadka kale ama xaaladaha kale.

Qaybta 16. Ficiil kasta oo waafaqsan awoodda xeerkan oo la sameeyo ka dib ansixintiisa iyo ka hor taariikhda uu dhaqan galayo waa la ansixiyay oo la xaqiijiyay.

Qaybta 17. Qaybaha xeerkan ee bixiya soo gudbinta soo jeedinta warqadda codbixinta ee codbixiyeyaasha waxay dhaqan galayaan oo ay xoog yeelanayaan 30 maalmood ka dib marka uu ansixiyo Duqa Magaalada, laakiin haddii aan la ansixin oo uusan dib u soo celin Duqa Magaalada toban maalmood gudahood ka dib marka loo soo bandhigo, waxay u dhaqan galayaan sida ku cad Qaybaha Xeerka Dowladda Hoose ee Seattle 1.04.020 iyo 1.04.070. Qaybaha xeerkan ee ku xiran ansixinta codbixiyeyaasha ee warqadda codbixinta la sheegay waxay dhaqan galayaan si waafaqsan sharciga khuseeya.



2026



Qorshe Codeyn

★ Doorashada Guud ee Nofeembar ★

Codkaaga ka dhig inuu noqdo mid la maqlo doorashadan! Buuxi qorshahaaga codeynta ee gaarka ah. Waxaad la barbar dhigi kartaa asxaabtaada iyo qoyskaaga ka dibna nagala wadaagi kartaa baraha bulshada @kcelections

Soo ururi agabyada

01


- ☐ Buug-yaraha Codbixiyeyasha
- ☐ Warqadda Codbixinta
- ☐ Bakhshadda Soo Celinta
- ☐ Qalin (midab kasta)



Waa wakhtigii codeynta!

02

- ☐ Waxaan warqaddayda codbixinta ku calaamadayn doonaa



Sidee baad u codeyn doontaa?

- ☐ Aniga keligay
- ☐ Qoyska iyo/ama asxaabta
- ☐ Si Kale (*Hoos ku qor*)

Soo celi warqaddaada codbixinta

Maalinta Doorashada waa Nofeembar 3, 2026 03

Mid Dooro



Lagu Taliyay

Sanduuqa rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta

- ☐ Sanduuqee rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ayaad isticmaali doontaa? *Hoos ku qor*

Ka hel midkaaga barta
kce.wiki/sanduuqyada



! Goor hore codee!

Boostada

- ☐ Haddii aad warqaddaada codbixinta ku dirayso boostada, USPS waxay kugula talineysaa inaad boostada kusoo dirto ugu yaraan hal toddobaad ka hor Maalinta Doorashada si loo hubiyo in lagu dhufto shaabadda boostada oo wakhtigeeda ah.

Dheeraad!

Waxaan halkaan u joognaa in aan caawinno!

Iskaan-garee QR koodka si aad u hesho macluumaad ku saabsan fursadaha codeynta ee la heli karo ee gudaha Degmada King.



Raad-raac warqaddaada codbixinta

Mid dooro

- ☐ Isku qor si aad u hesho digniimaha kce.wiki/TrackMyBallot-SO
- ☐ Horrey ayaan isku qoray si aan u helo digniimaha warqadda codbixinta, farxad badan!



Runtu waa muhiim




Inta u dhexeysa doodaha xisbinimo, wararka xanta ah ee oonleenka, iyo been-abuurka ay soo saartay Al-ga, ogaanshaha waxa dhabta ah waxay noqon kartaa caqabad.

Halkan waxaa ku qoran qaar ka mid ah talooyinka kaa caawinnaya inaad xaqiiqooyinka hesho.




Is haki, ka dibna su'aal asalka xogta.

Haddii aad oonleenka ku aragto wax jahawareer ah ama aad ka maqasho saaxiib, xubin ka mid ah qoyskaaga, ama qof aad isla shaqeysaan, daqiiqad qaado si aad u ogaato halka macluumaadka uu ka yimid. Ogaanshaha in xogta la yaqaano oo la aaminni karo waxay kaa caawini kartaa inaad ogaato in xogtu run tahay iyo in kale.




Si maskax leh uga fikir.

Waxay noqon kartaa mid waxtar leh - gaar ahaan marka aan wax si xooggan u dareemayno - inaan hakanno oo aan xiiso muujinno. Ka fiirso dhowr su'aalood oo fudud: Yaa wadaagaya macluumaadkan? Sababtu maxay tahay? Goorma ayaa markii ugu horreysay la daabacay? Maxaa kale oo iga caawin kara inaan ogaado?



Raadso fikrado kala duwan.

Raadinta macluumaad laga helo illo leh aragtiyo iyo asallo kala duwan waxay kaa caawin kartaa in sawirka ugu cad ee runta la helo.



Anaga na weydii!

Shaqaalaha Doorashooyinka Degmada King waxay u heellan yihiin inay adiga iyo codbixiye kasta siiyaan doorashooyin sax ah, la heli karo, oo daah furan. Si wadajir ahaan ah, waxaan leenahay khibrad boqolaal sanno ah oo doorashooyinka ah! Naga soo wac taleefanka 206-296-VOTE (8683) ama iimeel noogu soo dir ciwaanka elections@kingcounty.gov.

Adams, Maggie	29	Hawk, Jaime Michelle	73	Scully, Keith	37
Alvarado, Emily	42	Jayapal, Pramila	18	Shadid, Damon	100
Anderson, Shantrice	100	Jenks, Nilu	96	Sheth, Nirav	18
Angelis, Theo	75	Kang, Julie	96	Shotwell, Kristin	93
Anito, Mary	43	Kauffman, Claudia	59	Siddiqi, Imraan	38
Balducci, Claudia	70	Klinge, Jill	80	Silva, Mary	17
Barker, Heather M.	85	Kloba, Shelley	23	Slatter, Vandana	62
Barón, Jorge L.	70	Kritzer, Vanessa	55	Smith, Adam	20
Basler, Doug	20	Larson, Dave	75	Soltys, Kristina	59
Bennett, Michelle	24	Laumann, Rhonda	86	Stearns, Chris	61
Bergquist, Steve	27	Macri, Nicole	52	Steele, Mike	29
Berry, Liz	45	Manion, Leesa	65	Steinmetz, Harry	89
Bielka, John	35	Mann, David S.	77	Stephens, Debra L.	76
Birk, Ian	74	Marinchik, Yuri	41	Stephens, Sandra	56
Bloom, Todd A.	76	Martin, Bardi	91	Stevens, David	73
Bowman, Bill A.	77	Martinez, Chris	40	Stokesbary, Drew	34
Bowyer, Tiffany	31	Martinez, Raul	82	Stramel, Tamara	33
Brown, Tatiana	46	Masanai, Jr., Fa'amomoi	89	Street, Chipalo	46
Burnett, Brian	28	McCorkle, Evon	48	Szczurko-Walton, Stephen	34
Callan, Lisa	25	McDaniel, Paul	32	Taguba, Leah	83
Chin, Yvonne	93	McDowall, Cat	97	Taylor, Jamila E.	31
Clark, Cobi	60	Meline, Spencer	19	Tewolde, Kelabe	47
Clendennin, Alby	52	Melody, Colleen	72	Thai, My-Linh T	50
Cooke, Ted	61	Merfeld, Noel	90	Thomas, Brianna K.	42
Crawford-Willis, Anita	98	Moon, Cliff	23	Thornley, Rodney 'Star'	58
Davis, Lauren	38	Mosqueda, Teresa	71	Todd, Brian	87
DelBene, Suzan	17	Newsom, Garmon	99	Tolentino, JoAnn	54
Dhillon, Kuljinder K.	92	Nguyen, Elle	49	Trasen, Jan	78
Dhingra, Manka	53	Noble, Danica	37	Tse, Bianca	78
Dreher, Will	57	Obras, Edwin	40	Vaddadi, Pooja	98
Duda, Nick	71	O'Donnell, Sean	74	Valdez, Javier	56
Duerr, Davina	22	Orwall, Tina L.	39	Walen, Amy	64
Edwards, Katharine	97	O'Toole, Lisa	79	Walls, Renee	90
Edwards, Scott	72	Peacock, Patrick	25	Wang, Maggie	22
England, Jillian	44	Peaquin, Peter	81	Willoughby, Stacy	28
Entenman, Debra Jean	60	Peck, Kevin	80	Wilson, Claire	30
Farivar, Darya	58	Pedersen, Jamie	51	Wise, Julie	67
Fedan, Ashley	26	Penner, Joshua	35	York, Matthew	83
Fitzgibbon, Joe	43	Pollet, Gerry	57	Zahn, Janice	49
Forsythe, Jessica	64	Poppe, Jeffery	63		
Fortunato, Phil	33	Reeves, Kristine	32		
Foxcurran, Rob	66	Robertson, Rebecca	92		
Frame, Noel C.	44	Rose-Akins, Nyjat	91		
Gagner, Denise	81	Rosen, Michael	50		
Gehlsen, Michelle	79	Rothstein, Gabe	99		
Gibbons, John P.	55	Rutland, Michael	30		
Goodman, Roger	54	Ryu, Cindy	36		
Grant Reed, Julia	45	Sabio-Howell, Hannah	51		
Greene, Mitch	88	Salahuddin, Osman	63		
Gregerson, Mia Su-Ling	41	Saldaña, Rebecca	69		
Grove Johnson, Tricia	84	Salomon, Jesse	36		
Hackney, David	26	Samonica Jarmon, Andrea	87		
Hall, Zach	24	Santos, Sharon Tomiko	47		
Harn, Corinna	84	Scarimbolo, Dominique M	66		
Harris, Joshua C.	85	Schrier, Kim	19		
Hasegawa, Toshiko Grace	69	Scott, Jaelynn	48		
Hawkins, Karama H.	82	Scott, Shaun	53		



Dhammaan codbixiyeyaasha ku nool:

Daabacaadda Gobolka iyo Deegaanka

Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahaan oo ah qaab kale.

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получать материалы для голосования на русском.

Nala soo xiriir si aad u hesho agabkaaga codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.